DHALIISHA DHAQANKA SOOMAALIDA

DHAQANKEENA AYAA SABABAY DIB-U-DHACEENA

CABDIRAXMAAN XUSEEN DAA'UUD

Copyright © 2010 by Cabdiraxmaan Xuseen Daa'uud

All rights reserved. No part of this publication may be reproduced, distributed, or transmitted in any form or by any means, including photocopying, recording, or other electronic or mechanical methods, without the prior written permission of the author, except in the case of brief quotations embodied in critical reviews and certain other noncommercial uses permitted by copyright law. For permission requests, write to the author, addressed "Attention: Permissions Coordinator," at the email below.

Abdihdaud@yahoo.com

HANAYN

Waxaan buuggan u hanaynayaa hooyaday
Xabiiba Ismaaciil Geedi,
aabahay
Xuseen Daa'uud Cigaal
iyo
Caruurtayda dhamaantood

BUUGTA KALE EE UU QORAY
CABDIRAXMAAN XUSEEN DAA'UUD

XEERKA ASTAAMAHA QORAALKA
Sidee Loo Isticmaalaa Astaamaha Qoraalka

ASSALKII IYO AASSAASKII QABIILKA
Nidaamka Qabiilka Inaga Ayaa Samaysanay

QORAALKA WARAAQAHA
Sidee Loo Qoraaa Waraaqaha?

TUSMADA BUUGGA

Mahadnaq xi
Qoraaga Buugga xiii
Afeef xv
Gogol-Dhig xix

1. Waa Maxay Dhaqan? 1
2. Dhaqanka Soomaalida Iyo Cadaaladda 19
3. Dhaqanka Soomaalida Iyo Tacaddiga Haweenka 63
4. Dhaqanka Soomaalida Iyo Bar-Baarinta Ubadka 114
5. Dhaqanka Soomaalida Iyo Dimuquraadiyadda 141
6. Dhaqanka Soomaalida Iyo Qaranimadda 171
7. Dhaqanka Soomaalida Iyo Wax-Soo-Saarka 209
8. Dhaqanka Soomaalida Iyo Xigmadda 256
9. Dhaqanka Soomaalida Iyo Qoyska 336
10. Gunaanad 367

CONTENTS

Mahadnaq xi
Qoraaga Buugga xiii
Afeef xv
Gogol-Dhig xix

1. Waa Maxay Dhaqan? 1
2. Dhaqanka Soomaalida Iyo Cadaaladda 19
3. Dhaqanka Soomaalida Iyo Tacaddiga Haweenka 63
4. Dhaqanka Soomaalida Iyo Bar-Baarinta Ubadka 114
5. Dhaqanka Soomaalida Iyo Dimuquraadiyadda 141
6. Dhaqanka Soomaalida Iyo Qaranimadda 171
7. Dhaqanka Soomaalida Iyo Wax-Soo-Saarka 209
8. Dhaqanka Soomaalida Iyo Xigmadda 256
9. Dhaqanka Soomaalida Iyo Qoyska 336
10. Gunaanad 367

MAHADNAQ

Buuggan qoraalkiisa waxaa talooyin, taageero, iyo dhiirigelinba ka bixiyey dad-badan oo aannan halkan kusoo koobi-karin. Dhamaantood waxaan si niyad ah ugu mahadnaqayaa sidii niyad-samidda ahayd ee ay uga qayb-qaateen qoraalka buuggan.

Inkastoo aannan magacyada dadkaas halkan kusoo koobi-karin, waxaan halkan ku xusayaa oo aan aadna ugu mahad-naqayaa: hal-abuur Faadumo Huruuse; hal-abuur Rashiid Caraale; weriye Cabdiaar Cabdi; Hogaamiyaha Isbaahaysiga Haweenka Fatxiya Absiiye; Saynab Cilmi Rooble; iyo qaar kale oo badan

Waxaa kale oo aan u mahad-naqayaa ardaydaydii Jaamacada Hargaysa iyo dad aad u tirro-badan oo ka-mid-ah bulsho waynta ku xidhan barnaamijyada aan kusoo bandhigo bartayda Facebook iyo Youtube. Ardaydaas iyo shacab-waynahaasi waxay si-hufan oo qoto-dheer uga jawaabeen su'aalo aan waydiiyey oo aan ku baadhaayey baahida ay u qabaan qoraalka buuggan.

Cabdiraxmaan Xuseen Daa'uud

QORAAGA BUUGGA

Qoraaga buuggan oo magiciisa la-yidhaahdo Cabdiraxmaan Xuseen Daa'uud, wuxuu wax-barashaddiisii kasoo-qaatay wadanka Soomaaliya iyo wadanka Maraykan-ka.

Cabdiraxmaan wuxuu Bachelor of Arts (BA) ka-qaatay University of Minnesota, U.S.A., waxaanu ku-takhasusay *Cilmiga Siyaaadda* (Political Science) iyo *Barashadda Caalamka* (Global Studies). Ka dib, wuxuu Masters Degree (MA) ka-qaatay Saint Mary's Univerisity of Minnesota, U.S.A., waxaanu ku-takhasusay *Maamulka iyo Maaraynta Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshadda* (MA in Health and Human Services Administration). Ka dib, wuxuu Cabdiraxmaan mar-labaad Masters Degree (MA) ka-qaatay Saint Mary's Univerisity of Minnesota, U.S.A., waxaanu Masters Degree-ggan labaad ku-takhasusay *Dhakhtarnimadda Dhimirka* (Masters of Counseling and Psychological Services).

Cabdiraxmaan wuxuu bare-sare (professor) ka haa Jaamacada Hargaysa muddo uu degenaa Soomaaliland. Waxaa kale oo uu Soomaaliland kasoo qabtay shaqooyin kala duwan. Cabdiraxmaan waxaa kale oo uu ka-mid-yahay assaasayaasha Hayadda Daryeelka Bulshada iyo Xayawaanka (Social and Animal Welfare Service) oo marka lasoo gaabiyo loo yaqaano, "SAWS;" degaankeeduna yahay caasimada Hargaysa, Soomaaliland.

Cabdiraxmaan waa qoraaga buugga Xeerka Astaamaha Qoraalka iyo maqaalo aad u tirro-badan, oo kusoo baxay

luqada Ingiriisida iyo Soomaalida. Waxaa kale oo uu Cabdiraxmaan bulshada usoo bandhigay fiidyowyo uu ku sharaxayo dhaliilalaha dhaqanka Soomaalida; fiidyowyadaasna waxaad ka helaysaa bartiisa Youtube (waxaad ku qortaa magiciisa oo saddexan).

Dhinaca kale, Cabdiraxmaan waa hal-abuur curiyey gabayo, maansooyin, iyo heeso. Tixahaas qaarkood wuu soo ban-dhigay, oo bulshada ayuu la wadaagay. Qaar kale oo badanina way soo socdaan, insha Allaah.

Cabdiraxmaan wuxuu degen-yahay wadanka Maraykan-ka. Waxaad kala xidhiidhi kartaa: abdihdaud@yahoo.com

Cabdiraxmaan Xuseen Daa'uud

AFEEF

Qoraalka buuggani wuxuu igu qaatay muddo aad u dheer. Sababtuna waxaa weeye: intii aannan bilaabin qoritaanka buugga, waxaa muddo badan iga qaatay cilmi-baadhis aad u qoto-dheer oo aan ku samaynaayey dooda uu buuggani xambaarsan-yahay. Waxaan aad ugu dedaalaayey in aan bulshada usoo gudbiyo, ama la-wadaago, meesha ay salka ku hayso dhibaatada ragaadisay bulshadeenu. Ujeeddada ugu wayn ee aan buuggan u qorayna waxaa weeye in aan bulshada dareensiiyo meelaha u baahan in aynu nolosheena wax ka bedelo si aynu uga baxno dhibaatooyinka iyo dib-u-dhaca ina regaadiyey. Howshaas aadka u culus, ee aan isu xil-saaray, keligay ayaa qabtay. Way jireen dad kale oo taageero, dhiiri-gelin, iyo tallooyinba ila bar-bar taagnaa. Laakiin, howsha kaligay ayaa qabtay. Maadaama aan howsha ku keliyeystay, waxaa xaqiiq ah in ay buugga ku jirayaan qaybo u baahnaa in la tafatirro. Qaybahaas ayaan ka afeefanayaa.

Sida caaddada ah, marka buug la qoraayo waxaa muhiima in buugga lagu sameeyo tafatir. Tafatirku waxaa weeye in aad hesho dad aqoon u leh nidaamka buugta loo

qoro. Dadkaasi waxay kaa caawinayaan meelaha muhiimka ah ee buugta laga tafatiro. Hadaba, inkastoo ay badan-yihiin meelaha buugta laga tafatiraa, oo aanan dhamaantood halkan ku xusi karin, aan soo qaato qaar ka mid ah. Buugta waxaa laga tafatiraa:

1) *qoraalka*: Dadka aqoonta u lihi, waxay tafatir ku samaynayaan higaada qoraalku inuu saxan-yahay iyo in kale. Hadii ay arkaan meelo si khaldan loo qoray, way saxayaan;

2) *dooda*: Qaybtan waxaa la tafatirayaa in habka aad usoo ban-dhigtay dooda buuggu ay buuxinayso shuruudihii doodaha ee loosoo gudbin. Taas micnaheedu waxaa weeye, in aad dooda buugga usoo gudbisay si macquul ah, dariiq wanaagsan haysta, oo uu akhristuhu si fiican u fahmi mkaro.

3) *naxwaha*: Qaybtan waxaa la tafatiraa in naxwaha qoraalku saxan yahay. Hadii ay buugga ku jiraan qoraalo aanu naxwahoodu saxnayn, waa laguu saxayaa;

4) *ereyadda:* Qaybtan waxaa la tafatiraa in ereyada aad xulaytay ee aad isticmaalaysaa ay yihiin ereygo xambaarsan, si dhab ah uga turjumaya, dooda uu buuggu xambaarsan-yahay. Waxaa kale oo la tafatirayaa in ereyadan aad xulatay ay yihiin ereyo ay si fuddud u fahmi karaan dadka aad ugu tallo-gashay inay buuggan akhriyaan;

5) *higaada*: Qaybtan waxaa la tafatiraa in higaada ereyada aad isticmaalaysaa dhamaantood sax yihiin. Sida caaddada ah, marka uu qofku keli ku noqdo qoraalka buugga, waxaa dhacda inuu meelaha qaarkood si aan sax ahayn u qoro ereyda qaarkood. Taas micnaheedu ma'aha in aanu qoraagu garanaynin higaada ereyada, *xaasha*. Laakiinse, micnaheedu waxaa weeye in qoraagu uu si il-duuf ah—aan badheedh ahayn—ama aqoon-darro ahayn, u qoray ereyadaas. Waxaan rajaynayaa in dhowrkaas qodob ee aan ku sharaxay

muhiimada tafatirka buuggagtu ay kuu iftiimiyeen micnaha tafatirka.

Hadaba, qodobadaas aan kor ku xusay, iyo qaar kale oo badan oo ku saabsan tafatirka buugta, laguma samaynin buuggan. Waayo? Ayaan-darrada jirtaa waxaa weeye: hadii aynu nahay ummada Soomaaliyeed, ma lihin dad isu xilqaamay inay noqdaan tafatirayaal. Sidaa awgeed, kaligay ayaa ah qoraaga buugga, tafatiraha buugga, daabacaha buugga, iwm. Howshii oo dhan aniga ayaa ku kaliyeystay. Waad fahmi kartaa marka uu qofku ku kaliyeysto howsha culayskaa leh, in aan buugga laga waayeynin il-duuf. Sidaa awgeed, waxaan ka afeefanayaa in hadii buugga laga helo il-duuf qoraalkiisa ku saabsan, ay sabab u tahay in aan ku kaliyeystay. Taas micnaheedu ma'aha in aannan gelinin dedaal dheeraad ah oo aan ku tafatiray buugga—intii itaalkayga ahayd.

Dhinaca kale, wakhtigii aan buuggan qoraayey, waxaan ahaa shaqaale. Waxaan shaqaynaayey shan maalmood wiigii—Isniin ilaa Jimce; waxaannan shaqaynaayey 8-saacadood maalin walba. Sidaa awgeed, waxaan buugga wakhti u heli jiray laba maalmood wiigii. Taas waxaa iisii dheeraa, in mar-marka qaarkood aan howlo kale yeesho, oo aannan labadaas maalmood-na wakhti u helin.

Waxaan kusoo gebo-gebaynayaa afeeftan, wixii il-duufa ee buuggu yeesho, fadlan u dulqaado.

Mahadsanid,

Cabdiraxmaan Xuseen Daa'uud

GOGOL-DHIG

"Cudurka kaa gala fardaha,
Hadii laga gubo dameer,
Dawada lama gaadhayee"
Abwaan Maxamed Jaamac Kayd

Buugga *Culture Matters: How Values Shape Human Progress* ee ay qoreen Lawrence Harrison iyo Samuel Huntington, ayaa war-bixintan ku bilaabay buuggooda. Bilowgii 1960-kii, *The World Bank* wuxuu sameeyey war-bixin uu ku falanqaynaayey is-bedelka dhaqaale ee wadanka Gaana iyo wadanka Koonfurta Kuuriya. War-bixintaasi waxay cadaysay in 1960-kii dhaqaalaha labada wadan—Gaana iyo Koonfurta Kuuriya—uu isku mid ahaa. Labada wadan waxay iskaga mid ahaayeen dhinaca *Gross National Product* (GNP)—isu-gaynta wax-soo-saarka guud ee uu wadan sameeyo wakhtig go'an (sida sanadkii); warshadaha; dhoofinta; adeegyada; iwm. Wax-soo-saarka warshadaha waxaa ku horaysay Gaana, oo soo-saari-jirtay qalab ka tirro-badan qalabka ay soo saarto Koonfurta Kuuriya. Dhinaca kale, labada wadanba waxay heli-jireen caawimo dhaqaale oo isku mid

ah. Soddon sandood (30-sanadood) ka dib, Koonfurta Kuuriya waxay noqotay wadanka afar-iyo-tobnaad ee aduunka ugu dhaqaalaha badan—shirkadaha ugu waawayn aduunka ayay yeesheen; dunida waxay u iib-geeyaan gawaadhida, qalabka laydhka ku shaqeeya, iyo qalabyo aad u tirro badan oo si casri ah loo sameeyey. Waxaa kale oo ay aad u dhisteen dowlad dumuqraadiyad ah. Laakiinse, wadanka Gaani waxaas oo hor-u-mar ah muu gaadhin. Maanta, dhaqaalaha Gaana wuxuu shan-jeer ka hooseeyaa dhaqaalaha Koonfurta Kuuriya—taas micnaheedu waxaa weeye in Koonfurta Kuuriya ay shan jeer ka dhaqaale badan-tahay Gaana. Hadaba waxaa is-weydiiin muddan: waa maxay sababta ay labadaas wadan oo isku dhaqaale ahaa 1960-kii ay maanta u kala horeeyaan? Maxaa sababay in Gaana ay aad uga hoosayso Koonfurta Kuuriya? Cilmi-baadhis aad u qoto-dheer oo ay sameeyeen jaamacado ku yaala Maraykan, Afrika, Yurub, iyo Aasiya, oo su'aashan laggaga jawaabaayey, waxay dhamaantood isku raaceen, oo ay ku cadeeyeen in sababtu ay tahay *dhaqanka* kala duwan ee labada ummaddood. Inkasta oo ay jiraan wax-yaabo badan oo sababay is-bedelka intaa leeg, hadana waxay xaqi-ijiyeen in waxa ugu wayn ee sababay kala duwanaanshaha dhaqaale ee labadaas wadan uu yahay *dhaqankooda* oo aad u kala-duwan. Dhaqanka Koonfurta Kuuriya wuxuu aad u qadariyaa, oo uu dhiiri-geliyaa, tacabka (in qofku wax urrur-sado), maal-gashiga, cadaalada, kartida shaqo, wax-barashada, is-maamulida, akhlaaqda shaqsiga iyo shacabka. Laakiin, dhaqanka Gaana intaas midna ma qadariyo, mana dhiirri-geliyo.

Waxaad is-weydiin kartaa: markii hore ee dhaqaala-hoodu isku midka ahaaba, saw dhaqankaas may haysanin labada wadan? Waa su'aal muhiim ah. Jawaabtuna waxaa weeye: markii ugu horaysay labada wadanba dhaqankoodu

isku mid ayuu aahaa, dhinaca wax-soo-saarka. Laakiin, waxay ku kala duwanaadeen: wadanka Koonfurta Kuuriya wuxuu awooda saaray inuu bedelo meelaha dhaqankooda ku jira ee khaldan. Laakiinse, wadanka Gaana may bedelin dhaqankoodii. Taasina waxay dib-u-dhac ku keentay wadanka Gaana. Waxaa isla-jaan-qaadi-waayey dhaqaalaha hore u socda ee Gaana iyo dhaqankii reer Gaana oo la diidey in la bedelo meelihiisii khaldanaa.

Sidaa awgeed, dhaqanka ayaa ah sababta ugu wayn ee labadaas wadan ku kala hor-mareen. Inkasta oo ay jiraan waxyaabo badan oo sababa dib-u-dhaca bulsho, hadana dhaqanku ummaddu ay haysataa nooca uu yahay ayaa qayb libaax-leh ka qaadata, sababna u ah in ummaddaasi ay horumar samayso iyo in ummaddaasi ay noqoto ummad dib-u-dhacda. Buuggan doodiisuna waxaa weeye: dhibaatada haysata ummadda Soomaaliyeed waxay kasoo-jeedaa *dhaqanka* Soomaalida.

Ummadda Soomaaliyeed waxay ka-mid-tahay ummaddaha aduunka ugu hooseeye marka laga eego dhinac walba —dhinaca dhaqaalaha, cadaaladda, caafimaadka, wax-barashada, shaqo-abuurka, nabada, nadaafada, difaaca, dhismaha, wadooyinka, wax-soo-saarka, iwm. Halkan waxaan ku xusayaa baadhitaano la sameeyey uu cadaynaya kaalinta aynu aduunka kaga jiro:

1. *Human Development Index*: is bar-bardhig lagu qiimeeyey 130 wadan Soomaalidu waxay gashay kaalinta 123 (waa kalin aad u hoosaysa, oo kuu cadaynaysa in aynu ka-mid-nahay wadamada ugu faqiirsan aduunka);
2. *Literacy Rate*: raga Soomaalida 50.3% iyo dumarka Soomaalida 74.2% waa dad aan waxna qori-karin, waxna akhriyi-karin;

3. *Poverty Rate*: dadka Soomaalida ah, 97.9% waa dad faqiir ah;
4. *Life Expectancy*: da'da ugu badan ee ay dadka Soomaalida ahi ku dhintaan waxaa weeye 57-jir; halka ay dadka Singapore dadkoodu ku dhintaan markay jiraan 84-jir; wadanka Maraykan-kana ay dhintaan markay gaadhaan 79-jir;
5. *Infant Mortality Rate*: marka ay dhashaan 1000 (kun) caruura oo Soomaali ahi, waxaa dhinta 67 caruurtaas ka-mid-ah, inta aanay gaadhin 5-jir; halka ay dadka reer Singapore markay u dhashaan 1000 (kun) caruur ahi, ay dhintaan 2 kaliyi.
6. *Corruption Perception Index*: Soomaalidu waxay aduunka kaga jiraan dawladaha ugu horeeya boobka—xatooyadaa xoolaha dadwaynaha
7. *Unemployment Rate*: dadkeena 80% ma haystaan shaqo ay maalintii u kalahaan
8. *Income Per Capita*: qiimayntii la-sameeyey 2012, waxaa lagu cadeeyey in dhaqaalaha uu helo qofka Soomaaliga ahi sanadkii uu yahay US$284; dadkeena 3/1 (saddexdii qofba, qof) wuxuu qabaa xanuunka dhimirka
9. Aduunka waxaynu kaga jirnaa wadamada ugu horeeya cadaalad-darradda, xatooyadda (boobka) xoolaha ummadda, wax-soo-saar la'aanta, nadaafad-darradda, nabad-la'aanta, dhaca iyo boobka, iwm
10. Digniin ay soo bandhigeen Qaramadda Midoobay (United Nation) waxay ku sheegeen in degaanada ay Soomaalidu degtaa (haday noqoto beriga iyo haday noqoto bada) khatar aad u wayn

> ku suganyihiin, oo la-filaayo inuu ka dhaco nabaad-guur; iwm.

Qodobadaas kor-ku-xusan, iyo qaar kale oo aad u badani, waxay ku tusayaan nolosha aadka u hoosaysa, u dhibaatada badan, una liidata ay ku nool yihiin ummadda Somaalidu. Dhibaatooyinkaasi waa kuwa ugu waawayn ee Soomaalida haysta. Waxaase jira dhibaatooyin kale oo aad u badan oo aannan halkan ku xusin (cutubada buugga ayaan ku sharax-ayaa dhibaatooyinkaas kale). Dhibaatada kasii wayni waxaa weeye in aynaan garanaynin sidii aynu u xallilli lahayn dhibaatooyinkaas. Sababta aynu u xallilli kari-waynay dhibaatooyin-kaasina waxaa weeye: waxaynaan fahmin meesha ay dhibaatadu salka ku hayso, ee ay kasoo bilaabantay. Halkee ayay salka ku haysaa—ama ay kasoo bilaabantay—dhibaatadan ummaddeena haysataa? Hadii aynu fahano meesha ay dhibaatadeenu salka ku hayso, ee ay kasoo bilaabantay, waxaa xaqiiq ah in aynu helayno sidii aynu u xallilli lahayn.

Dad badan ayaa isku dayay inay ka jawaabaan su'aashan: *halkee ayay salka ku haysaa—oo ay kasoo bilaabantay—dhibaatadeenu*? Dadkaas badankoodu si khaldan ayay uga jawaabeen su'aashaas. Jawaabaha ay dadkaas kala-duwani ka bixiyeen su'aashan waxaa ka-mid-ah: qaar waxay yidhaahdeen, waa "qabyaalad;" qaarna waxay yidhaahdeen, waa "hogaan xumo;" qaarna "diintii oo laga fogaaday;" qaarna "jahli;" qaarna "faro-gelin shisheeye;" qaarna "nidaam xumo;" qaar-na "musuq-maasuq;" iwm. Waxaas oo dhami waa dhibaatooyin jira. Laakiin, midkoodna ma'aha waxa salka u ah—ee sababay—dhibaatadeena. Dadka jawaabahaas keenay, waxaa iskaga khaldan laba arimood: "sabab" iyo "saamayn" ("cause" and "effect"). Maxay ku kala-duwan-yihiin "sabab" iyo "saamayn?" Sabab waxaa weeye

wixii wax sababay; saamayn-tuna waxaa weeye wixii ay sababtaasi dhashay. Sabab' waxaa weeye waalidka dhalay 'saamayn.' *Sabab waxay samaysaa saamayn.* Tusaale: wejiga ayay kaasoo baxeen finnan. Dadkii ayaa waxay kugula taliyeen in aad saliid saytuun-ta mariso finnanka. Markii aad saliidii marisay wejiga, finnankii way kaa baa'ba'been. Laakiin, subaxii labaadba way kugusoo noqdeen finnankii. Hadana, mar labaad ayaad saliidii marisay. Way kaa tageen. Hadana way soo noqdeen. Waxaa kuu cadaatay in taladii ay dadku ku siiyeen ay ahayd talo khaldan; sababtoo ah, dadku waxaanay baadhin waxa 'sababay'—ama keenay—finnanka wejiga kaasoo baxay. Maadaama aanay garanaynin 'sababta' keentay finnankaas, marna ma suurto-galayso inay helaan dawadii kaa kaxayn lahayn finnankaas. Maalintii danbe ayaa waxaad u tagtay dhakhtar. Dhakahtarkii ayaa kuu diray shay-baadh; waxaanu ogaaday in uu jeermis (bakteeriya) caloosha kaaga jira; sidaa awgeeda, jeermis-kaasi uu 'sababay' inay finnan kaasoo baxaan wejiga. Dhakhtarkii wuxuu kuu qoray dawo dilaysa jeermiska; waxaanu kuu sheegay in aanad taabanin finnanka wejiga, oo ay iska tagayaan marka aad dawada qaadato ee uu jeermiska caloosha kaaga jiraa dhinto. Dawadii markii aad qaadatay, ayay finnankiina baa'ba'been—adigoo aan mar kaliya finnanka taabanin. Markaa "sababtu" waxaa weeye jeermiska, "saamantuna" waxaa weeye finnanka.

Hadaba dadka isku dayey inay ka jawaabaan su'aasha ah —*halkee ayay salka ku haysaa, oo ay kasoo bilaabantay, dhibaatadeenu*?—waxaa iskaga khaldamay 'sababta' iyo 'saamaynta' aynu kor kusoo sharaxnay. May samaynin cilmibaadhis qoto-dheer oo ay ku raadinayaan 'sababta' keentay dib-u-dhaceena. Sidaa awgeed, jawaabtoodii waxay noqotay khalad. Aan kuu cadeeyo. Aynu mar labaad soo qaadano tusaalihii 'finnanka wejiga.' Waxaynu soo sheegnay in

markii hore ee saliida la mariyey finnanka ay finnankii tagiwaayeen (baa'bi'i-waayeen); sababtoo ah, waxaan la baadhin 'sababta' keenaysa finnanka. Laakiin, markii la ogaaday 'sababta' keentay finnanka, oo ahayd jeermis (bakteeriya) ku dhashay caloosha, in jeermiskii la dilay; ka dibna, finnankii baa'ba'been. Sidaas oo kale, dadka isku dayey inay su'aashaas ka jawaabaan, waxay arkeen dhibaatooyin ka jira ummada Soomaaliyeed dhexdooda (finnanka). Dadkaasi markay arkeen dhibaatooyinkaas (finankaas), waxay moodeen dhibaatooyinkaasi (finankaasi) ay 'sabab' u yihiin dib-u-dhaca ummadda Soomaaliyeed. Dhibaatooyinka ay dadkaasi arkeena, waa dhibaatooyin inoo muuqda oo aynu mar walba arago; sida aynu finanka wejiga u arkayno oo kale. Dhibaatooyinkaas-na waxaa ka-mid-ah: *qabyaalad, hogaan xumo, diintii oo laga fogaaday, jahli, faro-gelin shisheeye, nidaam xumo, musux-maasuq*; iwm. Waxaas oo dhami waa finnan ku yaala wajiga ummadda Soomaaliyeed. Laakiinse, finnankan—*qabyaalad, hogaan xumo, diintii oo laga fogaaday, jahli, faro-gelin shisheeye, nidaam xumo, musuq-maasuq*—maxaa sababay? Su'aashan lagama jawaabin. Si aad u fahanto, aan midh-midh u sharaxo, oo aan kuu cadeeyo in aanay qodobadaasi ahayn waxa sababay dib-u-dhaceena.

Qabyaalad: qoladani waxay ku doodaan in ay qabyaaladu tahay sababta keentay dib-u-dhaca ina haysta. Doodani waxay si fuddud u bur-buraysaa marka aad waydiiso: *Waa maxay sababta ay dadkeenu u isticmaalaan qabyaalada*? Su'aashani waxay kalifaysaa in dadkaasi ay keenaan 'sababta' ay dadkeenu u isticmaalayaan qabyaalada. Dadkaasi waxay ku jawaabaan: sababta ay dadkeenu u isticmaalayaan qabyaaladu waxaa weeye dhaqaale la'aanta wadanka ka jirta; taas oo kaliftay in dadku isugu xidhnaadaan qabiilooyin si ay isu taageeraan oo u helaan

nolol-maalmeed-kooda. Hadii ay sidaas tahay, markaa 'sababta' ama meesha ay salka ku hayso dhibaatadeenu ma'aha qabyaalada; ee waxaa weeye dhaqaale la'aanta wadanka ka jirta. Taasi waxay ina tusaysaa in jawaabtani ay khaldan-tahay. Waayo? Sababta ay dadkeenu qabyaalada ugu dhaqmayaan hadii ay tahay dhaqaale la'aan, markaa dhibaatadu waxay ka imanaysaa dhaqaale la'aanta. Hadii dhaqaalaha la dhiso, dadku kuma dhaqmayaan qabyaalad. Sidaa awgeed, doodan odhanaysa dib-u-dhaceena waxaa sababay waa qabyaalad, ma'aha dood saxan. Qabyaaladu ma'aha sababta aynu u bur-bursanahay.

Hogaan xumo: qoladani waxay ku doodaan in ay hogaan xumaddu tahay sababta keentay dhibaatada ina haysata. Doodani waxay si fuddud u bur-buraysaa marka aad waydiiso: *Waa maxay sababta keentay hogaan xumiddu*? Su'aashani waxay kalifaysaa inay dadkani keenaan sababta keentay hogaan xumidda. Hadii ay su'aashan ka jawaabi kari-waayaan, waxaa kuu cadaanaysa in ay jawaabtoodu khaldan tahay. Hadiise ay ka jawaabaan, waxaa kuu cadaanaysa in uu jiro wax sababay hogaan xumuddi; sidaa awgeed-na, aanay sababtu ahayn hogaan xumidaa, laakiin ay tahay 'waxaas kale ee sababay hogaan xumidda." Laakiin, dadka jawaabtan keenay waxaanay si cilmiyeysan u fahmin in aanu jirin hogaamiye daacad ah, oo aan danayste ahayn, oo la aamini karaa (marka laga reebo anbiyadii uu Illaahay soo diray). Hadaan si fuddud u dhigo: ma jiro hogaamiye daacad ahi; ma jiro hogaamiye aan danayste ahayni; mana jiro hogaamiye la aamini karaa. Si aan kuugu cadeeyo, aan soo qaato saddex dabeecadood, oo uu bani'aadamka oo dhami leeyahay, oo si qoto-dheer, oo cilmiyeysan, kuugu cadaynaya in aanu jirin hogaamiye fiican oo aynu ku aamini karno—ama gacanta u gelin karno—nolosha ummadda.

Ma jiro qof cadaali ahi: si aan kuugu cadeeyo in aanu jirin

qof cadaali ahi, sheekadan si fiican u akhri, oo u fahan. Waa dood falsafad ah. Tareen ayaa wado maraya. Si deg-deg ah ayuu u socdaa. Ma istaagayo. Waddada uu tareenku marayaa way kala leexanaysaa—wado waxay u leexanaysaa midig; waddada kalena waxay u leexanaysaa bidix. Waddada u leexanaysa midig, waxaa jiifa oo lagu xidh-xidhay shan qof (5 qof); waddada u leexanaysa bixid-na, waxaa jiifa oo lagu xidh-xidhay hal qof (1 qof). Adigu waxaad ku dhex-jirtaa qol yar, oo ku yaala waddada tareenka dhiniciisa. Qolkaas yar waxaa ku dhex-yaala geer ama marsho (geerka ama marshadda gaadhiga ku yaala oo kale). Geerkaas/marshadaas, waxaa lagu leexin karaa tareenka. Hadii aad geerka/marshada u leexiso dhinaca midig, tareenku wuxuu jiidhayaa (dilayaa) shanta qof (5-ta qof); hadii aad u leexiso dhinaca bidix-na, wuxuu jiidhayaa (dilayaa) halka qof (1-ka qof). Adigu waxa kaliya ee aad samayn kartaa waxaa weeye in aad geerka u leexiso midig (oo aad disho shanta qof), ama in aad u leexiso bidix (oo aad disho qofka kaliya). Maxaad samayn lahayd? Inta aanad sii akhriyin sharaxaadan, jooji akhrinta. Waxoogaa yar ka fikir wixii aad samayn lahayd. Ma waxaad jiidhsiin lahayd shanta qof, mise waxaad jiidhsiin lahayd qofka kaliya? Sabab? Dadkii su'aashan la waydiiyey, 100% (boqol-kiiba-boqol) waxay ku jawaabeen inay jiidhi lahaayeen (oo ay dili lahaayeen) halka qof; sababtoo ah, waxaa haboon in la bad-baadiyo dadka tirrada badan. Kolay hadii ay mar walba cidi dhimanayso, waxaa haboon inuu dhinto qofka kaliyi; shanta qofna la bad-baadiyo. Waa sharaxaad fiican. Adiguna—akhristoow—sidaas ayaad samayn lahayd, saw ma'aha? Hadaba, sheekada meel yar ayaa wax laga bedelayaa; waana meesha ugu muhiimsan ee kuu cadaynaysa in aanu jirin qof bani'aadam ah oo cadaali ahi, marka laga reebo anbiyadii uu Illaahay soo diray.

Sheekada meesha wax laga bedalayaa waxaa weeye: qofkii kelida ahaa (1-kii qof) ee waddada ku xidh-xidhnaa ayaa waxaa lagu bedelayaa "hooyadaa." Iminka maxaad samayn lahayd? Ma waxaad jiidhsiin lahayd shanta qof, mise waxaad jiidhsiin lahayd qofka kaliya? Markii hore ee aanad garaynin dadka meesha ku xidh-xidhan, waxaad go'aamisay in la bad-baadiyo dadka tirrada badan, oo la dilo qofka kalida ah. Laakiinse, iminka qofkii kelida ahaa waa 'hooyadaa,' maxaad samayn lahayd? Waxaa xaqiiq ah in aanad marna disheen hooyadaa. Dadkii su'aashan la waydiiyey, 100% (boqol-kiiba-boqol) waxay ku jawaabeen inay dili lahaayeen shanta qof (5-ta qof), oo ay bad-baadin lahaayeen hooyadood.

Hadii aynu wax yar oo kale kasii bedelo su'aashan, waxaad ka warantaa: hadii aad adigu tahay reer *Qudhac*; qofka kaliga ahina uu yahay reer *Qudhac*; shanta qofna ay yihiin reer *Galool*. Markaa adiga iyo qofka kaliga ahi waad is xigtaan, oo waxaad tihiin isku reer Qudhac (waa 'inaadeerkaa'). Laakiin, shanta qof isku qabiil ma tihidin, oo waxba isuma tihidin. Maxaad samayn lahayd? Ma waxaad jiidhi lahayd qofka kaliya (inaadeerkaa); mise shanta qof (shisheeyaha)? Soomaalida 99%, waxay jiidhi lahaayeen shanta qof ee "shisheeyaha" ah; waxaanay bad-baadin lahaayeen qofka kaliya ee ay isku reerka yihiin. Sidaa awgeed, mar hadii aanu qofka bani'aadamka ahi marna noqon karin cadaali, ma jiro hogaamiye cadaali ahi. Hogaamiyuhu waa qof bani'aadam ah; dadka kalena waxba kagama duwana, oo dabeecadaas bani'aadamka ee aan kasoo hadlay ayuu leeyahay, ama ay leedahay. Ma jiro hogaamiye daacad ahi. Qof bani'aadam ahina marna suurto-gal ma'aha inuu cadaali noqdo.

Ma jiro qof aan danayste ahyni: qof kasta oo bani'aadam ahi waa danayste. Ficil kasta oo uu sameeyo qofka

bani'aadamka ahi, sababta uu u sameeyaa waxaa weeye: dantiisa ayaa ugu jirta. Ma jiro ficil uu qof bani'aadam ahi sameeyo oo aanay dantiisu ugu jirin. Dooddani waa dood falsafadeed. Markii doodan lasoo ban-dhigay, dad aad u badan ayaa markiiba ka cadhooday. Sababtoo ah, waxay doodani beenisay waxyaabo badan oo ay dadku naftooda ku qancin jireen. Hadaba, dadkii doodan soo ban-dhigay ayaa la waydiiyey su'aalo aad u ad-adag, oo tirro-badan. Aynu soo qaadano dhowr su'aalood oo ka-mid-ahaa su'aalihii la waydiiyey. Waxaa la waydiiyey: marka ay hooyadu u toosto ilmaheeda yar saq-badhka (saqda-dhexe habeenkii), ee ay caanaha siiso, waa maxay danta ugu jirta hooyadaas? Hooyadaasi ma waxaa weeye danayste? Waxaa loogu jawaabay: HAA! Hooyadaasi waa danayste. Waayo? Hadii ay hooyadaasi u toosi waydo ilmaheeda, oo ay caano siin waydo; ka dibna, ilmahaas yari xanuunsado ama sidaa ku dhinto, hooyadaas waxaa ku dhacaya murugo, calool-xumo, is-ciil-kaanbi, iyo niyad xumo. Waxaa suuro-gal ah in ay hooyadaasi waalato, oo xanuunka dhimirku ku dhaco murugadaas awgeed; ama inay hooyadaasi ku noolaato murugo inta nolosheeda ka hadhay; oo ay is waydiiso: "hadaan u toosi lahaa, oo aan caano siin lahaa, ilmahaygu muu xanuunsadeen ama muu dhinteen." Sidaa awgeed, hooyadaasi waxay iska ilaalinaysaa murugadaas. Nafteeda ayay ka difaacaysaa murugo iyo xanuun. Markaa waa danayste.

Su'aalaha kale ee la waydiiyey waxaa ka-mid-ah: marka uu sheekhu dadka diinta barayo—ama uu wacdiyayo—waa maxay danta shakhsiga ah ee ugu jirta sheekha? Sheekhu lacag kuma qaadanayo; wax dan ah oo ugu jirtaana ma jirto; markaa sheekhaasi ma danaystaa? Waxaa loogu jawaabay: HAA! Sheekhaasi waa danayste. Waayo? Sababta uu sheekhu dadka diinta u barayo—ama u wacdiyayaa—waxaa weeye: inuu Illaahay ajar (iyo denbi

dhaaf) kaga helo. Sheekhu bilaash uma wacdiyayo dadka dhegeysanaya. Waa nin shaqo-tag ah oo dantiisa wata. Janno ayuu Illaahay kaga doonayaa. Sidaa awgeed, sheekhu waa danayste.

Su'aalaha kale ee la waydiiyey waxaa ka-mid-ah: waxaad ka warantaa ninka askariga ah, ee naftiisa khatarta u gelinaya inuu wadankiisa difaaco? Askarigaasi wuxuu diyaar u yahay inuu dhinto ama dhaawacmo. Markaa, askarigaas khatarta intaa leeg naftiisa geliyey, ma danaystaa? Waxaa loogu jawaabay: HAA! Askarigaasi waa danayste. Waayo? Sababta uu askarigaasi dagaalka u galay, ee uu naftiisa khatarta u galiyey waxay noqon kartaa dhowr sababoob. Kow, waxaa laga yaabaa inuu askarigaasi doonaayo aargoosi —in la diley, oo nafta laga jaray, dad askariga ay qaraabo yihiin, caruurtiisa, xaaskiisa, waalidkii, imw. Laba, waxaa laga yaabaa inuu askarigaasi doonaayo inay dadku ugu yeedhaan: "geesi;" "halyey;" "nin rag ah;" iwm. Bani'aadamku wuxuu aduunka ugu jecel-yahay in ay bulshadiisu sare u qaado oo amaanto. Saddex, waxaa laga yaabaa inuu doonayo in ubadkiisu ay helaan mus-taqbal fiican; sidaa awgeedna, aan cadowgu bur-burin ama ka qaadin wadankooda. Saddexdaas tusaale waxay ina tusayaan inay jiraan waxyaabo aad ubadan oo askarigaas ku kalifaya inuu dagaalkaas galo. Waxyaabahaas oo dhamina waa wax dantiisa ah. Sidaa awgeed, askarigaasi waa danayste.

Qofka bani'aadamka ahi haduu yeesho awood buuxda, waxba kama xishoodo: hadii uu qofka bani'aadamka ahi uu yeesho awood buuxda, waxaa xaqiiq ah inuu samaynayo waxyaabo badan oo aanu hore u samayn jirin. Waayo? Sababtu waxaa weeye: awooda buuxdaa waxay qofka siisaa kalsooni ah inuu wuxuu doono samayn karo, wax ciqaab ahina aanay soo gaadhaynin. Fikradani waa dood falsafad

ah. Si aad doodan u fahanto, aan soo qaato tusaale male-awaal ah oo kuu cadaynaya doodan.

Waxaa lagu siiyey kaatun (fargal). Sida caaddada ah, kaatunku/fargalku wuxuu dusha sare ku leeyahay "fas" ama madax buuran oo ka samaysan dhagax, dheeman, dahab, iwm. Marka aad madaxa buuran ee kaatunka hoos u wareejiso, ee aad hoosta mariso, waxaad noqonaysaa qof aan la arkaynin. Waad qarsoomaysaa. Dadku kuma arkayaan. Waxaad noqonaysaa sida jinka oo kale. Laakiin, adigu waad arkaysaa wax walba, waanad maqlaysaa wax walba. Waxaad awood u yeelanaysaa in aad gidaarada (derbiyada) ka dhex dusto. Sidaa awgeed, dhisme kasta oo xidhan, waad gelikartaa maadaama aad gidaarka/derbiga dhex mari-karto. Waxaa kale oo aad awood u yeelanaysaa in wixii aad qaadaaba ay qarsoomayaan oo aanay dadku arki-karin. Ta u danbaysa, waxaad awood u yeelanaysaa in aad dadka dili karto, dhaawici-karto; wixii aad doonto bur-burin karto; meeshii aad doonta u dhoofi karto, maadaama diyaaradaha aad fuuli karto ilayn laguma arkayee; iwm. Hadii maanta lagu siiyo kaatunkaas/fargalkaas, oo aad yeelato awoodaas buuxda, maxaad samayn lahayd? Bal waxaad ka fikirtaa qaddar daqiiqado ah, wixii aad samayn lahayd? Waxaa xaqiiq ah in aad ku dhaqaaqi lahayd ficil aanad markii hore ku dhaqaaqdeen. Waayo? Sababtu waxaa weeye: bani'aadamka waxaa kaliya ee xakameeyaa waa *baqdin*. Ma'aha in aad u dhalatay qof "wanaagsan;" "wax qadariya;" "sharaf leh;" "xishoonaya;" iwm. Midna ma tihid? Baqdin ayaa ku haysa.

Baqdinta qofka bani'aadamka xakamaysaana waa saddex: 1) dowlad aad baqato; 2) dad aad ka baqato; iyo 3) cadaab aad ka baqato. Saddexdaas ayaa xakameeya qofka bani'aadamka ah. Weli ma is-waydiisay: waa maxay sababta aanad u xadin gaadhiga waddada taagan, ee aanay cidina

fuushanayn? Waa maxay sababta aanad u dhacaynin dukaamada? Waa maxay sababta aanad u kufsanaynin hablaha? Waa maxay sababta aanad u dilaynin dadka? iwm. Su'aalahaas jawaabtoodu waxaa weeye: *baqdin* ayaa ku haysa.

Tusaale, sababta aad gaadhiga waddada taagan u xadila'dahay waa baqdin; waxaanad ka baqaysaa saddexdan arimood mid uun: kow, waxaad ka baqaysaa inay dowladu ku ciqaabto—in lagu xidho ama lagu ganaaxo; laba, waxaad ka baqaysaa in dadkii gaadhiga lahaa kusoo weerraraan oo dhaawac kuu gaystaan; ama waxaad ka baqaysaa in aad bulshadu kuu aragto in aad tahay tuug. Waxaad u baqaysaa inuu dhaawac soo gaadho sumcada iyo magacaaga ayaad (waa baqdin); saddex, waxaad ka baqaysaa inuu Illaahay ku cadaabo qiyaamaha.

Bal waxaad ka warantaa iyadoo aanay jirin saddexdaas laga baqayaa. Iyadoo aanay jirin dowlad (boolis, milatary, maxkamado, iwm); iyadoo aanay jirin dad isu hiiliya oo laga baqaa (hadii qof waliba uu keligii nool yahay, oo aanay cidina u hiilinaynin); iyo hadii aanay jirin cadaabi. Bal in yar sawiro. Dawladani ma jirto; dad isu hiilinayaa ma jiro; cadaabina ma jirto aakhiro. Saddexdaasi hadii aanay jirin, bani'aadamku sidee ayuu u dhaqmi lahaa? Xayawaanka mayeedhaanka ah ayuu ka hoos-mari-lahaa.

Hadaba marka kaatunka/fargalka lagu siiyo, kama baqaysid dowlad iyo dad midna. Waayo? Kuma arkayaan. Waxaa kaliya ee aad ka baqaysaa waxaa weeye cadaabta aakhiro. Bani'aadamkuna hadii uu helo kaatunkaas/fargalkaas (awoodaas buuxda), waxaa xaqiiqo ah in aanu aakhiro xasuusanaynin. Bani'aadamka noocaas ah, maku aamini karnaa maamul ummaddeed? Su'aashu way iska cadahay: MAYA! Sidaa awgeed, ma jiro hogaamiye lagu aamini-karo maamulka ummadda. Markaa dooda odhanaysa: dhibteena waxaa sabab u ah hogaan xumo,

kuma salaysna cilmi-baadhis qoto-dheer. Waxba kama jiraan doodaas. Waayo? Sidaas aan soo sharaxay, maba jiro qof bani'aadam ah oo hogaamiye daacad ahi; oo aan danayste ahayn; oo la aamini karaa. Waana dhibaatada keenta in aynu doorano qof aynu u aragno inuu yahay hogaamiye daacad ah, oo aan danayste ahayn; oo la aamini-karaa. Marka aynu qofkaas doorano, ee uu qofkii maamulkii qabtana, ummadda xoolaheeda ayuu boobaa; caddaalad-darro ayuu ku dhaqmaa; waxbana ummada uma qabto. Marka uu xoolaha boobo, ayaynu qaylo iyo calaacal bilow-naa. Hadana mid cusub oo kale ayaynu sidii kii hore oo kale xukunka ugu dhiibnaa inagoo u aragna inuu yahay hogaamiye fiican—oo aynu qabyaalad ku dooranaa.

Dowlad la'aan: qoladani waxay ku doodaan in dhibaatadeenu ay salka ku hayso dowlad la'aanta ka jirta wadankeena. Qoladan doodoodu waxaa weeye: hadii aynu heli lahayn dowlad adag, dhibaatadan waynu ka bixi lahayn. Laakiinse, qoladan marka aad waydiiso su'aashan soo socota, ayaa waxaa kuu cadaanaya in ay sharaxaadoodu khaldantahay. Su'aashuna waxaa weeye: maxaa hor-taagan in aynu dowlad dhisano? Ama waa maxay sababta aynu u samaysan waynay dowladi? Qolada doodan aaminsani, jawaabo kala duwan ayay ka bixiyaan su'aashaas. Qaar waxay ku jawaabaan: dowlad in la dhisto waxaa hor-taagan hogaan la'aan (taas waaniga xaga sare kaga jawaabay). Qaarna waxay ku odhanayaan: waxaa hor-taagan qabyaalada (taasna waaniga xaga sare kaga jawaabay). Qaar kale waxay ku odhanayaan: dowlado shisheeye ayaa hor-taagan in aynu dowlad dhisano (taasna waxaan xaga hoose ayaan kaga jawaabay).

Jawaabahaas oo dhan—iyo qaar kale oo la-mid-ahiba—waxay ku tusayaan in aanay dhibaatadeenu salka ku haynin dowlad la'aan, ee ay salka ku hayso meel kale. Tusaale

ahaan: marka ay qoladani ku jawaabto, dowlad la'aanta waxaa hor-taagan 'qabyaalada,' markaa dhibaatadeenu waxay salka ku haysaa 'qabyaalada' oo hor-taagan dowlad in la dhisto. Sidaa awgeed, dhibaatadeenu salka kuma hayso dowlad la'aane, waxay salka ku haysaa 'qabyaalda.' Taas waxaan uga jeedaa in aan kuu cadeeyo, marka aad waydiiso su'aasha ah: maxaa hor-taagan in aynu dowlad dhisano? Markiiba waxay kuu sheegayaan waxa hor-taagan dowlad in aynu dhisano; taas oo noqonaysa sababta asalka ah. Markaa dowlad la'aantu ma'aha meesha ay salka ku hayso dhibaatadeenu.

Diintii ayaa laga fogaaday: qoladani waxay ku doodaan in dhibaatadeenu salka ku hayso diintii oo laga fogaaday. Qoladani markay sharaxayaan doodan, waxaad markiiba arkaysaa in aanay ahayn dood adag, oo climi-baadhis ku salaysan. Doodan waxaa ku jira laba khalad oo waaweyn. Kow, khaladka koowaad waxaa weeye in qoladani ay aamin-san-yihiin: hadii dhamaan ummaddu ay masaajiddada buuxiyaan; salaadaha oo dhan tukadaan; dhamaantood ay gutaan waajibka soonka; dhamaantood ay badiyaan akhrinta Quraanka iyo dikriga, aynu ka baxayno dhibaatadan ina regaadisay. Doodani ma'aha dood ku salaysan diinta Islaama; mana aha dood ku salaysan cilmi-baadhis qoto-dheer. Qolada sidan ku doodaa waxay aamin-san-yihiin hadii ay dadku cibaadooyinka badiyaan, inuu Illaahay u samaynayo nimdaam dowladeed, horumar dhaqaale, wax-barasho tayyo-leh, iwm. Illaahay cidna uma sameeyo dowlad ama dhaqaale aanay iyadu kartideeda kulasoo bixin. Waayo? Illaahay wax walba wuxuu inoo dhigay dhulka dushiida. Maanta wax kasta oo uu bani'aadamka aduunka ku nooli isticmaalo, waxaa lagasoo saaray dhulka aynu ku noolahay—diyaaradaha, kombuyuu-tarada, dawooyinka, hubka, cuntada, iwm. Wax walba

waxaa lagasoo saaray dhulka. Ma jiro wax diyaar ah oo uu Illaahay samada inoogasoo daadiyaa. Illaahay wuu awoodaa inuu diyaarado iyo maraakiib samaysan samada inoogasoo daadiyo; laakiin, ma'aha sida uu Illaahay nolosha u qaabeeyey. Wax kasta oo aad diyaarad ku samayn-lahayd dhulka ayay kuugu diyaar yihiin; inagana Illaahay wuxuu ina siiyey maskaxdii aynu kulasoo bixi lahay. Dhinaca kale, Illaahay wuxuu ina siiyey maskaxdii iyo diintii aynu ku dhisan lahayn dowlad.

Laba, khaladka labaad ee doodan ku jiraana waxaa weeye: sidee ayay ku ogaadeen in dhibaatadeena ay sal u tahay diinta oo laga fogaaday? Waa maxay sababta ay ummadu uga tagtay diinta? Jawaabtaadu waa inay aanay ahaanin fikir shakhsi oo ah, "aniga sidaa ayay ila tahay.' Waa in ay ahaataa su'aal salka ku haysa cilmi-baadhis qoto-dheer. Marka aad su'aalahan waydiiso, waxay markiiba kuugu jawaabayaan: Cumar binu Khadaab (rc) ayaa yidhi, diinta ayuu Illaahay idinku karaameeyey; sidaa awgeed, maalinta aad ka tagtaan diintana, waad duloobaysaan. Waa run oo Cumar sidaa wuu yidhi. Laakiin, Cumar wuxuu la dar-daarmaayey ummaddii uu la joogay wakhtigiisii, iyo guud ahaan Muslimiinta. Laakiin, taas micnaheedu ma'aha in hadalka Cumar uu inoo sheegay meesha ay salka ku hayso dhibaatada haysata ummadda Soomaaliyeed. Sidee ayaad ku cadaynayaa in dhibaatada ummadda Soomaaliyeed ay salka ku hayso markii ay ka fogaadeen diinta? Suuro-gal ma tahay in dhibaatada Soomaalida haysataa aanay ahayn diintii oo laga fogaaday; laakiinse, dhibaatadu ay salka ku hayso meel kale? Su'aashan waxay kaga jawaabaan: HAA! Mar hadii ay suuro-gal tahay in dhibaatadu ay meel kale salka ku hayso, markaa sidee ayaad ugu doodi kartaa inay salka ku hayso diinta oo laga fogaaday? Qoladani waa kuwa ugu

dooda jilicsan. Markaa iyaga intaas ayaan kusoo gebo-gebanayaa.

Faro-gelin shisheeye: qoladani waxay ku doodaa in dhibaatadeenu ay salka ku hayso faro-gelin shisheeye. Taas oo micnaheedu yahay in dowlado shisheeye ay wadankeena bur-buriyeen. Dadka sidan ku doodaa waxaanay aqoon u lahayn taariikhda Sooomaalida. Waxaa kale oo aanay fahansanayn waxa loo yaqaano xidhiidhka caalamiga ah. Siday doontaba ha ahaatee, dadkan marka aad waydiiso su'aalahan soo socda, waxaa ku adkaata inay ka jawaabaan: waa maxay sababta ay dowladaha shisheeye dhibka ugu gaysanayaan Soomaalida? Maxay ka faa'iidayaan haday Soomaaliya bur-burto? Dowladaha bur-buriyey Soomaalida waa kuwee? Waa maxay cadaynta aad hayso ee ina tusaysa inay dowaladahaasi bur-buriyeen Soomaaliya? Markii ay dowladahaasi bur-burinayeen Soomaalida, maxay qabanayeen Soomaalidu? Maxay wadankooda u ilaashan waayeen? Maxaa dowladaha shisheeye u fuddudeeyey inay Soomaalida bur-buriyaan? Arimahaas dowladaha shisheeye u fuddudeeyey bur-burka Soomaalida ayaa ah meesha ay salka ku haso dhibaatadeenu. Hadii ay sidaa tahay, markaa dhibaatadu ma'aha dowladaha shisheeye ee faro-gelinta inagu sameeyey. Dhibaatada salkeedu waxaa weeye: arimaha kalifay inay Soomaalidu iska difaaci waydo dowladahaas shisheeye. Ma aragtaa in ay been noqotay faro-galinta dowladaha shisheeye.

Musuq-maasuq: qoladani waxay ku doodaa in dhibaatadeenu salka ku hayso musuq-maasuq. Marka ay doodan soo ban-dhigayaan, waxay ka sheekeeyaan sida uu musuq-maasuqu ugu badan-yahay dowladaha Soomaalida; dadka musuq-maasuqa sameeya; dhacdooyin musuq-maasuq oo ay soo xigtaan, iwm. Musuq-maasuqu inuu Soomaalida aad ugu badan-yahay waynu ognahay. Laakiin,

waxaa is waydiin leh: maxaa sababay musuq-maasuqa? Su'aashaas kaliya markaad waydiiso dadka fikirkan aaminsan, waxay kuu sheegayaan waxyaabo badan oo sababay musuq-maasuqa. Tusaale ahaan, waxay ku jawaabaan: musuq-maasuqa waxaa sababa sharciga oo aan lagu dhaqamaynin. Markaa hadii sharciga lagu dhaqmi lahaa, musuq-maasuq muu jireen. Hadii ay sidaas tahay, markaa dhibaatadu waxay salka ku haysaa sharciga oo aan lagu dhaqmanine, salka kuma hayso musuq-maasuqa. Waayo? Hadii sharciga lagu dhaqmi lahaa, muu jireen musuq-maasuq. Markaa dhibaatadu waa sharciga oo aan lagu dhaqmaynin. Doodani waa doodaha aad markiiba si fuddud u beenin karo. Markaa ma'aha dood ku salaysan cilmi-baadhis qoto-dheer.

Lixdaas sababood ee kor-ku-xusani, waa lixda ugu waawayn ee lagu tilmaamo inay yihiin meelaha ay dhibaatadeenu salka ku hayso. Laakiinse, lixdaas sababood midna ma'aha meesha ay dhibaatadeenu salka ku hayso. Lixdaas sababood midna ma'aha 'sababta' (cause); laakiin, dhamaantood waa 'saamayn' (effect). Sidii aan hore usoo sharaxay, aad ayay u kala duwan-yihiin sababta iyo saamayntu. Markaa dadkaas waxaa iskaga qaldamay sababtii (cause) iyo saamayntii (effect). Hadaba, hadii lixdaas qodoba aanay ahayn meesha ay salka ku hayso dhibaatadeenu, markaa halkee ayay dhibaatadeenu salka ku haysaa? Waa su'aal aad u muhiima. Su'aashaasna buuggan ayaa kaaga jawaabayaa. Buuggani wuxuu ku salaysan-yahay cilmi-baadhis qoto-dheer, oo muddo dheer aan samaynaayey. Cilmi-baadhistan qotada-dheerina waxay asiibtay, oo ay si sax ah usoo ban-dhigaysaa, meesha uu salka ku hayo—ama sababta u ah—dhibaatada ummadda Soomaaliyeed. Cilmi-baadhistani waxay kuu cadaynaysaa, oo ay ku doodaysaa: dib-u-dhaca ummadda Soomaaliyeed,

waxaa 80% (boqolkiiba sideetan) sabab u ah *dhaqanka Soomaalida*. Inta kale ee soo hadhay—20%—waa dhibaatooyinkii ka dhashay dib-u-dhacaas uu sababay dhaqankeenu.

Markii aanu baranaynay culuumta siyaasadda (ee aan ka baranaayey University of Minnesota; USA—Jaamacada Minnesota, USA), waxyaabihii ugu muhiimsanaa ee aanu baranay waxaa ka-mid-ahaa qaaciidadan: marka aad doonayso inaad fahanto, oo aad sharaxdo arin bulsho (dhibaato bulsho), waxaad ku khasbantay in aad fahanto meesha uu salka ku hayo, ee uu kasoo jeedo, arinkaas bulsheed ee aad baadhaysaa. Si aad u fahanto meesha uu kasoo jeedo, waa inaad soo dhirran-dhirrisaa taariikhda uu leeyahay arinkaas aad ka sharaxaysaa. Waa in aad kasoo bilawdaa meesha uu asalkiisu ka yimi iyo is-bedelkii kusoo dhacay muddaddii uu jiray. Markaas ayaad si cilmiyeysan, oo qoto-dheer, u fahmi kartaa arinkaas aad doonayso in aad fahanto. Intaas ka dib, waxaa kuu fuddudaanaaya in aad hesho xalkii aad kaga bixi lahayd dhibaatadaas.

Tusaale ahaan, waxaa lagu waydiiyey su'aashan: *maxaa sababay in wadamada qaarkood ay noqdaan qani; wadamada qaarkoodna ay noqdaan faqiir?* Marka aad doonayso in aad su'aashan ka jawaabto (Cutubka *Dhaqanka Soomaalida iyo Wax-Soo-Saarka* ayaan kaga jawaabay su'aashan), waxaa lagaa doonayaa in aad si cilmiyeysan u fahansanaato, oo aad u sharaxdo, qodobadan soo socda:

1) in aad micnayso ereyga "qaninnimo" (dhaqaale abuur). Waxaad uga jeedaa "qaninnimo?" Haku deg-degin jawaabta su'aashan. Sababtoo ah, waa su'aal aad u adag. Sida aad moodaysana uma fudduda.

2) in aad micnayso ereyga "faqiir" (dib-u-dhac dhaqaale). Waa maxay micnaha "faqiir?" Haku deg-degin jawaabta

su'aashan. Sababtoo ah, waa su'aal aad u adag. Sida aad moodaysana uma fudduda.

3) in aad soo dhirraan-dhirriso taariikhdii dhaqaale abuurka, meeshii ay kasoo bilaabantay, wixii sababay inay bilaabanto, dhibaatooyinkii lagala kulmay, cidii bilowday, iwm.

4) in aad soo dhirran-dhirriso taariikhdii dib-u-dhaca dhaqaale, meeshii ay kasoo bilaabantay, wixii sababay inay bilaabanto, dhibaatooyinkii lagala kulmay, iwm.

5) in aad is bar-bar-dhigto wadamadii qaniga ahaa iyo kuwii faqiirka ahaa adigoo kasoo bilaabaya markii ay isku awooda dhaqaale ahaayeen iyo sababta ay u kala duwanaadeen wakhtigan aynu ku jirno; iwm.

Saw ma aragtid sida ay u adag-tahay, ee ay u qoto-dheer-tahay, ka jawaabida su'aashani? Ma'aha su'aal fuddud. Sidaas oo kale, su'aasha uu buggani ka jawaabayaa—*halkee ayay salka ku haysaa—oo ay kasoo bilaabantay—dhibaatadeenu*?—waa su'aal aan fuddudayn ka jawaabideedu. Wali jawaabtaas maynu helin. Taasna waxaa kuu cadaynaya, hadii jawaabtaas si sax ah loo heli lahaa, waxaa la heli lahaa xalka aynu dhibaatadan kaga bixi lahayn. Laakiin, maadaama jawaabihii su'aashaas laga bixiyey ay dhamaantood khalad yihiin, waxaa khaldamay xalkii laysku dayay in wax lagu daweeyo.

Buuggan ayaa su'aashaas ka jawaabaya. Waana buug kusoo biiray cilmi-baadhistaas lagu raadino meesha uu salka ku hayo dib-u-dhaceenu.

1

WAA MAXAY DHAQAN?

Buugga *Primative Culture: Research into the Development of Mythology, Philosophy, Religion, Art, and Custom* ee uu qoray Edward Burnet Taylor ayaa si cilmiyeysan, oo aad u qoto-dheer, u sharaxaya meesha uu dhaqanku kasoo bilaabmay, sababtii abuurtay, sababahaa uu isu-bedelo, iwm. Hadaba, inta aynaan u guddo-gelin *Dhaliisha Dhaqanka Soomaalidda*, waxaa muhiim ah in aynu fahano micnaha "dhaqan" oo uu Edward si cilmiyeysan u sharaxay. Waayo? Maadaama aan buuggan kusoo bandhigayo dhaliilaha uu leeyahay dhaqanka Soomaalidu, waxaa muhiim ah in aan sharaxo macnaha "dhaqank;" ama waxa uu yahay dhaqan.

Hadaba, si aynu u fahano micnaha "dhaqan," cutub-kan waxaynu u dhirraan-dhirrinaynaa siddan soo-socota. Kow, waxaynu qeexaynaa oo aynu sharaxaynaa kelmedda "dhaqan." Laba, waxaynu sharaxaynaa sida uu u abuurmo (samaysmo) dhaqanku. Saddex, waxaynu faah-faahin ka-bixinaynaa sababta ay dhaqamadda aduunku u kala duwan-yihiin. Afar, waxaynu is-dul-taagaynaa meeshii uu ka-yimi

dhaqanka Soomaaliddu. Shan, waxaynu kusoo gunnaanna-day-naa arimaha (wax-yaabaha) sababa in dhaqanku is-bedelo.

Qeexidda iyo Sharaxaada Dhaqanka

'Dhaqan' waxaynu u sharaxaynaa laba siyood: kow, waxaynu qeexaynaa macnaha kelmeda 'dhaqan' lafteeda; laba, si aynu u fahano macnaha guud ee 'dhaqan,' waxaynu soo dhirraan-dhirrinaynaa sida uu u abuurmay—ama u abuurmo—dhaqanku. Aynu ku horayno macnaha kelmeda 'dhaqan.'

Marka aynu ka eegno dhinaca af-Soomaaliga, lama garanayo (cid ii sheegtana maan arkin) macnaha kelmeda 'dhaqan' lafteeda; ama meesha ay kasoo jeedo kelmeda dhaqan. Hadiise aynu xusno luqadaha horuu-maray, ee sida fiican looga shaqeeyey (sida Ingiriisida), waxaad arkaysaa in kelmeda dhaqan si fiican loo qeexay.

Af-Ingiriisida, kelmeda 'dhaqan' waxay noqonaysaa '*culture*.' Hadaba, asal ahaan xagee ayay kasoo jeedaa kelmeda '*culture*?' Kelmeda '*culture*,' waxay asal ahaan kasoo jeedaa kelmeda '*colere*' oo Latin ah, macnaheeduna yahay 'beerid'—sida marka beerta la beerayo oo kale. Sidaa awgeed, kelmeda 'culture' micnaheedu waxaa weeye 'beerid.' Beerta marka la beerayo, waxaa loo maraa dariiqan: ciida ayaa la nafaqeeyaa; iniinta ayaa lagu ridaa dhulka; waa la waraabiyaa; geedka kasoo bilqa ayaa la dhaqaaleeyaa, oo la koriyaa. Sidaas beerta loo beerayo oo kale, ayaa dhaqankuna uu yahay wax beerma oo maalinba wax ku kordhayaan; waxna ka dhacayaan. Geedku inuu dhulka kasoo baxana uma baahna caawimadeena. Geedku iskii ayuu dhulka ugasoo bixi karaa. Marka aynu geedka beeraynanna waxa kaliya oo aynu inagu samaynaa waxaa weeye:

ciida ayaynu nafaqaynaa; iniinta ayaynu dhulka ku ridnaa; waynu waraabinaa; dhibaatadana waynu ka ilaalinaa; BES. Laakiin, marka aynu iniinta dhulka ku ridno, iniintaasi siday u shaqaynayso inagu waxba kama qaban karno. Inay soo bixi doonto iyo in aanay soo bixi doonin, waxba kama qaban karno. Dhaqankuna waa sidaas oo kale (qodobkan waxaad si fiican usii fahmayaa markaad akhrido abuuridda dhqanka. Sii akhri). Intaasi waa qeexida kooban ee kelmeda 'dhaqan.' Bal iminka aynu sharaxno macnaha guud ee dhaqan.

Buugga *Primative Social Organization: An Evolutionary Perspective* ee uu qoray Elman Service ayaa si cimiyeysan u sharaxay macnaha guud ee dhaqanka. Elman wuxuu dhaqanka ku macneeyey: "Nidaam-nololeed ay bulsho—ama kooxi—ku wada xidhiidhaan, ama wadaagaan. Nidaamkaasi wuxuu ka kooban-yahay tiirrar aad u tirrobadan oo kala duwan; tiir walibana uu nolosha kaalin ku leedahay. Tiirrarkaas kala duwana waxaa ka-mid-ah: caadooyinka, diinta, lebiska, cuntada, luqada, suugaanta, qalabka, muusiga, iwm." Dhinaca kale, *Qaamuuska af-Soomaaliga* ee ay qoreen Annarita Puglielli iyo Cabdalla Cumar Mansuur, wuxuu kelmeda 'dhaqan' ku macneeyey: "Isu geynta nolosha maaddiga, ruuxiga, iyo bulsho ee ummadi leedahay, soona maray isbeddello taariikheed . . . [kaas oo] ka kooban fikrado, caadooyin, fan, farshaxan ay [samaysteen] ama ay wadaagan [mujtamac] gaar ah." Ummad kasta oo aduunka ku noolina way leedahay dhaqan u gaar ah. Inkastoo ay dhaqamada ummaduhu kala-duwan-yihiin, hadana dhaqan waliba wuu leeyahay tiirrarkaas aynu soo sheegnay; laakiin, dhaqan waliba si gaar ah ayuu u isticmaalaa tirrarkaas. Waa waxa keenay inay dhaqanadu kala duwanaadaan.

Abuurridda Dhaqanka

Dhaqanku weligiiba miyuu jiray, mise wuxuu leeyahay bar-bilow (meel uu ka-bilaabmay)? Hadii uu bar-bilow leeyahay, siduu u bilowday? Ma bulshadda ayaa intay shirtay (isu-timi) dhaqan samaysatay, mise waxaa jirta baahi bulsho oo uu dhaqanku ka abuurmay? Su'aalahaas iyo qaar kale oo badani waxay inagu khasbayaan in aynu si qoto-dheer, oo cilmiyeysan, u fahano abuuridda dhaqanka.

Hadaba, waxa ugu horeeya ee loo baahan-yahay in aad fahantaa waxaa weeye in dhaqanku aanu weligiiba jirin; oo uu dhaqanku leeyahay bar-bilow (meel uu ka bilowday). Waxaana jira baahiyo (sababo) abuuray dhaqanka. Sidaa awgeed, dhaqanku ma'aha wax ay dadku iskood u samaysteen. Dadku iyagoo aan ogayn ayuu dhaqanku si tartiiba ah u abuurmay, oo maalinba wax ku kordhayeen, waxna ka dhacayeen; waxaana ku khasbay arimo badan. Halkan hoose waxaan si kooban ugu sharaxayaa sidii uu u abuurmay dhaqanku iyo baahiyihii abuuray.

Dhaqanku wuxuu ka-abuurmaa marka ay isla fal-galaan labadan arimood: 1) degaanka (dhulka) ay bulshaddu ku-nooshahay; iyo 2) is-maamulka bulshadda. Labaddan arimood-na way isa-saameeyaan. Degaanku wuxuu qaabeeyaa nooca dhaqanka ee ay dadku yeelanayaan; is-maamulka bulshadduna wuxuu bedelaa degaanka ay degen-yihiin bulshaddu. Waa laba rimood oo sharax-aadooddu isku noq-noqonayso. Sidaa awgeed, sharxaadan soo-socotaa waa sharaxaad isku-noq-noqonaysa oo labadaas arimood mid waliba midka kale micnaynayo.

Degaamadda (dhullalka) ay bulshooyinku ku-kala-nool-yihiin way kala-duwan-yihiin. Dadka qaarkood waxay ku-nool-yihiin degaan saxare ah; qaarna degaan beeralay ah;

qaarna xeeb; qaarna degaan buuro'ley ah; iwm. Inkastoo ay degaanaddu kala-duwan-yihiin, hadana degaan kasta—noocuu-doono ha ahaadee—waxaa ka-jira laba arimood: 1) wax bani'aadamka faa'iido u-leh, oo ay munaafac-sadaan; iyo 2) wax bani'aadamka khasaare u-leh, oo jiritaankooda khatar ku ah. Waxyaalaha bani'aadamka faa'iiddadda u-leh waxaa ka-mid-ah:

b) *ugaadha*: oo hilibkooda la-cuno, caanahooda la-cabo, haragooddana maryo laga-samaysto;

t) *biyaha*: oo ah assaaska nolosha, ee aan la'aantood noloshu suuro-galaynin;

j) *dhirta*: oo midhahoodda la-cuno, laysku daweeyo, hub laga samaysto, maryo iyo guryana laga-samaysto;

x) *dhagaxa*: oo laga samaysto mindiyo wax lagu goo'-goosto, hub laysku difaaco, qalab midhaha dhirta lagusoo daadiyo; iwm.

Dhinaca kale, waxyaalaha bani'aadamka khatarta ku ah waxaa ka-mid-ah:

b) *bahalaha dad cunka ah*: sida, libaaxa, shabeelka, jabisadda, maska, madax-kutidda, iwm., oo bani'aadamku aanu u haysanin hub iyo awood ay iskaga difaacaan;

t) *cadowga*: weerarka bani'aadamka kale;

j) *bakteeriyada/fiiruska (bacteria/virus)*: cudurada ay keenaan oo aanay wax aqoona u lahayn;

x) *dhimirka*: xannuunadda ku dhaca maskaxda oo aanay wax aqoona u lahayn;

kh) *masiibada dabiiciga*: dhul-gariirka, fulkaanaha, duufaanada, dhulka duma, iwm.

Bani'aadam-ku muddaddii ugu dheerayd ee uu jiray wuxuu ku noolaa deeganadaas kala-duwan; oo faa'iido iyo khatariba ay ka-jireen. Bani'aadamka degaanaddaas ku-noolaa wuxuu ku-khasbanaa inuu ka faa'iidaysto (munaafa-

caad-saddo) wax-kasta oo faa'iido leh oo degaankiisa ka jira; isla-markaana uu naftiisa ka-bad-baadiyo wax-kasta oo khatar ah oo degaankiisa ka jira. Degaanadaasina waxay dhamaantood ahaayeen kaymo. Nolosha kayntuna waa nolol aad u khatar badan.

Waa nolol ku salaysan in aad wax cunto ama adiga lagu cuno (*cun, ama halagu cuno*); ama in aad wax disho ama adiga lagu dilo (*dil, ama halagu dilo*). Labadaas wax u dhexeeyaa ma jiraan—waa *Sharciga Kaynta*. Waa nolol ay nooluhu is wada-cunayaan; noole weliba midka kale ayuu cunaa. Waa nolol ay bani'aadamku is wada dilayaan, is wada dhacayaan, oo is boobayaan. Nolosha waxaas oo khatar ahi ka jiraana, ma suurto-galayso inuu qofku keligii noolaado. Si uu qofku u bad-baado, waa inuu helaa dad kale oo ay is kaashadaan, si ay uga bad-baadan khatarta degaanka, ugana faa'iidaystaan manaafacaadka degaanka.

Hadaba, si uu bani'aadamkaasi uga faa'iidaysto degaankiisa uu ku-nool-yahay, isagoo naftiisana bad-baadinaya, waxay sameeyeen laba arimood (waana labada-arimood ee abuurray dhaqanka). Kow, waxa ugu horeeya ee loo-baahday waxay ahayd (si degaanka looga faa'iidaysto): in la helo bulsho isku-xidhan, oo is-kaashata, oo qof walibanna uu howsha ka-qayb-qaato. Hadii aanay bulshaddu iskaashanin, awood uma-yeelanayaan inay ka faa'iidaystaan degeeenka ay degen-yihiin; mana awoodayaan inay iska-difaacaan khatarta kaga imanaysa degaanka. Laba, marka ay bulshaddu iskaashato, waxaa muhiima inay fahanto, oo si qoto-dheer u daraasadayso, degaanka ay ku-noolshahay. Labadaas arimood aynu sii faah-faahino.

Iskaashigga bulshadda: si bulshaddu isu-kaashato waxaa muhiim ah in bulshadda laysku-xidho, oo ay jiraan xadhko iyo rukumo adag oo isu haya bulshada, si aanay u kala fur-

furmin. Sidii aynu soo sheegnay, qof kali ahi kuma noolaan karo kaynta. Sidaa awgeed, waa inay is kaashadaan dad tirro-badani. Dadkaasi markay is kaashanayaana, waxaa muhiim ah in qof waliba uu howsha ka qayb qaato. Hadaba, si loo dhiiri-galiyo inay dadku shaqada ka wada qayb-qaataan, iyagoo u badheedhaya khatar kasta oo kasoo gaadha, waxaa la samaystay tiirrar bulsho oo qofka dhiiri-geliya. Dhinaca kale, si looga hor-tago dadka aan shaqada ka qayb-qaadanin, ee doonaya inay khiyaamo kula noolaadaan bulshada, waxaa la-samaystay tiirrar bulsho oo joojiya qof kasta oo isku daya khiyaamo bulsho.

Si loogu guulaysto arimahaas, nolosha kayntu waxay dadka ku khasabtay inay ka jawaabaan su'aalahan: siday u suurto galaysaa in nin dhalinyaro ahi uu kaynta u dhex lugeeyo si uu usoo ugaadhsado, isagoo u badheedhaya khatarta xad-dhaafka ah ee kaynta ka jirta? Sidee ayay u suurto galaysaa in ninka dhalinyarta ahi uu ka qayb-qaato dagaal lagu weerarayo—ama layska difaacayo—dad kale, isagoo og khatarta nafeed ee kasoo gaadhi karta? Sidee ayaynu u joojinaa wax kasta oo khatar inagu keenaya oo ka imanaya bulshada dhexdeeda? Sidee ayaynu u dhiiri-gelinaa wax kasta oo wanaag ah oo kor-u-qaadaya horu-marka bulshada? Wa'ayo qofka hogaaminaya dadkaas kaynta ku nooli? Qofka hogaamiyaha ah, maxaa lagu xulanayaa? Su'aalahaas iyo qaar kale oo badani, waxay inagu kalifayaan inaynu sharaxaad ka bixino siday dadkaas kaynta ku noolaa isugu xidhi-jireen bulshadooda. Si ay ummadooda isugu xidhaana, wuxuu degaanku ku khasbay inay samaystaan tiirrar isu haya, oo isku xidhaya, bulshada. Aynu xusno dhowr tusaalee oo ina tusaya tiirrarkaas bulshada isu haya.

Hoggaamiye: waa maxay hogaamiye? Halkuu kasoo bilaabmay waxa aynu u naqaano "hogaamiye?" Waa maxay

baahida keentay "hogaamiyuhu?" Qofka hogaamiyaha noqoyaa, astaamo noocee ah ayuu leeyahay? Muxuu kaga duwan-yahay dadka intooda kale? Si aynu su'aalahaas uga jawaabno, aynu sharaxno baahiyihii ugu waawaynaa ee ka jiray kaynta, ee abuuray hogaamiyaha.

Wakhtigii ay dadku ku noolaayeen kaymaha, waxa uguweyn ee ay bulshaddu u baahnayd wuxuu ahaa cunto. Sidaa awgeed, waa in la-helaa dad soo ugaadhsadda xayawaanka duur-joogta-ah. Ugaadhsigu waa shaqo aad u howl iyo khatarba badan. Marka uu qofku ugaadhsanayo xayawaanka duur-joogta ah, waxaa dhacda in isaga laftiisa lasii ugaadhsado, oo ay sii ugaadhsadaan libaax, shabeel, jabiso, iwm. Qofkii ugaadhsigga tegay, ayaa isaga la-cunaa; ama wuxuu ku-dhacaa god ama ceel, oo uu ku dhintaa. Mar-marka qaarna waxaa dhacda in rag kale ay ka qaadaan (boobaan) xayawaankii uu soo ugaadhsaday. Waa shaqo baqdin iyo khatar badan.

Hadaba, si-loo-helo dad ku-dhiirradda, oo u-badheedha, khatartaa faraha-badan ee ku-gedaaman ugaadhsigga, waxaa muhiima in la-dhiiri-geliyo dhalinyarta gaashaan-qaadka ah, ee xooga lagu-tuhmayo. Dhalinyartaas waxaa hor-jooge (hoggaamiye) u-noqda ninka ugu-weyn. Sababtoo ah, ninka ugu wayni wuxuu khibrad fiican u-leeyahay ugaadhsigga. Maadaama uu ninka wayni muddo-dheer kusoo-jiray xirfadda ugaadhsigga, wuxuu kala-yaqaanaa xiligga la-ugaadhsaddo, sida loo-ugaadhsaddo, khatarta ku-geddaaman ugaadhsigga, iyo sida looga-hor-taggo (ama laysaga bad-baadiyo khatartaas).

Marka ugaadhsiga la-tago, waxaa la-kaxaystaa, oo wax la-waydiiyaa, ninka ugu da'da wayn ee muddada dheer kusoo dhex-jiray ugaadhsiga. Ninkaas ayaa hogaamiyaha dhalinyaradda ugaadhsiga tagaysa. Halkaas waxaa ka abbuurmay waxa loo-yaqaano "hoggaamiye." Waa baahiddii

ugu-horaysay ee abbuurtay waxa loo-yaqaano "hoggaamiye." Laakiinse, su'aasha is-weydiinta muddani waxaa weeye: sidee ayay hoggaamiyaha ugu-suurto-galaysaa inuu dhalinyarta ka-dhaadhiciyo inay qabtaan howshaas ugaadhsigga ee khatarta badan?

Si arinkaas loogu guulaysto, waa in la-sameeyaa "derejooyin bulsho." Derejo kastana waxaa loo-bixiyey magac u gaar ah—mid wanaagsan iyo mid xun. Ninka doonaya inuu yeesho magac, sharaf, maamuus, milgo, oo uu helo hablaha ugu quruxda badan, waa inuu ku guulaystaa derejada ugu saraysa. Ninka derejadaas ku guulaysan-waayana, wuxuu noqdaa nin ku khasaaray noloshii, habluhuna ay nacaan. Dhinaca dumarkana waa sidaas oo kale. Gabadha doonaysa inay qaadato derejada ugu saraysa ee haweenka, waa inay buuxishaa shuruudaha derejadaas.

Halkan hoose ayaan ku sharaxayaa qaar ka-mid-ah derejooyinkaas ay bulshadu samaystay si ay dadka ugu dhiirrigeliyo howsha laga doonayo inay qabtaan.

***Geesi*:** sidii aynu soo sharaxnay, nolosha kayntu aad ayay u khatar badan tahay. Sidaa awgeed, si dhalinyarta loogu dhiirri-geliyo inay u badheedhaan howshaas khatarta ah, waxaa la abuuray derajooyin loo-kala-sameeyey bulshadda. Derajooyinkaasina way kala-sareeyaan; waanay kala maamuus iyo sharaf badan-yihiin. Derejadda ugu saraysa ee uu nin dhalinyar ahi ku guulaysataa waxaa weeye: *Derejada Geesi*. Waa maxay "geesi?" Geesigu waxaa weeye: qof bani'aadam ah oo la-doonayo inuu naftiisa khatar geliyo si uu u bad-baadiyo bulshada inteeda kale.

Geesigu kama duwana bulshada inteeda kale—kama qalbi adka, kama niyad wanaagsana, kamana fariidsana. Waxaa keliya ee uu geesigu ummada kale kaga duwanyahay waxaa weeye: waa qof aad u jecel in la amaano. Si uu u helo amaantaasna, wuxuu ku dedaalayaa inuu helo

amaanta ugu saraysa ee ay bulshadu dadka siiso. Amaanta ugu saraysaana waxaa weeye *geesi*. Waa qof naftiisa khatar galinaya si uu u helo amaantaas bulshada.

Berigii hore ee kaynta lagu jiray, geesigu wuxuu ahaa qofka u badheedha khatarta kaynta ka-jirta si uu usoo ugaadhsado. Laakiinse maanta, geesigu waxaa weeye ninka wadankiisa difaaca, ama ummad kale weerrarra. Kaalintii geesigu waxba iskamay bedelin; sababtoo ah, geesigu waa qof naftiisa khatar gelinaya si uu bad-baadiyo, ama guul ugusoo hooyo, bulshadiisa. Laakiin, waxaa is-bedelay uun shaqadiisii—ugaadhsi iyo difaac wadan.

Fulay: derejooyinka ay bulshadu bixiso kuwa ugu hooseeya waxaa ka-mid-ah, *Derejda Fulay*. Fulaygu waxaa weeye qofka ka baqa inuu u badheedho khatart kaynta ka dhex-jirta. Waa qof doonaya inuu cuno hilibka lasoo ugaadhsaday isagoo aan ka qayb-qaadanin khatartii loo-maray ugaadhsiga. Waa qof naftiisa jecel, oo doonaya in aanay wax dhibaato ahi soo gaadhin—*Fulle hooyadii ma goblanto*. Sidaa awgeed, marka uu qofkaasi ka-caga-jiido, ama uu diido, inuu u badheedho khatarta kaynta ka jirta, ayaa waxaa la siiyaa derejada fulay. Qofka derejadaas qaataana wuxuu noqda qof la-caayo, lagu digto, habluhu nacaan, la yasso, iwm. Laakiin, fulaygu waa qof aad u maskax badan. Waayo? Waa qof doonaya in uu naftiisa bad-baadiyo, isla markaana uu cuno hilibka ugaadha ee ay khayrkii naftooda khatarta u geliyeen. Wakhtigii kaynta lagu noolaa, fulaygu wuxuu la-mid-ahaa siyaasiga maanta jooga. Wuxuu ahaa siyaasiga kaynta.

Khalad iyo Sax: maxaa looga jeedaa "khalad iyo sax?" Bulshadu marka ay ku nooshahay kaynta, waxaa muhiima in layska ilaaliyo khatarta ka imanaysa dadka bulshada ka-midka-ah. Khataraha bulshada ka yimaadaana way kala-duwan-yihiin. Khaladaadka waaweyn ee ay dadku

sameeyaan ee bulshada khatarta ku ahi, waxay leeyihiin ciqaab aad u saraysa—sida: dil, ganaax dhaqaale, iwm. Khaladaadka yar-yarina waxay leeyihiin ciqaab aan aad u waynayn—sida: ceebaynta qofka, takoorida, iwm.

Wax kasta oo khatar wayn ku ah jiritaanka bulshada, waxaa loo bixiyey "khalad;" wax kasta oo bulshada hor-u-markeeda u wanaagsana, waxaa loo-bixiyey "sax." Bulsho walibana waxay leedahay wax ay u taqaano "khalad" iyo wax ay u taqaano "sax." Sidaa awgeed, bulshadaada Soomaalidu wax ay u taqaano "khalad" ayaa bulsho kale u qataanaa "sax." Sababtuna waxaa weeye: bulsho waliba waxay iska ilaalinayaa waxa khatarta ku ah. Dhinaca kale, waxa ay bulshadu maanta u aragto "khalad" ayaa berito noqon-kara wax ay u arkaan "sax." Sababtoo ah, wixii maanta khatarta ahaa ee loo arkaayey "khalad," marka uu berito noqdo wax aan khatar ahayn, oo faa'iido leh, waxay bulshadu u arkaysaa inuu yahay "sax." Sidaa awgeed, macnaha labadaas erey ee "khalad" iyo "sax" waxay ku xidhan-yihiin kolba xaalada ay ku jirto bulshadu (diintu kuma jirto. Halkan waxaynu ka hadlaynaa tiirrarka bulsho ee ay bani'aadamku samaystaan).

Ceeb: maxaa looga-jeedaa "ceeb?" Ceebtu waxaa weeye, wax ay bulshadu u aragto dhibaato aan waynayn, laakiin bulshada aan u fiicanayn, oo khatari ay ka dhalan karto. Dhibaatadaasna si loo-joojiyo, ama loo-yareeyo, waxay bulshadu samaysatay ciqaab fuddud oo lagu joojiyo dhibaatadaas. Marka uu qofku sameeyo dhibaatadan, waxaa lagu yidhaahdaa: "ma xishoode;" "ma yaq-yaqsoode;" "Alle kuma asturo;" iwm. Qofka ereyadaas loogu yeedhaa, waa qof la caayayo, oo la-ciqaabayo si uu joojiyo dhibaa-tooyinkaas yar-yar ee uu samaynayo.

Sharaf: maxaa looga jeedaa "sharaf?" Kelmeda "sharaf" macnaheedu waxaa weeye: qofka aan samaynin waxyaalaha

khatarta ama khaladka ah ee bulshada dhibaato u keenikara. Si bulshada loogu dhiiri-geliyo inay ku guulaystaan derejada "sharaf," waxay bulshadu amaantaa oo ay sare-u-qaadaa in qof kasta oo ka dhawrsada wax kasta oo bulshada khatar ama khalad ku ah. Waa kelmed aad u muhiima oo bulshada lagu taba-baro si looga ilaaliyo khataraha iyo dhibaatooyinka.

Cuntadda: bulsho waliba waxay leedahay cunto "xaaraan" ah, oo aan la-ogolayn in la-cuno. Dadka ku takhasusay cilmiga antaraboolooji-ga (anthropology), waxay ogaadeen in ay sababo badan, oo kala-duwan, oo ay bulshooyinku xaaraan uga dhigeen cuntooyinka qaarkood: kow, in cuntadaas xaaraanta laga dhigay ay ku yartahay degaanka ay bulshadu degen-tahay; sidaa awgeedna, la-doonayo in aan xoolahaas la-dhamaynin; laba, in cuntadaas xaaraanta laga dhigay aan laga helin degaanka ay bulshadu degentahay; saddex, in diintoodu ka mamnuucday; iwm.

Qodobadaas aynu kor-kusoo-xusnay, waxay sawir guud inaga siinayaan in tiirrarkaas dhaqanka ujeeddadoodu yihiin in bulshada lagu maamulo oo lagu xakameeyo, si looga hortago khatarta ka imanaysa dadka iyo si looga faa'iidaysto kartida iyo garaadka dadka. Dhaqanka ujeeddaddiisu waa intaas. Dhaqanku waa sharciyo aan qornayn oo bulshada lagu xakameeyo iyo sharciyo aan qornayn oo lagu dhiiri-geliyo wax kasta oo bulshada hor-u-mar usoo siyaadinaya.

Hadaba, sidii aynu soo sheegnay, dhaqanku wuxuu ka dhashaa baahida ka abuuranta isla-fal-galka bulshada iyo degaankooda. Marka ay bulshadu ka guurto degaankaas ay degentay, waxaa khasab noqota inuu dhaqankuna is bedelo. Waayo? Dhibaatooyinkii iyo faa'iidooyinkii ay bulshadu kala kulmi jirtay degaankii hore ee ay degenayd, wuu is bedelay. Degaanka cusub ee ay degeen wuxuu leeyahay

dhibaatooyin iyo faa'iidooyin cusub oo aanay bulshadu hore u aqoonin. Sidaa awgee, sharciyadii ay bulshadu ku xakamayn jirtay dadka iyo sharciyadii ay ku dhiirri-galin jirtayba wuu is bedelayaa. Waa arinka ugu wayn ee bedela dhaqamada. U fiirso, Soomaalidii miyiga deganyd dhaqankoodii iyo Soomaalida maanta degen magaalooyinka.

Agabka Dhaqanka: waa maxay "agabka dhaqanku?" Agabka dhaqanku waxaa weeye: qalabka (tignoolojiga) ay bulshadu isticmaasho si ay noloshu ugu fuddudaato. Agabka dhaqanka waxaa ka-mid-ah: weelka, hubka, maryaha, dhismayaasha, muuqalada diinta, iwm. Tusaale ahaan, agabka dhaqanka Soomaalida waxaa ka-mid-ah: fandhaalka, haanta, aqal Soomaaliga, dharka, kabaha (cagba-cag), saliga, yacayga, heeryada, kebedda; iwm. Maadaama uu agabka dhaqanku yahay qalabka (tignoolojiga) ay bulshadu isticmaasho, waa meesha laga dheehdo, ee laga arko, heerka hor-u-marineed ee bulshadaasi marayso. Hadii aan si kale u sheego, agabka dhaqanku wuxuu tilmaamaa aqoonta iyo horumarka bulshada.

Tusaale ahaan: hadii aad is bar-bar dhigto agabka dhaqanka ee ummadda Maraykan-ka iyo Soomaalida, waxaa kuu cadaanaya sida ay u kala horeeyaan labadaas ummaddood. Maraykan-ku qalabka uu isticmaalo iyo Soomaalidu qalabka ay isticmaashaa waxay si toos ah kuu tusaysaa heerka aqooneed, dhaqaale, iyo dadnimo ee labadaas ummaddood.

Agabka dhaqanku waa waxa kaliya ee ka hadha bulsho aduunka ka dabar-go'day. Taas waxaan uga jeedaa, marka bulsho meel degenayd ay xasuuqanto (madhato), waxaa kasoo hadha oo kaliyi waxaa weeye agabkii dhaqankooda ee ay isticmaali jireen. Dhaqankoodii kale oo dhami bulshadaas ayuu la xasuuqmaa, ama la-dhintaa.

Soomalidu waxay isku khaldaan: dhaqanka iyo agabka

dhaqanka. Marka Soomaalidu ay soo bandhigayso dhaqankooda, ummadaha uma sharaxaan tiirrarka dhaqanka; laakiin, waxay daawad-siiyaan uun agabka dhaqanka; kaas oo aan ka turjumaynin tiirrarka dhaqanka Soomaalida. Agabku waa qayb aad u yar oo ka-mid-ah dhaqanka; inkastoo fahankiisu uu aad muhiim u yahay.

Maxaa Kala-duway Dhaqamada Aduunka?

Maadaama aad akhriday, oo aad fahantay, sharaxaadaas kor-ku-xusan, waxaad si fiican uga jawaabi kartaa su'aashan: maxaa kala-duway dhaqamada aduunka? Sidii aynu soo sharaxnay, dhaqanku wuxuu ka abuuramaa marka ay isla fal-galaan bulshada iyo degaankoodu (hadii aanad weli fahmin, dib ugu noqo sharaxaada kor-ku-xusan). Dhaqamada aduunka waxaa kala-duway waxaa weeye degaanada kala-duwan. Aan soo qaato tusaale kooban, oo aad u fuddud.

Dadka ku nool dhulalka baraf-layda ah iyo dadka ku nool dhulka saxara ahi, waa dad uu dhaqankoodu aad u kala-duwan-yahay. Dadka barafka ku nooli waxay aad isugu taxalujiyaan sidii ay uga bad-baadi-lahaayeen qabowga khatarta ah ee degaankooda ka jira; halka dadka saxaraha deganina ay aad ugu dedaalaan sidii ay uga bd-baadi-lahaayeen kulaylka ka jira degaankooda. Dedaalka kala-duwan ee labadaas ummadood ayaa sabab u ah kala-duwanaanshaha dhaqankooda. Dhaqankooda waxaa kala-duwayn: degaanada kala-duwan ee ay ku nool yihiin.

Abuurriddii Dhaqanka Soomaalidda

Dhaqanka Soomaalidu wuxuu ka abuurmay markii ay isla fal-galeen bulshadii Soomaaliyeed iyo degaankii ay ku

noolaayeen. Degaanka ay Soomaalidu degtaana waa degaan aad u dhibaato badan. Waa degaan ay aad ugu yar-yihiin biyaha iyo baadku. Waa degaan qallallan oo uu roobku ku yar-yahay, xayawaanka duur-joogta ahina aad ugu yar-yahay. Degaanka sidaa u dhibaatada badan ayay Soomaalidu ku noolayd muddo aad-iyo-aad u dheer. Baahidaa xad-dhaafka ah ee degaanka Soomaalida ka jirta ayaa abuurtay inay noloshii Soomaalidii hore ahayd nolol ku salaysan cabsi, kala-qaybsanaan bulsho (qabyaalad), wax-soo-saar la'aan, gaajo, dagaal, dhac, boob, dil, qax, iwm. Waa nolol ay dadku cadow isu wada yihiin, oo cid la bad-baadinayaana aanay jirin. Waa nolol uu bad-baadayo ninka awooda leh ee haysta dad tirro-badan—qabiil tirro-badan. Runtii waa nolol aad u cabsi (baqdin) badan.

Noloshaas kaynta sharci kama jiro. Dawladi kama jirto. Boolis ma jiro. Naxariisi kama jirto. Cadaaladi kama jirto. Cadaalad-darro kama jirto. Waxaa kaliya ee jiraa waxaa weeye: awood in laysku muquuniyo. Ninka laga tirrada-badan-yahay ayaa mar kasta lagu tacadiyi-jiray: "*ninkii roonoow, reerka u hadh*."

Buugga ciwaankiisu yahay *Leviathan* ee uu qoray filosoo-far-kii (philosopher) Ingiriis-ka ahaa ee la odhan jiray Thomas Hobes, ayaa si qoto-dheer u sharaxay xaaladan uu bani'aadamku ku jiray wakhtigii ay ku noolaayeen kaymaha (inkastoo isagu uu mal'e-awaal samaynaayey, laakiin xaqi-iqda ayuu ku salaysan-yahay).

Xaaladan keymaha ee uu bani'aadamku ku noolaa wuxuu u bixiyey: "*state of nature*"—oo micnaheedu yahay "*xaalada dabiici-ga*." Markii uu sharaxaayey nolosha ka jirta kaynta—xaalada dabiiciga—wuxuu ku tilmaamay in ay tahay nolol ah: "*solitary, poor, nasty, brutish and short,*" oo micnahoodu yahay nolol ah, "*cidla, sabool, karaahi, axmaq, oo gaaban*." Noloshaas ayay ku noolaayeen Soomaalidu.

Markaa waxaa is-weydiin-leh: dhaqan noocee ah ayaa ka dhashay degaankaas dhibaatada badan? Jawaabta su'aashan, waxaa ka jawaabaya buuggan. Dhaqanka ka abuurmay degaankaas dhibaatada badan, ayaa Soomaali u horseeday dib-u-dhaca ay maanta ku jirto. Si aad u hesho jawaabta oo qoto-dheer, si degen u akhri cutub kasta oo buugan ka mid ah.

Maxaa Sababa in Dhaqanku Is-bedelo

Buugga *Essentials of Cultural Anthropology: A Toolkit for Gloabal Age* ee uu qoray Kenneth J. Guest ayaa si cilmiyeysan u sharaxaya sababaha uu dhaqanku isu bedelo. Kenneth wuxuu cilmi-baadhistaan ku sheegay in "dhaqanku aanu ahayn sida dhaqagaxa oo kale; laakiinse uu yahay sida biyaha socda oo kale. Taas waxaan uga jeedaa, dhaqanku ma'aha wax adag oo aan is-bedelin; laakiin, dhaqanku waa sida biyaha soconaya oo si joogto ah ayuu isu bedelaa mar walba. Mararka qaarkood, waa la dareemaa is bedelka ku dhacay adhaqanka. Mararka qaarkoodna, lama dareemo is bedelkaas."

Sidii aynu kor kusoo-xusnay, dhaqanku wuxuu ka dhashaa marka ay isla fal-galaan bulshada iyo degaanka ay degen-yihiin. Degaanku wuxuu qaabeeyaa bulshada dhaqankeeda; bulshaduna waxay bedeshaa qaabka degaanka. Dhaqanku wuxuu ka jawaabaa khataraha iyo faa'iidooyinka degeenku uu leeyahay. Inkasta oo ay jiraan waxyaabo aad u tirro-badan oo dhaqamada bedelaa, bal aynu xusno shan ka-mid-ah.

Kow, marka ay bulshadu ka guurto degaankii ay degenayd, dhaqanku wuu is bedelaa; sababtoo ah, dhibaatadii iyo faa'iidadii uu degaankaasi lahaa way ka guureen. Waxay

u guureen degaan cusub oo leh dhibaatooyin iyo faa'i-idooyin nooc kale ah.

Laba, marka uu degaanku is-bedalo—nabaad-guuro, bur-buro, ama la dhiso—dhaqanka bulshaduna wuu is bedelaa; sababtoo ah, degaanka is bedelay wuxuu keenayaa dhibaatooyin cusub iyo faa'iidooyin cusub; kuwaasina waxay sababayaan inuu dhaqankii hore bedelmo, oo uu dhaqan cusubi bilaabmo.

Saddex, marka ay bulshadu horumar (ama dib-u-dhac) samayso, dhaqankeeduna wuu is bedelaa; sababtoo ah, waxay bulshadu la kulmaysaa xaalado cusub oo aan hore u jirin.

Afar, marka ay bulshadu la fal-gasho, ama ay aragto, dhaqamo kale oo shisheeye, ka dibna ay aaminaan in dhaqamadaasi yihiin dhaqamo ka fiican dhaqankooda; taasina waxay keentaa in bulshadu ku dayato dhaqamadaas shisheeye, sidaana uu dhaqankoodii ku bedelmo.

Shan, marka bulshada la gumaysto, ama wadankooda la qabsado; sababtoo ah, quwadaas gumaysanaysaa waxay markiiba ku dedaalaysaa inay bedelaan ummada dhaqan-keesa, si uu gumaysigu ugu fuddudaato. Shantaa qodob waxay ina-tuseen arimaha sababta u noqda inuu dhaqanku bedelmo.

Marka aad u fiirsato bulshada Soomaaliyeed, waxaad arkaysaa inuu dhaqankeeniu bedelmay dhowr jeer; welina uu bedelmaayo. Arimaha ugu waaweyn ee sababaya inuu dhaqankeenu bedelmana waxaa ka-mid-ah: kow, iyadoo lagasoo guuray miyigii (baadiyihii) uu dhaqankani ka abuurmay; laba, iyadoo lala kulmay dhaqano kale oo aduunka ah, oo aad uga duwan dhaqankeena, dhalin-yarteeniina ay aad ugu riyaaqeen dhaqamadaas—sida ka muuqata noloshooda; saddex, in dadka qaar ay u arkaan

inuu dhaqankeenu yahay dib-u-dhac iyo dhaqan aan lahayn horumar iyo cadaalad toona; iwm.

Iminka waxaynu u guddo-galaynaa qodobada ugu waawayn ee dhaqanka Soomaalida ku jire, ee sababay ama sababta u ah dib-u-dhaca ummada Soomaaliyeed. Waana qodoba u baahan in laga guuro, oo la bedelo. Xalkeenunna wuxuu ku jiraa in qodobadan dhamaantood la bedelo.

2

DHAQANKA SOOMAALIDA IYO CADAALADDA

"*Fiqi, tolkii kama-janno-tago*!"
"Aano, ilmaadeer-baa u dhinta!"
Maah-maaho Sooomaaliyeed

Dhaqanka Soomaalidu ma dhaqan ku dhisan—ama ku salaysan—cadaalad-baa, mise waa dhaqan ku dhisan—oo ku salaysan—cadaalad-darro? Si aynu uga jawaabno su'aashan, waxaa muhiima in aynu sharaxno, oo aynu fahano, cadaaladu waxay tahay. Waa maxay cadaaladdi? Marka aynu su'aashan ka jawaabno, ee aynu fahano micnaha cadaaladda, ayaynu qiimayn ku samayn-karnaa in dhaqanka Soomaalidu uu ku dhisan-yahay cadaalad iyo inuu ku dhisan-yahay cadaalad-darro.

Waxaynu soo qaadanaynaa laba sharaxaadood oo laga bixiyey cadaaladda: diinta Islaamka iyo buugga *Metaphysical Elemenets of Justice*, ee uu qoray filosoofarkii Jarmalka ahaa ee Emmanuel Kant.

Kow, Quraan-ka kelmeda aadka usoo noq-noqota ee ku jirtaa waxaa weey "*Cadal*." Kelmeda *Cadl* waa Carabi, micna-

heeduna luqad ahaan waxaa weeye, "abbaaridda miisaaman," oo micnaheedu yahay in wax walba loo abbaarro si miisaaman. Hadii uu qofku ku dhaqmo "*cadl*," wuxuu qofkaasi noqonayaa qof miisaaman dhinaca xaq-soorka, garashada, akhlaaqda, iyo ruuxda intaba.

Diinta Islaam-ku waxay cadaaladda ku micnaysay: "In si siman loogu xaqsooro noolaha dhamaantii, iyadoo lagu salaynayo masuuliyada qofka saaran. In si siman noolaha loogu qaybiyo masuuliyada iyo fursadaha [nolosha ee] jira si loo helo bulsho ku dhisan, oo sees ay u tahay, horumar iyo xasilooni." Abu Darr (rc) wuxuu Nebiga (cs) kasoo wariyey inuu Illaahay yidhi: "Adoomahaygii-yoow! Waxaan naftayda ka mamnuucay cadaalad-darro; idinkana waxaan idinka mamnuucay cadaalad-darro" (Saxiix Muslim).

Quraanku wuxuu cadaalada geeyey kaalin aad u saraysa. Sidaa awgeed, Quraanku marka uu kaalinta koowaad siisey Tawxiidka, waxaa uu kaalinta labaad siiyey cadaalada. "Illaahay wuxuu idin farayaa cadaalad iyo samafal" (Quran, 16:90). Halkaa waxaa inooga cadaatay micnaha kelmeda cadaalad iyo heerka aadka u sareeya ee ay cadaaladu ka taagantay diinta Isaamka. Waxaa kale oo uu Illaahay inoo sheegay denbiga iyo ciqaabta wayn ee laga dhaxlo cadaalad-darrada. Aayadan ayaa si cad inoogu cadaynaysa heerka aadka u sareeya, iyo muhiimada wayn, ee ay cadaaladu leedahay: "Waxaanu idiinsoo dirnay rasuulo aanu usoo dhiibay fariimo cadaan ah, waxaannannu soo raacinay kutubo iyo cadaymo si aannu cadaalad uga abuurno dadka dhexdooda" (Quran: 57:25).

Laba, Emmanuel Kant wuxuu cadaalada ku micneeyey: "Cadaaladu waa saddex qaybood. Kow, cadaaladu waxay khusaysaa marka uu qof bani'aadam ahi xad-gudub ku sameeyo qof kale, si toosa ama si dadban. Laba, cadaaladu ma khusayso sida uu qofku dareemayo, ama uu ku riyoon-

ayo, ama uu doonayo. Waxyaabahaasi waa waxyaabo qofka bani'aadamka ah gaar u ah, oo xor u yahay, oo xadaysan. Laakiin, cadaaladu waxay khusaysaa qadarinta, ilaalinta, iyo sinnaanta xoriyada uu qofku leeyahay. Saddex, cadaaladu waxay khusaysaa qiimaynta xidhiidhka tooska ah ee dhexmara dadka, iyadoo aan la eegaynin waxa quluubtooda ku jira [waayo taas ma ogaan karno inagu]. Sidaa awgeed, cadaaladu waa qadarinta, ilaalinta, iyo tix-gelinta qofka kale xaqiisa, noloshisa, maalkiisa, maxastiisa, iyo sharaftiisa intaba" (Kant, 1965).

Halkaa waxaa inooga cadaatay in diinta Islaam-ka iyo filosoofarkaas Jarmalka ahiba isku waafaqeen micnaha cadaaladda.

Mar hadii micnaha laysku waafaqay ee cadaaladdu sidaa yahay, bal aynu si qoto-dheer, oo cilmiyeysan, u falanqayno in dhaqanka Soomaalidu ku salaysan-yahay cadalaaddaas Islaam-ka iyo cadaaladdaas dunidda hore-u-martay isku raaceen.

Micnahaas cadaaladda ee aynu kor kusoo sharaxnay wuxuu inoo xaqiijinayaa in uu dhaqanka Soomaalidu aad uga fog-yahay cadaaladda. Waa dhaqan ku salaysan cadaalad-darro, dulmi, iyo eex. Waa dhaqan u hiiliya dilaaga (qofka dadka dila); budhcada (qofka dadka dhaca/booba); ninka hablaha iyo caruurta kufsada; ninka dulmiga sameeya; iwm.

Hadaba inta aannan qodob-qodob u sharixin cadaalad-darrada dhaqanka Soomaalida, waxaa haboon in aan sharaxaad guud, oo kooban, ka bixiyo sababta uu dhaqanka Soomaalidu ugu salaysan-yahay cadaalad-darro.

Cadaalad-darradda Dhaqanka Soomaalida

Waa maxay sababta uu dhaqanka Soomaalidu u noqday mid ku salaysan cadaalad-darro? Si aynu uga jawaabno su'aashan, waxaa muhiim ah in aynu fahano meesha ay kasoo jeedo cadaalad-darradda dhaqanka Soomaalidu.

Soomaalidu waxay ahaayeen—illaa iminkana qayb ka mid-ahi ay tahay—dad xoolo dhaqato ah, oo ku nool miyiga (baadiyaha); iyo qayb yar oo beeralay ah. Soomaalidu wakhtigii ugu dheeraa ee noloshooda waxay ku noolaayeen dhulka miyiga (baadiyaha). Dadkaas miyiga deganaa waxay u kala-deganaayeen—illaa maantana ay u kala degen-yihiin—qabiilooyin kala-duwan. Qabiil waliba wuxuu leeyahay madax-dhaqmeed gaar u ah: suldaan, garaad, maraaq, boqor, isin, iwm.

Madax-dhaqmeedku ma laha awood buuxda oo uu ku fuliyo amarkiisa, sida madaxwaynaha oo kale. Sababtoo ah, madax-dhaqmeedku ma haysto ciidan boolis ama milatari ah oo dadka ku fuliya amarka madax-dhaqmeedka. Nolosha miyiga kamuu jirin maamul guud oo u dhexeeyaa qabiilooyinku.

Dadkaas reer-miyiga ahi waxay ku noolaayeen meel aanay ka jirin dowladi (boolis, militari, maxkamaddo, maamul, iwm). Sidaa awgeed, qabiil waliba wuxuu difaacijiray dadkiisa. Qofka ka dhashay (ama "ka tirsan") qabiil tirro-badani, waa qof haysta difaac—dhinaca naftiisa, maxastiisa, iyo maalkiisaba. Laakiinse, qofka ka dhashay (ama "ka tirsan") qabiil tirro-yari, wuxuu la kulmi jiray cadaalad-darro iyo tacaddi badan oo naftiisa, maxastiisa, iyo maalkiisaba ah. Qabiilooyinka tirrada-badani waxay ku tacaddiyi-jireen qabiilooyinka tirrada-yar. Waxaa laysku maquunin jiray xoog iyo awood.

Waxaa mar walba dhici-jirtay in qabiilooyinkaas gaarka

u kala-degani ay xurgufo (dhibaato) dhex-mari-jirtay. Baresare/abwaan Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye) ayaa si cilmiyeysan, oo qoto-dheer, u sharaxay xurgufihii (dhibaatooyinkii) dhex mari jiray qabiilooyinkaas iyo nidaamkii ay garta u qaadi jireen.

"Kiiska [case] Soomaali dhex mara, dhamaantii marka laysu geeyo," ayuu yidhi Gaariye, "Soomaalidu waxay u qaybin jirtay laba." Waa marka geedka hoostiisa la fadhiisto si loo xallillo (ama looga gar qaado) xurgufo (dhibaato) soo kala dhex-gashay laba qabiil ama laba jilib. Hadaba, si ay xeer-beegtidda garta qaadaysaa u fahanto arinka laysku haysto, waxay samaysteen qorshe ay garta ku qaadan.

Marka ugu horaysa ee garta la gelayo, waxay u kala qaybin jireen siddan: "Waxay odhanayaan," ayuu yidhi Gaariye, "Ma dhur-baa, mise waa dhaqan?'" Ereyga "dhur" micnihiisu waxaa weeye: "dhiig la daadiyey"—oo looga jeedo: Ma qof ayaa la diley, mise qof ayaa la dhaawacay? Ereyga labaad ee "dhaqan" micnihiisu waxaa weeye: wax kasta oo aan ku saabsanayn dhiig la daadiyey.

Hadii arinka laysku haystaa uu yahay "dhur"—qof la diley ama qof la dhaawacay—wuxuu usii kala baxayaa laba qaybood: "Ma qudh-baa, mise waa qoon?" Ereyga "qudh" micnihiisu waxaa weeye: "qof la diley." Ereyga labaad ee "qoon" micnihiisu waxaa weeye: "qof la dhaawacay."

Hadiise arinka laysku hayaa uu yahay "dhaqan," waxay usii kala baxayaan, laba qaybood: "Ma xilaa, mise waa xoolo?" Ereyga "xilo" micnihiisu waxaa weeye: "gabadh la furayo; gabadh la dumaalayo; gabadh la kala qaaday . . . mid doonnan [gabadh nin u doonnan]; iwm."

Hadiise arinka laysku hayaa uu yahay "xoolo," wuxuu usii kala baxayaa, laba qaybood: "Ma bar-baa, mise waa beer." Ereyga "bar" micnihiisu waxaa weeye: xoolo. Ereyga "beer" micnihiisu waxaa weeye: beerta.

Hadii arinka laysku haystaa uu yahay "bar"—xoolo—wuxuu usii kala baxayaa, laba qaybood: "Ma magan-baa, mise waa mooro." Ereyga "magan" micnihiisu waxaa weeye: xoolaha lasoo dhaco; xoolaha baadidda ah; iwm. Ereyga "mooro" micnihiisu waxaa weeye: "xeradda"—oo looga jeedo: xoolo xero ku jira, oo ay wada-leeyihiin dad walaalo ah, ama xiggto ahi. Tusaale ahaan, dad walaalo ah ayaa isku haysta xoolo dhaxal ah.

Marka aad u fiirsato sida cilmiyeysan ee uu Gaariye u sharaxay habka ay garta u geli-jireen Soomaalidu, waxaa kuusoo baxaya in xurgufooyinka dhex mari jiray dadkii reer miyiga ahaa ay ku koobnaayeen: 1) qof la diley ama qof la dhaawacay; 2) dumar la kala qaaday ama gabadh la kufsaday; 3) xoolo la dhacay ama laysku haysto; iyo 4) beer laysku haysto.

Hadaba waxaa is-weydiin leh: marka ay odayaasha xeerbeegtidda ahi garta qaadayaan, si cadaalad ah ma u qaadi jireen garta, mise cadaalad-darro ayay samayn-jireen? Si aynu su'aashan uga jawaabno, aynu afrtaas qodob ee xurgufaddu ka dhalan-jirtay xabad-xabad u sharaxno.

Denbi-wadareed

Dhaqanka Soomaalida, marka uu qofku denbi ama ceeb sameeyo, waxaa denbigaas ama ceebtaas dusha laga saarayaa qoyskiisa iyo qabiilkiisa oo dhan. Danbi/ceeb uu qof kaliyi sameeyey, ayaa waxaa dusha laga saarayaa dad kale oo aan denbigaas shaqo ku lahayn.

Tusaale ahaan, hadii uu nin sameeyo denbi dil ah, oo uu dilo nin kale; ka dibna, uu ka baxsado meeshuu uu ninka ku dilay, waxaa markiiba denbigaas dusha laga saarayaa walaaladii, aabihii, adeerkii, ilmaadeeradii, iyo qabiilkiisa.

Diinteenu waxay inoo sheegtay in aan danbiga uu qof

sameeyo dusha laga saari karin qof kale. "Qofna qof kale danbigiisa ma qaado" (Quran 35:18).

Tusaale labaad, hadii uu nin Soomaali ahi sameeyo arin ceeb ah, ama gabadh Soomaaliyeed ay sameyso arin ceeb ah, waxaa markiiba ceebtaas dusha laga saarayaa qoyskii aama qabiilkii ay dadkaasi ka dhasheen: "Dumarkii reer hebel way xumaadeen;" "Nimankii reer hebel, gob ayay ahaan-jireene, waa maxay dhaqankan ay lasoo baxeen." Waa dulmi cad.

Marka aad deristo dunida horuumartay, waxaad arkaysaa in marka uu qofku dilo qof kale aan danbigaas cid kale dusha laga saarin. Waxaa danbigaas dusha laga saaraa qofka wax dilay oo kaliya.

Hadaba, maadaama ay diinteena iyo dunida horuumartay waxay isku raaceen in aan qofna danbigiisa qof kale dusha laga saarin, dhaqanka Soomaalidu xaguu raacsan yahay? Dhaqanka Soomaalidu kuma dhaqmayo sidii ay diintu ina fartay; lamana socdo dunida horuumartay. Halkaa waxaa inooga cadaatay in dhaqanka Soomaalidu uu si cadaalad-darro ah u qiimeeyo danbiga cida dusha laga saarayo.

Dilka

Denbiga ugu wayn ee uu qof bani'aadam ahi gaystaa waxaa weeye: in uu si badheeh ah (kamma ah) u dilo qof kale oo aan naftiisa, maalkiisa, iyo maxastiisa soo weerarin. Marka kaliya ee ay qofka u banaan-tahay—ee loo ogol-yahay—inuu qof kale dilaa waxaa weeye: marka lasoo weeraro naftiisa, maxastiisa, iyo maalkiisa. Waa waajib inuu qofku is difaacaa. Laakiinse, hadii aan qofka lasoo weerarin, uma banaana inuu qof bani'aadam ah si badheedha u dilo.

Diinteenu sida ay ina farayso, qofka dilka gaysta

ciqaabtiisu waxaa weeye: 1) in la dilo; 2) mag la siiyo reerka qofka laga diley; ama 3) ama ay reerka qofka laga dilay iska saamaxaan. Dhamaan dowladaha aduunka ka jiraa, saddex-daas ciqaabood mid ka mid ah ayay ku fuliyaan qofka dilka gaysta. Laakiinse, dhaqanka Soomaalidu sidaas maaha.

Dhaqanka Soomaalida, marka uu qofka Soomaaliga ahi si badheedh ah (kamma ah) u dilo qof kale, wax ciqaab ah lama marsiiyo qofka dilka gaystay. Waayo? Maxaa sababa in qofka dilka gaysta aan la ciqaabin? Sababtu waxaa weeye: qofka dilka gaysta waxaa markiiba difaacaya qabiilkiisa. Marka uu qofku dilka gaysto, waxaa markiiba la baxsada—oo meel ku qariya—qabiilkiisa uu ka dhashay. Si aad u fahanto, waxaan halkan kusoo ban-dhigayaa sheeko dhab ah oo ku saabsan nin dil gaystay iyo sidii loola dhaqmay.

Waxay ahayd sanadkii 1999. Nin la odhan-jiray Xasan ayaa wuxuu si badheeh ah (kamma ah) u toogtay nin kale oo la odhan-jiray Saleebaan. Markii uu Xasan dilka gaystay, waxaa uu markiiba u tagay niman ay isku qabiil yihiin. Nimankii ay isku qabiilka ahaayeen ayaa markiiba ku taliyey in Xasan laga kaxeeyo meesha uu wax ku dilay, si aan isaga loo dilin.

Isla habeenimaddii ayaa Xasan magaaladii laga saaray oo la geeyey dhulkii ay degenaayeen qabiilkiisu. Waxaa kale oo iyagana la qariyey ragii ugu xigay Xasan—sida, walaal-addii iyo ilmaadeeraddii—si aan loogu aarin ninkaas uu Xasan dilay.

Qabiilkii uu ka dhashay ninkii la dilay—Saleebaan—waxay codsadeen in loosoo qabto Xasan, oo loo dilo. Laakiinse, qabiilkii uu ka dhashay gacan-ku-dhiigle Xasan, arinkaas way ka war-wareegeen; waxaanay reerkii ninka laga dilay ka codsadeen in ay mag bixiyaan, oo aan Xasan la dilin. Laakiinse, reerkii ninka laga dilay way diideen in ay

qaataan magtaas; waxaanay ku adkaysteen in Xasan loo dilo.

Markii uu arinku muddo-dheer socday, ugu danbayntii waxaa reerkii ninka laga dilay—Saleebaan—la ogolaysiiyey in ay magtii qaataan. Reerkii uu ka dhashay gacan-ku-dhiigle Xasan ayaa markiiba bilaabay inay soo urrurriyaan xoolihii magta ahaa. Markii xoolahaas magta ah la urrurrinaayey, waxaa Xasan kusoo hagaayey—oo laga qaaday—xoolo aad u tirro-yar. Xoolaha badankooda waxaa lagasoo urrurriyey—oo bixiyey—qabiilkii uu ka dhashay gacan-ku-dhiigle Xasan.

Muddadaas uu socday wadahadalka labada qabiilo, gacan-ku-dhiigle Xasan waxaa lagu qarinaayey meeshii ay degenayeen qabiilkiisu. Laakiinse, markii magtii la bixiyey, ee ay reerihii heshiiyeen, waxaa dibeda usoo baxay ninkii Xasan ee gacan-ku-dhiiglaha ahaa. Maanta, gacan-ku-dhiigle Xasan wuxuu si xoriyad ah ugu nool yahay magaal-addii uu ninka ku dilay. Wax ciqaab ah oo uu Xasan la kulmayna ma jirto.

Dhacdaddan kor-ku-xusani waa dhacdo mar walba ka dhex-dhacda umada Soomaaliyeed. Hadaba, waxaa muhiim ah in aynu is waydiino: ma cadaalad-baa in lala baxsado qofka wax dila, mise waa cadaalad-darro? Ma cadaalad-baa in reerka qofka laga dilay lagu jujuubo inay mag qaataan, mise waa cadaalad-darro? Ma cadaalad-baa in aan wax ciqaab ah la marinin qofka dilka gaysta? Marka lala baxsado qofkii dilka gaystay; ee la qariyo; ee magta laga bixiyo, waxaa ka dhasha arimo aad u tirro-badan oo khal-khal iyo xasilooni-darro ka dhex abuura bulshadda dhexddeeda.

Kow, cadaalad-darrada ugu wayni waxaa weeye: marka loo hiiliyo qofka gacan-ku-dhiiglaha ah. Diinta Islaam-ka iyo dunida horuu-martayba—gaalo iyo Islaam—waxay ku dhaqmaan in qofka gacan-ku-dhiiglaha ah (qofka si

badheedha wax u dila) la ciqaabo. Laakiin, dhaqanka Soomaalidu waa mid kasoo hor-jeeda diinta suuban ee Islaamka iyo dunida horuu-martay labadaba. Waa dhaqan u hiilinaya gacan-ku-dhiiglaha.

Marka lala baxsado qofka gacan-ku-dhiiglaha ah, waxay kuu cadaynaynaysaa in si badheedha loogu hiilinayo qofkii gacan-ku-dhiiglaha ahaa, ee dulmiga gaystay. Marka loo hiiliyo qofka gacan-ku-dhiiglaha, maxaa ka dhasha?

Laba, cawaaqib xumadda ugu wayn ee ka dhalata in loo hiiliyo qofka gacan-ku-dhiiglaha ahi waxaa weeye: reerkii qofka laga dilay, ee murugaysnaa, ayaa markiiba dareema in xaqoodii la duudsiyey; in si dulmi ku jiro loola dhaqmay; in looga hiiliyey qofkii gacan-ku-dhiiglaha ahaa, iwm. Marka ay reerku arkaan—ee ay u cadaato—dulmigaa badheedhka ah ee lagula kacay, waxay go'aansadaan inay iyaguna aar-goosasho sameeyaan.

Aar-goosadhadana waxaa ka dhasha dil aad u tirro-badan, oo ay dad tirro-badani naftooda ku waayaan. Waxaas oo dhana waxaa ka masuul ahi waxaa weeye: marka lala baxsado, ee loo hiiliyo, qofka gacan-ku-dhiiglaha ah. Laakiin, waxaa is-weydiin leh: sidee ayuu dareemaa qofkii dilka gaystay?

Saddex, qofka dilka gaystay wuxuu dareemaa—oo u cadaata—in danbi kasta oo uu sameeyo aanu wax ciqaab ah mudanaynin. Sababtoo ah, waxaa u cadaanaysa in isagoo gaystay danbigii ugu sareeyey ee uu qof bani'aadam gaysto —inuu qof kale dilo—aanay wax ciqaab ahi ku dhicin. Wuxuu isu aaminayaa inuu yahay qof ka dhashay qabiil awood leh oo laga baqayo; wuxuu aaminayaa inuu dili-karo, ama dhici-karo, ama kufsan-karo cida uu doono; wuxuu aaminayaa in mar walba dulmiga lagu garab-taaganyahay oo loogu hiilinayo, iwm. Marka ay u cadaato inuu dulmi kasta samayn karo, cid ciqaabaysaana aanay jirin, waxaa u

fududaanaysa inuu ku dhaqaaqo dulmi kasta oo niyadiisa kusoo dhaca.

Marka ay bulshadu—waliba dhalinyarta soo koraysaa—aragto dhacdadda noocan ah, cashar noocee ah ayay ka baranayaan?

Afar, dhacdaddani waxay bulshada inteeda kale—waliba dhalinyarta soo koraysa—ku dhiiri-gelinaysaa inay ku dhaqaaqaan dulmi iyo cadaalad-darro kasta; maadaama ay ogyihiin in aanay wax ciqaab ah la kulmi doonin. Bulsho walba jiilkeeda cusubi waxay casharo ka qaataan jiilkii ka horayeeyey. Marka jiilka cusubi arko iyadoo la difaacayo qofkii dulmiga iyo cadaalad-darrada gaystay, waxay aaminayaan in ay iyaguna ku dhaqaaqaan dulmi iyo cadaalad-darro.

Waa cashar fududaynaya inuu dulmigu ku baaho bulshadda dhexdeeda. Waa cashar bulshada baraya in dulmiga iyo cadaalad-darradu ay yihiin wax wanaagsan oo lagu faano. Waa cashar bulshada baraya in qabiil waliba uu difaaco qofkiisa, gar iyo gar-darraba. Marka qabiil waliba uu ku dhaqaaqo u hiilinta iyo difaaca dulmiga iyo cadaalad-darrada, sidee ayay bulshadaasi xasooli iyo horumar ku gaadhaysaa?

Shan, difaaca dulmiga iyo cadaalad-darradu wuxuu bulshada ku dhex abuuraa kala shaki iyo is aaminaad la'aan. Bulshada Soomaalidu waxay ka kooban tahay qabiilooyin kala duwan. Marka qabiil waliba uu difaaco qofkiisa—gar iyo gar-darraba—ma suuro galayso in la helo nabad, horumar, iyo xasilooni waarta. Sababtoo ah, *cadaalad-darro waxay dhashaa cadaalad-darro*. Marka qabiilku dareemo in loola dhaqmay si cadaalad-darro ah—oo xaqoodii la duudsiyey—waxay go'aansadaan in ay xaqooda raadsadaan. Dariiqa ay u maraaan inay xaqooda raadsadaana waxaa weeye dariiq cadaalad-darro ah: *aargoosi*.

Aargoosiga—*"hadaan loo aarin, miyaa loo ooyi?"*

Sida aynu kor kusoo xusnay, marka qofkii dilka iyo dulmiga gaystay lala baxsado, ee loo hiiliyo, ee aan wax ciqaab ah la marsiinin, waxaa ka dhasha *aargoosi*.

Tusaalaheenii hore hadii aynu soo qaadano: Xasan wuxuu dilay Saleebaan. Ka dibna, Xasan waxaa la baxsaday qabiilkiisii. Sidaa awgeed, Xasan wax ciqaab ah lama marrin. Marar badan waxaa dhacda in marka ay reerku magta ogolaadaan, in magtii si fiican loo siin waayo oo lagala aamuso, ama lagala raago. Reerkii marka ay magta soo doontaana, la war-wareejiyo. Reerkii laga dilay Saleebaan waxay dareemayaan cadaalad-darrada lagula dhaqmay.

Hadaba, reerkii uu ka dhashay Saleebaan ee la dulmiyey, si ay xaqoodii usoo dhacsadaan, waxay ku dhaqaaqaan aargoosi. Waxay dilaan ninka ugu xiga Xasan—aabihii, walaalkii, inaadeerkii, adeerkii, nin qabiilkiis ah, iwm. Su'aasha is waydiinta lihi waxaa weeye: waa maxay sababta loo dilayo Xasan aabihii, ama walaalkii, iwm? Maxay gaysteen iyagu? Iyagu cidna may dilin? Miyaanay dulmi ahayn in la dilo qof aan wax danbi ah gaysanin? Haa. Waa dulmi. Waa khalad. Waa gef. Waa caqli xumo. Waa diin la'aan. Aargoosigu waa cadaalad-darro iyo dulmi.

Laakiinse, dhibaatadda oo dhami waxay ka bilaabantay, cadaalad-darradii ay sameeyeen reerkii uu ka dhashay Xasan. Hadii reerka uu ka dhashay Xasan ay soo qaban lahaayeen inankooda wax dilay, oo ay cadaaladda hor keenilahaayeen, aargoosigu muu dhaceen. Taas micnaheedu maaha in aan taageersanahay aargoosiga, xaasha. Laakiinse, waxaan halkan kugu tusayaa in cadaalad-darradu ay dhasho cadaalad-darro.

Dhaqanka Soomaalida waxaa aad uga buuxa dhac-

dooyin aad u tirro-badan oo aargoosi ah; kuwaas oo ka dhashay cadaalad-darrada dhaqanka Soomaalida.

Nin gabayaa ahaa oo reerkooda nin laga dilay, ayaa magtii u doontay reerkii uu ka dhashay ninkii wax dilay. Ayaan-darro'se, reerkii way ka war-wareegeen inay magtii bixiyaan. Markii uu ninkii gabayaaga ahaa arkay sida ay reerku uga war-wareegayaan inay magta bixiyaan, ayuu wuxuu tix gabay ah ku yidhi: "*Noosoo dedaaloo xaqii, daacad nagu siiya; Hadii kalase dib u laabanaye, duuga bal aan dhowro*." Ninkan gabayaaga ahi wuxuu ka cabanayaa cadaalad-darrada ka muuqata reerka uu ninku ka dhashay; waxaanu uga hanjabayaa in hadii magta la siin waayo, ay aargoosi samayn-doonaan.

Aan xuso (soo qaato) sheeko caan ah oo Soomaaliyeed oo ku tusaysa cadaalad-darrada dhaqanka Soomaaliyeed.

Sheekadii qabaalka: sheekadani waxay ka dhacday meel ceel ah oo geel laga waraabinaayey. Nin la odhan-jiray Axmed Samatar (oo lagu naanaysi jiray, "Burgal"), ayaa ceelkii yimi oo geeliisii ka waraabiyey. Markii uu Burgal geelii waraabiyey, ayuu meel ceelka u dhow fadhiistay, si uu ugu nastay.

Isagoo meeshii ku nasanaya, ayaa waxaa u yimi nin ay xigto ahaayeen, oo la odhan-jiray Maxamed Cabdulle Liibaan, oo isaguna ceelka u yimi inuu geeliisa ka waraabiyo. Maxamed muu haysanin qabaalkii geela lagu waraabin jiray; sidaa awgeed, wuxuu Burgal waydiistay inuu amaanaysiiyo qabaalkiisa. Burgal wuu yeelay codsigaas Maxamed, oo qabaalkii ayuu amaanaysiiyey.

Intaa ka dib, Maxamed oo geeliisii waraabinaaya, ayaa waxaa ceelkii yimi nin kale oo la odhan jiray Cumar Aadan Galaydh. Cumar wuxuu ahaa nin aad u kibir badan; sababtoo ah, wuxuu ahaa nin la dhashay dhowr-iyo-toban nin oo gaashaan-qaad ah; aabihiina wuxuu ahaa nin

Illaahay ku manaystay geel aad u tirro-badan (waxaa lagu qiyaasaa inuu geeliisu kor u dhaafay kun).

Taas waxaa kasii daraa, Cumar aabihii—Aadan Galaydh—wuxuu ahaa nin aad u madax-adag, kibir badan, dagaal badan, oo xoolo iyo ragba Illaahay ku maneystay.

Cumar markii uu yimi ceelkii—isagoo geeloodii wada—ayuu wuxuu u yimi Burgal, waxaanu ku yidhi: "Ii keen qabaalkaagii aan geela ku waraabsadee." Burgal wuxuu u tagay Maxamed si uu qabaalkii ugasoo qaado. Laakiin, Maxamed ayaa ugu jawaabay: "Geelii badh-baa iga oomane, ii kaadi aan waraabsado geela inta ii hadhaye."

Burgal ayaa kusoo noqday Cumar oo u sheegay in uu Maxamed weli u baahan-yahay qabaalka. Cumar ayaa intuu canaantay Burgal, mar labaad dib ugu celiyey inuu Maxamed kasoo qaado qabaalka. Laakiinse, Burgal way u suurto-geliwayday inuu qabaalka kasoo qaado Maxamed; sababtoo ah, Maxamed ayaa mar walba ka codsanaayey inuu howsha ku dhamaysto. Markii u danbaysay ayuu Cumar cadhooday, waxaanu Burgal ugu hanjabay hadii uu qabaalka kasoo qaadi-waayo Maxamed, inuu naftiisa khatar gelin-doono. Ogow, Cumar iyo Maxamed waa laba nin oo ilmaadeer ah, oo aad isugu-dhow abtir-siinyo ahaan.

Burgal, oo naftiisa u baqaya, ayaa Maxamed ku noqday, waxaanu u sheegay in uu qabaalka siiyo. Maxamed, oo arinkaas aad uga cadhooday, ayaa qabaalkii kala-jabiyey.

Markii uu Cumar intaa maqlay, ayuu aad u cadhooday; isagoo ficilkaas Maxamed u fahmay in isaga la "xiniinyo-taabanayo." Cumar oo warankiisii sita ayaa soo abbaaray ceelkii uu joogay Maxamed; ka dibna, wuxuu warankii ku dhuftay Maxamed (oo ay xigto ahaayeen). Maxamed halkaas ayuu ku geeriyooday.

Markii warkaasi uu beelihii gaadhay, waxaa markiiba gaddoodday reerkii uu ka dhashay Maxamed. Muruggo,

cadho, dhiilo, iyo wayrax ayaa ku habsaday reerkii uu ka dhashay Maxamed.

Sidii caaddaddu ahayd, waxaa shir isugu-yimi odayaashii iyo beeshii uu ka-dhashay Cumar (oo ah ninka wax diley). Markiiba waxaa lasoo urrurriyey xoolihii magta ahaa ee lagu qaboojin-lahaa reerkii uu ka dhashay Maxamed. Waxaa lasoo urrurriyey 99-neef (sagaal-iyo-sagaashan) oo geel ah. Iyadoo geeli magta loosoo urrurriyey laysu keenay, ayaa waxaa shirkii yimi Aadan Galaydh—oo ahaa Cumar aabihii.

Aadan waxaa loo-sheegay magtii isaga (waa Aadan Galaydhe) kusoo haggaagtay inay noqotay "hal neef oo geel ah" (1-neef oo geel ah). Aadan wuxuu guurtiddii ugu-jawaabay: "Illaahay geel tirro-badan wuu i-siiyey [1000 geel ah]; laakiinse, waxaa doqoniimo ah in hal aan leeyahay—oo ay sumaddii geelaygu ku taalo—ay geel kale ka dhex ollosho." Guurtiddii si kasta way ula-hadleen Aadan Galaydh; laakiinse, Aadan wuu diidey in uu neefkaas geela ah bixiyo.

Cumar ayaa maqlay in uu aabihii diidey inuu hashii bixiyo, si loogu-darro geela magta loo-bixinayo. Sidaa awgeed, Cumar wuxuu u yimi aabihii, wuxuuna ku yidhi: "Aabo magta bixi; oo saddex sababood-ba u bixi: ta koowaad, ninka anigaa diley, oo ma dafirsani; ta labaad, ninka aan dilay waa sokeeye, dhiig sokeeyana lama haysto; ta saddexaad, hadii aad bixin-waydo hashaas, aniga ayaa lay dilayaa." Aadan wuxuu ugu-jawaabay: "Waar inanka, ifka laguma ciiline, ma uurkii hooyaddii ayaa lagu-ciiley." Aadan wuu ka diiday codsigaa inankiisa.

Maarkii muddo kasoo-wareegtay arinkii, ayaa maalintii danbe Aadan wuxuu u yeedhay inankiisii Cumar; waxaanu ku yidhi: "Geelan kaxee, oo waxaad u gaysaa reerkii aan la-xididey ee Doollo yaalay." Cumar geelii ayuu kaxeeyey.

Markii uu meel-dhexe marayo, ayaa waxaa Cumar kusoo-baxay nimankii uu ninka ka-dilay. Nimankii way dileen Cumar; geeliina way ka qaadeen. Waxay u aarayeen inankoodii Maxamed.

Markii Cumar la diley, ayuu aabihii—Aadan Galaydh—u yimi odayaashii reerkiisa. Shir ayaa la-galay. Waxaa la-go'aansaday in reerkii diley Cumar loo-tago, oo lalasoo-hadlo.

Ergadda lasoo-xulay, ee reerka loo-dirayo, waxaa hogaaminayey oday magiciisa la-odhan-jiray Cali Baar-gooye. Reerkii loo-tagey waxay yidhaahdeen: "anagu waxaanu ogol-nahay in aanu iska ilowno inankayagii aad naga-disheen; waxaannannu diyaar-u-nahay in aanu bixino magtii inankiinii aanu diley ee Cumar, oo ah 200-geel ah (laba-boqol oo geel ah).

Ergeddii way ku farxeen warkaas. Waxay kusoo noqdeen deggaankoodii. Shir ayaa la-galey. Ergaddii waxaa la-waydiiyey: "Maxaad wadaan, ee aad lasoo guro-noqoteen?" Cali Baar-gooye (oo ahaa odaygii ergedda watay) ayaa ku jawaabay: "Waxaanu wadno, 'nin waalan iyo in wedkii galey,' ayaa diida." Intaana wuxuu raaciyey warkii wanaagsanaa.

Markii warkii loo sheegay, ayaa waxaa istaagay nin la-odhan-jiray Qoorwaa Jaamac, oo ay Cumar ilmaadeer ahaayeen. Qoorwaa wuxuu yidhi: "Miyaa la helayaa Cumar oo nool?" Ergeddii waxay ugu jawaabeen: "Maya!" Qoorwaa ayaa ugu jawaabay ergadii: "Sidaa aan Cumar loo-helaynin, ayaan nabadna loo-helaynin."

Halkaa markay marayso, waxaa istaagay Aadan Galaydh; waxaanu yidhi: "Qoorwaa, hal-baan leeyahay; ninkaa nacabka ah-na [waa Cali Baar-gooye] hal-baan leeyahay. Qoorwaa-yoow, 'inaadeer go'aankaas haka noqonin.' Ninkaa nacabka ah-na waxaan leeyahay, 'anigu wax-tar kaagama-baahniye, adigu naftaadda wax-tar." Sidaa

awgeed, waa la-diidey nabadii iyo wanaagii ay ergeddu waday.

Dagaal ayaa loo-diyaar-garoobay. Fardihii, hubkii, iyo ragiiba waa lasoo-diyaariyey. Weerrar ayaa la-qaaday. Waxaa lasoo-qabtay afar nin oo walaalo ah, oo ka dhashay reerkii diley Cumar.

Afarta nin ee lasoo-qabtay, waxay habro-wadaag-yihiin (labaddooda hooyo walaalo yihiin) Aadan Galaydh. Aadan wuxuu go'aansaday inuu afarta ninba dilo. Qoorwaa ayaa ku yidhi Aadan: "Waar nimanka ha-wada-dilin dhamaantood. Islaantii habar-yarta kuu ahayd waxaad u reebtaa mid biyaha u dhaamiya; waliba waxaad u reebtaa Cabdi."

Aadan Galaydh ayaa ugu-jawaabay: "Ma intaan Cabdi sii daayo, ayaan Boos-il'laawe dilaa (Boos-il'laawe waa nin il-la'aa)." Aadan wuxuu dilay saddex nin oo walaalo ah; waxaanu sii-daayey Boos-il'laawe.

Intaasi markii ay dhacday, waxaa aad u cadhooday Boos-il'laawe; waxaanu isu-diyaariyey inuu usoo-aaro walaalihii. Wuxuu soo iibsaday faras aad-u-dheereeya; ciidana wuu soo urursadday. Weerrar ayuu soo qaaday Boos-il'laawe, waanu ku guulaystay. Guusha Boos-il'laawe waxaa sabab u ahaa, faraskiisa oo ahaa mid aad u-dheereeya.

Warkii ayaa gaadhay Aadan Galaydh. Aadana wuxuu go'aansadday inuu soo iibsaddo faras aad u dheereeya, si uu u dilo Boos-il'laawe.

Markii uu Aadan soo iibsaday faraskii, ayuu weerrar ku qaaday beeshii Boos-il'laawe. Dagaal aad u qadhaadh ayaa dhex-maray labaddii beelood. Waxaa guulaystay Aadan Galaydh. Laakiinse, Aadan wuxuu raadinaayey inuu dilo Boos-il'laawe.

Aadan ayaa arkay Boos-il'laawe oo sii carrarraya. Ka dib, wuu ka daba-carrarray. Markii uu Aadan oo gaadhay Boos-il'laawe, ayuu Aadan is-yidhi warankii ku dhufo; laakiinse,

markii uu Aadan gacantii uu waranka ku hayey sare-u-qaaday, ayuu faraskiisii mooday shaabuug kusoo socda; ka dibna, faraskii Aadan ayaa hore-u-booday. Hore-u-boodkaas uu farasku sameeyey ayaa bad-baadiyey Boos-il'laawe. Markii uu Boos-il'laawe arkay faraskii uu Aadan watay oo hore-u-booday, ayuu warankiisii dhuunta ka geliyey Aadan Galaydh.

Aadan oo dhaawaca, oo ay naftii kasii-gurmayso, ayay soo gaadheen ragiisii. Waxay ku yidhaahdeen: "Waar Aadan, bal waran." Wuxuu Aadan ugu jawaabay: "Aduun-i-qattal. Markii aan taag-hayeyna tallo-ma-hayn; maanta oo aan tallo-hayanna, taag-ma-hayo." Halkaas ayuu ninkii kibirka badnaa—ee taladdii ergedda diidday ku dhintay.

Nuxurka Sheekadda

Sheekaddani waxay ina tusaysaa cadaalad-darrada dhaqanka Soomaalida. Cumar markii uu kibirka u dilaayey Maxamed, wuxuu ogaa inuu la-dhashay rag tirro-badan oo gar-iyo-gardaraba (xaq-iyo-xaqdaraba) ugu hiilinaya. Hadii uu Cumar ogaan-lahaa in hadii uu wax-dilo, isagana la-dilayo; kumuu deg-degeen inuu dilo Maxamed (Illaahay ayaa inoo sheegay in qisaasta uu inoogu jiro wanaag badani).

Laakiinse, wuxuu Cumar ogaa in ay dhaqanka Soomaalida ka-mid-tahay in qabiilku u hiiliyo qofka ka dhashay xaq iyo xaq-darraba. Hiilkaas xaq-darrada, dulmiga, iyo cadaalad-darradda ku salaysan ayaa Cumar u fuddudeeyey inuu si kamma (badheedh) ah u dilo Maxamed.

Dhinaca kale, Cumar aabihii (Aadan Galaydh) sababta uu u diiday inuu bixiyo "hal neef" oo geel ah (isagoo haysta kun neef oo geel ah), waxaa weeye: wuxuu isku halaynaayey

in qabiilkiisu—iyo ilmaaddeeradii—ay mar walba u hiilinayaan, xaq iyo xaq-darraba.

Markii uu Aadan diidey inuu bixiyo neefkii geela ahaa ee kusoo beegmay, khalad wayn ayuu sameeyey. Laakiinse, markii inankiisii Cumar la-diley—iyadoo loogu-aarayo ninkii uu diley ee Maxamed—markiiba waxaa Aadan u hiiliyey beeshiisii, oo go'aansatay in dagaal lagu-qaado reerkii diley Cumar.

Hadii cadaaladda la illaalinayo, waxaa haboonayd in Aadan ay beeshiisu runta u sheegto, oo ku tidhaahdo: 'Aadan-ow dulmigii iyo cadaalad-darradii aad samaysay ayaa keliftay in Cumar la-dilo. Reerkii uu ninka ka diley ayaana ugu aaray inankoodii uu Cumar diley; sidaa awgeed, iminka xaq uma lihid in aad dagaal ku qaado reerkii Cumar diley.' Ayaan-darro'se, reerkii Aadan sidaa may odhanin. Waxay kusii raaceen dulmigga labaad ee uu samaynayo.

Maadaama uu Aadan yaqaanay dhaqanka Soomaalidana, wuxuu ogaa in wax kasta oo uu sameeyo ay beeshiisu ku gar-gaarayso. Taasina waxay sababtay in dad aad u tirrobaddani ku dintaan caqli-xumiddaas, cadaalad-darraddas, iyo dulmigaas uu ku dhaqaaqay Aadan Galaydh.

Cadaalad-darrada dhaqanka Soomaaliyeed ee ay sheekadani xambaarsantay, waxaa gabay kusoo dhex-darray gabayaagii waynaa ee Ismaaciil Mirre. Gabayga waxaa magiciisa la-yidhaahdaa "*Ragow Kibirka Waa Lagu-kufaa*."

Qaybta gabayga ee ka hadlaysa sheekadan aynu kor-kusoo-sharaxnay, waxay odhanaysaa:

Lixda koos ee Reer Cali-garee,
kow iskaga siiyey;
Kasi-waaye wuxu waa qabaal,
waana kabataane;
Ragow kibirka waa lagu-kufaa,

kaa hala-ogaado.

Dhaca (Boobka)

Sidii aynu hore usoo sheegnay, maadaama uu qofka Soomaaliga ahi ogyahay inuu qabiilkiisu u hiilinayo xaq iyo xaq-darraba (gar iyo gar-darraba), waxaa qofka Soomaaliga ah u fudud inuu ku xad gudbo, oo uu dulmi kula kaco, dadka uu la nool yahay. Wuxuu qofka Soomaaliga ahi ogyahay in aan wax ciqaab ahi soo gaadhaynin hadii uu wax dilo, wax dhaco, ama uu wax kufsado. Sidaa awgeed, waxaa dhaqanka Soomaaliga caado u ah dhaca (boobka).

Soomaalida badankoodu waxay ahaan-jireen (illaa iminkana qayb ka mid ahi ay yihiin) dad xoolo dhaqato ah. Xoolahaas ay Soomaalidu dhaqatana waxaa ugu qiimo badan geela. Hadaba, waxaa dhaqanka Soomaalida caado u ah in geela la kala dhaco. Ninka geela dhacaana wuxuu ahaa nin la amaano oo sharaf leh. Wuxuu ahaa nin geesi ah; nin sharaf leh; nin raganimo leh; nin "libaax ah;" nin garasho leh; wuxuu ahaa nin la majiirto; wuxuu ahaa nin lagu faano. U fiirso, waxaa lagu amaanayaa inuu umad kale xoolahooda soo dhacay. Dhaqanka Soomaalida, ceeb may ahayn—ilaa iminkana ma'aha—inuu ninku dhaco xoolaha ummadda.

Hadii aad u fiirsato gabayadii Soomaalida, waxaad arkaysaa in dhaqanka Soomaalidu uu boobka iyo dhaca u yaqaahan faan iyo amaan. Tusalaa ahaan, gabayaagii la odhan-jiray Jaamac Faarax Aadan, ayaa gabay ku tilmaamaya in dhicitaanku uu yahay "xalaal." Gabayaagani geel ayuu dhacay. Gabaygana wuxuu ku muujinayaa in dhicitaanku uu yahay xalaal. Wuxuu yidhi:

Wadaadkii Xadeed iyo fadhiyey,

xarun Daraawiisha;
Ee Xodayo gayn jiray intuu,
xamar u heenseeyo;
Xaafidal-Quraan-buu ahaa,
soo xajiyey dhowre;
Isagaba xaq-iyo-baadil waw,
kala xarriiqnaaye;
Xaaraan haduu yahay fardaha,
kuma xabaadheene;
Anna way xalaal Xaawis iyo,
xagalo awr-yaale.

Gabayaagii kale ee caanka ahaa ee la odhan-jiray Cali Dhuux, ayaa geel kasoo dhacay niman wadaado (culimo) ah. Ka dib, reerkiisii ayaa ku canaantay geelaas uu kasoo dhacay culimada (reerku kumay canaanan geela uu soo dhacay; laakiin, waxay ku canaanteen inuu kasoo dhacay culimo diinta fidinaysa). Isagoo canaantaas iska difaacaya, ayuu Cali Dhuux yidhi:

Sayidkii wadaad oo dhan xidhay,
Weris xalaaleeye;
Xaraan haduu yahay maqdaca,
Xula ma qaadeene;
Xoolaha kaleetiyo isagu,
waaba kala xeere;
Nin kastoo xadreeyaaba wuu,
u xusul duubtaaye;
Hadaan xaajiyaddu weerarayn,
xur uma duuleene.

Wakhtigii miyiga la joogay waxaa la-kala-dhici-jiray geela. Laakiinse, markii magaalada lasoo galay, maadaama

aan magaalada lagu dhaqanin geel, waxaa meeshii geelu ku jiray lagu bedelay dowladii. Sidaa awgeed, miyiga waxaa lagu faani jiray dhicitaanka geela; magaaladana waxaa lagu faanaa dhicitaanka dowlada—xatooyadda xoolaha dadwaynaha (qodobkan dib ayaan ugusoo noqonayaa sharaxaadiisa). Maxaa dhici-jiray marka geela lasoo dhacayo? Ama dariiq noocee ah ayaa loo mari-jiray marka geela lasoo dhacayo?

Dhaqanka Soomaalida, marka geela la dhacaayo, waxaa is raaci jiray dhowr nin oo shufto ah, oo ilmaadeera. Ama nin kaliya ayaa soo dhici jiray. Marrarka qaarkood, nimankaas geela dhacayaa waxay dili-jireen raga ay geela kasoo dhacayaan. Marrarka qaarkoodna, dhiig kumuu daadan jirin. Markay geela soo dhacaan, waxay geelaas keeni-jireen degaankooda. Inta aan geela la kala qaybsanin, waxaa loo yeedhi-jiray "sheekha" ama "wadaadka" reerka. Waa maxay sababta loogu yeedhayo "sheekha?"

Sababtu waxay ahayd: maadaama uu geelu yahay geel lasoo dhacay oo xaaraan ah (booli ah), waxaa "sheekha" laga codsan-jiray inuu geela "xalaaleeyo." "Sheekhu" wuxuu geela ku akhriyi-jiray "aayaddo Quraan" ah oo geela lagu xalaalaynayo. Aayadahaas Quraan-ka ah ee geela lagu xalaalaynayo, waxaa loo-yaqaanay: "Booli Reeb."

Ereyga "booli" micnihiisu waxaa weeye "xaaraan;" erayga labaadna waxaa weeye "reeb," oo micnihiisu yahay in geela laga reebo xaaraanta; oo xalaal laga dhigo. Ereyga "booli" waxaa micnihiisa ku tusaaya, odhaahda Soomaaliyeed ee tidhaahda: "*Hal booli-yi, nirig xalaala ma dhasho*."

Marka "sheekhu" geelaas "xalaaleeyo," waxaa "sheekha" la siin-jiray dhowr neef oo geela. Qofka labaad ee geela qayb laga siin-jirayna wuxuu ahaa gabayaaga reerka. Waayo? Gabayaaga reerku wuxuu ahaan-jiray afka reerka—BBC-da

reerka. Marka ay geela soo dhacaan, ee lasiiyo dhowr neef oo geela, wuxuu tirin-jiray gabay faan iyo amaan ah, oo uu ku amaanayo in reerkoodu geel soo dhaceen. Ka dib, nimankii geela soo dhacay ayaa geela intiisii kale kala-qaybsan jirtay.

Taasi waxay inoo cadaysay in dhaca iyo boobku uu ahaa dhaqan Soomaaliyeed oo lagu faano. Soomaalidu waxay aaminsanaayeen in geelu uu ummadda oo dhan ka dhex-eeyo. Waa sheeko been-abuur ah oo ay samaysteen si ay u xalaalaystaan dhicitaanka geela.

Markii magaalada lasoo-degay, ee dowlad la samaystay, ummaddii magaalada usoo guurtay may haysanin geel ay dhaqdaan. Sidaa awgeed, dhaqankii dhicitaanka ee Soomaalida, waxaa loo wareejiyey dowladii. Dowladii ayaa waxaa la geliyey meeshii uu geelu ugu jiray Soomaalida.

Taas waxaa kuu cadaynaya, heesihii Soomaaliyeed ee la sameeyey markii dowladnimadu dhalatay: "*Magowdoo candhadii gollaha marisee, aan maalo HASHEENA Maandeeq*." Micnaha heestani waxaa weeye: hashii waataa irmaanataye, aynu maalo. Waxaa looga jeeda, dowladii waa-taas dhalataye, aynu dhaqano sidii geelii. Dowladnimadii ayaa loo bixiyey "hasheena Maandeeq." Waxaa laga yaabaa in aanu abwaanka heesta sameeyey sidaa u jeedin. Laakiin, waxaad heesta ka arkaysaa in abwaanka sameeyey uu geela u yaqaanay wax la wada leeyahay.

Markii dowladnimadii loo arkay inay tahay sidii geelii, ayaa waxaa bilaabmay in la boobo xoolihii ummadda masaakiinta ah. Maadaama dhaca iyo boobku uu ka mid yahay dhaqanka Soomaalida, oo uu yahay wax lagu faano, siyaasiyiintiina waxay bilaabeen inay ummadda xoolahoodii boobaan.

Marka uu ninka siyaasiga ahi boobo xoolaha ummadda, waa nin la amaano—waa nin raganimo leh; waa nin iska

dhiciya khayrkii; waa nin guryo badan ka dhistay; waa nin dukaamo samaystay; waa nin geesiya, iwm. U fiirso, waxaa lagu amaanayaa inuu boobay xoolihii ummadda masaakinta ah. Xataa kuwa ku ammaanaya ayuu xoolohoodii dhacay.

Ninka xil dowladeed qabta, marka xilka laga eryo, waxay dadku waydiiyaan: "maxaad kasoo qabsatay intii aad xilka haysay?" oo micnaheedu yahay, "xoolo intee leeg ayaad soo boobtay?" Ninka la arko in aanu xoolo badan soo boobin, dadkeenu waxay u yaqaanan nacas; nin liita; nin karti daran; nin aan waxba qabsan sarin; iwm. U fiirso, waxaa lagu maagayaa maxaad xoolaha ummadda u dhici wayday. Xataa kuwa maagaya ayaa waxay ku maagayaan, "maxaad xoolahayaga u dhici wayday?" Siyaasigu wuxuu la mid noqday ninkii reer miyiga ahaa ee geela boobi jiray.

Boobka iyo dhacu kuma eka dowlada oo kaliya. Marka uu qofka Soomaaliga ahi dhaco ama boobo qof kale oo shacab ah, waxaa caado ah in ninka wax boobay ay reerkoodu ka bixiyaan lacagtaas ama xoolahaas uu boobay. Tusaale ahaan: hadii uu nin boobo ama dhaco nin kale. Waxaa isu yimaada laba qabiil ee ay ka kala dhasheen labada nin. Ninka xoolaha dhacay waxaa markiiba difaaca reerka uu ka dhashay. Ma ogola in la ciqaabo. Markiiba waxay go'aansadaan in ay bixiyaan xoolahaas uu boobay ninkaasi. Xoolahaasna waxaa lagasoo urruriyaa nin walba oo ka mid ah qabiilkaas. Taasina waxay fududaysay in uu boobka iyo dhacu noqdo wax dhaqanka ka mid ah. "*Waa maan gurracan, iyo garasho jaan*."

Waynu ognahay halka ay diinteenu ka taagan-tahay dhaca iyo boobka. Dunida horuu-martayna way ciqaabtaa qofka dhaca dawdlada iyo dadka xoolahooda. Dhaqanka Soomaalidu diintiina wuu kasoo hor-jeestay; dunidii horuu-martayna wuu ka hadhay.

Kufsiga

Kufsiggu wuxuu ka mid-yahay danbiyadda ugu waa-weyn ee uu qofka bani'aadamka ahi sameeyo. Kufsiggu wuxuu si walba u dhaawacaa qofka la-kufsadday. Wuxuu dhaawacaa qofka dadnimaddiisa, jidhkiisa, ruuxdiisa, maankiisa, miyirkiisa, sharaftiisa, iwm. Dhakhaatiirta cilmi-nafsiggu (psychologists/psychiatrists), ee daweeya dadka la-kufsadday, waxay cilmi-baadhis ku ogaadeen dhaawaca ku dhaca qofka la kufsadday.

Buugga *Working with the Trauma of Rape and Sexual Violence: A Guide for Professionals* ee uu qoray Sue J. Daniels ayaa cilmi-baadhis ka diyaariyey dhaawaca uu kufsigu gaadhsiiyo qofka la kufsaday.

> Kufsiggu wuxuu dumiyaa shaqsiyadda qofka; wuxuu dhawacaa ruuxda qofka; wuxuu qofka u keenaa hurdo-la'aan, cabsi joogto ah, wel-wel, iyo walbahaar; wuxuu keenaa cuduradda dhimirka; wuxuu keenaa xanuunadda laysku qaadsiiyo galmadda (hadii qofka kufsigga gaystay uu xanuun qabay); wuxuu sababaa qofka oo is-dila; wuxuu keenaa dhaawac jidhka ah; iwm. Kufsiggu dhaawaca uu qofka u gaystaa, maaha mid lasoo-koobi-karo.

Hadaba, waxaa is-weydiin leh: qofka dulmanaha ah (ee waxaas oo dhaawac ah loo-gaystay, ee naftiisii la-baa'biiyey), dhaqanka Soomaalidu ma u cadaalad-falaa? Qofka'se wax kufsadday ma ciqaabaa? Jawaabta labadaas su'aalood-ba waa: MAYA! Dhaqanka Soomaalidu uma cadaalad-falo qofka la-kufsaddo; mana ciqaabo qofka wax kufsadday. Mid-walba aan sharaxaad kooban ka bixiyo.

Dadka la-kufsaddo waxaan u-kala-qaadayaa laba

qaybood: 1) gabadh; iyo 2) ilme-caruur ah. Waayo? Waa maxay sababta aan u-kala-qaaday labadaas qof ee la-kufsadday? Sababtu waxa weeye: gabadha iyo ilmaha-caruurta ah ee la-kufsado, laba dariiqo oo kala-duwan ayuu ku xallillaa dhaqanka Soomaalidu.

Gabadha (innanta) la-kufsaddo: marka gabadh la-kufsaddo, waxaa la-raadiyaa ninkii wax-kufsadday. Hadii ay gabadha la-kufsadday garanayso ninka kufsadday, waxaa la-raadiyaa reerkii uu ninku ka-dhashay. Waxaa shir isugu-yimaadda odayaasha labada-qoys ee kasoo-kala-jeedda gabadha iyo ninka. Marka uu ninku qirto inuu gabadha kufsadday, waxaa ninka lagu-xukumaa inuu gabadhaas uu kufsadday "guursaddo." Gabadhii la-dulmiyey, ee sharafteeddii, dadnimaddeeddii, magaceeddii, iyo jidh-keediiba lagu xad-gudbay, ayaa waxaa lagu-amrayaa inay oori (xaas) u-noqoto ninkii baa'biiyey.

Dhinaca kale, odayaasha u-hiilinaya ninka wax kufsaday, waxay lacag siiyaan odayaashii "u-hadlaayey" innanta la-kufsaday. Lacagtaas waxaa qaata odayaasha kasoo-jeedda dhinaca innanta iyo reerka innanta. Lacagtaas waxaa loo yaqaan *xaal*. Innanta la-kufsadday (ee dulmanaha ahi) lacagtaas waxba kama-aragto; lacagta waxba lagama-siiyo. Odayaashaas ayaa mashruuc ka-dhigtay in hablaha la-kufsaddo ay irsaaqad ka-raadiyaan. Waa rag waaweyn oo aan diin, dadnimo, aqoon, damiir, garasho, cilmi, iyo imaan midna lagu ogayn. Waa halkii ugu-saraysay dulmigga iyo cadaalad-darrada.

Waxaa'se is-weydiin muddan: waa maxay sababta innanta loogu guurinayo ninkii kufsadday?

Sababtu waxaa weeye: marka innanta la-kufsaddo, bulshaddu waxay innanta ka dhigtaa qof danbiile ah. Innantii lagu xad gudbay ee la-kufsaday ayaa danbiile laga dhigayaa. Dhaqanka Soomaalida, innanta la-kufsaddo

lama-guursaddo; qiimheeddu hoos ayuu u-dhacaa; waa la-caayaa; waa la-ceebeeyaa; waa lagu-dhego-hadlaa; waana la-faquuqaa.

Maadaama innantii ay bulshaddu faquuqday (nin guursanayaana aanu-jirin), maxaa xal-ah? Waxaa xal ah in innanta loo-guuriyo ninkii kufsadday, si aanay innantu ugu dhicin guur-la'aan, ceeb, iyo mustaqbal-la'aani. Dhaqanka Soomaalida ee ciqaabaya qofkii la dulmiyey, ayaa sababay in innantaas la-dulmiyey loo-guuriyo ninkii ku xad-gudbey ee noloshiiddii baa'biiyey.

Markii arinkan cadaalad-darradda iyo dulmiga ahi uu ka-mid-noqday dhaqanka Soomaalida, waxay Soomaalidu u samaysatay maah-maah. Maah-maahdaasina waxay si cadaan ah kuu tusaysaa in bulshadu isku-raacday dulmigga intaas leeg. Maah-maahdu waxay tidhaahdaa: "*Quruxdeeda wax-u-dhime, qaddaadkuu u ritaa*!" Micnaha maah-maahdani waxaa weeye: ninka innanta dhaawaca (ama ha-kufsado ama dhaawac ha-gaadhsiiyo), isaga ayuunbaa guursanaya.

Arinkani wuxuu dhiiri-gelinayaa—oo fududdaynayaa—kufsigga. Wuxuu dhalinyarta u sheegayaa in hadii ay gabadh kufsadaan aan wax ciqaab ah la-marsiinaynin. Ciqaabta ugu-weyn ee la-marsiinayaa ay noqonayso inay guursadaan gabadhaas ay kufsadeen. Taasi waxay keenaysaa in uu nin waliba kufsado gabadha uu ka hello, laakiin uu og-yahay in aanu si kale u heli-karin. Hadii aan si kale u dhigo: hadii uu ninku arko gabadh uu aad uga helay, laakiinse uu og-yahay in aanu heli-karin, dariiqa ugu-fudud ee uu ku heli-karo gabadhaasi waxaa weeye: inuu kufsado. Dariiqaasi waaa dariiqa cadaalad-darrada iyo dulmigga ah ee lagu-xallillo kufsigga dumarka.

Ninka gabadh (innan) kufsadda: dhaqanka Soomaalida, ninka gabadh kufsadda, wax ciqaab ah oo la-mariyaa majirto. Ninka gabadh kufsadda, lama-dillo; laguma-xukumo

xabsi-daa'im; lama-ceebeeyo; lama-caayo; iwm. Hadaba, marka ninka wax-kufsadda aan wax ciqaab-ah la-marinin, saw dhiiri-galin-mayso inuu kufsiggu sii-bato ama sii-kordho? Saw dhalinyartu kuma-dhiiranayso inay wax-kufsaddaan, maadaama aanay ka-baqaynin wax ciqaab ah? Bal iminkana aynu eegno, dariiqa lagu-xallilo kufsigga caruurta.

Ilmaha-yar ee la-kufsaddo: marka la-xallilaayo kufsigga loo-gaysto caruurta yar-yar (wiil ama gabadh), waxaa loo-maraa dariiq ka-duwan dariiqa loo-maro kufsigga gabadha qaan-gaadhka ah. Dariiqa lagu-xallilo kufsigga caruurtu waxaa weeye: in la-qariyo. Waayo? Waa maxay sababta loo-qarinayo ilmaha-yar ee la-kufsadday?

Sababta loo-qarinayaa waxaa weeye: hadii bulshaddu ogaato in ilmaha yar la-kufsadday, ilmahaas yari wuxuu noqonayaa ilmo yar oo ceebaysan. Bulshadda ayaa caayeysa; bulshadda ayaa takooraysa; way dhaleecaynayaan; sharafta ilmaha yar ayaa lagu-tumanayaa; iwm. Ilmaha-yari wuxuu noqonayaa ilmo yar oo aan bulshadda ku dhex-noolaan karin. Weliba, haddii uu ilmahaas yari yahay wiil, wuxuu noqonayaa mid ay bulshaddu ku sheekaysato oo la-caayo.

Hadaba, si ilmaha yar looga bad-baadiyo dhaawaca takooridda ah ee bulshadda kasoo-gaadhaya, waa in la-qariyaa kufsigga loo-gaystay. Cid ka hadli-kartaa ma-jirto. Warkaasi wuxuu ku ekaanayaa oo keliya reerkii uu dhibku soo-gaadhay.

In cadaalad-darradaasi timaato, waxaa sababay markii ay Soomaalidu isku khalday labadan arimood: *ceeb* iyo *danbi*. Maxay ku kala duwan-yihiin? Ceebtu waxaa weeye, khaladka uu qofku naftiisa ka galo isagoo aan qof kale dhibaato u gaysan. Tusaale: marka uu qofku khamri cabo, wuxuu sameeyey khalad aad u wayn, xaga Illaahayna danbi ayuu ka galay. Tusaale labaad: hadii aad aragto wiil iyo

gabadh wax khaldan samaynaya, labadaas qof waxay samaynayaan waa khalad, xaga Illaahayna waxay ka galeen danbi. Laakiin, qof kale waxba kumay samaynin.

Hadaba dadkaas khaladaadka naftooda ka galay (Illaahayna danbiga ka galay), waxaa waajib ah in aad ceebtooda asturto oo aanad cid kale u sheegin. Marka uu Illaahay ina farayo in aynu dadka ceebahooda asturno si uu Illaahay ceebteena u asturo, arimahaas ayuu Illaahay ka hadlayaa. Laakiinse, danbigu wuu ka duwan-yahay ceebta.

Marka uu kufsigu dhaco, waa danbi—ma'aha "ceeb," sida ay Soomaalidu sheegto. Ninka wax kufasadaa waa nin ku xad-gudbay qof kale oo bani'aadam ah. Sidaa awgeed, waxa uu sameeyey danbi. Hadaba, dhaqanka Soomaalidu kufsigii ayuu ka dhigay inuu yahay "ceeb." Marka kufsigu dhaco, Soomaalidu waxay yidhaahdaan: "waa ceebe hala asturo." Waa kelmed aad u khaldan? Ma'aha ceeb; waa danbi. Danbiguna wuxu leeyahay ciqaab. Markii kufsigii "danbiga" ahaa laga dhigay "ceeb," ayaa kufsigii waxaa loola dhacmay inuu yahay "ceeb." Ceebtuna ciqaab malaha. Sow ma aragtid sida cadaalad-darrada ah ee uu dhaqanka Soomaalidu ugu hiilinayo qofkii danbiilaha ahaa?

Waxaa laga-yaabaa in dadka qaarkood ay is-diidsiiyaan, ama ay dafiraan, in caruur lagu-kufsaddo Soomaaliya. Dadka is-diidsiinaya, ama dafirayaa, lama-yaabayo. Sababtoo ah, waa dad lagusoo-koriyey in arimaha noocan oo kale ah la-qariyo oo aan laga-hadlin. Waxay u yaqaanaan wax "ceeb" ah oo aan laga-hadli-karin. Dafiraada iyo is-diidsiinta noocan ahina waa waxa kalifay in kufsigga caruurtu kor usii kaco, ama uu sii bato. Xaqiiqda jirta ee aan marna layska indho-tirri-karini waxaa weeye: in caruurta—hablo iyo inamo—lagu-kufsaddo Soomaaliya.

Hadii aad u-baahantay inaad soo xaqiijiyo kufsigga lagu-hayo caruurta Soomaaliya ku-nool, waxaad soo booqataa

dhakhtarka wayn ee magaaladdaadda. Waa waajib ku saaran inaad soo eegtaa. Waxaad soo baadhaa tirradda caruurta yar-yar ee la-kufsadday sanadkii ina-dhaafay.

Waxaa xaqiiq ah—oo aan hubaa—in tirradda caruurta la kufsadday ay aad u tirro badan-yihiin. Laakiinse, waa arin la-qariyo, oo aanay bulshaddu ogolayn in laga-hadlo; khaasatan, reerka uu ka-dhashay ilmaha yar ee la-kufsadday.

Diinteena Islaamku ciqaab aad u saraysa ayay marsiisa ninka wax kufsada. Ciqaabahaas waxaa ka mida in la-dilo ama lug iyo gacan la gooyo. Dunida horuumartayna, ciqaab aad u adag ayay iyaguna mariyaan ninka wax kufsada. Wadamada qaarkood, waxaa lagu xukumaa xabsi daa'in; wadama qaarkoodna waxaa lagu xukumaa xadhiga aad u dheer. Taas waxaa kasii daran, marka ninku uu jeelka soo dhamaysto, waxaa la galiyaa nolol aad u cidhiidhiya oo aanay u suurto-galin inuu nolol fiican helo. Ragaas wax kufsaday markay noloshu ku adkaato, qaar badan ayaa is dila, oo nafta iska jara.

Sanadkan 2020, wadanka Maraykan-ka waxaa gobolo badan laga abaabulayaa in la hirgeliyo sharci odhanaya: "ninka laba jeer wax kufsada, waa in la dhufaanaa." Sida loo dhufaanayaa waxaa weeye: irbad ayaa lagu mudayaa. Irbadaasi waxay ka kaxaynaysaa, ama ka dilaysaa, hamadii ninnimo. Waxay ka dilaysaa baahidii uu u qaadi lahaa dumarka. Sababta sharcigan adag loo hirgelinayaa waxaa weeye in aanay ragu dib danbe wax u kufsanin.

Bal waxaad is bar-bar dhigtaa diinteena Islaamka iyo dunida horuumartay siday ninka wax kufsada u ciqaabaan si hablaha loo bad-baadiyo iyo dhaqanka Soomaalidu sida uu ugu hiilinayo ninkii wax kufsaday.

Ninka caruurta (ilmaha-yar) kufsadda: sida aan kor-kusoo-xusay, caruurta la-kufsaddo waa la-qariyaa (dhakhaatiirta

soo booqo si aad u ogaato). Mar hadii caruurtaas la qarinayanna, waxaa iyana khasab ah in la qariyo raggii caruurtaas kufsadday. Hadii la-sheego, oo la-ashtakeeyo, ragga caruurta kufsadday, waxaa la-ogaanayaa caruurta la-kufsadday kuwa ay yihiin; taasna waalidku kama raali-aha. Sidaa awgeed, raggii caruurta kufsadday wax ciqaab ah oo la-mariyaa ma jirto—waa rag xor ah; waa rag suuqa kula-lugaynaya oo iyagoo caruur (inamo iyo hablaba) kufsadday, aan cidina ciqaabin. Taasina waxay fuddudaysay kufsigga loo-gaysto caruurta. Ragga caruurta kufsaddaa waxay og-yihiin in marka ay ilma yar kufsaddaan, aanay cidina ciqaabaynin. Waayo? Waalidiinta iyo qoyska uu ka-dhashay ilmaha-yar ee la-kufsadday ma sheegayaan in ilmahooddii la-kufsadday. Markaa kufsigga caruurtu, waa kufsigga ugu fuddud, uguna tirradda-badan, ee maalin-walba ka-dhaca dhulka Soomaalidda.

Marka aad bulshadda Soomaalidda kala-hadasho kufsigga caruurta lagu-hayo, badan-koodu waxay ku odhanayaan: "Waar waxaasi waa ceebe, yaan lasoo hadal-qaadin?" "Waar waxaas halkeed ka-keenteen?" "Waar waxaas waxba kama-jiraan?" "Waar waxaasi wax lagu-hadlo maahee, xishoodda, oo waxaas yaan laydinka maqlin? iwm. Dadka siddan u-hadlaa waxay isugu-jiraan dhowr nooc.

Kow, dadka qaarkood waa dad aan ogayn in kufsigga caruurtu aad u tirro-badan-yahay.

Laba, dadka qaarkood-na, way og-yihiin dhibka jira; laakiin, waa dad doonaya in aan arinkan la-fur-furin oo aan la-ogaanin caruurta la-kufsaddaa cida ay yihiin si loo bad-baadiyo sharafta iyo karaamadda caruurtaas.

Saddex, dadka saddexaad waa dadka caruurta kufsadda. Dadkan markaad arinkan kala-hadasho, markiiba waxay bilaabayaan inay cadhoodaan, oo ay beeniyaan in caruur la-kufsaddo. Waxay ku odhanayaan: "Bal waxaad ku

hadlaysaan eega? Inagu dad dhaqan-iyo-diin-leh ayaynu nahay, waxaasina inagma suurto-galaan. Illaahay ka yaaba oo waxaas oo kale mar-danbe haku-hadlina." Waa dad doonaya in aan danbiga ay galeen dibedda lasoo-dhiggin. Mar hadii danbigoodi la qariyeyna, waxaa u fududdaanaya kufsigii ay ku hayeen inamada iyo hablaha yar-yar.

Afar, waa dad caruurtooddii la-kufsadday oo aan doonaynin in arimahaas lasoo fur-furo si ay u difaacaan sharafta iyo karaamadda caruurta. Dadka caruurta laga-kufsadday, si degen ayay kuula hadlayaan, waxaanay isku-deyayaaan in ay si deggen u beeniyaan in caruurta la-kufsaddo.

Iskusoo wada-duub, arimahaas oo dhami waxay fududeeyaan in kufsigga caruurtu uu noqdo mid aad u fuddud.

Dhaqanka Soomaaliddu wuxuu difaacaa, taageeraa, oo kobciyaa wax kasta oo dulmi ku-salaysan. Wuxuu taageeraa gacan-ku-dhiig-laha; tuugga; qofka wax booba; qofka wax kufsadda, iwm. Dhaqanka noocan ah ee Soomaaliddu, bulsho noocee ah ayuu bar-baarinayaa?

Bulshadu waxay noqonaysaa bulsho aan is aaminsanayn oo kala shakisan. Waxay noqonaysaa bulsho aanay waxba ka dhaxaynin. Sababtoo ah, waxa ugu horeeya ee umadda isusoo dhaweeya, ee mideeyaa, waa cadaalad. Cadaalad-darradu waa waxa ugu wayn ee Soomaalida u horseeday dib-u-dhaca dhinac walba ah; hadii ay noqoto: xasilooni, wax-soo-saar, wax-barasho, caafimaad, nadaafad, dhismo, iwm.

Maxaa Laga-dhaxlay Cadaalad-Darradda?

Cadaalad-darrada dhaqanka Soomaalidda—ee aynu kor-kusoo-xusnay—maxaa laga-dhaxlay? Khasaaraha iyo dhabar-jabka laga-dhaxlay cadaalad-darrada dhaqanka

Soomaalidda waxaynu u kala-qaadaynaa laba-qaybood. Kow, qaybi waxaa weeye dadka wadanka guddihiisa ku-nool iyo khasaaraha ay ka dhaxleen cadaalad-darrada dhaqanka Soomaalidda. Laba, qaybta kalena waxaa weeye dadka ku-nool wadanka dibediisu (dadka qurbaha ku nool) khasaaraha ay ka dhaxleen cadaalad-darrada dhaqanka Soomaalidda.

Wadanka gudihiisa: dadka wadanka ku-nooli khasaaraha ay ka-dhaxleen cadaalad-darradda dhaqanka Soomaaliddu ma'aha mid aynu halan kusoo-koobi-karno. Khasaarahaas waxaan si-kooban uga-xusayaa kuwa ugu waa-weyn.

Kow, cadaalad-darradda dhaqanka Soomaalidda waxaa ugu-weyn ee laga-dhaxlay waxaa weeye: is aaminaad la'aan. Ummadda Soomaaliddu isma aaminaan. Dadku sida ay u badan yihiin, qof waliba waxa kaliya ee uu aaminsan-yahay waa qabiilkiisa. Sababtoo ah, wuxuu aaminsan-yahay in cida kaliya ee uu cadaalad ka helayaa ay tahay qabiilkiisa (khaasatan jifadiisa hoose). Waa xaqiiqo jirta. Aaminaad la'aantaasi waxay keentay in xaafaddaha ku yaala magaalooyinka waa-weyn ee Soomaaliya iyo Soomaaliland, ay dadku u kala-degaan qabiilooyin. Xaafaddaha ku yaala magaalooyinka Muqdisho, Hargaysa, Qardho, Jabuuti, Jigjiga, iwm., waxaa loo kala-degen-yahay qabiilooyin kala-duwan. Xisbiyadda siyaasadda ee Soomaaliddu waxay ku-salaysan-yihiin qabiilooyin. Dowladdaha Soomaalidda waxaa loo kala-qaybsadaa qabiilooyin; waxaa tusaale cadaan ah kuugu-filan 5.4-ka lagu kala-qaybsaddo dowladda Soomaaliya; iyo xisbiyada siyaasiga ah ee ka jira Soomaaliland.

Sababta ugu-wayn ee ay dadka Soomaalidda ahi isu aamini-waayeena waxaa weeye: dhaqankeena ayaa ku-salaysan calaalad-darro. Is aaminaad-la'aantaas maxaa ka dhashay?

Laba, is aaminaad-la'aantaas waxaa ka-dhashay qarran la'aan. Seeska iyo sal-dhigga qaranku waxaa weeye bulsho is aaminsan. Bulsho aan is aaminsanayni ma dhisan karto qaran—suurto-gal maaha, weligeedna aduunka kamay-dhicin. Bulshaddu iyadoo ah kala fikir, kala-diin, kala-dhaqan, iyo kala-luqad way dhisan-karaan qarran; hadii ay is aaminsan-yihiin; ama ay ku dedaalayaan inay cadaalada horuumariyaan. Waxa ugu wayn ee bulshadda ku abuura in aanay is aaminnina waxaa weeye cadaalad-darrada.

Maadaama dhaqanka Soomaalidduna—sida aynu kor-kusoo-xusnay—uu ku salaysan-yahay cadaalad-darro, Soomaaliddu ma helayso, mana arkayso, qarran u dhisan. Maxaa laga dhaxlay qaran-la'aantaas?

Saddex, qaran la'aanta ku dhacday ummadda Soomaaliyeed waxaa laga-dhaxlay dowlad la'aan. Maxay ku kala-duwan-yihiin "qaran" iyo "dowlad?" Qaranka iyo dowladu waxay ku kala-duwan-yihiin arimahan. Qaranku wuxuu ka kooban-yahay: shicib, dhul (bad-iyo-berri), iyo dowlad (fulin, baarlamaan, maxkamaddo). Dowladdu waa qayb yar oo ku hoos-jirta qaranka.

Tusaale ahaan, qaranka waxaa ku hoos-jira dowlad—oo ka kooban: fulinta, baarlamaanka, iyo maxkamadda (ama gar-soorka). Markaa hadii la-waayo qaran—oo ah meesha ay wax-waliba ku hoos-jiraan—suurto-gal ma-noqonayso in la-helo dowlad dhisan oo ay ku-midoobaan shacabku. Marka la-waayo qaran, waxaa laga-dhaxlaa in la-waayo dowlad. Laakiin, maxaa laga-dhaxlaa marka la-waayo dowladd ay shacabku isku raacsan-yihiin, oo ay aaminsan-yihiin?

Afar, marka la-waayo dowlad ay shacabkeedu aaminsan-yihiin, waxaa laga-dhaxlaa bur-burka kaabayaasha nidaamka dowligga ah: sida, sharci dejinta (baarlamaanka); sharci fulinta (maamulka); iyo gar-soorka (maxkamad-

daha). Marka ay bur-buraan kaabayaashaas dowligga ahi —ee ay ku fashilmaan xilkii loo-igmadday—waxaa kadhasha xatooyo xoolo dadweyne (in xoolaha ummaada laboobo).

Dadkii maamulka iyo xoolaha ummadda loo xil-saaray ayaa bilaaba inay boobaan xoolaha ummadda. Sababtoo ah, ma jiro nidaam dowladeed oo xakamaynaya boobka xoolaha ummadda; mana jiro wax ciqaab ah oo ay ka baqayaan. Marka uu musu-maasuqu aad u-batana, waxaa bur-bura dhismaha bulshadda oo dhan. Musuq-maasuqa maxaa laga-dhaxlaa?

Shan, musuq-maasuqa waxaa laga-dhaxlaa bur-burka nolosha bulshadda. Marka uu musuq-maasuqu aad u tirrobato, waxaa bur-bura qaybaha ugu muhiinsan nolosha bulshadda: sida, caafimaadka, wax-barashadda, cadaaladda, shaqo-abuurka, dhismaha wadanka, wax-soo-saarka, biyaha, wadooyinka, iwm. Dhaqaalihii ummadda laga urruriyey ee lagu dhisi-lahaa wax-yaalahaas aynu soo sheegnay, waxaa booba (oo jeebka ku shubta) dhowr qof.

Maadaama aanay jirin kaabayaashii dowladda ee xakamayn-lahaa (ama ciqaabi-lahaa) dadkaas xoolaha boobaya, waxaa fududaata in xoolahaas ummadda la-boobo. Hadaba, maxaa laga-dhaxlaa bur-burka nolosha bulshadda?

Lix, bur-burka nolosha bulshadda waxaa laga-dhaxlaa colaad iyo dagaal. Marka ay bulshaddu waydo kaabayaasha assaaska nolosha; sida, shaqooyin, wax-barasho, biyo, cadaalad, iwm., noloshoodddu way adkaataa. Dadku waxay la dersaan baahi aad u tirro-badan; waxaanay noqdaan dad fuqaro ah. Marka ay dadka baahidu ka badato, wuxuu qof waliba ku dedaalaa sidii uu naftiisa iyo ubadkiisa ugu heli lahaa nolol. Maadaama aany jirin meel uu nolol ka samaystaa, waxay qofka ku kaliftaa inuu bilaabo boob iyo dhac. Marka uu boobka iyo dhacu batana, waxaa bulshadda

ku abuurma shaki, baqdin, rajo-la'aan, xasilooni-darro, iwm.

Dadkaas baahidu hayso, ee kala shakisana, sida loo maamulaa way adkaataa. Dadku waxay ka aamin-baxaan nidaamka dowligga ah ee jira; waxaa bilaabma eexaysi iyo qabyaalad; waxaa bilaabma is cabudhin iyo cago-juglayn; waxaa bilaabma ku xad-gudubta xuquuda qofka waddaniga ah; waxaana ugu danbeeya ee bilaabma xadhig, caga-juglayn iyo marka ugu danbaysa oo ay dil gaadho.

Marka ay bulshaddu heerkaas gaadho, waxay noqotaa bulsho aan waxba xeerin oo aan isu nixin. Qof waliba ama qabiil waliba wuxuu ka fikiraa oo uu ku dedaalaa sidii uu naftiisa iyo dadkiisa u bad baadin-lahaa. Marka u danbaysa, waxaa bilaabma dagaalo badheedh ah, oo aan waxba laysula hadhin. Maxaa laga-dhaxlaa dagaaladda?

Toddoba, dagaaladda waxaa laga-dhaxlaa wax kasta oo nolosha bani'aadamka baa-bi'iya: sida, dil, boob, dhac, kufsi, iyo qax. Dhibaatooyinka laga-dhaxlo dagaaladda si fiican ayay u taqaana ummadda Soomaalidu; umana baahna sharaxaad qoto-dheer in *aan ka-bixiyo.*

Qurbaha: dadka qurbaha ku-nooli waxay cadaalad-darradaas Soomaalida ka-dhaxleen kala-qaybsanaan. Dadkii qurbaha ku-noolaa waxay samaysan kari waayeen urrur ay ku midaysan-yihiiin oo u doodda (kana shaqeeya) danahoodda ay wadaagaan. Sababta ay qomiyadda Soomaaliddu u midoobi-waayeena waxaa weeye: waxay u kala qaybsan-yihiin qabiilooyin kala-duwan, oo qabiil waliba aanu aamin-sanayn qabiilka kale. Sababtoo ah, qabiil waliba wuxuu difaacayaa qofkiisa xaq-iyo-xaq-darraba, waxaanu dulminayaa qof kasta oo aan qabiilkiisa ka mid-ahayn.

Markii ay Soomaaliddu ku fashilantay inay samaysato urrur ay ku midoobaan, waxay la kulmeed dhibaatooyin

aad u-tirro-badan, oo aan lasoo koobi-karin. Bal aan xuso qayb ka-mid-ah dhibaatooyinkaas ay Soomaaliddu kala kulmeen qurbaha.

Kow, Soomaalidda qurbuhu waa dad aan lahayn cod-iyo-cuddud isku duuban. Dhaqanka qurbaha ka jiraa waxaa weeye in qowmiyad waliba samaysato urrur (ama jaaliyad) ay ku midowdo kuna muujiso codkooda iyo cudduddooda. Marka ummaddu ay yeelato cod-iyo-cuddud, waxay noqdaan ummad wax walba qabsata iyaddoo isku-duuban. Waxay noqotaa ummad la-qaddariyo oo ka dhex-muuqata qowmiyaddaha kale.

Codkaas iyo cuddudaas isku duubannina wuxuu sababaa in qowmiyaddaha kale ku deddaalaan sidii ay usoo dhawaysan lahaayeen Soomaalidda—hadii ay noqoto cod (vote) laga raadsato; hadii ay noqoto baayac-mushtar lala-samaysto; hadii ay noqoto taageero laga-dalbaddo, iwm. Ayaan-darro'se, in kastoo Soomaalidda qurbaha joogta tirraddooddu aad u badan-tahay, hadana waxay noqdeen ummad aan cod-iyo-cuddud midna lahayn. Taasina waxay keentay in qof waliba iyo qoys waliba keliggii gooni isu debaro. Ka dibna, la ugaadhsaddo Soomaalida.

Ma jiro urrur (ama jaaliyad) ay Soomaaliddu ku midaysan-tahay oo ka-jira magaalooyinka ay Soomaaliddu ugu-badantahay aduunka; sida, London, UK; Toronto, Canada; Ohio iyo Minnesota, USA; iwm. Taas waxaa kasii darran in qabiil waliba uu samaysto urrur (ama jaaliyad) u gaar ah. Qabiil kali ahina waxba ma qabsan-karo mar hadii aanu ku-tiirsanayn qowmiyad awood baddan.

Soomaaliddu waxay gaadhay xad aad u xun oo ah: in masaajiddadii ay kala yeeshaan qabiilooyin kala-duwani. Waa astaanta ugu-saraysa ee lagu garto qowmiyad bur-bursan oo kala qaybsan. Waxaas oo bur-bur ahna waxaa u sabab ah: cadaalad-darradda dhaqanka Soomaalidda.

Laba, furitaanka iyo bur-burka qoysaska Soomaalidda oo aad u-batay. Bulshadda Soomaalidda ee ku-nool qurbaha (gaar-ahaan, wadamadda reer Galbeed-ka) waxaa aad ugu-batay furitaanka iyo bur-burka qoysaska; maadaama aanu jirin urrur (ama jaaliyad) ay ummadda Soomaaliddu ku midaysan-tahay (oo xal-u-raadiya dhibaatooyinka qoyska). Magaalo kasta oo aad booqato waxaad ku arkaysaa hooyooyin aad u tirro-badan oo keligood caruurtii korinaya. Markii ay tirraddooddii aad u badatay, waxaa loo bixiyey "single mothers;" oo minaheeddu-yahay "hooyo keli ah." Markii qoysaskii Soomaaliddu ay bur-bureen, waxaa bilaabmay inay caruurtiina dayacmaan. Waa caruur ay korinayso hooyo keli-ah oo ku-nool qurbe.

Hooyooyinka Soomaaliyeed badan-koodu ma'aha dad soo qaatay wax-barasho fiican. Xataa kuwoodda tirradda yar ee wax-soo-bartay, marka ay yimaaddaan duniddan reer Galbeed-ka, wax-barashaddoodii ay soo qaateen ma'aha mid ka-shaqaynaysa dhullalkan reer Galbeed-ka. Hooyooyinkani kuma hadlaan luqadda wadamadaas ay degenyihiin. Sidaa awgeed, waxba kama oga xaaladda wax-barasho iyo nolloleed ee caruurtoodda. Taasina waxay sababtay in caruurtii Soomaaliyeed ay waayaan hogaankii iyo daryeelkii waalidnimo.

Saddex, dhalinyartii (hablo iyo inamo-ba) kusoo kortay guryahaas bur-buray, waxay noqdeen dhalin-yaro lagukhasaaray. Dhalinyaradda ku kortay dhullalka reer Galbeed-ku, waxay u kala baxaan saddex kooxood: 1) dhalinyaro noqotay shufto (gangs); 2) dhalinyaro iska fadhidda oo aan waxba qabsanin; iyo 3) dhalinyaro naftoodda kaliya u nool. Saddexdan kooxood ee dhalinyaradda qurbuhu u kala-baxdo, aan mid-walba sharaxaad gaaban uga bixiyo.

Shufto: dhalinyaradda shuftadda (gangs) noqotay waa dhalinyaradda ugu tirradda-badan. Dhalinyaraddani waxay

isticmaalaan (oo iibiyaan) nooc-kasta oo maan-dooriye ah (drugs); sida, xashiishadda, khamrigga, kiniinadda, iwm. Waxay boobaan (dhacaan) dadka shicibka ah, iyagoo adeegsanaya hubka khatarta ah; sida, baastooladda, mindidda, qoryaha, iwm. Waxay u kala qaybsan yihiin kooxo kala-duwan oo iskasoo hor jeeda. Kooxahaasi si joogto ah ayay suuqa isugu-toogtaan.

Dilka dhalinyaraddaasi aad ayuu usii kordhay sanadihii ugu danbeeyey. Danbiyaddaas faraha-badan ee ay dhalinyaraddani samaynaysaa wuxuu kalifaa in dhalinyartan mar walba la-xidho oo ay ku jiraan jeelasha. Badankoodu ma haystaan dhalashadda wadanka ay degen-yihiin; taasina waxay sababtay in loosoo mastaafuriyo (tarxiilo) Soomaaliya. Dhalinyartan mustaqbal-koodu wuxuu ku danbeeya: 1) in la-dilo; 2) in ay jeelasha nolosha ku dhamaystaan; iyo 3) in la-mastaafuriyo (la-tarxiilo).

Fadhiid: kooxda labaad ee dhalinyaraddu waxaa weeye dhalinyaro iska fadhidda oo aan waxba qabsanin. Waa dhalinyaro aan khayr-iyo-shar midna lahayn—waxba aan ku filayn. Dhalinyaraddani iskuuladda ma dhigtaan (waxba ma bartaan); mana shaqaystaan; mana aha dhalinyaro shufto noqotay. Badankooddu waxay la noolyihiin hooy-ooyin-kood oo degen (ama ku-nool) guryaha dowladdu siiyo dadka caydha qaata.

Lacagta caydha ayay dalbadaan. Guryaha caydha ayay ku nool yiihin. Inamaddu wakhtigoodda oo dhan waxay ku bixiyaan: TV iyo Internet la daawaddo; ciyaaarta lagu ciyaaro kombuyuuradda (computer games); suuqa oo lasoo war-wareego; kubadda cagta/kolayga oo la ciyaaro; shukaansi; iwm. Habluhu wakhtigoodda oo dhan waxay ku bixiyaan: filimo la daawaddo; maryo iyo waxyaalaha habulhu isku-qurxiyaan; suuq la-meeraysto; shukaansi; iwm.

Mar-marka qaarkood way shaqeeyaan; laakiin, shaqadda kuma-raagaan oo markiiba way iskaga tagaan. Dhalinyartani way is guursaddaan. Markay is-guursaddaana waxay ku noolaadaan guryaha caydha; waxaanay qaataan lacagta yar ee la siiyo dadka caydha ah. Waxay ku nool-yihiin meesha ugu-hoosaysa nolosha. Marka ay caruur dhalaana, iskuma raagaan badakoodu oo way kala tagaan. Halkaa waxaa ka bilaabma in ay ubadkooduna raacaan dariiqii ay ku baa'ba'een waalidkood. Dariiqaas ayay dhamaantood qaadeen kooxdaasi.

Calooshood u shaqaystayaal: kooxda saddexaad ee dhalin-yaraddu, way ka duwan-yihiin labadaas kooxood ee aan kor kusoo-xusay. Dhalinyartani waa kuwa ugu tirradda-yar. Waa dhalinyaro wax-baratay oo jaamacaddo kasoo "qalin-jabisay." Waa dhalinyaro shaqaysata; badankooduna reero iyo caruur ayay leeyihiin. Hablo iyo inamaba, waa dhalin-yaro noloshooddii dhistay. Laakiin, waa dhalinyaro aan cid kale waxba-tarrin. Taas waxaan uga-jeedaa: waa dhalinyaro ku kooban naftooda iyo gurigoodda oo kaliya. Waalidkood kama war-hayaan; masoo booqdaan; ma caawiyaan; waxna uma qabtaan. Qaraabadda iyo xigtaddooda kale kuma xidhna, kamana war-hayaan. Waxay noqdeen "calooshooda u shaqaystayaal."

Dhalinyartani waxay aaminsan-yihiin in marka uu waalidkood waynaado (gaboobo) ay geeyaan meelaha lagu-xanaaneeyo dadka waaweyn ee cadaanka/madowga ah, ee wadankan loogu-yimi. Tusaale ahaan, hadii hooyaddood ama aabahood oo gaboobey (oo caawimo joogto ah u baahani) uu magaaladda kula nool-yahay, ma ogola inay gurigoodda keenaan oo uu waalidkood la-noolaado. Hooy-addood ama aabahood oo d'addoodu aad u waynaatay, oo u baahan inay la-noolaadaan caruurtoodda, ayaanay ogolayn inay gurigoodda keenaan, oo xanaaneeyaan.

Dhalinyartani ma haystaan dhaqan Soomaaliyeed; mana haystaaan dhaqanka wadanka ay ku nool yihiin. Marka ay la-joogaan (ama la-dhaqmayaan) dadka wadanka loogu-yimi (sida, dadka Maraykan-ka ah; dadka reer Yurub; ama Kanada, iwm), waxaa la-dareensiiyaa, ama si cadaan ah loo-tusaa, in ay yihiin dad soo-galeeti ah (dad ajinabi ah); iyagoo lagu faquuqayo luqaddooda, midabkooda, diintooda, iwm. Taasi waxay dareensiisaa in aanay ahayn muwaadiniin, wadankana aanay u dhalanin; kana mid-ahayn.

Dhinaca kale, inkastoo aanay soo dhex-gelin bulshadda Soomaalidda badankooddu, hadana marka ay la-joogaan (ama la-dhaqmayaan) bulshadda Soomaalidda, waxay dareemaan faquuq labaad. Sababtoo ah, waxay ku hadlaan af-Soomaali ja-jaban; waxba kama yaqaanaan dhaqanka, siyaasadda, taariikhda Soomaalidda; waxay u lebistaan sidda dadka wadanka loogu-yimi, oo ka duwan sida ay Somaaliddu u lebisato; iwm. Taasina waxay keentaa in bulshadda Soomaaliddu ay dhalinyartaas dareensiiso in aanay ahayn Soomaali "asal" ah. Faquuqaas kaga-yimaadda dhinaca dadka wadanka loogu-yimi iyo dhinaca bulshadda Soomaaliddu, wuxuu dhalinyartaas ku abuuray quc-dad, kalsooni-darro, iyo niyad-jab.

Inkastoo ay saddex-daas kooxood ee aynu kor-kusoo-xusnay kala-duwan-yihiin, hadana waxaa-jira wax ay dhamaantood wadaagaan. Dhamaantood waxay iskaga mid-yihiin waxaa weeye: dhamaantood waxaa ka luntay baadi-soocdii. Maxaan uga-jeedaa kelmedda "baadi-sooc?"

Baadi-soocdu waxaa weeye: summadda ay leedahay bulsho; summaddaas oo laggaga sooco bulshooyinka kale. Bulshadda unuggeedda ugu yarina waxaa weeye qofka bani'aadamka ah. Marka ay laba qof—oo lab-iyo-dhaddig ahi—reer dhistaan, waxay noqdaan qoys ama reer. Hadii dhowr qoys ama reer meel wada-degaana, waxay noqdaan

beelo. Marka ay qoysaska ama beeluha tirraddoodu aad u bataana, waxay noqdaan bulsho ama qowmiyad.

Qoqmiyad waliba-na waxay leedahay summad (baadi-sooc) lagu garto oo gaar ah; oo ay kaga duwan-yihiin qowmiyaddaha kale ee aduunka. Waa maxay baadi-soocda lagu kala saaro qowmiyadduhu? Baadi-soocda bulsho waliba waxay ka koobantay laba qaybood oo waaweyn: diinta iyo dhaqanka. Sidaa awgeed, qofka baadi-soocdiisu—diintiisa iyo dhaqankiisu—waxay kasoo-jeedaan bulshaddiisa soo gar-daadisay, ee uu kusoo dhex-koray. Diinta iyo dhaqankana waxaa sidda, oo u ah weel (saabaan), waa luqadda. Hadaba, hadii aanu qofku ku hadlaynin luqadda ummaddiisa uu asal-ahaan kasoo-jeedo, ma'aha qof tirsan bulshadaas ama ummadaas.

Afar, waalidka oo caruurta laga-qaato. Maadaama qowmiyadda Soomaalidda ee ku-nool qurbuhu—gaar-ahaan waddamada reer Galbeed-ku—aanay isku-xidhnayn (oo ay u kala qaybsan-yihiin qabiilooyin), waalidkii Soomaalidda ahaa waxay la-kulmeen dhibaatoobin badan oo ay ugu-horayso ubadkii oo ay dowladdu ka qaado. Waalidku wuxuu waayay cid ka-caawisa, ama tallo ka-siisa, sharciyadda wadanka ee ku saabsan daryeelka caruurta.

Wadamadda reer Galbeedka badankoodda waxaa ka-jira sharciyo ku-saabsan "daryeelka iyo bar-baarinta (korinta) ubadka." Sharciyaddani waxay si-toos ah ugasoo horjeedaan nidaamka ay Soomaaliddu u koriso caruurta. Marka uu waalidku caruurtiisa u bar-baariyo sidii caadiga ahayd ee ay Soomaaliddu u bar-baarin-jirtay ubadka, waxaa lagusoo oogaa danbiyo. Sababtoo ah, sida ay Soomaaliddu ubadka u koriso iyo sharcigga wadanka u yaalaa badankiisu aad ayay u kala duwan-yihiin.

Tusaale ahaan: ilmahaaga yar uma hanjabi kartid; dhirbaaxo yar kuma dhufan-kartid; innantaada uma diidi-kartid

in ay habeenkii soo cawayso, ama ay rag la saaxiibto, iwm. Waalidiinta caruurta laga qaaday aad ayay u tirro-badan-yihiin; waana dhibaato ay keentay cadaalad-darrada dhaqanka Soomaalidda ee umaddii Soomaaliyeed kala-irdheeyey (kala-qaybiyey, ee kala-fogeeyey).

Shan, dadka sharcigga loo-diiday oo aan haysanin cid u-doodda. Wadamadda reer Galbeed-ka waxaa jooga dad aad u tirro-badan oo Soomaali ah, oo sharcigga loo-diiday. Dadkaasi waa dad isku-dhiibay qaxoonti-nimo. Dadkaasi waxay ku jiraan jeelal lagu-xidhay oo lagu-hayo; badankoodduna waxay sugayaan in la-mastaafuriyo (la-tarxiilo). Dadkaasi wax aqoon ah uma-laha waddamadan ay xaqootinimadda ka dalbadeen; mana-haystaan cid u doodda oo caawisa. Dadkaas badankoodu waxay ku danbeeyaan in wadanka laga mastaafuriyo oo loo tarxiilo Muqdisho. Haddii ay qowmiyadda Soomaaliddu isku xidhnaan-lahayd, dad aad u badan ayay ka bad-baadin lahaayeen in la-mastaafuriyo.

Lix, dhibaatooyinka Soomaalidda ka qabsadda baayac-mushtarka. Dhibaatooyinkaas waxaan ka-xusayaa laba. Kow, dhibaatooyinka suuqyadda ay Soomaaliddu kiraysato. Soomaalidda ku nool wadamada reer-Galbeed-ka—khaasa-tan, Ingiriiska, Maraykan-ka, Kanada—waxay kiraystaan meelo ay ku iibiyaan badeecaddaha ay ka baayac-mushta-reeyaan. Meelahaas ay kiraystaan waxaa loo yaqaanaa "mall" (suuq). Suuqyaddaas waxaa iska-leh shaqsiyaad gaar ah, oo tacaddiyo badan u gaysta dadka Soomaalidda. Tacad-diyadaas-na waxaa ka-mid ah: dadka oo kiradda lagu-kiciyo (qaali laggaga dhiggo); dukaamada ay wax ku iibiyaan dadka Soomaalidu oo aan loo-samaynin wax dayac-tir ah; dadka oo laga-saaro suuqayaddaas; iwm. Tacaddiggaas Soomaalidda lagu-hayaana wuxuu kasoo hor-jeeddaa shar-cigga wadamadaas u yaala. Laakiinse, maadaama aanay

Soomaaliddu lahayn urrur u doodda xaquuqdooda, ma-jirto cid ka difaacaysa tacaddiggaa sharci-darradda ah ee lagu-hayo. Laba, dhibaatadda labaad ee ay Soomaaliddu kala kulanto baayac-mushtarkuna waxaa weeye: qof kasta oo Soomaali ahi wuxuu wax ka iibsanayaa qofka ay isku qabiilka yihiin. Taas micnaheedu waxaa weeye: qofka baayac-mushtarka ah, waxaa kaliya oo wax ka-iibsanaya qofka ay isku qabiilka yihiin. Sidaa awgeed, qofka baayac-mushtarka ah ee aanay qabiilkiisu magaaladda degenayn, ama ay ku yar-yihiin, uma suurto-galayso inuu baayac-mushtar noqdo. Waa dhibaatooyinka dhabar-jabka ah ee laga dhaxlay cadaalad-darradda dhaqanka Soomaalidda.

3

DHAQANKA SOOMAALIDA IYO TACADDIGA HAWEENKA

"Kal caano-galeen, kas ma galo."
"Dumarku, waa dhalaan raad weyn."
Maah-maaho Soomaaliyeed

Labadaas maah-maahood (iyo qaar kale oo badani) waxay tilmaamayaan tacaddiga dhabar-jabka ah ee uu dhaqanka Soomaalidu ku hayo haweenka Soomaaliyeed. Aan micneeyo maah-maahda koowaad. "*Kal caano-galeen, kas ma galo:*" ereyga "kal" micnihiisu waxaa weeye, "laabta" ama "shafka," ama "xabad-ka;" oo looga jeedo, "naasaha dumarka;" oo ku-yaala "laabtooda" ama "xabad-kooda." Naasahana dhediggana waxaa lagu yaqaana inay caano galaan. Ereyga kalena waxaa weeye: "kas" oo micnihiisu yahay, "caqli" ama "garaad." Sidaa awgeed, "kal caano galeen"—laabta (ama xabad-ka) ay caano galaan, "kas ma-galo"—caqli ma galo. Taas oo loola-jeedo, dumarku caqli ma-laha.

Maah-maahda labaad—"*Dumarku waa dhalaan raad weyn*"—micnaheedu waxaa weeye: caqliga (ama garaadka) dumarku wuxuu la-mid-yahay garaadka dhalaanka (ama

caruurta). Waxa kaliya ee dumarka iyo caruurta lagu kalagaranayaa waxaa weeye: dumarka raadkooda ayaa ka weyn raadka caruurta. Laakiin, caqliga iyo hab-u-fikirka dumarku wuxuu la-mid-yahay caqliga iyo hab-u-fikirka dhalaanka, ama caruurta yar-yar.

Ujeeddadda labada maah-maahood-ba waxaa weeye: dumarka caqligoodu (ama garaad-koodu) aad ayuu u hooseeyaa. Waa tacaddi, af-lagaado, cay, itxiraam-darro, kudiggasho, iyo hoos-u-dhigid loola badheedhay hablaheena, si loo bah-dillo, loo-caadaaddiyo, oo loo-yaso; ka dibna, loogumaysto.

Maah-maahyadaasi maaha ereyo la'iska yidhi oo kaliya. Waa ereyo si dhab ah uga turjumaya nolosha dhabta ah ee haweenka Soomaaliyeed. Micnaha ay maah-maahyadaasi xambaarsan-yihiin ayaa bulshaduna ku dhaqantaa, oo ficil u rogtaa. Waa tacaddi si ficil ah, oo badheedh ah, loogu dhaqo haweenka Soomaaliyeed. Waa tacaddi lagu barbaariyo, oo lagu gar-daadiyo, marka ay haweenku yar-yar-yihiin; waxaanu maraa marxaladdo kala danbeeya.

Si aad u fahanto tacaddiga qudh-gooyadda ah ee lagu-hayo haweenka Soomaaliyeed, cutubkan waxaan u dhiraandhirinayaa sidan soo-socota.

Kow, waxaan si-kooban u sharaxayaa noloshii miyiga (oo ah meesha uu kasoo-jeedo) tacaddigan qudh-gooyadda ah ee lagu hayo haweenka. Laba, waxaan qodobaynayaa in tacaddiga haweenku uu ka bilaabmo guriga waalidkood—aabahood iyo hooyadood. Saddex, waxaan faalaynayaa tacaddiga ay haweenku kala-kulmaan guud-ahaan bulshadda Soomaaliyeed. Afar, waxaan faah-faahinayaa tacaddiga ay haweenku kala-kulmaan iskuulada. Shan, waxaan is dul-taagayaa tacaddiga ay gabadhu kala-kulanto ninkeeda ama seygeedda.

Noloshii Miyiga

Si aynu u fahano meesha uu kasoo jeedo tacaddiga haweenka Soomaaliyeed, waxaa muhiima in aynu si kooban u sharaxno noloshii miyiga (baadiyaha), oo ahayd meeshii uu kasoo aassaasmay dhaqanka Soomaalida ee boqnogooya haweenku.

Dadka Soomaaliyeed, wakhtigiii ugu dheeraa waxay ku noolaayeen miyiga (baadiyaha)—inkastoo ay jiraan dad tirro-yar oo beeralay ahi. Nolosha miyigu waxay nolol aad u adag. Degaanada miyiga waxaa aad ugu yar baadka iyo biyaha. Dadka reer miyiga ah waxaa ku adkaa inay xoolhadooda u helaan meel barwaaqo ah iyo biyo joogto ah. Si ay u helaan meel doog iyo biyo leh, waxay dadkaasi u lugayn jireen dhulal aad u kala fog iyagoo raadinaya doog iyo biyo. Dadkaasina xoolaha ay dhaqdaan waxay ugu jeclaayeen geela. Sababtoo ah, geelu wuxuu u adkaysan jiray haraadka iyo gaajada. Dhibta kale ee miyiga ka jirtay waxay ahayd: dadkaasi waxay u kala degenaayeen qabiilooyin kala duwan oo aan is aamainsanayn.

Hadaba, marka ay dadkaasi geelooda u daaq geeyaan dhulal aad u kala fog, waxaa dhici jirtay in geela laga dhaco; raga geela wadana la laayo. Sidaa awgeed, noloshoodii ayaa aad u adkaatay. Nolosha sidaa u adag, waxaa loo baahday rag dagaalama oo geela dhifaaci kara; ama geel soo dhici kara. Dumarku maadaama aanay dagaalka ka qayb qaadanin, dadkaasi waxay dumarkii u arkeen in qiimahoodu uu ka hooseeyo qiimaha raga. U fiirso, waxa kaliya ee raga iyo dumarka lagu kala saraysiiyey waxaa weeye: dagaal, difaac, iyo dhac.

Qofka intaas samayn-kara, ayaa qiimo sare yeeshay. Qofka aan intaas samayn karina, qiimihiisu hoos ayuu u dhacay. Qofka dagaal geli kara, ee naftiisa hurayaa, wuxuu

yeeshay xuquuq gaar ah, oo ka saraysa xuquuqda uu leeyahay qofka aan naftiisa huri karini. Ragaas iyo dumarkaas laguma qiimaynin garashadooda, aqoontooda, dadnimadooda, diintooda, iwm. Waxaa kaliya ee lagu kala saraysiiyey waxaa weeye: qofkii dagaal geli kara.

Dhaqankaasi wuxuu ka jawaabaayey baahidii taalay miyiga. Laakiinse, dhaqankii miyiga yaalay ayay dadkii Soomaalida ahaa ulasoo guureen magaaladii. Waxaanay halkii kasii wadeen tacaddigii haweenka.

Sidaa awgeed, dadkaas reer miyiga ahaa waxay masuuliyadihii dadka u kala qaybiyeen siddan soo socota. Raga masuuliyadoodu waxay ahayd inay geela raacaan, oo ay geeyaan meelo aad u fog-fog si ay u helaan dhir uu geelu daaqo. Dumarka masuulayadoodu aad ayay uga badnayd masuuliyadii raga. Dumarku waxay raacaan adhiga, waxay dhisaan guryaha, waxay rarraan reerka, waxay sameeyaan agabka (qalabka) reerku isticmaalo badankiisa, waxay sameeyaan xadhkaha, iwm. Iyagoo howsha ugu badan qabta haweenku, ayaa hadana wax xaquuq ah oo ay lahaayeen aanay jirin.

Go'aamada oo dhan waxaa iska lahaa raga oo kaliya. Dumarku go'aamada kamay qayb qaadan jirin; loomana ogolayn. Go'aamada uu ragu gaadho ayuunbay fulin-jireen. Hadii go'aamadaasi ay yihiin go'aamo aanay haweenku raali ka ahayn, kamay hadli kari jirin ama awood umay lahayn inay diidaan go'aamadaas uu ragu soo gaadho.

Inkastoo dumarku ay qaban jireen howlaha ugu badan, hadana nolosha miyiga way ka qiimo hooseeyeen raga. Waayo? Sababtu waxaa weeye: nolosha miyigu waa nolol aad u adag.

Dadka reer miyiga ahi waxay u kala qayb-sanaayeen qabiilooyin kala duwan, oo is wada neceb. Geela ayay kala dhici jireen; way is dili jireen, ismanay aamin sanayn. Taas

waxaa usii dheeraa, miyiga muu jirin nidaam isku haya qabiilooyinkaas kala duwani, oo u-kala cadaalad qaadaa. Qabiilka tirrada badan ayaa ku tacaddiyi jiray qabiilooyinka tirrada yar. May jirin wax cadaalad ahi.

Nolosha miyigu waxay ahayd nolol mar walba lagu jiro dagaal iyo colaad. Nolosha sidaa u adag, waxaa loo baahnaa rag dagaalama oo difaaca xoolaha iyo dumarkaba. Dhinaca kale, waxaa loo baahnaa rag tirro badan oo geela kasoo dhaca qabiilooyinka kale. Taas ayaa sababtay in ragu ka qiima bataan dumarka. Waxa kaliya ee ay ragu dumarka uga qiima bateena waxaa weeye in ay ragu dagaalami karaan; xoolahooda difaaci karaan; xoolaha qabiilooyinka kalena ay soo dhici karaan. Waa intaas oo kaliya.

Ragaasi kamay maskax iyo garaad badnayn haweenkii reer miyiga ahaa. Laakiin, maadaama aanay dumarku dagaal geli karin, waxaa loo arkay inay yihiin wax ka qiima yar raga. Sidaa awgeed, waxaa lagu sameeyey tacaddi xad-dhaafa. Inkastoo tacadigaasi uu aad u tirro-badnaa, aan dhowr tusaale soo qaato oo si cad kuu tusaya tacaddiga xad-dhaafka ah ee lagu hayay haweenka Soomaaliyeed.

Gabadhu waa iib: sida caadadada ah, innanta reer migiya ahi marka ay gaadho da'ddii guurka, waxaa aabaheed isu diyaariyaa inuu innantaas ku iibiyo boqol geel ah, faras, iyo qori. Sababta aan u isticmaalay kelmeda "iib," waxaa weeye: innanta miyiga joogtaa marka la guursanayo, waxaa loosoo maraa dhowr dariiqo.

Kow, aabaheed ayaa go'aamiya inuu nin siiyo. Ninkaa uu aabaheed siinayo iyadu ma taqaano, manay arkin. Sababta uu aabaheed ninkaa u siinayaana ma'aha in uu ninkaasi yahay nin fiican oo u wanaagsan innantiisa. Aabaheed lama kulmo, mana yaqaano, ninka uu innantiisa siinayo. Waxaa kulmaya innanta aabaaheed iyo innanka aabihii. Labada oday markay wada hadlaan, ayay innanta is waydiisanayaa.

Innanta aabaheed wuxuu ogyahay in odayga kale, ee wiilkiisa gabadha u doonayaa, uu xoolo badan leeyahay. Sidaa awgeed, innanta aabaheed wuxuu ku xisaabtamayaa in xoolo badan la siiyo.

Maadaama uu aabuhu innantiisa waydaarsaday xoolo badan, taasi miyaanay ahayn inuu aabuhu innantiisa iibiyey? Jawaabtu waa HAA. Laakiin, dad badan oo Soomaaliyeed uma arkaan in innanta la iibiyey. Waayo? Maadaama dadkaasi ay in badan arkayeen in gabdhaha la bixiyo, oo xoolo badan laga qaato, uma arkaan inay wax dhibaato ahi ku jirto. Waa dhaqan aad u khaldan oo ummadda laga dhaadhiciyey, diinteena Islaamkuna aanay ogolayn. Diiintu ma ogola in innanta la siiyo qof aanay raali ka ahayn. Hablaha miyiga joogana cidi kalama tashato ninka la siinayo.

Laba, marrarka qaarkood waxaa dhici jirtay inay innantu soo xulato nin ay guursato. Laakiinse, ninkaas ay soo xulatay waa inuu ahaadaa nin xoolo badan haysta, oo aabaheed siinaya xoolahaas. Hadii aanu ninku haysanin xoolo badan, oo reerkoodu yahay reer dan-yar ah, waxaa hubaal ah in uu aabuhu innantiisa ku amrayo inay ninkaa diido, oo aanay guursanin.

Taas waxaa kuu cadaynaya, marka ay innantu ka hesho ninka, ee ay ogaato in aanu xoolo badan haysanin, wiilka iyo gabadhu waxay samayn jireen inay isla baxsadaan oo ay is guursadaan. Waayo? Sababtu waxaa weeye, innantu waxay ogtahay in aanu aabaheed yeelaynin ninkaas aan xoolaha badan haysanin. Sidaa awgeed, maadaama ay innantu ninka rabto, way la baxsan jirtay si ay uga bad-baado inuu aabaheed u diido. In badan ayaad maqashay: 'gabadhaas waa lala tagey." Taasina waxay kuu cadaynaysaa inay habluhu ahaayeen wax la iibiyo, oo xoolo lagu bedesho.

Saddex, waxaa kale oo dhici jirtay in marka innanta loo

diido nin kasta oo ay soo doorato maadaama aanu xoolo badan haysanin in innantu ay guriga ku waynaan jirtay, oo ay noqon jirtay "innan waynaatay." Sidaa awgeed, si ay innantu uga bad-baado dhibaatadaas uu ku hayo aabaheed, waxay habluhu samayn jireen: way heermi-jireen.

Heerinka micnihiisu waxaa weeye: innantu waxay ka baxsan jirtay guriga reerkooda. Ka dib, waxay u tegi jirtay reer ay ku ogtahay inamo. Reerka marka ay u timaado, ayay u sheegi jirtay in ay tahay "heerin"—guur doon. Reerka ay innantu u timaadaana waxay usoo xuli jireen nin guursada. Dhaqanka Soomaalida ceeb ayay ahayd in gabadh heerin ah dib loo celiyo. Taasina waxay kuu cadaynaysaa inay habluu ahaayeen wax la iibiyo, oo xoolo lagu bedesho.

Qoyska miyiga: ninka reer miyiga ahi, gabadhiisa wuxuu ula dhaqmi jiray si axmaqnimo ah. Waayo? Ta koowaad, ninka reer miyiga ahi wuxuu ogaa inuu gabadha soo iibsaday oo uu xoolo badan ka bixiyey. Mar hadii uu gabadha soo iibsadayna inuu iska leeyahay isagu. Ta labaad, wuxuu ogaa in hadii uu garaaco (oo uu dhenged la dhaco) cid ka qabanaysaa aanay jirin. Sababtoo ah, in dumarka la garaacaa waxay ka mid ahayd dhaqanka Soomaalida ee miyiga. Ta saddexaad, ragii reer miyiga ahaa waxay dumarka aaminsiiyeen in gabadha la furaa ay tahay gabadh aan sharaf iyo qiimo lahayn. Marka uu ninku gabadha furo, waxaa eeda dusha laga saari jiray gabadha. Waxaa lays waydiin jiray: "Maxaa lagu furay gabadha?"

Raga miyigu waxay aaminsanaayeen in furitaanka ay sababteeda leedahay gabadhu. Sidaa awgeed, in ay jirto sabab lagu furay, oo ah inay wax aad u fool xun samaysay. Odayaal miyiga ku dhashay oo ku dhaqan ayaan waraystay. Dhamaantood waxay ii sheegeen in uu furitaanku "ceeb" yahay. Marka uu ninku gabadhiisa u cadhoodo, wuxuu ugu hanjabi jiray inuu furayo. Taasina gabadha waxay ku noqon

jirtay naxdin aad u wayn. Si ay dumarkaasi uga badbaadaan furitaanka, waxay ninkooda ku odhan jireen: "Waar hay furine, i garaac." Gabadhu waxay doorataa in la garaaco, oo dhenged lala dhaco, laakiin aan la furin. Waa tacaddi halkii ugu saraysay.

Godob-reeb: dulmiga lagu hayay hablaha Soomaaliyeed ee reer miyiga ahaa, waxaa ugusii xumaa dulmiga loo yaqaano "godob reeb." Godob reerbta aan sharaxo.

Nin ayaa wuxuu dilay nin kale. Marka uu ninku wax dilo, waxaa caado ah in reerka uu ka dhashay ninka wax dilay ay mag siiyaan reerka wax laga dilay. Mar-marka qaarkood waxaa dhici jirtay in reerka wax laga dilay ay ku samri waayaan xoolaha magta ah ee la siiyey. Sidaa awgeed, si reerka loo samir-siiyo, oo niyada loogu dejiyo, waxaa laysugu dari jiray xoolaha magta ah iyo gabadh la dhalatay ninka wax dilay. Gabadhaas waxaa la siinayaa reerkii wax laga dilay si ay u samraan, oo ay u saamaxaan ninkii wax dilay. Taas waxaa kuu cadaynaysa, maah-maahda Soomaaliyeed ee tidhaahda: "*Meel xinjiri-taal, xabna ha-yaal*." Maah-maahdan micnaheedu waxaa weeye: meel dhiig ku daatay (wal lagu dilay), dhiig kalena ha yaalo—gabadhi haku umusho.

Ninkii wax dilay, isaga wax ciqaab ah oo la marinayaa ma jirto. Hadaba, waxaa is waydiin-leh: maadaama aanay innantu wax danbi ah samaynin, maxaa loo siinayaa reerkii wax laga dilay? Jawaabtu waxaa weeye: dumarku may lahayn wax xaquuq ah; loomana arkaynin inay leeyihiin qiimaha ragu leeyahay oo kale. Waa dulmi iyo tacaddi halkii ugu saraysay.

Dhaawaca hablaha: tacadiyada kale waxaa ka mid ahaa, hadii uu nin gabadh nabar ku dhufto, oo uu dhaawaco, ninkaas gabadha dhaawacay waxaa lagu xukumi jiray inuu guursado gabadhaas uu dhaawacay. Ninkii dhaawaca

gaystay ee ay ahayd in la ciqaabo, lama ciqaabayo. Waxaaba loogu abaal gudayaa inuu gabadhii guursado.

Gabadhu ma rabto ninka, mana doonayso inay guursato. Laakiin, iyadu ma'ala go'aanka guurkeeda. Go'aanka waxaa iska leh aabaheed iyo raga ay la dhalatay. Waa halka ay Soomaalidu ku maah-maahdo: "*quruxdeeda wax u dhime, qaddaadkuu u ritaa*." Dhaqankaas ayaa ka jiray miyiga (baadiyaha). Dhaqankii noocaas ahaa ee miyiga ka jiray, ayay Soomaalidii ulasoo guurtay magaaladii.

Qoyska Soomaaliyeed

Tacaddiga iyo yasidda haweenka Soomaaliyeed wuxuu bilaabmaa marka ugu horaysa ee uu qoys Soomaaliyeed dhismo. Marka uu qoysku dhismaayo, hooyada iyo aabuhu waxay aamin-sanyihiin in wiilashu ay ka wanaagsan yihiin hablaha. Waa dhaqankii miyiga ee aynu kor-kusoo-xusnay. Sidaa awgeed, labadda waalid waxay ku hamiyaan inay dhalaan inamo tirro-badan iyo hablo tirro-yar.

Hadii ay hooyaddu dhasho dhowr hablood oo isku-xiga, qiimaheeddu hoos ayuu u dhacaa. Hooyaddu way murugootaa; waxaanay aad u jeclaysataa inay dhasho wiillal, si uu qiimaheedu sare ugu kaco. Hadii hooyaddu ay wiil dhaliwaydo, ninkeedda iyo reerkiisuba waxay dareemaan "niyad-jab." Aabuhu wuxuu noqdaa nin aan qiimo-badan bulshadda ku dhex-lahayn. Sidaa awgeed, aabuhu wuxuu go'aansadaa—reerkiisuna kula taliyaan—inuu guursaddo gabadh labaad, si uu u-dhallo inamo. Hadiise ay hooyaddu dhasho dhowr wiil oo isku-xiga, qiimaheeddu sare ayuu u kacaa. Ninkeedda iyo reerkiisuba way ku "farxaan" waanay ku "faanaan;" waxaanu noqdaa nin bulshada qiimo ku leh.

Dhaqankan Soomaaliyeed wuxuu inoo cadaynayaa: in inta aanay caruurtuba dhalanin uu inanku qiime sare ku

leeyahay bulshadda; halka ay inantuna qiime-hoose ku leedahay bulshada.

Hab-u-fikirka noocan ah waxaa kuusii cadaynaya ereyga la-yidhaahdo "maddi" ama "maddiga." Ereyga "maddi" micnihiisu waxaa weeye: inanka la dhasha hablo keliya, ee aan la-dhalanin wax inamo ah. Waa wiil aan la-dhalanin wax rag ah. Wiilkaas, reerkiisa iyo bulshaduba waxay u arkaan inuu yahay wiil cidla-joog ah, oo aan haysanin wax garab-iyo-gaashaan ah. Reerkiisu waxay ku deddaalaan inay si dhakhso ah ugu guuriyaan, si uu u dhalo inamo badan oo uu weheshaddo. Laakiinse, inanta la dhalata rag tirro-badani, iyaddu malaha magac u dhigma "maddigga" oo kale. Sababtoo ah, innanta la dhalata rag tirro-badan waxaa loo arkaa inay tahay gabadh nasiib-badan, oo garab-iyo-gaashaan haysta.

Tanninna waxay inoo-sii cadaynaysaa qiimaha-sarre ee inamadu ku leeyihiin dhaqanka Soomaalidda iyo qiime-la'aanta ay habluhu ku leeyihiin.

Nolosha Guriga Magaalada

Gurigga Soomaaliyeed waa meesha ugu-horaysa ee ay kasoo bilaabanto tacaddigga, yasidda, hoos-u-dhiga, iyo cadaadinta haweenku. Marka ay innantu yar-tahay, waxaa lagu-abba'biyaa, oo la-aaminsiiyaa, inay ka hoosayso innanka. Gurigii waalid-kood—ee lagu kobcin-lahaa aqoon-tooda, garaad-kooda, han-kooda, iyo dadnimadooda—ayaa noqday meesha ugu-horeysa ee haweenka lagu gar-daadiyo, laguna aaminsiiyo, inay yihiin dad aan caqli iyo garasho midna lahayn, oo ragga ka-hooseeya.

Marka ilmaha yar tacaddiga noocan ah lagu sameeyo, Culimida Cilmi Nasfigu (psychology iyo psychiatry), waxay u yaqaanaan psychological abuse—oo micnaheedu yahay,

"xad-gudub maskaxeed." Xad-gudubka maxkaxduna waa danbi aad u wayn. Dunida horuumartay, marka uu qofku sameeyo xad-gudub maxkaxeed, wuxuu la kulmaa ciqaab aad u saraysa. Waa maxay xad-gudub maskaxeed?

Xad-gudub maskaxeedku waxaa weeye: tacaddi uu qof ku sameeyo qof kale, kaas oo sababa inuu qofka ku abuuro cabsi, wer-wer, niyad-jab, han-jab, dhimir, iwm. Sida caaddada ah, qofka tacaddiga samaynayaa waa qof ka awood sareeya qofka uu tacaddiga ku samaynayo. Tusaale ahaan, waalidku wuu ka awood sareeyaa caruurtiisa uu korinayo. Sidaa awgeed, marka uu waalidku tacaddiga noocaas ah ku sameeyo ubadkiisa, waa danbi aad u wayn, oo uu waalidku la kulmo ciqaab aad u saraysa.

Xad-gudubka maskaxda waxaa kale oo ka mid ah in qofka awooda lihi uu qofka kale ugu hanjabo inuu garaacayo si uu u cabsi geliyo (ama uu gacan u qaado si uu u cabsi geliyo). Qofka marka la cabsi geliyo, ee uu og-yahay in la garaacayo hadii uu yeeliwaayo wixii la faray, waxaa qofkaa ku dhaca dhaawac maskaxeed.

Hadaba, si innanta loo-aminsiiyo inay ka hoosayso innamadda, waxaa loo-maraa dhowr dariiqo.

Dariiqa 1^{aad} *– Nafsiyyan* (*psychological*): Dariiqa koowaad —oo ah dariiqa ugu raad-reebka badan, uguna khatarta badan—waxaa weeye in innanta si-qoto-dheer, oo nafsiyyan ah (psychological), loo-aamin-siiyo inay ka-hoosayso inamadda. Marka ay innantu aad u yartahay ayaa lagu bilaabaa in laga-dhaadhiciyo inay si walba uga hoosayso inamadda.

Culimadda daraasaysa dariiqa, ama habka, wax-loo-baro bani'aadku, waxay baadhitaan aad u qoto-dheer, oo cilmiyeysan, ku ogaadeen in wakhatigga ugu fudud ee qofka bani'aadamka ah wax laga-dhaadhicin-karaa ay tahay marka uu aadka u yar-yahay. Marka uu ilmuhu yar-yahay, ee

garaadkiisa la dhisaayo, waxay ugu yeedhaan: "*tabula rasa*" —oo micnaheedu yahay "weel madhan" ama "sabuurad aanay waxba ku qornayn, oo wixii la-doono lagu qori-karo." Marka uu ilmaha yari marxaladdan taagan-yahay, aad ayay u fududahay in laga dhaadhiciyo wax walba.

Professor B. F. Skinner—oo ahaa psychologist wax ka-dhiga Jaamacada Harvard ee dalka Maraykanka—ayaa yidhi:

> Waxaad ii keentaan dhowr caruura oo caafimaad-qabta, oo aan anigu koriyo. Waxaan kuugu balan-qaadayaa in aan mid walba ka dhigo wixii aan anigu doonaayo inuu noqdo—dhakhtar, gar-yaqaan [looyar], far-shaxan, baayac-mushtar, dabaaakh [cunto-kariye]; ama aan ka dhigo, dawarsadde ama tuug—caqliga ama hibadda uu doono hakusoo dhasho; awooda doono ha yeesho; ciduu doono hakasoo jeedo (Skinner, 1974).

Qoraalkaas Professor Skinner, wuxuu inoo cadeeyey in ilmaha yar laga dhaadhicin-karo, oo laga-dhigi-karo, kolba qofka la-doonaayo inuu noqdo mustaqbalka.

Buugga *The Whole-brain Child: 12 Revolutionary Strategies to Nurture Your Child's Developing Mind* ee uu qoray Daniel J. Siegel—oo ah child psychiatrist—wuxuu si cilmiyeysan, oo qoto-dheer, ugu sharaxay in marka ay caruurtu yar-yar-yihiin ay tahay wakhtiga ilmaha yar laga dhaadhicin karo wax kasta oo uu waalidku rabo inuu ka dhaadhiciyo. "Xidhi-idhka dhex-mara [waalidka iyo ilmuhu] wuxuu raad-reeb ku yeeshaa garaadka ilmaha . . . raad-reebkaasina kama hadho ilamaha yar, oo wuxuu maskaxdiisa ku jiraa ilaa iyo inta uu nool-yahay" (Siegel, 2012). Waa wakhtiga ay caruurtu ugu nugushahay.

Wakhtiggan, caruurtu waxay aaminaan, oo ay

rumaystaan, kolba cida gacanta ku-haysa daryeelkooda. Sida caaddada ahna, dadka ugu horeeya ee ay caruurtu aaminto, ee ay wax-ka-barataa, waa labadda waalid—aabaha iyo hooyadda. Waalidkuna waa dadka ugu horeeya ee raadka ugu badan ku yeesha hab-u-fikirka, garaadka, shaqsiyadda, iyo kalsoonidda ilmaha yar.

Marka ay innanta Soomaaliyeed marayso marxaladdaas ay yar-tahay, waxaa loo adeeg-sadaa, oo loo-maraa, dhowr dariiqo oo kala-duwan si looga dhaadhiciyo inay ka-hoosayso inamadda. Kow, talaabadda ugu horaysa ee uu waalidku ku niyad-jabiyo innanta yari waxaa weeye: waxaa la weerraraa—oo la boqno-gooyaa—garaadka, hab-u-fikirka, iyo hanka innanta. Waxaa si joogto ah loogu yidhaahdaa: "Naa aamus, innan ayaad tahaye!" Innanta in la-aamusiiyaa waxay kaalin-wayn ka qaadataa boqno-goynta garaadka iyo hanka innanta.

Waa ereyo aannan soo koobi-karin raadka taban ee ay ku-yeeshaan garaadka iyo hanka innanta. Ereyaddan ujeedaddoodu waxaa weeye in la-cabudhiyo, aamusiiyo, af-qabto, oo loo-diido inay innantu soo gudbiso cabashadeeda, fikirkeeda, iyo doodeeda. Waa ereyo innanta u sheegaya in aanu hadalkeedu wax-qiimo ah, ama wax micno ah, lahayn. Mar hadii aanu hadalkeedu wax qiimo ah, ama micno ah lahayna, waxaa haboon inay iska aamusto.

Bani'aadamku wuxuu xayawaanka kaga-duwan-yahay mid kaliya oo ah: *garaadka*. Garaadkana waxaynu ku cabirnaa hadalka. Inuu bani'aadamku hadlana waxaa sababa hab-u-fikirkiisa oo ka-sareeya ka xayawaanka. Wax kasta oo kale bani'aadamka iyo xayawaanku waa iskaga-mid: labaduba waxbay cunaan; waxbay cabaan; way tarmaan (dhalaan); way seexdaan; way baqaan; way murugoodaan; way farxaan; way cibaadaystaan; iwm. Waa

sababta aynu xayawaanka ugu tilmaano, "ma-yeedhaan;" oo micnihiisu yahay, "ma hadle."

Hadaba, marka qofka bani'aadamka ah loo-diido (ama la-xaddiddo) inuu fikirkiisa si xor ah u dhiibto (inuu hadlo), waxaa la-dhaawacayaa bani'aadam nimadiisa. Waayo? Wixii keli ahaa ee uu xayawaanka mayeedhaanka ah kaga-duwanaa—oo ah hadalka—ayaa loo diiday inuu isticmaalo. Taas micnaheedu maaha in innanta loo-diidayo inay hadashaba. Laakiin, waxaa innanta loo xaddiddayaa waxa ay odhan-karto iyo waxa aanay odhan-karin; hadalkeedii ayaa la-xaddiddayaa. Mar hadii qofka hadalkiisa la-xaddid-dana, waxaa nusqaamaysa dadnimaddiisa. Mar hadii qofka dadnimaddiisu nusqaantana, wuxuu noqonayaa qof bani'aadamkii kalena ka hooseeya, xayawaankana ka yara sareeya.

Marka ay innantu dareento cadaalad-darrada lagu hayo, ee ay jeclaysato inay ka-hadasho, ama ka-dooddo, ayaa loo-isticmalaa, "Naa aamus, innan ayaad tahaye!" si loo-aamusi-iyo. Mar kaliya maqli-maysid iyadoo ay waalidku inanka ku leeyihiin, "Waar aamus inan ayaad tahaye!"

Dadka qaarkood ayaa arinkan dood ka keeni-kara. Waxay ku doodi-karaan siddan: qofka bani'aadamka ahi hadii uu ku-hadlo wixii uu doono, oo aan hadalkiisa la-xaddiddin, miyaanay khatar u keeni-karin, ama aanay u horseedi-karin inuu ku hadlo af-xumo, cay, iwm.? Waa dood xaqiiq ku salaysan. Laakiin, anigu waxaan ku doodayaa in sida innanta hadalkeeda loo-xaddiddayo innankana loo-xaddiddo hadalkiisa; taas waxaan uga jeedaa, si isku-mida haloo xaddiddo hadalka innanta iyo inanka.

Laba, hadii innantu ka gill-gillato, oo ay hadalka joojin-waydo, waxa loosoo xigtaa "murti" Soomaaliyeed, si loo-tuso in ay xigmaddi ku jirto aamusnaanta. Xigmad ku-sheega innanta loo-soo-xigto waxaa ka-mid-ah: "Innani waa

tii af-gaaban;" "Gaa-gaabso innan-baad-tahaye!" "Raga dhexdooda lagama-hadlo!" iwm.

Saddex, waxaa kale oo ay innantu si-ficil ah u aragtaa maalin-walba habka ay u wada-dhaqmaan waalidkeedu. Innantu waxay aragtaa in aanay hooyaddeed wax tallo ah ku lahayn qoyska. Talooyinka ugu waaweyn oo dhan waxaa gaadha aabaha. Kaalinta hooyadu waxay ku egtahay oo keliya korinta ubadka iyo daryeelidda guriga.

Aabuhu marka uu go'aanka gaadho, hooyadu way ku khasbantay inay go'aankaas aabaha raacdo—ama ha fiicnaado ama ha xumaado. Innantu waxay mar walba maqashaa, hooyadeed oo ku leh aabaheed, "dee saw adigu ninkii reerka ma tihid"—taas oo micnaheedu yahay, "saw adigu taliyihii reerka ma tihid." Waxaa kale oo ay mar walba maqashaa, aabaha oo ku leh hooyada, "naa gurigu saw gurigaygii ma'aha"—taas oo micnaheedu yahay, "saw anigu guriga kama taliyo." Waxaas oo dhami waxay innanta sii aaminsiiyaan in ay kaalinta haweenku ka hoosayso kaalinta raga.

Afar, dariiqa ugu danbeeyaa waxaa weeye: hadii ay innantu intaas oo dhan diido, si toos ah ayaa loo-ciqaabaa: waa la-caayaa; waa la-yasaa; ama waaba la-garaacaa (la-karbaashaa), ilaa ay ogolaato, oo ay aqbasho, yasidda iyo tacaddiga lagu-hayo.

Abaal-gudka tacaddiga: marka qofka lagu tacaddiyayaa uu aqbalo tacaddiga, waxaa la siiyaa abaal-gud. Abaal-gudkaasi wuxuu noqdaa in qofka la amaano, oo laga dhigo qof wanaagsan. Sidaa awgeed, innanta aamusta ee aan fikirkeeda dhiibanin, waxay noqotaa innan la-amaano oo sharaf iyo karaamo ku-leh qoyskeeda. Waxay noqotaa innan deriskeeda iyo tolkeeduba amaanaan. Taasina waxay innanta u fududaysaa inay hesho rag tirro-badan oo guur usoo ban-dhigga. Waxay noqotay innan guulaysatay.

Innantu waxaas oo "wanaag" iyo "faa'iiddo" ah waxay ku kasbatay inay aqbashay (oo ficil, af-iyo-idinba, ku muujisay) inay innamadda si-walba uga-hoosayso.

Taas waxaa kuu cadaynaya, derejooyinka ay raga Soomaaliyeed u samaysteen haweenka. Gabadh kasta oo aqbasha tacaddiga lagu hayo, magacyo "amaan" ah ayaa loola baxay. Magacyadaasina way kala derejo sareeyaan. Waxaa ugu derajo saraysa gabadha aqbasha tacaddigaas lagu hayo dhamaanteed, waxaana ugu hoosaysa gabadha aan wada aqbalin tacaddiga. Derejooyinkaas aan u kala sheego siday u kala sareeyaan: qarriyad, dhabeel, marwo, baggaggi, baali, basari; iwm.

Hadii aad si qoto-dheer ugu fiirsato gabadha loo yaqaano "qarriyadda," ee ugu saraysa, waxaad arkaysaa inay gabadhaasi si buuxda u aqbashay tacaddigii lagu hayey. Dhaqankeeda oo dhan waxaa ka muuqda habrasho iyo inay raga u foorarsato, oo aanay hadal kusoo celinin. Waa derejooyin ay ragu u samaysteen dumarka si ay tacaddiga u aqbalsiiyaan.

Dariiqa 2^{aad} — *Adeegto*: dariiqa labaad waxaa weeye: marka innanta la-weerraro—ee la boqon-gooyo—garaadkeeda, hab-u-fikirkeeda, iyo hankeeda (ee lagu guulaysto in maskaxda laga-gumaysto), waxaa hadana si ficil ah loogu tababaraa inay adeegto u noqoto raga. Dariiqan labaad, waa dariiq ka-fudud dariiqa koowaad. Waayo? Dariiqa koowaad waxaa lagu-guulaystay in innanta la niyad-jabiyo, la-yasso, hankeediina dhulka lagu-jiido. Mar hadii qofka bani'aadamka ah hankiisa la-baa'biiyana, aad ayay u fududahay in la-maamulo, oo dhinicii la-doono loo-hago.

Qofka mar hadii lagu sameeyo tacaddigaas maskaxda ah, waxaa ku dhaca wax loo yaqaano *Stockholm Syndrome*. *Stockhold Syndrome* waxaa weeye qaab uu qofka lagu tacaddiyaa naftiisa ku qaboojiyo si aanu u dareemin xanuunka

nafsiyanka ah ee kasoo gaadhaya tacaddiga. Si uu taas ugu guulaysto, wuxuu qofka lagu tacaddiyaa xidhiidh nafsiyan ah la yeeshaa qofka ku tacaddiyaya. Taasina waxay qofka lagu tacaddiyayo ka indho-tirtaa inuu dareemo tacaddiga lagu hayo. Qofka ku tacaddiyaya ayuu u arkaa inuu yahay qof nasteexo u ah oo u wanaagsan. Waa qof jabay oo laga adkaaday, oo is dhiibay. Waa xaalada dhabta ah ee ay ku sugan yihiin habalaha Soomaaliyeed badankoodu.

Marka ay innantu guriga waalidkeed joogto, waxay adeegto u tahay inamadda ay la-dhalatay; marka ay gurigga waalikeed ka baxdana, waxay adeegto u tahay ninkeeda. Ficilkan lagu-tababarayo inay innantu noqoto adeegto, waxaa bar-bar socda hadalo looga-dhigayo inay yihiin "xigmad," oo lagu yasayo innanta; sida, maah-maahaha, sheekooyinka, suugaanta, iwm.

Hadii aynu tusaale usoo qaadano mid-ka-mid ah maah-maahaha aadka u khariban ee hablaha lagu-yaso, waxaa ka-mid-ah: "*Gabadhi ama guri hakaaga-jiro ama god*." Waxaa looga-jeedaa: gabadhu ama gurigga aabaheed ha joogto; ama guriga ninkeeda ha joogto; ama xabaal haku-jiro. Maah-maahdani waxay innanta u sheegaysaa in aanay ahayn qof dhamays-tirran oo keligeed meel istaagi-karta, ama wax-qabsan-karta.

Si aad u fahanto dariiqan adeegtadda, waxaan tusaale usoo-qaadanayaa gurri Soomaaliyeed. Guriggan aynu tusaalaha usoo qaadanaynaa wuxuu sawir-guud ka bixinayaa guud-ahaan guryaha Soomaaliyadda. Guriggani wuxuu ka kooban-yahay: aabe, hooyo, iyo laba caruura oo ay dhaleen—wiil iyo gabadh. Innantu waa saddex-iyo-toban-jir (13-jir); innankuna waa laba-iyo-toban-jir (12-jir). Labadubba waa arday dhigata dugsigga; waxaana laga-sugayaa inay ku deddaalaan, oo ay wakhti-geliyaan diyaarinta iyo ka-shaqanta caasharadda iskuulka.

Marka uu waagu beryo, innantu way ka hor toostaa innanka; halka uu innankuna hurddada kusii raago. Sababta ay innantu uga hor toosayso innanka waxaa weeye: si ay innantu ugu adeegto, oo shaqaale ugu noqoto, innanka. Makra uu innanku tooso, wuu maydhaa; wuxuu cunaa quraac loosii diyaariyey; wuxuuna xidhaa maryo loosii maydhay oo loosii kaawiyaddeeyey. Ka dib, iskuulka ayuu tagaa. Laakiin, marka ay innantu toosto, waxay diyaarisaa quraacda reerka oo dhan; waxay kaawiyadaysaa maryaha innanka hurda; waxay hagaajisaa (oo goggoshaa) qolka uu innanku ka toosay. Iyadoo waxaas oo howl ah qabatay, ayay innantu isu diyaarisaa inay iskuulka tagto.

Marka iskuulka lagasoo noqdo, innanku wuxuu iska-bixiyaa maryihii uu iskuulka ku tagay; wuxuu cunaa qado loosii-diyaariyey; wuxuuna seexdaa qolkiisii ay innantu usii-diyaaarisay ee ay usii-goggoshay. Laakiinse, marka ay innantu iskuulka kasoo-noqoto, waxay bilowdaa inay shaqadda gurigga qabato. Waxay xashaa weelkii laguqaadeeyey; waxay masaxdaa daaradda gurigga; waxay nadiifisaa madbakha (jikadda). Ka dibna, hadii ay hesho wakhti ay nasato, way seexataa. Maal-maha qaarkood waxay innantu maydhaa maryaha reerka oo dhan.

Marka hurdada casarka lagasoo tooso, innantu waxay bilowdaa inay kariso shaaha loo-yaqaano casariyaha—waa shaaha la-cabo marka lagasoo-tooso hurdadda salaadda casar. Laakiin, innanku markuu soo-tooso, wuxuu cabaa shaaha ay u karisay innantu. Ka dibna, gurigga wuu ka-baxaa—suuqa ayuu soo-tax-taxaashaa; ama casharadda iskuulka ayuu diyaariyaa; ama wuxuu asxaabtiisa lasoo ciyaaraa kubadda cagta.

Inta uu innanku ku maqan-yahay suuqa, ama uu casharadiisa diyaarinayo, ama uu kubada soo-ciyaarayo, innantu waxay hagaajisaa gurigga dhamaantii. Waxay

hagaajisaa, oo goggoshaa, qollalka gurigga; waxay masaxdaa qollalka; waxaanay qabataa howl-kasta oo gurigga laga-qabanayo.

Marka laagasoo baxo salaada maqrib ama cishaha, innaku gurigga ayuu yimaadaa, waxaanu bilaabaa inuu diyaariyo, oo uu-dhigto, casharaddii iskuulka. Laakiinse, innantu waxay u-tafo-xaydataa inay diyaariso cashada reerka oo dhan (hadii loo baahdo in lasoo-iibiyo raashinka cashada, innanta ayaa soo-iibisa). Ka dib, marka ay innantu cashadda diyaariso, waxay bilowdaa inay qof walba cashadiisa weel ugu-riddo.

Marka uu innanku dhamaysto cashaddii ay innantu u diyaarisay, weelkii uu ku casheeyey wuxuu kaga-kacaa miiska, ama meeshii uu ku-casheeyey. Ka dibna, wuxuu dib ugu noqda, oo uu meeshiisii kasii wataa casharaddii iskuulka. Laakiin, innantu waxay bilowdaa inay soo urrurriso weelkii lagu-casheeyey oo dhan. Ka dibna, waxay bilowdaa inay xasho weelka, mad-bakhana ay nadiifiso. Intaa ka dib, innantu waxay bilowdaa inay qooshto, oo ay garaacdo, qoosh-kii barrito laga samayn lahaa laxooxda (canjeeradda).

Marka ay innantu qooshayso "qooshka," wuxuu qooshku kaga duul-duulaa jidhkeeda, timaheeda, iyo maraha oo dhan. Waxay innantu kala kulantaa dhib baddan oo ku kalifta inay timaheeda maydho muddo baddan si ay isaga nadiifiso qooshku ku duul-duulay. Innantu waxay howshaas dhamaysaa wakhtgi danbe oo laysu-diyaarinayo hurdadda habeenkii. Sidaa awgeed, innantu ma hesho wakhti fiican, oo ku-filan, inay diyaariso casharaddii iskuulka.

Maadaama aanay innantu helin wakhti fiican oo ay ku-diyaariso casharaddii iskuulka, waxaa ku adkaata inay ku guulaysato wax-barashadda. Waa waxyaabaha sababta u ah in ay yaraadaan hablaha Soomaaliyeed ee cilmiga lihi.

Marka ay innantu ka cabato howsha badan ee ka mashquulisay wax-barashadii, waxaa lagu yidhaahdaa, "kolay gabadh ayaad tahay oo guri nin ayaad ku danbaynaysaaye, waxba haysku dhibin wax-barashada." Dhawaan ayay raga Soomaaliyeed sameeyeen maah-maah ay hablaha ku niyadjabinayaan si aanay wax u baranin: "Borofesoor naagood, babbis-baa u danbeeya." Hadalada noocaas ah ayaa bulshada looga dhigayaa inay yihiin "xigmad."

Dariiqa 3^{aad} *— Malcaamadda/Iskuulka*: labadii dariiqo ee hore—*Dariiqa 1^{aad}: Nafsiyyan (psychological)* iyo *Dariiqa 2^{aad}: Adeegto*—waa laba dariiqo oo ku koobnaa guriga ay habluhu ku koraan. Labadaas dariiqo ee hore waxaa isticmaala innanta aabaheed, hooyadeed, iyo walaalaheed si ay u boqno-gooyaan inanta hankeeda, dadnimadeeda, iyo garaadkeeda.

Dariiqan 3^{aad} waxaa la isticmaalaa marka ay innantu bilowdo dhex-galka bulshada. Marka ay innantu guriga kasoo baxdo, ee ay dhex-gasho bulshadda, waxaa loo isticmaalaa dariiqooyin kale oo lagu xoojinayo, laguna badhitaarayo, tacaddigii ay ku hayeen waalidkeed iyo walaalaheed. Dhex-galka bulshadda ee ugu horeeya ee ay innantu samaysaa waxaa weeye marka ay bilowdo maclaamadda iyo/ama iskuulka. Malcaamadda iyo iskuulka waxay kula kulmaan macalimiin iyo arday.

Sida caaddada ah, malcaamadda iyo iskuulku waa meesha lagu kobciyo cilmiga, garaadka, hanka, iyo shakhsiyadda ubadka yar-yar. Ubadka yar-yari—khaasatan habluhu—waxay ku hamiyaan, oo ay aaminsan-yihiin, inay malcaamaddaha iyo iskuuladda kaasoo baran-doonaan cilmi ay kaga-baxaan tacaddiga ay ku hayaan waalidkood iyo walaalahood. Ayaan-darro'se, malcaamaddihii iyo iskuuladdii ayaa noqday meel lagu boqono-gooyo hanka, aqoonta, garaadka, iyo shakhsiyadda hablaha.

Waxaa innanta laga dhaadhiciyaa inay ka hoosayso inamada. Waayo? Macalimiinta dhiga malcaamadaha iyo iskuuladu, waa rag iyo dumar kusoo koray gurigaas Soomaaliyeed ee aynu kor-kusoo sharaxnay. Macalimiintaasi waxay aamin-sanyihiin inay habluhu ka caqli iyo garaad liitaan raga. Sidaa awgeed, waxay hablaha ula dhaqmaan si ka hoosaysa raga.

Iskuulada waxaa loogu dhigaa casharo Suugaan ah. Sugaantaasna waxaa ka buuxa amaanta raga iyo af-lagaadaynta haweenka. Dadka Soomaalida ahna waxaa la aamin-siiyey inay suugaantu tahay "xigmad"—waa been aanay waxba ka jirin (fadlan akhri cutubka *Dhaqanka Soomaalida iyo Xigmadda*). Malcaamadahana waxaa dhiga niman macalimiin ah oo aan diinta si fiican u fahansanayn. Sidaa awgeed, waxay hablaha si khaldan uga dhaadhiciyaan in ay diinteena Islaamka ee cadaalada ku salaysani hablaha ka hoosaysiiso raga—waana fikir khaldan oo aan sal-iyo-raad-toona lahayn.

Hablihii marka ay isu raacaan waalikood oo ku tacaddiyey iyo goobihii wax-barashada oo ku tacaddiyay, waxay noqdeen dad is dhiibay oo aaminay inay raga ka hooseeyaan.

Dariiqa 4^{aad} *— Bulshadda*: marka innanta hankeedda iyo dadnimadeedda lagusoo boqno-gooyo guriga waalidkeed iyo malcaamadda/iskuulka, waxaa kale oo tacaddiga sii xoojiya, oo ka qayb-qaata bulshadda inteeda kale. Innantu si joogto ah ayay bulshada uga maqashaa—ama uga aragtaa—in ay haweenku si walba ugu hooseeyaan raga.

Bulshadda cid walba oo ay la kulantaa, waxay aamin-sanyihiin, oo ay innanta si joogto ah ugu sheegaan, inay ka hoosayso raga. Marka qof kasta oo bulshadda ka-mid-ihi uu aaminsanyahay in ay habluhu raga ka hooseeyaan, innantu waxay aaminaysaa in ay run, ama xaqiiq, tahay in habluhu

ay raga ka hooseeyaan. Sababtoo ah, dadka oo dhan ayaa aminsan, dadkuna iskumay raaceen arin been ah.

Joseph Boebbles—Wasiirkii Boro-boggaanddadda ee dowladii Jarmalka ee uu hogaaminaayey Hitler—ayaa yidhi: "Hadii aad sheegto been aad u wayn, oo aad ku cel-celiso sheegitaan-keeda, waxaa xaqiiqo ah in ay bulshadu aaminayso." Markii beentaas lagu cel-celiyey, ayay dadkii oo dhami aamineen.

Dariiqa 5^{aad} — *Suugaanta*: dariiqan ugu danbeeyaa wuxuu tacaddiga hablaha lagu hayo ka dhigaa inuu yahay "xigmad." Suugaanta iyo maah-maahuhu waxay haweenka ka dhaa-dhiciyaan in aan wax tacaddi ah lagu haynin; iyagoo tacaddiga uga dhigaya xigmad lagasoo min-guuriyey garaadkii iyo khibraddii Soomaalidda. Si ay haweenku u aqbalaan tacaddiga, ayaa waxaa loo samaystay maah-maaho, gabayo, geerraarro, iyo heeso tacaddigii ka dhigaya "xigmad." Weliba maah-maahaha ayaa aad uga awood badan suugaanta kale. Waayo?

Suugaanta—tixaha—la tiriyo, dadku ma rumaystaan dhamaantood. Laakiinse, Soomaalida waxa la aamin-siiyey in maah-maahaha oo dhami ay ku salaysan-yihiin xaqiiq iyo run. Taas waxaa kuu cadaynaya, maah-maahda Soomaaliyeed ee tidhaahda: "Soomaalidu been way sheegtaa; been-se ma maah-maahdo." Maah-maahdan lafteeda ayaa been ah, oo aan sal-iyo-raadtoona lahay. Soomaalidu beena way sheegaa; beena way maah-maahdaa. Doodaas waxaan kuugu cadaynayaa, halkan hoose.

Waxaan soo qaadanayaa dhowr maah-maahood oo haweenku leeyihiin. Ka dib, maah-maah walba waan sharaxayaa, oo waan fur-furiyaa. Markaan fur-furo ayaan kuu cadaynayaa inay dhamaantood been ku salaysan-yihiin.

1. "*Nin habari dhashay, hal ma seegi waayo*:" maah-

maahdan micnaheedu waxaa weeye: ninku khalad, ama gef, wuu samayn-karaa maadaama ay habari dhashay. Waxay uga jeedaan, maadaama dumarka garaadkoodu, iyo garashadoodu, uu ka hooseeya garaadka raga, ninka ay dhalaan waxay qaadsiiyaan garaad-yaraantaas, oo mar-marka qaarkood khalad wuu ku dhacayaa. Sidaa awgeed, khaladka iyo gefefka uu ninku samaynayo, waxaa sabab u ah "habar ayaa dhashay." Maah-maahdani fariintan ay xambaarsan-tay waa been cadaan ah. Waayo? Khaladka iyo gefka bani'aadamka oo dhan ayaa sameeya. Illaahay oo kaliya ayuunbaan khaldamin. Sidaa awgeed, raga iyo dumarku way u siman-yihiin khaladka iyo gefefka. Mar hadii khaladka loo siman-yahay, maxay maah-maahdu tusaale ugusoo qaadatay "habarta" oo kaliya? Maxaa "odayga" looga reebay? Odaygu ma khaldamo miyaa? Maah-maahdani miyaanay kasoo hor-jeedin siduu Illaahay inoo sheegay, ee ahayd: in bani'aadamka oo dhami uu khaldamo.

2. "*Kal caano galeen, kas ma galo*:" micnaheedu waxaa weeye: ereyga "kal" micnihiisu waxaa weeye, "laabta" ama "shafka," ama "xabad-ka;" oo looga jeedo, "naasaha dumarka;" oo ku-yaala "laabtooda" ama "xabad-kooda." Naasahana dhediggana waxaa lagu yaqaanaa inay caano galaan. Ereyga kalena waxaa weeye: "kas" oo micnihiisu yahay, "caqli" ama "garaad." Sidaa awgeed, "*kal caano galeen*"—laabta (ama xabad-ka) ay caano galaan, "*kas ma-galo*"—caqli ma galo. Taas oo loola-jeedo, dumarku caqli ma-laha. Maah-maahdani fariinta ay hambaarsantay

waa been cadaan ah. Waayo? Illaahay wuxuu inoo sheegay inuu bani'aadamka karaameeyey. Karaamada uu Illaahay inoo sheego, ee aynu mayeedhaanka kaga duwanahayna, waxaa weeye: caqliga. Illaahay muu odhanin, raga oo kaliya ayaan karaameeyey. Illaahay wuxuu yidhi, bani'aadamka ayaan karaameeyey. Dumarkuna way ku jiraa. Maah-maahduna waxay tidhidi, "dumarku caqli malaha." Maah-maahdani miyaanay toos uga hor-imanin hadalkii Illaahay? Miyaanay beenin aayadii Quraan-ka ahayd? Intaas ayaa kuugu filan inay tahay maah-maah been ah.

3. "*Dumarku waa dhalaan raad wayn*:" micnaheedu waxaa weeye: caqliga (ama garaadka) dumarku wuxuu la-mid-yahay garaadka dhalaanka (ama caruurta). Waxa kaliya ee dumarka iyo caruurta lagu kala-garanayaa waxaa weeye: dumarka raadkooda ayaa ka weyn raadka caruurta. Laakiin, caqliga iyo hab-u-fikirka dumarku wuxuu la-mid-yahay caqliga iyo hab-u-fikirka dhalaanka, ama caruurta yar-yar. Ujeeddadda labada maah-maahood-ba waxaa weeye: dumarka caqligooda (ama garaad-koodu) aad ayuu u hooseeyaa. Maah-maahdani fariinta ay hambaarsantay waa been cadaan ah. Waayo? Illaahay wuxuu inoo sheegay inuu bani'aadamka karaameeyey. Karaamada uu Illaahay inoo sheego, ee aynu mayeedhaanka kaga duwanahayna, waxaa weeye: caqliga. Illaahay muu odhanin, raga oo kaliya ayaan karaameeyey. Illaahay wuxuu yidhi, bani'aadamka. Dumarkuna way ku jiraa. Maah-maahduna

waxay tidhidi, "dumarku caqli malaha." Maah-maahdani miyaanay toos uga hor-imanin hadalkii Illaahay? Miyaanay beenin aayadii Quraan-ka ahayd? Intaas ayaa kuugu filan inay tahay maah-maah been ah.

4. "*Kas dumar oo kadaloob rag kaaga danbeeyay, kaad ku ogaydba maaha*:" micnaheedu waxaa weeye: nin ayaa gabadh la sheekaysanaya. Ka dibna, gabadhii iyo ninkii ayaa guur ku heshiinaya. Heshiiskii oo meesha yaala, ayaa gabadhii la kulmaysaa nin kale. Ninkaas kale ayaa gabadha maskaxdeeda bedelaya, oo ay raacaysaa. Waa intaas micnuhu. Laakiin, waa maah-maah khaldan, oo tacaddi ku salaysan. Waayo? Raguba sidaas way sameeyaan. Tusaale ahaan, marka uu nin gabadh kula heshiiyo guur, hadii uu la kulmo gabadh kale oo uga wanaagsan, gabadhii hore iyo heshiiskiiba wuu ka baxaa, oo gabadha danbe ayuu guursadaa. Marka uu qofku guur-doonka yahay, xaq ayuu u leeyahay inuu doorto qofka uu nolosha la wadaagayo. Sidaa awgeed, hadii uu qof guur kula heshiiyo, hadana uu la kulmo qof kale oo kasii fiican, xaq ayuu u leeyahay inuu heshiiskii hore ka baxo, oo uu qofka danbe guursado. Raga iyo dumarkuba sidaa way sameeyaan. Hadaba waxaa is-weyndiin leh: mar hadii ay raga iyo dumarkuba sidaa sameeyaan, maxaa dumarka oo kaliya ay maah-maadu u xustay? Maxay raga uga tagtay? Maxay dumarka uga dhigaysaa in ay yihiin kuwa kaliya ee sidaa sameeya? Sababta ay maah-maahdu rag uga tagtay waxaa weeye: kow, maah-maahdan rag ayaa sameeyey; laba, ujeedadeedu waxaa weeye

in dumarka caqligooda la caayo, oo la tuso in maskaxdooda la bedeli karo; saddex, waxaa la doonayaa in gabadhu aanay heshiiska hore ka bixin; iwm. Waxaa halkaa ka cadaatay in ay tahay maah-maah aan xaqiiqda ku salaysnayn.

5. "*Meel xinjiri taal, xabna ha yaal*:" micnaheedu waxaa weeye: meel dhiig ku daatay (qof lagu dilay), dhiig kalena haku daato (gabadhi haku umusho). Maah-maahdan si aad u fahanto, waxaa muhiima in aad fahanto waxa loo yaqaano "godob-reeb." Si aad u fahanto godob-reebta, sheekadan fahan. Nin ayaa wuxuu dilay nin kale. Sida caaddada ah, marka uu ninku wax dilo, reerka uu ka dhashay ninka wax dilay waxay bixiyaan mag. Magtaa waxay siiyaan reerka wax laga dilay. Mar-marka qaarkood waxaa dhici jirtay (iminkana dhacda) in reerka wax laga dilay ay ku samri waayaan xoolaha magta ah ee la siiyey. Sidaa awgeed, si reerka loo samir-siiyo, oo niyada loogu dejiyo, waxaa laysugu dari jiray xoolaha magta ah iyo gabadh la dhalatay ninka wax dilay. Gabadhaas waxaa la siinayaa reerkii wax laga dilay si ay u samraan, oo ay u saamaxaan ninkii wax dilay. Ninkii wax dilay, isaga wax ciqaab ah oo la marinayaa ma jirto. Hadaba, waxaa is waydiin-leh: maadaama aanay innantu wax danbi ah samaynin, maxaa loo siinayaa reerkii wax laga dilay? Jawaabtu waxaa weeye: dumarku may lahayn wax xaquuq ah; loomana arkaynin inay leeyihiin qiimaha ragu leeyahay oo kale. Waa dulmi iyo tacaddi halkii ugu saraysay. Maah-maahdani miyaanay kasoo hor-jeedin diinta Islaamka, cadaalada, caqliga

suuban, cilmiga, dadnimada, iyo garashadaba? Taas ayaa kuu cadaynaysa inay tahay maah-maah khaldan, oo been iyo dulmi ku salaysan. "*Meel xinjiri taal, xinjiri ha taal*" ayaa kaga haboon; oo micnaheedu yahay: ninka wax dila, isagana hala dilo.

6. "*Haween u samir, ama ka samir*:" micnaheedu waxaa weeye: dhibaatada haweenka isaga dul-qaado ama hadii aanad u dul-qadaan karaynin, iskaga samir oo waxba hala wadaagin. Waa maah-maah tacaddi ah. Waayo? Dabeecadaha bani'aadamku waa isku mid. Noocyada dumarku leeyihiin oo dhan, raguna wuu leeyahay. Markaa dumarkuba raga way u samraan kuwooda xun. Sidaa awgeed, maxaa dumarka oo kaliya looga dhigayaa inay yihiin kuwa loo samrayo ama laga samrayo. Miyaanay kaga haboonayn: "dad u samir, ama ka samir" si ay cadaaladi uga muuqato. Maah-maahdani waa been cadaan ah, maadaama ay dumarkii oo kaliya weerartay oo ay ragii ka reebtay.
7. "*Naagi waa belaayo loo bahan yahay*:" Maxaa naagta kaligeed ka dhigay belaayo loo baahan-yahay? Waa maxay dhibta ay haweenku sameeyaan ee balaayada ka dhigay? Marka aad u fiirsato, raga ayaa ka balaayo badan dumarka xaqiiqdii. Ragu miyaanay ahayn kuwii wadanka bur-buriyey? Ragu miyaanay ahayn kuwii ubadkii rasaas la dhacay? Ragu miyaanay ahayn kuwa xoolaha ummadda booba markay masuuliyada dowlada qabtaan? Ragu miyaanay ahayn kuwa intay gabadh ka dhalaan caruur badan, isakaga taga ee gabadh kale guursada?

Iwm. Waxaynu isla qiraynaa in ragu ay ka balaayo badan-yihiin dumarka. Sidaa awgeed, maxaa dumarka dusha looga saarayaa belaayo ay ragu kaga badan-yihiin? Maah-maahdani waa been cadaan ah. Waxaa laga yaabaa in ay dadka qaarkood ku doodaan, belaayada waxaa looga jeedaa waxyaabaha ay dumarku sameeyaan, ee dumarka u gaarka ah. Taas waxaan kaga jawaabayaa, maah-maahdu may odhanin "belaayda" dumarka u gaarka ah. Maah-maahdu dumark ayay belaayo ku sheegtay. Sidaa awgeed, marka lays bar-bar dhigo raga iyo dumarka, raga ayaa belaayo ah xaqiiqdii. Belaayo aanay rag samayni aduunka kama dhacdo. Cida dunida rogtay, ee baa'biisay waa raga. Waa maxay belaayada ka wayn in wadan dham la dumiyo, oo ummad dhan wadankoodii laga qixiyaa?

8. "*Quruxdeeda wax-u-dhime, qadaadkuu u ritaa*:" maah-maahdani waxay dhiiri-gelinaysaa in hablaha la kufsado. Micnaheedu waxaa weeye: ninka dhaawac u gaysta gabadh (ama ha-kufsado ama nabar haku dhuftee), isaga ayuunbaa guursanaya. Maah-maahdani, waxay dhalinyarta u sheegaysaa in hadii ay gabadh kufsadaan aan wax ciqaab ah la-marsiinaynin. Dadka qaarkood ayaa ku dooda in ay maah-maahdani ka hadlayso gabadha la dhaawaco oo kaliya, ee aanay ka hadlaynin gabadha ka kufsado. Sharaxaadani way khaldantay. Maah-maahdani labadaba way ka hadlaysaa. Dadka sidaa ku doodayaa, waxay qarinayaan xaqiiqda dhabta ah ee ay maah-maahdani ku timi. Ciqaabta ugu weyn ee ninka wax kufsadaa ku dhacaysaa waxay noqonaysa

inuu guursado gabadhaas uu kufsaday. Taasi waxay keenaysaa in uu nin waliba kufsado gabadha uu ka hello, laakiin uu og-yahay in aanu si kale u heli-karin. Hadii aan si kale u dhigo: hadii uu ninku arko gabadh uu aad uga helay; laakiinse uu og-yahay in aanu heli-karin, dariiqa ugu fudud ee uu ku heli karo gabadhaasi waxaa weeye: inuu kufsado. Dariiqaasi waaa dariiqa cadaalad-darrada iyo dulmigga ah ee lagu-xallillo kufsigga dumarka, ee ay maah-maahdani ku salaysan tahay. Sida aynu ognahay, dhaqanka Soomaalida ninka gabadh kufsadda wax ciqaab ah oo la-mariyaa ma-jirto. Ninka gabadh kufsadda, lama-dillo; laguma-xukumo xabsi-daa'im; lama-ceebeeyo; lama-caayo; iwm. Hadaba, marka ninka wax-kufsadda aan wax ciqaab-ah la-marinin, saw dhiiri-galin-mayso inuu kufsiggu sii-bato ama sii-kordho? Saw dhalinyartu kuma-dhiiranayso inay wax-kufsaddaan, maadaama aanay ka-baqaynin wax ciqaab ah? Sidaa awgeed, maah-maahdani waxaabay dhiiri-gelinaysaa kufsiga.

9. "*Naagi ninkii xariir u gogla xansas-bay u goglaan; ninkii xansas u goglana, xariirbay u goglaan*:" maah-maahdan micnaheedu waxaa weeye: ninka dumarka wanaag u sameeya, dumarku waxay ugu abaal-gudaan inay xumeeyaan; ninkii dumarka xumaan ku sameeyana, dumarku way wanaajiyaan. Sidaa awgeed, hadii aad dumarka wanaajiso, iyaguna way ku xumaynayaan; hadiise aad dumarka xumaan ku samayso, iyaguna way ku wanaajinayaan. Maah-maahdani waxay dhalinarada iyo raga guud ahaanba baraysaa

inay dumarka xumaan ku sameeyaan. Hadii aad gabadha la sheekaysato iyo hadii ay tahay xaaskaagaba, labadaba marka aad xumayso, wanaag ayay kuu samaynayaan. Waa maah-maah aad u khaldan, oo aad u foolxun. Waayo? Maah-maahdani waxay kasoo hor-jeedaa diinteena suuban. Sidii uu Illaahay inoogu sheegay Quraan-ka iyo axaadiistii Nebiga (cs) ee ku saabsanaa sida dumarka loola dhaqmo, maah-maahdani way kasoo hor-jeesatay. Dhinaca kale, maah-maahdani waxay kasoo hor-jeedaa caqliga suuban. Waayo? Soomaalidu waxay tidhaahdaa, "aygu ma qaniino, gacanta wax siisa." Sida aynu ognahay, hadii aad ayga u naxariisato oo aad hilib iyo biyo siiso, aygaasi kuma qaniinayo. Wuxuu ogyahay in aad u naxariis badantay. Sidaa awgeed, aygaasi wuu kula saaxiibayaa. Noolaha oo dhamina waa sidaa. Hadii aad u naariisato, iyaguna way kuu naxariisanayaan. Markaa maah-maahdani waxay raga baraysaa in aygu waxa uu gartay, aanay gabadhu garanaynin. Aygu wuxuu gartay in gacanta wax siisa aanu qaniinin, laakiin gabadhu waxay dhibaysaa qofka wanaajiga. Miyaanay cay iyo af-laado ahayn? Markaa miyaanay maah-maahdani kasoo hor-jeesanin caqligii suubanaa.

10. "*Shar dumar, waa dabin shaydaan*:" micnaheedu waxaa weeye: sharka dumarku sameeyaa wuxuu la-mid-yahay sharka uu shaydaanku sameeyo. Taas waxaa looga jeedaa in sharka dumarku uu ka wayn-yahay sharka uu ragu sameeyo. Hadaba waxaa is-weydiin muddan: sharka uu dumarku sameeyo iyo sharka uu ragu sameeyo, keebaa

wayn? Raga iyo dumarka keebaa sharkoodu daran-yahay? Su'aashan jawabteedu way fudduday: RAGA. Waayo? Wadankeenii cidii dagaalka ka riday, ee ummada qixisay waa rag; dadka wax kufsadaa, waa rag; dadka wax dilaa, waa rag; dadka wax dhacaa, waa rag. Maah-maahdaas intaas ayaaba kaaga filan.

11. "*Gabadhi ama guri hakaaga jirto, ama god*:" micnaheedu waxaa weeye: gabadha nolosheedu waxaa weeye inay guriga joogto, ama god (xabaal) ku jirto. Waa inay joogtaa guriga aabaheed, ama guriga ninkeeda, ama ay god (xabaal) ku jirtaa. Maah-maahdani waa maah-maah khaldan oo aad u khariban. Kow, waxay kasoo hor-jeedaa diinteena suuban. Illaahay wuxuu Quraanka inoogu sheegay inuu bani'aadamka karaameeyey—oo uu caqli siiyey. Caqligaasna waxaa laynoo siiyey in aynu aduunka ku hor-u-marino, oo ku dhisno. Illaahay muu odhanin, raga oo kaliya ayaan karaameeyey. Illaahay rag iyo dumarba wuu karaameeyey. Sidaa awgeed, marka qofkii uu Illaahay karaameeyey, ee uu ugu talo-galay inuu dunidan dhiso, lagu yidhaahdo, "ama guri ku jir ama god," miyaanay kasoo hor-jeedsanin hadalkii Illaahay? Laba, dumarku waligoodka howsha bulshada qayb wayn ayay ka qaadan jireen. Maanta markaad tagto magaalooyinka Soomaalidu degto oo dhan, waxaad arkaysaa in dadka shaqeeya ee suuga fadhiyaa ay 90% yihiin dumar. Dumarka ayaa reerka u shaqeeya maanta. Ragiina wuxuu ku mashquulay inuu qaad (jaad) dul fadhiyo subax, galab, iyo habeen. Markaa

maah-maahdan waxaa beeniyey sida dumarku ay bulshada u dhisayaan ragiina u noqdeen wax aan faa'iido lahayn.

12. "*Wixii xunba Xaawaa leh*:" micnaheedu waxaa weeye in wax kasta oo xumaan ah ay iska leedaay Xaawi. Inkastoo had iyo jeer maah-maahdan loo isticmaalo marka aad aragto qof mar walba la eedaynayo, oo denbi aanu lahayn dusha laga saarayo, hadana khaladka ku jiraa waxaa weeye: maxaa loogu xusay magaca Xaawa? Maxaa loo odhan-waayey: "Wixii xunba, Xirsi-baa leh." Xaawi waxaa weeye hooyadii bani'aadamka—xaaskii Nebi Aadam (cs). Maah-maahdani waa denbi aad u wayn. Kow, waxay maah-maahdani af-lagaadeysay oo ay been ka sheegtay hooyadeen Xaawa. Xaawi xumaan may lahayn; waa xaaskii Negi Aadam. Nebiyada xaasaskooda suuban in la af-lagaadeeyaana waa denbi aad iyo aad u wayn. Beenta ay maah-maahdani Xaawa ka sheegtayna waxaa weeye: Xaawi xumaanta ay samysay waa maxay? Laba, inkastoo ay maah-maahdu asliyan denbi tahay, hadana ujeedada laga leeyahay waxaa weeye: wax kasta oo xun, waxaa iska leh dumarka. Waana been cadaan ah. Waayo? Waa maxay xumaanta ay dumarku sameeyaan? Xumaan walba oo ummadda dhibaato u keenta waxaa sameeya raga. Maah-maahdan waxaaba burinaya denbiga ku jira ee ciqaabta lagu mutaysanayo.
13. "*Dheri iyo naago toona yar-yaraysi male*:" micnaheedu waxaa weeye, gabadha aadka u yar waa la guursan karaa. Maah-maahdan waa mar-marsiiyo ay ragu u samaysteen inay ku

guursadaan habalaha yar-yar ee aan guurka diyaarka u ahayn. Raga ayaa samaystay maah-maahdan iyo sheekada ka danbaysa labadaba. Waa sheeko been abuur ah. Waa sheeko iyo maah-maah lagu xalaalaysanayo guurka caruurta. Taas micnaheedu ma'aha in aan la guursan-karin marka ay gabadhu qaan gaadho siday diinteenu inoo sheegtay. Laakiin waxaa weeye in gabadh yar oo aan garaadkeedii korin, oo aan masuuliyad reer qaadi karin, la guursado dhibaato ayaa ka dhalata. Culimado badanina dadka way uga digaan. Laakiin, maah-maahdani (sidii kuwii hore) waabay kasoo hor jeedaa talooyinka culimada.

14. "*Illaahow yaanay na nicin, naluguma karee; Illaahow yaanay na jeclaan, nalagama karee*:" micnaheedu waxaa weeye, hadii dumarku wax jeclaadaan, loogama taag helo oo way daba cararaan; hadii ay wax nacaana, looguma taag helo oo way ka cararaan. Arinkani ma dumarka oo kaliya ayuu gaar u ayahay? Ka warama raga? Ragu iyaguba marka ay wax nacaan, laguma karo; marka ay wax jeclaadaana, lagama karo. Sidaa awgeed, rag iyo dumarba arinkan waa loo siman-yahay. Waxaaba aad u sii daran raga. Ragu marka ay wax jeclaadaan, ee ay gabadhu diido, waxaa in badan dunida ka dhacda inay ragu dilaan (nafta ka gooyaan) gabadhaas. Sidaa awgeed, mar hadii araga iyo dumarku ay arinkan u siman-yihiin, maxaa dumarka oo kaliya dusha looga saarayaa? Miyaanay ahayn dulmi lagu hayo dumarka? Taasi waxay kuu cadaysay inay maah-maahdani tahay maah-maah dumarka oo kaliya

lagu weeraray—sidaa awgeedna, way khaldantay,

15. "*Ninkii gabadh dhali kara, ayaa dhiqi kara*:" micnaheedu waxaa weeye, gabadha hadii uu guursado nin aad uga wayni, si fiican ayuu u dhiqi karaa. Maah-maahdan waxaa isticmaala nin wayn oo shukaansanaya gabadh aad uga yar. Maah-maahdan ma isticmaalaan dhalinyarada shukaansanaysa gabadhaha ay is leegyihiin. Ninka wayni wuxuu gabadha u sheegaya in uu si fiican u maamuli karo maadaama uu yahay nin wayn oo khibrad leh. Maah-maahdani waa khalad. Waayo? Iskuma xidhna ninka da'diisa iyo masuuliyadiisu. Waxaa jira rag waawayn oo aan masuul ahayn. Waxaana jira rag dhalinyaro ah oo masuul ah. Sidaa awgeed, da'du ma sheegayso masuuliyada qofka. Khaladka labaad ee maah-maahdan ku jiraa waxaa weeye: waa maah-maah uu ninka waynu u samaystay hablaha yar-yar si uu u khaldo oo ay u ogolaato. Waa maah-maah been-abuur ku salaysan. Raga waawayn ayaa isa siinaya amaan aan sal-iyo-raad-toona lahay.
16. "*Talo haween, waa taag yaraan*:" micnaheedu waxaa weeye, ninkii talo ka raadiya haween waxaa ka muuqata taag daraan. Waxaa looga jeedaa, hadii aad talo haween waydiiso, waxaad tahay nin aad u taag daran. Maah-maahdani waa been cadaan ah. Waayo? Kow, waa maah-maah uu denbi wayni ku jiro. Nebigu (cs) markii ay xaaskiisu kula talisay inuu xiirto, markaa ma Nebiga (cs) ayaa taag daraa? Laba, raga Soomaalidu miyey ka talo wanaagsan-yihiin haweenka Soomaaliyeed? Hadii ay jawaabtaadu

tahay, HAA, waa maxay talada wanaagsan ee raga Soomaalida laga dhaxlay? Raga Soomaalidu wanaaga ay soo kordhiyeen muxuu yahay? Dadka ummadda iyo wadanka baa'bi'iyey ma ragbaa mise waa dumar? Waxaad ii sheegtaa tallo kaliya oo ay rag Soomaaliyeed keenen oo horumar lagu gaadhay?

17. "*Saaxiib dumar waa bil sadex*:" micnaheedu waxaa weeye, saaxiibtinimada dumarku masii raagto. Bil saddex waxaa looga jeeda: bishu mark ay soo baxdo wakhtiga fiidka iyadoo saddex ah, iftiin ayay bixisaa wakhtigaas fiidka ah. Laakiin wax yar ka dib, bishaasi way dhacdaa (qarsoonaata) oo iftiinkeendii lama arko. Sidaa awgeed, bil saddex waxay leedahay iftiin aan muddo badan sii waarin. Sidaas oo kale, dumarka saaxiib-tinimadooduna masii waarto, oo markiiba way bur-burtaa. Markaa haysku halaynin saaxiibtinada dumarka. Maah-maahdani way khaldantay, waana maah-maah dumarka lagu weerarayo. Waayo? Waxaa jira hablo saaxiib-tinamadoodu ay aad u raagto, una wanaagsantay. Saaxiinb-tinamadu inay raagto iyo inay sii waartana, dadka oo dhami waa iskaga mid. Raga qaarkood-ba, saaxiib-tinimadoodi masii waarto. Waxaa jira rag ay saaxiib-tinimadoodu waarto iyo rag aanay waarin. Waxaa kale oo jira dumar ay saaxiib-tinimadoodu waarto iyo qaar aanay waarin. Sidaa awgeed, mar hadii ay raga iyo dumarku arinkaas ka siman-yihiin, waa maxay sababta dumarka oo kalya loo weeraraya? Waa tacaddiga lagu hayo haweenka Soomaaliyeed.
18. "*Sadex haween haw sheegin: 1) surin-kaaga; 2)*

saacaddaada; 3) sirtaada:" micnaheedu waxaa weeye, haweenka ha u sheegin saddexdan midna: 1) *surin-kaaga*: meesha aad marayso ama aad tagayso how sheegin haweenka (xaaskaaga); *2) saacaddaada:* haweenka ha u sheegin saacada aad tagayso ama aad imanayso (xaaskaaga); *3) sirtaada:* haweenka ha u sheegin sirtaada kuu gaarka ah. Waa maah-maah khaldan. Waayo? Kow, maah-maahdani waxay dhalinyarta iyo raga baraysaa in aanay marna aaminin haweenka. Hadii aannu ninku aaminin xaaskiisa, sidee ayay u suurto-gelaysaa in la wada noolaadaa? Waa maah-maah shaki ka dhex abuuraysa raga iyo dumarka oo been-abuura. Laba, waxaa jira haween aad intaaba u sheegi karto oo aad 100% aamini karto. Kuwaas ka waran? Saddex, saw ma jiraan rag aanad marna sirtaada ku aamini-karini? Saw ma jiraan rag xigto ah oo aanad marna aamini-karini? Maxaa ragaas looga reebay maah-maahda? Saddex, waa maah-maah kasoo hor-jeeda diiinteena suuban. Diintu waxay inoo sheegtay in dumarka iyo ragu ay isu yihiin hugga la xidho; yacnii, inay isu yihiin sida maryaha la xidho oo kale. In gabadhu ay ninkeeda u tahay hugga uu ku asturan yahay, ninkuna uu gabadhisa u yahay hugga ay ku asutran tahay. Sida awgeed, miyaanay maah-maahdani kasoo hor jeedin sidii ay diintu inoo sheegay? Taasi waxay inoo cadaysay inay maah-maahdani tahay maah-maah si walba u khaladan.

19. "*Haween beenna waa lagusoo xero gelayaa; runna waa lagu dhaqaa*:" micnaheedu waxaa weeye, marka aad doonayso in aad gabadh guursato,

gabadhaas been u sheeg marka hore si aad ugu guulaysato guurkeeda. Marka aad ku guulaysato ee aad guursatana, runta kula dhaqan. Maah-maahdani aad ayay u khaldantay. Waayo? Kow, waxay kasoo hor-jeedaa sidii ay ina fartay diinteena suubani. Diinteenu waxay ina fartay in aynu runta sheegno mar walba, oo aynu beenta ka fogaano. Maah-maahdanina waxay ina baraysaa in aynu noqono dad beenta sheega. Laba, hadii aad gabadha been ku guursato, sidee ayay kuu aaminaysaa marka aad guri yeelataan? Maah-maahdani miyaanay ka hor-imanaynin maah-maahda kale ee tidhaahda, "beentaada hore waxay bi'iisa runtaada danbe." Labadaas maah-maahood miyaanay iska hor imanaynin? Marka uu qofku ogaado in aad beenaale tahay, waxaa xaqiiq ah in aannu mar danbe ku aaminaynin. Sidaa awgeed, hadii guriga Soomaaliyeed lagu dhiso been, sidee ayay uga suurto-galaysaa nolol lays aaminsan-yahay oo wanaagsani? Taasi waxay inoo cadaysay inay maah-maahdani tahay been cadaan ah.

20. "*Haween u samir ama ka samir*:" micnaheedu waxaa weeye, haweenka ama u dul qaado, ama iskaga samir. Waa maah-maah khaldan. Waayo? Dumarka iyo raguba arinkan way ka siman yihiin. Waxaa jira rag aan masuuliyad lahayn oo reerkooda dayaca. Waxaa jira rag dumarka garaaca. Waxaa jira rag dumarka cadaadiya. Waaa jira rag dumark aad ugu xun. Markaa ragaas-ba saw ma'aha inay dumarku u samraan? Maxaa ragaas looga reebay maah-maahda? Taasi

waxay inoo cadaynaysaa tacaddiga loola badheedhay hablaheena Soomaaliyeed.

21. "*Haween nimay legdaan kama kacaan*:" micnaheedu waxaa weeye, hadii ay haweenku kaa adkaadaan, waligaa kuma daynayaan. Waa maah-maah aad u khaldan. Waayo? Raguba hadii ay kaa adkaadaan, waligaa kuma daynayaan. Tusaale, raga Soomaalidu waxay ka adkaadeen dumarkii; sidaa awgeed, weligood may amaan gelinin dumarka oo waxaas oo xumaan ah ayay ku sheegaan. Dhinaca kale, beelaha laga tirrada badan-yahay sawkuwaa raga Soomaalidu markii ay ka adkaadeen aan waligood daynaynin ee caayaya mar walba. Markaa maxaa dumarka oo kaliya loogu eedaynayaa? Taasina waxay inoo cadaysay inay maah-maahdani tahay dulmi iyo tacaddi haweenka loola badheedhay.
22. "*Fidmo aan haween ka kicini fidmo maaha*:" micnaheedu waxaa weeye, fidnada ugu khatarta badani waxaa weeye fidnada ka bilaabanta dumarka. Waa maah-maah been ah. Waayo? Fidnooyinka ugu waawayn ee Soomaalidu samayso, waxaa ka masuul ah raga. Fidnooyinkaas waxaa ka-mid-ah: dagaalada, dilka, kufsiga, boobka/dhaca, iwm. Fidnooniyinkaas dumarku shaqo kuma laha. Sidaa awgeed, ragii samaynaayey fidnooyinka ugu waawayna, waxba maah-maahdu kamay sheegin; dumarkii aan fidnooyinka waawayn shaqo ku lahayna, way eedaysay maah-maahdu Dadka qaarkood ayaa ku dooda in uu Nebigu (cs) inoo sheegay fidnada dumarka. Waa run.

> Nebigu (cs) wuu inoo sheegay. Laakiin, hadiiskaas Nebigu (cs) fidnada uu ka hadlayaa waxaa weeye fidnada sinnada iyo danbiyada. Laakiin, xadiisku kama hadlayo fidnada dilka, boobka, dhaca, iwm. Hadii aan taas kuusii cadeeyo, intii ay Muslimiintu jirtay, waxaa jirta fidno ka dhex-dhacday taariikhdooda. Fidnadaas ma dumar ayaa sameeyey? Ma dumar ayay ka bilaabantay? Jawaabtu waa MAYA. Taasina waxay inoo cadayday in ay maah-maahdani tahay been cadaan ah iyo tacaddi loola badheedhay hablaheena Soomaaliyeed.

Maah-maahahaas aan kor-ku-sharaxay, waxaynu ka fahanay laba arimood. Kow, in ay Soomaalidu beena sheegto; beena maah-maahdo. Sidaa awgeed, maah-maahda tidhaahda, "*Soomaalidu been way sheegtaa, beense ma maah-maahdo*" inay been tahay ayaa inoo cadaatay. Soomaalidu beena way sheegtaa, beena way maah-maah-daa. Laba, in tacaddiga lagu hayo haweenka Soomaalidu uu aad u wayn-yahay.

Aqbalidda Tacaddiga

Cilmi-baadhis aad u qoto-dheer oo ay sameeyeen jaamacadaha aduunka ee qaybta cilmi nafsigu (psychology), waxaa lagu-ogaaday in marka mudo-dheer si joogto ah loo bah-dillo, loo yasso, loo niyad-jabiyo, loogu tacaddiyo, loo cadaadiyo, loo af-lagaadeeyo, loo-caayo, loogu digto, ee hoos-loo-dhigo, in dadkaas la-yassay ay aaminaan in ay yihiin dad ka hooseeya dadka kale. Dadkaas la yassay waxay si niyad ah u aaminaan inay yihiin dad aan caqli fiican

lahayn; wax maamuli-karin; karti-lahayn; oo ka hooseeya dadka kale.

Buugga *Internalized oppression: The Psychology of Marginalized Groups* ee uu qoray E. J. R. David ayaa wuxuu si qotodheer oo cilmiyeysan ugu sharaxay dhaawaca iyo bur-burka nafeed ee soo gaadha dadka lagu tacaddiyo. "Aqbalidda tacaddigu waxaa weeye, marka dadka lagu tacaddiyey rumaystaan in xumaanta lagu sheegayaa ay run tahay. Marka ay run u qaataana ay dadkaas lagu tacaddiyey laftoodu isu adeegsadaan tacaddigii lagu hayey" (David, 2014). Hadii aan si faah-faahsan u sharaxo xiggashadan, David wuxuu u jeedaa in marka dadka mudo aad u dheer loo sheegaayey inuu garaad-koodu liito, oo ay ka hooseeyaan dadka kale, ay dadkaasi rumaystaan tacaddigaas beenta ah. Marka ay tacaddigaa rumaystaana, iyaga dhexdoodu isu isticmaalaan tacaddigaas.

Waa tacaddi loogu talo-galey in lagu dumiyo—oo lagu boqno-gooyo—qofka shakhsiyadiisa, ruuxadiisa, hankiisa, iyo dad-nimadiisa. Waa tacaddi qofka laga gumaysanayo maskaxda; waana tacaddiga ugu qotodda-dheer, ugu raad-reebka badan, uguna khatarsan. Tacaddiga noocan ah in layska xoreeyaa way adagtahay; sababtoo ah, qofka tacaddiga lagu hayaa uma arko in tacaddi lagu hayo. Waa marka qofka lagu tacaddiyayaa uu rumaysto, aqbalo, oo uu aamino, in sida loola dhaqmayaa ay sax tahay; waa marka uu qofku is-dhiibo. Taas micnaheedu waxaa weeye: qofkii la lagu-tacaddiyayey ayaan ogaynba in lagu tacaddiyayo, oo aaaminsan, isuna-arka, in waxa lagu sheegaayo ee xumaan ahiba ay yihiin wax jira oo run ah. Waa heerka ugu sareeya ee qofk looga gumaysto maskaxda.

Hadaba waxaa is waydiin leh: halkee ayaynu ka dheehan karnaa (ama maxaa inoo cadaynaya) inay dumarka Soomaalidu aqbaleen tacaddiga lagu hayo? Meesha ugu

muhiimsan ee aynu ka dheehanaynaa waxaa weeye, luqadda Soomaaliga. Marka la-daraasaynaayo nolosha bulshooyinka, meelaha ugu muhiimsan ee la-daraaseeyo waxaa ka mid ah luqaddooda. Luqaddu waxay xambaarsantahay dhaqanka, diinta, falsafadda, xidhiidhka bulshadda, xigmadda, iwm., ee bulshada. Luqaddu waa muraayad laga dheehdo nolosha bulshadda guud ahaan. Sidaa awgeed, aynu soo qaadano qaar ka mid ah hadalada, maah-maahaha, suugaanta, iwm., ee ay haweenku isticmaalaan.

- *"Akhas! Ninkan sidii dumarka u tirsanaya!"* ama *"'Hebel,' sida dumarka ayuu kuula tirsanayaa!"* Hadalkan kor-ku-xusan waxaa istcimaala dumarka. Hadalkan waxay isticmaalaan marka ay arkaan gabadh iyo nin mur-maaya, oo hadalka isku cel-clinaya. Dumarku waxay ninka u sheegayaan in aannu u tirsanin sida dumarka. Weedhahan waxaa ku duugan micno aad u balaadhan oo ka turjumaya—si toos ahna u cadaynayaan—in ay haweenka Soomaaliyeed aqbaleen tacaddiga lagu hayo. Waa ereyo ku tusaya sida maskaxda looga gumaystay haweenka Soomaaliyeed. Hadaba, si aynu u fahano micnaha qotodda-dheer ee erayadan ku jira, waxaa muhiima inaynu marka hore is-waydiino: waa maxay "tirsigu?" Tirsigu waxaa weeye: marka laba qof ay isku cel-celiyaan hadalo uu ka muuqdo ficiltan, oo aanay ujeeddadoodu ahayn in lays fahmo ama xal la gaadho. Waa hadal ay keentay cadho, oo aan micno badan xambaarsanayn. Hadaba, marka ay gabadha Soomaaliyeed isticmaalayso ereyaddan, waxay sheegaysaa in "tirsigu" uu yahay wax aad u

hooseeya, oo dhaqan u ah haweenka oo keliya. Laakiin aanu ahayn dhaqankii, ama hab-u-hadalkii, ragga. Maadaama tirsigu uu yahay hadal aad u hooseeya (oo aan wax micno ahna lahayn) waa hab-u-hadal u gaar ah haweenka. Tusaalahani wuxuu inoo cadaynayaa in ay gabadhuhu aamineen, oo ay rumaysteen, in hab-u-hadalkoodu uu ka hooseeyo hab-u-hadalka raga. Mar hadii hab-u-hadalkoodu ka hooseeyo kii ragana, inay raga ka hooseeyaan. Waa gumaysi ay ragu ku guulaysteen.

- "*Waa naag 'RAG' ah!*" Maxaa looga-jeedaa "naag rag ah? Hadii aad si qoto-dheer ugu fiirsato ereyaddan—"waa naag rag ah"—waxaad kuusoo baxaya in ay yihiin ereyo aan is raaci-karin; wax micno ahna aan lahayn. Jinsiga bani'aadamku wuxuu u qaybsamaa laba: "rag" iyo "naago." Laakiinse, ma jiro wax la yidhaahdo, "naag RAG ah." Hadii aad ka eegto dhinaca luqada af-Soomaaliga, wax micno ah ma samaynayaan ereyaddaasi. Laakiinse, ereyadda "naag RAG ah," waxay xambaarsan-yihiin micne aad u qoto-dheer. Marka ay bulshadu aragto gabadh isku darsatay af-tahanimo, cilmi, maskax-wanaag, karti, fariidnimo, iwm., waxay bulshadu gabadahaas ku tilmaamaan, oo ay ku "amaanaan," in ay tahay "naag RAG ah!" Waxaa looga jeedaa: waa gabadh ay ka muuqdaan astaamihii lagu yaqaanay raga—af-tahanimo, cilmi, maskax wanaag, karti, fariidnimo, iwm. Gabadha astaamahaas yeelataa, waa gabadh kor ugasoo kacday (oo kasoo gudubtay) derejaddii (ama meeqaamkii) aadka u "hooseysey" ee

dumarka. Waa gabadh usoo gudubtay derejeddii (ama meeqaamkii) aadka u "sareeyey" ee raga. Ereyaddani waxay tilmaamayaan in ay dumarku ka derejo (ama meeqaam) hooseeyaan raga. Haweenka ayaa loo diidanyahay inay yeeshaan astaamahaas wanaagsan. Waa aflagaado, tacaddi, niyad-jabin, iyo boqno-goyn badheedh ah oo lagu hayo haweenka Soomaaliyeed. Waa tacaddiga meesha ugu saraysa.

- "*Kor dumar, kabo isma dheera!*" Sida caaddadda ah, maah-maahdan waxaa isu-isticmaala haweenka Soomaaliyeed; mana arkaysid raga oo isticmaalaya. Maah-maahdan micnaheedu waxaa weeye: "dumarku ma kala-sareeyaan, ee waa isku mid." Maxaa looga jeedaa, "dumarku ma kala-sareeyaan?" Hadaad si qoto-dheer ugu fiirsato, waxaad arkaysaa in ay tahay maah-maah khaldan. Waayo? Dumarku isku mid ma'aha. Waxaa jira dumar fariido ah; dumar caqli badan; cumar cilmi leh; dumar aan cilmi lahayn; iwm. Markaa dumarkaasi ma sina. Laakiinse, maah-maahdani waxay ina baraysaa in dumarku si kasta oo ay u kala cilmi iyo fariidnimo badan-yihiin, ay hadana isku mid yihiin oo aanay is dhaamin. Waxaa kuusoo baxaya in micnaha dhabta ah ee ku jiraa uu yahay: "dumarku way ka hooseeyaan raga." Aan kuu sharaxo. Si aad u fahanto micnaha qotada-dheer ee ku qarsoon maah-maahdan, waxaad is waydiisaa su'aalahan: waa maxay sababta gooni loogu saaray dumarka? Maxaa laysu bar-bar dhigi-waayey raga iyo dumarka? Maxaa loo odhan-waayay, "kor aadame, kabo isma dheera?" Hadii la yidhaahdo,

"kor aadame, kabo isma dheera," waxay muujinaysaa in laga hadlaayo aadamaha oo dhan; sidaa awgeedna, micnuhu wuxuu noqonayaa in raga iyo dumarku aanay kala-saraynin. Laakiin, sidaa lama odhanin. Dumarkii ayaa gaar loo saaray; dabadeed lays bar-bar dhigay; ka dibna, lagu sheegay in aanay kala-saraynin. Raga waa laga reebay maah-maahdan; sababtoo ah, dhaqanka Soomaalida ragu way ka sareeyaan dumarka. Dumarka waxan isugu maah-maahayaa waxay si dhab ah u aaminsan-yihiin, oo ay rumaysteen, in ay raga ka hooseeyaan si walba. Guusha ugu saraysa ee uu gaadho gumaysigu waxaa weeye: marka dadka la gumaysanayaa ay aqbalaan, oo ay rumaystaan, in aanay gumaysi ku jirin, ee ay yihiin dad xor ah. Waa marka ay dadka la gumaysanayaa iyagu u shaqeeyaan, oo gacan-yare, u noqdaan cida gumaysanaysa. Maah-maahdani waxay ku tusaysaa in haweenka Soomaaliyeed ay dhexdooda is-liidaan, is niyad-jabiyaan, oo is boqno-gooyaan, iyagoo isu gudbinaya in ay raga ka hooseeyaan.

- "*Akhas! Orod googarad soo xidho!*" ama "*Akhas! Orod diric soo xidho!*" Ereyadan waxaa isticmaala dumarka. Marka ay dumarku doonayaan in ay si aad u xun u caayaan nin, ayay ereydan u isticmaalaan. Ujeeddada ereyadani waxaa weeye: gabadha ayaa ninka ku odhanaysa, orod oo googarad ama diric soo xidho. Googarada iyo diricana waynu naqaanaa oo waxaa xidha dumarka. Sidaa awgeed, gabadha ereyadaas ninka ku odhanaysaa waxay aaminsantay in

qofka xidha googarada ama diricu uu yahay qof aad u liita. Markaa, maadaama ay haweenku xidhaan maryahaas waa dad liita ayay gaadhaasi aaminsantay. Ninka maryahaas xidhaana inuu dumarka la-mid noqnayo; sidaa awgeedna, uu noqonay qof liita oo dumarka la-mid-ah, ragana ka hooseeya. Waa gabadh aqbashay tacaddigii lagu hayey, oo rumaysan inay raga si walba uga hoosayso.

- "*Innanta kursiga uga kaca!*" Sida caaddadda ah, marka hablaha Soomaaliyeed ay soo fuulaan bas, kuraasidda baskuna ay buuxaan, waxaa dhacda in inamadu ay kuraasida uga kacaan hablaha. Ma arkaysid wiil kursi uga kacaya wiil kale? Waxaa is-weydiin leh: waa maxay sababta ay inamaddu uga kacaan kuraasida si ay hablahu ugu fadhiistaan? Su'aashan jawaabteeda waxaynu ka eegaynaa laba dhinac. Dhinaca koowaad, waa arin u muuqata in ay inamadu ixtiraamayaan ama qadarinayaan hablaha; waana sida ay bulshada iyo habluhuba aaminsan-yihiin. Hadiise aad is-weydiiso: waa maxay ixtiraamka ama qadarinta ku jirta in hablaha kursiga looga kaco? Maxaad u arki wayday wiil kursi uga kacaya wiil kale? Su'aalahan jawaabtooda waxaynu ka helaynaa, marka aynu arinka ka eegno dhinaca kale. Dhinaca kalena waxaa weeye: sababta ay inamadu sidaa u samaynayaan waxaa weeye, hablaha ayaa la-quudhsanayaa, la-yasayaa, oo hoos loo-dhigayaa. Aan kuu sharaxo. Sida caadada ah, marka lasoo fuulo basaska waxaa kuraasida looga kacaa dadka waaweyn ee

> gaboobey, dadka naafada ah, dadka buka, caruurta yar-yar, dumark uurka leh, iwm. Dadkaas oo dhami waa dad jilicsan oo aan lahayn awooddii ama kartidii ay ku dhex-taagnaan lahaayeen bas soconaya. Sidaa awgeed, way haboontahay, waana wax fiican, in dadka jilicsan looga kaco kuraasida. Laakiinse, waxaa is-weydiin leh: hablaha dhalinyaradda ah ee caafimaadka qabaa iyagu ma dad jilicsan, oo bilaa karti ahbaa? Miyaanay taagnaan karaynin baska oo socda? Su'aalahaas jawaabtoodu waxaa weeye: HAA! Habluhu way taagnaan karaan, oo ma'aha dad jilicsan oo naafo ah. Laakiin, maadaama ay ragu u arkaan in ay habluhu yihiin dad ka hooseeya, oo jilicsan, oo bilaa karti ah, way ku haboontay in kursiga looga kaco oo la caawiyo; sida loo caawinayo dadka waaweyn ee gaboobey, dadka naafada ah, dadka buka, caruurta yar-yar, dumark uurka leh, iwm.

Dariiqooyinkaas aynu soo sharaxnay (iyo qaar kale oo aad u tirro badan) ee loo-isticmaalayo hablaha Soomaalida si loo gumaysto, waa dariiqooyin loo-isticmaali-jiray dadka la-adoonsado. Tusaale ahaan, markii uu Maraykan-ku gumaysan-jiray dadka madow, waxay isticmaali-jireen dariiqooyinkaas si ay u fududaato gumaysiga dadka madoobi. Fadlan waxaad akhridaa, ama aad daawataa, cilmi-gaadhista laga sameeyey dhacdooyinkaas.

Hadaba, waxaa is-weydiin-leh: maxaa sababay in inanku qiimo-weyn yeesho, inantuna aanay wax qiimo-ah lahaanin? Si aynu u fahano waxa sababay in inanka laga-door-biddo inanta, waxaa muhiim ah inaynu fahano dhaqanka Soomaalida, oo kasoo-jeeda nolosha miyiga.

Noloshii Miyiga

Nolosha miyigu waa nolol aad u adag. Dadka reer miyigga ah noloshoodu waxay ku tiirsan-tahay xoolaha nool. Si ay u daryeelaan xoolahoodda, waxay ku deddaalaan inay helaan baad-iyo-biyo. Dhulka ay ku nool-yihiina waa dhul ay aad ugu-yar-yihiin baadka iyo biyuhuba. Sidaa awgeed, waa dad si joogto ah u guur-guura, si ay u deggaan meel baad-iyo-biyo leh. Guur-guuritaan-kaas faraha-baddannina wuxuu sababaa inay la-kulmaan dad aanay isku qabiil-ahayn.

Tusaale ahaan, geela waxaa loo foofiyaa (daaq-geeyaa) dhullal aad u-kala-fog, iyaddoo la-raadinayo meel uu geelu ka-helo baad-iyo-biyo. Maadaama uu geelii kasoo fogaaday reerkii iska-lahaa, waxaa had-iyo-jeer dhacda in geelaas lagusoo-duulo oo la-dhaco. Mar-marka qaarkood-na waxaa dhacda in isagoo uu geelu ku-jiro xeraddii reerkii iska-lahaa, lasoo weerrarro oo la-dhaco. Hadaba, si loo-helo ciidan geela foofiya, oo geela ka-difaacda cid-kasta oo isku-dayda inay-dhacdo, waxaa loo-baahday in la-helo rag tirro-badan oo geela foofiya ama difaaca. Dhinaca kale, marka loo-baahdo in geel lasoo-dhacana, waxaa muhiim ah in la-helo rag tirro-badan.

Intaas uun kuma koobna baahidda keentay in inamada laga-door-biddo hablaha. Waxaa kale oo jira: marka qof laga-dillo reerka, waa in la-helaa rag tirro-baddan oo usoo aari-kara qofkaas la-dilay. Reer miyiggu waxay isugu-faanaan sida ay u kala inamo badan-yihiin. Ninka reer miyigga ah ee inamo badan dhalaa, waa nin bulshada reer miyigga ah qiime aad u sareeya ku dhex-leh. Waa nin laga baqo oo aan xoolihiisa iyo dadkiisaba loo-dhawaanin. Noloshaas miyigga ee ku-salaysan haraadka, baahida, dhaca-iyo-boobka, iyo dilka ayaa sababtay in ay inamadu qiime-sarre ku yeeshaan bulshada reer-miyigga ah.

Hadaba, marka ay dadkaasi geelooda u daaq geeyaan dhulal aad u kala fog, waxaa dhici jirtay in geela laga dhaco; raga geela wadana la laayo. Sidaa awgeed, noloshoodii ayaa aad u adkaatay. Nolosha sidaa u adag, waxaa loo baahday rag dagaalama oo geela dhifaaci kara; ama geel soo dhici kara. Dumarku maadaama aanay dagaalka ka qayb qaadanin, dadkaasi waxay dumarkii u arkeen in qiimahoodu uu ka hooseeyo qiimaha raga. U fiirso, waxa kaliya ee raga iyo dumarka lagu kala saraysiiyey waxaa weeye: dagaal, difaac, iyo dhac.

Qofka intaas samayn-kara, ayaa qiimo sare yeeshay. Qofka aan intaas samayn karina, qiimihiisu hoos ayuu u dhacay. Qofka dagaal geli kara, ee naftiisa hurayaa, wuxuu yeeshay xuquuq gaar ah, oo ka saraysa xuquuqda uu leeyahay qofka aan naftiisa huri karini. Ragaas iyo dumarkaas laguma qiimaynin garashadooda, aqoontooda, dadnimadooda, diintooda, iwm. Waxaa kaliya ee lagu kala saraysiiyey waxaa weeye: qofkii dagaal geli kara.

Dhaqankaasi wuxuu ka jawaabaayey baahidii taalay miyiga. Laakiinse, dhaqankii miyiga yaalay ayay dadkii Soomaalida ahaa ulasoo guureen magaaladii. Waxaanay halkii kasii wadeen tacaddigii haweenka.

Maxaa Laga-dhaxlay Tacaddiga Haweenka?

Dib-u-dhaca iyo khasaaraha laga dhaxlay tacaddiga lagu hayo haweenka Soomaaliyeed maaha mid halkan lagusoo koobi-karo. Waa dib-u-dhac iyo khasaare saameeyey qayb kasta oo bulshada ka mid ah—daqaalaha, aqoonta, caafimaadka, dowladnimadda, difaaca, bulshadda, iwm. Inkastoo aanu qoraalku ii saamaxaynin in aan qodobaddaas oo dhan u faah-faahiyo si qoto-dheer, waxaan ku dedaalayaa in aan dhamaantood si kooban u sharaxo.

Hadaba, inta aynaan qodobadaas gudo-gelin, aynu dheehano xaalaadda guud ee haweenka Soomaaliyeed.

Tirro-koobkii ugu danbeeyey ee ay qaaday hay'adda sama-falka ee United Nations Development Program (UNDP), waxay ku sheegeen:

- In haweenka Soomaalidu yahay 50.5%; halka uu raguna yahay 49.5%.
- In haweenka Soomaalida ee wax qori-kara, waxna akhriyi-kara, ay yihiin 25%; halka raga wax qori-kara, waxna akhriyi-kara ay yihiin 75%
- In haweenka Soomaalida ee iskuuladda ku jiraa ay yihiin 30%; halka raguna ay yihiin 70%
- In haweenka Soomaalida ee siyaasadda, ama maamulka dowladda, ku jiraa tirraddoodu tahay 11.5% halka raga siyaasadda ku jiraana ay yihiin 88.5%
- In haweenka shaqaalaha xafiisyada ka shaqeeya tirraddoodu yihiin 36% halka raguna ay yihiin 64%

Tirro-koobkani wuxuu inooga jawaabayaa su'aasha ah: maxaa laga dhaxlay tacaddiga haweenka?

Haweenka Soomaaliyeed tirraddoodu (50.5%) way ka badan-tahay tirradda raga (49.6%). Taas micnaheedu waxaa weeye: hadii bulshada loo kala qaybiyo laba meelood, haweenku waxay noqonayaan qayb-iyo-dheeraad. Ayaan-darrada jirtaase waxay tahay in qayb-iyo-dheeraad bulshada ka mid ahi (haweenku) ay noqdeen dad aan wax hor-u-mar ah bulshadda kusoo kordhin-karin. Sababtoo ah (sida aan kor kusoo sharaxay), waxaa haweenka laga dhaadhiciyey in ay yihiin dad aan lahayn karti, fikir suuban, tallo-wanaagsan, garasho, iwm.

Marka bulshadda qayb-iyo-dheeraad ka mid ah la curyaamiyo, bulshaddaasi sidee ayay hor-u-mar ku gaadhikaraysaa? Waa bulsho qayb-dhami ay naafo tahay; waa bulsho aan ka faa'iidaysanin dadkeeda in ka badan qayb-iyo-dheeraad; waa bulsho naafo ah. Waa bulsho la-mid-ah qof naafo ah, oo dhinac qallalley. Marka uu qofka ku dhaco xanuunka la yidhaahdo "qallalku" ama "dabayshu" (stroke), qofka waxaa qallalla dhinac jidhkiisa ka mid ah—gacan, lug, iyo qayb ka mid ah wejiga. Qofkaas waxaa ku adkaata inuu qabsaddo howlihii nolol maal-meedkiisa ahaa oo dhan. Wuxuu noqdaa qof la daryeelo, oo aan isagu is daryeeli karin. Qofkaas waxaa la-mid-ah, bulsho tacaddi iyo yasitaan ku haysa qayb-iyo-dheeraad ka mid ah dadkeeda.

Tacaddiga haweenka Soomaaliyeed, wuxuu qayb wayn ka qaataa dib-u-dhaca bulshada Soomaaliyeed hadheeyey. Si aad usii fahanto, aynu soo qaadano tusaalahan gaaban ee soo socda.

Waa laba magaalo: X iyo Y. Dadka ku kala-nool X iyo Y tiraddoodu waa isku mid. Mid walba waxaa ku nool 1000 qof (500 haween ah iyo 500 oo rag ah). Dadka ku nool magaaladda X dhaqankoodu waxaa weeye in ay siman-yihiin raga iyo dumarku. Isku si ayay ula dhaqmaan raga iyo dumarka. Inamada iyo hablaha si isku mida ayaa wax loo baraa; si isku mida ayaa shaqooyinka loo siiyaa; si isku mida ayay siyaasadda uga qayb-qaataan; iwm. Waa magaalo dadkeedu ay wax wada-barteen, dhamaantoodna ay shaqeeyaan (rag iyo dumar).

Dhinaca kale, dadka ku nool magaaladda Y dhaqankoodu waxaa weeye in ay ragu ka sareeyaan dumarka. Sidaa awgeed, waxay mudnaanta koowaad siiyaan inamadda. Waxaanay rumaysan yihiin in haweenku aanu lahayn maskax badan; in aanay keeni karin fikir fiican; in aanay ahayn dad karti leh, iwm.

Hadaad is bar-bar dhigto labadaas magaalo—X iyo Y—magaaladee ayaa horumar gaadhaysa? Jawaabu way iska cadahay: magaalada X. Sababtoo ah, magaalada X waxay howl gelisay oo ay ka faa'iidaysatay bulshadeedii oo dhan—rag iyo dumarba. Laakiin, magaalada Y, waa magaalo uu ka jiro dib-u-dhac badan—dhinaca, dhaqaalaha, wax-barashada, fursaddaha shaqada, caafimaadka, iwm. Sababtoo ah, waa magaalo aan ka faa'iidaysanin bulshadeedii qayb ka mid ah. Tusaalahan si fiican u fahan: waxaad is bar-bar dhigtaa Singabuur iyo Soomaaliya, oo isku mar xoriyada ka qaatay gumaystihii Yurub.

4

DHAQANKA SOOMAALIDA IYO BAR-BAARINTA UBADKA

Buugga *Raising a Muslim Child: Owning a Sacred Responsibility* ee uu qoray Mirza Yawar Baig ayaa wuxuu si cilmiyeysan oo diinteena ku salaysan u sharaxaya habka ugu sareeya ee loo koriyo ubad Muslim ah. Mirza wuxuu sharaxaadiisaas ku salaynayaa diinta Islaamka iyo cilmiga casriga ah. Buuggaas waxaad bar-bardhigtaa buugga kale ee *How to Raise Successful People: Simple Lessons for Radical Results ee ay qortay* Esther Wojcicki oo si cilmiyeysan oo qoto-dheer uga hadashay sida loo koriyo ubadka dunida reer Galbeedka.

Labadaas buug markaad akhrido, waxaa kuu cadaanaya in guud ahaan habka wanaagsan ee ubadka loo koriyaa ay 90% iskaga mid yihiin. Inkastoo ay jiraan waxyaabo yar-yar oo ay ku kala duwan-yihiin, hadana guud ahaan labadaas ummadood ee si walba u kala duwani, waxay iskaga mid yihiin sida ugu wanaagsan ee ubadka loo koriyo. Markaad labadaas buug fahanto, waxaad u fiirsataa habka uu dhaqanka Soomaalidu u koriyo ubadka. Waxaa kuu cadaanaya in habka uu dhaqanka Soomaalidu u bar-baariyo ubadku aanu ku salaysnayn habka ay ina fartay in ubadka

loo koriyo diinteena Islaamku iyo habka ay dunida horuumartay ubadka u koriyaan. Si aad u ogaato, sii akhri sharaxaada.

Cutub-kani wuxuu sharaxayaa, oo cadaynayaa, in habka (qaabka) uu dhaqanka Soomaalidu u bar-baariyo ubadka uu yahay hab aad u khaldan. Inuu khaldan-yahay waxaa kuucadaynaya dhowrkan arimood: (1) hab-u-dhaqanka iyo hab-u-fikirka khaldan, ee hooseeya, ee qofka Soomaaliga ah; iyo (2) masuuliyad-darrada qofka Soomaaliga ah.

Si aan kuugu-cadeeyo doodaydan, waxaan sharaxaada cutubkan u dhirraan-dhirriniyaa siddan soo socota. Kow, waxaan sharaxayaa habkii khaldanaa ee ubadka loogu bar-baarin jiray (ilaa iminkana loogu bar-baariyo) miyiga. Laba, waxaan faah-faahinayaa habka khaldan ee ubadka loogu bar-baariyo magaalooyinka Soomaaliyeed dhamaantood. Saddex, waxaan sharaxayaa masuuliyad-darrada qofka Soomaaliga ah ee qaan-gaadhka ah, oo ay sabab u tahay habkii khaldanaa ee loosoo koriyey. Afar, waxaan kusoo gebo-gebaynayaa khasaaraha laga-dhaxlay habka khaldan ee uu dhaqanka Soomaaligu u koriyo ubadka.

Bar-baarinta Ubadka Miyiga

Miyugu waa meesha ugu xun—ee ugu liidata—ee ilmo caruura lagu-koriyo; waa cadaabtii ifka ee caruurta. Soomaalidu nolosheeda intii ugu badnayn waxay kuu-noolaayeen miyiga (baadiyaha). Nolosha miyigu waxay ahayd (ilaa iminkana ay tahay) nolol aad u adag oo dhib badan.

Miyigu waa dhul oommane iyo qorfe ah. Waa dhul ay aad ugu yar-yihiin baadka iyo biyuhu. Waana dhul cidla ah. Dadka ku-nool dhulka nocaas ahina, waxay ahaayeen dad xoolo-dhaqato ah. Xoolaha ay dhaqdaan wuxuu u badnaa

geela iyo adhiga. Xoolahaasina waxay si joogto ah ugu baahanyihiin baad iyo biyo. Sidaa awgeed, dadkaas reer miyiga ahi waxay mar walba u guuri-jireen kolba meesha ay ka helayaan baad iyo biyo.

Marka ay reeruhu u guurayaan dhullal kala-fog, waxay la-kulmi-jireen dhibaatooyin aad u tirro-badan: haraad, hayaan dheer, colaad, cudduro, iwm. Dadkaasi may haysanin cunto ku-filan oo ay cunaan. Waxaa cunto u ahaa caano, hilib mar-mar la-cuni-jiray, iyo midhaha dhirta (mar-marka qaarkood ayay cunto heli-jireen).

Dhinaca kale, dadkaas reer miyiga ahi waxay u kala-qayb-sanaayeen qabiilooyin aan isku-duubnayn, oo is neceb. Qabiil waliba dhul gaar u ah ayuu deganaa. Noloshaa adag, ee dhibta badannina, waxay sababtay colaad joogto ah oo dhex-marta qabiilooyinkaas kala-duwan. Colaadana waxaa sababi-jiray baadka iyo biyaha oo yar; iyo geela oo la-kala dhici-jiray. Hadaba, si uu qofku ugu noolaado noloshaa aadka u adag, waa in loo koriyaa hab qalafsan: waa in qofka laga dilaa naxariista, garashada, debecsanaanta, iwm.

Si aad u fahanto habka caruurta loogu koriyo miyiga, waxaynu soo xigganaynaa Abwaaan Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi) oo si qoto-dheer uga sheekayna. Abwaan Hadraawi wuxuu sheegay in habka loo koriyo wiilasha iyo gabdhuhu ay kala duwan-yihiin.

Bar-baarinta inanka (wiilka): abwaan Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi)—oo yaraantiisii kusoo-koray miyiga—ayaa si qoto-dheer uga sheekeeyey sida ubadka ay u bar-baariyaan dadka miyiga degeni. Inanku (wiillku) marka ugu-horaysa ee uu dhasho, waa la-anqariyaa (*anqarin* micnaheedu waxaa weeye: caano yar ayaa afka luugu-shubaa [lagu-habaa]). Inanku markuu gaadho saddex-jir (3 sano), ayaa jiqitaanka naaska laga joojiyaa. Ka dibna, hooyadii waa laga qaataa. Waxaa xambaara—oo tuurta

saara—nimanka geel-jiraha ah. Waxaa la-dhex-geeyaa geela, oo jooga meel aad-iyo-aad uga fog guriga ay reerku degen-yihiin. Sababta inanka looga fogaynayo hooyaddii iyo dumarka kaleba waxaa weeye, waxaa loo-diidayaa inuu ku-koro raaxo, kool-koolin, iyo naxariis.

Marka uu innanku dhex-joogo geela hal sano (1 sano), ee uu gaadho afar-jir (4-jir), ayaa waxaa loo-bilaabayaa inuu qabto howshii geela. Howsha ilmahaas yar lagu-bilaabayaana siddan ayay u kala-horaysaa. Kow, waxaa markiiba la-barayaa magacyadda geela (waxaa laga-yaabaa inay geela tirradiisu tahay 100-neef ama ka-badan). Laba, waxaa ilmahaas yar loo-dirayaa inuu hasha soo-godlo. Saddex, waxaa loo-yeedhaayaa inan (wiil) kale oo isaguna afar-jir ah (4-jir) oo geel kale la-jooga. Labadaas inan (wiil) ee yar-yar ayaa loo-golaynayaa (laysu saarayaa) si ay u leg-damaan. Inanka la-legdo, ee laga guulaysto, habeenkaas caano lama-siiyo. Wuxuu seexanayaa isagoo gaajaysan, oo aan waxba cunin.

Mar labaad ayaa loo-golaynayaa labadii inan (wiil) ee yar-yara. Laakiin, markan labaad ma'aha legdintii hore oo kale. Markan labaad, waxaa labada inan (wiil) mid kasta loo-dhiibayaa laba ullood (dhengadood), oo madheedh ah—oo dubanyo ah. Labadaas inan ee yar-yar ayaa dhengedaas isla-dhacaya (isku garaacaya). Si axmaqnimo ah ayay dhengedda isula-dhacayaan. Midna midka kale uma naxariisanayo. Diirka ayay iskaga-siibayaan dhengeddahaas. Meel kasta oo ay dhengedaasi kaga-dhacdo ilmahaas yar, diirka ayaa ka-mudhxaya. Jidhkoodu wxuu isu-bedelayaa nabar miidhan. Sababtoo ah, dhengedda ayaa jiidhka mudhxinaysa. Ilamaha xejisan-waaya xanuunka dhengedda, ee cabaada ama ooya, wuu ceeboobayaa. Laakiin, ilmaha adkaysta, ee cabaadi waaya, wuu guulaystay.

Ujeeddada laga leeyahay waxaa weeye: ilmaha yar ayaa waxaa laga-baa'bi'inayaa dabac-sanaanta, naxariista, qalbi-jileeca, iyo raxmadda. Ragii waaweynaa ee labadaas inan ka-masuulka ahaana, hareeraha ayay taagan-yihiin oo way isku-daawanayaan. Caruurtaas dhengedda isla-dhacaysa, ragaas waaweyni waxay ka-dhiganayaan mada-daalo.

Ciqaabtaas dagaalka ka dib, waxaa ilmahaas yar loo-bilaabayaa inuu howshii geela qabto. Ilmahaasi wuxuu qaadaya, oo dhabarka loo-saarayaa, maqaarka hasha igadha ah, hadhuubka, iwm. Malintii ooo dhan, geela ayuu daba-taagan-yahay ilmahaasi—hadii uu geelaasi yahay geedi (socod ku jiro) iyo hadii uu meel-degen-yahayba. Nirgaha yar-yar ayuu ka-gurayaa shilinta iyo kafana.

Intaas ka dib, waxaa loogu xigsiinayaa inuu barto sida loo-diiro, ee loo-xardho, ee loo-feedho, maraqa (maraqa hasha lagu-maro). Marka uu ilmahaas yari gaadho todobba-jir (7-jir), waxaa laga filayaa inuu noqdo nin buuxa, oo qaan-gaadh ah (ogow: waa todobba-jir). Wuxuu masuul ka noqanayaa—oo uu dusha ku sidayaa—sibraarka caanaha lagu-qaato; hadhuubka xoolaha lagu-maalo; gudinta wax lagu-gooyo; iwm.

Sida caaddada ah, geela waxaa la-geeyaa dhul aad u fog oo daaq-leh. Bishiiba mar ayaa geela lasoo arrorriyaa si loo-waraabiyo. Marka geela lasoo-arroorrinayo, waxaa la lugeeyaa masaafo aad-iyo-aad u dheer. Ilamahaas yarina socodkaa dheer, ee dhibta badan, ayuu lugaynayaa. Waxba ma cunayo; waxba ma cabayo; qodax ayaa mudayasa; qori ayaa mudaya, iwm. Wax-kasta oo dhib ah oo uu dareemo, looma ogola inuu damqado, ama ka cawdo, ama "ax' yidhaahdo. Waa inuu u adkaystaa dhibaato kasta oo soo-gaadha. "Waxaa lagaa-dhigayaa," ayuu yidhi Hadraawi, "mustaqbalka in aad 'nin' noqoto . . . Waxaa [lagu-barayaa]

samirka, dul-qaadka . . . in aad noqto jittattabe raganimoleh."

Intaa ka dib, waxaa la-gaadhayaa ceelkii. Marka geela lageeyo ceelka, ee la-waraabinayo, marka hore waxaa geela latubaa (lagu-urruriyaa) meel ceelka u dhow. Ka dibna, kolba qayb geela ka-mid-ah ayaa lasoo-daayaa si loo-waraabiyo. Miyiga waxaa looga-yaqaan: kala-horida geela. Ilmahaas yari, isaga ayaa geela hor-taagan oo kala-horya (kolba qayb soo daynaya). Waxaa ilmahaas yar la-barayaa inuu u adkaysto gaajada, haraadka, soo-jeedka, socodka, qodaxda, dilka, caggaaga (kabo la'aan inuu ku-lugeeyo).

Hadraawi wuxuu intaa sii-raaciyey, sharaxaad murrugo badan oo si dhab ah u tilmaamaysa shakhsiyadda qofka lagu-koriyo miyaga: "Markaa isagoo qofku duban-yoobey, oo sirrsira, oo qallallan, oo naxariis daayey—dee naxariis ilayn mabuu arage," ayuu noqonayaa qof qaan-gaadha. Hadraawi wuxuu yidhi: "Waxaa lagaa-dhigayaa bir-lab [qof adag] . . . Sida maanta [jirta ee] . . . quraacda, qaddada . . . cashada, iyo dabac-sanaanta . . . jileeca . . . nuglaanta iyo waxaasi ma-jiraan. Waxaa la-doonayaa in aad ul madheedha, oo dubanyo ah noqoto."

Dhinaca cuntada, ilmahaas yar—iyo dadka reer miyiga ahiba—may haysanin cunto ku-filan. "Wax kale lama-cuno," ayuu yidhi Hadraawi. "Hilib lama-cuno. Wax-qaliddu ceebay ahayd. Ummaddu caanay [caano] dhantaa labada wakhti. Haday rag tahay iyo haday dumar tahay, labada wakhti [subaxii iyo fiidkii ayaa] wax la-quutaa. Labada wakhtina caanaa la-dhaamaa." Wuxuu Hadraawi ku-daray laba heesood oo kuu muujinaya cuntadii ay cuni-jireen reer miyigu: "'*Kimis iyo kaluun ma cunee, kursan waynaanu maalaa*.' '*Golen-gole guryahayaga, weli laguma gowracan*.'"

Bar-baarinta innanta (gabadha): dadka reer miyiga ahi,

habka ay u bar-baariyaan innantu wuu ka-duwan-yahay habka loo bar-baariyo inanka.

Culayska ugu-weyn waxaa la saaraa innanta. Inantu marka ay dhalato, lama-anqariyo (*anqarin* micnaheedu waxaa weeye: caano yar ayaa afka luugu-shubaa [lagu-habaa]). Waxaynu soo-aragnay in marka uu inanku dhasho la-anqariyo—caano la-siiyo. Laakiin, innanta lama-anqariyo—caano lama-siiyo. Waa maxay sababta inankana caanaha loo-siinayo; innantana aan loo siin-waayey? Hadraawi wuxuu ku-jawaabay: "Halkaas ayaa [innanta] looga-bilaabayaa samirka iyo adkaysiga. Waa innan oo, shuruuddo badan-baa ku-xidhanoo, marka la-guursaddo ayaa laga-baqayaa inay ceeb keeno."

Intaas ka-dib, innanta labadeeda lugood ayaa laysku dhejinayaa; ka dibna, labadii lugood oo isku-dheggen ayaa xadhig laysugu xidhiyaa (Waxaa looga-jeedaa inay innantu lugaha isku-qabsato mar walba). Ogow, waa innan yar oo jirta dhowr saacadood. Iyaddoo innantii ay lugaheedu isku xidhan-yihiin, ayaa waxaa loo-jiifinayaa bar-barka. Laakiin, marka ay innantu jiifto muddo soddon-daqiiqaddood ama saacad ah, ayaa waxoogaa yar oo caano ah afka loogu-shubayaa.

Marka ay innantu gaadho saddex-jir (3-jir), ayaa loo-bilaabayaa inay howsha guriga qabato. Markiiba waxaa loo-dirayaa inay soo-gurto xaabada. Sababta loogu-dirayo inay xaabo soo-gurto iyadoo saddex-jir ahi waxaa weeye: xaabada ay soo gurayso, lama rabo; laakiin, waxaa la-doon-ayaa in la-baro howsha iyo shaqadda. Marka ay gaadho shan-jir (5-jir), waxaa loo-dirayaa inay raacdo maqasha. Ka dib, marka ay gaadho lix-jir (6-jir) ilaa tobban-jir (10-jir), adhiga ayay raacaysaa. Innanta yari, maalintii oo dhan adhigaas ayay la-joogaysaa.

Isagoo Hadraawi ka-hadlaya cuntada ay innantaas yari

cunto maalintii oo dhan, wuxuu yidhi: saacadu markay tahay lixda subaxnimo, ayay caano cabtaa. Caanahaas ay subaxii cabtay, cuntadda ugu-xigta ee ay quudataa waa wakhtiga fiidnimadda—marka ay soo-hoyso adhigii ay la-joogtay. Taas micnaheedu waxaa weeye: maalintii oo dhan waxaa cunto u ah, caano ay cabto lixda subaxnimo iyo caano ay cabto fiidkii.

Dhinaca kale, innantaas yari iyadoo aan gaadhin tobban-jir (10-jir), ayaa waxaa la-barayaa: xoolaha sida loo-agaasimo, sida loo-raaco, sida loo-liso, sida loo-qalo, sida loo-kariyo. Waxaa kale oo la barayaa sida loo-dhiso aqal Soomaaliga—xadhikihiisa, udubkiisa, dhigtiisa, harrarkiisa, kebediisa, dul-saarkiisa, dheg-saarkiisa, iwm.

Intaas ka dib, waxay baranaysaa sida awrta loo-rarro. Innantu waxay baranaysaa sida ay u hannan-lahayd reer-keeda marka la-guursaddo.

Hadraawi, wuxuu halkan si qoto-dheer inoogu sharaxay qaabka arxan-darrada ah ee uu reer miyigu u bar-baariyo ubadka.

Qoraaga Ibraahim Yuusuf Axmed (Hawd), ayaa qoray maqaal uu ciwaan uga-dhigay, *Cadaabtii Carruurta*. Ibraahim wuxuu maqaalkan si kooban, oo qoto-dheer, ugu lafa-guray (sharaxay) qaabka khaldan ee loo bar-baariyo ubadka Soomaaliyeed iyo wixii laga-dhaxlay. Waxaan jeclaystay in aan maqaalkaas—*Cadaabtii Caruurta*—oo dhamays-tirran soo xigto.

Sababta aan maqaalka oo dhamays-tirran usoo-xigtayna waxaa weeye: kow, habka quruxda badan ee uu Ibraahim u qoray; laba, maqaalka oo ku-haboon in dhamaantii lasoo-xigto, si akhristuhu u fahmo sharaxaadda Ibraahim; saddex, aniga oo aan doonaynin in aan maqaalka kala goo-gooyo. Sababtoo ah, si huffan oo qurux badan ayay sharaxaada maqaalku u qorantay.

Maqaalka dhamaantii waxaan ka-dhigay '*jan-jeedh*'—hadii aad doonayso in aad fahanto micnaha, iyo sida loo-isticmaalo astaanta '*jan-jeedh*,' waxaad akhridaa buuggaygii hore ee *Xeerka Astaamaha Qoraalka*—oo aad ka heli-karto Https://www.amazon.com/s?k=xeerka&i=stripbooks&ref=nb_sb_noss ama waxaad ka-daawan-kartaa shaashadda Youtube ee buugga. Waxaad booqataa Youtube. Ka dibna, waxaad ku qortaa: *Xeerka Astaamaha Qoraalka*. Waxaad ka xulataa: Cudub-ka 15aad: *Jan-jeedh* & Hoos-Xariiq.

Waa kan maqaalkii Ibraahim oo dhamays-tirran (maqaalkan waxba kamaan beddelin; waxna kumaan-darin. Sidii uu u qoraa ayaan usoo-xigtay. Sidaa awgeed, 'khalad' iyo 'sax' wixii ku-jira, waxaa iska-leh qoraa Ibraahim Hawd).

"Cadaabtii Carruurta

Dhulka soomaalida oo u badan oommane iyo qorfe, bulshada hab-nololeedkeedu weligii waxa uu u badnaa raacato reer guuraa ah, oo hayaan, harraad iyo colaad miidhan ah. Nolosha sidaas ah waxaa ka abuurmay dad dabci qallafsan oo naftooda iyo nafta kaleba u daran. Naxariista iyo debecsanaantu ma aha wanaag iyo ammaan ee waa nugayl iyo jileec. Falsafadda nolosha soomaalidu ma ahayn in la hindiso farsamooyin iyo talooyin dhibaatada dabeecadda lagaga baxo, waxa ay se ahayd u adkaysiga duruufaha arxanka daran. Qofka naftiisa iyo jidhkiisa loo ma carbiyo in uu xal helo, waxaa se loo laylyaa in uu u adkaysto harraadka, gaajada, daalka iyo hawlaha culculus.

Falsafadda adkaysi aan hindise lahayn ayaa carruurtana lagu barbaariyaa oo loo tababaraa. Run ahaantii ilmaha soomaaliyeed ee miyiga ku dhashaa ma maro carruurnimo la sheegi karo, waayo isla kolka uu tallaabo dhaqaajiyo ayaa sida qof weyn loo hawlgeliyaa. "Waxaa soo qabo" iyo "orod xoolaha raac" ayaa lagu bilaabaa isaga oo aan tallaabadiisu adkaan.

Isaga oo sidaa u yar ayaa la dilaa oo la canaantaa haddii uu waxa loo diray baylihiyo. Ilmuhu isaga oo aad u yar kolka xoolaha la raaciyo waxaa lagu sii daayaa dhul cidlo ah oo uu ka baqayo bahalaha ka buuxa iyo dadka qalaad. Looga ma tudho. Xooluhu waa wax ciiddaa ka badan oo ayda dhex yaacaya dhulkana dugaag baa ka buuxa ee haddii neef qudha ahi lumo ama bahal qaato carruurta waa la dilaa. Ilmuhu isaga oo kulka daran ee qorraxda ku wajaqay haddii uu geed ku yara gam'o, ama ciyaar ku jeesto, oo xooluhu ka lumaan, in la dilo ayuu ka baqaa oo waxaa laga yaabaa in uu reerkooda tegi kari waayo oo ayda ku dhuunto, sidaana silic iyo saxariir buu ka mutaa. Dhulka soomaalidu waa cadaabtii carruurta.

Ciriidda naarta ah ee lagu cagagubyoonayo, iyo gocondhada iyo qorijabka dhulka daadsan badanaa ilmuhu wuu u kabola yahay. Badanaa kabo loo ma waayin ee waa dhaqan xun oo laylyidda ka mid ah. Xanuunkaa haddii uu ka ooyo ama ka cawdo loo ma garaabo, waayo dadka korsanaya qudhooda ayaa cadaabtaa ku soo barbaaray oo uga tudhi maayaan. Geela oo ah noole adkaysi badan, aadna u socod dheer, ayaa wiil yar oo aan toban jirsan la daba dhigaa. Hooyadii iyo reerkoodii wuu ka tagaa oo dhul fog oo qorfe iyo harraad ah ku fogaadaa. Kulaylaha la arkay ee Geeska Afrika ilmahaa yari muddo dheer biyo ma cabbo, intaana tallaabada dheer ee geela ayuu daba gucleeyaa oo wadnuhu ku go'aa. Habluhuna iyaga oo sidaa u yaryar ayay islaan sheyddaan la hoos fadhiisataa biro daxalaystay iyo qodxo fiiqfiiqan, oo wax gudniinka fircooniga la yidhaahdo ku samaysaa, oo halbawlaha googooysaa, oo jidhkooda iyo naftooduba sidaa ku naafoobaan. Dhulka soomaalidu waa cadaabtii carruurta.

Waa la guuraa oo ilmaha la xambaarsan yahay ama awrta saaran mooyee inta tallaabsan karta maatada iyo maqasha la la xawawariyaa. Ilmuhu kolka uu daal la dhaqaaqi kari waayo oohin iyo ciil buu miciinsadaa, waayo in cidlada lagaga tago

ayuu ka baqayaa, socodna ku ma jiro. Si uu isu tiilo waxaa lagu bajiyaa "caws iyo biyo ku nool baa ku cunaysa" iyo "reer-guure-raac baa ku eeganaya", dabadeed daalkii waxaa u raaca argagax. Markaas oo kale waxaa been loogu sheegaa "geedkaa muuqda ayaa la degayaa", kolka geedkii la gaadhana mid kale ayaa loo sii tilmaamaa. Sidaas ayuu ku bartaa dadka waaweyni in ay beenowaasyo yihiin dabadeed isaganu beenta xalaashadaa. Dhulka soomaalidu waa cadaabtii carruurta.

Ilmaha oo aan weli carrabkiisu afka hooyo karin ayaa malcaamad lagu daraa. Halkaa waxa ay ahayd in uu ugu tago diin, naxariis, xaqdhawr iyo jacaylka Eebbe, waxa uu se ugu tagaa wadaad axmaq ah oo ul dheer la haliilaya. Ulo badan oo meel ugu toonsan ayuu macallinku kolba mid la soo baxaa, oo jidhka dhaylada ah ee carruurta ku idleeyaa. Mid buu yidhaahdaa waad xujowday, oo inta uu indhaha u duubo ul xanuun badan ku dildillaaciyaa, ama carruurta kale ku amraa in ay washamsiyeeyaan oo jidhkiisa yar ciddiyaha ku googoostaan. Haddii uu looxa ka bixi kari waayo cuntada ayaa laga soomiyaa, fasax iyo jimicsina waa loo diidaa. Waalid iyo walaal uu ku ooyo oo u naxayaa ma jiraan, waayo wadaadka heshiiska la la galay baa ahaa "ilmahayga hilibka adiga ayaa leh anigana lafta ii reeb". Barbaarinta qudha ee la yaqaan waa xanuunjin iyo bajin. Dhulka soomaalidu waa cadaabtii carruurta.

Magaalo wal ee soomaaliyeed boqollaal debedyaal baa waddooyinka daadsan. Weligeed sidaas ayay ahayd. Carruurtaasi waa kooxda bulshada oo dhan ugu ayaandaran. Loo ma naxo, loo ma tudho, dulmiga looga ma hiiliyo, danna laga ma galo. Maya, waaba la neceb yahay oo iyaga iyo eyda debedjoogta ah isku si baa loo dhibsadaa oo loo maagaa oo loo dilaa. Isirka soomaalida lagu ma hayo dawlad carruurtaa debedyaalka ah isu xilqaantay oo ururisay oo daryeelka ay xaqa u lee yihiin u qabatay. Sababta ay sidaa wax u yihiin, miyi iyo magaalaba, waxaa la moodi karaa in ay tahay duruufo nololeed ama

dhaqaale xumo, laakiin taasi run ma aha. Miyi iyo magaalaba dhibaatadu waa dhaqan xumo iyo naxariis darro bulshada ku jirta. Dhulka soomaalidu waa cadaabtii carruurta.

Kolkii la magaaloobay dhaqankii barbaarinta wax badani iska ma doorin. Baraha dugsigu wax badan ma uu dhaamin kii malcaamadda. Waxaana cilmi ahaan sugan ilmaha arxandarrada lagu koriyaa in kolka uu weynaado in uu arxanlaawe noqdo oo dadnimada u darraado. Innagana dilka iyo xanuunjintu weligood waxa ay inoo ahaayeen asaaska edbinta, toosinta iyo waxbaridda ilmaha. Sidaa darteed xilli walba waxaa kacay fac wada bahal ah oo arxandarrada iyo macangagnimada kii hore ka la mid ah. Sababtaas ayay u joogtoobeen dhiigyacabnimada, dhaca iyo afxumada dhaqanka galay. Taa ayaa sabab u ahayd dawladnimadii lixdankii ka dib in ay soo baxaan boqollaalkii nin ee dadkooda iyo dalkooda ku dugaagoobay ee wada dadqalka iyo iimaanlaawaha ahaa. Sidaa darteed haddii la doonayo mustaqbalka in la helo soomaali nabad iyo xasillooni ku nool, oo ku wada dhaqan xaqdhawr, xushmad iyo isu arxamid, waa in maanta la bilaabaa barbaarinta carruurta in lagu saleeyo jacayl, naxariis iyo tudhid. Haddii kale dhulka soomaalidu weligii waxa uu ahaanayaa cadaab lagu cagagubyoodo, oo lagu cagaago, oo lagu harraado, oo lagu gaajoodo, oo la isku laayo, oo laga qaxo."

Bar-baarinta Ubadka Magaaladda

Bar-baarinta ubadka ee magaaladdu, dhinacna wuxuu la-mid-yahay bar-baarintii miyiga; dhinacna wuu ka-duwan-yahay. Sababtu waxaa weeye: qaabka loogu nool-yahay magaaladdu aad ayuu uga duwan-yahay qaabkii loogu noolaa miyiga. Nolosha magaaladdu aad ayay uga dhib-yar-tahay, ugana fuddudahay, nolosha miyiga.

Marka magaaladda la-joogo, habka loo-bar-baariyo ubadku waa hab aad u khaldan, oo kalifaya inay ubadku

noqdaan dad aan naxriis, damiir, garasho, cilmi, dedaal, iyo tacab midna lahay. Aan soo qooto, dhowr qaybood oo khaldan oo ka mid ah sida loo koriyo ubadka Soomaaliyeed.

Garaacida ubadka: habka khaldan ee ugu horeeya waxaa weeye: *garaacida ubadka*. Soomaalidu waxay aamin-santay in garaacida ubadku ay tahay hab wanaagsan oo ubadka loo koriyo, oo loo "edbiyo." Garaacida ubadku waa habka ugu khaldan ee ubadka loo koriyo. Cilmi-baadhis ay sameeyeen dhakhtarada cilmi nafsigu (psychologists), waxay ku cadeeyeen in garaacida ubadku ay dhaawac maskaxeed u keento ubadka; noloshooda oo dhana ay dhaawac ku noqoto.

Cilmi-baadhistaasi waxay intaas ku dartay in marka ubadka yaraantoodii la-garaacijiray ay waynaadaan ay yeeshaan dabeecado iyo dhaqamo aan wanaag-sanayn. Kuwaasna waxaa ka-mid-ah. Kow, qofka yaraantiisii la-garaaci jiray, waxaa ku dhacda cuqdad nafsi (l*ow self-esteem*). Waa maxay cuqdada nafsigu?

Buugga *Child Abuse and Neglec*t ee ay qoreen Monica L. McCoy iyo Stefanie M. Keen ayaa si cilmiyeysan u sharaxday dhaawaca uu garaacitaanku gaadhsiiyo ubadka. Waxay sharaxeen, cuqdada nafsiga ah ee ku dhacda ilmaha yar. Ilmaha yar waxaa cuqdad nafsiga ku rida, marka la garaaco wuxuu ilmahaas yari aaminaa in sababta loo garaacayaa ay tahay in uu yahay qof aan wanaagsanay oo khalad samay-naya. Waxaa kale oo uu aaminaa in aanay waalidkiisu jaclayn, maadaama ay garaacayaan. Labadaasi waxay ilmaha yar ku abuuraan inuu yahay qof aan wanaagsanayn oo aad u khariban. Waxaa jira astaamo uu yeesho qofka cuqdad nafsiga qabaa.

Cuqdada nasfiga ahi waaxaa weeye marka aanu qofku naftiisa ku salsoonayn. Astaamaha lagu garto qofka cuqdad nafsiga qaba waxaa ka-mid-ah: 1) marka uu khalad sameeyo,

waxaa aad ugu adag inuu raali-gelin bixiyo oo uu yidhaahdo, "raali ahow;" 2) waa qof iska dhisa dadka kale—wuxuu mar walba ku mashquul-sanyahay si uu dadka isaga dhisi lahaa, habka uu u hadlo, u dhaqmo, ama uu u lebistaa, waa hab uu u arko inay dadku ku jeclaanayaan; 3) si uu dadka ugu helo soo dhawayn, wuxuu ku mashquulaa inuu dadka casuumo, xalfado u sameeyo, ama hadyado siiyo si uu dadka uga helo aqbalaad; 4) wuxuu aaminaa in aanay dadku soo dhawaynaynin marka ay ogaadaan shakhsiyadiisa dhabta ah; 5) wuxuu jecel yahay inu dadka kale hoos u dhigo, si uu u dareemo inuu ka sareeyo; iwm. Waa xanuunada ugu xun ee ay keento garaacida ubadku.

Dhinaca kale, garaacida ubadku waxay keentaa in marka uu ilmuhu waynaado uu noqdo qof dagaal badan. Waayo? Marka qofka la garaaco isgoo yar, wuxuu dareemaa in loo xoog sheegtay, oo dad ka xoog wayni ay garaaceen. Waxaa ilmaha yar maskaxdiisa ku abuuranta in sababta loo garaacayey ay ahayd itaal yarida lagu arkay. Sidaa awgeed, marka uu qofkaasi waynaado dabeecadiisa ayaa xumaata. Wuxuu mar walba ku jiraa difaac iyo cadho. Hadalada caadiga ah ee aanay dadku dhibaato u arkin, isagu wuxuu u fahmaa in isaga la yassayo. Sababtoo ah, hadalada caadiga ah, ee dadka kale caadiga u arkaan, isagu wuxuu u arkayaa in ay yihiin hanjabaad iyo haga-juglayn. Markaa wuxuu isku dayayaa inuu qofkaas ugu jawaabo hadalo aan fiicnayn; halkaasna uu dagaal ka bilowdo.

Qofku markuu cuqdad nafsi qabo, waxaa kale oo uu isku dayaa inuu dadka kale yasso, hoos u dhigo, ku digto, iwm. Waayo? Qofka naftiisa qucdada ka qabaa si uu u dareemo farxad iyo inuu yahay qof isku kalsoon, waa inuu dadka kale yassaa oo hoos u dhigaa. Marka uu dadka kale hoos u dhigo, ayuu dareemaa inuu yahay qof han leh. Hadii uu dadka kale hoos u dhigi kari-waayo, wuxuu isku dayaa

inuu dadkaas ka fogaado, oo uu doonto dad uu hoos u dhigi karo oo uu yassi karo. Taasina waxay kaliftaa in ay dadku karhaan, oo ay nacaan marka ay arkaan inuu yassayo. Marka ay dadku nacaan, ee ay ka fogaadaana, wuxuu qofkaasi dareemaa in sababta ay dadku uga fogaadeen ay tahay in uu yahay qof hooseeya oo aan fiicnayn.

Qofka cuqdad nafsiga qabaa, noloshaas cidhiidhiga ah ayuu ku nool yahay. Waxaas oo dhana waxaa sababay makii uu yaraa ayay waalidkii garaaci jireen. Hadii aad u fiirsato dadka Soomaalida ahna, badankoodu dabeecadahaas aan kor kusoo xusay way leeyihiin. Laakiinse, waxay cuqdadaas ku qariyaan kaftan.

Waa sababta ay Soomaalidu aadka ugu isticmaasho kaftanka, oo mar-marka qaarkood adhaxda is goynayaan. Laakiin, hadii aanay kaftan wax isugu sheegin, hadalkooda kale wuuxuu u badan yahay murran, is canbaarayn, is niyad jabin, iyo cay. Waa sababta ay dadka Soomaalida ahi u yidhaahdaan: "Soomaalidu qof kasta oo shaadhkiisu cad-yahay, waxay jecel yihiin inay shaadhkiisa cad wasakheeyaan." Taas micnaheedu waxaa weeye: in qofka magaca yeesha ay caayaan si ay magiciisa u dilaan.

Astaamaha kale ee lagu garto in dadka Soomaalida ahi qabaan cuqdad nafsi ah, waxaa weeye: naanaysta. Soomaalidu markay arkaan qof ay jidhkiisa ku taalo calaamad aan caadi ahayni, waxay markiiba u bixiyaan naanays. Tusaale: cawar, farruur, guray, cawar, af-qalooc, iwm.

Marka aad eegto diinteena Islaamka, waxaad arkaysaa in ay diinteenu kasoo hor jeedo in caruurta la garaaco. Tusaale ahaan, Nebigu (cs) waligii muu garaacin ilma yar oo uu ka masuul yahay. Isagoon aan ubadkaas garaacin, hadana ubadkaasi waxay noqdaan dad aad u akhlaaq, karti, dadnimo, diin, iyo naxariis leh. Dhinaca kale, dunida horu-

umartayna waa danbi in ilmaha la garaaco. Soomaalidu labada midna may raacin.

Dagaalka ayaa la baraa ubadka: ubadka Soomaalidu marka ay yar-yar yihiin waxaa la baraa in ay la dagaalamaan caruurta yar-yar ee ay is leeg-yihiin. Caruurtaas yar-yar oo guryaha lagusoo garaacay, oo cadhaysan, ayaa hadana waxaa la-barayaa inay la dagaalamaan caruurta kale. Sidaa awgeed, waxaa layska hor keenaa caruur qabta cuqdad nafsi, oo mid waliba uu doonayo inuu muujiyo inuu ka kale ka sareeyo.

Sidaa awgeed, caruurtaasi waxay si joogto ah ugu jiraan is-difaacid, dagaal, iyo rabshad. Ilmaha yar ee laga adkaado waa la caayaa; waxaa la tusaa inuu yahay qof liita. Taasina waxay kusii badisaa cuqdad nafsigii. Sidaa awgeed, wuxuu isku dayaa inuu muujiso in aanu liidanin. Si uu taas u muujinaya wuxuu sameeyaa inuu qof dhaawaco; dilo; ama shakhsiyadooda dhaawaco. Waa sababtay ay Soomaalida ugu badan tahay gacan ka hadalka, dilka, dhaawaca, af xumida, iyo cuqdadu.

Beenta ayaa la baraa: ilmaha yar ee Soomaaliga ah waxaa lagu bar-baariya inuu beenta berto. Beentana cida ugu horaysa ee ku bar-baarisaa waa waalidka. Hablka ilmaha yar beenta loo baraa way noocyo badantay. Aan soo qaato laba tusaale.

Tusaalaha koowaad, waalidku marka uu doonayo inuu ilmaha yar wax u dirto (adeegsado) ama uu doonayo inuu casharada iskuulka si fiican u dhigto, ayuu waalidku wuxuu ilamaha yar ugu balan qaadaa inuu alaab usoo iibin doono hadii uu casharada si fiican u dhigto. Ilamaha yari wuu rumaystaa waalidkii, waxaanu ku dedaalaa inuu casharada si fiican u dhigto. Marka uu ilamaha yari ku guulaysto wax-barashada, ayuu waalidki waydiistaa in alaabtii loosoo iibiyo. Ayaan-daaro'se waalidku balantii wuu ka baxaa.

Marka uu ilmaha yari arko dhacdooyin noocaas ah oo badan, wuxuu fahmaa in beenta iyo in balanta laga baxo, oo ay tahay wax aan dhib lahayn. Tusaalaha labaad, ilamaha yari wuxuu mar walba arkaa aabaha oo been u sheegaya hooyada, ama hooyada oo been u sheegaysa aabaha. Sidaa awgeed, wuxuu ilmaha yari aaminaa inay beentu tahay wax caadiya, oo aan ceeb ahayn. Halkaas ayuu ka bartaa beenta.

Fariid: Soomaalidu waxay fariidka u taqaanaa qofka dhibka badan, rabshada badan, khiyaamda yaqaana, dagaalka badan, iwm. Sidaa awgeed, waxaa ilamaha yar lagu dhiiri-geliyaa inuu yeesho dabeecadahaas aan kor-ku-xusay. Ilamahaas yar waxaa lagu bar-baarinayaa inuu noqdo qof aad u dhaqan xun. Waxaad mar walba arkaysaa caruur Soomaaliyeed oo nin waalan (dhimirka ka buka) dhagax la dhacaya, dilaya, ama ku ciyaaraya. Sababtu waxaa weeye, habka aadka u liita ee ubadkaas loo koriyey.

Nacas: Soomaalidu waxay nacaska u taqaanaa qofka degen, diinta leh, akhlaaqda leh, afka gaaban, aan dadka dhibin, iwm. Dhaqanka Soomaalida, qofka dabeecadahan lihi, waa nacas. Sidaa awgeed, marka ay Soomaalidu ubadka korinayaan, waxay ku dedaalaan in aanu ilmahoodu yeelanin dabeecadaas kor-ku-xusan. Dabeecadahaasina waa dabeecadaha ay ina fartay diinteenu; waana dabeecadaha ay dhiiri-geliyaan dunida horuumartay.

Tacab: Soomaalidu ubadka ma baraan tacab-ka. Tacabku waxaa weeye inuu qofku barto sida dhaqaalaha loo urursado, ee mustaqbalka wax loosii dhigto. Qofka wax urursada, Soomaalidu waxay u taqaanaa "dhabcaal" ama "qof gacan adag." Ilmaha yari hadii lagu arko lexo-jeclo waa la caayaa si uu u noqdo qof gacan furan oo wax bixiya. Taasina ilmaha yar waxay bartaa in aanu nolosha u tabcanin. Waa waxa sababay in Soomaalida badankoodu ku nool yihiin nolol faqiir ah. Hadaba, ilmaha yar ee sidaa

loosoo koriyey, qof noocee ah ayuu noqdaa marka uu waynaado.

Masuuliyadda Shaqsigga Soomaaliga ah

Qofka Soomaaliga ah, wax masuuliyad ah oo saarani—haba yaraatee—ma-jirto. Khalad kasta oo uu qofka Soomaaliga ahi sameeyo, wuxuu eeda dusha ka-saaraa cid kale. Mar walba wuxuu raadinayaa cid uu masuul uga dhigo khaladka uu isagu sameeyey. Mar hadii aanu qofku ogolaanin inuu aqablo khaladkiisa, waxaa adkaata inuu gaadho hor-u-mar nolloleed. Sidii aynu soo sheegnay, waa qof qaba cuqdad nafsi. Wuxuu aaminsan-yahay hadii uu qirto khaladkiisa inuu u ekaanayo qof jilicsan, oo daciif ah. Masuuliyad la'aantaasina waxay dib-u-dhac wayn ku-keentay bulshadda Soomaaliyeed.

Si aan kuugu-cadeeyo masuuliyad-darrada qofka Soomaaliga ah, waxaan soo qaadanayaa dhowr tusaale. Tusaalooyinkaas marka aan sharaxo, waxaan kusoo gebo-gebaynayaa sheeko uu alifay abwaankeenii waynaa ee Xasan Sheekh Muumin. Qisaddan wuxuu abwaan Xasan is bar-bar-dhig ku-sameeyey hab-u-dhaqanka bisadda iyo hab-u-dhaqanka shaqsiyada Soomaalida. Waa qiso kuu-cadaynaysa masuuliyad-darradda qofka Soomaaliga ah, ee ay sababtay habka ubadka loo koriyo oo ku salaysan dhaqanka Soomaalida. Inta aynaan qisadaas xusin, aynu soo qaadano dhowr tusaale oo inoo-cadaynaya masuuliyad-darrada qofka Soomaaliga ah.

Dagaaladda: maxaa sababay dagaaladdii bur-buriyey Soomaaliya? Marka su'aashaas lays-weydiiyo, dadka Soomaalida ah badankoodu waxay ku-jawaabaan, "Waa ciqaab Illaahay! Illaahay ayaa inagu ciqaabay danbiyaddii aynu samaynay." Marka aad jawaabtan si qoto-dheer ugu-

fiirsato, micnaheeda dhabta ahi waxuu noqonayaa: "Hadii aannu Soomaali nahay, dagaalka wadanka bur-buriyey masuul kama-nihin. Waayo? Danbi aanu samaynay ayuunbuu Illaahay nagu ciqaabay. Laakiin, dagaalka anagu maanu bilaabin."

Jawaabtani waxay kala-saartay laba-arimood: danbiyaddii ay Soomaalidu gashay iyo ciqaabtii Illaahay. Jawaabtani markii ay kala-saartay—danbiyaddii ay Soomaalidu gashay iyo ciqaabtii Illaahay—micnaheedii wuxuu noqday sidan.

Hadii aanu nahay Soomaali, waanu samaynay danbiyo badan. Laakiin, danbiyada aanu samaynay may ahayn qaar iyagu sidooda dagaal u bilaabay. Tusaale ahaan, hadii ay badato sinaddu, ama khamri-cabiddu, waa danbiyo waaweyn. Laakiin, danbiyadaasi ma'aha qaar iyaggu sidooda u bilaaba dagaalo. Sinada iyo khamri-cabidda ayay ka-dhalataa ciqaabta Illaahay. Hadaba, maadaama danbiyadda aanu samaynay aanay iyagu siddooda dagaal u bilaabin, dagaalka waxaa bilaabay ciqaabtii Illaahay. Danbiyadu sidooda dagaal uma bilaabaan oo iyagu dad nool ma'aha. Laakiin, ciqaabtaas Illaahay ayaa sababtay dagaalka.

Sidaa awgeed, anagu danbi ayuunbaanu samaynay. Laakiin, dagaalka bilowgiisii masuul kama nihin. Taas micnaheedu waxaa weeye: in aanay Soomaalidu masuul ka-ahayn bilowgii dagaalka. Waa bulsho aan ogolayn in ay dusha u riddato, oo ay qaadato, inay iyaddu masuul ka-tahay, oo ay bilowday, dagaaladda ka dhacay wadankooda.

Sharaxaadan waxaa ku-jira khaladaad aad u tirro-badan. Kow, in Illaahay loo-nisbeeyo inuu sababay dagaal-adda ka-dhacay Soomaaliya waa denbi wayn. Illaahay wuu ka nasahan-yahay dulmigga iyo xumaanta. Laba, waxaa jira wax-yaabo badan—oo Soomaalidu samaysay—oo sababay

inay dagaaladaasi bilaabmaan. Wax-yaabahaas sababay dagaalada Soomaaliyana waxaa baadhitaan cilmiyeysan, oo qoto-dheer, ku-sameeyey dad cilmi u leh.

Dadkaas cilmiga u lihina, mar kaliya may odhanin "waa ciqaab Illaahay." Cilmi-baadhistaasi waxay ummadda u faa'iideysaa waxyaabo badaan oo ay ka-mid-yihiin, in lagadiktoonaado wax-yaabihii sababay dagaaladaas. Laakiin, marka aanay bulshaddu baadhitaan ku samaynin wixii sababay dagaalka, waxaa aad u fuddudaanaysa inay mar labaad sameeyaan khaladaadkii markii hore bilaabay dagaaladaas.

Shaqadda: marka uu qofka Soomaaliga ahi shaqaysanwaayo, marna ma ogolaado inuu eeda shaqo-la'aantiisa isagu masuuul ka yahay. Wuxuu raadiyaa cid—ama shay—kale oo uu eediisa dusha ka-saaro. Aynu soo qaadano dhowr tusaale.

Qofka Soomaaliga ahi marka aanu rabin inuu shaqeeyo, wuxuu eeda dusha ka-saaraa: (1) Illaahay ayaan ii qorin. Markaa wuxuu uga jeedaa: anigu shaqada waan rabaaye, Illaahay ayaan ii ogolayn in aan shaqo helo (qodobkani wuxuu la-mid-yahay kii aynu xaga-sare kusoo sharaxnay); (2) shaqooyinka qaarkood waa ceeb: rayiisle (timo-xiir); xashiish-wale; dhul-xaadh; waashumaan; iwm. Shaqooyinkaas (iyo qaar kale oo badan) wuxuu u yaqaanaa ceeb, si aanu u shaqaysanin. Wuxuu eedii dusha ka-saaray shaqadda lafteedii; oo uu ku dooday inay shaqooyinkaasi ay yihiin shaqooyin 'ceeb' ah. Hadaba, maadaama uu eedahaas u helay cid uu dusha ka saaro (isaguna iska-duway), wuxuu bilaabaa inuu ku noolaado dawarsi (tuugsi). Si uu dawarsiga (tuugsiga) ugu noolaado, wuxuu samaystay kelmed cusub oo u fuddudaysa inuu dawarsaddo. Kelmedaas cusubna waxaa la-yidhaahdaa: "*shaxaad*." Maxay ku kala-duwan-yihiin, maxayse iskaga mid-yihiin, "dawarsi" iyo "shaxaad?"

Labadan kelmadood waxay iskaga mid-yihiin ficilka: waa qof lacag waydiisanaya qof kale. Qofka dawarsanaya waxaa lagu-gartaa, waa qof lacag waydiisanaya qof kale. Qofka wax shaqaadayana waxaa lagu-gartaa, waa qof lacag waydiisanaya qof kale. Dhinacaas marka laga eego, waa laba kelmadood oo isku micne ah. Laakiin, si ay qofka Soomaaliga ah ugu fuddudaato inuu ficilkaas dawarsiga ah sameeyo, wuxuu samaystay kelmeda "shaxaad" oo ka khafiifsan "dawarsi." Kelmeddii "shaxaad" ayay shacabkii Soomaaliyeed waxay ka dhigeen in aanay ahayn "dawarsi." Sidaa awgeed, mar walba waxay dawarsadaan dadka ay ku tuhmayaan inay lacag haystaan.

Furiin-ka: "intaas ayuu calaf-koodu ku ekaa." Waxaa jira sababo tirro-badan oo labada qof ee is-qabaa ay ku kala tagaan. Sababtu waxay noqon-kartaa mid ka-timi dhinaca gabadha; ama dhinaca ninka; ama mid aan labadooda-ba ka iman, ee duruufo nolloleed ay sababeen. Sababaha ka-yimaadda duruufaha nolloshu, iyaggu waa gaar. Laakiin, marka ay sababtu ka-timaado qofka Soomaaliga ah, waxaa caado ah in aanu qofka Soomaaliga ahi marna aqbalin khaladka uu sameeyey.

Tusaale ahaan, hadii uu ninku sameeyo khalad wayn, oo sabab u noqda in ay gabadha kala-tagaan, wuxuu ninku (iyo bulshaduba) eeda dusha ka-saaraan "calaf-ka." Waxay yidhaahdaan, "intaas ayuu calaf-koodu ku ekaa." Micnaheedu waxaa weeye in sababta uu ninku gabadha u furay ay tahay: in calafkoodii kala-dhamaaday, oo aanu waxba ka qaban-karin ninku. Sidaa awgeed, ninku wax khalad ah muu-samaynine, calafkii ayaa dhamaaday. Waxaa eedii lasaaray wax aan ahayn noole—"calaf."

Hadii aad si qoto-dheer ugu fiirsato, waxaad arkaysaa in ay Soomaalidu calafkii ka dhigtay wax 'nool' oo awood uleh inuu reer dhisan dumin-karo. Ujeeddada dhabta ah ee

danbiga dusha looga-saarayo 'calafku' waxaa weeye: kow, in aanu qofku aqbalin danbiggii uu sameeyey; iyo laba, in qofku aanu is-cannaanan, ama is ciil-kaambiyin, ama murugooyin. Mar hadii aanu qofku aqabalin danbigii uu sameeyeyna, wuxuu noqonayaa qof qayral masuul ah. Halkaas-na waxaa ka-dhalanaysa bulsho dhan oo qayral masuul ah.

Dhinaca kale, maadaama aanu qofku qiranin, oo aanu aqbalin, khaladii uu sameeyey, waxaa aad u fuddudaanaysa inuu khaladkaas sameeyo marar badan oo danbe. Waayo? Maba qirsana inuu khalad sameeyey.

Guurka: adigoon dhaqaale u haynin, dumar badan guurso. Waa masuuliyad-darrada halka ugu saraysa. Ninka Soomaaliga ahi, isagoo aan haysanin dhaqaale ku-filan, ayuu guursaddaa dumar badan (laba, saddex, ama afar dumara). Maadaama aanu haysanin dhaqaale fiican, marka uu dumarkaas badan guursado, waxaa ku adkaata noloshii. Sababtoo ah, ma haysto dhaqaale uu siiyo dumarkaas kala-duwan. Sidaa awgeed, waxaa dhacda inuu dumarkaas qaar ka-mid-ah furo, ama ay dumarkaasi ku-noolaadaan nolol aad u cidhiidhi ah oo dhib badan.

Anigu waxaan la-kulmay rag badan oo Soomaaliyeed oo dumar badan qaba. Aan soo qaato laba-tusaale.

Waxaanu saaxiib ahaan jirnay nin la-odhan-jiray Jaamac (ma'aha magiisa dhabta ah). Jaamac wuxuu ka-shaqeeyaa xafiis dowladeed. Mushaharka uu qaataa waa mushahar aan badnayd. Intii aanu guursanin, wuxuu Jaamac dhistay guri hanti ah. Markii aanu is-baranay, wuxuu lahaa saddex xaas. Gabadha ugu-weyni (min-weyn) waxay u dhashay lix caruur ah; waxaanay degenayd guriga hantidda ah. Gabadha labaad (mag-magato), waxay u dhashay saddex caruur ah; waxaanay degenayd guri kirro ah. Gabadha

saddexaad (meel ma-dayato), wax carruura umay dhalin; waxaanay degenay guri kirro ah.

Maadaama aanu Jaamac haysanin wax dhaqaale ah (mushahar-kiisuna uu yar-yahay), waxaa ku-adkaatay inuu biil ku filan u helo saddexdaas reer. Gabadhii saddexaad ayuu u awoodi-waayey inuu ka-bixiyo kirraddii guriga; sidaa awgeedna, gurigii ayaa laga-saaray. Gabadhii ayuu u sheegay inay guriggii aabaheed tagto, oo in muddo ahna lasoo-joogto (intuu dhaqaale helayo). Markii ay gabadhii muddo la-joogtay aabaheed, aragtayna in aanu ninkii wax dhaqaale ah helin, ayay ka-codsatay inuu iska furo. Sidii ayuu gabadhii ku-furay. Markaa waxaa usoo-hadhay, oo uu qabaa laba xaas. Isagoo xaaladaas ku jira ayaa iigu danbaybay Jaamac. Aniga iyo Jaamac ismaanu arkin muddo laba sanadood ah. Laba sanadood ka-dib, ayaanu kulanay.

Wuxuu Jaamac ii sheegay inuu guursaday gabadh kale oo saddexaad. Waan yaabay! Waxaan waydiiyey inuu helay wax dhaqaale ah oo cusub. Wuxuu iigu jawaabay, "Maya! Weli waxaan ka-shaqeeyo xafiiskii dowlada ee aad igu-ogayd, wax kale oo dhaqaale ahina imay-soo-gelin."

Su'aasha aan is-weydiiyey (ilaa iminkana aan is-weydiiyaa) waxaa weeye: mar hadii uu gabadhii hore u furay dhaqaale la'aan; iminkana aanay soo-gelin wax dhaqaale ah oo cusubi, maxaa ku-kalifay inuu gabadh kale oo saddexaad guursado? Waxaa ii cadaatay inuu yahay qayral-masuul; waana sida ay u badan-yihiin raga Soomaalidu.

Kufsigga: shaydaan-baa ka adeegay; ama waa lagu sababey. Marka uu ninka Soomaaliga ahi gabadh kufsaddo, naftiisa wuxuu ku-maaweeliyaa (bushadduna ku-maaweelisaa): shaydaan-baa ka adeegay. Ninka Soomaaliga ahi marna ma aqabayo inuu khaladkaa weyn—ee qudh-gooyadda ah—masuul ka-yahay. Khaladkaas waxaa ka-masuula 'shaydaanka.'

Laakiin, waxaa is-weydiin-leh: waynu og-nahay inuu shaydaanku dadka u horseedo danbiyo aad u tirro-badan. Laakiinse, waa mar-marsiiyo laga hoos galo kufsiga. Taas waxaa kuu cadaynaya xasiiskii Nebiga (cs). Wakhtigii Nebigu (cs) joogay ayaa gabadh la kufsaday. Ninkii gabadha kufsaday wuxuu Nebigu (cs) ku amray in la dilo. Nebigu (cs) muu odhanin, shaydaan ayaa ku kalifay. Danbiga ninka ayaa sameeyey, isaga ayaana lagu fuliyey ciqaabtii diintu dhigtay. Laakiin, ninka Soomaaliga ahi ma raacayo tusaalahaas Nebiga (cs). Waa nin aan ogolayn inuu aqbalo khaladkii uu sameeyey.

Tacabka: maanta ayaan hubaa; berito yeelkeed. Sida ay u badan-yihiin Soomaalidu, uma tabcadaan (wax uma dhigtaan) mustaqbalka. Wax masuuliyad ah iskama-saaran inay ka-diyaar-garoobaan mustaqbalka. Qofka Soomaaliga ahi wuxuu ka-fikiraa, oo ku-xisaabtamaa, wakhtigaas uu joogo "maanta." Marna kama-fikirayo inuu naftiisa iyo caruurtiisa u tabco, oo uu dhaqaale meel u dhigo. Waxaa kaliya ee uu ka-fikiryaa "maanta;" mana yaqaano "berito." Waa waxa sababay in ay ummadda Soomaalida badankoodu noqdaan faqiir.

"Basar Xumaa; ma Soomaali-baa"

Masuuliyad-darrada, iyo hab-u-fikirka liita ee bulshadda Soomaalida, waxaa si qoto-dheer—oo xigmaddaysan; oo ay ku-jirto male-shaxanimo xeel-dheeri—u falanqeeyey abwaaanka wayn ee Xasan Sheekh Muumin. Si uu inoogu iftiimiyo dhaqanka Soomaalida, abwaanku wuxuu sooqaatay xayawaan ay Soomaalida isku-dhaqan-yihiin. Dabciga iyo dhaqanka xayawaankaas iyo dhaqanka Soomaalida ayaa isku-mid-ah. Abwaanku wuxuu ku-bilaabay hadalkiisii:

Marka aad kulantaan geedaasi [xayawaan-kaas], eed tidhaahdo: "Maxaa lagu-yidhaa?" Waxay ku-odhanaysaa, "Basho." Waad dhaafaysaa, oo mid-kale ayaad u tagaysaa [oo la-mid-ah]. [Waxaad ku-odhanaysaa], maxaa lagu-yidhaa? Waxay ku-odhanaysaa, "Bisad." Tii saddexaad ayaad u tagaysaa [waxaanad waydiinaysaa]: "Maxaad tahay?" [Waxay ku-odhanaysaa], "mukullaal ayaa lay-yidhaa." Waad dhaafaysaa [oo tii afaraad ayaad u tagaysaa. Waxaad odhanay-saa, "maxaa lagu-yidhaa], "Yaan-yuur-baa lay yidhaa." Waad dhaafaysaa [oo tii shanaad ayaad u tagaysaa. Waxaad odhanay-saa, "maxaa lagu-yidhaa], "Dinad-baa lay yidhaa." Sidaad u socoto—ma dhamayn-karo iminka magac-yaddeedee—ayay ugu-danbaysta ku odhanaysaa, "Yaaw! baa lay-yidhaa."

. . . Bahashani [bisaddu], waa isku sinji . . . way isu-wada eg-tahay; hase-ahaatee, dee magac badanaa. Waxan oo magac ah, maxaa ku-kalifay? May mid [kaliya] la-baxdo. **BASAR XUMAA, MA SOOMAALI-BAA.**

. . . Bisaddu . . . wax la-cuno kaluun-bay u jeceshahay. Markaan yar-yarayn, hooyo waxay na-odhan-jirtay: "Hooyo, yaanay ku-diline isaga tuur [kaluun-ka], waa meherkii hooyadeede." [Waa sheeko Soomaali. Soomaalidu markii ay aragtay sida ay bisaddu u jeceshahay kaluunka, ayaa waxay alifeen sheeko. Waxay yidhaahdeen, sababta ay bisadu kaluunka u jeceshahay waxaa weeye: markii bisada hooyadeed la-meherinaayey, ayaa waxaa meherkeedii ay ka-dhigatay kaluun].

Kaluunkii bad ayuu ku-jiraa. [Kaluunkuna badda] kamasoo baxo . . . [Bisaduna] biyaha way ka-xanaaqdaa. [Waxaa bisadda loo-yaqaanaa] 'ma maydhato' . . . Bal waayahaye, kaluunka bada ku-jira—een kasoo-baxayn—iyana aanay ugu-tagayn, ee aanay lasoo-baxayn, maxaa bashooy ku jeclaysiiyey? [Mar hadii ay bisadu jeceshay

kaluunka; kaluun-kiina uu bada ku-jiro, dibedana aanu usoo-baxaynin; bisadiina ay biyaha necebtay; sidee ayay u-suurto-gelaysaa inay bisadu hesho kaluun?].

[Waxay ku-helaysaa, saddex mid-uun]: boob, baryo, iyo tuuggo. Waa saddex [kala]daran. Baryo waa ceeb. Boob-na waa dhagar. Tuuggana kasii-daran, oo waa ceeb. Bal inta ay saddexdaa nolosheeddii ku-xidhay, [may barato sida loo-lasoo baxo kaluunka]. Maxaa [u-diiday] sharafta wixii lagu-helaayey. **BASAR XUMAA, MA SOOMAALI-BAA.**

Xayawaanka Illaahay markuu waagu-beryo, wuu wada [kalahaa]. Wadaadku [wuu eedaamaa]; diiggu waa qayliyaa; dameeruhu waa ciyaan; shinbiruhuna [way ciyaan]. Maxay leeyihiin? [Waxay leeyihiin]: "Waagii-baa inoo-beryey. Waan arsaaqad doonanaynaa. Mugdigii wuu dhamaaday. Cabsidii way dhamaatay . . . 'nin iyo tamartii;' 'nin iyo taagtii.' 'Nin cadhoon hela, iyo nin quwaax hela; hala qadhabsado.' Yaa Rasaaq! Yaa Fataax!" Basho markaa maxay samaysaa?

Intay soo waydaarato, ayay hurto-tagtaa. Kasii darrane, meel ay ku-raaxaysato ayay hadana doontaa—oo [ay] seexato . . . Bashooy! Raaxo waxay u xalaal-tahay, oo raaxaysta, ninka shaqaystay—ee wax dhigtay. Hadaba, [bashooy] maxaad soo-shaqaysatay—oo [aad] meel-dhigatay? . . . Bashooy! Waxan aad ku-raaxaysanayso, ma-leedahay horta? Maya . . . Sababta raaxada ku-bartay, adoon hubkeedii u samaysani, maxay tahay? [**BASAR XUMAA, MA SOOMAALI-BAA**].

[Nin] . . . faqiira, oo soo-gubtay . . . ayay [xaaskiisi] xanjeeraddii . . . u dhigtay . . . Markii uu [ninkii] soo-fadhiistay isagii oo [ay gaajo hayso] . . . ayay [bisadii] soo kacday: "Aaaww . . . aaaww . . . aaaww." [Ninkii ayaa canjeeradii badh u gooyey bisaddii]. Markaasay [bisadii] tidhi, "ma cuno" [Yacnii, way diiday inay cunto. Waayo?

Bisadu ma cunto canjeerada]. [Hadana, ninkii wuxuu u gooyey rootigii]. Waxay [bisadii] tidhi, "waan ka-caaganahay [ma cuno]." Baastaddii ayuu u daayiyey. [Bisadii waxay tidhi], "Igaba-daa hadalkeeda taa."

[Ninkii ayaa bisadii waydiiyey]: "Oo maxaad doonaysaa?" [Bisadii ayaa ku-jawaabtay]: "Hilib iyo caano ma-haysaa?" Hilib iyo caano, kii soo-shaqeeyey ayaa waayey. Iyadoo uunkii saaka shaqo-tagey soo waydaaratayna—oo seexatay-na—hillib iyo caano inay ku [qadayso ayay] doonaysaa. Waa sidii kaluunkii oo kale.

Bal waayee [bisadeey], sideed ku-helaysaa? Boob iyo baryo iyo tuugaa igu filan . . . [Bisadeey] hadaanad waxba haysan . . . xaaraan iyo xalaal, wixii aad heshaba maad iska-cuntid? Ilayn waxba ma lihidoo bakhtigaa kuu xalaalee. Kibir-na maxaa keenay? [**BASAR XUMAA, MA SOOMAALI-BAA**].

Qodobadaas aan soo koobay, sheekadaas abwaanka, iyo qaar kale oo aad u tirro-badani, waxay ina tusayaan qaabka khaldan ee ay Soomaalidu u koriso ubadka. Taas oo sababtay inay soo saaraan bulsho dhinac walba ka bur-bursan. Waxay ka-mid-tahay waxyaalaha sababay dib-u-dhaca bulshada Soomaalida. Si looga baxo dib-u-dhaca intaas leeg, waxaa muhiima in aynu bedelo habka aynu u korino ubadkeena, ee ku salaysan dhaqanka Soomaalida. Waa meelaha dhaqankeena ku jira ee u baahan in la bedelo.

5

DHAQANKA SOOMAALIDA IYO DIMUQURAADIYADDA

Dhaqanka Soomaaliddu ma-yahay dhaqan la-jaan-qaadi-kara dimuquraadiyadda, mise waa dhaqan aan la-jaan-qaadi-karin? Hadaan si-kale u-dhigo: dhaqanka Soomaalidda iyo dimuquraadiyaddu ma-yihiin laba isla jaan-qaadi-kara? Jawaabtu waa *MAYA*. Dhaqanka Soomaaliddu ma'aha dhaqan la-jaan-qaadi-kara dimuquraadiyadda. Hadaba, waxaa is waydiin muddan: halkee ayay dhibaatadu ka imanaysaa?

Cutub-kani wuxuu ku-doodayaa in dimuquraadiyadda iyo dhaqanka Soomaaliddu aanay isla-jaan-qaadi-karin. Dhibaataduna aanay ahayn dimuquraadiyadda. Laakiinse, dhibaataddu ay ka-imanayso dhaqanka Soomaalidda. Si aad u fahanto doodan, waxaan cutub-kan u dhirraan-dhirrinayaa siddan soo socota.

Kow, marka hore waxaynu sharaxaynaa micnaha reyga dimuquraadiyad: Waa maxay micnaha ereyga "dimuquraadiyad?" Waxaa kale oo aan ka jawaabayaa: waa maxay qaab-dhismeedka nidaamka dimuquraadiyaddu? Marka aad fahanto micnaha iyo qaab-dhismeedka

nidaamka dimuqraadiyadda, waxaynu u-gudbaynaa qodobka labaad.

Laba, waxaynu sharaxaynaa qaab-dhismeedka (social structure) bulshadda Soomaalidda: Waa maxay micnaha "qaab-dhismeed bulsho?" Waa noocee qaab-dhismeedka bulshadda Soomaaliyeed? Marka aad fahanto, qaab-dhismeedka nidaamka dimuquraadiyadda iyo qaab-dishmeedka bulshadda Soomaalidda, waxaynu u-gudbaynaa qodobka saddexaad.

Saddex, waxaynu is-bar-bar-dhigaynaa qaab-dhismeedka nidaamka dimuquraadiyadda iyo qaab-dhismeedka dhaqanka Soomaalidda. Qodobkan saddexaad wuxuu kuucadaynayaa in aanay labadaas qaab-dhismeed isla-jaanqaadi-karin; dhibaatadduna aanay ahayn dimuquraadiyadda; laakiin, in ay dhibaataddu tahay dhaqanka Soomaalidda.

Afar, qodobka ugu-danbeeya ee cutubkan, waxaan kusoo-ban-dhigayaa sida looga-bixi-karo dhibaatadda dhaqanka Soomaalidda ee carqaladda ku-noqday geeddi-socodka dimuquraaddiyadda: Waa maxay xalku? Sidee ayaa loo-beddeli-karaa dhaqanka Soomaalidda ee carqaladda ku-noqday dimuquraadiyadda? Hadii xal-loo-waayo, mustaq-balka dimuquraadiyadda ee Soomaaliddu siduu u-ekaanayaa?

Micnaha Dimuquraadiyadda

Waa maxay micnaha ereyga "dimuquraadiyad?" Dimuquraadiyaddu (*democracy*) waa laba erey oo laysku-xidhay; asal-ahaana kasoo-jeeda luqadda Giriigga. Labadan erey waxay kala-yihiin: *demos* iyo *kratia*. *Demos* micnaheedu waxaa weeye, "*the people*" ama "shacabka," "dadka," "bulshadda"; *Kratia* micnaheedu waxaa weeye, "*rule*" ama

"xukun." Marka labadaas kelmeddood laysku-daro waxay noqonayaan: "*rule by the people*"; oo af-Soomaali ku-noqonaya, "*xukunka shacabka*."

Xukunka shacabka micnihiisu waxaa weeye: marka arin la-go'aaminayo in go'aanka ay dadka badankoodu isku-racaan—boqolkiiba-kow-iyo-konton (51%)—ayaa la-qaadanayaa. Tusaale ahaan, boqol qof (100 qof) ayaa magaalo wada-deggan. Boqolkii qof ayaa go'aansadday inay iskasoo xulaan qofka ku haboon in loo-dhiibo hoggaanka magaaladda. Gabadh iyo nin ayaa isusoo sharaxay in mid-waliba uu noqdo hoggaamiyaha magaaladda. Laakiin, dadkii ayaa qaybina gabadhii jeclaatay, qaybina ninkii jeclaatay. Sidaa awgeed, waxaa dadkii laga-codsadday in qof waliba uu doorto qofka uu u arko inuu ku-haboon-yahay hoggaaminta magaaladda.

Dadka codkoodii ayaa la-qaaday, natiijaddiina waxay noqotay: 51% (boqolkiiba-kow-iyo-konton) waxay doorteen gabadhii; 49% (boqolkiiba-sagaal-iyo-afartan) waxay doorteen ninkii. Sidaa awgeed, waxaa hoggaankii magaaladda loo-dhiibay gabadhii.

Halkan waxaa inooga-cadaatay in hoggaankii magaaladda loo-dhiibay cidii ay doorteen tirraddii ugu-badnayd ee magaaladdu. Bal dib ugu noqo qeexiddii dimuquraadiyaddu: "xukunka shacabka." Hadii aynu soo koobno micnaha dimuquraadiyadda, waxaan ku sharixi-lahaa: codka shacabku meesha uu u-bato, ayaynu raacaynaa. Dhinacaas aynu ka-eegnay dimuquraadiyaddu waa dhinicii doorashadda (ama xulashadda) hoggaanka. Balse iminka aynu eegno in dhaqanka Soomaaliddu uu lahaan-jiray nidaamka dooraashadda (ama xulashadda) hoggaamiyama, ee loo-yaqoono dimuquraadiyadda.

Qaab-dhismeedka Nidaamyadda Dimuquraadiyadda

Qaab-dhismeedyadda nidaamyadda dimuquraadiyaddu wuu kala-duwan-yahay. Waxaa jira nidaamyo badan oo dimuquraadiyaddeed. Sababta ay nidaamyaddaas dimuquraadiyaddu u-kala-duwan-yihiina waxaa weeye: bulsho waliba waxay leedahay dhaqan, diin, qaab-dhismeed bulsho, iwm., oo u gaar ah. Nidaamka dimuqraadiyada ee ay bulshadu qaadanaysana waxaa xukumaya dhaqanka, diinta, iyo qaab-dhismeedka bulshaddu leedhay.

Tusaale ahaan, si aad u fahanto, aynu soo-qaadano laba nidaam oo dimuquraadiyaddeed, oo aad u-kala-duwan: *liberal democracy* and *illiberal democracy*. Maxay ku kala-duwan-yihiin *liberal democracy* and *illiberal democracy*? *Liberal democracy* waa nidaamka dimuquraadiyadda ee ay ku-dhaqmaan wadamadda reer Galbeedku (Yurub, Kanada, Ustareeliya, iwm., [USA kuma jirto]).

Liberal democracy waa laba erey oo kala-ah: "*liberal*" iyo "*democracy*." Kelmedda "*liberal*" waxay kasoo-jeedaa "*liber*" (oo Latin ah), micnaheeduna yahay, "*free*" ama "xor" (kelmedda democracy waynu soo sharaxnay). Sidaa awgeed, *liberal* waxaa looga jeedaa "xoriyada qofka."

"Xoriyadda" qofka waxaa looga-jeeddaa inuu qofku xaq u leeyahay:

- *xoriyadda diinta*—taas oo micnaheeddu yahay inuu qofku qaadan-karo diinta uu doono; ka bixi-karo diinta uu haysto; noqon-karo qof aan diinba haysanin ama aan Illaahayba aaminsanayn:
- *xoriyadda hadalka*—taas oo micnaheeddu yahay inuu qofku ka-hadli-karo wixii uu-doono; dhalliili-karo wixii uu-doono (xataaa Illaahay iyo

diimaha); fikirkiisana si-xor-ah usoo gudbin-karo:

- *xoriyadda urrurrada*—in uu qofku ku-biiri-karo urrur kasta oo uu doorto; urur siyaasadeed iyo urrur diimeed kuu doono ha ahaadee:
- *xoriyadda guurka*—in uu qofku guursan-karo cida uu doono; xataa qof ay isku-sinji yihiin (Qowmu-Luud):
- *xoriyadda war-baahinta*—in ay war-baahintu noqoto xor, oo ay wararka usoo gudbin-karto si-xor ah; iwm.
- *xoriyada sharciga*: waxaa kale oo ay bulshaddu xaq-u-leedahay inay u codayso—oo ay doorato—sharcigga lagu-xukumayo wadanka. Taas micnaheeddu waxaa weeye: in ay dadku bedeli-karaan sharcigga lagu-maamulo wadanka.
- iyo wixii la mid ah.

Hadii aynu isku-jimcino labadaas erey ee aynu kor-kusoo-sharaxay—"*liberal*" iyo "*democray*"—micnahoodu waxaa weeye: "nidaam dimuquraadiyaddeed oo ku-dhisan, kuna-salaysan, xoriyadda iyo xuquuqda qofka; qofkaas oo si toos-ah iyo si-dadban-ba u-go'aaminaya madaxda iyo dejinta sharciyadda lagu-dhaqmayo."

Taariikhda reer Galbeedka, labada kelmedood ee *Liberal* iyo *democracy* waa laba erey oo mar walba wada socda oo aanay kala reebin—illaa ay xad gaadhsiiyeen in labada erey ay isku micno yihiin. Laakiin, wadamada Yurub, xoriyada qofka (liberalism) ayaa ka horeeyey dimuquraadiyada; xoriyada qofka ayaana sababtay inay dimuquraadiyadu ka tis-qaado wadamada Yurub.

Culimada waawayn ee Doh Chull Shin iyo Richard Rose waxay sheegeen in "wadamadii [Yurub] ee ugu hor-qaatay

dimuquraadiyada, sida Ingiriiska iyo Iswiidhan, markii hore waxay noqdeen wadamo casri ah, sharcigu shaqeeyo, urrurada bulshadu shaqeeyaan, madaxdana lala xisaabtamo. Markii ay intaas ku guulaysteen, ayay si aayar-aayar ah u bilaabantay inuu hir-galo oo ay aqbalaan nidaamka dimuquraadiyada." Kaasi waa nidaamka diqumuraadiyadda ee loo-yaqaano *liberal democracy*. Bal iminka aynu eegno nidaamka *illiberal democracy*, oo ah nidaam dimuquraadiyaddeed oo kasoo-hor-jeedda nidaamka reer Galbeedka.

Illiberal democracy waa laba erey oo kala-ah "*illiberal*" iyo "*democracy*." Kelmedda "*illiberal*," micnaheedu waxaa weeye, "xaddaynta xoriyadda." Waa kelmed kasoo-hor-jeeda kelmeda "*liberal*." Nidaamkan *illiberal democracy* waa nidaam ku-salaysan in shacabku ay xaq-u-leeyihiin inay doortaan madaxdoodda. Laakiinse, nidaamkani waxaanu ogolayn laba-arimood (waana labada arimood ee uu kaga-duwan-yahay nidaamka *liberal democracy* ee reer Galbeedka).

Kow, nidaamkani wuxuu xadeeyaa "xoriyadda" qofka. Qofka shicibka ahi wuu leeyahay xoriyad uu sharciggu siinaayo. Laakiin, xoriyadiisu waxay leedahay xudduud. Xoriyadda qofku uu yeelanayo waxaa go'aaminaya dhaqanka iyo diinta ay haystaan shacabku. Tusaale ahaan, kasoo qaad in Soomaaliya ay qaadatay nidaamka *illiberal democracy*. Muxuu noqonayaa xadka ay yeelanayso xoriyadda qofku?

Qofku wuxuu xor u noqonayaa wax-kasta oo ay Shareecadda Islaamku xoriyad u siinayso qofka Muslimka ah. Hadaynu xusno dhowr ka-mid-ah xoriyaddahaas ay Shareecada Islaamku siisay qofka Muslimka ah:

- *xoriyadda hadalka*—taas oo micnaheeddu yahay

inuu qofku ka-hadli-karo wixii uu-doono; dhalliili-karo wixii uu doono, fikirkiisana si-xor-ah usoo gudbin-karo (marka laga-reebo: diinta, Illaahay, iwm)
- *xoriyadda urrurrada*—in uu qofku ku-biiri-karo urrur kasta oo uu doorto (hadii aanu urrurrku kasoo-hor-jeedin shuruucda diinta Islaamka)
- *xoriyadda war-baahinta*—in ay war-baahintu noqoto xor, oo ay wararka usoo gudbin-karto si-xor ah;
- iwm.

Laakiinse, qofku xaq uma-laha arimahan soo-socda:

- *xoriyadda diinta*—qofku ma-qaadan-karo diinta uu doono; kama bixi-karo diinta Islaamka; ma-noqon-karo qof aan diinba haysanin ama Illaahayba aaminsanayn:
- *xoriyadda guurka*—in uu guurku ku-salaysan-yahay nin iyo naag; laakiin, aanu qofku guursan-karin qof ay isku-jinsi-yihiin (Qowmu-Luud waa danbi; lamana ogola); iwm.
- *Maandooriyaha iyo ribbada*—qofku ma isticmaali karo maandooriye, sida khamriga iyo daroogada.
- *Ribbada*—qofku xor uma aha inuu ku shaqaysto ribadda ay diinteenu xaaraanta ka dhigtay
- iwm

Laba, nidaamkan *illiberal democracy* wuxuu xadeeyaa sharciyadda ay dadku u codayn-karaan, ee ay bedeli-karaan iyo sharciyadda aanay bedeli-karin. Sharciyadda aanay dadku bedeli-karin waxaa ka-mid-ah: wixii ay Shareecadda Islaam-ku xaraan ka-dhigtay; sida, isticmaalka khamriga,

khamaarka, ribadda, iwm. Arimahaas ay Shareecaddu xaraamaysay iyo arimaha ay xalaalaysay, midna dadku xaq uma-laha inay wax-ka-bedelaan.

Laakiinse, waxaa jira sharciyo ay dadku u-codayn-karaan, waxna ka-bedeli-karaan. Tusaale ahaan, hadii la-doonayo in la-samaysto sharci lagu-kala-hago gaaddiidka wadooyinka magaaladda maraya, dadku xaq ayay u leeyi-hiin inay u codeeyaan habka loo kala-hagayo gaadiidka. Si loo kala-hago gaaddiidka, ma waxaynu samaysanaa askar "taraafiko" ah oo gaaddiidka kala-hagta, mise waxaynu samaysanaa "laydhadh" aynu ku xidhno wadooyinka oo gaddiidka kala-haga? Sharciggan gaaddiidka lagu kala-hagayo dadku xaq ayay u-leeyihiin inay u-codeeyaan shar-cigga ay-doonayaan.

Labadan tusaale waxay inoo cadeeyeen in nidaamka dimuquraadiyadda ee *illiberal democracy* uu aad uga-duwan-yahay nidaamka kale ee *liberal democracy* ee ay ku-dhaq-maan dowladaha reer Galbeedka ahi. Labaddubana waa laba-nidaam oo dimuquraadiyaddeed.

Nidaamyadda dumuquraadiyadda iyo xoriyadda qofkuna iskuma-xidhna. Waa laba aad u-kala-duwan. Buugga *The Future of Freedom: Illiberal Democracy at Home and Abroad* ee uu qoray Fareed Zakaria wuxuu ku sheegay in xoriyadda qofka iyo dimuquraadiyaddu aanay isku-xidhnayn. ". . . xoriyadda hadalka, urrurradda, diimaha . . . xoriyaddahaas shaqi ee badani . . . shaqo kuma-laha dimuquraadiyadda." Doodaas mid-la-mida waxaa isaguna ku dooday Michael Parenti. Buugga *Democracy for the Few* ee uu qoray Michael Parenti wuxuu ku dooday: "nidaamka dimuquraadiyadu waxaa weeye nidaam siyaasadeed kaas oo awoodu ay gacanta ugu jirto tirrada ugu badan ee bulshda."

Labadaas nimaam ee dimuquraadiyaddeed waxay inoo iftiimiyeen inay jiraan nidaamyo dimuquraadiyaddeed oo

kala-duwani. Si kasta oo ay nidaamyadaas dimuquraadiyad-deed u-kala-duwan-yihiin, dhamaantood waxay iskaga-mid-yihiin in shacabku xaq u leeyahay inay doortaan hogaamiyeyaashooda.

Doorashadda Hoggaamiyaha

Dimuquraadiyaddu waxay ku salaysan-tahay doorashadda (ama xulashadda) hoggaamiyaha ama hoggaamiyeyaasha bulshadda. Dimuquraadiyaddu waa "nidaam doorasho" oo ummadda siinaya xoriyad ay ku-doortaan hoggaamiyaha ay u-arkaan inuu dantooda ka-turjumayo ama uu dantoodda hore-u-marinayo. Hadaba, waxaa is-weydiin leh: bulshadda dimuquraadiyadda isticmaashaa maxay ku-doortaan hoggaamiyeha ama hoggaamiyeyaasha?

Bulshaddu siddeedaba waxay u kala qaybsan-tahay kooxo kala-duwan, oo kala dan ah. Kooha-haas kala duwanna waxay ka-mid-ah: ardayda, baayac-mushtarka, shaqaalaha, beero-layda, macalimiinta, dan-yarta, dumarka, duqaytida, iwm. Koox waliba waxay leedahay danno u gaar ah; waxaanay ku-deddaalaan inay doortaan qofka dantoodda fulinaya. Maadaama kooxahaas kala duwan ee bulshadu ay leeyihiin danno kala duwan, waxaa caadi ah in danahaas kala duwani ay iskasoo hor-jeestaan; khaasatan wakhtiga doorashooyinka. Si aan taas kuugu sharaxo, aan soo qaato laba kooxood oo bulshada ka-mid-ah dana-hooduna iskasoo hor-jeedaan.

Tusaale ahaan, ardayda iyo baayac-mushtarka. Ardaydu waxay doortaan qofka wax-barashadda ka-dhiggaya bilaash; ama lacagta lagu-dhigto iskuuladda iyo jaamacaddaha hoos-u-dhiggaya. Sidoo kale, dadka baayac-mushtarka ahi waxay ku-deddaalaan inay doortaan qofka hoos-u-dhiggaya (ama yaraynaya) cashuurta laga-qaado dadka baayac-

mushtarka ah. Labaddan kooxood—ardayda iyo baayac-mushtarka—danahooddu way iska-soo hor-jeedaan. Ardaydu waxay rabaan qof wax-barashadda ka-dhiga bilaash. Laakiin, xaggee laga-keenayaa lacagta lagu-bixi-nayo wax-barashadda? Si lacagtaas loo-helo, waa in cashuur badan laga-qaadaa dadka baayac-mushtarka ah, iyo dadka kaleba. Laakiinse, dadka baayac-mushtarka ahi ma-ogola in cashuur badan laga-qaado. Baayac-mushtarku waxay rabaan qof yareeya cashuurta laga-qaado baayac-mushtarka.

Sidaa awgeed, waxaa tar-tan aad u sareeyaa uu dhex-marayaa ardayda iyo baayac-mushtarka. Waayo? Hadii ardaydu ku guulaysato inuu wadanka maamulo qofka ay rabaan, markaa baayac-mushtarkii ayaa laga-qaadayaa cashuur badan. Sidaa awgeed, dadka baayac-mushtarka ahi waxay aad ugu deddaalayaan inay ka-guulaystaan qofkaas ay ardaydu rabo, oo ay soo-saaraan qofka ay iyaggu rabaan. Dimuquraadiyadda dhabta ahi waa-taas.

Waa nidaam ay dadku isu-xulafaystaan, oo isku-kaashaddaan, si ay u-hirgaliyaan danahoodda gaarka u ah, ee nolloshoodda sare-u-qaadaya. Waa nidaam walaaleeya dadka isku-danta ah. Waa nidaam ay is-xigsaddaan inta isku-danta ahi. Halkan waxaynu si-kooban ugu-sharaxnay micnaha iyo nidaamka dimuquraadiyadda.

Hadaba, waxaa is-weydiin muddan: nidaamkaas dimuquraadiyada ee aan kor-kusoo sharaxay iyo dhaqanka Soomaalidu ma yihiin laba isla jaan-qaadi-kara, mise waa laba aan isla jaan-qaadi-karin? Si aan su'aashan uga jawaabo, waxaan sharaxaad guud ka bixinayaa qaab dhis-meedka bulshada Soomaaliyeed, ee ku salaysan dhaqanka Soomaalida. Marka aad fahanto qaab-dhismeedka bulshada Soomaalida, ayaan si fuddud u fahmi kartaa inuu la jaan-

qaadi-karo nidaamka aynu kor kusoo xusnay ee dimuquraadiyada.

Qaab-dhismeedka Bulshadda Soomaalidda

Guud ahaan, marka ay bulshadda Soomaaliddu dooranayso (ama xulanayso) hoggaamiyaha, shuruudda kaliya ee ay ku-doortaan waxaa weeye qabyaalad. Hadii qofka isusoo-sharaxay hoggaamiye-nimaddu uu yahay qabiilkaaga, waad dooransaa; xataa haddii uu yahay qof aan lahayn cilmi, karti, dadnimo, diin, iwm. Laakiin, haddii qofkaas isasoo-sharaxay aanu ahayn qabiilkiina, ma dooranaysid; xataa haddii uu yahay qof leh cilmi, karti, danimo, diin, iwm. Waayo?

Bulshadda Soomaaliddu waxay u kala qaybsan-tahay kooxo kala-duwan; sida bulshooyinka aduunka oo kale. Kooxa-haas bulshaddu u kala-qayb-santay, ee kala-duwanna, waxaa ka-mid-ah: ardayda, baayac-mushtarka, shaqaalaha, beera-layda, macalimiinta, tijaarta, dan-yarta, dhakhaatiirta, iwm. Koox walba oo bulshadda ka-mid-ihina waxay leeyihiin dan gaar ah oo ka-dhaxaysa. Sidaa awgeed, waxaa waajib ah in koox waliba ku-dedaasho (oo ay raad-sato) siddii ay u-gaadhi-lahaayeen danahoodda gaarka u ah.

Tusaale ahaan, aynu soo qaadano afar kooxood oo bulshadda Soomaalidda ka-mid-ah. Koox waliba waxay leeyihiin dan gaar ah oo ka-dhaxaysa koox-dooda; waxaana waajib ku ah inay dantooddaas ka-wada-shaqeeyaan. Afarta kooxood iyo sida ay danahooddu u kala-duwan-yihiina, waa siddan:

- *Shaqaalaha*: shaqaalaha dantooddu waxaa weeye in ay doortaan (oo codkoodda siiyaan) murashaxa aaminsan in shaqaalaha loo-kordhiyo

mushaharka; kana-soo hor-jeestaan murashaxa diidan in shaqaalaha loo-kordhiyo mushaharka.

- *Baayac-mushtarka*: dadka hantiilayaasha ah dantooddu waxay ku-jirtaa inay kasoo hor-jeestaan murashaxa aaminsan in mushaharka loo-kordhiyo shaqaalaha; sababtoo ah, hantiilayaashu ma doonayaan inay mushahar badan siiyaan shaqaalaha; kana-soo hor-jeestaan murashaxa aaminsan in shaqaalaha loo-kordhiyo mushaharka. Sidaa awgeed, hantiilayaashu waa inay doortaan murashaxa aaminsan in aan mushaharka loo-kordinin shaqaalaha.
- *Ardayda*: ardaydu waa inay doortaan (oo codkoodda siiyaan) murashaxa aaminsan in wax-barashadda laga-dhiggo bilaash, ama lacagta lagu-dhigto iskuuladda iyo jaamacaddaha hoos loo-dhiggo; kana-soo hor-jeestaan murashaxa aaminsan in iskuuladda iyo jaamacadaha lagu-dhigto lacag qaali ah.
- *Mulkiileyaasha iskuuladda/jaamacaddaha*: mulkiilayaasha iskuuladda iyo jaamacaduhu, waa inay doortaan (oo codkoodda siiyaan) murashaxa aaminsan in iskuuladda iyo jaamacaddaha lagu-dhigto lacag qaali ah; kana-soo hor-jeestaan murashaxa aaminsan in iskuuladda iyo jaamacaddaha laga-dhiggo bilaash; ama lacagta lagu-dhigto iskuuladda iyo jaamacaddaha hoos loo-dhiggo, ama lacagta lagu-dhigto iskuuladda iyo jaamacaddaha hoos loo-dhiggo.

Marka aad u fiirsato afartaas kooxood ee kor-ku-xusan iyo danahoodda kala-duwan ee mid-walba gaarka u ah,

waxaynu isla-qiraynaa inay waajib tahay in koox waliba u-midoobaan siddii ay uga midho-dhalin-lahaayeen danahooddaas; waana sidda uu ina-farayo caqliga, cilmiga, iyo garaadka suubani. Marka aad eegto kala-duwanaan-shaha danaha afartaas kooxood, waxaad arkaysaa in danahooddu iskasoo-hor-jeedaan, oo aanay marnaba ku midoobi-karin danahooddaas kala-duwan.

Tusaale ahaan, shaqaalaha iyo baayac-mushtarka danahoodu way iskasoo-hor-jeedaan; suurto-galna ma noqonkarto inay midoobaan. Shaqaaluhu waxay rabaan inay doortaan hoggaamiye u kor-dhinaya mushaharka, cashuur baddana ka-qaada baayac-mushtarka. Halka ay baayac-mushtarkuna rabaan hoggaamiye aan kordhinin mushaharka shaqaalaha, cashuurtana hoos-u-dhigga. Marna-ba isma-waafiqi-karaan danaha kala-duwan ee shaqaalaha iyo baayac-mushtarku.

Tusaalaha labaad, ardayda iyo mulkiilayaasha iskuuladda iyo jaamacadduhu iyaggana danahooddu aad ayay u kala duwan-yihiin; marna isma-waafiqi-karaan.

Laakiin'se, dhaqanka Soomaaliddu danahaas ay leeyihiin kooxahaas kala duwan ee bulshadu wuu kasoo hor-jeedaa. Waa dhaqan kasoo-hor-jeeda in kooxda isku dantaahi is-kaashato, oo midowdo. Waa dhaqan kala-kaxayna kooxaha isku-danta-ah, oo midaynaya kooxo aan isku-dan ahayn. Waa arin uu diidayo caqligga suubani.

Sidii aynu soo-sheegnay, Soomaaliddu (sida bani'aadamka kale ee aduunka) waxay leedahay kooxahaas kala-duwan ee kor-ku-xusan. Laakiin, kooxaha isku-danta ah ee Soomaaliddu, isma-urrursaddan, isma-gaashaan-buuraystaan, isumana-hiiliyaan. Cajiib!

Dhinaca kale, kooxahaa kala-duwan ee Soomaaliddu—ee ay danahooddu iska-soo-hor-jeedaan—way is-gaashaan-buuraystaan, way is-urrur-sadaan, waanay is-

waafaqaan; iyadoo koox waliba kasoo-hor-jeedsanayso kooxdii ay isku-danta ahaayeen. Ardaygu wuxuu kasoo-hor-jeesanayaa ardaygii kale ee ay isku-danta ahaayeen; waxaanu taageerayaa (oo uu ku-biirayaa) mulkiilayaashii iskuuladda iyo jaamacaddaha. Ardaygani wuxuu taageeray kooxdii kasoo-hor-jeedday danihiisa; waxaanu kasoo-hor-jeestay kooxdii dantiisa difaacaysay. Abwaan Cabdi Muxumed Amiin ayaa tilmaan fiican ka bixiyey hab-u-fikirka foorrora ee Soomaalida, markii uu yidhi: "*Waa maan-gurracan, iyo garasho jaan*." Waa dhacdo aan maskaxda bani'aadamka ah ee aqoonta, garashadda, dadnimadda, diinta, iyo fikirka suubban Eebe ku manastay aanay marna qaadan-karin. Aan sharaxaad huffan ka-bixiyo dhacdaddan.

Qaab-dhismeedka guud ee ay bulshadda Soomaaliddu u dhisan-yahay waxaa weeye: qaab-dhismeedka qabiilooyin kala-duwan. Qabiil waliba wuxuu leeyahay danno gaar u ah oo ka-dhaxeeya, oo ay iska-kaashaddaan; sida, magta, qaadhaan-ka, difaaca, iwm. Iyadoo ay danahaas-gaarka-ahi jiraan, haddana waxaa-jira dano-kale oo aan ka-dhexeynin (kana-dhaxayn-karin) qabiilka.

Tusaale ahaan, qabiil waliba wuxuu leeyahay arday, baayacmushtar, shaqaale, dan-yar, iwm. Ardayda iyo baayac-musharka qabiilka ku-jiranna wax dan-ah oo ka-dhaxeysaa ma-jirto. Danahoodu way iskasoo-hor-jeeddaan. Aynu soo-qaadanayo laba qabiil oo kala-duwan: reer *Qudhac* iyo reer *Gallool*.

Reer Qudhac waxaa guud-ahaan ka-dhaxeeya inay iska-kaashaddaan magta, qaadhaanka, hiilka, iwm; reer Gallool-na intaas oo kale ayaa ka-dhaxaysa. Reer Qudhac wuxuu leeyahay arday iyo baayac-mushtar; reer Gallool-ma wuxuu leeyahay arday iyo baayac-mushtar. Sida aynu kor-kusoo-sheegnay-na, ardayda iyo baayac-mushtar-ka wax dan-ah oo

ka-dhaxaysa ma-jirto; danahooddu way iska-soo-hor-jeedaan; ismana gaashaan-buuraysan-karaan.

Sidaa awgeed, ardayda iyo baayac-mushtarka reer Qudhac way iskasoo-hor-jeedaan; ardayda iyo baayac-mushtarka reer Gallol-na iyagguna way iskasoo-hor-jeedaan. Markaa miyaanay haboonayn (oo aanay waajib-ahayn) in ardayda reer Qudhac iyo ardayda reer Gallool ee isku-danta-ahi is-kaashaddaan, oo danahoodda meel-ugasoo-wada-jeestaan?

Dhinaca kale, miyaanay haboonayn (oo aanay waajib-ahayn) in baayac-mushtar-ka reer Qudhac iyo baayac-mushtar-ka reer Gallool ee isku-danta ahi iyagguna is-kaashaddaan, oo danahoodda meel ugasoo wada-jeestaan? Jawaabtu waa HAA. Laakiinse, dhaqanka Soomaaliddu sidaa maaha. Waana qodobka kagasoo hor-jeedda dimuquraadiyadda.

Waxaad arkaysaa ardaydii iyo baayac-mushtar-kii reer Qudhac oo is gaashaan-buuraysanaya; iyo ardaydii iyo baayac-mushtarkii reer Gallool oo is-gaashaan-buuraysanaya. Ardaydii reer Qudhac iyo ardaydii reer Gallool ee ay dantu ka-dhaxeysay, isma-raacsana oo way iskasoo hor jeesteen. Dhinaca kale, baayac-mushtarkii reer Qudhac iyo baayac-mushtarkii reer Gallool, ee dantu ka-dhaxaysay, iyagguna way iskasoo hor jeesteen.

Haddaba, waxaa is-weydiin-leh: waa maxay sababta ay isagasoo-hor-jeesteen ardaydii isku-danta ahayd? Waa maxay sababta ay isagasoo-hor-jeesteen baayac-mushtarkii isku-danta ahaa? Jawaabta aan sharaxo.

Si aad u-fahanto waxaa sababay arinkan, aynu soo qaadano sheeko kuu fuddudaysa fahankeeda.

Waa wakhtiggii doorashadda. Waxaa tar-tamaya, oo murashax-nimadda u taagan, laba nin: 1) Maxamed, oo reer Qudhac ah; iyo 2) Xasan, oo reer Gallool ah. Maxamed (reer

Qudhac) wuxuu aaminsan-yahay in iskuuladda iyo jaamacaddaha bilaash lagu-dhigto, oo ay dowladdu bixiso miisaaniyadda wax-barashadda. Hadaba, si ay dowladdu u hesho miisaaniyadda ay ku-bixinayso wax-barashadda, waa in ay dowladdu cashuur siyaaddo ah ka-qaadaa baayac-mushtarka. Dhinaca kale, murashaxa kale ee Xasan (reer Galool) wuu kasoo hor jeedaa fikraddaas Maxamed. Xasan wuxuu aaminsan-yahay in iskuuladda iyo jaamacaddaha lagu-dhigto lacag.

Sidaa awgeed, Xasan ma aaminsana in cashuur badan laga-qaado baayac-mushtarka. Labada murashax fikradahaas kala-duwan ayay qabaan.

Hadaba, haddii aad tahay arday, labadaas murashax kee-baad codkaagga siin-lahayd? Hadiise aad tahay baayac-mushtar, labadaas murashax kee-baad codkaagga siin-lahayd? Jawaabu way fuddudahay. Hadii aad-tahay arday, codkaagga waxaad-siinaysaa Maxamed; hadiise aad tahay baayac-mushtar, codkaagga waxaad-siinaysaa Xasan. Waayo?

Ardayga dantiisa ayaa ku-jirta inuu codka siiyo Maxamed; baayac-mushtarkana dantiisa ayaa ku-jirta inuu codkiisa siiyo Axmed. Laakiin, dhaqanka Soomaaliddu wuu kasoo hor-jeedaa go'aamadaas ay qaateen ardayga iyo baayac-mushtarkuba. Dhaqanka Soomaaliddu wuxuu ardayga iyo baayac-mushtar-kaba ku khasbayaa inay u codeeyaan murashaxiin aan dantoodda wadin.

Tusaale ahaan: dhaqanka Soomaaliddu wuxuu ardayga reer Gallool ku khasbayaa inuu taageero (oo uu codka siiyo) murashax Xasan (oo reer Gallool ah) oo diidan in iskuuladda iyo jaamacaddaha bilaash laga-dhigo. Hadaba, sababta uu ardayga reer Gallool codka u-siinayo Xasan (oo kasoo-hor-jeedda danta ardayda) waxaa weeye: ardayga reer Gallool wuxuu doonayaa in uu "inaadeer-kii" Xasan ku-

guulaysto doorashadda. Muxuu ardaygu ka-faa'iidayaa inuu doorto (oo uu taageero) murashax kasoo hor-jeedda dantiisa ardaynimo? Ardaygu wuxuu ka-faa'iidayaa: in uu qabiilkiisu "guulaysto." Mar-labaad iyo mar-saddexaad-ba akhri kelmeddahaas: *in uu qabiilkiisu "guulaysto."*

Waa maxay waxan uu aradayga qabiilkiisu—reer Gallool—ku "guulaysanayaa?" Jawaabtu waxaa weeye: ardaygu wuxuu doonayaa in Xasan (oo reer Galool ahi) uu ku guulaysto hoggaaminta wadanka. Marka uu Xasan guulaysto, ardayga reer Gallool wuu khasaarayaa. Sababtoo ah, Xasan wuu kasoo hor-jeeddaa danta ardayga ee ah in iskuuladda iyo jaamacaddaha laga-dhiggo bilaash.

Laakiin, arinka cajaayib-ka ahi waxaa weeye: ardaygu markuu arko "inaadeerkii" Xasan oo ku-guulaystay hoggaamintii wadanka, wuxuu dareemayaa "han-weyni" iyo "reyn-reyn;" wuxuu dareemayaa inuu "guulaystay;" in reerkiisii "guulaystay;" in reerkooda "sharaftooddii" sare-u-kacday; guurka hablahooddu "qaali-noqonayo;" in qabiil-koodu "ka-sareeyo qabiilooyinka kale;" iwm. Waa dareen nafsi ah (psychological), oo aan u-bixiyey: "*Qab-dhalanteedka Qabyaaladda*."

Qab-dhalanteedka Qabyaaladdu—oo ku-salaysan been—waa dareen lagu gardaaddiyo, ama lagu bar-baariyo, caru-urta yar-yar ee Soomaalidda. Waa dareen mar-walba la-xusuusiyo qofka Soomaaliga ah, illaa iyo inta uu ka-dhimanayo. Waa dar-daaran uu qabiil waliba kula dar-daarmo "dadkiisa."

Qab-dhalanteedka Qabyaaladdu wuxuu ka kooban yahay qaybo kala-duwan. Halkan waxaynu si-kooban ugu sharaxaynaa, qaybaha cudurkan iyo sidda uu u shaqeeyo. Sheekadda ardayga dib ayaynu ugusoo noqonaynaa.

Kow, Qab-dhalanteedka Qabyaaladdu wuxuu bulshadda u kala qaybiyaa "inagga" iyo "iyagga." Tusaale ahaan,

"inaggu" waxaynu nahay reer Qudhac; "iyagguna" waa reer Gallool. Kala-qaybintaas uu Qab-dhalanteedka Qabyaal-addu u-kala-qaybinayo bulshaddu, meel uu ku-dhamaado malaha. Marka hore, bulshadda wuxuu u-kala-qaybinayaa reer Qudhac iyo reer Gallool; waxaanu odhanayaa, "Iska-ilaali reer Gallool, waa cadow." Ka dib, inagga oo reer Qudhac ah, ayuu inoo-sii kala-qaybinayaa "inagga" oo reer Caws ah iyo "iyagga" oo reer Doog ah; waxaanu odhanayaa, "Iska-ilaali reer Doog, waa cadow." Ka dib, inaga oo reer Caws ah, ayuu inoo-sii kala-qaybinayaa, "inagga" oo reer Sakaaro ah iyo "iyagga" oo reer Gooddir ah; waxaanu odhanayaa, "Iska-ilaali reer Gooddir, waa cadow." Ka dib, inagoo ah reer Sakaaro ah ayuu inoo-sii kala-qaybinayaa, "inagga" oo reer Diin ah iyo "iyagga" oo reer Dawaco ah; waxaanu ku-odhanayaa, "Iska-ilaali reer Dawaco, waa cadow."

Kala-qaybinta bulshadda ee Qab-dhalanteedka Qabyaaladdu meel uu ku dhamaado ma laha; ilaa uu xumaan iyo colaad ku-kala dhex-abuuro labadda qof ee ay kala-dhaleen laba nin walaalo ahi. Arinkan waxaa si cadaan ah kuu tusaya marka ay Soomaalidu tidhaahdo: "*Walaal-kaana wiil u lahow; wiil-kaagana, walaal u lahow*."

Taas micnaheedu waxaa weeye: walaalkaa wuxuu noqon karaa cadowgaaga. Sidaa awgeed, waa in aad lahaataa wiil kaa difaaca walaalkaa. Wiilkaaguna wuxuu noqon karaa cadowgaaga. Sidaa awgeed waa in aad u lahaataa walaal kaa difaaca. Qabiilku meesha ugu hooseysa ee uu gaadhaa waxaa weeye in uu wiil iyo abihii colaysiiyo; laba nin oo walaalo ahna colaysiiyo. Bur-burka bulsho ee inoo hadhay muxuu yahay?

Laba, Qab-dhalanteedka Qabyaaladdu markuu bulshadda u kala-qaybiyo "inagga" iyo "iyagga," wuxuu is bar-bar-dhigaa qabiilkiina iyo qabiilooyinka kale. Qab-

dhalanteedka Qabyaaladdu wuxuu qofka Soomaaliga ah ka-dhaadhiciyaa in qabiilkiisu uu ka-fiican-yahay qabiilooyinka kale oo dhan.

Tusaale ahaan: "inaggu" waxaynu nahay reer Qudhac. Qab-dhalanteedka Qabyaaladdu beenta uu inoogu-sheekeeyo, waxaa ka-mid-ah: "inagga" ayaa ugu-tirro-badan qabiilooyinka oo dhan; "inagga" ayaa ugu 'gobsan;' "inagga" ayaa ugu dhaqan fiican; hablaheenu waa hablo dhowr-soon; "inagga" ayaa ugu degaan-weyn; "inagga" ayaa ugu dagaal-yahan-san; iwm. Qab-dhalanteedka Qabyaaladdu intaaas ayuu u sheegaa qabiil walba. Sidaa awgeed, qabiil waliba wuxuu aaminsan-yahay inuu "isaggu" ugu fiican-yahay.

Buugga *In-Between Three Civilizations: Archeology of Social Amnesia and Triple Heritage of Somalis* ee uu qoray Dr. Xuseen Bulxan ayuu isu bar-bardhigay sida qabiilooyinka Soomaalidu isugu fanaan. Qabiil waliba sidan ayuu aaminsan-yahay:

Qabiil-kayagga

1. Anaga ayaa ugu tirro-badan

2. Dhulka ugu-weyn anagaa leh

3. Tariikh fiican ayaanu leenay

4. Gobanimo ayaanu u dhalanay

5. Nebiga ayaanu ku ab-tirsanaa

6. Waanu barakay-sanahay

7. Dhaqan/sharaf ayaanu leenay

8. Xiddidka waanu qadarinaa

9. Gobonimo ayaanu leenay

10. Geesiyaal ayaanu nahay

11. Garasaho ayaanu leenay

12. Daacad ayaanu nahay

13. Cadaalad ayaa nalagu yaqaan

14. Wada-hadalka waanu

15. Madax ayaanu nahay

16. Saami-qaybsigga dowlada xaq kama helo

Qabiilkooda

1. Way tirro-yar-yihiin

2. Dhulkoodu wuu yar-yahay

3. Tariikh fiican malaha

4. Gobonimo umay dhalanin

5. Asalkoodda shaki ayaa ku jira

6. Way habaaran-yihiin

7. Malaha dhaqan/sharaf midna

8. Xiddidka ma qadariyaan

9. Gunnimo ayay u dhasheen

10. Waa fulay

11. Waa bilaa garasho

12. Waa khiyaamo miidhan

13. Dulmiga ayay isku raacaan

14. Xooga ayay qadariyaan

15. Madax ma noqon-karaan

16. Saami-qaybsiga inta u badan ayay qaataan

Saddex, marka uu Qab-dhalanteedka Qabyaaladdu kala-qaybiyo bulshadda, ee uu is-bar-bar-dhiggo qabiilkiina iyo qabiilooyinka kale, ee uu kuu-sheego in qabiilkiinu yahay qabiilka ugu fiican, waxaa nafsiyan kuugu-dhacaya cudurka Qab-dhalanteedka Qabyaaladda. Cudurkan waxaa qaba 99% (boqolkiiba-sagaal-iyo-sagaashan) dadka Soomaalidda ah. Waxaa jira astaamo lagu-garto qofka qaba xanuunka Qab-dhalanteedka Qabyaaladda. Astaamahaas waxaa ka-mid-ah in qofka xanuunkan qabaa uu aamin-sanyahay:

- In abtirsiintu ay sal-iyo-sees u-tahay xidhiidhka ka-dhaxeeya bulshadda; sidaa awgeed, uu qofku bulshadda kusoo-kala-dhawaysto abtirsiintooda;
- In aad ku-hanwaynaato qabiilkaaga; sababtoo ah, qabiilkaagu waa ka ugu-"nasab-san" ugguna "gobsan" qabiilooyinka oo dhan;
- In aad u hiiliso qabiilkaaga; xaq-iyo-xaq-darraba;
- In aad ka-feejignaato (oo aanad aaminin) qabiilooyinka kale ee aad la-degentahay;
- In aanad marna aaminnin maddax aan ahayn qabiilkaaga; sababtoo ah, madaxda aan ahayn qabiilkaagu waxay rabaan inay ku khiyaameeyeen oo qabiilkaagana gumaystaan;
- In aad dhacdo xoolaha qabiilooyinka kale ma'aha ceeb—waa sharaf;
- In aad ogaato, hantidda ummadda ka-dhaxaysa in aanay cid gaar-ahi lahayn; sidaa awgeed, qaybtaadda qaado (dhac ama boob) markaad fursad u-hesho.

Hadaba aynu dib ugu noqono ardaygii u codeeyey, ee taageeray, "inaadeerkii" Xasan. Ardayga waxaa ku-dhacay xanuunka aynu kor-kusoo-sharaxnay ee Qab-dhalanteedka Qabyaaladda. Ardaygu wuu og-yahay in uu murashax Xasan kasoo-hor-jeeddo danihiisa. Isagoo ardaygu arinkaas og, ayuu hadana taageeray, oo codkiisa siiyey Xasan. Ardaygu dantiisii wuxuu ka-hor-mariyey dantii murashax Xasan. Ardayga iyo Xasan-na weligood may kulmin; ismana yaqaanaan. Qof aanu aqoonin, oo aanu weligii arkin, oo dantiisa kasoo-hor-jeeda, ayuu ardaygu taageeray oo codkiisiis siiyey. Ardaygu waxba muu faa'iidin; khasaare ayuu u badheedhay. Ardaygu wuxuu faa'iiday oo keliya inuu naftiisa ugu sheekeeyo, hadal khayaali ah oo been ah: "qabi-

ilkayaggii ayaa guulaystay." Qabiilkooddu muu guulaysanin. Waxaa guulaystay nin la-yidhaahdo Xasan oo dantiisa gaarka ah u socda. Ardaygu wuxuu dantiisii u seegay inuu la-tar-tamo qabiilooyinka kale.

Siyaasiyiin ku-sheegii Soomaalidda ayaa ka faa'iidaystay Qab-dhalanteedka Qabyaaladda. Marka ay siyaasiyiintu ku tar-tamayso boobka xoolaha ummadda iyo awoodda dalka, siyaasi waliba wuxuu soo urursaddaa qabiilkiisa; oo shuruud la'aan iyo indho-la'aan ku-taageera "siyaasigoodda."

Bulshaddu wax-rajo ah kama qabto in ay siyaasiyiintu dhaqaalaha wadanka sare-u-qaadaan, ama ay wadanka dhisaan. Niyad-jab ogwii, waxay shacabku dugsadeen Qab-dhalanteedka Qabyaaladda. Qabiil waliba wuxuu dareemaa qab-wayni iyo farxad, marka uu nin qabiilka ka-mid-ahi ku-guulaysto hoggaanka wadanka; ama uu noqdo wasiir. Taasi waxay qabiilka u cadaysaa inay yihiin qabiil sharaf iyo awood-ba leh; waxaanay sare-usii-qaadaa Qab-dhalanteed-koodda Qabyaaladda. Qabaa'ilada Soomaalida dhamaan-tood markii ay rajo beeleen, ee ay isugu biirtay faqri, jahli, colaad, iyo xasilooni-darro, ayay waxay dugsadeen, oo wehel u noqday, Qab-dhalanteedka Qabyaaladda.

Reer Miyiga iyo Dimuquraaadiyadda

Sidii aan xaga sare kusoo sharaxay, dimuquraadiyaddu (democracy) waa laba erey oo laysku-xidhay; asal-ahaana kasoo-jeeda luqadda Giriigga. Labadaas erey waxay kala-yihiin: demos iyo kratos. Demos micnaheedu waxaa weeye, "majority" ama "waddar"; Kratia micnaheedu waxaa weeye, "rule" ama "xukun." Marka labadaas kelmeddood laysku-daro waxay noqonayaan: "majority rule"; oo af-Soomaali ku-noqonaya, "xukun waddar" ama "xukun waddareed."

Xukun waddar micnihiisu waxaa weeye: marka arin la-go'aaminayo, wixii ay dadka badankoodu isku-racaan ayaa la-qaadanayaa.

Dhinaca kale, sidii aynu hore-usoo-sharaxnay, dhaqanka Soomaaliddu wuxuu kasoo-jeeddaa miyigga (baadiyaha). Dadka reer miyigga ahi marka ay arimahoodda xasaasigga-ah ka-tashanayaan, waxay isugu iman-jireen geed hoositii, oo ay shir ku qabsan-jireen. Shirkaas waxaa kasoo qayb geli-jiray raga qaan-gaadh-ka ah oo kaliya. Laakiin, dumarka looma-ogolayn (waa tacaddi dumarka lagu-hayey). Raggaasi marka ay shirka isugu yimaadaan, waxaa mar-marka qaarkood dhici jirtay in go'aanka laysku qabto, oo lagu kala qaybsamo.

Marka uu arinku siddaa u adkaado, raggaasi waxay ku kala-bixi-jireen inuu nin waliba gacanta u-taago go'aanka uu taageersan-yahay. Waxaa la-tirrin-jiray inta gacmood ee loo-taagay go'aan kasta; waxaana la-qaadan-jiray go'aanka ay gacanta u-taageen ragga ugu tirradda-badani.

Dhinaca kale, marka Soomaalidda reer-guuraagga ahi ay dooranayso madax dhaqmeed (suldaan, garaad, maraaq, ugaas, iwm), waxaa shir isugu-yimaadda ragga qaan-gaadhka ah ee beeshaas. Ka dib-na, waxay doortaan cidda ay isku-raacaan tirradda ugu badan ee raggaasi (inkastoo uu dhaxal-na noqdo madax dhaqmeedku).

Nidaamka noocan ahi, waa nidaam dimuquraadiyaddi ah. Sababtoo ah, waa "xukun (ama go'aan) waddar." Halkaas waxaa inooga cadaatay in Soomaalidda miyigga deggeni—ee reer-guuraagga ahi—ay ku-dhaqmi-jireen nidaamka dimuquraadiyadda.

Buugga *A pastoral democracy: A study of pastoralism and politics among the northern Somali of the Horn of Africa* ee uu qoray I.M. Lewis ayaa cilmiyeysan u sharaxay in reer guuraaga Soomaalidu marka ay go'aamada gaadhayaan ay

ku dhaqmaan nidaamka dimuquraadiyada ee aynu kor kusoo xusnay.

Hadaba, waxaa is-weydiin-leh: hadii nidaamka uu aduunku wax-u-doorto (ama go'aamadda u-gaadho) ee looyaqaano dimuquraadiyadda, iyo nidaamka ay Soomaalidda reer-guuraagga ahi wax-u-doortaan (ama go'aamadda u-gaadhaan) uu isku mid yahay, waa maxay sababta aanu dhaqanka Soomaaliddu ula-jaan-qaadi-karin dimuquraadiyadda? Jawaabtu waxaa weeye: sababta aanu dhaqanka Soomaaliddu ula-jaan-qaadi-karin dimuquraadiyaddu waxaa weeye, is-bedelka ku-dhacay hab-nollolleedkii Soomaalidda. Is-bedelkaas ku dhacay hab-nollolleedkii Soomaalidda ee aan la-jaan-qaadi-karin dimuquraadiyaddana halkan ayaan ku-sharaxayaa.

Is-bedelka Hab-nollolleedka Soomaalidda

Is-bedelka ugu saamaynta badan ee ku-dhacay hab-nollolleedka Soomaaliddu waxaa weeye: markii lagasoo guuray miyigga ee loosoo-guuray magaaladda. Markii miyigga la-degenaa, dadku waxay u kala degenaayeen qaabiilooyin kala-duwan. Qabiil waliba gaarkiisa ayuu u lahaa maamul-dhaqameed u-gaar ah, oo ay dhexdoodda ka-dooran-jireen hogaamiyaha, go'aamadana ay ku gaadhi jireen. Muu jirin maamul guud oo u dhexeeya qabiilooyinkaas. Aynu tusaale usoo qaadano, laba qabiil.

Qabiilka reer Qudhac isaga ayaa dhexdiisa ka dooran-jiray madax-dhaqmeed kiisa; qabiilka reer Qansax-na isaga ayaa dhexdiisa ka-dooran-jiran madax-dhaqmeed-kiisa. Reer Qudhac iyo reer Qansax wax maamul ah oo ka-dhax-eeyey muu-jirin. Marka uu reer-waliba dooranayo madax-dhaqmeedkiisa, wuxuu dooran-jiray nin illaalinaya (oo difaacaya) danta gaarka ah ee uu reerku leeyahay.

Dhinaca kale, wax dan-guud ah oo ka-dhexeeyey reer Qansax iyo reer Qudhac may jirin; xataa biyaha-iyo-baadku kamuu-dhaxaynin qabiilooyinka kala-duwan. Waayo? Sababta aanay u-jirin dan-guud oo ka-dhaxaysa qabiilooyinku waxay ahayd: may jirin wax kaliya oo ay wada-isticmaalaan (ama wada-intifaac-sadaan) oo ka dhexayn-jiray qabiilooyinka. Waxaa jiray in marrar ay abaaruhu dhacaan ay reerahaasi isu gudbi jireen si ay u wada isticmaalaan dhulka barwaaqada ah. Laakiin, hadii aanay wax duruufo ahi, wax dan guud ah oo kale kamay dhaxaynin qabiilooyinkaas kala duwan.,

Tusaale ahaan, may jirin "iskuulo" ama "dhakhaatiir" ay wada-isticmaalaan qabiilooyinkaasi, oo ka-dhexeeyey. Sidaa awgeed, dan-guud oo ka-dhaxaysay ma-jirto. Reer waliba wuxuu lahaa meel u-gaar ah oo uu degen-yahay; mar-marka ay abaaruhu-dhacaan ayuunbaa laysu gudbi-jiray, oo lawada isticmaali jiray baadka iyo biyaha.

Dadka ka-tirsan qabiilku isku dan ayay ahaayeen. Waxaan uga-jeedaa: qabiilka dadka ka-tirsan oo dhan dantoodu isku-mid ayay ahayd. Dhamaantood waxay doon-ayeen inay helaan baad, biyo, iyo difaac. Sidaa awgeed, si uu qof waliba u helo baad, biyo, difaac, dhamaantood waxay meel ugasoo wada-jeedaan (oo ay difaacaan) danta qabi-ilkooda. Laakiinse, noloshaasi way is-bedeshay markii loosoo-guuray magaaladda.

Markii magaaladda loosoo-guuray, dadkii waxay wada-degeen hal magaalo. Dadkii aanay waxba ka-dhaxayn-jirin markii ay miyigga wada-daganeeyeen, iminka markay magaalo soo-degeen, wax-badan ayaa ka-dhaxeeya. Sidaa awgeed, maadaamada ay dan-guud oo aad u-baddani ay ka-dhexayso dadkaas magaaladda wada deggen, waxay dantu ugu jirtaa inay ka guuraan qabiilkii oo u guuraan qowmiyad. Sababtoo ah, dantii gaarka ahayd ee ka-dhex-

eysay qabiilkii miyiga degenaa, way-dhamaatay; iminka waxaa bilowday dan-guud oo ka dhaxaysa qabiilooyinka oo dhan—waa meesha uu ka-abuurmo qaranku.

Waxyaabaha ka-dhexeeya ee waajibka ku ah qabiilooyinkaas magaaladda wada-deggan, ee ay waajibka tahay inay wada-ilaa-shadaan, oo ay wada-difaacdaan, waxaa ka-mid ah:

- *Dhakhtaradda*: qabiilooyinka magaaladda soodeggay oo dhami, waxay isticmaalaan dhakhtaradda. Ma jiro dhakhtar ay leeyihiin qabiil gaar-ahi. Sidaa awgeed, qabiilooyinka oo dhan dantooda ayaa ku-jirta inay dhistaan, daryeelaan, oo illaa-shadaan dhakhtaradda. Hadii ay wada ilaashan waayaan, dhamaantood way khasaarayaan.
- *Iskuuladda*: caruurta iyo dhalin-yarradda magaaladda deggeni waxay dhigtaan iskuulladda; iyagoo kala qabiil ah. Ma jiro iskuul ay-leeyihiin qabiil gaar ahi. Iskuuladdu waa meelaha ay wada-leeyihiin qabiilooyinka soodeggey magaalooyinku. Sidaa awgeed, qabiilooyinka oo dhan dantooda ayaa ku-jirta inay daryeelaan iskuuladda magaaladdooda.
- *Wadooyinka*: dadka magaaladda wada-degeni way wada-isticmaalaan wadooyinka. Ma arkaysid waddo keliya oo ay isticmaalan hal qabiil oo keli ahi. Maadaama uu qabiil waliba intifaacsanayo wadooyinka, waxaa waajib ah in dadka magaaladda wada-degeni ay daryeelaan wadooyinkaas ay wada-isticmaalayaan.
- *Nabad-gelyadda*: dhamaantood dadkaas magaaladda wada-deggen waxay dantooda-guud

ku-jirtaa inay illaaliyaan nabaddooda. Magaaladda ay ka-jirto nabad-la'aantu, cidina kuma noolaan-karto. Qabiil kasta oo magaaladda deggen waxay dantiisu ku-jirtaa inuu illaaliyo (oo uu difaaco) nabad-gelyadda qof kasta oo magaaladda ku-nool—qabiilka uu doono ha-ahaadee.

- *Maa-mulka*: dhamaan qabiilooyinka magaaladda wada-deggay, waxaa laga-qaadaa cashuur. Dantu waxay ugu-jirtaa inay wada-ilaashadaan lacagtaas cashuurta ah ee laga-qaado. Waa inay iyagoo isku duuban la-xisaabtamaan cida ay u dhiibteen maamulku waxa ay ku-qabtaan lacagtaas cashuurta ah ee laga-qaado. Marka uu maamulku og-yahay inay dadku isku-xidhan-yihiin oo ay lacagta cashuurta ee laga qaado wada-ilashanayaan, wuxuu maamulku iska-ilaaliyaa inuu boobo xoolaha ummadda. Laakiinse, waxaad ogaataa in maamulku aad u neceb-yahay dad isku-duuban oo la-xisaabtama. Sidaa awgeed, wuxuu maamulku jecel-yahay ummad kala-qaybsan, oo is-neceb, oo iskasoo-hor-jeeda, oo aan danahooda u midays-nayn. Taasi waxay maamulka u fudaydisaa inuu xoolahoodda boobo. Mar-walbana wuxuu maamulku ku-dedaalaa inuu ummadda kala-qaybiyo si uu xoolahoodda u boobo. Sidaa awgeed, beelaha magaaladda wada-deggan waxay dantooddu ku-jirtaa inay ilaashaddaan xoolahoodda cashuurta laggagga qaaday.
- Iwm.

Maxaa Laga-dhax-lay Dimuquraaddiyadda Dhicisowday?

Dhaqanka Soomaalidda ee hor-taagan—ama carqaladda ku-noqday—dimuquraadiyadda, waxaa laga-dhax-lay khasaare aad-iyo-aad u-tirro badan, oo aan halkan lagusoo koobi-karin. Inkastoo khasaaraha dhabar-jabka ah ee laga-dhax-lay uu aad u badan yahay, waxaan halkan ku xusayaa dhowr ka mid ah.

- *Kala-qaybsanaan*: khasaaraha ugu wayn ee laga dhaxlay dimuquraadiyada dhicisawday waxaa weeye in dadkii usii kala qaybsameen qabiilooyin is neceb. Nacaybka qabiilooyinkana waxaa kor-usii-qaaday marka ay qabiilooyinku ku tar-tamaan doorashada ayaa qabiilka laga guulaystaa uu dareemaa in la ceebeeyey; aadna way u cadhoodaan. Qabiilka doorashad ku guulaystaana waxay dareemaan inay sharafi usoo korodhay. Sidaa awgeed, qabiilka laga guulaystay waxay isku dayaan inay dowlada mucaaridaan oo ay cagaha qabtaan si aanay u guulaysanin, oo aanay wax la muuqdo u qabanin, si aanay qabiilka dowlada haystaa u faanin. Qabiilka kale ee dowlada haystaana waxay ku dedaalaan inay difaacaan dowlada uu ku guulaystay "inadeerkood." Colaad aad u saraysa ayay isu qaadaan labadaas qabiil. Qabiilka guulaystay wuu u fanaa qabiilka uu ka guulaystay. Mar kasta oo ay doorasho dhacdana, labada qabiil ayay colaadi ka dhex abuurantaa. Ogow: labadaas qabiilba dadkoodu waxay ku nool-yihiin nolol aad u hooseysay—ma haystaan shaqo,

dhakhtaro, wax-barasho tayyo-leh, wadan dhisan, iwm. Markaa, dimuquraadiyadan la dhex-geliyey qabiilku, miyaanay khasaare inoo hor-seedin?

- *Hoggaamin xun*: khasaaraha kale ee aynu ka dhaxalayna waxaa weeye in qof waliba soo hungureeyo sidii uu u noqon lahaa hogaamiye. Waayo? Qofku wuxuu ogyahay in aanu u baahnay cilmi, khibrad, dadnimo, diin, iwm., si uu u noqdo hogaamiye. Qofka Soomaaliga ah ee doonaya inuu hogaamiye noqdaa waxaa kaliya ee u baahan-yahay waxaa weeye inuu qabiilkiisa taageero ka helo. Taasina waxay abuurtay in qabiil waliba uu taageerto, hogaamiyana ka dhigo, qofkiisii ugu liitay. Halkaas waxaa ka dhashay inay ummadda hogaamiyaan intii ugu liidatay dhinaca cilmiga, akhlaaqda, khibrada, dadnimada, diinta, aaminaada, iwm.
- *Musuq-maasuq*: marka qabiil waliba uu doorto qofkii ugu liitay, waxaa bilaabantay in dadkaas la doortay ay noqdaan dad booba xoolaha ummadda. Waayo? Dadkaasi waxay og-yihiin in marka ay boobaan xoolaha ummadda aanay wax ciqaab ah la kulmaynin.; sababtoo ah, waxaa difaacaya qabiilkooda. Waxaad arkaysaa mar walba in ummadda Soomaalida ay hogaaminayaan dad caan ah oo lagu yaqaano boobka xoolaha ummadda. Sababtoo ah, qof walba waxaa si indho-la'aan ah u taageersan qabiilkiisa.
- *Maamul xumo*: maadaama dadkaas la doortay aanay lahayn cilmigii iyo khibradii ay dowlad ku maamuli lahaayeen, waxaa dhacda in ay

horseedaan maamul xumo. Maamul xumadaasina waxaa ka dhashay in la waayo waxbarasho tayyo-leh; ruggo caafimaad; wadooyin dhisan; wadan dhisan; difaac qaran; ummad isku duuban; nadaafad; shaqo abuur; cadaalad; iwm.

- *Hor-u-mar la'aan*: marka la waayo qodobadaas aynu kor-kusoo-xusnay, waxaa kuu cadaanaysa in aanay suurto-gal ahayn inay bulshadu gaadho wax hor-u-mar ah. Waayo? Kaabihii hor-u-marka lagu gaadhi lahaa oo dhami way bur-bursan-yihiin; waxaana bur-buriyey qabiilooyinkaas isu eryahana inay iskugu faanaan "anaga ayaa idinka fiican."

6

DHAQANKA SOOMAALIDA IYO QARANIMADDA

"Dab iyo dhagax,
Layskuma dhuftee,
Kala dhowraay!
Wax ka dhigan gobonimo,
Qabiil dhex-galee,
Kala dhowraay!"
Abwaan Cali Sugule (Dun-carbeed)

Soomaalidu weligeed intii ay jirtay marna kumay guulaysanin inay dhistaan qaran—ummad midaysan, oo isku duuban, oo isku dan ah. Dadka qaar ayaa ku doodi-kara in ummadda Soomaalidu ay midowday, oo ay qaran dhisatay, lagasoo bilaabo markii ay gumaystayaashii Ingiriiska iyo Talyaaniga iska kiciyeen. Doodani waa dood aad u khaldan; waanan kuu cadaynayaa. Si aan kuugu cadeeyo in aanay Soomaalidu weligeed dhisanin qaran, waxaan cutubkan u dhirraan-dhirrinayaa siddan soo socota.

Kow, si aynu u fahano inay Soomaalidu qaran samaysatay iyo in kale, waxaa muhiima in aynu fahano

micnaha iyo taariikhda uu leeyahay waxa loo yaqaano "qaran." Sidaa awgeed, kelmeda "qaran" ayaan u sharaxayaa laba nooc oo kala qoto-dheer: 1) waa maxay macnaha kelmeda "qaran?" 2) waa maxay macnaha guud ee qaran? 3) nidaamka qaranku halkuu kasoo bilowday? Qaranku ma waxaa weeye nidaam waligiiba jirtay, mise waa nidaam taariikh leh, oo mar bilaabmay? Sidee ayuu u bilaabmay? Maxaa sababay inuu bilaabmo? iwm.; 4) waa maxay udub-dhexaadka iyo dhiddibada uu ku taagan-yahay qaranku?

Laba, waxaan si-kooban u faah-faahinayaa halka uu kasoo jeedo dhaqankan Soomaalida ee car-qaladda ku noqday, ama hor-taagan, inay Soomaalidu samaysato qaran —ummad isku xidhan oo midaysan. Dhaqankaasi wuxuu kasoo jeedaa, oo salka ku hayaa, noloshii miyiga ee ay Soomaalidu ku noolayd intii ugu badnayd nolosheeda.

Saddex, marka aad fahanto labadaad qodob ee kor-ku-xusan, waxaa kuu cadaanaysa in dhaqanka Soomaalidu uu caqabad ku yahay—kana-soo hor-jeedo—nidaamka qaranka.

Waa Maxay Micnaha "Qaran?"

Macnaha kelmeda "qaran:" kelmeda qaran waxay luqada Ingiriisida ku noqonaysaa "*nation*;" luqada Carabidana waxay ku noqonaysaa "*al-qawmiya*." Ingiriisida hadii aynu eegno, kelmeda "*nation*" waxay kasoo jeedaa kelmed kale oo Latin ah, *nātĭō (natio)*, oo macnaheedu ayahay "*birth*" ama "dhalasho." Maxaa looga jeedaa "dhalasho?"

Halkan, dhalasho waxaa looga jeedaa, hab-nolloleed cusub oo loo qaabeeyey wada-noolaanshihii bulshada. Waa nidaam cusub oo aanay bulshooyinku hore u arkin. Sidaa awgeed, waa nidaam cusub oo aanay bulshooyinku hore u arkin, oo dhawaan abuurmay.

Iminkan aynu xusno macnaha guud ee qaran iyo astaamaha lagu garto bulshada qaranka. Qaamuuska Oxford Dictionary, wuxuu kelmeda "*nation*" ku macneeyey: "Dad tirro-badan oo ku midaysan inay yihiin isku isir [baadi-sooc], taariikh, dhaqan, ama luqad; kuna nool degaan ay leeyihiin." Hargreaves isna wuxuu qaranka ku macneeyey: "qaranku waa koox dad ah oo ku wada-nool dhul gaar u ah; isuguna-xidhan, ama ay ka dhaxayso, baadi-sooc u gaar ah—sida, dhaqan, taariikh, xeerrar, xilal, iyo dhaqaale," (Hargreaves, 2000). Qaranku waxaa weeye: dad isku dhaqan ah; isku diin ah; isku luqad ah (ama diimo kala duwan haysta); isku taariikh ah; oo ku wada nool dhul ay leeyihiin.

Sharaxaadaasi waxaa weeye, marka la sharaxayo macnaha ereyga 'qaran' iyo astaamaha lagu garto bulshada samaysata nidaamka qaranka. Marka aad u fiirsato astaamahaas kor-ku-xusan ee lagu garto bushada qaran samaystay, ma u malaynaysaa inay Soomaalidu weligeed samaysatay nidaam qaran?

Iminka waxaaan sharaxaad kooban ka bixinayaa sida loo dhiso qaran iyo dariiqaooyinka loo maro dhisidda qaranka. Ka dibna, waxaan soo dhirraan-dhirrinayaa taariikhdii ay soo martay dhisitaanka qaranimadu. Waxaan kale oo aan sharaxayaa intii aanay bani'aadamku samaysanin qaranimada, dariiqooyinkii ka horeeyey ee bani'aadamka laysugu xidhi-jiray, si loo mideeyo.

Buugga *Imagined Communities: Reflections on the Origin and Spread of Nationalism* ee uu qoray Benedict Anderson ayaa si qoto-dheer, oo cilmiyeysan, u sharaxay macanaha "qaran." Cilmi-baadhistaa uu sameeyey Benedict, wuxuu buuggiisa si cad ugu iftiimiyey in nidaamka aynu maanta u naqaano 'qaran' uu yahay nidaam cusub oo dhawaan bilaabmay. Nidaamka qaranku ma'aha nidaam waligiiba

jiray oo ay bani'aadamku kusoo dhaqmi jireen. Sidaa awgeed, waa nidaam leh taariikh dhow oo si fiican loo fahmi karo. Benedict wuxuu soo dhirran-dhirriyey taarikhdii uu soo maray nidaamka qaranku si uu inoo fahansiiyo macnaha 'qaran.'

Markii la samaynayey qaranimada, waxaa la isticmaalay dariiqooyin loo adeegsaday sii adkaynta isku xidhka bushada. Dariiqooyinkaas oo suurto-geliyey inay isku xidhmaan dad aan is aqoonin, weligoodna aan is arkin. Inkastoo ay dariiqooyinkaasi aad u badan-yahihiin, waxaynu ka xusaynaa qayb ka-mid-ah.

- *Jaraa'iddada*—jaraa'iddadu waxay ahaayeen dariiqo cusub oo aan hore u jirin oo wararka laysugu gudbiyo. Laakiin, jaraa'iddadu kumay koobnayn wararka laysu gudbiyo oo kaliya. Kaalinta ugu muhiimsan ee ay jaraa'iddadu ka qaateen dhismaha qaranimadu waxay ahayd: dad aan is aqoonin, oo aan is arkin, oo aan waligood kulmin, ayay jaraa'iddadu isku xidhnaan ka dhex abuureen. Jaraa'iddadu waxay abuureen in dadkaasi ay isu arkaan inay yihiin dad iska xiga ummadaha kale ee aduunka. Sababtoo ah, jaraa'iddada ayaa dadka baray inay dadkaas ka dhexayso taariikh, luqad, dhaqan, diin, iwm.
- *Calanka*—calanku waa maro loo sameeyey midabo kala-duwan. Laakiin, waa maro ka duwan—kana qiimo badan—maryaha kale. Waxa kaliya ee ay uga qiimo badantahay waxaa weeye: waa maro isku-xidha dad aan is aqoon; oo sababta inay dadkaasi isu arkaan dad ay ka dhaxayso dano gaar ahi. Calanku waa baadi-

sooc. Calanku wuxuu qofka u sababaa inuu naftiisa u huro (oo uu u dhinto) qof kale oo aanu weligii arkin, wax aqoon ahna u lahay.

- *Lacagta*—lacagtu waa warqad loo sameeyey sawiro iyo midabo kala-duwan. Markaad dhinac ka eegto, lacagtu waxba kagama duwana warqadaha caadiga ah. Laakiinse, waa warqad ay dadku isku raaceen inay qiime gaar ah leedahay. Markii ay warqadii yeelatay qiime laydku raacay, ayaa hadana waxaa loo sameeyey sumad lagu garto inay warqadaas leeyihiin ummadda degen wadanka hebel. Sidaa awgeed, lacagtuna waxay qayb wayn ka qaadataa isku xidhka dad aan weligood is arkin.
- Iyo dariiqooyin kale oo badan. Hadii aad u baahato, faah-faahin siyaado ah, fadlan waxaad akhridaa buuggaa aan kor-ku-xusay.

Hadaba si aynu u fahano macnaha qotoda-dheer ee "qaran," waxaynu si kooban usoo dhirraan-dhirrinaynaa taariikhdii uu soo maray dhisitaanka qaranimaddu.

Taariikhda 'qaranimada: waxaynu si kooban usoo dhirraan-dhirrinaynaa nidaamyadii kala duwanaa ee uu bani'aadamku isticmaali jiray si uu u mideeyo bulshada, si aynu u fahano macnaha qotada-dheer ee qarana. Buugga *Primative Social Organization* ee uu qoray antraboologistaha Maraykan-ka ah ee Elmen Servies ayaa wuxuu si cilmiyeysan u sharaxayaa marxaladihii ay soo mareen nidaamyadii kala duwanaa ee uu bani'aadamku u midayn jiray bulshada. Nidaamyadaasina waxay kala ahaayeen nidaamyo uu bani'aadamku soo maray oo mid walba uu kasoo gudbay. Nidaamyadaasina waxay u kala horeeyeen siddan: 1) wadar; 2) koox; 3) qabiil; 4) bulsho; 5) qaran.

Hadaba, waxaa is waydiin muddan: maxaa bani'aadamka ku kalifay inay samaystaan nidaamyadaas ay ku midaynayaan bulshada? Marka aad fahanto jawaabta su'aashan, waxaad si qoto-dheer u fahmaysaa rimahan soo socda.

Kow, waxaad si fiican u fahmaysaa ujeeddada ay bani'aadamku u samaysteen nidaamka qaranka. Laba, waxaa kale oo aad si qoto-dheer u fahmaysaa baahidda abuurtay nidaamka qabiilka ee ay Soomaalidu ku dhaqanto. Saddex, waxaa kale oo aad si cad u fahmaysaa Soomaalidu marxalada ay taagantahay marka laga hadlayo midaynta ummadda—wadar, koox, qabiil, bulsho, qaran. Afartan marxaladood, kee ayay Soomaalidu maanta maraysaa?

Si aad u fahanto jawaabta su'aashan, waxaa haboon in aynu si kooban u sharaxno taariikhdii dheerayd ee uu soo maray nidaaminta bani'aadamku. Taariikhdaas dheer ee uu soo maray, waxaynu u kala horaysiinaynaa siddan soo socota: 1) wakhtigii ugaadhsatada; 2) wakhtigii abuurida qabiilka; iyo 3) wakhtigii abuurida qaranka.

Markii Nebi Aadan (cs) iyo Xaawa lagasoo saaray janada, waxa uu hoygoodii noqday dhulkan aynu ku nool-nahay. Bani'aadamkii ka farcamay Aadan iyo Xaawa, waxay ku kala-lumeen kaymaha, sababo badan awgeed. Waxaa dhex-maray dagaalo iyo colaado sababay in ay kala guuraan. Tusaale waxaa kuguu filan: colaadi dhex-martay Haabiil iyo Qaabiil. Mudo-dheer ka dib, qoys waliba iyo qof waliba wuxuu degey meel kaynta ka mid ah; waxaana ay u kala-guureen qaaradaha aduunka ee kala-duwan.

Bani'aadamkaasi muddaddii ugu dheerayd ee uu jiray wuxuu ku noolaa kaymaha. Nolosha kayntuna waa nolol aad u khatar badan. Waa nolol ku salaysan in aad wax cunto ama adiga lagu cuno (cun, ama halagu cuno); ama in aad wax disho ama adiga lagu dilo (dil, ama halagu dilo).

Labadaas wax u dhexeeyaa ma jiraan. Waa nolol ay xayawaan-ku is wada-cunayaan. Xayawaan weliba midka kale ayuu cunaa. Tusaale cadaan ah waxaa kuugu filan, marka aad daawato barnaamij-yada xayawaanka keynta ku nool.

Bani'aadamka waxaa ku xeernaa, oo gees-kasta ka jiray, waxyaabo naftooda khatar gelinaayey. Wax-yaalahaas khatar-ta ku ahaa waxaa ka mid ahaa: 1) *bahalaha dad cunka ah*: sida, libaaxa, shabeelka, jabisadda, madax-kutidda, iwm., oo bani'aadamku aanu u haysanin hub iyo awood ay iskaga difaacaan; 2) *cadowga*: weerrarka bani'aadamka kale; 3) *bakteeriyada/fiiruska (bacteria/virus)*: cudurada ay keenaan oo aanay wax aqoona u lahayn; 4) *dhimirka*: xanuunada ku dhaca maskaxda oo aanay wax aqoona u lahayn; 5) *masi-ibada dabiiciga*: dhul-gariirka, fulkaanaha, duufaanada, dhulka duma, iwm.

Noolaha kaynta ku nool, mid waliba wuxuu leeyahay awood ama xirfad (farsamo) uu naftiisa ku difaaco. Laakiin, bani'aadamku muu lahayn wax uu isku difaaco, sida noolaha kale ee kaynta kula nool. Marka aad bani'aadamka bar-bardhigto noolaha kale ee kaynta kula nool, bani'aadamku wuxuu ahaa ka ugu awooda liita; uguna jilicsan dhinac walba.

Tusaale ahaan, shinbirtu marka ay khatar dareento, way duushaa si ay uga baxsato khatarta; masku wuxuu isku difaaca—oo waxaa laggagga baqaa—sunta; sakaaradu/deeradu waxay isku difaacdaa orod aad u dheereeya; wiyishu aad ayay u xoog-weyn-tahay, waxaana ay leedahay fool aad u dheer oo ay isku difaacdo, iyo jidhkeeda oo ah qolof aad u adag oo aanay miciyaha bahaluhu daloolin karin; daayeerku wuxuu isku difaacaa xirfada uu dhirta ku koro; jir-jirooluhu wuxuu isku difaacaa inuu kolba isu-ekeysiiyo meesha uu ku taagan-yahay si aan loo arkin;

xayawaanka qaarkood marka ay khatar dareemaan, wuxuu jidhkoodu sii daayaa dheecaan aad u qadhmuun oo lagaga leexdo; iwm.

Bani'aadamku ma dheereeyo; ma duulo; sun malaha; jidh adag malaha; isma-qarin-karo; awood (xoog) malaha; fool malaha; ur qadhmuun oo laggagga leexdo malaha. Sidaa awgeed, marka kaynta la joogo, bani'aadamku waa noolaha ugu nuggul, ugu jilicsan, ee ugu awooda iyo xirfada liita.

Dhinaca kale, waxaa bani'aadamka khatar ku ahaa weerer kaga yimaadama bani'aadamka kale ee ay la kulmaan. Wakhtigaas bani'aadamku wuxuu u noolaa qoys-qoys ama keli-keli. Taas waxaan uga jeedaa, waxaa meel ku wada noolaa nin, xaaskiisa, iyo caruurtiisa oo keli ah. Mar-marka qaarkood-na, waxaa meel ku wada noolaa dhowr nin oo walaalo ah, xaasaskooda, iyo caruurtooda. Waxaa kale oo jiray rag iyo dumar kali-socod ahaa, oo kaligood meel ku noolaa.

Bani'aadamkaasi wuxuu ahaa ugaadhsato—weli may baranin sida xoolaha loo dhaqdo ama beeraha loo fasho. Xoolo-dhaqashada iyo beeruhu waxay bilaabmeen mudo aad u dheer ka dib. Dhibaatooyinka bani'aadamka dhexdiisa ka jiray waxaa ka mid ahaa; waxaa la-kala-dhici-jiray ugaadha iyo dumarka. Tusaale ahaan, marka uu ninku ugaadhsi (ama midho uu cuno) doonto, waxaa dhici-jiray in la-dilo si ugaadhaas uu soo qabsaday (ama midhahaas uu soo urursaday) looga boobo. Waxaa kale oo dhici-jirtay in ninka la-dilo si gabadha looga qaado. In aad bad-baado iyo in-lagu-dilaa waxay ku xidhnayd inta ay awoodaadu leeg-tahay, oo ahayd tirradda raga ee aad haysato.

Tusaale ahaan, qoyska ka kooban nin, xaaskiisa, iyo caruurtiisa marka ay iska-soo hor-baxaan (ama ay kulmaan) qoys kale oo ka kooban afar nin oo walaalo ah, xaasaskooda,

iyo caruurtooda, waxaa dhici-jirtay in afarta nin ay dilaan ninkaas keligii ah; ka dibna ay gabadha iyo caruurtaba kaxaystaan. Noloshooda iyo bad-baadadoodu waxay ku xidhnayd tirrada raga ah ee ay haystaan. Waata Soomaalidu ku maah-maahda: "*ama buur ahow, ama buur ku tiirsanow*."

Dhanka kale, wakhtigaas bani'aadamku muu aqoonin in xoolaha la rabaysto (la dhaqdo). Waxay ahaayeen ugaadhsato iyo midho-gurato (oo Soomaalidu u taqaano "cidiyo-madoobe") ama midho-gurato (midhaha dhirta ee lasoo gurto). Marka uu ninku ugaadh doonto, wuxuu khatar ugu jiray in la cuno, oo ay cunaan xayawaanka dad-cunka ahi, ama in la dilo, oo uu nin kale dilo. Waxaa kale uu khatar ugu jiray in uu god ku dhaco; geed kusoo jabo; ama mas qaniino; iwm.

Runtii waa nollol aad u cabsi (baqdin) badan. Noloshaas kaynta sharci kama jiro. Dawladi kama jirto. Boolis ma jiro. Naxariisi kama jirto. Cadaaladdi kama jirto. Cadaalad-darro kama jirto. Waxaa kaliya ee jiraa waxaa weeye: awood in laysku muquuniyo. Ninka laga tirrada-badan-yahay ayaa mar kasta lagu tacadiyi-jiray: "*ninkii roonoow, reerka u hadh*."

Buug ciwaankiisu yahay *Leviathan* oo uu qoray filosoofar-kii (philosopher) waynaa ee Ingiriis-ka ahaa ee laodhan-jiray Thomas Hobes, waxa uu si qoto-dheer ugu sharaxay xaaladan uu bani'aadamku ku jiray wakhtigii ay ku noolaayeen kaymaha (inkastoo isagu uu mal'e-awaal samaynaayey; laakiin xaqiiqda ku salaysan). Xaaladan keymaha ee uu bani'aadamku ku noolaa wuxuu u bixiyey: "*state of nature*"—oo micnaheedu yahay "*xaalada dabiici-ga*." Markii uu sharaxaayey nolosha ka jirta kaynta—xaalada dabiiciga—wuxuu ku tilmaamay in ay tahay nolol ah: "*solitary, poor, nasty, brutish and short,*" oo micnahoodu yahay, waa nolol ah, "*cidla, sabool, karaahi, axmaq, oo gaaban*."

Hadaba si looga baxo noloshaas khatar-ta ah, Thomas

Hobbes wuxuu keenay fikrad ah in ay bani'aadamkaasi heshiis wada-galaan. Heshiiskaas-na wuxuu u bixiyey "*social contract*" oo micnihiisu yahay "*heshiis bulsho*." Bulshadu waxay ku heshiinayaan inay samaystaan cid madax u ah dhamaantood, oo awood-na u leh inay ciqaabto, oo xoog ku muqiiniso, cidii xad-gudub samaysa. Si taasi ay u suurto-gasho, ayuu yidhi Thomas, waxaa loo baahan-yahay in uu qof waliba xoriyadda xad-dhaafka ah ee uu iminka haysto, qaybo ka mid ah uu waayo.

Taas micnaheedu waxaa weeye: inuu qofku xoriyadiisa qaybo ka-mid-ah uu waayayo si uu u helo nabad iyo xasilooni. Tusaale ahaan, qofka ku nool kayntu xor ayuu u yahay in uu kufsado gabadha uu doono ama uu dilo qofka uu doono. Laakiinse, marka uu heshiiskan galo, xoriyadaas ah in uu gabadha uu doono kufsado, ama uu dilo qofka uu doono, wuu waayayaa. Xoriyadahaas uu waayaayo wuxuu ku bedelanayaa inuu nabad iyo bad-baado u helo naftiisa, maalkiisa, iyo ehel-kiisaba. Thomas Hobbes isagu wuxuu diirada-saaraayey, oo uu sharaxaayey, muhiimadda ay leedahay in dowlad—ama maamul—la samaysto, iyo faa'i-idada ku jirta.

Fikradaas uu keenay Thomas Hobbes—ee ah in dowlad la samaysto si uu qof waliba u bad-baado—waxaa iyana fikrad la-mid-ah keenay bani'aadamkii ku noolaa kaymaha, dhowr boqol-oo-kun oo sanadood ka hor intii aanu buugga qorin Thomas. Fikrada Thomas iyo fikradii ay keeneen bani'aadamkii kaymaha ku noolaa, dhinac waa iskaga mid, dhinacna way ku kala-duwan-yihiin.

Labada fikradood waxay iskaga mid-yihiin: labadooduba waxay ka duulayaan in uu qofku helo cid bad-baadisa, oo difaacda naftiisa, maalkiisa, iyo qoys-kiisaba. Laakiinse, waxay ku kala-duwan-yihiin arinkan: Thomas wuxuu soo jeedinayaa in la samaysto dowlad; halka ay bani'aadamkii

kaymaha ku noolaa aanay iyagu dowlad ka hadlaynin, ee ay ka hadlayeen in ay samaystaan cid kale oo difaacda naftooda, maalkooda, iyo qoys-koodaba. Waa maxay waxa aan dowlada ahayn ee ay bani'aadamkii hore ka fikireen in ay samaysteen, si ay isu bad-baadiyaan?

Bani'aadamkaas kaynta ku noolaa waxaa aad u damqay, oo baqdin iyo argaggax ku abuuray, markii uu aad ugu batay dilkii, boobkii, dhacii, kufsigii, iyo cadaalad-darradii (taas oo ay u raacday dhibaatooyinkii kale ee ka jiray nolosha kaynta). Waxay mar walba arki-jireen in dadka naftooda, maalkooda, iyo qoysas-koodaba difaacan-karaa ay yihiin dadka tirrada-badan ee ka kooban dhowr nin iyo dhowr dumar ah. Waxaa kale oo ay mar walba arki-jireen in la dulmiyo, ama la dilo, qofkii kali-socod ah; ama qoyska ka kooban aabe, hooyo, iyo caruur. Taasi waxay u cadaysay in qofka kaliya ee bad-baadayaa uu yahay qofkii haysta rag garabkiisa taagan. Sidaa awgeed, dadkii keli-kelida ahaa (ama tirrada yaraa) wuxuu qof waliba ku dedaalay sidii uu ugu biiri-lahaa—ama uu uga mid-noqon-lahaa—koox ka kooban dhowr nin.

Dhinaca kale, dadkii ka koobnaa dhowrka nin iyaguna waxay ku dedaaleen in ay soo dhaweeyaan cid kasta oo awood kusoo biirinaysa, si aan looga tirro badanin. Wuxuu ahaa go'aan ay labada dhinacba—dhinaca wax ku biiraya iyo dhinaca lagu biirayaaba—ay soo dhaweeyeen. Inkastoo ay dhici-jirty in marrarka qaarkood isku-biiritaanku aanu suuro-geli-jirini.

Go'aanka ah in uu qofku ku biiro koox tirro-badan—ama koox tirro-badani soo dhawayso cidii kusoo biiraysa—kamay imanin fikir kaliya. Go'aankani wuxuu ka dhashay dhibaatadii ay maalin walba dadkaasi la kulmi-jireen. Waxay arkeen kooxo ay tirradoodu sii badanayso, maadama ay dad kale ku biireen. Sidaa awgeed, koox waliba waxay ku

dedaaleen inay soo urrurr-sadaan, soona dhaweeyaan, cidii kusoo biiraysa si ay tirradoodu usii badato oo ay isu difaacaan.

Marka ay tirradaadu badan-tahay, waxaad awood u yeelanaysaa arimahan soo socda: 1) in marka aad ugaadhsi doonataan aad isku raacdaan rag fara-badan; sidaa awgeed-na, aad iska difaacdaan bahalaha-dad-cunka ah; 2) in aad maalkiina, dumarkiina, caruurtiina, iyo naftiinaba ka difaacdaan bani'aadamka kale; 3) in aad soo boobtaan (ama soo dhacdaan) ugaadha iyo dumarka dadka kale ee aad ka tirrada-badan-tihiin; 4) in aad noqotaan bani'aadam hay'badd iyo sharaf ku nolaada.

Baahidaas ayaa abuurtay inuu bani'aadamku isu urrurrsado kooxo-kooxo: *waana baahidii keentay abuuridii (ama samaysashadii) qabiilka*. Nidaamka qabiilkuna waa nidaamkii saddexaad ee uu soo maray nidaamka midaynta bulshadu. Sidaa awgeed, Soomaalidu waxay weli maraysaa nidaamkaas saddexaad; halka bulshooyinka kale ee horuu-marayna ay marayaan nidaamka casriga ah ee qarana.

Halkaas waxaa inooga cadaatay in Soomaalidu aanay weligeed qaran samaysanin. Waxaa kale oo inooga cadaatay in ay Soomaalidu ka danbayso bulshooyinka aduunka dhinac walba; khaasatan, marka laga hadlayo qaranimada. Hadaba, waxaa is weydiin muddan: maxay ku kala duwan-yihiin qabiil iyo qaran?

Dhaqanka Soomaalida ayaa Hor-taagan Qaranimada

Maqaalka ciwaankiisu yahay *Qabiil iyo Qaran: Laba aan is Qaban* ee uu qoray aqoon-yahan, cilmi-baadhe, suugaan-dhaadhi, dhaqan-yaqaan—Rashiid Sheekh Cabdillaahi "Gadhweyne," ayaa lalgusoo daabacay mareegta Ward-heernews markay taariikhdu ahayd Nofember 18, 2015.

Rashiid wuxuu si cilmiyeysan, taariikhaysan, qoto-dheer, oo uu aad ugu nuux-nuuxsaday u sharaxayaa sida uu dhaqanka Soomaalidu u hortaagan-yahay, ama caqabada ugu noqday, dhisida qaranimada. Maqaalka oo dhamays-tirran, oo annan waxna ka bedelin, waxna ku darin, ayaan dhamaantii soo xigtay.

Sida caadada ah, marka lasoo xigganayo qoraal uu qof kale qoray, waxaa loosoo xigtaa laba nooc oo kala duwan: kow, in aad si toos ah usoo xiggato qayb ka-mid-ah qoraalkaas, adigoo xusaya qofkii qoraalkaas iska lahaa; iyo laba, in aad soo xigato fikirka qoraalku xambaarsan yahay; ka dibna, aad adigu ku qorto ereyadaada. Marka aad fikirka soo xiganaysana waxaa kugu waajib ah inaad xusto qofkii fikirkaas iska lahaa.

Anigu halkan waxaan kusoo xigganayaa maqaalkaas Rashiid oo dhamays-tirran. Sababta aan usoo xigtay maqaalka oo dhamays-tirranina waxaa weeye: waa maqaal aan la-kala reeb-reebi karin; maadaama uu si cilmiyeysan, oo qoto-dheer, u sharaxayo sida uu dhaqanka Soomaalidu u hor-taagan-yahay dhisida qaranimada. Waa kan maqaalkii oo dhamays-tirrani.

"Qabiil iyo Qaran: Laba aan is qaban

Marka hore

Qoraalkan kooban waxa aynu ku eegaynaa mushkiladda qabyaaladda iyo sida ay liddiga ugu tahay qarannimada. Liddinnimada lafteeda doodi ka ma madhna oo waxa jira dad u arka in aan qabiilku ka horjeedin ama aanu xataa saamayn taban ku lahayn qarannimada. Waxa ay yidhaah-daan "qabiilku ma xuma ee waxaa xumi waa qabyaaladda". Badi ba dadka sidaas arkaa, labada ayey si u kala saaraan. Xumo iyo samo se, labadu waa qofba sida arrinku u la

ekoonaado, waa na wax ka duwan natiijada lagu gaadhi karo darsidda waaqica jiraalka ah.

Waxa kale oo la yidhaa haddii aynu Soomaliland nahay (Waa tuslaale ahaane), qabaa'il isu yimid baynu nahay, qarannimadeennu na taas bay ku dhisan tahay. Marka sidaas la leeyahay, waxaa la daliishanayaa shirarkii qabaa'ilka ee Burco, 1991kii, iyo Boorama, 1993kii, ee lagu dhisay dawladda Soomaaliland. Ma aha shirarkaas oo keli ah ee dooddu waxay ku sii arooraysaa

golayaasha awoodaha qaran oo si joogto ah, loogu saleeyo saamiqaybsiga qabaa'il. Se taasi ma tahay qarannimadii oo dhisantay? Qaabka muuqda iyo magacyada hay'adaha waa la arkayaa, waxaa se meesha ka maqan nuxurkii qarannimo ee ahaa isahaanshaha dadka, dhab ahaan, ku wada abtirsanaya qarannimada. Waxaa jira ifafaalayaal ina tusaya in dareenka reer-hebelnimo, cid kasta kaga weyn qaranka. Waxaa maqan wadalahaanshihii dalka iyo qaranka. Qabaa'il iyo reero ayaa loo kala sheeganayaa hay'adaha dawladda iyo ilaa waaxyaha maamulkeeda. Taasi na waxay saamayn taban ku yeelatay kaalingudashada dhamman ba golayaasha iyo garsoonka qaranka. Sababtu waxaa weeye, dhaqanka dawlad la'aaneed ee qabiilada xooloraacatada Soomaaliyeed ma laha ma na yaqaan awood dhexe oo la isku darsado. Runtii qabaa'ilku wax way kala qaybsadaan, wax se isku ma darsadaan oo ma wada yeeshaan. Waxii dhexdooda yimaadda, xoog iyo xeer mid ay noqoto ba, way kala goostaan oo kala qaataan.

Ugajeeddada Ereybixinaha

Si uu jidkeennu u qorqoormo, waxaynu hadda ku hormaraynaa qeexidda dhawr ereybixinood oo ay doodda

qoraalku ku toosi karto. Markeeda hore, maxaynu uga jeednaa ereyada qabiil iyo qabyaalad, qaran iyo dawlad?

Qabiil, qolo iyo reer afsoomaaliga, marar badan, isla hal wax bay tilmaaamaan. Wadarta u ballaadhan ee isugu timaadda magaca qoladu ka soo unkanto, Sida "Hawiye, Dir, Daarood, Isaaq iyo Raxanweyn (waa tusaale ahaane)" iyo sii qaybsankooda hoose, heer kasta ba, waxa la yidhaa qabiil, qolo ama reer. Hoos bay, joogto, ugu sii qaybsantaa, ilaa ay tagto qoyska jifada la yidhaahdo. Waxaa kuwan hoose la yidhaa magacyo badan oo ay ka mid yihiin jilib, laf, jibsin, ardaa iyo kuwo kale.

Laba astaamood baa ku gaar ah ereyadan dambe. Midda hore, mar kasta oo la adeegsanayo waxaa laga muujiyaa qayb ahaanta ay ka tahay qolo ballaadhan. Haddii la maga-cdhebo jilib Hebel la yidhaa, waxaa laga fahmayaa (qofkii aan aqoonna loo sheegayaa) qabiilka ka weyn ee uu jilibkaasi ka tirsan yahay. Midda labaadna, marka aan loo dan-lahayn jilib iyo jibsin ahaanta, heer walba waxaa loogu yeedhaa magacyada qabiil, qolo iyo reer. Mar ba waa kii qofka madaxiisa ku soo hordhaca. Waxaa ugu layaab badan ereyga Reer; waayo, marka aad u fiirsato hidde-hadalka dadka ee maalinlaha ah, waxa aad maqli "Reerkaa Hawiye" ama "Reerkaas Daarood" iwm. Ilaa qoyska u yar, heer kasta oo laga hadlayaa ba waa reer. Waxaa ka duwan magaca guud ee ay qabiiladu ka askumanto, sida Daarood, Dir Hawiye, Isaaq iwm; kuwan ayaga, badi ba, la ma yidhaahdo jilib iyo jibsin iyo kuwa ka sii hooseeya. Magacyada Samaale Saab iyo Irir ayaga danaysi siyaasadeed baa, mararka qaar, loo wadwadaa; inta badan se la ma xusuusto.

Marka loo noqdo aqoonta ka soo ururtay cilmibaadhista anthroplojiga, ereybixinta qabiil oo afcarbeed ka soo jeedda, way adag tahay in badanka kooxaha Soomaalida lagu sifeeyaa. Ereyga qabiil waxa uu u dhigmaa tribe oo ingiriisi

ah; asaguna, sida uu faahfaahinayo I. M. Lewis oo ku xeeldheeraa soojireenka bulshooyinka Soomaalida, waxa lagu tilmaansadaa koox bulsheed mid ahaanteeda siyaasadeed iyo xeer-xidhkeedu ba (political & jural unity) ku dhisan yahiin dhul gaar ah oo ay wadaagto ku na wada abtirsato (1). Waxaa raaca af iyo dhaqan u gooni ah. Sidaas darteed, qabiiladan awoodda taladeeda siyaasadeed waxay ka dhalataa xidhiidhka dhulka. Badanka qolooyinka Soomaalidu, gaar ah kuwa aynu ka hadlaynaa, xidhiidhkaas la ma laha dhulka; ku ma na abtirsato oo loogu ma yeedho magaca dhulka ay deggan yahiin. I. M. Lewis, marka uu ka hadlayo kooxda xoolodhaqatada Soomaalida, waxaa uu doorbidayaa ereyga clan (afingriisi) oo afcarabiga ku ah cashiira (ereygan cashiira Soomaalidu waxay u adeegsataa macnaha xigto). Ereygani waxa uu tilmaamayaa koox bulsheed uu isku xidho adoo lagu wada abtirsado oo magaciisa la sheegato. Bulshadani magacyada odayaasha xidhiidhsan ee "isdhalay" ayey ku sii kala farcantaa oo ugu qaybsantaa jilibo iyo jibsino ilaa qoyska hoose u daaddegaya. Waxaa raaca oo uu I. M. Lewis qirayaa xeer koox walba gudaheeda ka dhexeeya oo hiiladeeda iyo hilowgeeda xejiya. Dhismaheeda siyaasadeed iyo buruudkeedu ba kooxdan waxa uu ka soo jeedaa xaqa xoogga dagaalka ee ay leedahay (2).

Qoloda aynu ka hadlaynaa waa ta qaabkaas u dhisan. Isla markii waa bulshada xoolodhaqatada reerguuraaga ah ee ay Soomaalidu guud ahaan, gaar na Soomaaliland, u badan tahay. Haddii aynu ereybixinta qabiil u dayno sida cilmiga antrobolojigu u dhigayo, ereybixinta clan ama cashiiro, afsoomaali ahaan, waxaynu u la bixi karnaa abtirsiinwadaag ama tolwadaag oo labadu ba nuxurka dhismaha bulshadaas tusayo.

Tolwadaagtaas xoolodhaqatada raacatada ahi, waxay lahayd jiritaan bulsho siyaasadeed mid ah, inkasta oo

falkeeda siyaasadeed iyo hiiladeedu ba la guurguuraan abtirsiinta jilibbada iyo jibsinaha hoos u sii qaybsamaya. Dadku wada xoolo dhaqato raacato ah buu ahaa. Qofka noloshiisu gees walba reer tolkii bay ku xidhnayd oo sina uga ma maari karin. Nabadgelyada naftiisa, hantidiisa iyo milgahiisa qof ahaaneed ba, awoodda iyo haybadda reer tolkii bay ku xidhnayd. Xilka ay wadarta tolkii ku ilaalinayso, ayuu asagu na reer tolkii garab iyo gaashaan ugu ahaa. Qofku reer tolkii buu u tirsanaa oo fal kasta oo ka yimaadda ba magaca reerkiisa ayaa lagu xidhidhiinayey. Sidaas darteed kooxda qabiil ama tolwadaagtu waxay ahayd dad is- ilaashada oo magaca isugu hiiliya dhegxumana ka dhawra dhaadashadooda. Sidaas darteed waxaynu odhan karnaa tolwadaagta Soomaalidu waageedii, fal iyo falcelin siyaasadeed oo sugan ba way lahayd (3).

Hadda aynu isla eegno ereyga qabyaalad. Marka hore, maxaa looga jeedaa qabyaalad? Maxaase ay isu yahiin qabiil? Ereygan qabyaalad ku ma jiro soojireenkii dhaqanka Soomaalida. Waxay dadku yaqaanneen qabiil (ka aynu hadda u la baxayno tolwadaag ama abtirsiinwadaag) oo ahaa qaab dhismeedka siyaasadeed ee ay bulshadu u habaysanayd; ereyga se qabyaaladi ku ma jirin luqadooda. Waxa uu ereygani soo biiray afartannadii iyo kontonnadii qarnigii labaatanaad, waagii uu carrada Soomaalida ka hinqaday halgankii gobannimodoonka Soomaaliyeed, goortaas oo ay qiirada soomaalinnimo aad kor ugu kacday. Amminkaas ilaa haddan aynu joogno, ereyga qabyaalad waxa uu leeyahay dhadhan diqo ah oo ay naftu diiddo, waayo waxa uu yeeshay macne ku liddi ah midnimada ummadeed oo dadka qabaa'il iyo reero u kala googoynaya. Ka dib Madaxbannaanidii qarannimo ee 1960kii, buu ereygu yeeshay duluc ah eexo iyo caddaalad darro. Malaha arrintaasi waa ta keentay in dadka qaar u arko qabiilka iyo

qabyaaladda laba aan waxba wadaagin oo aan isu iman karin. Doodda xumaha u celisa qabyaaladda ee ka anfida qabiilka, malaha halkaas bay ka soo jeeddaa.

Inkasta oo ay taasi wax jira tahay, runtu sidaas ma wada aha. Qabiilka abtirsiinwadaagta ah ee Soomaaliyeed waa isahaansho ku arooraya mabda'a iska-soo-horjeedka annaga iyo ayaga; waa hiilaada sookeeyaha ee ku salaysan iska caabbinta shisheeyaha. Eexada ku jirta mabda'a odhanaya tolkaa gar iyo gardarro ba ugu hiili- xaalad kasta iyo meel walba-waxa uu horseedayaa caddaalad-darro. Isku-qolada tolliimada wadaagta, dadku dadnimo ugu ma sinna oo isku xuquuq u ma aha. Baaqeedu waa lababa kii ku abtirsiin xiga u eexo. Midda kale, waa wax dabeeci ah in qofku had iyo jeer, taxgeliyo cidda uu ka tirsan yahay ee uu u tirsan yahay, uu na u hoggaansamo ta ay kooxdiisu bulsheed ka rabto; taas owgeed, ciddii tolliimo xigta ayuu qofku weligiiba u dareen nugul yahay. Qabyaaladda dhismaha dawladeed iyo maamulkeeda gashay, meel kale ka ma imannin ee waxaa dhalay dhaqanka eexada iyo hiilada tolliimo, kaas oo ay abtirsiinwadaagta Soomaalidu ku dhisan tahay. Haddii abtirsiinwadaagta reerguuraaga ahi shalay ku loollamaysay geela iyo daaqa iyo ceelka biyaha oo ay isugu hiilinasay, taas uun baa u soo guurtay awoodda xukun dawladeed iyo danaha laga quuddarraynayo. Waxay ku ururs an tahay, haddii aan qabiil jirin, qabyaaladi ma jirteen. Ka ma wado in aan dawladdu dulmi iyo caddaalad-darro yeelateen; waxa aan ka wadaa haddii aan qabiil jiri lahayn, musuqa iyo caddaalad-darrada dawladda ka timaaddaa, waxay yeelan lahayd weji kale oo aan qabyaalad ahayn.

Hayeeshee, macnaha eryega qabyaaladi, mar walba, isku si ma ahayn. Waagii gumaysiga shisheeye halganka lagu la jiray waxa uu ereygu ku xidiidhay halkudheggii "qabyaaladdu ha dhacdo" iyo "Soomaalidu ha noolaato"; ma na

lahayn duluc ka horjeedda caddaalad-darro iyo qaraabokiil. Ulajeeddadu waagaas, waxa ay ahayd in dadka lagu mideeyo magaca soomaalinnimo, laga na jiro kala qaybinta iyo iskahorkeenka qabaa'ilka iyo reeraha. Ururrada halganka hoggaaminayey waxay si weyn, ugu dedaali jireen ka-wacyigelinta dadka xataa sheegashada magacyada abtir-siinwadaagta. Waxay gaadhay ilaa xad magaca qoloda laga dhawro carrabka oo laga xishoodo. Sidaas darteed, ereyga qabyaaladdu waagaas, waxa uu la mid ahaa qabiilka laftiisa; waxa la diiddan yahayna asaga ayuu ahaa.

Madaxbannaanidii qarannimo iyo dawladnimadii Soomaaliyeed ayuu ka soo kordhay ifafaale qabyaaladeed oo aan ahayn kii lagu hirdamayey daaqa, ceelka iyo hantida xoolaha, gaar ahaan, geela. Wax kale na ma aha ee awooddii xukunka dawladeed iyo maamulkeedii iyo hantidii guud baa ku dhacay loollankii qabiilka. Waxaa ka dhashay qabyaalad ku duran siyaasadda iyo hoggaanka qaranka. Magaca qabyaaladdu markan waxa uu ka imanayaa wejiga tolliimada ee loogu loollamayo jagooyinka hoggaanka qaranka iyo eexada iyo qaraabokiilka maamulka dawladda ku marmay. dhibaatadan, sida aynu kor ku xusnay, waxaa yeedhinaya qiyamta tolliimada ee dhaqankii qabiilada Soomaaliyeed. Waa dhaqankii qabiilka oo qarankii lagu rarayo. Ereyga qabyaalad maanta macnahan buu leeyahay oo waxaa ku ladhan musuq, sharcidarro iyo caddaalad la'aan ka jirta maamulka danaha guud. Waana wax ka imanaya dareenka wada dhalashada tolka laftiisa. Haddii la helo hal qof qarannimada u daacad ah oo xilka uu u hayo qaranka xeerkiisa mariya, dadka na caddaalad iyo sinnaan ugu adeega, u ma suurogalayso, waayo cadaadin aanu hayn karin baa dhinac walba, kaga imanaysa oo ku riixaysa in uu eexdo.

Aynu hadda u nimaadno qaran iyo waxaa uu noqon

karo. Marka loo noqdo taariikhda bulshada aadanaha waxaa laga helayaa qaabab dawladeed oo aad u kala duwan. Boqortooyin dhaxaltooyo ku dhisan, saldanado awood qof ahaaneed oo aan xad celiya lahayn, kelitalisyo afgembi ku yimid oo xoog hubaysan cid kasta ba ku muquuniya iyo dawladda dimoqraaddiga liberaaliga ah ee casrigan, intuba magaca way wadaagaan. Sida ay u kala wada jaad yahiin, waxaa la moodaa in aan qeexid mid ah loo helaynin; ma se aha sidaas ee wax ay wadaagaan baa jira.

John Locke (1632-1704) baa yidhi, baa la yidhi: awoodda siyaasadeed waa xaqa samaynta sharci qofkii jebiya ku xukuma ilaa dil iyo intii ka hoosaysa ba (4). Qaran waxa u horreeya ee lagu yaqaan waa awoodda siyaasadeed ee dhexe. Max Weber na waxaa uu ku sifaynayaa hay'ad keligeed xaq u leh in ay xoog iyo gacan kulul adeegsato. Waa quwadda qudha ee la oggol yahay in uu sharci ka soo baxo oo ay ku socodsiiso xoog hubaysan.

Sifaaleyaalkaasi waa laga helaa qaran dawladeed dhammidood; marka se aynu u nimaadno casrigan aynu joogno, waxaynu odhan karnaa: Qaran waa bulsho rayid ah oo leh habdhismeedyo siyaasadeed (political institutions) oo u abaabulan qaab xukun dawladeed oo dhexe. Rukummadeeda saleeyaha ah waxaa u mudan: Dhul leh soohdin sugan oo ay kelideed ka taliso. Waxaa halkan ku jira oo hadalku u dhacayaa, dhul ku hoos-jira haybadda qarankaas oo loo aqoonsan yahay. Waxaa dhaci karta in qayb ama qaybo ka mid ah dhulkaas ay awood kale oo gudahooda ahi ka taliso, ta muhiimka ahi se waa in cid kasta oo ka talisaa ba ka wakiil tahay qaranka, ama ugu yaraan haybaddiisa aqoonsan tahay. Rukun kale waa mabda'a kelida qofeed ee xorta ah oo jiritaan siyaasadeed iyo xilqaad naftiisa ah leh, wadar ahaan na u noqda muwaadiniinta uu dalku ka dhexeeyo. Waxaa soo raaca xeer, qaanuun ama sharci (waa isla

halkiiye) dhulkaasi ka wada hirgala, dadka na qof wal ba iyo ha'yad kasta oo leh shakhsiyad sharciyeed na qabta. Rukun kale na waa hab-maamulka madaniga ah iyo ciidanka hubaysan (boolis) ee u jabsan in uu xoog ku meelmariyo sharciga ka soo baxa hay'adda awoodda qaranka, ciddii ka hortimaadda na xoog ku muquuniya. Waxaa kale oo rukun ah, garsoor habaysan oo sharciga fasira oo ciddii qodab-badiisa isku qabata ku kala saara.

Ereybixinta qaran, marka ay sidaas tahay, waxa ay u dhigantaa oo aannu uga jeednaa, state oo ah ingiriisi ama a-dawlah oo ah carabi. Ereygan dambe, af carabiga qaranna wuu dhigmaa, awoodda fulinta na, isla mar ahaan, wuu tilmaamaa. Dawladdu markan waa xukuumadda mar ba maamulka dalka haysa. Tusaale ahaan, waa ta la yidhaahdo: "Dawladdii Hebel" ayada oo loo jeedo xukuumaddii uu ka madaxda ahaa. Mar kale waa ta la dhaho "dawladdii xisbi-gaas iyo xisbigaas". Halkan bay ka muuqataa waxa ay labadu ku kala geddisan yahiin oo jiritaanka qaranku waa negi joogto ah, halka dawladdu, marka looga jeedo cidda hawlaha qaranka fulinaysa ama xukuummadda, ay noqon-ayso wax isbeddeli kara. Hayeeshee hab ahaan, xuku-umaddu na dhismaha guud ee qaranka ayey ka mid tahay.

Ujeeddada aynu daba soconaa waa nuxurka xidhiidhka ka dhexeeya habyaalka ama nadaamka tolwadaagta Soomaaliyeed ee reerguuraaga ah iyo qarannimada Soomaalidu, gaar ahaan, Soomaaliland, u hanqaltaagayso.

Bartilmaanteenna hore ee male-awaalka ahi waxay tahay dhismaha dhaqanka abtirsiinwadaagta Soomaalidu wuu burinayaa qarannimada iyo dawladeeda. Si aynu arrintan runteeda uga yoolgaadhno, waxaynu meelo iska tusi doonnaa qiyamta ama qaayosoorrada siyaaasadeed ee bulshadaasi ku dhisanto ee hoggaamiya faldhaqanka dadkeeda, koox iyo kowba. Waxaa xiga oo aynu uga

gudbaynaa muujinta sida dhismaha abtirsiinwadaagtu ugu liddiga yahay hannaanka qarannimo hagaagsan iyo dawlad wanaagsan.

Bulsho Dawla La'aaneed

Dhismaha bulshada abtisiinwadaagta Soomaaliyeed waxaa uu ka kooban yahay qiyam ama qaayosoorro gebi ahaan, burinaya qarannimada aynu kor ku soo tilmaanay. Kuwa u mudan waxaa ka mid ah xoogga iyo dirirta joogtada ah, tolliimada iyo hiilada sokeeye.

Ta u horraysa: bulshadaasi waxa ay ku noolayd xaalad dawlad la'aaneed oo ay nabadgelyadeedu ku xidhan tahay, marka hore, xoogga qofka; marka xiga na xoogga reer tolkii. Waa xaalad si weyn ugu ekoon tii uu Thomas Hobbes (1588-1679) kaga hadlay buuggiisi caanka noqday ee Leviathan, taas oo uu ugu magacbixiyey xaaladda dabeecaceed (state of nature). Waa xaalad aanay dawladi jirin oo ay cid wali ba dagaal Joogto ah ku la jirto cid kasta oo kale. Waa xaalad qofku ku nool yahay cabsi uu ka qabo in la qudhgooyo (5). Ulajeeddada Thomas Hobbes iyo digniintiisu waxay ku ursursan tahay, meeshii aanay joogin dawlad leh awood ay dadka ku kala waabiso, lamahuraanku waa iska-horimaad iyo dirir ba'an oo dadka ka dhex dhacda.

Thomas Hobbes waagiisii badanka fikireyaashu ma malaynaynin in ay dunida ka jirto, ama soo martay ba bulsho ka madhan qaab dawlad dhexe oo dadka guud ahaan xukunta (6). Dooddiisu na, Hobbes waxay ka ahayd male-awaal ku saabsan dhul aan dawladi ka jirin, sida xaal noqon karo. Waa se la hubaa in dunidii, waagaas ba (qarnigii 17aad) ay ka jireen dadyow aan lahayn hannaan dawladnimo; waxaa na ka mid ahaa qabaa'ilka Soomaalida reerguuraaga ah. Dhulka Soomaalidu degto waagaas waxa

ka jiray dawlad magaaleedyadii Muqdisho iyo Saylac iyo boqortooyadii Ajuuraanka; ha yeeshee in badan oo ka mid ah tolwadaagaha Soomaalidu way ka baxsanaayeen xukunkooda.

Maanta, haddii aynu akhrino buugga Leviathan oo markii u horraysay, la daabacay 1651kii, waxaa la moodaa Hobbes in uu ka hadlayo noloshii tolwadaagaha reerguuraaga Soomaalida. Thomas Hobbes fikraddiisu, ayada oo aad u kooban waxay tahay abuurta dabeeciga ah ee aadanahu waa helitaanka waxa ay naftiisu jeceshahay. Meel ay ku eg tahay oo uu nafta damaceedu ku joogsado na ma jirto. Mar kasta wax naftu rabto oo qofka ka maqan baa jira.

Waxaas ay naf waliba rabto oo aan dadka wada gaadhi karin baa, meel aan dawladi ka jirin, la iskaga horimanayaa; waxaa na ka dhalanaya colaad iyo dirir aan dhammaanayn. Waa ta uu ku tilmaamayo dagaal ay cid wali ba ku la jirto cid kasta oo kale (war of all agaist all) (7).

Markan waxaa qaayo yeelanaya oo wax kasta ka mudan xoogga uu qofku ku heli karo rabitaankiisa. Waa xaalad uu xoogga dagaalku xoolo keeno, la'aantii na lagu waayayo. Waxii uu qofku haysto, cid aan haysan baa ku soo weeraraysa oo ku dilaysa. Xoog ayuu xoolo ku heli karaa, kuna haysan karaa, kuna a sii biirsan karaa. Xooggu markan waa dad, duunyo iyo hub, magaca dagaalyahan oo u baxa iyo wax kasta oo lagaga habrado (xusuuso magacyada Wiilwaal, Xirsi Ammaan, Mataan Ciideed, Xuseen Xasan, Afxakame, Aadan Galaydh iyo kuwo kale oo badnaa).

Waayahan, sida Hobbes ku sifaynayo, xoog-biirsigu ma joogsanayo, illayn nacabkiisu na way isu ururSanayaaye. Sidaas darteed, ku tartanka xooggu, asagu na, ma laha meel uu isku taagto. Qofkii aan haysannin wax laga hungureeyo, asagu na, ma badbaadayo, waayo faro-madhnaantiisu waa sabab lagaga shakiyo in uu soo weeraro kii wax haysta;

shakigaas oo keli ah buu ku dhimanayaa. Ka xoogga weyn iyo kii uu u baxay magaca dagaalyahan dilaa ah oo aan dhinaciisa dhul la dhigin, ayagu na ma ammaan-qabaan, waayo, dilkooda iyo dhacooda magac iyo maal ba waa lagu doonayaa oo weerarka u badan, baa mar kasta, ku soo maqan. Naafada aan lahayn tamaro dagaal na laga ma cabsi la'a, waayo, gaadmo iyo ciidan kale ba wuu ku adeegan karaa. Qofka xooggiisu ku ma filna; sidaas darteed, waa la isu xoog badsanayaa oo saaxiibbo, iyo dhoobbi kiraysan iyo addoon la soo qafaashay iyo qaraabo ba waa la isku xoojinayaa.

Marka aynu u fiirsanno, sababta dagaalku, ugu dambanyta, waxay u dhuranaysaa shaki iyo cabsi la kala qabo. Taas darteed cid waliba waxa ay ku tashanaysaa in ay ayadu nabarka ku hormarto. Waxay u arkaysaa in difaaceedu ku jiro weerarkeeda. Hobbes wuu qirayaa in aanu dagaalku ahayn mid goor wal ba oogan ee ay jirto gooro la dhiillo la'yahay. Waxaa se mar kasta lagu jiraa cabsida weerar goor kasta ba iman kara. Waxa lagu jiraa oo aan laga gudbaynin xaalad, mar walba, dirir loo toog hayo. Sida uu Hobbes, marka dambe u dhigayo, dagaalku wuu ka tegayaa hungurigii xoolaha oo wuxuu noqonayaa isdifaac. "Inta aanu kugu dhufan adigu nabarka kaga horree". Hobbes waxa uu u arkaa in wacaalaha dawladnimo ka dhalatay tahay dhibaatadaas iyo sidii looga raysan lahaa. Dawladdu waa xooggii dadka qof-qof ugu filqanayaa oo la isugu geeyey awood dhexe oo ay cid waliba hoos timaaddo.

Aynu hadda isweydiinno ilaa heerka taas looga meel-dayi karo dhismaha tolwadaagta reerguuraaga Soomaaliyeed. Ma la odhan karaa xaaladdan Thomas Hobbes uu qarnigii 17aad, mala-awaalay, waa ta ay abtirsiinwadaagta xooloraacatada Soomaalidu ku sugnayd waagaas, ilaa maanta na aanay ka dhammaannin?

Qabiilada tolwadaagta raacatada Soomaaliyeed, marka aynu hadda hoos ugu fiirsanno, waxaynu ku arki wax badan oo Thomas Hobbes kaga warramay Xaaladda dabeecadeed (State of Nature). Waxaa ka mid ah adeegsiga xoogga mutuxan ee lagu kala sedqaado. Xoolaha oo uu geelu u mudan yahay xoog dagaal baa lagu soo xerogashanayey oo lagu haysan karay. Dhismaha bulsheed iyo siyaasadeed ee kooxda isku qolada ah, dhaca iyo dhacsiga geelu rukun adag buu ka ahaa. Dirirtu haddii aan maanta lagu jirin, filashadeedu mid ammin kasta ba taagan bay ahayd. Waxay yidhaahdeen: "Nabadi wax ku ma yeeshee colaad u toog hay". Si-aragga bulsheed ee dhaqanka raacada Soomaaliyeed waxaa ka mid ah in qofku, si gaar ahaaneed na ninku, xoog iyo gacan kulul ku qaado waxii uu ku qaadi karo, waxiisa na ku dhacsado. Waxaa kale oo ka mid ah inuu naftiisa, maalkiisa iyo milgihiisa ba gacantiisa ku difaaco, dirir na u feejignaado. Waxay ku maahmaaheen: "dagaal gondahaaguu ka dhashaa". Waxay ina tusaysaa sida fudud ee dagaalku uga dhex dhacayey dadkaas. Waxa u yar ee la isku qabto, dhif bay ahayd, dagaal hortii, in geedka garteeda la tagaa. Nabarka kulul baa marka hore la bilkeedayey. Sida ay rumaysnaayeen, marka waranka la dhiigeeyo ayaa la isdhegesanayey. Waa halkii ay ka yidhaahdeen: "nin aan warankaagu gelin weedhaadu ma gasho". khasaarahiisa ayaa geedka garta la keenayey. Noloshii bulshadaasi iyada oo kooban waxay ahayd colaad u joog. Waa halka ay ka yidhaahdeen: "Lugna dirir ugu joog lugna nabad" "baqe" na waa la yidhaaye.

Dhaqanka raacatada, Soomaaligu marka uu gardarro tirsado, ceeb buu u yaqaan in cid kale loo ashtakoodo. Haddii ashtako la la soo qaado, Soomaaligu inta uu isdhufto ayuu yidhaa: "oo miyaan ka baqanayaa"?! Alle ha u naxariisto ee Axmed Sheekh Jaamac, diiwaankiisa maanseed ee

Cadlidoonaha Daal Allaa Baday, tixda 15aad, ayaa shakhsiyadda raacatada soomaaliyeed, si qayaxan oo qurxoon u soo bandhigaysa (8).

Habka dhismaha abtirsiinwadaagta reerguuraaga Soomaalida, xaqu waa inta xooggu kuu gooyo. Darajada aad bulshada ku yeelan kartaa na waa xooggaaga. Sidaas oo kale, haybadda ay koox Reer Hebel la yidhaahdaa leedahay, waxay ku xidhan tahay xoogggeeda dagaal. Qofka waxaa lagu taxgeliyo ee lagaga dhawrsado, geeliisu dhulka daaqo, iyo waxa lagu la xidido ee lagu xurmeeyaa waxay ahayd xoogga iyo biliga qolodiisu ku dhex-leedahay qolyaha kale. Dadka Soomaalida ah ee hayb ahaan loo takooro, meel kale laga ma raacin ee waa loo xoog sheegtay. Waa loo moorduugay oo qudhaa laga muquushay. Inta dhaqashadii xoolaad laga xarrimay, ayaa xirfad kasta oo kale na lagu takooray. Waxay yidhaahdeen: "ama buur ahaw ama buur ku tiirsanow". Gobonnimo xoogga ayey saarrayd. Xoog la"aantii waa lagu gumoobayey.

Waa run oo bulshadaasi xoog, dagaal iyo hiilo tolliimo oo keli ah ma ahayn ee qiyam anshax dadnimo oo guud na, intaa ka badan bay lahayd. Sidiisa na ereyga qiyamta waxaannu halkan uga jeednaa waxyaalaha dadku qaayo siiyo ee hanka iyo hiyiga dadku tiigsado dhammaantood. Waxaa ka mid ah, tusaale ahaan, deeqsinnimada, dulqaadka, geesinnimada iyo dagaalyahannimada oo ayadu bushada aynu ka hadlayno meel lafdhabar kaga jirtay. Waxaa se bulshadan agteeda kow ahaa oo aannu, si gaar ah, u eegaynaa qiyamta nabadda iyo dagaalka, xoogga iyo adeegsigiisa, tolka ama tolliimada iyo hiilada sokeeyaha.

Ta se la isweydiin karaa waxay tahay, guud ahaan ba, bulshada dawlad la'aaneed miyaanay dadkeedu lahayn xeerar dawraac iyo anshax ama akhlaaq dadnimo ah oo waabiya xoogga mutuxan. Isla su'aashani waxay ka hortimid

Thomas Hobbes. Waxa uu na ku warceliyey xaaladda dabeecadeed (state of nature) ma jiraan xeerar anshaxeed (moral rules); waayo ma jirto awood dadka u dhex ah oo dejisa xeer, dadka na ku kala saartaa. Qofku xooggiisa ayuu u irkanayaa oo uu ku dedaalayaa in uu tiisa ku gaadho ku na difaaco. Mar haddii aan cidi na cid kale ku kalsoonayn oo cabsi la kala wada qabo, aanayna jirin quwad kale oo ay cidi na nabadgelyadeedaa ku hallaysaa, waxaa uu qofku dan moodi karaa in uu weerar ku qaado ciddii uu cabsi ka qabo, si uu isu difaaco. Waxa uu Hobbes leeyahay haddii anshaxu yahay xeer damiirka dadka ka yimaadda oo ku salaysan kala saaridda daw iyo dawdarro, caddaalad iyo caddaal la'aan iyo xaq iyo baadil, xaaladda dabeecadeed, qofku daw iyo jid buu u leeyahy in uu isdifaaco; meesha uu weerar kaga iman karo na asaga ayuun baa og oo garan kara. Sida ugu habboon ee uu isu difaacayo asaga ayaa qiyaasi kara, waxay na noqon kartaa in uu weerarka ku hormaro. Hobbes waxa uu u arkaa xaaladdan xaqa jiraa waa xaqa isdifaaca oo keli ah; waana daw taasi. Waxa uu xaqaas uga magac-dhigayaa xaq dabeeciga ee xorriyada (Natural Right of liberty) (9).

Maxaynu hadda ka nidhaa dhaqankii lagu yaqiin abtirsiinwadaata Soomaaliyeed? Jawaabta dad badani, meel dhow ka soo qabanayaa waa xeerarkii qolyaha Soomaalidu, gaar ahaan, jilibbada iyo jibsinaha wadaaga daaqa iyo ceelku, ku wada dhaqmi jireen, taladii odayaasha iyo gartii geedka iyo weliba qiyamtii birimageydada ee dibuheshiisiinta fududaynayey. Tu inta ba ka sii mudani waa hiyiga nabadda raba ee dadka ku jira. Waxaa run ah in nabadda la jecel yahay, sidaas darteed na ay qiyamta bulshadaas ka mid ahayd. Waxaa ka marag ah dhaxalka suugaanta Soomaaliyeed, tix iyo tiraabba. Hayeeshee geesta kale na waa run oo colaaddu na, sidii aynu hore u faahfaahinnay, rukun adag bay ka ahayd jiritaanka bulsheed iyo siyaasadeed ee

tolwadaagta xoolojiratada soomaaliyeed. Waxa aad ku garataa barbaarinta carruurta, siiba wiilka; dhallaannimadiisa ayaa dagaalyahannimo lagu barbaarin jiray; halka uu nabad-talinta waayeelnimo ku baran jiray.

Colaadda iyo nabaddu laba qaayo-soor oo isa sudhan bay ahaayeen. Qolo walba xooggeeda ayey nabadgelyadeedu ku xidhnayd, waayo waa lagu tixgelinayey. Xooggu, ka sokow tirada gaashaanqaadka, xoolaha iyo magaca dagaalyahannimada na wuu ahaa. Waxaad ku garataa qolyahu ka ma sheekeeyaan badi ba, dhacadada nabadda; waxay se ay, had iyo jeer, hadalhayaan dhacdooyinka dagaalka iyo faanka libintooda. Haddii laba qolo oo aan dagaal isku barani dhul ku kulmaan, dagaalkoodu wax yar buu ka kaci jiray; waayo labada dhinac quudhsi bay ku kala shakiyayeen oo dagaalkooda dedejinayey. Qadhaadhka ayaa marka hore la istusayey. Marka dirirta la isku barto, ayey nabaddu imanaysay. "Nin aan warankagu gelin" bay ahayd "weedhaadu ma gasho". Waxaynu odhan karnaa colaaddu, qiime ahaan, mar kasta ta nool bay ahayd; xataa marka aanu dagaal soconnin, filashadiisaa dhawayd oo loo feejignaa. Gees kale na dagaalka ayaa nabadda lagu keenayey oo jid u ahaa. Isu dhiganka xoogga dagaalka ayaa la isku taxgelinayey. Sida aynu kor ku xusnay, qoladii "aan buur ahayn, buur na ku tiirsanayn" bar lagu ma reebaynin. Waxay ku ururtsan tahay, qaayaha xoogga iyo dagaalka ayaa sal iyo seesba u ahaa nabadda oo ay ku saldhigaysay. Waayo, qolodii aan dirirtooda lagu taxgelinaynin, nabad la la ma qaadanaynin.

Qaayo-soor kasta waxaa ku ladhan majeerasho iyo lagaaddo, sharaf iyo ceeb. Bulshadan dagaalka ayaa ammaanta lahaa, xaalado badan nabad-qaadashada hore, waxaa looga carari jiray yaan, lagu odhan waa fule. Dagaalka, canaan mooyee, ceebi ninna ku ma raacaynin.

Waxaa kale oo qoloda abtirsiinwadaagtu, si door ah, u qaayosoortaa tolka iyo tolliimada. Ayada lafteedu na waxay ku sal leedahay xoogbiirisga iyo dirirujoogga la yahay. Waayo nabadgelyadiisu qofka, naf iyo maalba, tolkiisa ayey ku tiirsanayd. Gees kale na tolku waa isahaanshaha qofka. Waa bulshada uu ka tirsan yahay ee u tirsan yahay. Dhaqanka abtirsiinwadaagta Soomaaliyeed qofku ma laha jiritaan kelidii ah oo ka baxsan reer tolkiis. Asaga iyo qoladiisu ama tolkii waa isku mid.

Qaayosoorka tolliimadu waxay ka soo jeeddaa oo jirrid u ah abtirsiinta iyo mabda'a wada dhalashada ee xoojinaya isu-ahaanshaha iyo isku xidhnaanta tolka. Wada dhalashadu waxay u adeegaysaa adkaynta xidhiidhka tolliimada oo ayadu na xoojinaysa qiimaha hiilada tolliimo. Hannaankan qaayosooreed na, sidaas darteed, waxa uu ku biyoshubayaa tamargelinta xoogga cududda dagaalka ee tolwadaagta. Waa qiyam xidhiidhsan oo mid ba ka kale u jiidmayo. Halkaas ayey ka imanaysaa kaalinta hiilada tolliimo ee ku fadhida mabda, "sokeeyahaa gar iyo gardarroba u hiili". Marmarka ay dhacdo in ninku arrin ku diido tolkii, ujeeddadiisu waa u hiilinta tolka ee ma aha ka hiilin, waayo arrinta ayaa ah tu ay tolkii dhibaato, gaar ahaan, magac xumo, uga imanayso.

Waa run oo bulshadan ku dhisan abtirsiinta, tollimaadu way guurguuraysaa oo waxay sii kala noqonaysaa jilibbo, jibsino iyo wax ka sii yar. Sidaas darteed, ma la oran karaa tolliimadu meel sugan ma fadhido oo qaayosoorkeedu ma sal adka? Haddii aynu se hoos u sii dhuganno, taasi waxa ay ka marag kacaysaa qaayoha xidhiidhka tolliimada. Marka hore, waxa guurguuraya ee hoos u sii furfurmayaa waa hiilada. Tolliinamadu mar ba waa heerkii loollanku ka taagan yahay. Hiilada ayaa tegaysaa in kii shalay la isu hiishanayey maanta la nacabsado. Qaayaha tolliimadu mar

kasta waa joogto, waayo qofku heer wal ba, tol buu dugsanayaa. Mar ba heerka loollanku ka socdo ayey ku xidhan tahay. Waa bulsho hilowgeeda iyo hiiladeedu aanay meel qudh ah ku sugnayn. Sokeeyaha maanta ayaa berri shisheeye ah. Laba qolo oo hadda colaadi ka dhex oogan tahay, ayaa qolo abtirsiinta ka fogi soo durrayn jirtay; markaas ayey labadii dirirtu ka dhex oognayd dhinac ka safan jireen. Shisheeyihii haddeer nacabka ahaa baa tol noqon jiray. Tolliimadu runtii waxay ahayd waxa u weyn ee dareenka qofka kiciya ee falkiisa dhaqaajiya.

Dhinac kale, marka loo fiirsado qofku sida uu ugu dhego nuglaa qaylodhaanta iyo tiratirada reer tolkii, waxa la moodaa in tolku leeyahay midnimo adag oo gudahiisa ah. Mase aha sidaas. Mid ahaansha qolada abtirsiinta wadaagtaa waxay ku xiran tahay nacab shisheeye ah oo ay iska eegayso. Bal jiritaankeedu taas ayuu ku dhisan yahay. Nacabkaas mar na la ma waayo. Sidaas darteed, Haddii ay dhacdo xaalad aanu jirin cadow la iska eegayo iyo cid werwer ku haysaa, shakiga ayaa markaa ba dhexdeeda yimaadda; markaas ayey hoos isu nacabsataa. Waa ta keenaysay dagaallada jilibbada isku qolada ah ka dhex dhaci jiray (10).

Waxaa dadka qaar ku doodaan bulshada tolwadaagta xooladhaqatada reerguuraaga ahi waxay lahayd xeer iyo habdhismeed (institution) ay dhibaatooyinkeeda ku xalliso oo nabadda ku ilaaliso. Waa run oo qabiilku, abtirsiin keli ah ma ahayn ee isla markii, xeer baa u yeelayey midnimadeeda syaasadeed. Hase ahaatee, xeer ama qaanuun, sharci iyo shareeco ba, waxa ay leeyihiin ulajeeddo ama himilo iyo abbaar dad isku og yahay iyo cid cayiman oo uu u mayal qabata. Xubnaha xeerka tolwadaagaha aynu ka hadlaynaa waa jilibbada ama jibsinaha ku heshiiya ee ku wada dhaqma. Waxa uu xeerkaasi qabtaa waa kooxda ee ma

aha qofka. Tusaale ahaan, haddii qolo nin laga dilo ama la dhaawaco, Reer Hebel baa, wadar ahaan, dembiga u qaba, waxaa na dembigaas laga galay reerka kale, wadar ahaan. Xubinta uu xeerku abbaarayaa waa qolada dhammaanteed. Masuuliyaddu, na mar walba, waa tu wadareed. Geesteeda kale na xaqa uu xeerku ilaalinayo waxa leh wadarta Reer Hebel. Magta la wada bixiyo ee la wada qaataa taas ayey ka tarjumaysaa. Ulajeeddada u mudan ee xeerka laba qolo wada galaan wuxuu ahaa xoojinta tolliimadooda iyo nacabka ay iska gaashaanbuursanayaan. Xoogbiirsigii aynu meel kale kaga soo warbixinnay buu xeerku u dhacayaa.

Waxa ay yidhaahdaan nabad-diidka, reer tolkii baa qaban jiray oo geed ku xidhi jiray. Waa ta ay u dhacayso maahmaahada tidhaa: "nin waalan tolkii baa u miyirqaba". Ha yeeshee waa ayo reertolkaasi? Reerku mar kasta waxa uu u sii qaybsan yahay jilib, laf, jibsin iyo jifo. Mar walba kuwii asaga sii abtirsiin xigaa ayaa la safanaya (qaayosoorkii hiilada). Marka ay dani run sheegto ee cududo isku jabaan, ee dagaal la iska soo taago, ayaa nabad-diidka, kuwa cid u sii xigaa xidhi jireen. Inta badan se nabaddoonka waxaa ka awood badnaa ka nabad-diidka ah ee colaadda raba. Xeerarka la sheegayaa waxa xoog u ahaa hiilada tolka gudahiisa. Marka se ay nabadda tahay aad bay xeerarkaasi u tamar yaraayeen. Marka dhiillo timaaddo falcelinta aargoosiga ayaa ka dheerayn jiray codka nabadda.

Dawladda dawlad la'aaneed

Habdhismeedka tolwadaagta Soomaaliyeed iyo qarannimo waa laba isdiiddan oo isburinaya, isuma na adeegi karaan, bal mikood ba ka kale wuu tirayaa. Waxaa taas keenaya unugyada uu mid ba ka abuuran yahay iyo ujeeddadiisa ayaa is ku lid ah. Qarannimo dhab ah iyo maamul

dawladeed oo hagaagsani, marka hore qabyaaladda ayuu tirayaa. Waqti dheer ka dib na, horumarka ka dhasha taasi qabiilka lafiisa ayuu socotada taariikhda ka saarayaa.

Waxa jira dad masaladan dambe ka dooda oo yidhaa qabiilka Alle (swt) ayaa jiritaankiisa ku xusay kitaabka Quraanka ah (II). Sidaas darteed la ma diidi karo. Arrintu se ma aha oggolaansho iyo diidmo ee waxaa weeye waxa ay qarannimada maanta isu yihiin iyo halka uu berri ku dambayn doono. Ta se halkan xusuusta mudani waxa ay tahay qabaa'il iyo shucuubi ba waa qaab taariikheed aadanahu soo maro, isbeddela oo heerar kale looga gudbo. Waxaa u tusaale ah qabaa'ilkii carabta ee jiray xilligii Rasuulka (csws) ee Alle quraanka soo dejiyey, sida Quraysh, Aws iyo Khasraj, muddo ka dib way tirmeen oo horumarkii xadaarada Islaamka ayaa meesha ka saaray. Qiyamta xadaarada Islaamka ayaa dadka, si kale, isugu xidhay oo lagu illoobay casabiyaddii qabiilada.

Isweydiintu waa sida ay isu burinayaan. Ta u horraysa, qaran waa dhul noqda dal magac leh (dal waa haltusmeed siyaasadeed oo tilmaamaya lahaaga qaranka ka jira dhul gaar ah). Waxa dal ka dhigaana waa wada lahaanshaha uu kaga dhexeeyo dadka ku nool oo aan ugu kala soocmin qabaa'il iyo reero, bal uu qof waliba ka yahay muwaadinn ku noolaan kara meeshii uu doono, xuquuqdiisa na ku heli kara. Ta labaadna waa dawlad dalkaas, sida uu u dhan yahay, ka talisa oo xukunkeedu ka wada fulo. Labadaas ba habka tolwadaagtu wuu burinayaa, sida qarannimadu na, haddii ay dhabowdo, u burinayso qiyamta ay tolwadaagtu ka dhisan tahay. Qarannimadu waxay ku hirgashaa sharci (Sharci, shareeco iyo qaanuun, waxaynu uga dan leenahay waa ku dhaqanka iyo fulinta xukunkooda loo siman oo keli ah). Kooxda ay isku xidho tolliimadu ma taqaan xeer iyo sharci dadka qof walba qabta. Xeerkeedu wadarta mid ahaa-

need ee tolka ayuu ilaaliyaa. Marka uu xeerkaasi soo galo xidhiidhka bulshada qarannimo, waxa uu u hiiliyaa qofka dembiga qaba, kooxda tolliimo na dembiqabahaas bay u hiilinaysaa. Waxayna taasi keenaysaa sharciyadii ay dawladdu ku dhisnayd oo burburta. Waayo xeerka qabiilo waxa uu hirgelinayaa hiiladda tolliimo, sidaas darteed na sharicga dawladeed waa uu jebinayaa. Tusaale ahaan, si-aragga "sokeeyahaa, gar iyo gardarro ba u hiili', sharciga sinnaanta qaranku ku dhisan yahay way burinaysaa. Jago aanu qofku shuruuddeedii sharciyeed ku mutaysanin baa loogu dagaallamayaa; hanti qaran iyo tu gaar buu lunsanayaa; dil, dhac iyo dhaawac ba wuu geysnayaa oo hiilo tolliimo ayaa loogu gurmanayaa; laba reer bay noqon-aysaa oo sharcigii qaranka waa la baal marayaa.

Xataa xeerka anshaxa dadnimada wacani ma saameeyo oo nin Reer Hebel ah ceebi ma qabato. Soojireenkii dhaqan-keeda ayaa hore u yidhi: "Dhudiyeey nin dhalasho huwani dharka muxuu ku falayaa." Si joogto ah waxaynu maqalnaa hanti la lunsaday, damiirka dadku na ka ma damqado; la ma yidhaa waa tuugo; magac xumo na cid ka ma raacdo. Haddii midkood la dhigo xabsiga, markii ba caaqil iyo suldaan baa ka daba tegaya, ka dib na reer abaabulan baa madaxda dawladda ku cadaadinaya in la sii daayo. Dawlad markeeda hore ba, lagu dhisay qaybaalad siyaasadeed, cadaadintaas way u debcaysaa. Sharci qaran, qabyaalad hoosteeda ka ma socon karo. Dhagaraha u daran kuwii galay ayaanu boolisku hayn karin. Waxaa meesha imanayaa waa muuqaal dawladeed iyo dhaqankii dawlad la'aaneed oo is-huwan. Waa dawlad dawlad la'aaneed.

Maanta dhaqdhaqaaaqa nolosha siyaasadeed ka aloosani waa loollankii abtirsiinwadaagta Soomaalida oo kala ridanaya jagayooyinka hoggaanka iyo maamulka dawladeed. Waxaa yeedhinaya wacyigii xoog-biirsiga ee ka

dhashay hirdanka tolwadaagaha Soomaalida. Ururrada iyo xisbiyadu waa habarwacasho qabiil oo la isugu hiilinayo qabsashada madaxnimada sare ee qaranka.

Waxaa kale oo ay ku sal leedahay isla shakigii iyo istuhunkii joogtada ahaa ee reeraha dhexyaallay. Awoodda mansabku ma aha tu qaranku leeyahay oo dadka u dhex ah ee waxa leh mar ba qolada loogu abtiriyo ninka meesha ku magacaaban. Tolliimo ayaa codka lagu helaa oo lagu waayaa. Taas darteed, dhaqdhaqaaqa siyaasaddu waxa uu bulshada ku abuuraa kala-jab iyo isnac, halkii uu ku midayn lahaa han iyo himilo horumar ummadeed lagu gaadho. Wixii hebel waayo, Reer Hebel baa waayey; waxii la yeelo na Reer Hebel baa la yeelay. Qofku codkiisa ma laha, waayo, Reer hebel buu u codaynayaa oo mar kasta codkiisu u tirsan yahay. Xooggii qabiilka ayaa tirsan oo lagu noqon karaa madaxweyne, wasiir iyo martabo kasta, lagu na waayayaa. Tii ahayd "ama buur ahaw ama buur ku tiirsanow" ayaa dhiskii qarannimo adeejisay; ka dib na qof muwaadin ah baa ku xukuman in aanu weligii dalka madax ka noqonnin, qoloda loogu abtirinayo darteed. Wax kasta oo dastoor ku qoran iyo wax afka laga sheego ba, waxaa beenisay runta lagu dhaqmayo. Muwaaddin xor oo codkiisa meeshii uu doono geyn karaa ma jiro. Sababtu na waa jiritaankiisa ba magac qabiil baa la wareegay. Heerka la awood siiyey dhaqanka qabiilka, way adag tahay in qof na shaqo toos uga helo dawladda, iyada oo aanu wadan oday reerka ahi.

Maxaa la yeelaa?

Ugu dambayn, maxaa la yeelaa? Marka hore, hawraarteenna horyaalka ahi waxay tahay qabiilka abtirsiinwadaagta ah iyo qabiil kastaa ba, ma aha lagama-gudbaan weligii ba jiraya ee waa qaab bulsheed dambeeya oo laga

tagayo. Waxaa taas ka marag ah dadyowga dunida ee soo maray ee ka koray, isu na rogay ummado qaran ah.

Waxaa ku laba ah: qaran dhab ahi ku ma dhismi karo ku ma na socon karo weligii unugyada abtirsiinta qabiilo iyo qiyamteeda hiilada tolliimo; waayo waxay qiyamtaasi horseedayaan eexo iyo caddaalad-darro aakhirka na bulshadu way ku burburaysaa. Qarannimo runtii ka ma unkanto qabaa'il iyo reero ee waxay ka unkantaa markaa hore muwaadiniin iyo kooxo bulsheed ay dano xalaal ahi isku xidhaan, isku na raaca oo ku wada dhaqma qiyamta sinnaanta, caddaaladda iyo iskaashi walaalatinnimo. Waxay ku dhisantaa xurmaynta dadnimada guud. Halka qabiilku kaga dhisan yahay tolliimada iyo kan baa i abtirsiin xiga.

Tu saddexaad na aynu isla garanno ee qabiilku, marka uu yahay xusuusta magaca iyo abtirsiinta la wada sheeganayo, ma aha wax dhaqso u baxaya ama loo tirtiri karo. Mushkiladda se wax laga qaban karaa waa waxa la yidhaa qabyaaladda siyaasadeed, taas oo ka bilaabanta jidka saamiqaybsiga loo raacayo dhiska dawladeed ku na biyoshubta eexada, musuqa iyo caddaalad darrada maamulka dawladeed.

Hoggaanka hiilo qabiil ku yimid, ayada ayuu u hoggaansan yahay, dadka na u ma sinnaan karo, qaran na ma dhisi karo. Weel ba wixii lagu shubto ayuun baa ku jira oo laga la soo baxayaa; wax kale na laga ma fili karo. Ninkii qabiil soo doortay, qaran wax ba isu ma aha. Siyaasiga Reer Hebel iyo suldaanka iyo caaqilku, magaca uun baa u kala duwan. Giddi ba reer bay taxgelinayaan; asaga ayey cuskan yahiin oo ay u nugul yahiin. Xuquuqda qofka muwaadinka —muwaadin kasta—iyo horumarka noloshu na ma damaqdo, waayo waa dhinac aan laga ga imannin oo aan dab kaga shidnayn.

Qabyaaladda siyaasadeed jid looga leexan karo ayaa jira.

Waa noolaynta iyo tamargelinta wacyiga bulshada rayidka ah, dhiirrigelinta iyo xoojinta ururrada bulshadaas, kuwaas oo weelayn kara danaha qaybaha dadweynaha guud ahaan.

Lagama-maarmaanku, mar wal ba, waa hoggaan siyaasadeed oo leh han iyo hirasho qarannimo oo ku ursursan mabda' iyo ulajeeddooyin, ku na xidhma muwaadinka iyo kooxaha bulshada rayidka ah ee uu ku abtirsanayo. Runtii bulshadaas ayada ah, ayaa shaldhig u noqon karta hoggaan qaran; halkaas ayeyna ka iman kartaa taageerada xisbiyo qaran oo dhab ahi. Dadku qabaa'il iyo reero abtirsiin wadaaga oo keli ah ma aha ee qaabdhismeedyo bulsheed na way leeyihiin, in kasta oo wacyigeedii ka maqan yahay. Waxa ay leeyihiin qaybaha xoolodhaqatada, beeralayda, ganacstada kala duwan, shaqaalaha muruqooda maala iyo kooxaha xirfadaha kala duwan leh iyo intii dano bulsheed oo gaar ahi ka dhaxayso ee kale. Baahidu waa hoggaan xisbiyeedyo dadka wejigaas u la xidhidhiidha oo aan ugu tegin magacyo abtirsiin qabiilo.

Ma la heli karaa hoggaankaas iyo sidee? Waxay i la tahay hoggaan ka kormara isir-raaca qabyaaladeed oo dadka magaca ummadeed ku wada matalaa waa lamahuraan. Haddii la waayo, qarannimo Soomaaliland iyo Soomaali kale, meella ka ma saldhigi doonta oo xididdo adag ma yeelan doonto. Way dumi oo qabyadeeda ayaa la daba ordi doonaa; ama magaca qaran Soomaaliyeed ba waa la waayi oo dhulka Soomaalidu degto ba dadyow kale ayaa qabsan doona.

Ma la heli karaa aqoonyahan iyo waxgarad bulsheed (ma odhanayo "hoggaan dhaqameede") rumaysan qaayosoorrada qarannimo, sida dalka iyo muwaaddinka xorta ah, sharciga iyo caddaaladda loo siman yahay, xaqa jiritaanka iyo xorriyadda kelida qofeed, codka doorashada xorta ah ee xalaasha ah? Aqoonyahanno intaas ku darsaday sarriigasho

iyo anshax wacan oo ummadda run ku la dhaqma, ayey qarannimo sugaysaa.

Waxay ku urursan tahay qabyaaladda waxaa lagaga guulaysan karo oo lagaga raysan karaa maamul dawladeed oo wanaagsan; kaas na waxaa u shardi ah in uu dadkiisa u la xidhiidho muwaadiniin ahaantooda iyo isahaantooda kooxo bulsheed. Siyaasiga qummani waa ka aan caaqil iyo suldaan u dabafadhiisannin taageerada uu dadkiisa ka rabo.

Ta mudnaanta hore lehi ma aha qabiilka; bal waa sidii loo tirtiri lahaa qabyaaladda. Waayo qabiilku waqti dheer buu sii jiitami oo xusuusta abtirsiinta ayaa weel u ah oo haynaysa; ugu dambayta se waa uu suuli doonaa. Waxaa u riiq dheereeyey waa dibu dhaca dhaqan iyo dhaqaale, iyo siyaaasadda qabyaaladeed. Labadaas oo laga guulaysto iyo isbeddel horumar dhaqaale iyo bulsheed oo dhinac walba saameeya ayaa xididdada u siibi doona. Hoggaan qaran (ma aha hoggaan qabiil) oo hankeeda iyo himiladeeda leh bay u baahan tahay. Sidaa darteed, lagam-maarmaanku, marka hore, waa in qabiilka laga saaro oo laga fogeeyo qarannimada. Marka labaadna, waa dhaqdhaqaaqa nolosha siyaasadeed, maamulka iyo garsoorka qaranka oo laga xoreeyo eexada qabyaaladeed iyo caddaalad-darrada ay dabada ku wadato. Haddii taas rabitaankeeda la inaga helo, qabyaaladda waa laga guulaysan doonaa. Haddii la waayose burbur keli ah ka eeg.

Raadraac

(1) I.M. Lewis, A Pastoral Democracy, The African International Institute, 1961,1982, b. 2.

(2) Ibid, b 3.

(3) Rashiid Sheekh Cabdillaahi Xaaji Axmed, Adduun iyo Taladii, PONTE INVISIBLE, REDSEA-ONLINE, 2010, B130-131.

(4) JONATHAN WOLFF, AN INTRODUCTION TO

POLITICAL PHILOSOPHY, OXFORD UNIVERSITY PRESS, 2006, B 7.

(5) ibid, b 8.

(6) ibid, 7.

(7) ibid, 10.

(8) AXMED Sheekh Jaamac, CADLIDOONAHA DAAL ALLAA BADAY, PONTE INVISIBLE, REDSEAONLINE, 2013, B 49.

(9) JONATHAN WOLFF, ibid b13.

(10) Rashiid Sheekh Cabdillaahi, tif, Suugaanta Nabadda iyo Colaadda, 2009, PROGRESSIO & PONTE, b 51, 54.

(11) ALQURAAN, SUURATULXUJURAAT, Aayadda 13aad."

7

DHAQANKA SOOMAALIDA IYO WAX-SOO-SAARKA

Soomaalidu intii ay jirtay—weligeed iyo abidkeed—may samaynin wax-soo-saar. Wax-soo-saarkaasi ha noqdo mid qalab (tignooloji) ama fikir (falsafad) cusub oo noloshooda hore u mariya. Si aan doodaydan kuugu cadeeyo, cutub-kan waxaan u dhirraan-dhirrinayaa siddan soo-socota.

Kow, waxaan sharaxayaa micnaha "wax-soo-saar." Waa maxay wax-soo-saarku? Waxaan raacinayaa in aanay Soomaalidu weligeed iyo abidkeed wax-soo-saar samaynin. Laba, waxaan faah-faahinayaa sababta ay wadamada qaarkoodna u noqdeen qani; wadamada qaarkoodna u noqdeen faqiir. Taas oo inoo cadaynaysa sababta kaliftay in aanay Soomaalidu weligeed samaynin wax-soo-saar. Saddex, waxaan iftiiminayaa sababta keentay in wadamo faqiir ahaan-jiray ay u noqdeen wadamo qani ah. Waxaan tusaale usoo qaadanayaa wadanka Singabuur (Singpore). Tani waxay inoo cadaynaysaa in ay Soomaalidu awood u lahayd inay samaysto wax-soo-saar. Lakiinse, inay awoodoodii ku khasaariyeen meel aan muhiim ahayn. Afar, waxaan kusoo gebo-gebaynayaa sharaxaada micnaha ereyga

"cilmi;" waa maxay cilmiggu? Tani waxay inoo cadaynayaa in cilmigu uu ka dhasho fahanka degaanka iyo kobcinta garaadka bani'aadamka.

Waa Maxay Wax-soo-saar?

Sida caaddada ah, marka ay dadku maqlaan kelmeda "wax-soo-saar," waxaa maskaxdooda kusoo deg-dega, "warshado," "beero," "qalab (tijnoologi)," iwm. Waxyaabahaasi waa qayb ka mid ah wax-soo-saarka. Laakiin, wax-soo-saarku kuma koobna intaas oo kaliya. Wax-soo-saarku wuxuu ka kooban yahay laba qaybood: 1) qalab (tignooloji) iyo 2) fikir cusub (falsafad). Qalabku (tignoolojigu) waxaa weeye qalabka aynu isticmaalo si aynu usoo gaabino wakhtiga aynu wax-soo-saarayno (safarkuna wuu ku jira) iyo si aynu u fudu-dayno howsha wax-soo-saarka. Fikirku (falsafadu) inkasta oo ay tahay waxa soo-saara qalabka, hadana waxaa jira qaybo kale oo aad u muhiima oo u baahan fikir (falsafad) joogto ah.

Tusaale ahaan: habka uu u shaqaynayo dhaqaaluhu, baaayac-mushtarku, siyaasaddu, maamulku, wax-barashadu, iwm., waxay u baahan-yihiin in lagu hogaamiyo falsafad. Labadaas midna Soomaalidu may soo-saarin weligeed intii ay jirtay. Labadan qodob aan si qoto-dheer usii faah-faahiyo.

Waa maxay wax-soo-saar-ku? Su'aashan waxaan uga jawaabayaa laba nooc: si kooban iyo si faah-faahsan. Jawaabta koobani waxaa weeye: wax-soo-saarku waa ka faa'iidaysiga (ama isticmaalka) noolaha iyo ma-noolaha degaanka ku sugan: sida, xayawaanka (mayeedhaanka iyo bani'aadamka), dhirta, ciida, dhagaxa, hawada, biyaha, iwm., si ay bulshaddu u daboosho baahiddeeda nolloleed. Tani waa jawaabta gaaban. Laakiin, jawaabta faah-faah-

sanni waxay si balaadhan usii faah-faahinaysaa jawaabtaas hore ee kooban.

Buugga *How Europe Underdeveloped Africa* ee uu qoray Walter Rodney, ayaa si faah-faahsan u sharaxay micnaha wax-soo-saar. Walter wuxuu inoo sheegay in wax-soo-saarku yahay: "Marka ay bulshaddu is-kaashato [iyadoo iskuduuban rag iyo dumar], ee ay awooddeeda [cilmi iyo kartiyeed-ba] isugu gayso sidii ay uga faa'iidaysan lahayd degeenka" (Rodney 1972). Ka faa'iidaysigga degaankuna wuxuu ku xidhanyahay heerka uu gaadh-siisan-yahay cilmiga ay bulshaddu u leedahay sharciga dabiicigga ah (saynis-ka ["*Social Science*"—Cilmiga Bulshadda; iyo "*Natural Science*"—Cilmiga Sayniska]). Kadibna, ay bulshaddu cilmigaas u adeegsato soo-saarista [abuurista] qalabka looadeegsaddo hor-u-marinta nolosha (tignooloji [technology]), iyo sida ay bulshaddu u qaabayso [u kala-qaybiso] shaqooyinka iyo masuuliyaddaha bulshadda (*division of labor*).

Sidaa awgeed, wax-soo-saarku wuxuu ku xidhan-yahay heeerka cilmiyeed iyo kartiyeed ee ay bulshaddu leedahay. Hadii aanay bulshadu lahayn cilmi, heerka wax-soo-saarkooduna aad ayuu u hoosaynayaa. Mar kasta oo uu bushada cilmigoodu sii kordho, wax-soo-saarkooduna wuu sii kordhaa.

Heerka wax-soo-saar ee uu bani'aadamku sameeyeyna wuxuu soo maray taariikh aad u dheer. Taariikhdaas aadka u dheer halkan kumasoo koobi-karo. Laakiin, waxaynu si kooban u xusaynaa is-bedeladdi uu soo-maray wax-soo-saarka bani'aadamku.

Taariikhdii wax-soo-saarka bani'aadamku waxay soo martay saddex marxaladood oo bedeshay noloshii bani'aadamka. Saddexdaas marxaladood-na waxay kala-yihiin: 1) *Sabankii Dhagaxa*; 2) *Sabankii Naxaas-ta*; iyo 3)

Sabankii Birta. Saddexdaas wakhti, waxay ahaayeen saddexdii wakhti ee uu bani'aadamku samaystay qalab iyo hub u fuddudeeya nolosha. Xaddaraddihii hore ee bani'aadamkuna, dhamaantood way isticmaali-jireen qalabkaas iyo hubkaas. Laakiin, way ku kala-horeeyaan helitaanka, ama abuuridda, qalabkaas iyo hubkaas. Xaddaaradaha qaarkood iyagoo isticmaalaya dhagaxa, oo ku jiraa *Sabankii Dhagaxa*, ayaa xaddaarad kale waxay isticmaalaysay birta, oo ay ku jirtay *Sabankii Birta*. Sidaa awgeed, xaddaaraduhu way ku kala-horeeyeen istcmaalka qalabka iyo hubka.

Xadaaradaha isticmaalaayey birtu waxay bilaabeen wax-soo-saar heer-sare ah oo ay u fuddudaysay isticmaalka birtu. In la-ogaado faa'iidada birtu leedahayna waxaa sababay markii ay dadku degaan noqdeen, ee ay beeraha fasheen. Birtaas iyo beeraha la-fashayna, waxay sababeen hor-u-mar dhinac walba leh inay xadaaradaha qaarkood gaadheen (halkan hoose ayaan kusii sharaxayaa qodobkan).

Kala-horayntaasina waxay sababtay in xaddaaradda isticmaasha birtu ay samaysato nolol aad u heer-saraysa; xaddaaradda isticmaasha dhagaxuna ay noqoto xaddaarad aad u hooseysa. Taasina waxay kaliftay (fuddudaysay) in xaddaaradda isticmaasha birtu si fuddud u weerrarto, una gumaysato, xaddaaradda isticmaasha dhagaxa. Sababtuna waxaa weeye: xaddaaradda birta isticmaashaa waxay birtaas ka sameeyeen hub aad u khatar ah oo aanay haysanin xaddaaradda dhagaxa isticmaashaa.

Iminka aynu si koobaan u faah-faahino saddexdaas seben ee uu soo maray wax-soo-saarka bani'aadamku.

Sebenkii Dhagaxa: buugga *A Marxist History of the World: From Neanderthals to Neoliberals* ee uu qoray Neil Faulkner ayaa si qoto-dheer oo cilmiyeysan usoo dhirraan-dhirrinaya taariikhda aadamaha. Markii uu bani'aadamku bilaabay

samaysashadda qalabka, wuxuu ka bilaabay isticmaalka dhagaxaanta (dhagaxa). Wakhtigaas ay dadku isticmaali jireen dhagaxana waxaa loo yaqaan "*Stone Age*" ama "*Sabankii Dhagaxa*." Sabanka Dhaguxu wuxuu ahaa wakhtigii aanay bani'aadamku bilaabin qoraalka, ama sida wax loo-qoro; wakhtigaasna waxaa loo-yaqaanay "*pre-history*" ama "taariikhda horteed."

Sabanka Dhaguxu wuxuu socday—oo uu bani'aadamku dhagaxa u isticmaalaayey qalab ahaan—muddo lagu qiyaasay 3.4 milyan oo sanaddood (saddex-milyan-iyo-afar-boqol oo sanadood); waxaanu dhamaaday intii u dhaxaysay 8700 BCE iyo 2000 BCE (Brian, 2019). Wakhtigaas marka ay bani'aadamku doonayaan in ay hilibka goo'goostaan, ama in ay dhirta goo'goostaan, ama iska difaacaan cadowga ama xayawaanka kale, waxay isticmaali jireen dhagaxaan. Dhagaxaantaas waxay u isticmaali jireen sida aynu maanta u isticmaalno gudinta, mindidda, qoriga, ama mishiinka wax lagu goo'gooyo. Bani'aadamkaas noolaa Sabankii Dhaguxu, waxay ku noolaayeen keynta.

Buugga *World Prehistory: A Brief Introduction* ee ay qoreen Brian Fagan iyo Nadia Durrani ayaa iyaguna si cilmiyeysan u dhirraan-dhirriyey taariikhdaas uu bani'aadamku soo maray. Bani'aadam-ku muddaddii ugu dheerayd ee uu jiray wuxuu ku noolaa kaymaha. Nolosha kayntuna waa nolol aad u khatar badan. Waa nolol ku salaysan in aad wax cunto ama adiga lagu cuno (cun, ama halagu cuno); ama in aad wax disho ama adiga lagu dilo (dil, ama halagu dilo). Labadaas wax u dhexeeyaa ma jiraan. Waa nolol ay xayawaanku is wada-cunayaan; xayawaan weliba midka kale ayuu cunaa (tusaale cadaan ah waxaa kuugu filan, marka aad daawato barnaamij-yada lagasoo duubo xayawaanka keynta ku nool).

Bani'aadamka waxaa ku xeernaa, oo gees-kasta ka jiray,

waxyaabo naftooda khatar gelinaayey. Wax-yaalahaas khatar-ta ku ahaa waxaa ka mid ahaa: 1) *bahalaha dad cunka ah*: sida, libaaxa, shabeelka, jabisadda, madax-kutidda, iwm., oo bani'aadamku aanu u haysanin hub iyo awood ay iskaga difaacaan; 2) *cadowga*: weerarka bani'aadamka kale; 3) *bakteeriyada/fiiruska (bacteria/virus)*: cudurada ay keenaan oo aanay wax aqoona u lahayn; 4) *dhimirka*: xanuunada ku dhaca maskaxda oo aanay wax aqoona u lahayn; 5) *masiibada dabiiciga*: dhul-gariirka, fulkaanaha, duufaanada, dhulka duma, iwm.

Noolaha kale ee kaynta ku nool, mid waliba wuxuu leeyahay awood ama xirfad (farsamo) uu naftiisa ku difaaco. Laakiin, bani'aadamku muu lahayn wax uu isku difaaco, sida noolaha kale ee kaynta kula nool. Marka aad bani'aadamka bar-bardhigto noolaha kale ee kaynta kula nool, bani'aadamku wuxuu ahaa noolaha ugu awooda liita; uguna jilicsan dhinac walba.

Tusaale ahaan, shinbirtu marka ay khatar dareento, way duushaa si ay uga baxsato khatarta; masku wuxuu isku difaaca—oo laggagga baqdaa—sunta; sakaaradu/deeradu waxay isku difaacdaa orod aad u dheereeya; wiyishu aad ayay u xoog-weyn-tahay, waxaana ay leedahay fool aad u dheer oo ay isku difaacdo, iyo jidhkeeda oo ah qolof aad u adag oo aanay miciyaha bahaluhu daloolin karin; daayeerku wuxuu isku difaacaa xirfada uu dhirta ku koro; jirjirooluhu wuxuu isku difaacaa in uu kolba isu-ekeysiiyo meesha uu ku taagan-yahay si aan loo arkin; xayawaanka qaarkood marka ay khatar dareemaan, wuxuu jidhkoodu sii daayaa dheecaan aad u qadhmuun oo lagaga leexdo; iwm.

Bani'aadamku ma dheereeyo; ma duulo; sun malaha; jidh adag malaha; isma-qarin-karo; awood (xoog) malaha; fool malaha; ur qadhmuun oo laggagga leexdo malaha.

Marka kaynta la joogo, bani'aadamku waa noolaha ugu nuggul, ugu jilicsan, ee ugu awooda iyo xirfada liita.

Dhinaca kale, waxaa bani'aadamka khatar ku ahaa weerer kaga yimaadama bani'aadamka kale ee ay la-kulmaan. Wakhtigaas bani'aadamku wuxuu u noolaa qoys-qoys ama keli-keli; taas waxaan uga jeedaa, waxaa meel ku wada noolaa nin, xaaskiisa, iyo caruurtiisa oo keli ah. Mar-marka qaarkood-na, waxaa meel ku wada noolaa dhowr nin oo walaalo ah, xaasaskooda, iyo caruurtooda. Waxaa kale oo jiray rag iyo dumar kali-socod ahaa, oo kaligood meel ku noolaa.

Bani'aadamkasi wuxuu ahaa ugaadhsato—weli may baranin sida xoolaha loo dhaqdo ama beeraha loo fasho. Xoolo-dhaqashada iyo beeruhu waxay bilaabmeen mudo aad u dheer ka dib. Dhibaatooyinka bani'aadamka dhexdiisa ka jiray waxaa ka mid ahaa; waxaa la-kala-dhici-jiray ugaadha iyo dumarka. Tusaale ahaan, marka uu ninku ugaadhsi (ama midho uu cuno) doonto, waxaa dhici-jiray in la-dilo si ugaadhaas uu soo qabsaday (ama midhahaas uu soo urursaday) looga dhaco. Waxaa kale oo dhici-jirtay in ninka la-dilo si gabadha looga qaado. In aad bad-baado iyo in-lagu-dilaa waxay ku xidhnayd kolba inta ay awoodaadu leeg-tahay, oo ahayd tirradda raga iyo dumarka ee aad haysato.

Tusaale ahaan, qoyska ka kooban nin, xaaskiisa, iyo caruurtiisa marka ay iska-soo hor-baxaan (ama ay kulmaan) qoys kale oo ka kooban afar nin oo walaalo ah, xaasaskooda, iyo caruurtooda, waxaa dhici-jirtay in afarta nin ay dilaan ninkaas keligii ah; ka dibna ay gabadha iyo caruurtaba kaxaystaan. Noloshooda iyo bad-baadadoodu waxay ku xidhnayd tirrada raga ah ee ay haystaan. Waata Soomaalidu ku maah-maahda: "*ama buur ahow, ama buur ku tiirsanow*."

Dhanka kale, wakhtigaas bani'aadamku muu aqoonin in

xoolaha la rabaysto (la dhaqdo). Waxay ahaayeen ugaadhsato iyo midhaysato (midhaha dhirta ee lasoo gurto). Marka uu ninku ugaadh doonto, wuxuu khatar ugu jiray in la cuno, oo ay cunaan xayawaanka dad-cunka ahi, ama in la dilo, oo uu nin kale dilo. Waxaa kale uu khatar ugu jiray in uu god ku dhaco; geed kusoo jabo; mas qaniino; iwm.

Runtii waa nolol aad u cabsi (baqdin) badan. Noloshaas kaynta sharci kama jiro. Dawladi kama jirto. Boolis ma jiro. Naxariisi kama jirto. Cadaaladi kama jirto. Cadaalad-darro kama jirto. Waxaa kaliya ee jiraa waxaa weeye: awood in laysku muquuniyo. Ninka laga tirrada-badan-yahay ayaa mar kasta lagu tacadiyi-jiray: "*ninkii roonoow, reerka u hadh*."

Buugga *Leviathan* oo uu qoray filosoofar-kii (philosopher) Ingiriis-ka ahaa ee la odhan jiray Thomas Hobes, waxa uu si qoto-dheer ugu sharaxay xaaladan uu bani'aadamku ku jiray wakhtigii ay ku noolaayeen kaymaha (inkastoo isagu uu mal'e-awaal samaynaayey, laakiin xaqiiqda ku salaysan). Xaaladan keymaha ee uu bani'aadamku ku noolaa wuxuu u bixiyey: "state of nature"—oo micnaheedu yahay "xaalada dabiici-ga." Markii uu sharaxaayey nolosha ka jirta kaynta—xaalada dabiiciga—wuxuu ku tilmaamay in ay tahay nolol ah: "solitary, poor, nasty, brutish and short" oo micnahoodu yahay, waa nolol ah, "cidla, sabool, karaahi, axmaq, oo gaaban."

Sebenkii Naxaas-ta: sabanka naxaas-tu wuxuu ka bilaabmay wadanka Shiinaha (China) muddo lagu qiyaaso 1700 BCE (Faulkner, 2013). Wakhtigan, waxay bani'aadamkasi ku noolaayeen keymaha (sidii Sabankii Dhagaxa). Laakiinse, bani'aadamku waxay barteen, oo aanay hore u aqoonin, sida loo isticmaalo naxaasta. Waxay ogaadeen in naxaastu ay ka adagtay, oo ay ka munaafacaad fiicantay, dhagaxa. Hubka laga sameeyo naxaastu aad iyo

aad ayuu uga adag-yahay, ugana fiican-yahay, hubka laga-sameeyo dhagaxa.

Helitaankii naxaastu wuxuu bedelay noloshii bani'aadamka. Tusaale ahaan, naxaastu waxay shaqaddooddii aad u fudduddaysay dadka macdan-ta qoda, farsamo-yaqaanadda iyo beeralayda. Dadka macdanta qoda, waxay naxaastu u fudduddaysay qoditaankii dhulka; dadka farsamo-yaqaanadda ahna, waxay u fudduddaysay inay sameeyaan qalab iyo hub casri ah, dadka beeralaydda ahna, waxay naxaastu u fudduddaydisay inay dad aad u tirro-yari qabtaan shaqo ay qaban lahaayeen dad aad u tirro-baddani.

Waxaa kale oo ay naxaastu fudduddaysay in dad tirro-yari ay soo-saaraan raashin aad u tirro-badan. Maadaama ay naxaastu fudduddaysay samaynta (abuuridda) qalab iyo hub cusub, waxaa bilaabmay shaqooyin tirro-badan, oo cusub, oo aan hore-u-jirin. Shaqooyinkaas cusubina waxay u baahdeen in loo-sameeyo maamul, xirfadlayaal, iyo in la-kala qaybiyo shaqooyinka. Taasina waxay abuurtay cilmi iyo aqoon cusub.

Sebenkii Birta: isticmaalka birtu wuxuu ka bilaablay Barriga Dhexe iyo Yurub muddo lagu qiyaasay 1200 BCE (Faulkner, 2013). Wadanka Shiinaha-na (China) wuxuu ka bilaabmay muddo lagu qiyaasay 600 BCE. Bani'aadamkaasi waxay heleen isticmaalka birta. Birtu way adag-tahay naxaastii aynu kasoo sheekaynay. Isticmaalka birtu waxay bedeshay qayb kasta oo nolosha bani'aadamka ah; waxaanad ka arki kartaa nolosha aynu maanta ku noolahay.

Degaanka iyo Dadka

Degaamadda (dhullalka) ay bulshooyinku ku-kala-nool-yihiin way kala-duwan-yihiin. Dadka qaarkood waxay ku-nool-yihiin degaan saxare ah; qaarna degaan beeralay ah;

qaarna xeeb; qaarna degaan buuro'ley ah; iwm. Inkastoo ay degaanaddu kala-duwan-yihiin, hadana degaan kasta—noocuu-doono ha ahaadee—waxaa ka-jira laba arimood: 1) wax bani'aadamka faa'iido u-leh, oo ay munaafac-sadaan; iyo 2) wax bani'aadamka khasaare u-leh, oo jiritaankooda khatar ku ah.

Waxyaalaha bani'aadamka faa'iiddadda u-leh waxaa ka-mid-ah: b) *ugaadha*: oo hilibkooda la-cuno, caanahooda la-cabo, haragooddana maryo laga-samaysto; t) *dhirta*: oo midhahoodda la-cuno, dawo laga-sameeyo, maryo iyo guryana laga-samaysto; j) *dhagaxa/ciida*: oo laga samayeeyo qalab kala-duwan oo loo-adeegsaddo horu-marinta nolosha; sida, hubka, birta, macdanta, gaadiidka, dawooyinka, iwm.

Dhinaca kale, waxyaalaha bani'aadamka khatarta ku ah waxaa ka-mid-ah: b) *bahalaha dad cunka ah*: sida, libaaxa, shabeelka, jabisadda, maska, madax-kutidda, iwm., oo bani'aadamku aanu u haysanin hub iyo awood ay iskaga difaacaan; t) *cadowga*: weerarka bani'aadamka kale; j) *bakteeriyada/fiiruska (bacteria/virus)*: cuduradda ay keenaan oo aanay wax aqoona u lahayn; x) *dhimirka*: xannuunadda ku dhaca maskaxda oo aanay wax aqoona u lahayn; kh) *masiibada dabiiciga*: dhul-gariirka, fulkaanaha, duufaanada, dhulka duma, iwm.

Bani'aadam-ku muddaddii ugu dheerayd ee jiritaankiisa wuxuu ku noolaa deeganadaas kala-duwan; oo faa'iido iyo khatariba ay ka-jireen (Faulkner, 2013). Bani'aadamka degaanaddaas ku-noolaa wuxuu ku-khasbanaa inuu munaafacaad-saddo wax-kasta oo munaafacad leh oo degaankiisa yaala; isla-markaana uu naftiisa ka-bad-baadiyo wax-kasta oo khatar ah.

Nolosha degaanaddaasina waxay ahayd nolol aad u khatar badan. Waa nolol ku salaysan in aad wax cunto ama

adiga lagu cuno—cun, ama halagu cuno; ama in aad wax disho ama adiga lagu dilo—dil, ama halagu dilo. Labadaas sharci wax u dhexeeyaa ma jiraan. Waa nolol ay xayawaanku is wada-cunayaan; xayawaan weliba midka kale ayuu cunaa. Waa nolol ay bani'aadamku is-wada-dilayaan. Hadaba, si uu bani'aadamkaasi uga faa'iidaysto degaankiisa uu ku-nool-yahay, isagoo naftiisana bad-baadinaya, waxay sameeyeen laba arimood (waana labada-arimood ee salka u ah wax-soo-saarka).

Kow, waxa ugu-horeeyey ee loo-baahday waxay ahayd: bulsho isku-xidhan, oo is-kaashata, oo uu qof walibanna howsha ka-qayb-qaato. Hadii aanay bulshaddu iskaashanin, oo qayb waliba kaalinteeda kasoo dhalaalin, awood umayeelanayaan inay ka faa'iidaystaan degeeenka ay degenyihiin; mana awoodayaan inay iska-difaacaan khatarta kagaimanaysa degaanka.

Laba, marka ay bulshaddu iskaashato, waxaa muhiima inay daraasadayso, oo ay si-qoto-dheer u fahanto, degaanka ay ku-noolshahay. Qof kasta—ama koox kasta—oo bulshadda ka-mid-ahina waxay si qoto-dheer, oo cilmiyeysan, u fahantaa dushana u riddatay qayb nolosha ka-mid-ah, oo ay u yeelatay takhasus gaar ah. Taasina waxay dhalisay in bulshaddu kala-noqoto qaybo kala-duwan, oo ay qayb waliba masuuliyad gaar-ahi saarantay. Qaybahaasna waxaa ka-mid-ah: dhakhaatiirta, gar-yaqaanadda, injineeradda, siyaasiyiinta, culimadda, macalimiinta, iwm. Labadaas arimood aynu sii faah-faahino.

Bani'aadamka aduunka ku nool way ku kala-duwanaayeen isticmaalka iyo fahanka shantaas qodob ee aan kor-ku-xusay. Bulshooyinka qaarkood si wanaagsan ayay uga faa'iidaysteen degeenkii ay ku noolaayeen iyo dadkoodiiba—*Dunidda Koowaad*. Bulshooyinka qaarkoodna waxay uga faa'iidaysteen si dhex-dhexaada—*Dunidda*

Labaad. Bulshooyinka qaarkoodna kamay faa'iidaysanin degaankii ay ku noolaayeen iyo dadkoodiiba—*Dunidda Saddexaad* (Soomaalida ayaa ka-mid-ah).

Soomaalida iyo Wax-Soo-Saarka

Soomaalidu weligood intii ay jireen lamaysoo-bixin waxyaalaha ugu yar-yar, uguna muhiimsan, ee uu bani'aadamku u bahaan-yahay. Weligeed Soomaalidu lamaysoo-bixin rimahan soo socda:

Cunto/biyo: intii ay Soomaalidu jirtay, ma jirto mar kaliya oo ay lasoo-baxeen cunto iyo biyo ku filan ummadda oo dhan. Cuntadda iyo biyuhu waa assaaska noolaha oo dhan—dhir iyo xayawaanba. Marka uu bani'aadanku helo, ee uu ka haqab beelo, cunto iyo biyo ku-filan, wuxuu u tafo-xaytaa sidii uu u samayn-lahaa hor-u-mar; sida, abuuridda qalab (tignooloji) ama falsafad (fikir cusub). Laakiinse, hadii aanu bani'aadamku haysanin cunto iyo biyo ku-filan, suurto-gal ma'aha inuu sameeyo hor-u-mar. Sababtoo ah, wuxuu qofka fikirkiisu ku mashquulayaa sidii uu u haqab-tirri-lahaa baahida cuntada iyo biyaha. Qofka garaadkiisa iyo kartidiisuba waxay kusoo urruraysaa inuu raadiyo cunto, cabitaan, iyo hoy uu seexdo.

Maqaalka *A Theory of Human Motivation* ee uu qoray Abraham Maslow—oo ah say-koo-logiiste (psychologist) Maraykan ah—asanadkii 1943, wuxuu soo bandhigay aragti (theory) uu u bixiyey *Darajooyinka Baahiyaha* (*Hierarchy of Needs*). Darajooyinka Baahiyuhu waxay si cilmiyeysan inoogu iftiiminaysaa in hab-u-fikirka qofka bani'adaamka ahi uu ku-xidhan-yahay baahidiisu meesha ay marayso. Hadii uu qofku aanu haysanin cunto, biyo, iyo hoy joogto ah, wuxuu awooda saarayaa sidii uusoo heli lahaa baahiyahaas seeska u ah

nolosha. Sidaa awgeed, wakhti uma helayo inuu ka fikiro wax-soo-saar qalab ama fikir (falsafad). Hadii aan si kale u idhaahdo, waxa uu qofku ka fikirayo, ama bulshadu ka firkirayso, waxaa hogaamiya baahidoodu halka ay taagan-tahay.

Abraham wuxuu soo bandhigay inay jiraan shan darajo-bahiyeed: 1) baahidda aassaasiga ah; 2) baahida amniga; 3) baahida bulshadda; 4) baahida qadarinta; 5) rumaynta karaamadda. Waxaan mid-mid u faah-faahinayaa shantan derajo-baahiyeed.

Baahidda aassaasiga ah: waxaa ka-mid-ah, cuntada, cabitaanka, hoy-ga (gurigga), hugga (maryaha), galmadda, hurdadda, iwm. Baahiyahani waa kuwa ugu hooseeya nolosha bani'aadamka. Baahiyahan waxaynu la-wadaagnaa noolaha kale ee mayeedhaanka ah. Tusaale ahaan, neefka xoolaha ahi, subaxii ayuu baxaa. Ka dib, wuxuu doontaa daaq iyo biyo. Marka uu dhergo, wuxuu u baahdaa inuu tarmo, oo uu wax dhalo. Noloshiisa wuxuu ku dhamaystaa: cunto, cabitaan, iyo inuu tarmo (waanu cibaadaystaa). Inkastoo kaalinta ay mayeedhaanku nollosha kaga jiraan ay tahay mid aad iyo aad u muhiim ah. Baahiddan aassaasiga ah, noolaha oo dhan ayaa iskaga mid-ah. Hadii baahiddan aassaasiga ah aanu qofku helin, wax-soo-saar uma suurtogalayo, oo wuxuu ku noolaanayaa nolol aad u dag, oo cidhiidhi ah. Marka uu qofka bani'aadamka ahi baahiddan aassasiga ah si joogto ah u helo, waxaa uu markiiba dareemaa baahi labaad.

Baahida amniga: marka uu qofku helo baahiyaha aassaasiga ah, wuxuu u baahdaa inuu helo amni ama nabad. Tusaale ahaan, xasilooni dhaqaale (sida, shaqo joogto ah ama dowlad wax difaacda), sharci iyo kala-danbayn, cabsi la'aan, hanti, daryeel caafimaad, iwm). Amnigana waxaa sugga bulshadda; sida, booliska, iskuu-

ladda, dhaqaalaha, daryeelka caafimaadka, iwm. Markaa uu intaas helo, hadana waxaa qofka ku dhalata baahi kale.

Baahida bulshadda: marka uu qofku helo nolol aad u degen, nabad ah, oo uu haysto baahiyihii muhiimka ahaa, wuxuu u baahdaa asxaab, lamaane, kal-gacal, ka-mid-noqosho qayb bulshadda ka-mid-ah, iwm. Markaa uu intaas helo, hadana waxaa qofka ku dhalata baahi kale.

Baahida qadarinta: kaalintan afraad, wuxuu Abraham u-kala-qaybiyey laba qaybood: 1) qadarinta nafta (sharafta, guusha, isku-filaanshaha, iwm); iyo 2) u-hilowga sumcadda bulshada dhexdeeda (maamuuska, qadarinta, cisaynta, iwm).

Rumaynta Karaamadda: kaalinta shanaad waxaa weeye marka uu qofku soo dhaafo guusha naftiisa iyo ehelkiisa. Kaalintan, wuxuu qofku gaadhaa inuu bulshadda wax kusoo kordhiyo, dadkuna u qiraan, oo lagu maamuuso waxaas uu soo kordhiyey. Waa marka uu qofku ku guulaysto inuu qabto waajibaadkii ugu saraysay ee noloshiisa—kaas oo ah inuu bulshada wax kusoo kordhiyo. Waa derejadda ugu saraysa ee uu qofka bani'aadamka ahi gaadho. Waa derejada uu Illaahay inoogu sheegay Quraanka ee uu bani'aadamka siiyey—*karaamada*.

Inkastoo uu Maslow sidaa u kala qaybiyey derejooyinka baahiyaha, xaqiiq badanina ay ku jirto, anigu waxaan kaga duwanahay inay dadka qaarkood gaadhaan derejeda ugu saraysa ee karaamada iyagoon aan kaafiyin baahiyaha hoose. Dadka noocan ahina waa dad aad u tirro-yar, oo ban'aadamka ku yar. Inaguna waxaynu ka hadlaynaa hab u dhaqanka iyo nolosha bani'aadamka 99%.

Bayramiidka Maslow
Derejooyinka Baahiyaha Qofka



Darajooyinka Baahiyaha ee aynu kor kusoo sharaxnay, kaalintee ayay kaga jirtaa bulshadda Soomaalidu? Bulshada Soomaalidu waxay ku jirtaa kaalinta ugu hooseysa. Sababtoo ah, kaalinta ugu hoosaysa waxaa weeye kaalinta uu qofku orodka ugu jiro sidii uu u heli-lahaa cunto, biyo iyo hoy. Sidaa awgeed, Soomaalidu nolosheeda oo dhan waxay orod ugu jirtay siday u heli lahay cunto, biyo iyo how. Bulshadda aan ka haqab beelin cunto, biyo, iyo hoyna waa bulsho aad u hooseysa oo baahi ku nool. Waa bulsho ku nool meeqaamka ay ku noolyihiin noolaha mayeedhanka ahi.

Sababtoo ah, noolaha mayeedhaanka ahiba intaas ayuunbuu raadiyaa noloshiisa oo dhan. Taasina waxay kaliftay in Soomaalida garaadkoodii iyo kartidoobiiba ku dhamaato sidii ay u heli lahaayeen cunto, biyo, iyo hoy. Sidaa awgeed, Soomaalidu wakhti umay helin inay abuuraan waxyaalahan soo socda (afar tusaale ayaan soo qaadanayaa):

1) Fikir Cusub: intii ay Soomaalidu jirtay weligeed may abuurin fikir cusub. Fikirka cusub waxaa ka mid ah:

- *fikir dhaqaale*—aqoonta dhaqaaluhu waxay ka dhalatay fikir bani'aadam; kaas oo suurto-geliyey in lagu maamulo dhaqaalaha aduunka;
- *fikir siyaasadeed*—fikirka siyaasadu wuxuu abuuraa dowlad iyo nidaam dhisan oo dadka u adeega; hadii ay noqoto nidaam dimuquraadiyad, boqortooyo, iwm., oo ummada oo dhan maamula. Tusaale ahaan, nidaamyadii dowladaha ee soo maray Soomaaliya (iyo kuwa iminka ka dhisaniba), dhamaantood waxay ahaayeen nimdaam dowladeed oo ay ummado kale samaysteen. Nidaamyadaas ayay Soomaaliduna kasoo amaanaysteen ummadahaas kale. Laakiin, Soomaalidu waligeed fikir siyaasadeed oo ay leeyihiin may abuurin. Miyaad weligaa aragtay nidaam dowladeed oo ay Soomaalidu aduunka kusoo kordhisay? Jawaaabtu waa: MAYA.
- *fikir baayac-mushtar*—baayac-mushtarku wuxuu leeyahay fikir-aqooneed lagu maamulo, lagu horu-mariyo, lagu kobciyo, loogana ilaaliyo khasaaraha ku yimaada baayac-mushtarka. Aqoonta baayac-mushtarku waxay ka dhalatay fikir bani'aadam. Soomaaliduna waligeed may keenin fikir baayac-mushtar. Waxaynu isticmaalaa fikirka baayac-mustar oo ay ummaddo kale samaysteen. Saddexdaas tusaale waxaan uga jeedaaa in aan kuu cadeeyo in aanay Soomaalidu waligeed abuurin fikir cusub oo horumar lagu gaadhay.

2) Gaaddiid: Soomaalidu waligeed may samaysanin gaadiid ay ku safarto. Marka uu qofku safrayo wuxuu istic-

maali jiray lugihiisa—wuu lugayn jiray. Lugtaasina waxay ku qaadan jirtay inuu socda maalmo, wiigaag, ama bilo. Tusaale ahaan, marka uu qofku doonayo inuu u safro meel durugsan, muu haysanin gaadiid si deg-deg ah u gaadhsiiya meesha uu u safrayo. Dadkeenu may samaysanin baaskeelad, dhug-dhugley, markab, diyaarad, iwm. Gaadiidka aynu isticmaalo—aan ahayn fardaha—waxaynu kasoo iibsanaa dunida kale. Waxaa inoosoo sameeya dad inaga oo kale ah; oo maskax iyo karti isicmaalay. Mar-marka qaarkood waxay Soomaalidu isticmaali jirtay fardaha. Laakiin, farduhuna wadanka aad ayay ugu yaraayeen, marka la isticmaalayana waxaa badanaa loo isticmaali jiray dagaalka.

3) Maryo: Soomaalidu waligeed may samaysanin maryo ay xidhato oo ay isku asturto. Berigii hore waxay xidhan jireen, oo ay jidhkooda ku asturi jireen, caleemaha dhirta (sidii bani'aadamkii keymaha ku noolaa). Laakiinse, waligeen maynu samaysanin maryaha caadiga ah ee aynu iminka xidhano. Waxaan uga jeeda, weligeen maynu samaysanin maryo aynu inagu duntooda iska leenahay, ama aynu leenahay warshadaha maryaha sameeya. Warshadihii Soomaaliya ka jirayna, waxay ahaayeen warshado aynu kasoo iibsanay dunida kale. Inagu weligeen maynu samaysan warshad.

Marka aan dadka u muujinayo karti la'aanta ummaddeena, waxaan waydiiyaa su'aashan: "*Maanta hadii uu aduunku inagu yidhaahdo: 'maryihii aannu idinka iibinay oo dhan noosoo celiya, anaguna waxaanu idiin celinaynaa lacagtiinii,' xagee ayaynu ka keeni lahayn maryo aynu xidhano*? Dhamaanteen inaga oo qaawan ayaynu suuqa lugayn lahayn. Taasi maxay ku tusaysaa?

4) Hub: Soomaalidu waligeed may samaysanin qoryo iyo rasaas ay isku difaacdo. Hubka ay samaysan jireen, ilaa maantana ay awoodaan inay samaystaan, waa toorida iyo

waranka. Toorida iyo warankuna waxay ahaayeen noocyadii hubka ee uu bani'aadamka kale samaysan jiray wakhtigii ay ku noolaayeen kaymaha. Waa sababta kaliftay in si fuddud ay inoo gumaystaan ummad kale oo inala-mid-ahi. Qoryaha iyo rasaasta aynu isticmaalo waxaa inoosoo sameeya dadka kale oo inala-mid-ah; inaguse ma lihin aqoontii iyo kartidii aynu ku samaysan lahayn. Maanta hadii uu gumaystihii reer Yurub dib usoo noqdo, ma haysano hub aynu iskaga difaacno. Sidii ay inoo gumaysteen berigii hore ayay inoo gumaysan karaan mar labaad.

Wax walba oo ay Soomaalidu isticmaasho, waxay kasoo iibsadaan—weligoodna kasoo iibsan-jireen—wadamo shisheeye. Waxaa kaliya ee ay samaysan-jireen wuxuu ahaa: weel ay ka qoreen dhirta, oo aad u tirro-yar. Wakhtigan aynu joognanna weelkaas ay miyiga ku isticmaali-jireen, Soomaalidii way ka guurtay oo ma isticmaasho.

Wadamada Qaarkood Waa Faqiir; Qaarna Waa Qani. Waayo?

Buugga *Guns, Germs, and Steel: The Fates of Human Societies* ee uu qoray Jared Diamond ayaa su'aashan uga jawaabay si cilmiyeysan, qoto-dheer, oo xaqiiq ah. Si uu su'aashan uga jawaabo Jared, wuxuu ka eegay meelo badan, isagoo isticmaalaya kuliyaddo kala-duwan, t.u., bay'ooloji (biology), kimistari (chemistry), botoni (botany), arki'ooloji (archeology), antrabooloji (anthropology), taariikh (history), soosi'ooloji (sociology), iwm. Isagoo isticmaalaya kuliyadahaas kala-duwan, ayuu hadana wuxuu dib u raacay taariikhdii bina'aadamka ilaa inta la-ogyahay maanta. Markii uu taariikhdaas dib-u-raacayna, wuxuu ka qiimeeyey dhinacyo badan, isagoo isticmaalaya kuliyaddo kale, t.u., dhaqaalaha (economics), dhaqanka (culture), siyaasadda (politics),

diimaha (religion), xoolaha (animals), dhirta (plants), milatariga (military), iwm. Cilmi-baadhista sidaa u balaadhan, ee u qotoda-dheerina, ma'aha mid fuddud. Waa sababta ay Jared ugu qaaday inuu su'aashan ka jawaabo muddo soddon-sanadood (30 sanadood) ah.

Inta aynaan u gudo-gelin jawaabta Jared, waxaan iftiiminayaa sidii khaldanayd ee dad badani uga jawaabeen su'aashan. Sharaxaadaha sida khaldan uga jawaabay su'aashannina kuma salaysna cilmi-baadhis. Waa jawaabo aan lahayn sal-iyo-raad toona. Sababta ay jawaabahaasi u khaldan yihiina waxaa weeye: su'aashan oo ah su'aalaha ugu adag in laga jawaabo—*maxaa sababay in wadamada qaarkood ay noqdaan qani, wadamada qaarkoodna ay noqdaan faqiir?*

Culimada ku takhasustay cilmiga bulshadu (social sciences), badankoodu way isku khilaafsan-yihiin jawaabta su'aashan, ilaa uu ka jawaabay Jared Diamond oo aan ku sharixi doono halkan hoose ka dib markaan sharaxo jawaabaha khaldan.

Amar Illaahay: dadka qaarkood waxay markiiba lasoo deg-degaan, "Illaahay ayaa dunida sidaa ugu talo-galay, oo qaabkaas u habeeyey." Marka aynu si fiican u daraasayno diinta Islaamka, waxaa kuu cadaanaya in ay jawaabtani tahay jawaab khaladan oo aan sax ahayn. Sababta ay Soomaalidu jawaabtan ulasoo deg-degtaana waxaa weey, dadka Soomaalida ahi waxaanay si dhab ah, oo qoto-dheer, oo cilmiyeysan, u fahmin diinta Islaamka. Marka aad akhrido buuggagta ay culimada waawayn ee Islaamku su'aashan kaga jawaabeena, waxaad arkaysaa in aanay sidaas u doodin (inkastoo ay jawaabaha ku kala duwan yihiin). Dhinaca kale, ummadda Soomaalidu malaha cilmigii ay kaga jawaabi lahaayeen su'aashan. Weli maynu yeelanin dad saynisyahano ah.

Dhulka kulul iyo barwaaqada: dadka qaar ayaa aaminsan in sababta ay wadamada foqorada ahi—khaasatan Afrikaanka—ay faqri u noqdeen ay tahay in dadka wadamadaas ku nooli haysteen nolol aad u fudud iyo cimilo kulul. Sidaa awgeed, may jirin nolol adag ama cilimo aad u qabow oo dadkaas ku kalifa in ay qabtaan howl ama shaqo badan, oo u horseeda horumar.

Doodani waa dood aan ku salaysnayn taariikh, cilmi, iyo saynis toona. Waa fikrad aad u khaldan. Sida aad ka dheehan karto taariikhda aduunka, waxaa jiray dad aad u tirro-badan oo ku noolaa dhulal cimiladoodu kulushahay, hadana sameeyey horumar aad u sareeya. Ta kale, nolosha Afrikaanku dhamaantood waxay ahayd nolol aad u adag. Waayo? Afrika badankeeda waxaa aad ugu yar xoolaha ku haboon in la-rabaysto iyo dhirta ku haboon in la-beerto, marka la bar-bardhigo Yureeshiya (Eurasia).

Cunsuriyad: dadka qaarkood waxay uga jawaabaan si ay ku jirto cunsuri-nimo (midab takoornimo). Daadkaasi waxay u badan yihiin dad-yowga reer Galbeedka. Markii ugu horaysay ee bad mareenadii reer Galbeedku ay u safreen dunida, ayaa waxay soo arkeen ummaddo kale oo aad uga duwan dadka reer Galbeedka ah; marka ay noqoto midabka, dhaqanka, maamulka, luqada, diinta, dhaqaalaha, degeenta, iwm. Kala duwanaanshahaas aadka u wayn, waxay ku micneeyeen inay sababtay kala duwanaanshaha abuurta bani'aadamku. Kala duwanaanshahaasina uu yahay in dadka reer Galbeedka ah maskaxdoodu ka sarayso dadka ku nool aduunka kale. Waxay si khaldan u istic-maaleen fikirkii Charled Darwin ee ahaa "*survival of the fittest*"—in cidii awood/garaad badani nolosha ku bad-baado, cidii awood/garaad liidataana ay nolosha ku baa'bado.

Sharaxaadan ku salaysan cunsurinimadda waxaa ka

dhashay fikir cusub oo ay reer Galbeedku keeneen, kaas oo ay ugu yeedhi yidheen "Yujeenikis" (*eugenics*). Yujeenikis wuxuu ahaa fikir lagu sheegay inuu ku salaysnaa saynis oo uu keeney nin dhakhtar ahaa oo la-odhan jiray Francis Galton, kanasoo jeeday Ingiriiska. Yujeenikis wuxuu ku salaysnaa horumarinta ama kobcinta isir-sidaha wanagsan ee bani'aadamka. Taas micnaheedu waxaa weeye: in dadka qaarkood ay leeyihiin maskax iyo kartii aad u saraysa (reer Galbeedka), dadka qaarna ay leeyihiin maskax iyo karti aad u liidata (aduunka kale).

Sidaa awgeed, waxaa waajib ah in dadka leh maskaxda iyo kartida aadka u saraysa lasoo xulo oo lagu dedaalo in lasii badiyo dadkaas (loo guuriyo si ay u dhalaan ubada badan). Dadka kalena in ay noqdaan dad u shaqeeya dadkaas. Dhinaca kale, waxaa waajib ah in dadka naafada ahna la laayo. Wakhtigan aynu ku jirno, dad reer Galbeed ahi way kasoo hor-jeedaan cunsuriyadda noocan ah. Laakiin, waxaa jira dad aad u tirro-badan oo reer Galbeed ah oo fikirkan aaminsan. Waxaa kale oo jira wadamo kale oo fikirkan aaminsan, sida Jabaan. Waxaa taas kasii daran in wadanka Jabaan aanay qarsanin, ee ay si cadaan ah uga hadlaan.

Fikirka noocaas ahina, wuxuu sababay in gumaystihii reer Yurub ay mar-marsiiyo ka dhigteen si ay u gumaystaan ummadaha kale. Waxay ku doodi-jireen in maadaama ay ummadaha kale aanay lahayn maskax iyo karti fiican, ay ku haboon yihiin la gumaysto oo la maamulo, nolosha iyo xadaaradana la baro.

Waxaa jirta oo kale dood aad u cajiib leh (laakiin been ah) oo ay ku doodaan gumaystayaashii reer Yurub ee qabsaday qaarada Ustaraaliya. Dooduna waa sidan: Ustraaliya waxaa ku noolaa dadka loo yaqaano Aborigines-ka mudo 40,000 sanadood ah. Muddadaas dheer, dadkaas

Aborigines-ka ahi wax badan oo ay dhulkaas ka dhiseen, ama qabsadeen may jirin. Markii uu gumaystihii reer Yurub qabsaday qaarada Ustaraaliya, muddo gaaban oo aan ka badnayd 100 sanadood ayaa waxay ku dhiseen warshado, nidaam dowladeed, dhaqaale, ciidan boolis, milatari, jaamacado, cusbitaalo, wadooyin, iwm. Waliba dadka reer Yurub waxay ka yimaadeen qaarada Yurub oo ay aad isugu dhow-yihiin qaarada Ustaraaliya. Hadaba, taasi miyaanay inoo cadaynaynin in dadka reer Yurub ay maskax iyo kartiba kaga horeeyaan dadka Aborigines-ka ah?

Doodan marka aad u fiirsato, waxay marka hore kuula ekaanaysaa dood maan-gal ah. Laakiinse, waa dood ku salaysan been, dulmi, iyo tacaddi. Taas waxaa inoo cadaynaya cilmiga sayniska. Saynisku wuxuu cadeeyey in bani'aadamka oo dhami ay isku maskax iyo karti yihiin, oo aanu jirin bani'aadam ka sareeya bani'aadam kale. Jawaabtani inay been tahayna waxaa inoo cadaynaya marka aan sharaxo jawaabta uu keenay Jared (halka hoose ka akhriso).

Hadaba, waxaa is weydiin leh: mar hadii ay jawaabahaas oo dhami khaldan-yihiin, waa maxay jawaabta saxda ah ee su'aashani: *maxaa sababay in wadamada qaarkood ay noqdaan qani, wadamada qaarkoodna ay noqdaan faqiir*? Su'aashan waxaa inooga jawaabay Jared Diamond.

Jawaabta saxda ah: Jared markiisii hore wuxuu ku takhasusay cilmiga bayoolojiga (biology). Laakiin, wuxuu aad u daraaseeyey, oo uu khabiir ku noqday, juquraafiga, taarikhda, iyo antraboolojiga (anthropology—cilmiga dhaqamada). Micnaha culus ee ay xambaarsan-yihiin ereyada ugu horeeya ee ciwaanka buugga—*Guns, Germs, and Steel*—waxay inoo cadaan-doonaan marka aynu soo bandhigno jawaabta Jared. Jared buugga wuxuu ku bilaabay sababta ku kaliftay inuu su'aashan ka jawaabo? Qofka su'aashan waydi-

iyey? Iyo muddada (wakhtiga) ay ku qaadatay inuu su'aasha ka jawaabo?

Sanadkii 1972, ayuu Jared wuxuu booqday Jasiirada New Guinnea. Wuxuu baadhitaan cilmiyeed ku samaynaayey shimbiraha kala duwan ee ku nool jasiirada.

Su'aashii Yali: bishii Luulyo 1972, ayaa waxaa meel xeeb ah wada lugaynaayey Jared iyo nin siyaasi ah, oo u dhashay New Guinnea, magiciisana la yidhaahdo Yali. Yali ayaa wuxuu Jared waydiiyey: "Waa maxay sababta aad u tihiin qani dadkiina cadaanka ahi [reer Galbeed-ka]; anaga oo madow ahina aanu nahay faqiir?" Su'aasu waxay Jared ula ekaatay su'aal aad u fuddud; jawaabteeduna ay fuddudahay. Laakiinse, markuu isku dayey inuu ka jawaabo ayuu dareemay in aanay ahayn su'aal fuddud. Sidaa awgeed, Jared wuxuu isku dayey inuu raadiyo jawaabihii laga bixiyey sua'aashan. Laakiinse, kumuu qancin jawaabahaas. Ka dib, wuxuu Jared bilaabay inuu sameeyo cilmi-baadhis aad u qoto-dheer si uu uga jawaabo su'aasha Yali. Jawaabtu waxay Jared ku qaadatay 25 sanadoo. Su'aasha waxaa Jared la waydiiyey 1972; waxaanu ka jawabay 1997. Marka su'aasha looga jawaabayo si cilmi-baadhis ku salaysan, waxay qaadaataa wakhtiga intaas leeg. Waa maxay jawaabta xaqiiqda ah ee uu helay Jared?

Jawaabtan laba siyood ayaan usoo ban-dhigayaa: 1) si kooban iyo 2) si qoto-dheer. Sida koobani waxaa weeye: *degaanka*. Sababta ay wadamada qaarkood u noqdeen qani waxaa weeye, degaanka ay ku nool yihiin oo ah degeen qani ah; marka ay noqoto dhirta iyo xayawaanka ku nool degaankaas—mana aha dhaqanka, abuurta dadka (aqoon, karti, iyo garasho ay ummaduhu is dheer yihiin).

". . . [S]ababta ay bulshooyinka aduunku u kala horumareen waxaa weeye," ayuu jidhi Jared, "*degaanka ay degenyihiin* [xarfaha aniga ayaa ka dhigay jan-jeedh], mana aha

kala duwaanshaha abuurta dadka. Qalab casri ah, nidaam dowli oo adag, [dhaqaale dhisan, wax-barasho aad u saraysa, ciidamo dhisan, hub, iwm] waxaa kaliya ee abuuri karaa waxaa weeye bulsho samaystay degaan rasmi ah; oo soo saaray raandhiis [surplus]" (Diamond, 1997).

Sida qotoda-dheerina waxaa weeye in aynu si huffan usoo dhirraan-dhirrino, una sharaxno in degaanku uu yahay sababta kaliya ee ummadaha qaarna ka dhigtay qani; qaarna ka dhigtay faqiir. Laakiin, waxaad ogaataa in aynu ka hadlayno markii ugu horaysay ee uu bani'aadamku fahmay degaanka uu ku nool-yahay.

Sharaxaaddani waxay ku koobantay in bilowgii ugu horeeyey, waxa dadka kala hor-mariyay uu ahaa degeenka ay ku nool-yihiin. Laakiinse, maanta waxa qowmiyadaha kala hor-mariyaa ma'aha degaanka; ee waxaa weeye aqoonta, kartida, iyo hogaanka ummadaasi samaysato. Si aan qodobkan danbe u sharaxo, waxaan tusaale usoo qaadanayaa wadanak Singabuur (Singpore); oo aan cutubkan ku sharixi doono.

Mar kasta oo la doonayo in si cilmiyeysan loo fahmo dhacdo bulsho (nooca ay doonto ha noqotee), waxaa muhiima in dib loogu noqdo taariikhdii ay lahayd dhacdaddaas laga hadlayaa. Hadii aan si kale u dhigo, waa in lasoo dhirraan-dhirriyaa meeshii ay kasoo bilaabantay dhacdaddada laga hadlayaa. Sidaa awgeed, Jared wuxuu soo dhirraan-dhirriyey taariikhdii bani'aadamka lagasoo bilaabo 7milyan oo sanadood ka hor ilaa lagasoo gaadhay markii ay bilaabantay xadaaradii ugu horaysay oo ku beegnayd13,500 B.C.

Cilmiga aasaarta (archaeology)—oo lagu ogaado taarikhii dadkii hore—wuxuu cadeeyey in bani'aadamkii ugu horeeyey uu ku noolaan jiray bariga Afrika. Sababtoo ah, xabaalihii bani'adaaka ee lasoo faqay (la qoday), lafihii

lagasoo saaray waxaa ugu da'wayn lafaha lagasoo saaray bariga Africa. Bani'aadamkaas ugu horeeyey qaar ka-mid-ahi waxay u goosheen (safreen) Yureeshiya (Eurasia); bariga Aasiya ilaa Jasiiradaha Bada Baasifigga; Saybeeriya ilaa Waqooyiga/Koonfurta qaarada Maraykan-ka. Qaaradahaas, jasiiraddahaas, iyo dhulalaakaas kala duwan ee uu bani'aadamkii ugu horeeyey u gooshayna aad ayay u kala duwanaayeen. Waxay ku kala-duwanaayeen carrada (ciida), xayawaanka, dhirta, biyaha, cuduradda, iyo khayraadka dabiicigga ah. Kala duwanaanshaha dhullalkaasina waa waxa sababay in wadamada qaarkoodna ay noqdaan qani, qaarna ay noqdaan faqri. Bani'aadamkaasi wuxuu soo maray dhowr marxaladood oo kala-duwan.

Marxaladdii ugu horaysay, dadku waxay ahaayeen ugaadhsato/midhaysato muddo lagu qiyaaso ka hor 5.5 milyan oo sanadood ilaa 11,000 sanadood B.C. Dadkaasi waxay ku noolaayeen inay soo ugaadhsadaan xayawaanka duur-joogta ah, soona urursadaan midhaha dhirta ka baxda. Dadkani waxay ka koobnaayeen dad tirro-yar oo qoys-qoys ama koox-koox u wada socda. May lahayn degaan rasmi ah oo ay ku negaadaan. Waxay mar walba ku jireen socod aad u dheer oo aan nasasho lahayn. Sababtoo ah, waxay ku noolaayeen ugaadhsiga xayawaanka. Sidaa awgeed, marka uu xayaawanka ay ugaadhsanayaan ka guuro meesha ay degenyihiin, ee ay u guuraan meel barwaaqo ah, dadkaasina way la guuri-jireen xayawaankaas. Dadkaasi may aqoonin sida xoolaha loo rabaysto ama sida beeraha loo fasho.

Marxaladdii labaad, muddo lagu qiyaaso 10,000 ilaa 12,000 sanadood ka hor, waxaa Barigga Dhexe ka bilaabmay inuu bani'aadamku bartay inuu beeraha fasho, xoolahana uu rabaysto. Markii ay dadku fahmeen inay beeraha fashaan, xoolahana rabaystaan, ayay bilaabantay

xadaaraddii ugu horaysay ee bani'aadamku samaysto. Xadaaradaasina waxay ahayd xadaaradii Mesopotamia.

Beero falashadda iyo xoolo rabaysigu waxay si walba u bedeleen noloshii bani'aadamka. Bani'aadamku markii ay ugaadhsatada ahaayeen, raashinkoodu wuxuu ahaa neefka ay soo ugaadhsadaan iyo midhaha ay soo gurtaa. Markay ugaadhaas qashaan ee ay midhahana soo gurtaan, umaysoo hadhi jirin wax badan oo hilib ama midho ahi. Mar-marka uu usoo hadho wax yar oo hilib/midho ahina, kumay filaan jirin inay sii quutaan muddo dheer. Waxaas oo dhami waxay is bedeleen markii uu bani'aadamku bilaabay falashadda beeraha iyo rabaynta xoolaha. Inkastoo uu aad u badnaa—muddo dheerna uu qaatay—is bedelkii dhacay ee beeruhu, halkan waxaynu kusoo qaadanaynaa qaybihii ugu muhiimsanahaa.

Kow, falashada beeraha iyo rabaynta xooluhu waxay bilaabeen inuu bani'aadamku soo saaro raashin ka badan intii ay u baahnaayeen. Hadaan si kale u dhigo, raashinka ay soo saareen wuxuu aad uga batay intii ay u baahnaayeen. Markay dadkaasi cunaan raashinka ay u baahan-yihiin, waxaa soo hadhi jiray raashin kale oo badan. Raashinkaas soo hadhay, waxaan u bixiyey "*raandhiis*"—kelmedani waa kelmed Soomaali ah oo weligeedba jirtay, micnaheeduna waxaa weeye: hadhaa.

Laba, raandhiiskaasina wuxuu sababay in dadku ay si rasmi ah u degaan, oo ay joojiyaan guuritaankii badnaa ee ay guuri jireen. Sidii aynu hore usoo sheegnay, dadkii ugaadhsatada ahaa waxay ahaayeen dad kolba meel u guura. Sababtoo ah, waxay daba socon jireen ugaadha ay ugaadhsadaan. Waxa kale oo ay dadkaas ugaadhsatada ahi u wada socon jireen kooxo isku qoys ah oo aan badnayn. Laakiinse, markii la bartay in beeraha la fasho oo xoolahana la rabaysto, dadku way joojiyeen guuritaankii. Waxaa

bilaabmay in dad badan oo kala qoys ahi si rasmi ah u wada degaan meel kaliya.

Saddex, degaankaas rasmiga ah, ee ay wada degeen dad kala duwani, wuxuu sababay in dadkaasi ay samaystaan nidaam ay ku wada noolaadaan. Dadkan meesha wada degey, waxay ahaan jireen ugaadhsato aan is aqoonin, oo aan is aaminsanayn, oo isu cadow ah. Laakiinse, maadaama ay dhamaantood meel wada degeen, waxaa kaliya oo la gudboon laba arimood: 1) inay is aamini waayaan, dagaalamaan, colaadi dhex marto; ka dibna, ay dhamaantood rogmadaan; iyo 2) inay samaystaan nidaam ay ku noolaadaan, oo ka ilaaliya inay dagaalamaan, oo coloobaan.

Afar, maadaama ay dadkaasi heleen raandhiis, degaan rasmi ah, iyo wada-noolaansho, waxaa bilaabantay in dhibaato ka timaado raashinkii raandiiska ahaa. Inkastoo dhibaatooyinka ka dhashay raandhiisku ay aad u tirro badnaayeen, halkan waxaan ku xusayaa kuwii ugu waaweynaa. Kow, had-iyo-jeer waxaa dhici jirtay marka raashinka raandhiiska ah meel la dhigo in ay ku dhashaan cayayaan yar-yar oo cuna raashinkaas. Sidaa awgeed, waxaa la xulay dad keena fikir ama farsamo cayayaankaas looga ilaaliyo raashinkaas raandhiiska ah. Waxaa kale oo jiray dhibaatooyin badan oo ay dadkaasi kala kulmeen degaankii rasmiga ahaa. Dhibaatooyinkaasna mid walba waxaa loo xil-saaray dad xal u raadiya. Halkaa waxaa ka bilaabmay, waxa aynu manta u naqaano "*takhasuska*;" ama "*specialist*"—dhakhtar, injineer, macalin, looyar, kal-kaaliso, siyaasi, iwm.

Laba, waxaa kale oo mar-marka qaarkood dhici-jirtay in degaanka weerar lagusoo qaado si loo dhaco raandhiiskooda. Sidaa awgeed, waxaa la xulay dad hubaysan oo ilaaliya raaandhiiska. Halkaa waxaa ka bilaabmay, waxa aynu maanta u naqaano milatariga, booliska, iwm.

Shan, waxaa lays waydiiyey sida loo qaybinayo raandhi-

iska. Maadaama ay dadka oo dhami ka qayb-qaateen wax-soo-saarka: *sidee* loo qaybsanayaa raandhiiska? *Yaa* la siinayaa inta ugu badan? *Yaa* la siinayaa inta ugu yar? *Yaa* la qadinayaa? *Sidee* loo daryeelayaa? *Yaa* daryeelaya? *Sidee* loo ilaalinayaa? *Yaa* ilaalinaaya? Su'aalahani waaa su'aalaha bilaabay siyaasada aynu manaqaano. Waa meeshii ay ka bilaabantay waxa loo yaqaano "siyaasada" dunida maanta ka jirtaa.

Sidaa awgeed, si looga jawaabo su'aalahaas, waxaa la xulay dadkii ugu waaweynaa, uguna khibrada badnaa, bulshada si ay uga jawaabaan su'aalahaas. Odayaashaas la xulay, waxa ay dunida reer Galbeedku u taqaanay "*senate*." Kelmeda "*senate*" waa kelmed kasoo jeedaa Latin, oo asal-keedu yahay "*senatus*;" oo iyaduna kelmed-ahaan asalkeedu kasoo jeedo "*senex*," micnaheeduna yahay "*duq*" ama "*qof wayn*." Dunida aynu maanta joogno, "*senate*" waa qayb ka-mid-ah baarlamaanka wadamo badan. Halkaas waxaa ka dhashay, waxa aynu maanta u naqaano "dowlad." Waayo? Odayaashaasi waxay ka jawaabayeen su'aalaha la xidhiidha raandhiiska.

Lix, markii la helay raandiis iyo ciidan ilaaliya, waxaa la dhiirri-geliyey inay bulshadu badiyaan dhalmada, oo ay ubad badan dhalaan. Taasi waxay sababtay in ay tirrada bulshadu aad usii korodho. Tirradaas sii korodhay-na, waxay sababtay in baahidii bulshadu sii badato. Sidaa awgeed, waxaa loo baahday in la-helo dariiqooyin ama farsamooyin lagusii kordhiyo wax-soo-saarka. Dari-iqooyinkaas si loo helana, waa in la helaa dadkii baadhi lahaa, ee hal-abuuri lahaa, dariiqooyinkaas.

Todoba, markii ay dadkaasi ku guulaysteen lixdaas qodob ee aynu kor kusoo xusnay—falashada beera-ha/rabaynta xooluha; raandhiiska; dad takhasus aqooneed leh; degeen rasmi ah; ciidan; dowlad; iyo bulsho tirraddodu

korodhay; dariiqooyin wax-soo-saar oo cusub—waxaa bilaabmay in ay dadkaasi iska xulaan dad gaar ah oo sameeyaa cilmi-baadhis. Si dadkaasi ay wakhtigooda oo dhan u geliyaan cilmi-baadhis, waa in loo diyaariyaa wixii ay ku noolaan lahaayeen iyaga iyo qoyskoodu. Sidaa awgeed, dadkaas waxaa laga codsaday inay wakhtigooda oo dhan geliyaan cilmi-baadhis, noloshooda oo dhana ay bixinayaan bulshaddu. Waa meesha uu ka bilaabmay *mushaharku*.

Siddeed, maadaama ay aad u badan-tahay baahida bulshaddu, waxaa dadkaas la-xulay loo-kala-qaybiyey dhowr qaybood; oo qayb waliba ay qaabilsantay howl u gaar ah. Tusaale ahaan: qayba caafimaadka; qaybta dhismaha; qalabka (tignoolojiga); difaaca; siyaasada; dhaqaalaha; iwm. Taasi waxay abuurtay, waxa loo-yaqaano kala-qaybtinta howlaha bulshada (*division of labor*). Waxaanay fuddudaysay in qayb kastaa ay si qoto-dheer ugu takhasusto cilmi gaar ah.

Sagaal, wakhtigii hore ee ay dadku ahaayeen ugaadhsatada, xidhiidh badani kamuu dhaxaynin iyaga iyo xoolaha ugaadha ah; dadkuna waxay kala degenaayeen dhulal kala durugsan. Laakiinse, dadkaasi markii ay heleen degaan rasmi ah, beerihii fasheen, xoolihiina ay dhaqadeen, waxaa bilaabmay dhibaato kale. Waxaa is dhex degey dadkii, xoolihii, iyo dhirtii. Saddexduba meel kaliya ayay ku wada sugmeen. Taasi waxay keentay inuu dadka ku dhaco cuduro aanay hore u arkin jirin oo ay sababeen bakteeriya (bacteria) iyo fayrus (virus). Cuduradaasi waxay hore ugu dhici-jireen xoolaha oo kaliya; laakiin, markii lays dhex-degey ayay dadkiina usoo gudbeen. Sidaa awgeed, inkastoo ay cuduradaasi dileen dad badan, hadana intii badnayd ee ka bad-baaday cuduradaasi wuxuu jidhkoodu yeeshay awood uu iskaga difaaco cudu-

radaas. Waxaa kale oo ay soo sareen dawooyin lagu daweeyo cuduradaas.

Hadaba, su'aasha is waydiinta muddani waxaa weeye: sidee lagu gartaa inuu degaanku yahay degaan barwaaqo ah; iyo inuu yahay degaan abaar ah? Jawaab: in uu degaanku yahay dagaan barwaaqo ah iyo inuu yahay degaan abaar ah, waxaa lagu gartaa—oo lagu qiimeeyaa—laba arimood oo kaliya: 1) degaanka laga helo dhirta ku haboon in la beeerto (kuwaas oo kala duwan, aadna u tirro badan); iyo 2) xoolaha manfaca leh ee la dhaqdo, oo kala duwan, aadna u tirro-badan. Degaanka labadaas laga helaa, waa degeaan barwaaqo ah. Laakiin, degaanka labadaas shurudood laga waayaa, waa degaan abaar ah. Degaanadaas barwaaqada ah ayaa sababay in markii ugu horeysay uu bani'aadamka qaarna noqdaan faqri; kuwa kalena ay noqdaan qani.

Hadaba, bulshooyinka aduunka qaarna waxay nasiib u yeesheen inay helaan, oo ay degaan, deggaan barwaaqo ah, oo u suurto-geliya inay beero fashaan oo xoolo dhaqdaan. Bulshooyinka qaarna, nasiib-darro, waxay ku beegmeen degaan aan lahayn dhirta ku haboon in la beerto iyo xoolaha ku haboon in la dhaqdo.

Degaanka ugu barwaaqada badan—ee laga helo dhirta iyo xoolaha ugu tirrada-badan, uguna anfaca badani—waa degaanka loo yaqaano Eurasia. Degaanka Eurasia wuxuu ka kooban-yahay qaarada Yurub iyo qaarada Aasiya oo laysku daray. Waa degaan ay baaxadiisu aad u balaadhan tahay; laguna qiyaaso inuu yahay 55,000,000 km^2. Degaankan Eurasia waa degaankii ay ka dhasheen xadaaradihii ugu horeeyey, uguna waaweynaa, ee aduunka. Tusaale ahaan: xadaaraddii Mesobotaamiya (Mesopotamia); xadaaraddii Shiinaha (China); xadaaraddii Hindiya (India); xadaaraddii reer Galbeedka (Eurpe); iwm. Aynu xusno noocyadda

xoolaha iyo noocyadda dhirta ee laga helo Eurasia; ee aan laga helin qaaradaha kale ee aduunka.

Noocyada xoolaha: noocayada xoolaha aduunka ku nool waxaa lagu qiyaasaa 148 nooc. Laakiin, waxaa la dhaqankaraa, oo manafacaad u leh bani'aadamka, afar-iyo-toban (14) ka-mid-ah 148-kaas nooc. Afar-iyo-tobankaas ugu anfaca badan (iyagoo aad u tirro-badan) waxaa dhamaantood laga helaa qaarada Eurasia. Ma jiro degaan kale oo aduunka ah oo laga helo afar-iyo-tobankaas nooc ee xoolaha anfaca leh ahi—oo aad u tirro-badan. Afar-iyo-tobankaas-na waxaa ka-mid-ah: lo'dda; adhiga; idaha; diggaaga; doofaarka; fardaha; geela Carab-ta; geela Bactrain; adhiga qoorta dhaadheer (ilama/alpaca); dameeraha; biciiddada; lo'dda buffalo; lo'-dibadeedka; lo'dda Bali; iyo lo'adda Hindiya (mithan).

Degaanka aadka u balaadhan ayaa u fuddudeeyey in Eurasia ay hesho xoolaha la dhaqdo kuwa ugu tirrada-badan. Eurasia waxaad bar-bardhigtaa qaaradaha kale. Qaarada Afrika, tusaale ahaan, kuma noola afar-iyo-tobankaas nooc ee aynu kor-kusoo-xusnay—oo aad u tirro-badani. Africa waxaa ku badan maroodiga; dameer dibad-deedka; iyo dameeraha; dhamaantoodna way adagtahay in la rabaysto. Waayo? Tusaale ahaan, maroodiga koritaankiisu wuxuu qaataa wakhti aad u dheer, waxaana ku baxaya kharash aad u badan. Marka uu waynaadana, faa'i-idooyinkiisu aad uma badna (sida lo'da oo kale). Dameer dibaddeedka in la rabaystaa aad-iyo-aad ayay u adagtay; waayo? Dameer dibaddeedku wuu dagaalamaa; mana ogolaado inuu rabaayad noqdo. Hadii la rabaystana, wax badan oo faa'iido leh lagama helo. Qaaradda Ameerika lafteeda aad ayay ugu yar-yihiin xoolahaas faa'iiddada badan u leh bani'aadamku.

Noocyada dhirta: noocyada kala-duwan ee dhirta ee ugu faa'iiddada badan bani'aadamka, iyagoo aad u tirro-badan

waxaa laga helaa Eurasia. Dhirtan tirrada-badan, lagama helo qaarada Afrika, Ustaraaliya, iyo Ameerika toona. Sidaa awgeed, Eurasia waxay nasiib u yeelatay inay hore u bilowdo falashadda beeraha; maadama ay haysato dhirtii ugu faa'iiddada badnayd ban'aadamka. Degaanka aadka u balaadhan ayaa u fuddudeeyey in Eurasia ay hesho dhirta ugu faa'iiddada badan bani'aadamka.

Maadaama ay Eurasia nasiib u yeelatay saddexdaas arimood—dhul baaxad wayn; xoolaha la dhaqdo; iyo dhirta ugu faa'iiddada badan—waxay ka horu-mareen qaaradihii aduunka kale oo dhan. Tusaale ahaan, Eurasia waa meeshii ugu horaysay ee bilowday qoraalka.

Qoraalka waxaa bilaabay xadaaraddii Mesobotaamiya (Mesopotamia) ee sal-dhigeedu ahaa Ciraaq (iyo qaybo ka mid ah Iiraan, Kuwayd, Suuriya, iyo Turkiga). Waxay qoraalka bilaabeen muddo lagu qiyaasay 3400 ilaa 3300 oo sanadood Nebi Ciise ka hor. Baahidda keentay qoraalkuna waxay ahayd in la ogaado tirrada raandiiska; tirrada ama qiimaha marka wax lays-weydaarsanayo; iyo marka wax la-qiimaynayo. Hadii aanay dadku beeraha falan lahayn, xoolahaasna aanay dhaqan lahayn, way adkaan lahayn inuu bilaabmo qoraal; hadii uu bilaabmana waxay qaadan lahayd muddo aad u dheer.

Waxaa kale oo Eurasia ka bilaabmay dhibaato aad u wayn: *dagaalo*. Dagaaladaas waxaa sababi jiray dhowr arimood: kow, in koox shufto ahi soo weerari jirtay dad meel degen si ay uga boobaan raandiishka; 2) in safaradda baayac-mustarka ay dhexda u galaan dad shufto ahi; 3) in degaanadda laftoodu isku duulaan si ay isu boobaan; iwm. Taasina waxay dhalisay in ay dagaaladu aad u bataan. Dagaaladaas batayna waxay keeneen inay dadkii Eurasia deganaa yeeshaan khibrad aad u qoto-dheer oo dagaalka ah; samaystaana hub ay isku difaacaan. Sida awgeed,

Eurasia waxay samaysteen hub casri ah, oo mar walba lasii casriyeeyo; waxayna si qoto-dheer u fahmeen xirfadaha dagaalka. Taasina waxay sababtay inay noqdeen dagaalyahano. Eurasia markii ay nasiib u yeelatay degaankaas barqaada ah, waxay yeesheen awood dhaqaale, cilmi, ciidan, hub, iwm.; taasina waxay suuro-gelisay inay gumaystaan qaaradihii kale ee aaduunka, ee aan iyagu nasiib u yeelanin barwaaqadaas degaanka. Aan soo qaadano tusaale kooban.

Markii ay kulmeen dadkii Eurasia (ee waxaas oo horumar ah gaadhay) iyo dadkii ku noolaa qaaradaha kale ee aduunka (ee aan iyagu nasiibka u yeelanin degaan barwaaqo ah) waxaa laga adkaaday, la-gumaaday, oo la-gumaystay dadkii degenaa qaaradaha kale.

Tusaale ahaan, markii ay dadkii reer Isbayn (Spain)—oo kasoo jeeda Eurasia—gaadheen Koonfurta Ameerikia (South America), waxay la kulmeen dadkii qaaradaas deganaa qaar ka-mid-ah, oo loo yaqaanay Beruufiyan (Peruvian). Reer Isbayn (Spain), waxay wateen fardo, hub casri ah, ciidan aad u tababaran, iyo dhaqaale. Dhinaca kale, reer Beruufi waxay haysteen fardo tirro-yar, hub qadiim ah, ciidan aan tababarayn, dhaqaale fiicana may haysanin.

Sanadkii 1532-kii, ayaa nin la odhan-jiray Fransisko Bisaaro (Francisco Pizarro) iyo ciidan uu watay—oo tirraddoodu ahaayeen 168 askari—ay gaadheen magaalada Cajamarca ee wadanka Beeruu (Peru). Magaalada Beeruu waxay ahayd xudunka xadaaradii la odhan-jiray Xadaaraddii Inka (Inca Empire), oo ka mid-ahayd xadaaraddihii ugu waaweynaa ee aduunka soo maray. Ciidankii uu watay Bisaaro waxaa ka hormiyi ciidankii Inka, oo tirraddoodu ahayd 80,000 oo askari. Dhowr saacaddood gudahood, waxay ciidankii Isbayn ku guulaysteen inay dilaan 70,000 oo ciidankii Inka ahaa. Ka dib, waxay soo qabteen boqorkii ka

talinaayey Xadaaraddii Inka. Halkaasna waxaa ka bilaabmay xasuuqii axmaqnimada iyo argaggaxa badnaa ee lagu xasuuqay dadkii asal ahaan u dhashay qaarada Maraykanka. Hadaba, su'aasha is-waydiinta muddani waxaa weeye: maxaa sababay in ay 168 askari ka guulaystaan, oo gumaadaan, 80,000 oo askari?

Jared wuxuu kaga jawaabay in ciidanka Isbayn ay kasoo jeedeen dadkaas aynu kor-kusoo-xusnay ee reer Eurasia; ciidanka Inka-na wuxuu kasoo jeeday dad aan nasiib u helin degaan barwaaqo ah. Sidaa awgeed, labada ciidan ayaa ku kala-horeeyey khibradda/aqoonta dagaalka, hubka casriga ah, iyo dhaqaalaha intaba. Ciidanka Isbayn waxay haysteen "*Guns, Germs, and Steel*"; oo macnihiisu yahay "*Hub, Cudur, iyo Bir*."

Hub waxaa weeye qalabkii ay ku dagaalamayeen; *Cudur* waxaa weeye, ciidanka Isbayn waxay isticmaaleen bacteeriya (bacteria) iyo fayruus (virus) ay ku gumaadeen dadkii Ameerika; cudurkaasina iyaga waxba muu yeelaynin oo jidhkooda ayaa yeeshay difaac (xasuuso: xoolihii ay dadka Eurasia la degeen ee ay cudurada ka qaadeen); *Bir* waxaa looga jeedaa, waxay xidhnaayeen dhar iyo koofiyaddo ka samaysan bir oo ka difaacaya hubka ay haysteen ciidamadii Inka. Ciidanka "Isbayn maryaha iyo koofiyadaha ay xidhnaayeen oo bir ka samaysan ayaa ka difaacaayey warmaha, leebka, iyo seefaha" (Diamond 1997). Jared wuxuu intaas sii raaciyey in "Fardoolaydii reer Isbayn ay aad uga xirfad-dagaal badanaayeen ciidanka Inka." Sidaas si la-mid ah ayay dowladihii Yurub ugu fuddudaatay inay gumaystaan qaaradaha kale ee aduunka—sida Afrika.

Qodobadaas aynu kor-kusoo-xusnay, waxay ka jawaabeen su'aashii aynu ku bilownay, ee ahayd: *maxaa sababay in wadamada qaarkood ay noqdaan qani, wadamada qaarkoodna ay noqdaan faqiir?* Qodobadaasi waxay inoo

cadeeyeen in sababta ay wadamada qaarna u yihiin faqiir, qaarna u yihiin qani, ay markii ugu horaysay kasoo bilaabantay kala-duwaanshaha degaanka. Taasi waa markii ugu horaysay ee uu bani'aadamku bilaabayey seeska nolosha.

Markii uu Jared buuggan daabacay, waxaa lays waydiiyey su'aashan: hadii dadka Afrikaan-ka ama Ameerikan-ka ahi ay ku noolaan-lahaayeen Yurub (Eurasia); dadka Ingiriiska ama Faransiiskuna ay ku noolaan lahaayeen Afrika ama Ameerica, maxaa dhici lahaa? Jawaabtu way iska cadahay: Jared wuxuu ku jawaabay in dadka Afrikaan-ka ah ama Ameerikan-ka ah ayaa gumaysan-lahaa Ingiriiska iyo Faransiiska. Taas macnaheedu waxaa weeye: dadkii nasiibka u yeesha inay degaan deggaanada barwaaqada ah, ayuunbaa gumaysanaya dadka degen deegaan abaar ah. *Waa nasiib, ee ma'aha karti.*

Hadaba iyadoo ay xaqiiqdu sidaas tahay, hadana waxaa iminka—oo ah 2020—aduunka ku nool dad degaankoodu uu yahay abaar—degaankoodu aanu lahayn khayraad dabiiciya; hadana wadankoodu uu ka-mid-yahay wadamada aduunka ugu dhaqaalaha badan. Waayo? Sabab? Maadamaa aynu soo sheegnay in sababta ay dadyowga aduunku u kala hor mareen ay tahay degaanka ay ku noolyihiin, sidee ayay u suuro-gashay in dad ku nool degaan abaar ah, oo aan lahayn dhir iyo xoolo la dhaqdo, iwm., ay hor-u-mar dhaqaale oo aad u heer sareeya samaystaan? Su'aashani waa su'aal aad muhiim u ah.

Jawaabtu waxaa weeye: markii ugu horaysay ee uu bani'aadamku nolosha bilaabaayey, cilmigoodu aad ayuu u yaraa. Sidaa awgeed, waxaa kaliya ee ay cilmiga u lahaayeen wuxuu ahaa falashadda beeraha iyo dhaqashadda xoolaha. Dadka degen deggaanka ay ku badan-yihiin dhirta iyo xooluhuna, waxay noqon-jireen dad gaadha hor-u-mar. Laakiinse, markii ay dadku yeesheen cilmi aad u qoto-

dheer, waxay ogaadeen in aanu hor-u-marku ku xidhnayn beer iyo xoolo kaliya. Laakiinse ay jiraan dariiqooyin kale oo lagu gaadhi-karo hor-u-mar.

Dariiqooyinkaas kalena waxaa ugu wayn in la-dhiso, kor loo-qaado, oo la-kobciyo dadka. Taas macnaheedu waxaa weeye in dadka la baro inay cilmi yeeshaan; inay yeeshaan karti shaqo; inay isku duubnaadaan; inay jirto cadaalad; inay jirto fursado loo siman yahay, iwm. Waxaa jira wadamo badan oo aduunka ka-mid-ah oo dariiqaas raacay. Si aad u fahanto, waxaynu soo qaadanaynaa wadanka Singabuur (Singapore). Wadanka Singabuur malaha beero, xoolo, iyo khayraad dabiici ah midna. Laakiinse, Singabuur waxay ka mid-tahay wadamada aduunka ugu qanisay. Waayo?

Maxay Singabuur (Singapore) ku Gaadhay Hor-u-marka?

Su'aashaas jawaabteedu waxaa weeye: Singabuur waxay hor-u-marka ku gaadhay, *waxay kobciyeen, sare-u-qaadeen, oo ay dhiseen, qarankii, aqoontii, dhaqankii, kartiddii, akhlaaqdii, hab-u-fikirkii dadkooda;* iwm. Sidee ayay u kobciyeen dadkooda? Su'aashan waxaa inooga jawaabay buug uu qoray Raysal Wasaarihii ugu muddadda dheeraa xukumaayey wadanka Singabuur, oo magiciisa la-odhan-jiray Lee Kuan Yew. Buuggaas wuxuu kaga hadlayaa dariiqii ay u mareen inay hor-u-mar gaadhsiiyaan wadankooda.

Buugga *From Third World to First: The Singapore Story: 1965 – 200* ee uu qoray Raysal Wasaarihii ugu muddadda dheeraa ee xukumaayey wadanka Singabuur Lee Kuwan Yew, ayaa wuxuu si qoto-dheer ugu sharaxay dariiqii ay u mareen hor-u-marinta wadankooda; iyo carqaladihii ay la kulmeen. Buuggaas ayaan kasoo qaadanayaa meelaha ugu muhiimsan ee ka jawaabaya su'aashaas aynu is waydiinay.

Singabuur waa wadan aad u yar. Baaxadda dhulku waxaa weeye 719 km^2, halka ay Soomaaliya tahay 637,660 km^2. Dadka ku nool Singabuur tirraddoodu waxaa weeye 5,639 milyan, halka ay Soomaalidu tahay 15 milyan. Singabuur malaha khayraad dabiici ah; sida, shiidaal, macdan, dahab, dheeman, bir, iwm. Dhinaca kale, Singabuur malaha beero iyo xoolo ay dhaqdaan. Waxaa kaliya ee ay leeyihiin waxaa weeye deked aad u yar, oo aan waynayn.

Singabuur waxaa gumaysan-jiray Ingiriiska; waxaanay xoriyaddoodii ka qaateen 1965-kii. Markii ay xoriyadda qaateen, waxaa Singabuur lagu tirrin-jiray wadamada "dunidda saddexaad." Jariiddadda *Sunday Times*, ee kasoo baxday London, UK., ayaa bishi Ogos 22, 1965, waxaa qoraal kusoo qoray Richard Hughes. Qoraalkaasina wuxuu u dhignaa siddan: "Dhaqaalaha Singabuur wuu baa'ba'ayaa marka la xidho xeryaha Ingiriisa—oo Ingiriisku ku bixiyo kharash gaadhaya 100 milyan oo lacagta Ingiirka ah" (Lee, 2000).

Singabuur dhibaatooyinka ugu waaweyn ee ay la kulmeed waxaa ka-mid-ahaa: 1) wadan faqiir ah, oo dhaqaalihiisu aad u liito; 2) dad aan cilmi lahayn; 3) dad kala qaybsan, oo aan is aaminsanayn; 4) khayraad dabiiciya oo aanay lahayn; 5) qaranimo aan u dhisnayn; 6) dowlad la'aan; 7) cadaalad-darro baahsan; iwm. Waxaas oo dhibaato ah siday u xalileen reer Singabuur?

Wuxuu Lee buuggiisa ku sheegay in markii uu xisbigiisu ku guulaystay doorashadii wadanka, ay la kulmeen dhibaato iyo walaac hor-leh. Lee wuxuu sheegay dhibtii ugu waynayd ee ay xisbigiisu la kulmeen. "Markii aanu wadanka qabsanay," ayuu yidhi Lee, "maanu lahayn wax aqoon—ama khibrad—maamul dowladeed" (Lee, 2000). Maadaama aanay wax aqoon iyo khibrad ah u lahayn maamul

dowladeed, waxay go'aansadeen inay shirar badan isugu yimaadaan. Shirarkaas waxay kaga-hadleen, sidii ay u maamuli lahaayeen wadanka. Halkan waxaan kusoo koobayaa, qodobaddii ugu muhiimsanaa ee ay go'aansadeen inay wadanka ku maamulaan.

Dastuur: waxay markiiba ku dhaqaaqeen inay qortaan dastuur ku salaysan dhaqankooda, si toos ahna uga turjumaya hor-u-marinta wadanka. Dastuurkaas dad ajinabi ahi umay qorin Singabuur; iyaga ayaa gacantooda ku qortay. Markii ay iska xoreeyeen Ingiriiska, dastuurkii qornaa ee wadanka lagu maamuli jiray wuxuu ahaa kii Ingiriiska. Inkastoo ay muddadii ugu horaysay ku shaqaynayeen dastuurkaas Ingiriiska, hadana waxay go'aansadeen inay ka guuraan, oo ay samaystaan dastuur ay iyagu leeyihiin. Inkastoo dastuurka wadanka aynaan halkan kusoo koobikarin, waxaynu ka xusaynaa meelaha ugu muhiimsan.

Qodobadda ugu muhiimsanaa dastuurka waxaa ka-midahaa: la-dagaalanka musuq-maasuqa; kobcinta cadaaladda; midayna ummadda (dhisida qowmiyad); iwm. Waxay go'aansadeen in aanu dastuurku noqonin ereyo ama weedho ku qoran buuggaag meel iska taala, oo afka uun laga sheego; laakiinse uu noqdo dastuur si dhab ah loo hirgaliyo, oo shaqaynaya. "Markii uu [xisbigayagu] qabsaday dowlada 1959, waxaanu go'aansanay in aanu dhisno dowlad nadiif ah. Waxaanu aad uga xumaanay qawlaystenimada, xatooyadda, iyo dhaqan xumidda madaxda wadamada Aasiya" (Lee, 2000). Waxay kaga dhabeeyeen in dastuurku uu si dhab ah u shaqeeyo. Aan soo qaato tusaale cadaan ah oo ku tusaya siday u rumeeyeen inuu dastuurku shaqeeyo.

Wasiirkii Qorshaynta oo magiciisa la odhan-jiray Teh Cheang Wan, ayaa waxaa lagusoo eedeeyey inuu musuq-maasuq sameeyey. Wasiirku wuxuu xaday lacag gaadhaysa USA$800,000 (sideed-boqon-oo-kun oo doolar). Wasiir Teh

waxay saaxiibo aad isugu dhow—oo muddo badan soo wada shaqeeyey—ahaayeen Raysal Wasaare Lee. Markii ay Guddidda *La-dagaalanka Musuq-maasuqu* bilaabeen baadhitaankii, ayuu Teh soo codsaday inuu la kulmo Lee. Laakiinse, Lee wuu ka diiday kulankaas. Waayo? Lee wuxuu sheegay in hadii uu la kulmo Teh ay Guddidda *La-dagaalanka Musuq-maasuqa* ku abuuri karto shaki iyo baqdin. Sidaa awgeed, wuxuu Lee ku yidhi, "Waxaynu kulmi-karaa marka uu dhamaado baadhitaanku" (Lee, 2000). Markii uu ogaaday in la xukumayo, ayuu Teh is diley (nafta iska googey). Intii aanu is dilin, ayaa wuxuu warqad usoo qoray Lee. Warqadiina siddan ayay u qorayd:

"Raysal Wasaare

Labadii wiig ee ugu danbeeyey, waxaan dareemaayey niyad jab iyo wer-wer. Waxaan dareemayaa in aan masuul ka ahay musuq-maasuqii dhacay; waxaanan naftayda ku qanciyey in aan aqbalo danbigaas aan galay. Maadaama aan ahay nin Aasiyaan ah, waxaan yaqiinsaday in aan u qalmo ciqaabta ugu saraysa ee uu danbigaasi leeyahay.

Mahadsanid,
Teh Cheang Wan"

Dhacdaddaasi waxay kuu xaqiijinaysaa halka ay dowlaadu ka taagnayd musuq-maasuqa. Waxaa kale oojiray madax aad u tirro-badan oo la-toogtay, la-xidhay, baxsaday, ama la-ganaaxay markii lagu qabtay musuq-maasuq. Markii ay dadkii oo dhan u cadaatay sida ay dowladu ula dagaalamayso musuq-maasuqa iyo ciqaabta aadka u saraysa ee lagu fulinayo qofka musuq-maasuq sameeya, waxay ummaddii dareentay in ay u dhalatay dowlad xalaal ahi. Laakiin, sidaa fuddud dadku kumay aaminin dowladdii dhalatay. Dadku waxay u baahan-yihiin arimo kale oo intaas kasii badan.

Xukunka Kartida (meritocracy): waa maxay macnaha "*Xukunka Kartida*" (Meritocracy)? Xukunka Kartidu waa nidaamka dowladeed ee ay ku dhaqmaan Singabuur. Markii ay wadanka qabsadeen, waxay is waydiiyeen: nidaam dowladeed oo noocee ah ayaynu ku maamulaa wadanka? Sida aynu ognahay, waxaa dunidda ka jira nidaamyo dowladeed oo aad u kala duwan. Markii ay darseen nidaamyaddii dowladeed ee dunida ka jiray, waxay isla qaateen in aanay qaadanin midna. Sababta ay u diideena waa sidan: iyagu dan kamay lahayn nidaamka dowladeed ee ay dhisayaan nooca uu yahay. Waxay danaynayeen inay dhisaan dowlad dadkooda ka saarta baahida iyo jahliga. Nidaamkaasi nooca uu doono ha noqdo. Mar hadii uu nidaamka dowdladeed dadka u adeegayo, oo uu ka saarayo baahida iyo jahliga, nidaamkaas ayay go'aansadeen inay qaataan; wuxuu doono ha noqdo'e.

Waxay iska diideen inay qaataan dimuquraadiyad, shuuciyad, kaligii talis, boqor-tooyo, iwm. Waxay go'aansadeen inay wadanka maamulaan dadka cilmiga iyo kartida lihi. "Dhamaan wasiiradda dowladu waxay ahaayeen jaamiciyiin, marka laga reebo mid kaliya mooyaane" (Lee, 2000). Qayb kasta oo dowlada ka mid ah waxay usoo xuleen dad leh cilmigii iyo kartidii ay wax ku maamuli lahaayeen. Tusaale, cadaaladda waxaa loo dhiibay dadkii bartay sharciyadda; caafimaadka waxaa loo dhiibay dhakhaatiirtii; dhismayaasha waxaa loo dhiibay injineeraddii, iwm.

Dadkaas markii lasoo xulayeyna waxaa la mariyey imtixaano aad u ad-adag, oo lagu hubsanayo qofka cilmigiisa iyo kartidiisa. Nidaamkaas ay samaysteena wuxuu Lee ugu yeedhaa: *Meritocracy—Xukunka Kartida*. Sida uu Lee ku sheegay waraysi laga qaaday, wuxuu sheegay in Singabuur ay maamulaan 300 oo qof oo leh cilmi jaamaceed iyo kartidii howshooda ay ku fulin lahaayeen.

Midaynta ummadda: Singabuur waxaa ku wada-nool saddex qawmiyadood (qaar yar-yarina way ku nool yihiin) oo si walba u kala duwan: 1) Shiine (Chinese): dad asal ahaan kasoo jeeda wadanka Shiinaha, oo ku hadla luqadda Mandarin; mana amiisana Illaahay; waa dadka loo yaqaano *Atheist*-ka; 2) Malay (Malaysian): dad asal ahaan kasoo jeeda Malaysiya; oo ku hadla luqadda Malay; oo Muslimiin ah; iyo 3) Hindi (India): dad asal ahaan kasoo jeeda wadanka Hindiya; waxay haystaan diinta Hinduism iyo Buddhism; waxaanay ku hadlaan Tamil iyo luqadaha kale ee laggaga hadlo Hindiya. Saddexdan qarandood isma jecla; isma aaminsana; isma ogola; waxaanay kala degen-yihiin xaafaddo kala duwan. Qolo waliba waxay isku urrursadeen xaafad u gaar ah. Waxay isu neceb-yihiin midab ahaan, diin ahaan, luqad ahaan, iwm.

Saddexdaas qowmiyadood—ee kala diinta, luqada, iyo dhaqankaba ah, oo is neceb—sidii loo midayn lahaa, ee looga dhigi-lahaa qaran ayaa aad u adag. Gumaystihii Ingiriiska ayaa dadka sii kala fogeeyey. Waayo? Ingiriiska dantiisa ayaa ku jirtay inuu kala fogeeyo, oo uu isku diro. Markay dadku coloobaan, waxaa Ingiriiska u fuddu-daanaysa inuu gumaysto. Laakiin, dowladii cusbayd waxay la dagaalamaysay eeshaas uu ka tagay Ingiriiskii. Markiiba waxay baadhitaan ku samaysay nacaybka iyo carqaladaha kala dhex yaala saddexdaas qarandood. Baadhitaankii waxay ku ogaadeen dhibka dhex-yaala dadka iyo sida ugu fiican ee looga dhigi-karo qaran isku duuban. Waxaynu halkan ku xusaynaa talaabooyinkii ugu mihiimsanaa ee ay qaadeen si ay u mideeyaan ummaddooda.

Talaabooyinka ummaddaas lagu mideeyey waxaa ka-mid-ah:

1. *cadaalad*: waxay ogaadeen in hadii ummaddu ay

dareemayso cadaalad-darro, in aanay marna noqon-karin qaran isku duuban. Cadaalad-darradu waxay qofka u horseedaa inuu aamino dadka uu ka dhashay (qabiilkiisa) oo aanu aaminin dowlada. Laakiinse, hadii uu qofku dareemo inay jirto cadaalad dhab ahi, wuxuu aaminaa dowaladiisa. Sidaa awgeed, waxay sameeyeen inay cadaaladda kasoo bilaabaan xagga hoose. Waxay ka bilaabeen ciidanka booliska iyo maxkamadaha. Sidii aynu kor-kusoo-xusnay, qawmiyad waliba waxay isku urursadeen xaafad u gaar ah. Sida caaddada ahna, xaafadaha waxaa ku yaalaha saldhigyo ciidanka boolisku leeyahay. Saldhigyadaas booliska iyo dadka xaafada degeni ismay aaminsanayn. Waxaa dhici-jirtay in ninka madaxda ka ah saldhiga boolisku uu ku tacaddiyi jiray dadka xaafada degen. Tusaale, hadii ay xaafada degenyihiin dad Malay ah (oo Muslimiin ahi), ninka saldhiga booliska haystaana uu yahay Shiine ama Hindi, wuu ku tacaddiyi jiray dadkaa Muslimiinta ah. Dhinaca kale, hadii uu nin Muslim ahi haysto saldhiga booliska ee xaafada ay degen-yihiin dadka Shiinaha ama Hindidda ahi, isna wuu ku tacaddiyi jiray dadkaas. Dhinaca kale, waxaa iyaguna sidaa u dhaqmi-jiray qaadiyadda maxkamadaha. Tacaddigaasina wuxuu abuuray inay dadku aamini waayaan booliskii iyo maxkamadihii. Sidaa awgeedna ay dadku isu baahaystaan, oo isu kaashadaan, hab qabiil. Waxaa kale oo dhashay in shacabku uu booliska u sheegi waayo dadkooda danbiga sameeya. Taasina ay dhibaato ku noqotay

shaqadii booliska. Waayo? Boolisku hadii aanu haysanin shacab la shaqeeya oo wararka u keena, way adkaanaysaa inay howlahooda si fiican u fuliyaan; taasna waxaa ka dhasha in ay nabada iyo xasilooni xumaato. Hadaba, si loo joojiyo arinkaas, oo loogu guulaysto inay dadku is aaminaan, waxaa la sameeyey nidaam cusub. Kow, waxaa la sameeyey guddi iyo xafiis madax banaan oo ay dadku usoo gudbiyaan tacaddiga uu boolisku kula kaco. Guddiddaasi waxay leedahay awood buuxda, oo ay maxkamad ku saari-karto booliska ku tacaddiya shacabka. Waxaa kale oo la sameeyey xafiis iyo guddi ay dadku usoo gudbiyaan tacaddiga ay u gaystaan maxkamaduhu. Labadaas guddi waxay ku guulaysteen inay maxkamadaha la tiigsadaan, oo ay xidhaan, madax badan oo boolis ah iyo qaadiyo maxkamadaha fadhiyey. Muddo gaaban ka dib, waxaa bilaabmay inay dadkii aaminaan booliskii iyo maxkamadihii. Halkaasna waxaa ka bilaabmay aaminaadii ay dadku aamineen dowladoodii.

2. *fursado*: waxaa kale oo iyana jirtay dhibaato kale oo dadka kala fogaysay. Dhibaatadaasi waxay ahayd helitaanka fursadaha wax-barashadda iyo shaqadda. Qawmiyad waliba waxay fursadaha wax-barashadda iyo shaqadda siin jireen dadkooda. Waxaa dhici-jirtay in arday aad u dedaal badan, oo si fiican wax u bartay, laga hor mariyo arday saaqid ah. Tusaale ahaan, arday Malay ah, oo Muslim ah, oo aad u dedaalay ayaa waxaa laga hor marinayaa arday Shiine ah. Sababtoo ah, qofka gacanta ku haya fursadda

> wax-barashada ayaa Shiine ah. Markaa wuxuu siin-jiray uun qof Shiine ah. Taasina waxay keentay inay sii kala shakiyaan, oo ay is aamini waayaan, qawmiyadahaas wada degeni. Si taas loo joojiyo, waxaa la sameeyey laba xafiis, oo madax banaan, oo ay wada maamulaan dad kasoo kala-jeeda qawmiyadahaas kala duwani. Marka uu qofku soo dalbado wax-barasho ama shaqo, dalabkiisa waxaa qiimaynaya guddiyo kala duwan; lamana ogolayn in la ogaado qofka magiciisa iyo qawmiyadiisa midna. Sidaa awgeed, marka uu qofku soo dalbado furasdahaas, magiciisa waa la qarin jiray, si aan loo garanin qawmiyada uu kasoo jeedo. Waxaa kale oo la sameeyey xafiis ay dadku usoo gudbiyaan wixii tacaddi ah ee ay tabanayaan. Guddiddani waxay ku guulaysteen inay maxkamad soo saaraan, oo ay xidhaan, dad badan oo ku tacaddiyey dad shicib ah oo ay fursadahaas ka hor-istaageen. Markii lagu guulaystay arinkan, waxaa bilaabmay inay soo baxaan dhalinyaro hablo iyo inamo leh, oo aqoontoodu aad u sarayso; kartina ku darsaday.

Labadaas qodob—cadaalad iyo fursado—waxay dhidibadda u taageen in ummaddu aaminto dowladooda. Ka dibna ay iyaguna is aaminaan. Marka uu qofka muwaadinka ahi ogyahay in uu haysto cadaalad iyo fursaddo shaqo/wax-barasho, waxaa xaqiiq ah inuu aaminayo dalkiisa, dowladiisa, iyo dadkiisaba. Bal waxaad barbar dhigtaa Soomaalida.

Dhisida akhlaaqda: qodobka kale ee aadka muhiimka u ahaa wuxuu ahaa dhisidda akhlaaqda bulshada. Dowladu si

ay u dhisto akhlaaqda shacabka, waxay soo saareen sharciyo aad u badan. Sharciyadaasi waxay u qaybsanaayeen laba qaybood oo kala duwan. Kow, qaarkood waxay ahaayeen sharciyo hadii uu qofku jabiyo uu ku mutaysanayo ciqaab—xadhig ama ganaax; ama labada oo laysu raaciyo (xadhig iyo ganaaxba). Laba, sharciyada kale waxay ahaayeen sharciyo hadii uu qofku jabiyo aanu ku mutasanaynin wax ciqaab xadhig ah. Laakiin, wuxuu la kulmayaa ciqaab nooc kale ah. Halkan waxaynu ku xusaynaa, sharciga labaad.

Sida caaddada ah, wadamada horuu-maray, dadku markay shaqaynayaan, waxaa laga qaadaa cashuur. Qofku lacagta uu shaqaysto ayay dowladu ka goysaa cashuur. Hadaba, si dadka loogu dhiiri-geliyo inay aad u ilaaliyaan akhlaaqda ubadkooda, waxaa lagula heshiiyey in waalidka caruurtiisu aanay wax danbi ah samaynin, cashuurta laga yaraynayo. Tusaale, aabe iyo hooyo shaqaale ah, ayaa waxay leeyihiin afar caruur ah. Waalidkaas waxaa mushaharkooda laga gooyaa cashuur. Kasoo qaad in cashuur looga goosto 18% (boqolkiiba sideed-iyo-toban). Hadii ay waalidkaasi doonayaan in cashuurta laga goynaayo laga yareeyo, oo looga dhigo 5%, waxaa laga doonayaa in aanay caruurtoodu wax danbi ah samaynin. Sidaa awgeed, waalidiintii oo dhami waxay ku dedaaleen in aanay caruurtoodu danbi samaynin. Dhinaca kale, waalidka ay caruurtoodu danbi sameeyaan, waxaa lagu kordhinayaa cashuurta. Sharcigan waxaa dhinac socda, sharciyadii kale ee ciqaabta lahaa. Taasi waxay sababtay in ay aad u yaraadaan danbiyadii; nabadiina ay aad u xasiloonaato.

Maal-gashi shisheeye: si loo dhiso dhaqaalaha wadanka, waxay awooda sareen in wadanka loo raadiyo maal-gashi shisheeye. Markii ay dowladii Lee wadanka qabsatay, waxay markiiba bilaabeen inay dhalinyaro tirro-badan, oo cilmi-goooduna aad u sareeyo, u kala diraan wadamada Yurub iyo

Maraykan-ka. Dhalinyaradaas waxaa loo diray inay wadanka u raadiyaan maal-gashi shisheeye. Waxay aad ula kulmi-jireen shirkadaha waaweyn ee aduunka—khaasatan kuwa reer Galbeedka. Markii ay la kulmeen in ka badan dhowr boqol oo shirkadood, ayay maalintii danbe ku guulaysteen shirkad ka ogolaatay inay maal-galin ku samayso wadanka. Dowladii Lee, shirkadaas qodobadii heshiiska ee ay la-galeen waxaa ka-mid-ahaa in ay shirkaddu shaqaalaysiiso dadka reer Singabuur, ee aanay dibeda ka keenin dad kale; iyo inay dadka reer Singabuur barto sida ay shirkaddu u shaqayso; iyo qalabka shirkaddu sida uu u shaqeeyo. Taasina waxay bilowday inay shirkado badan oo aduunka ahi kusoo dhiiradaan inay Singabuur yimaadaan. Shirkadihii aadka u badnaa ee Sigabuur yimidna waxaa ka dhashay in dadkii reer Singabuur bartaan xirfadihii iyo aqoontii lagaga shaqayn lahaa shirkadahaaas.

Mamnuuc hay'ad caawimo: dadkii maamulka u hayay Singabuur waxay diideen inay wadankooda yimaadaan hay'addaha UN-ta iyo kuwa kale ee wax caawiya. Singabuur waxay go'aansadeen in ay iyagu kartidooda wax kulasoo baxaan; laakiin, aanay aduunka kale baryo iyo dawarsi ula tagin. Go'aankaas sharafte iyo kalsoonidu ku dheehantay wuxuu sababay in ay reer Sinagbuur ka-mid noqdaan dadka ugu cilmiga, khibrada, dhaqaalaha, nadaafada, nabada, iyo xasiloonida badan aduunka.

Gunaanad

Cutubkani wuxuu inoo cadeeyey in aanay Soomaaliddu waligeed samaynin wax-soo-saar—hadii ay noqoto qalab (tignooloji) iyo hadii ay noqoto fikir (falsafad siyaasadeed, dhaqaale, iwm). Soomaalidu wax ay nolosha aadamaha

kusoo kordhisay haba-yaraatee ma jiro. Ilaa iyo maanta oo ah 2020, Soomaalidu waxay cuntada, maryaha, gogosha, iwm., kasoo iibsataa aduunka kale. Wax kale iskaba daaye, basasha, baradhada, iyo tamaandhada ayay kasoo iibsadaan Itoobiya. Dhinaca kale, dowladaha Sooomaalida oo dhan, waxaa caawiya UN-ta. Dad aad u tirro-badan oo Soomaali ahina waxay u shaqeeyaan hay'adahaas caawimada siiya dowladooda iyo dadkooda. Hadaba, si aynu uga baxno dib-u-dhaca, jahliga, iyo baahiddan xad-dhaafka ah, waxaa muhiima inaynu wax ka-barano aduunka kale; khaasatan wadanka Singabuur.

8

DHAQANKA SOOMAALIDA IYO XIGMADDA

"*Inta maanku gaajaysan-yahay, guuli waa weli.*"
Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi)

Hadii aad qofka Soomaaliga ah waydiiso su'aasha ah, "*waa maxay xigmadi?*" dadka badankoodu ma garanayaan micnaha kelmeda xigmad. Kelmeda "xigmad," waxay oo af-Soomaaliga ku noqonaysaa murti. Waa maxay micnaha "murti?" Dhibaatada labaad ee jirtaana waxaa weeye in ummadda Soomaaliyeed ay isku khaldeen laba arimood. Waxay isku khaldeen "falsafad" iyo "suugaan." Labadaasina aad ayay u kala duwan yihiin. Jaamacadaha aduunka oo dhamina, labadaas way kala saaraan. Falsafadu waa kuliyad gaar ah oo lagu barto waxa loo yaqaano "filoosofi" (philosophy). Suugaantuna waa kuliyad gaar ah oo lagu barto waxa loo yaqaano "suugaan" (art). Qodobkan waxaan si qoto-dheer ugu sharaxayaa qoraalka xaga hoose ku qoran.

Sida caddadda ah, marka ay Soomaalidu ka hadlayso

"xigmadda," waxaa maskaxdooda kusoo deg-dega "suugaanta." Waayo? Waa maxay sababta ay Soomaalidu u aamin-santay in xigmadu ay ku jirto suugaanta? Sababtu waxaa weeye: dadka Soomaalida ahi muddadi noloshooda ugu dheerayd waxay ku noolaayeen dhulka miyiga (baadiyaha). Dhulka miyiga ahna nolosha dadku aad ayay u koobnayd. Dadkaas reer miyiga ah noloshoodu waxay ku koobnayd, dhirta ay qalabka ka samaystaan (sida, aqal Soomaaliga, maryaha, iyo weelka), midhahoodana gurtaan; xoolaha ay dhaqdaan; xayawaanka duurjoogta ah ee ay la nool-yihiin, iyo qabiilooyin wada degen oo is neceb.

Sidaa awgeed, fikirka iyo luqada ay dadkaasi istic-maalaan wuxuu ku koobnaa intaas aadka u kooban. May jirin falsafad laga wada hadlo oo ay dadka reer miyiga ahi lahaayeen. Waxa kaliya ee ka duwan hadalkaas ay ku wada xidhiidhaan ee caadiga ah (tiraab) wuxuu ahaa suugaanta (tixda). Sida awgeed, dadkii reer miyiga ahaa marka ay dhegaystaan macaanka tixda oo leh hab-u-dhac, xaraf-raaca, erey suugaaneed, humaagyo, iwm., waxay dadkaasi u fahmeen in tixdu tahay "xigmad." Hadii ay falsafadi ka jiri lahayd miyiga, dadka reer miyiga ahi suugaanta umay arkeen in ay xigmadu ku jirto. Fikirkaas khaldan ayay inoosoo gudbiyeen dadkeenii reer miyiga ahaa, inaguna kamaynu doodin, waxna iskamaynu waydiinin, ee sidiisii ayaynu ku aaminay. Waana fikir aan sal-iyo-raadtoona lahay.

Cutubkan waxaan ku dooddayaa in aanay wax xigmad ahi ku-jirin suugaanta Soomaalida (marka laga reebo laba tixood—"*Sirta Nolosha*" iyo "*Af-ku-Siran*").

Hadii aad dooonayso in aad si fuddud u fahanto in aanay wax xigmad ahi ku-jirin suugaanta Soomaalida, waxaad samaysaa siddaan: tix kasta waxaad u bedeshaa hadal caadiya (tiraab). Maxaan uga-jeedaa "hadal caadiya?"

Sida aad ogsoontahay, tixdu waxay leedahay "xaraf-raac" iyo "hab-u-dhac" aanu lahayn hadalka caadiga ahi; waana inta ugu muhiimsan ee ay tixdu kaga duwan-tahay hadalka caadiga ah. Marka aad tixda ka-saarto "xaraf-raaca" iyo "hab-u-dhaca," waxaa kuusoo baxaya hadal caadiya. Ka dib, waxaad u fiirsataa in hadalkaas caadiga ah ay ku jirto wax xigmad ahi iyo in aanay ku jirin. Waa sidda ugu fuddud ee aad ku qiimayn-karto. Waxaa kale oo aad samayn kartaa: qofka tixta tirinaya waxaad ka codsataa inuu mawduuca uu tixda kaga hadlayo, ku sheego hadal caadiya isagoo aan istic-maalaynin tixda. Hadiise aad doonayso in aad u fahanto si qoto-dheer, waxaad akhridaa cutubkan.

Si aan kuugu-cadeeyo dooddaydan, waxaan cutub-kan u dhirraan-dhirriniyaa siddan soo socota. Kow, waxaan sharaxayaa micnaha kelmedda "xigmad." Waa maxay xigmaddi? Laba, marka aad fahanto micnaha "xigmad," waxaan faah-faahinayaa inta nooc ee ay u-kala-baxdo suugaantu guud-ahaan; xeerarka suugaanta; qalabka ay isticmaasho suugaantu; iyo sida loo qiimeeyo suugaanta. Saddex, marka aad fahanto qodobadaas, waxaan soo qaadanayaa gabayada iyo geerraarradda ugu caansan suugaanta Soomaalida. Gabayadaas iyo geerraarraddaas ayaan qiimaynayaa; waxaanan kuu cadaynayaa in aanay ku jirin wax xigmad ahi. Afar, mar hadii aanay wax xigmad ahi ku jirin suugaanta Soomaalida; sidee ayaynu suugaanta Soomaalida xigmad uga dhigi-karnaa? Hadii aanad doon-aynin in aad akhrido sharaxaada qaab-dhismeedka suugaanta, oo aad doonayso in aad fahanto in aanay suugaanta Soomaalidu wax xigmad ah lahayn (marka laga reebo dhowr tixood), waxaad akhridaa qaybta hoose ee ciwaankeedu yahay, "*Suugaanta Soomaaliddu Xigmad Malaha*."

Micnaha Kelmedda Xigmad

Waa maxay "xigmadi?" Buugga *A History of Western Philosophy* ee uu qoray Bertrand Russel ayaa si qoto-dheer u sharaxaya micnaha qotoda-dheer ee xigmada. Hadii aad u fiirsato micnaha kelmeda "philosophy" waxaad arkaysaa inay tahay xigmada dhabta ah. Kelmeda "philosophy" waxay asal ahaan kasoo jeedaa luqada Giriiga; waana laba erey oo laysku xidhay. Ereyga kowaad "philo," micnihiisuna waxaa weeye "love" ama "jacayl." Ereyga labaad ee "-sophos" micnihiisu waxaa weeye, "wisdom" ama "xigmad." Marka labada erey laysku xidho, "philosophy," micnahoodu wuxuu noqonayaa, "jacaylka xigmada." Maxaa looga jeedaa "jacaylka xigmada?"

Jacaylka xigmadu waxaa weeye, isku taxalujinta ku salaysan maskax ka shaqaysiinta qotoda-dheer ee loogu kuur galayo fahanka dhabta ah ee nolosha. Waa fahan aad u qoto-dheer, oo aan si fuddud loo dhex-gali karin. Waa fahan gaar u ah dad aad u tirro-yar. Waa fahan aanay dadka badankoodu isku dayin ama isku taxalujin inay ka qayb qaataan. Sidaa awgeed, falsafadu waa arin aad u adag oo u qoto-dheer. Jaamacad kasta oo aduunka ku taala, waxay leedahay kuliyad gaar ah oo lagu barto falsafada. Dadka falsafada ku takhasusaana waxay ku qaataan shahaadada PhD-da. Taasi waxay kuu cadaynaysaa inay falsafadu ka mid tahay cilmiyada ugu waaweyn ee aduunka yaala.

Falsafadu waxay u kala baxdaa: 1) metaa-fiisigis (metaphysics) oo micnaheedu yahay barasahda iyo fahanka asalka xaqiiqda; 2) abistimi-yooloji (epistemology), oo micnihiisu yahay barashada iyo fahanka cilmiga—tusaale, sidee ayaynu ku ogaanay waxa aynu ognahay? Waxa aynu ognahay ma xaqiiq-baa?; 3) taariikhda falsafada (history of philosophy); 4) sayniska, macquulka, xisaabta (science,

logic, and mathematics); 5) habka bani'aadamku wax u qiimeeyo (axiology) oo micnaheedu yahay barashada iyo fahanka sida uu bani'aadamku wax u qiimeeyo; sababta uu wax u qiimeeyo; iyo ilaa xadka uu wax qiimeeyo.

Qaamuuska Merriam-webster wuxuu xigmadda ku micneeyey: "male-shaxanimadda lagu gaadho go'aamo qoto-dheer." Wikipedia wuxuu xigmadda ku micneeyey: "Xigmaddu waa kartidda lagu fekero, isla-markaana fal lagu sameeyo, iyadoo la-adeegsanayo aqoon, waayo-aragnimo, kasmo-wadarreed, iyo fiiro qoto-dheer." Sidaa awgeed, xigmadu waa fahanka iyo sharaxaada asalka ay wax waliba ka samaysan-yihiin; waana fahanka ugu qotoda-dheer ee uu bani'aadamku gaadho si uu u fahmo dunidan uu ku nool-yahay.

Micnahaas xigmadda ee aynu kor-kusoo-xusnay marka aad si qoto-dheer ugu fiirsato, waxaa inoo soo baxaya in ay xigmaddu tahay: fahanka nolosha. Waa maxay "fahanka noloshu?" Fahanka noloshu waxaa weeye: in bani'aadamku uu si qoto-dheer u fahmo laba arimood oo jiritaankiisa muhiim u ah. Kow, inuu bani'aadamku si qoto-dheer u fahmo deegaanka uu ku nool-yahay. Degaanka uu ku nool-yahayna waxaa ka jira laba arimood: 1) wax khatar ku ah jiritaankba bani'aadamka; iyo 2) wax faa'iido u leh jiritaanka bani'aadama (faah-faahin siyaado ah waxaad ka akhridaa cutubka sharaxaya micnaha "dhaqanka"). Fahanka labadaas arimoodna waxaa ka dhasha *cilmiga sayniska*. Laba, inuu bani'aadamku si qoto-dheer u fahmo bulshadda. Bulshadduna waxay leedahay laba arimood: 1) wax khatar ku ah jiritaanka bulshadda; iyo 2) wax faa'iido u leh jiritaanka bulshada. Fahanka bulshadduna wuxuu ka bilaabmaa: fahanka qofka (ama shakhsiga). Halkaasna waxaa ka dhasha *cilmiga bulshada*. Fahanka labaad arimood—degaanka iyo bulshadda—waxaa ka dhasha in bani'aadamku uu ka faa'i-

ideyso labadaba; ka dibna, uu gaadho horu-markii uu hiigsanaayey. Fahanka labadaas arimood—oo aad iyo aad u qoto-dheerna—waxaa loo-yaqaan xigmad ama falsafad. Intii aanay bani'aadamku fahmin ama helin cilmiga sayniska, waxay bilaabeen waxa loo yaqaano "philosophy" ama "falsafad;" taas oo bani'aadamka ka caawisay fahanka nolosha iyo helitaankii cilmiga sayniska.

Maxaad ku kala-garanaysaa hadalka xigmadda ah iyo hadalka aan xigmadda ahayn. Waxaad ku kala-garanaysaa laba arimood: 1) hadii hadalku horumar usoo siyaadiyo nolosha bani'aadamka (ama bulshada), waa xigmad. Hadiise aanu hadalku waxba ka bedelin nolosha bulshadda, ma'aha xigmad; 2) xigmadu way ka duwan-tahay dhacdo maal-meedka caadiga ah. Taas waxaan uga jeedaa: hadii uu qof ka sheekeeyo dhacdo maal-meed aynu isla-wada-naqaano, taasi ma'aha xigmad. Laakiin, hadii uu qofku keeno fikir ama fahan cusub oo aynaan weligeen arkin, nolosha bulshadana wax wayn oo horumar ah u horseeda, markaa waa xigmad. Dhinaca kale, xigmaddu ma'aha maaweelo ama meddedaalo. Xigmaddu ma'aha sheekooyin laysugu sheekeeyo oo laysku dhaafiyo wakhtiga. Xigmaddu waxay bedeshaa hab-u-fikirka bani'aadamka; waxay bedeshaa sida uu bani'aadamku u qiimaynayo ama u fahmayo nolsoha guud ahaan. Maadaama aan sharaxay micnaha guud ee xigmad, iminka aynu u gudubno sharax-aada suugaanta.

Waa Maxay Suugaani?

Inta aannan u guddo-gelin micnaha 'suugaan,' waxaan halkan ku cadaynaa in faah-faahinta cutubkan ee ku saab-san sharaxaada suugaanta gebi-ahaan-ba aan kasoo-xigtay Barre sare/Abwaan Maxamed Xaasi Dhamac (Gaariye).

Anigu ma lihi sharaxaadan; Gaariye ayaa iska-leh. In qofka loo-qiro, lagu-maamuuso, lagu-sharfo, oo lasoo-xigto, iyadoo loo-qirayo inuu isagu leeyahay sharaxaadaas cilmiyeysan ee suugaantu, waa waajib. Waajib-kaasna waxaa ina-faraya: diinteena suuban ee Islaam-ka; cilmiga; sharciyadda qoraalka; dadnimada; sharafta; garashada; iyo wax isu-ogolaansha. Anigu waxaan qirayaa inuu Gaariye yahay aabaha ama qofka kaliya ee suugaanta Soomaalida u sharaxay si cilmiyeysan, oo qoto-dheer, oo ay ku dheehantahay aqoon, cilmi, waayo'aragnimo, af-tahanimo aad u xeel-dheeri, iyo dedaal uu u sameeyey ummaddiisa Soomaalieed ee uu ka-dhashay. Intaas oo keliya maaaha'e, Gaariye waa abwaankii ugu-horeeyey ee baadhitaan cilmiyeysan kusoo saaray, kuna dejiyey, *Miisaanka Maansadda*. Illaahay abaalkeeda ha-siiyo Gaariye; anaguna abaal aan lasoo-koobi-karin ayaanu u haynaa. Aan usoo noqdo micnaha ereyga 'suugaan."

Micnaha suugaanta waxaynu u kala-qaadaynaa labaqaybood: 1) micnaha ereyga "suugaan;" iyo 2) micnaha guud ee "suugaanta." Kow, marka aynu eegayno dhinaca af-Soomaaliga, ereyga "suugaan" wuxuu leeyahay dhowr micne; inkastoo micnihiisu isu dhow-yahay.

Barre-sare, abwaan Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye) —oo ah shaqsigii ugu horeeyey ee helay *Miisaanka Maansadda*—mar uu sharaxaayey ereyga suugaan, wuxuu sheegay in ereyga "suugaan" uu ahaa erey af-Soomaali ah oo weligiiba jiray; ilaa iminkana jira. Goboladda kala-duwan ee ay Soomaalidu degto, ereyga suugaan isku si uma yaqaanaan. Gobol waliba wuxuu u yaqaan micne gaar ah. Gaariye isagoo hadalkii sii wata wuxuu yidhi:

> . . . af-Soomaaligeena markii la-qoray [1972-kii] ka dib, ayuu ereyga 'suugaan' la-yidhaahdaa waxaa uu yeeshay

> micnaha uu iminka leeyahay ee '*literature*' afka [Ingiriisida] lagu yidhaahdo; *al-adab*-na afka-Carabiga loogu yaqaano. Wuxuu noqday "*technical word*" [erey meel gaar-ah loo-isticmaalo]. Ereyga 'suugaan,' micnayaal fara-badan-buu ku lahaa goboladda kala-jaad-jaadka ah ee Soomaaliyeed . . . Gobolada qaar, ereyga 'suugaan' waxaa looga-yaqaanay: marka roobku da'o, dabaysha dhabata ka dib roobka, ee 'saxan-saxadda' ah, ee udgoonka badan, [ayaa] dadka qaar 'suugaan' u yaqaaniin. Gobolada qaar, ereyga 'suugaan' waxaa looga-yaqaanay: marka roobku da'o, ugbaadka soo-baxa, [ayaa] loo-yaqaanay ereyga 'suugaan' . . . Gobolada qaar—oo galbeed-ka u badan—ereyga 'suugaan' waxaa looga-yaqaanay: marka hadhuudhka la-tumo—ee la-hufo, ee la-kala-haadiyo—[inta] buddadda ah, ee nadiifta ah ayay dadka qaar 'suugaan' u yaqaanaan. Macnayaal kala-jaad-jaad ah ayay ku-lahayd—welina ku leedahay—afka-Soomaaliga . . . Kan inagu aynu iminka isticmaalayno—markaynu 'suugaan' leenahay—waa 'mustalax' micno gaar-ah leh, micno xaddiddan leh oo cilmiyeysan, oo waxa '*literature*' loo-yaqaano ah. Waxaanu u qaybsamaa 'tix' iyo 'tiraab.' (https://www.youtube.com/watch?v=3Saxk2sAXMU&t=89s).

Waxaa kale oo sharaxay micnaha ereyga 'suugaan,' hal-abuur Axmed Faarax Cali (Idaa-jaa). Idaa-jaa isaguna wuxuu suugaanta ku micneeyey:

> 'Suugaan' waa erey hore; hadana cusub; macne horena wuu lahaa, oo ay Soomaalidii hore u tiqiinay . . . macno danbena waa yeeshay oo loo-balaadhiyey. Marka hore wuxuu ku saab-sanaa dhulka . . . [dooga] leh, ee indhaha u roon, ee qurxoon, ee xoolaha iyo dadkaba u roon; marka

> miyiga la-joogo. Ka dib, kun-iyo-sagaal-boqol-iyo-dhowr-iyo-afartankii [194-] markii lasoo-gaadhay, 'goosankii' af-Soomaaliga ee Xamar ka-dhisnaa—urrur-aqooneed buu ahaaye—ayaa ereygaa waxay u qaateen erey-bixin cusub . . . waxaa loo-bixiyey wax-yaalaha, *letteratura* [Italian], *literature* [English], ama *al-adab* Carabida looga-yaqaan, oo ah: tix iyo tiraab habaysan, oo hagaagsan, oo si fiican loo-tiriyey . . . (https://www.youtube.com/watch?v=oXKvelDXOY4).

Isaguna waxaa ereyga 'suugaan' inoo micneeyey, abwaan Maxamuud Cabdillaahi Ciise (Sin-gub). Sin-gub wuxuu suugaanta ku micneeyey:

> . . . suugaan waxaan u naqaanaa 'wax aan dhamays-tirnayn:' roob meel yar helay oo sahanku sheego, [oo] ay yidhaahdaan: 'suugaan yar-baa halkaasi [lahayd] . . [Waxa kale oo aan 'suugaan' u naqaanay], dhinbiil geed ku-taala oo aan aad u engeggin . . . [Waxa kale oo aan 'suugaan' u naqaanay], qof aan bukin oo yar dhafoor go'an [ama dhibaato ay haysato]. Kolka aad hada aragto, [ee aad ku tidhaahdo]: 'Hebeloow! Miyaad buktaa?' . . . 'Maxaa kugu-dhacay?' . . . [Wuxuu kuugu jawaabayaa]: 'Waan yar suugaamays-nahay.' [Waxaa kale oo aanu u naqaanay]: neefku kolkuu biyaha diido (https://www.youtube.com/watch?v=wYqrMuHbACE).

Micnahaas aynu soo sharaxnay, waa micnihii ereyga "suugaan."

Laba, iminka waxaynu sharaxaynaa micnaha guud ee 'suugaanta.' Gaariye mar uu sharaxaayey micnaha guud ee suugaanta, wuxuu ku sharaxay: sheekooyinka gaa-gaaban ee buugta lagu qoro, ". . . malaa dadka qaar uma-yaqaanaan

suugaane—ayaa suugaan ah. Noofalada (novals) iyo sheekooyinka gaa-gaaban ee la-qoro, qawaaniin [sharciyo] ayay leeyihiin; [waana] qayb suugaanta ka-mid-ah . . ." (https://www.youtube.com/watch?v=ztyJZ6Pk9EQ). Gaariye kumuu dheeranin sharaxaada guud ee suugaanta; sababtoo ah, wuxuu sharaxaayey—oo uu hadalkiisu ku-saab-sanaa—hab-u-dhiska tixaha (tixda). Waxa kaliya ee uu sheegay in noofladda (novals) iyo sheekooyinka gaa-gaaban ee la-qoraa ay ka-mid-yihiin suugaanta. Waana sharaxaad sax ah.

Laakiinse, Gaariye waxaanu sharixin—oo aanu wakhti u helin wax-yaalaha kale ee suugaanta ka mid ah. Waa maxay waxyaalahaas kale ee suugaanta ka-midka-ahi? Halkan ayaan ku faah-faahinayaa.

Marka uu bani'aadamku isu-gudbinayo fariimaha, wuxuu isticmaalaa dhowr dariiqo oo kala-duwan. Dariiqa koowaad ee aynu dhamaanteen isticmaalaa waxaa weeye 'hadalka' caadiga ah. Dariiqaas hadalka caadiga ahna, waxaa loo yaqaan "tiraab." Laakiinse, waxaa jira dariiqooyin kale oo ay bani'aadamku isugu-gudbiyaan fariimaha. Inkastoo dariiqooyinka kale ay badan-yihiin, anigu halkan waxaynu kaga-hadlaynaa dariiqa loo-yaqaano 'suugaanta.' Dariiqa suugaantu wuu ka-duwan-yahay dariiqa 'hadalka caadiga ah." Dariiqa suugaanta waxaa ka-mid-ah: tix-da, noofaladda (novals), sheekooyinka gaa-gaaban, sawir-gacmeedka, filimadda qaar-ka-mid-ah, iwm. Waxaas aan soo sheegay oo dhami waa dariiq uu bani'aadamku isugu-dugbiyo fariimaha.

Dariiqan ay waxaas oo dhami ku-jiraan ayaa loo-yaqaan 'suugaan.' Si aad u fahanto micnaha guud ee 'suugaanta,' waxaynu soo qaadanaynaa: tix-da iyo sawir-gacmeedka (Soomaalida dhexdeeda, waxaa sawir-gacmeedka caan ku ah Amiin Caamir). Maxay iskaga-mid-yihiin—ama ay ku-kala-duwan-yihiin tix-da iyo sawir-gacmeedku? Inta aynaan

sharixin kala-duwanaanshaha tix-da iyo sawir-gacmeedka, waxaa haboon in aan sharaxaad ka bixiyo: waa maxay tix? Iyo waa maxay sawir-gacmeed? Aynu ku horayno sharaxaada tix-da.

Waa Maxay Tix-du?

Bare-sare/abwaan Gaariye wuxuu yidhi: "Marka si cilmi ah loo-micnaynayo, hadal kasta oo leh 'dhacdo' iyo 'higaad' ayaa la-yidhaahdaa 'tix.'" Muxuu Gaariye uga jeedaa 'dhacdo' iyo 'higaad?' *Dhacdo* wuxuu uga jeedaa: waa hadal leh "hab-u-dhac," oo lagu luuqeeyo; oo leh luuq iska-daba-dhacaysa, oo ku-socota dariiq aanay ka bixi-karin, oo dhegaha bani'aadamka u macaan. *Higaad* wuxuu uga jeedaa: hadal ay ku jiraan weedho ka bilaabla hal 'xaraf' oo isku mid ah. Si aad u fahanto, aan sharaxaada sii fududeeyo.

Bani'aadamka badankiisu—oo ay Soomaaliduna ku-jirtaa—waxay hadalka u kala-saaraan laba qaybood: tix iyo tiraab. Maxay ku-kala-duwan-yihiin tix iyo tiraab? Tix iyo tiraab waxay ku-kala-duwan-yiihiin dhowr arimood.

Kow, tiraab-tu waa hadalka caadiga ah ee aynu ku wada hadalo. Tix-da lafteedu waa hadal. Laakiinse, waxay leedahay saddex arimood oo aanu hadalka caadiga ahi lahayn: 1) xaraf-raac; 2) hab-u-dhac; iyo 3) xiggasho toos ah. Xaraf-raacu waxaa weeye: marka tix-da la-tirinayo—gabay, guurow, geeraar, maanso, hees, jiifto, iwm—waxaa shuruud u ah in tix-du ay ku dhisnaato (ama ku socoto) xaraf. Tusaale: "Dugsi male qabyaaladi, waxay dumiso mooyaane." Meeriskani wuxuu ku socotaa xarafka "D." Sida kuu muuqata, xarafka "D" wuxuu meeriskan kaga-jiraa laba meelood. Tusaale labaad: "Wal-hadow faraskay-ga; Weedh-yar-oon ku-amaanay; Wow-ga maan ka bilaabo." Saddexdan tudduc waxay ku socdaan xarafka "W." Waxaa

shuruud ah in tudduc walba uu ku-jiro xaraf "W." Hadii qofka tixda tirinayaa uu jabiyo shuruucda xaraf-raaca (ama higaada), wuxuu sameeyey khalad loo-yaqaano "laaxin;" oo looga-jeedo in ay tixdii jabtay ama khaldantay.

Taas micnaheedu waxaa weeye, hadii uu qofku isagoo tuduc walba u istcmaalay xarafka "W" uu hadana tuduc kale u isticmaalo xaraf aan "W" ahayn, markaa tixdii way "jabtay." Mar hadii tixdu jabto, ama khaldantana, manoqonayso tix, ee waxay noqonaysaa 'hadal caadiya,' ama 'hadal cuddoon.' Gabayaa Soomaaliyeed ayaa yidhi, "Laaqsi gabay Salaanow adaan, layli ku ahaannin; Aan laaqin mooyee murtida, laaxin ka idleynnin."

Dhinaca kale, tix-du waxay leedahay "hab-u-dhac." Hab-u-dhacu waxaa weeye: waa luuq iska-daba-dhacaysa, oo ku-socota dariiq aanay ka bixi-karin, oo dhegaha bani'aadamka u macaan. Tix waliba waxay leedahay luuq u gaar-ah, oo lagu garto. Tusaale: meeriska "Dugsi male qabyaaladi, waxay dumiso mooyaane," waxay leedahay luuq iska-daba-dhacaysa, oo ku-socota dariiq aanay ka bixi-karin. Luuqda ay tudducdani leedahayna waxaa loo-yaqaan "gabay." Luuqda uu gabaygu leeyahay ee aad ku garanaysaana waxaa weeye: "Hoyaalayey! Hoyaalayeey! Hoyalayeey! Hooye!"

Tusaale labaad: "Wal-hadow faraskay-ga; weedh-yaroon ku-amaanay; wow-ga maan ka bilaabo." Luuqda ay ku-socoto tix-dani, waxaa loo-yaqaan "geerraar." Marka aad dhegaysanayso (ama aad akhriyeyso) geerraar-kaas, waxaad dareemaysaa inuu ku socdo hab-u-dhac ka duwan hab-u-dhaca gabayga aynu kor-ku-xusnay. Hadii qofka tix-da tirinayaa uu ka-baxo, ama uu ka leexdo, luuqda (hab-u-dhaca) tix-da, wuxuu ku dhacayaa khalad loo-yaqaano "deel-qaaf." Deel-qaaf-kana waxaad ku garanaysaa: tix-dii ayaa ka-leex-anaysaa luuqdii, hab-u-dhacii, ama dariiqii ay ku-socotay. Gabayaa Soomaaliyeed ayaa yidhi: "Ma daleeyey deel-

qaafku wuu, kaa dilaa gabaye." Abwaan Gaariye isaguna wuxuu yidhi: "Kuma daro ninkii fara-yaqaan, arrarta deel-qaafe."

Abwaan Gaariye oo sharaxaya sida lagu kala-garto marka uu qofku ka baxo hab-u-dhaca tix-da, ayaa tusaalooyin ka-bixiyey. Wuxuu Gaariye yidhi, "Hadii aad tidhaahdo:

Maroodi! Maroodi!
Maroodi cadhoole!
Hadii col-la-sheego,
Cadaada ku-meere,
Hashii cosob waa-tan.

[Hab-u-dhaca ay ku-socotaa waxaa weeye]:

La'laa, la'la'laa'la,
La'laa, la'la'laa'la,
La'laa, la'la'laa'la.

Baddaas ayaad ku jirtaa." Bal isku day inaaad si muusig ah u qaado. Gaariye oo sii wada sharaxaadii wuxuu yidhi: "Hadii uu ka baxo [hab-u-dhaha ah] 'La'laa, la'la'laa'la; La'laa, la'la'laa'la; La'laa, la'la'laa'la' [way jabaysaa, ama way khaldamaysaa]."

Si uu inoo fahansiiyo abwaan Gaariye, wuxuu heestan bar-bar-dhigay hees kale oo iyaduna leh hab-u-dhac ka duwan hab-u-dhaca 'Maroodi cadhoole." Wuxuu tusaale ahaan usoo qaatay:

Maqaleey war-laay!
Malaguu waramay?
Yaa ii waramay?

Ma walaalkay-baa,
Webi hoose iyo,
Waaneed ka yimi?

Gaariye oo sii wada sharaxaadii wuxuu yidhi: "hadii uu ka baxo [hab-u-dhaha ah]:

La'la'laa'la'laa,
La'la'laa'la'laa,
La'la'laa'la'laa,

[way jabaysaa, ama way khaldamaysaa]." Halkan waxaynu ka aragnaa in 'hab-u-dhacu' uu ku socdo luuq muusig oo kale ah. Tixaha kala-duwana, mid waliba waxay leedahay 'hab-u-dhac' ama 'luuq' gaar u ah: gabay, geeraar, maanso, buraan-bur, iwm.

Qodobka saddexaad ee ay tix-du kaga-duwan-tahay hadalka caadiga ahina waxaa weeye: xiggasho toos ah. Waa maxay "xiggasho toos ahi?" Maxayse kaga duwan tahay "xiggashada aan tooska ahayn?" Xiggashadda toos-ka ahi waxaa weeye: qoraal ama hadal loosoo xigtay sidii loo qoray ama loo yidhi markii ugu horaysay, iyadoo aan waxna lagu-darin, waxna laga-reebin. Waxaad qoraysaa ama aad odhanaysaa ereyadii uu qofku yidhi iyagoo sidoodii ah. Dhinaca kale, waxa jirta xiggasho aan toos ahayn. Xiggashad aan tooska ahayni waxaa weeye: marka aad soo xiggato qoraal ama hadal uu qof kale leeyahay; laakiin aanad qoraalkaas/hadalkaas si toos ah usoo xigganin. Waxaas usoo xigganaysaa si aan toos ahayn.

Sidaa awgeed, marka tix-da lasoo xigganayo, waxaa mar walba lasoo xigtaa ereyadii iyo hab-u-dhicii ay tix-du lahayd oo sidoodii ah. Laakiinse, hadalka caadiga ah mar walba looma-soo xigto si toos ah. Tusaale: si aad u fahanto

xiggashadda toos-ka ah iyo xiggashada aan tooska ahayn, waxaynu soo qaadanaynaa sheeko Soomaali. Waa sheeko caan ah. Abwaan Gaariye ayaa 1980-kii sheekaddan ka sameeyey maanso uu u-bixyey *Madax Goodir*; inkastoo uu Gaariye la-hadlaayey dowladii wakhtigaa wadanka hogaamineysay ee uu ka-talinaayey May-jar Generaal Maxamed Siyaad Barre.

Mar waxaynu soo xigganaynaa sheekada; marna waxaynu soo xiganaynaa tix-da. Labadaas xiggasho waxay ku tusayaan in hadalka caadiga ah iyo tix-da si kala-duwan loosoo xigto.

Sheekadii: waxaa jiray nin boqor ah. Ninkaa boqorka ahi wuxuu lahaa geeso riyaad (geesaha riyaha). Boqorkaasi dadka uu xukumo wuu ka-qarin-jiray geesihiisa; muu ogolayn in la-arko. Maalintii danbe, ayaa nin boqorka u shaqayn-jiray uu arkay boqorka geesihiisii. Boqorkii ayaa ninkii ku yidhi, "Hadii aad dadka u sheegto in aan leeyahay geeso, qoorta ayaan kaa goynayaa." Ninkii wuu baqay, oo naxdin (cabsi) ayuu la-seexan-waayey. Sida aynu ognahay, waxaa dabeecada bani'aadamka ka-mid-ah in wax kasta oo laguu-diido ama lagaa-qariyo aad xoog-usii-jeclaato. Waxaa la-mid-ah in marka lagugu yidhaahdo "sirta laguu sheegay cidna how sheegin," ay aad u adkaanayso inaad qariso. Waayo? Waxaa ku dhibaaaya sirtaas aad hayso—waa dabeecad uu leeyahay bani'aadamka badankiisu.

Ninkii ayaa waxaa dhibaato ku noqotay inuu qariyo "sirta" uu hayo ee lagu-amray in aanu sheegin. Sirtaa uu hayo awaadeed, ninkii waxaa barrartay (buuratay) caloosha; xanuun ayaanu dareemay. Maalintii danbe, ayuu ninkii go'aan ku gaadhay inuu sirta sheego si uu u caafimaado, oo barrarka calooshuna uga baa'ba'o. Laakiin uma sheegi-karo qof kale oo bani'aadam ah. Ninkii wuxuu tagay meel ka durugsan guriga boqorka. Meeshii ayuu ka qoday "god"

dheer. Godkii ayuu afka saaray, waxaanu yidhi: "boqorku geeso ayuu leeyahay!" Ka dib, godkii ayuu aasay, oo ciid ku rogay. Markii uu intaas yidhi, ayuu caafimaaday, oo barrarkii calooshuna ka baa'ba'ay. Muddo-ka-dib, godkii waxaa kasoo-baxay geeso. Sheekadu intaas ayay ku dhamaatay. Laakiinse, micnayaal badan ayaa ku-jira.

Iminkana aynu dhowr tudduc kasoo qaadano maansadii *Madax Goodir* ee uu Barre-sare/abwaan Gaariye ka-sameeyey sheekadan. Gaariye wuxuu yidhi:

Mar aan gaban ahaa beri,
Galab aan adoogay,
Geed uu fadhiyi jirey,
Sheeko kooban kaga guray,
Wuxuu yidhi: "guyaal hore
Boqor geesalaa jirey
Oo goostay weligii
Inaan iinta lagu garan.

Hadaba, hadii aad sheekadaas kor-ku-xusan akhrisato, oo aad jeclaysato in aad uga sheekayso saaxiibkaa, waxaa hubaal ah in aanad marna isticmaalaynin ereyadaas aan anigu isticmaalay. Sheekada marka aad akhriddo, ee aad fahanto, saaxiibkaa waxaad ugu sheegaysaa ereyo kale oo aan ahayn ereyadda aan anigu isticmaalay; adigoo sheekadiina si sax ah u sheegaya. Laakiinse, hadii aad jeclaysato in aad saaxiibtaa u tiriso maansadaas uu Gaariye ka-sameeyey sheekadan, waxaad ku khasban-tahay in aad isticmaasho ereyaddaas uu Gaariye isticmaalay; oo aad waliba ereyaddaas u tiriso, oo aad isu-daba-dhigto, sidaa uu Gaariye u tiriyey, ee uu isu-daba-dhigay.

Sidaa awgeed, marka aad sheekada xigganayso, umasoo xigganaysid si toos ah. Laaakiin, waxaad usoo xigganaysaa si

dad-ban oo aad adigu isticmaalayso ereyadda aaad doonto. Marka aad maansaddaas Gaariye soo xigganayso, ma istic-maali-kartid ereyadda aad doonto; waxaa khasab kugu ah inaad isticmaasho ereyaddaas uu Gaariye isticmaalay.

Halkaas waxaa inooga cadaatay in xiggashada tix-du ay ka duwan-tahay xiggashadda tiraab-ta—hadalka caadiga ah. Waa qodobka saddexaad ee ay tix-du kaga duwan-tahay tiraabta. Xiggashaddan tooska ah ee ay tix-du leeedahayna waxaa ku-jira faa'iidooyin aad u tirro-badan. Iminkana aan sharaxaad ka bixiyo sawir-gacmeedka.

Waa Maxay Sawir-gacmeed-ku?

Sawir-gacmeed-ku waa qayb ka-mid-ah suugaanta. Waa dariiq ay bani'aadamku isugu-gudbiyaan fariimaha. Sida tix-da oo kale, sawir-gacmeed-ku wuu ka-sareeyaa hadalka caadiga ah ee aynu ku wada-xidhiidhno. Sawir-gacmeed-ku wuxuu dadka ku-baraarujiyaa inay si qoto-dheer, oo huffan, ugu fiirsadaan arimaha bulshada, dadka ay la nool-yihiin, degaanka, xayawaanka, iwm. Sawir-cagmeedka aadka u fiicani, wuxuu bulshada u iftiimiyaa (tusaa) wax aanay bulshaddu arkaynin, ama aanay u fiirsanin, oo aan u muuqanin; hadii ay noqoto: cadaaladda, siyaasadda, dhaqaalaha, dhaqanka, fahanka diinta, daryeelka degaan-ka/mayeedhaanka, iwm. Bulshada ayuu baraarujiyaa.

Tix-da iyo Sawir-gacmeed-ka

Sida aan kor-kusoo-xusay, tix-da iyo sawir-gacmeedku waxay iska-mid-yihiin arinkan: labaduba waa dariiqooyin ay bani'aadamku isugu gudbiyaan fariimaha; dariiqaas oo ka-duwan, kana qoto-dheer, hadalka caadiga ah ee uu bani'aadamku fariimaha isugu gudbiyo. Marka ay fariimaha

inoo-soo gudbinayaan tix-da iyo sawir-gacmeed-ku, waxay isticmaalaan qalab kala-duwan. Tix-du waxay isticmaashaa ereyo (ama hadal) aad maqlayso. Sidaa awgeed, maadamaa ay tix-du isticaalayso ereyo, waxay inoo-soo-martaa maqalka (dhegta). Sawir-gacmeed-ku wuxuu isticmaalaa sawiro uu inagu tusayo fariimaha uu inoosoo gudbinayo. Sidaa awgeed, maadaama uu sawir-gacmeed-ku isticmaalyo sawiro, wuxuu inoo-soo-maraa araga (indhaha).

Labadaas dariiqo ee kala-duwan ayay inoo-soo kala-maraan tix-da iyo sawir-gacmeed-ku. Laakiinse, iyagoo labaduba inoosoo kala maraya labadaas dariiqo ee kala-duwan—maqalka (tix) iyo araga (sawir-gacmeed)—waxay usii-gudbaan dareema-yaasheena kale (sida, farxada, murugada, cadhada, iwm). Tix-du markay inoosoo marto maqalka, waxay isticmaashaa ereyo saamayn-weyn ku-yeesha dareemayaasheena iyo shucuurteena. Sawir-gacmeed-kuna waa sidaas oo kale.

Tusaale ahaan, tixaha qaarkood waxay ka hadlayaan arin murrugo ah, ama arin farxad ah, ama arin cadho ah, iwm. Hadii tix-du ay ka hadlayso arin murrugo ah, waxay isticmaalaysaa ereyo murrugo xambaarsan si ay kuu dareen-siiso murrugada; sidaa awegeed, waxaad dareemaysaa murrugo. Markaa tix-du iyadoo kuusoo-maraysa maqalka, ayay hadana isticmaalaysaa dareenkaagii murrugadda. Sawir-gacmeed-kuna si uu kuu dareensiiyo murugo (isagoo isticmaalaya aragaaga), wuxuu isticmaalayaa sawir ay ka muqaato murrugo, si aad u dareento murrugada. Sidaa awgeed, tix-da iyo sawir-gacmeed-kuba iyagoo kuusoo-maraya labadaas dariiqo ee kala-duwan ayay hadana istic-maalayaan dareemayaashaada iyo shucuurtaada kale. Waxaa kale oo ay isticmaalaan maskaxdaada macquulka ah.

Qalabka Suugaantu Isticmaasho

Suugaantu marka ay inoosoo gubinayso fariin, waxay isticmaashaa qalab u gaar-ah, oo aad u badan. Si aynu u fahano qalabkaas, waxaynu soo qaadanaynaa qalabka ay isticmaalaan tix-da iyo sawir-gacmeed-ku. Guud ahaan, tix-da iyo sawir-gacmeed-ku waxay isticmaalaan qalabyo iskumid-ah. Sida aynu kor kusoo-xusnay, tix-du waxay isticmaashaa ereyo; sawir-gacmeed-kuna wuxuu isticmaala sawir. Laakiin, ereyada iyo sawirka marka ay isticmaalayaan waxaa jira qalab kale oo aad u qoto-dheer oo ay u isticmaalaan ereyadaas iyo sawiradaas.

Qalabka koowaad ee labaduba isticmaalaan waxaa looyaqaan humaag (ama humaagayn); dadka qaarna waxay u yaqaanaan af-maldahayaal (Ingiriisida waxaa lagu-yidhaahdaa: "*imagery*"). Humaagayn-tu (ama af-maldahayaashu) waxaa weeye: marka laga-eegayo dhinaca tixda, humaagayntu waa ereyo xambaarsan (ama ku-tusaya) sawir-maskaxeed; sawir-maskaxeedkaasina wuxuu dareenkaaga ku-beerayaa shucuur—sida, farxad, murugo, cadho, rayn-rayn, murugo, iwm. Waa ereyo kuu sawiraya dhacdo ama arin, kuuna tusaya qaab ka duwan qaabka aad u-arkaysay. Dhinaca sawir-gacmeedka, humaagayntu waa sawir-gacmeed isaguna xambaarsan sawir-maskaxee sida tix-da oo kale.

Waa maxay ujeeddadda humaagayntu? Ujeeddadda humaagayntu aad ayay u tirro-badantahay. Tusaale ahaan: qofka tix-da tirinaya ayaa doonaya inuu kuu sheego arin dhacay oo aanad adigu goob-joog u ahayn. Hadaba, si uu arinkaas kuu fahan-siiyo, waa inuu isticmaalaa qalabka humaagaynta. Waa inuu kuu sawiraa sidii ay wax u dhaceen, si aad u dareento wixii dhacay. Dhinaca kale, qofka tix-da tirinayaa marka uu doonaayo inuu ka-hadlo

arin; laakiin, aanu doonaynin inuu si toos ah u-abaaro arinkaas uu ka hadlaayo, wuxuu isticmaalayaa humaagayn.

Hadii aynu dhowr ka tilmaano humaagyadda la-isticmaalo, waxaa ka-mid-ah: ekeyn; gud-booneyn; qofayn; xus; yam-xeerid; silan-suggan; tibaax; astaamayn; iwm. Hadaba, si aad u fahanto humaagaynta, waxaynu soo qaadanaynaa dhowr tusaale.

Ekeeye (ama ekeyn): xidhiidhka ka dhexeeya laba humaag. Waxaa xidhiidh laga-dhexeysiinayaa laba waxyaalood; sida, muuqooda (aragooda), dabeecadooda, awooddooda (xoogooda), dhererkooda, jileecooda, adkaantooda, iwm. Guud ahaan, ekeynta waxaad ku garanaysaa ereyadda ay ka-mid-yihiin: lagumood ama lamoodaa; geddeedii/geddiisii tahay; sida; caynkeedii/caynkiisii tahay; iwm. Ekeyn-tu waxaa weeye: wax aad taqaano ayaa waxaa loo-ekeysiinayaa wax kale oo aad taqaanay. Ekeyntu kuma eka suugaanta oo keliya. Ekeynta waxaynu ku isticmaalaa hadalka caadiga ah—tiraab-ta. Aynu soo-qaadano laba tusaale oo mid uu yahay "tiraab;" midna uu yahay "tix."

Tusaalaha tiraab-ta: "Maxamed waa libaax." Marka aan ku idhaahdo: "Maxamed waa libaax," waxaad ogtahay in aannan uga-jeedin in Maxamed uu yahay libaax dhab ah; oo taasi suurto-gal ma'aha. Waayo? Maxamed waa bani'aadam. Laakiin, ujeeddaddu waxaa weeye: dabeecadaha aynu ku naqaano libaaxa waxaa ka-mid-ah inuu yahay 'geesi." Sidaa awgeed, ujeeddaddu waxaa weeye inuu Maxamed sida libaaxa oo kale 'geesi' yahay. Markaa, hadalkeena ah "Maxamed waa libaax," waxay la-mid-tahay: Maxamed waa 'geesi.' Halkan waxaan xidhiidh ka dhexeysiiyey, geesinimadda libaaxa iyo geesinimadda Maxamed. Waxaan ku tusayaa in Maxamed iyo libaaxu ay iskaga-mid-yihiin dhinca geesinimadda. Tusaalooyin badan oo noocan oo kale ahna, waad maqashay in badan; sida, Xasan waa

Cigaal-shiidaad, oo looga-jeedo, waa 'fulay;' ama Saynab waa geenyo, oo looga-jeedo, way qurux-badantay.

Tusaalaha tix-da: waxaynu soo-qaadanaynaa mid-ka-mid ah gabayada ugu meeqaamka sareeya gabayada Soomaalida. Waa gabay uu tiriyey gabayaagii waynee ee Raage Ugaas (IHN). Raage ayaa waxaa ka-dhimatay xaaski-isii—oo la-odhan-jiray Faadumo Xuseen Faarax—oo uu Raage-na ula-baxay magaca "Faadumo Illo-biyo," oo uu aad u jeclaa. Hal-abuur Axmed Faarax Cali (Idaa-jaa) ayaa si qoto-dheer oo huffan uga sheekeeyey qisaddan. Qisaduna sidan ayay u dhacday.

Muddo markii ay wada-joogeen Faadumo iyo Raage, ayay Faadumo u dhibaad doonatay reerkoodii—aabaheed. Faadumo ". . . waxaa lasoo-siiyey awr gollal ah; rarro wada marriiman; qumbayaal sixin ah; tabaddo ood-kaca [muqumad]" iyo wax kasta oo reer qani ahi (reer ladan) ay gabadhooda (innantooda) ku dhibaadin-jirtay. Waxaa kale oo Faadumo lasoo-raaciyey rag badan oo xoolahaas la-kaxeeya, oo la-gaadhsiiya gurigeedii. Goor fiid ah ayay kusoo dhawaadeen degaankii ay Faadumo degenayd. Ragii xoolaha la-waday Faadumo waxay ku-tashadeen, go'aana ku-gaadheen, in aanay guriga Faadumo tagin wakhtiga fiidka ah; ee ay guriga tagaan barqada si ay dadku u arkaan xoolaha dhibaada ah ee Faadumo lasoo-siiyey. Laakiin, go'aankaas way diidey Faadumo. Waxay Faadumo tidhi, "Raage oo intaas ii jira, lagama yaabo in aan halkan [seexdo keligay]."

Ka dib, Faadumo waxay ragii u sheegtay inay gurigeeda u hoyanayso; iyagana ay la-kulmi-doonto berito barqaddii marka ay reerka u yimaadaan. Ayaan-darro'se, iyadoo Faadumo usii socota gurigeedii, ayuu dhexda ka-helay libaax dad-qaad ahi; halkaasna uu Faadumo ku cunay libaaxii. Markii uu waagii beryey, ayay ragii yimaadeen

gurigii; waxaanay la-kulmeen Raage Ugaas. Markii la-ogaaday in ay Faadumo maqantahay, ayaa loo xayd-xaytay in la baadi-goobo. Muddo-yar ka-dib, waxaa lasoo-helay raqdii Faadumo. Naxdin, argaggax, murugo, taah, reen, iyo calool-xumo ayaa isugu-biirtay Raage. Dhowr habeen ayuu Raage seexan-waayey, oo ku-dhamaystay soo-jeed iyo murugo. Ka dib, wuxuu Raage tiriyey gabayga caanka ah ee loo-yaqaano, "*Sida Koorta Yucub*." Hadaba, aynu sharaxno sida uu Raage u isticmaalay humaaga 'Ekeynta.' Sharax-aadan waxaa iska-leh Gaariye.

Raage wuxuu isticmaalay humaaga loo-yaqaano 'ekeyn.' Raage wuxuu doonayaa inuu inoo-sheego murugaddii, naxdin-tii, argaggaxii, iyo calool-xumaddii uu dareemey markii ay ka-dhimatay xaaskiisii uu jeclaa—Faadumo. Raage wuxuu soo-qaatay humaag ah 'san-qadh' ama 'dhawaaq.' Ka dib, wuxuu inoo-sheegayaa in 'san-qadhaas' ama 'dhawaaqaas' mid-la-mid-ahi uu qalbigiisa ka-baxaayey; ama uu qalbigiisu bixinaayey 'san-qadhaas' mid-la-mid ah, xanuun iyo murugo awgii; ama uu qalbigiisu u 'dhawaaqaayey' sida dhawaaqaas oo kale, xanuun iyo murugo awgii. Wuxuu xidhiidh ka-dhexeysiiyey 'san-qadhaha' ama 'dhawaaqyada' uu soo-qaatay iyo 'san-qadhii' iyo 'dhawaaqii' ka baxaayey qalbigiisa. 'San-qadha' iyo 'dhawaaqana' wuxuu uga-jeedaa in xanuun awgii uu qalbigiisa ka baxaayey 'san-qadhaahaas' iyo 'dhawaaqyadaas' uu soo-qaatay, murugo iyo xanuun awgii. Aynu soo-qaadano saddex meeris oo ka-mid-ah gabaygaas Raage:

Sida koorta yucub oo la-sudhay,
koromo buubaala;
. . .
Ama beelo kaynaanahoo,

kor u hayaamaaya;
. . .
Shini kaaluf galey ama sidii,
koron-korkoo oomey;

Saddexdan meeris micnaha qotoda-dheer ee ku-jira waxaa fur-furay Gaariye. Gaariye siddan ayuu u sharaxay. Bal waxaynu eegaynaa inta dhawaaq ee uu soo-qaatay Raage. Meeris walba waxaa ku-jiraa dhawaaq aad u dheer.

Meeriska koowaad: "*Sida koorta yucub oo la-sudhay, koromo buubaala*." Kow, Raage wuxuu soo-qaatay "koor." Koorta waxaa qoorta loo-sudhaa geela; waxaana laga-qoraa (laga-sameeyaa) dhirta. Marka uu geelu dhaqaaqo—iyadoo ay qoorta u-sudhantay koortu—waxay koortu bixisaa dhawaaq aad u dheer. Halkaas waxaynu ka fahanay in koortu ay bixiso dhawaaq aad u dheer. Laakiin, koortu way kala-dhawaaq dheertahay; waxaana ugu dhawaaq-dheer koorta laga-qoro (laga-sameeyo) geedka loo-yaqaano yicibta. Raage muu soo-qaadanin 'koor' walba, ee wuxuu soo-qaatay koorta laga-sameeyo geedka yucubta—oo ah koorta ugu dhawaaqa dheer. Ta kale, Raage muu-soo-qaadanin hal koor (xabad kaliya), wuxuu soo-qaaday kooro badan (dhowr koorood).

Laba, Raage markii uu koorahaas yucubta ah soo-qaatay, koorihii qoorta umuu-sudhin awr hayin ah; wuxuu qoorta u sudhay 'korommo;' oo minaheedu yahay: muu soo-qaadanin hal 'koran' oo kaliya; wuxuu soo-qaatay dhowr korran. Halkaas kagamuu hadhin Raage, muu soo-qaadanin korammo hayin ah; wuxuu soo-qaatay 'korammo buubaaya'—korromo bood-boodaaya. Bal aynu eegno dhawaaqa ay sameeyaan.

Horta koor waxaynu u naqaanaa inay leedahay dhawaaq aad u dheer. Koortuna isku mid maaha'e, waxaa ugu

dhawaaq dheer koorta laga qoro geedka yucib-ta. Marka koorta la-sudho awr hayin ahna, waxay bixisaa dhawaaq dheer. Laakiin, marka dhowr "koorood" la-sudho dhowr 'korammo' oo buubaaya, dhawaaqii wuxuu noqonayaa mid aad-iyo-aad u dheer.

Meeriska labaad: "*Ama beelo kaynaanahoo, kor u hayaa-maaya*." Kow, Raage wuxuu soo-qaatay beelo guuraaya. Marka ay beeshu guurayso, waxaa caado u ah dhawaaq aad u dheer. Marka odayga reerku uu subaxa-hore—isagoo weli dhulku madow yahay—uu ku dhawaaqo, "reerka raraay!" waxaa markiiba howsha bilaaba reerka oodhan: dumarka, caruurta, dhalinyaradda, iwm. Bulxan iyo dhawaaq ayaa isku-darasama. Dhinaca kale, xoolaha xeradda ku-jira ayaa iyaguna dhawaaqa ku-dara. Halkaaas waxaynu ka-aragnaa dhawaaqa uu leeyahay marka uu reerku guurayo.

Laakiinse, Raage muusoo qaadanin reer kaliya; wuxuu soo-qaatay 'reero'—reero badan. Marka ay reeruhu badan-yihiina, dhawaaqu aad ayuu ugasii badanayaa. Halkaa Raage kagamuu hadhin. Wuxuu soo-qaatay, reero 'kaynaan ah.' Keynaan micnaheedu waxaa weeye: col ayay ka-cararayaan ama ka-baxsanayaan. Hadii marka ay reeraha badani guurayaan ay yeeshaan dhawaaq aad u sareeya, sidee ayuu noqonaya marka ay reeruhu ka-cararayaan col, ee ay baqayaan? Dhawaaqu wuu kasii-darayaa. Halkana wuxuu soo qaatay dhawaaq aad u dheer.

Meeriska saddexaad: "*Shini kaaluf galey ama sidii, koron-korkoo oomey*." Kow, Raage wuxuu soo-qaatay laba wax-yaalood oo sameeya dhawaaq aad u dheer. Ta hore, wuxuu soo qaatay 'shinnidda." Marka ay shinniddu cadhooto, ee ay is difaacayso, waxaa mar kaliya duulaan qaada shinni aad u tirro-badan. Shinnidaasi markay duulaysana, waxay samaysaa dhawaaq aad u dheer. Hadaba, Raage muu-soo-qaadanin shinni duulaysa oo keliya. Wuuu soo-qaatay

shinni "kaaluf galey." Sida ay Soomaalidu tidhaahdo, habalka loo-yaqaano 'xoor-ka' ayaa marka uu doonayo inuu shinnida ka-boobo malabka, wuxuu sameeyaa: wuu ku-dhuusaa. Shinnidduna waxay aad u necebtahay dhuusadda xoorka. Sidaa awgeed, marka uu 'xoor-ku' ku-dhuuso shinnida, waxaa dhacda in shinnidu cadhooto, oo ay mar-kaliya dhamaanteed duusho iyadoo doonaysa inay is-difaacdo. Dhawaaqaas shinnidduna waa mid aad u dheer, marka la-joogo miyiga.

Laba, Raage waxaa kale oo uu soo qaatay 'koronkor." Koronkor-ku waxaa weeye 'hadhuudhka.' Marka hadhuudh-ka la karinayo—ee biyaha lagu-karinayo—wuxuu sameeyaa sanqad yar. Laakiinse, marka hadhuudhkii dabka saarnaa ee karaayey uu biyihii gudhsado (biyuhu ka dhamaadaan), digsiga waxaa kusoo-hadha hadhuudhkii oo biyo-beelay, oo dabkii saaran. Marka uu hadhuudhku xaal-adaas biyo-la'aanta ku jiro, wuxuu sameeyaa dhawaaq aad u dheer—waxaanu noqdaa 'salool."

Labadan dhawaaq—"shinnida kaaluf galay" iyo "koronkor-ka oomey"—waxay ina-tusayaan sida mala-shax-animadda leh ee uu Raage u isticmaalay humaagga 'ekeyn-ta." Tixaha kale ee isticmaalay ekeyntu aad ayay u tirro badan-yihiin; waxaana ka-mid-ah: "Sidii cir ku hoorey meel cosob-leh; oo cad-caadi usoo baxdaad tahay" Abwaan Huro

Gud-booneyn: is-bar-bar-dhiga laba humaag. Gud-boon-ayntu waxaa weeye: laba arimood ayaa lays bar-bar-dhigayaa si laguu tuso meelaha ay iskaga-midka-yihiin, ama ay ku kala-duwan-yihiin. Aynu soo-qaadano gabay ina tusaya gud-boonaynta.

Gabaygan waxaa tiriyey Cali Jaamac Haabiil. Cali wuxuu kasoo-hor-jeestay Sayid Maxamed Cabdulle Xasan; oo la-dagaalamaayey gumaystihii Ingiriiska (inkastoo uu Sayid-ku khaladaad badan sameeyey, ay ka-mid-ahaayeen inuu dad

Soomaaliyeed u laayey hab-qabyaaladaysan). Maadaama uu Sayid-ku isticmaalayey diinta Islaam-ka, waxay dad badanina u-arkayeen in dagaalku uu ka-dhexeeyo 'Daraawiish' oo 'Muslimiin' ah iyo Ingiriis oo 'gaalo' ah. Cali wuxuu doonaayey inuu ummadda ka-dhaadhiciyo inay kasoo-qorjeestaan 'Muslimiin-ta,' oo ay taageeraan 'gaaladda."

Cali wuxuu arkay in dooddiisu ay tahay dood aad u adag, oo aan si fuddud dadka looga-dhaadhicin-karin. Cali waxaa kale oo u muuqatay in hadii uu si-toos-ah u yidhaahdo, 'Muslimiin-ta ha-taageerina, ee waxaad taageertaan gaalada,' in aanay dadku ogalaanaynin. Hadaba, si uu ummadda uga-dhaadhiciyo dooddaas adag, wuxuu gabayaagu isticmaalay humaagga gub-boonayn-ta; waxaanu u dooday si aad u heer-saraysa, oo ay ku-dheehan-tahay male-shaxanimo qoto-dheeri. Wuxuu isticmaalay dariiqooyinka ugu sareeya ee doodaha loosoo jeediyo. Waa dariiqooyin iminka lagu dhigto jaamacadaha aduunka.

Wuxuu soo qaatay wax-yaalo badan oo kala duwan; ka dibna, wuu is-bar-bar-dhigay. Labadaas shay, ama wax-yaalood, ee uu is-bar-bar-dhigay, midi waa wax fiican, midina waa wax aan fiicnayn. Wuxuu doonayaa inuu dadka nacsiiyo wixii fiicnaa; dhinaca kalena, inuu dadka jecleysiiyo wixii aan fiicnayn. Wixii fiicnaa ayuu wuxuu u yeelay (u-sameeyey) iin (dhaliil); wixii xumanaa, wuxuu u-sameeyey wanaag. Markaa, wuxuu ku-dooday in wixii fiicnaa aanay dadku qaadanin (ama taageerin) maadaama uu wixii fiicnaa leeyahay iin (ama dhaliin); oo ay dadku qaataan (ama taageeraan) wixii xumaa, maadaama waxa xumi ay leeyihiin 'wax fiican." Aynu soo-qaadano dhowr meeris oo ka-mid-ah gabayga. Cali wuxuu yidhi:

Maddi carrar-ta, maqasheeda koris,
minnow-san-baa dhaanta;

Mataan liddiqa, laas maax ah-baa,
kuu mitibis dhaama;
Marwo camal xun, maan-gaab ninkeed,
maqasha-baa dhaanta;
Muslinimo nimaan kugu-dhaqayn,
muuminimo khaasa;
Gaal maxasta kuu dhowra ood ,
magan-sataa dhaama.

Si aad u fahanto qaabka loo-isticmaalo gud-boonayn-ta, aynu micnayno dhowr-ka meeris ee kor-ku-xusan.

Meeriska koowaad: "*Madi carrar-ta, maqasheeda koris, minnow-san-baa dhaanta*." Gaariye wuxuu meeriskan ku micneeyey siddan: "Madi" waxaa loo-yaqaan hasha caanaha badan. Hashii caanaha badnayd wuxuu bar-bar-dhigay hal kale oo caano yar "maqasheeda koris." Marka lays bar-bar-dhigo hal caano badan iyo hal caano yar, dadku waxay jecel-yihiin hasha caana badan. Laakiin, gabayaagu si uu kuu nacsiiyo hasha caanaha badan, wuxuu u yeelay iin (dhaliil). Dhinaca kalena, si uu kuu jecley-siiyo hashii caana yarayd ayuu u yeelay wanaag (amaan). Gabayaagu wuxuu ku dooday: in hasha caanaha badan ee marka la-lisaayo carrarta, ee dagaalanta, ee diida in la-liso, ay dhaanto hasha caanaha yar, ee la-lisi-karo, ee aan dagaalamaynin marka la-lisayo.

U fiirso, hashii caanaha bad-nayd ee aad jeclayd ayuu dhaliil u sameeyey si aad u nacdo; hashii caanaha yarad ee aanad jeclayna wanaag ayuu u sameeyey si aad u jeclaato. Waad ogolanaaysaa—oo waa runtii.

Meeriska labaad: "*Mataan liddiqa, laas maax ah-baa, kuu mitibis dhaam*a." Meeriskan wuxuu gabayaagu is bar-bar-dhigay (gud-booneeyey) laba arimood: "mataan" iyo "laas." "Mataan" waxaa weeye: isha biyaha badan—waa meel ay

kasoo bur-qanayaan biyo aad u badani; "laas" waxaa weeye: isha biyaha yar—waa meel ay kasoo bur-qanayaan biyo aad u yari. Sida caaddadda ah, dadku waxay 'laas-ka' biyaha yar leh ka-jecel-yihiin 'mataan-ta' biyaha badani kasoo burqanayaan. Laakiin, gabayaagu wuxuu iin (dhaliil) u sameeyey 'mataan-tii' biyaha badnayd; waxaanu wanaag u sameemey 'laas-kii' biyaha yaraa. Wuxuu yidhi: "Mataan lidiqa"—'lidiq' waxaa weeye 'dhoobo' ama 'wasakh.' Markaa, mataan-ta ay kasoo-burqanayaan biyaha badan ee 'dhoobada' ama 'wasakh-da' ah, waxaa kaaga fiican 'laas-ka' ay biyaha yari kasoo-burqanayaan ee nadiif-ta ah. Halkan, wuxuu gabayaagu ku ogolaysiiyey in aad nacdo biyihii badnaa; oo aad jeclaato biyihii yaraa. Waad ogolanaaysaa—oo waa runtii.

Meeriska saddexaad: "*Marwo camal xun, maan-gaab ninkeed, maqasha-baa dhaanta*." "Marwo" waa gabadha wanaagsan ee fariida ah, ee reer-keedda si fiican u dhaqata. "Maan-gaab" waa gabadh aan maskax badan lahayn; oo doqon ah. Sida caaddadda ah, ragu waxay jecel-yihiin gabadha 'marwadda' ah; waxaanay neceb-yihiin 'maan-gaab-ta." Hadaba, si uu gabayaagu kuu nacsiiyo 'marwadii' aad jeclayd; oo uu kuu-jeclaysiiyo 'maan-gaab-tii' aad necbayd, wuxuu sameeyey siddan: "marwadii" ayuu iin (dhaliil) u sameeyey; "maan-gaab-tiina" wanaag ayuu u sameeyey. Wuxuu yidhi: gabadha 'marwada' ah, ee laakiin dabeecada xun, waxaa dhaanta (ka-wanaagsan) gabadha 'maan-gaab-ta' ah, ee laakiin ku maqlaysa. Waad ogolanaaysaa—oo waa runtii.

Meerisyadda afaraad iyo shanaad: "*Muslinimo nimaan kugu-dhaqayn, muuminimo khaasa; gaal maxasta kuu dhowra, ood magan-sataa dhaama*." Gabayaagu labadan meeris ayuu kusoo-gebo-gebaynayaa gabaygiisa; waana ujeeddaddii uu u socday. Labadan meeris wuxuu is bar-bar-dhigay "Muslim"

iyo "gaal." Sida caaddada ah, marka laysu-kaa bar-bar-dhigo Muslim iyo gaal, waxaad raacaysaa (taageeraysaa Muslim-ka). Laakiin, gabayaagu Muslimiin-tii uu ka-hadlaayey—Sayid-ka iyo Daraawiish-tii—ayuu iin (dhaliin u sameeyey); gaaladiina wanaag ayuu u-sameeyey, si aad ugasoo hor-jeesato Muslimiinta, oo aad u-taageerto gaalada.

Wuxuu yidhi: qof Muslim ah oo aan kugu-dhaqaynin (ama kugu maa-mulaynin) sidii ay tiintu ina-fartay (oo ku dilaya ama dhibaato kuu gaysanaya); waxaa kuu-dhaama qof 'gaal' ah oo naftaada iyo maxas-taada kuu dhowra, oo aan wax dhibaato ah kuu gaysanin. Waana runtii—waad aqbalaysaa doodaaas. Tixo aad u tirro-badan ayaa istic-maala humaaggan gud-boonayn-ta.

Xus: xusiddu waxaa weeye "xusuus-waddareed"—sheekho bulshaddu ay wada taqaano. Sheekadaas ay bulshadu isla-taqaano ayaad "xusaysaa" oo aad soo qaadanaysaa. Xusidda marka la-isticmaalayo, waxaa la-xusaa (lasoo-qaataa; la-adeegsadaa) sheeko Soomaaliyeed oo ay bulshaddu isla-taqaano.

Xusidda sidan ayaa loo-isticmaalaa: waxaad doonaysaa in aad ka-hadasho dhacdo ama arin bulsho. Dhacdadda ama arinka bulshadda ee aad ka-hadlayso ayaa waxaad xusaysaa (soo-qaadanaysaa; adeegsanaysaa) sheeko la-mid-ah, ama kasoo-hor-jeeda, arinka aad ka-hadlayso. Tusaale aynu soo qaadano.

Gabayaagii waynaa ee Axmed Ismaaciil Diiriye (Qaasim), ayaa wuxuu doonaayey inuu la-taliyo walaalkii oo siyaasada ku-biiray. Sida laga sheekeeyey, doorashooyinkii dalka ka-dhici-jiray wakhtigii 1960-meeyaddii, ayaa nin ay Qaasim walaalo ahaayeen oo lagu-naanaysi-jiray "San-yare," wuxuu ku-biiray Xisbigii Somali Youth League (SYL). Xisbiga waxaa ka sharaxnaa (murrashax ka-ahaa) Ibraahim Cismaan Food (Bas-baas), oo ay isku reer yihiin Qaasim iyo

"San-yare." Qaasim wuxuu dareemay in "San-yare" uu Xisbiga SYL ugu biiray si uu u-taageero Bas-baas.

Hadaba, isagoo Qaasim la-talinaya walaalkii "San-yare," ayuu tix gabay ah tiriyey. Tix-ddan gabayga ah wuxuu Qaasim xusayaa (soo-qaadanayaa; adeegsanayaa) sheeko Soomaali. Qaasim wuxuu yidhi (waxaynu kasoo-qaadanaysaa dhowr meeris):

Sanyarow dharkayn lama cuniyo,
midho dhunkaaleede;
Dha-dhamooyin badan baa jiroo,
aad ku dhimataaye;
Dhereg ma-laha dhuuniga xun-een,
cunaha dhaafeyne;
Hal libaax dharqaday uu jidhiyo,
dhiigba ka idleeyey;
Haw dhuran dhurwaagii laftuu,
dhuuxay eersadaye;
. . .

Sheeko Soomaalida uu Qaasim xusay, waxay ku-jirtaa labada meeris ee u danbeeya (ee aan hoosta ka xariiqay). Labadaas meeris, waxaa ku-jira sheeko Soomaali. Gaariye ayaa sharaxaaddan ka-bixiyey. Sheekadduna waa siddan.

Libaax ayaa wuxuu helay hal (neef geel ah) oo baadi ah (soo luntay). Libaaxii ayaa hashii diley, oo cunay. Intii uu libaaxu hasha cunaayey, ayaa waxaa ag-tiisa joogay waraabe. Sida aynu naqaano, waraabuhu wuu ka-baqaa libaaxa. Sidaa awgeed, intii uu libaaxu hasha cunaayey, waraabuhu agtiisa ayuu meeraysanaayey; waxaanu sugaayey inta uu libaaxo ka-dhergaayo ee uu raqda ka dul-tegaayo. Markii uu libaaxi dhergey, ayuu iska-tagay.

Waraabihii ayaa bilaabay inuu cuno raqdii (hambadii)

uu libaaxu ka-tagey. Isagoo waraabihii feen-feennannaya lafihii hasha, ayaa waxaa soo dul-istaagay ragii ay hashu ka-luntay. Ragii waxay u-maleeyeen inuu waraabuhu hasha diley oo uu cunay. Ka dib, ragii waxay dileen waraabihii; isagoo waraabuhu aanu hasha wax badan oo hilib ahba ka cunin. Libaaxii hasha diley, ee hilibkeeda intii ugu fiicnayd cunayna, wuu bad-baadey oo ragii hasha iska-lahaa ismay arkin. Sidaa awgeed, waraabuhu wuxuu ku dhintay hal aanu waxba ka cunin. Sheekadu waa intaas.

Usoo noqo meeriskii gabayga Qaasim: "*Haw dhuran dhurwaagii laftuu, dhuuxay eersaday*." Halkan wuxuu Qaasim xusay sheekadaas kor-ku-xusan; waxaanu uga jeedaa in uu Bas-baas yahay libaaxa qaadanaya wixii anfac (faa'iido) leh; "San-yarena" uu noqon-doono waraabaha. Markaa wuxuu walaalkii kula-talinayaa: ha noqonin sidii waraabihii ku dhintay hal aanu waxba ka cunin.

Maadaama dadka Soomaalida ahi ay sheekadan yaqaanaan, marka uu Qaasim gabay-gaas tiriyey, dhamaantood way fahmeen ujeeddadda gabayga. Qaasim wuxuu xusay oo kaliya waraabe ku dhintay laf uu dhuuxay. Uma baahna inuu sheekada oo dhan ka wada sheekeeyo maadaama ay bulshada oo dhami taqaano sheekada. Tixo badan ayaa jira oo adeegsadday 'xusidda,' dhamaantoodna halkan kumasoo-koobi-karno. Laakiin, waxaan rajaynayaa in aad fahantay sida loo-isticmaalo 'xuska.'

Buun-buunin: arin looga hadlayo si aan macquul ahayn; waxaa la-dhaafinayaa xadkiisii caadiga ahaa. Buun-buunintu waxaa weeye: arin la-sharaxayo ayaa waxaa la-gaadhsiinayaa xad, ama derejo, aan caadi ahayn, ama aan macquul ahayn. Tusaale ahaan: Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame, ayaa wuxuu sameeyey hees aad u cajiib leh, oo caan ah, oo lagu magacaabo *Jacayl Dhiig Malagu Qoray*.

Hadraawi wuxuu ka-sheekeeyey qisaddii heesta. Wuxuu yidhi:

Waxaanu joogney guriga fanaanaddii waynayd Xaliimo Khaliif Cumar (Magool). Magool ayaa ii yeedhay. Waxay i fadhiisiyey qolkeeda; waxaanay iga codsatay inaan u akhriyo warqad uu usoo-diray nin u-dhashay wadanka Suudaan. Warqadu waxay ku qoranayd af-Carabi. Sida aynu wada ognahay, fanaaniinta Soomaalidu waxay u dhoofi-jireen wadamada aduunka si ay ugusoo-bandhigaan fanka Soomaalidda. Fanaanadda Magool-na waxaa codkeeda iyo heesaheeddaba aad u jeclaa dadka Suudaan-ta ah. Marka ay Magool tagto wadanka Suudaan, waxay mar-marka qaarkood ku heesi-jirtay heeso suudaani ah.

Hadraawi wuxuu akhriyey warqadii. Ninka Suudaanigga ahi, wuxuu warqada ku cadeeyey inuu aad u jeclaaday Magool. Warqadu waxay ku qoran-tahay khad casaan ah. Ninka Suudaanigga ahi wuxuu yidhi, "khadka aan waraaqda kuugusoo-qoray, qalin cas ma'aha . . . intaan siliij soo qaatay, oo xiddiddadayda mid dalooliyey, ayaan dhiig kasoo-qaaday. Qalinkii . . . ayaan ku shubay [dhiigii]; dabadeed, waxa aan warqada kusoo-qoray, waa dhiigaygii aan xiddidka kasoo-qaaday." Hadraawi wuxuu yidhi:

> Anig[a] dhulka ayaa ila-wareegay. Anba waxbaan tiriyaaye, laakiin inuu jacaylku ilaa heerkaa gaadhayo, oo xiddiddadda la-dal-daloolinayo, dee aniga iigumay jirin sheekadda . . . 'oo [jacaylkaad] ku ciyaaraysay . . . ma siddan ayuu halis u yahay?' '[su'aashaas] ayaan is-weydiiyey. Magool warqadiibaan u akhriyey; laakiin . . . raad culus ayuu ninkii hadalkiisii igu-reebay . . . [Aakhirkii], waxaan gudoontay [go'aansadday] in aan ninkaasi wuu iga-yaabiyee, isagana ka yaabiyo.

Sheekadaas kor-ku-xusani, waxay ina-tusaysaa buun-buuninta. Suurto-gal ma'aha inuu qof dhiigiisa tuunbo kusoo nuugo, si uu dhiiga uga-dhigto khad uu wax ku-qoro. Ninka Suudaanigga ahi jacaylkii uu u qabay Magool ayuu buun-buuniyey, oo uu gaadhsiiyey meel aan macquul ahayn. Laakiinse, ujeeddaddiisu waxay ahayd inuu Magool ogaysiiyo in jacaylka uu u qabaa uu aad u qoto-dheer-yahay.

Hadaba si uu Hadraawi uga-yaabiyo ninkaa Suudaanigga ah, ayuu isaguna wuxuu sameeyey heesta la-yidhaahdo, *Jacayl Dhiig Malagu Qoray*. Heestan wuxuu Hadraawi isticmaalay buun-buunin halkii ugu saraysay, isagoo tilmaayaya inuu jacaylku gaadhi-karo heer aan macquul ahayn. Aynu soo qaadano dhowr tudduc oo ka-mid-ah heesta. Hadraawi wuxuu yidhi:

Jacayl dhiig ma-lagu-qoray?
Weli dhuux ma-loo-shubay?
Qofna saanta dhabar-kiyo,
Ma-u-dheegey feedhaha?
Dhabanada cad laga-jaray,
Hadalkii ma-lagu-dhigay?
Xinjir aan is-dhalan-rogin,
Midab-keedu dhiin-yahay,
Laga dhuray halbowlaha,
Weli dhiil ma lagu shubay?
Laba mays-dhansiiyeen,
Sida dhayda xoolaha,
Dhag-dhag ma-u-wadaageen?

Cajiib!

Marka aad akhriddo midhahaas heesta ee kor-ku-xusan, waxaad arkaysaa in aanay suurto-gal-ahayn in jacayl awgii dhuux loo-shubbo; ama loo-dheego saanta dhabarka ama

feedhaha. Waxaa kale oo aan suurto-gal ahayn in jacayl awgii dhabanadda cad laga-jaro, oo cadkaas dhabanadda laga-jaray hadalkii lagu-qoro. Sida caadiga ah ee aynu isla-naqaano, arinkaasi marna suuro-gal ma'aha. Laakiin, abwaanku wuxuu isticmaalay buun-buunin si uu inoo tuso heerarka khatar-ta ah ee uu jacaylku gaadhi-karo.

Dhowr-kaa tusaale ee kor-ku-xusani waxay ina-tusayaan kaalinta muhiimka ah ee ay ee humaagayn-tu ku-leedahay suugaanta.

Far-shaxanimo iyo Male-shaxanimo

Waa maxay far-shaxanimo iyo male-shaxanimo? Marka aynu ka hadlayno qaabaynta suugaanta—tix-da ama sawir-gacmeedka—waxaynu soo sheegnay inay labaduba isticmaalaan humaagyo. Hadaba, dadka tix-da tirinaya ama sawir-gacmeedka samaynayaa waxay ku kala-xariifsan-yihiin sida ay u isticmaalaan humaagyadda. Marka ay doon-ayaan inay arin ka hadlaan, humaagyadda ay soo-qaataan wuu kala-duwan-yahay. Dadka qaar waxay xushaan humaagyo aad u fud-fudud; ama waxaa ku adag sida ay humaagyadda u isticmaali-lahaayeen. Dadka qaar-koodna aad ayay ugu xeel-dheer-yihiin xulashada iyo isticmaalka humaagyadda labadaba.

Far-shaxan: marka uu qofku sawirayo sawir-gacmeed ee uu yahay qof aad u yaqaana sida loo-xusho, ee loo istic-maalo, humaagyada waxaa loo yaqaan: *far-shaxan*. Far-shax-anku waa qof si qoto-dheer u xusha una isticmaala humaagyadda. Ka dibna, si qurux-badan, oo qoto-dheer, u isticmaala faraha uu ku sawirayo saawirka.

Male-shaxan: dhinaca tix-da, marka qofka tix-da tiri-nayaa uu aad ugu fiican-yahay xulashadda iyo isticmaalka humaagyada, waxaan anigu u bixiyey inuu qofkaasi yahay

male-shaxan. Male-shaxanimaddu waxaa weeye qof si qurux-badan, oo qoto-dheer, u xusha una isticmaala humaagyadda. Xulashadda iyo isticmaalka humaagyaddu waa meelaha ugu muhiimsan ee ay ku kala-horeeyaan dadka tix-da tiriya ama sawir-gacmeedka sawiraa. Laakiin, waa xirfad uu qofka suugaan-yahanka ahi baran karo, hadii uu isku taxalujiyo fahankeeda; kune cel-celiyo isticmaalkeeda. Qofka tix-da tiriya ee male-shaxanka ah iyo ka sawir-gacmeedka sawira ee far-shaxanka ahiba, waxay noqdaan dad tix-dooda ama sawir-gacmeedkoodu uu noqdo mid ummadda soo-jiita, taariikhdana gala.

Erey Suugaaneed

Waa maxay erey suugaaneedku? Erey suugaaneedku waxaa weeye, ereyo af-Soomaali ah oo suugaanta gaar u ah. Waa ereyo aanay dadka caadiga ahi isticmaalin maalin walba. Laakiin, erey suugaaneedku intaas kuma eka. Halkan waxaan ku faah-faahinayaa micnaha qotada-dheer ee erey suugaaneedka.

Kow, suugaantu waxay bedeshaa micnaha ereygu leeyahay ee ay ummaddu isla taqaano. Erey af-Soomaali ah, oo ay ummadu micne u taqaano, ayay suugaantu micne kale u samaysaa. Taas micnaheedu ma'aha in ay suugaantu khaldan-tahay. Waxaa weeye in suugaantu aanay ogolayn in micnaha ereyada loo xaddido. Gaariye ayaa si fiican u sharaxay qodobkan; waxaanu tusaale usoo qaatay jaamacadaha.

Sida aynu ognahay, jaamacaduhu waxay leeyihiin kuliyado (deparments) kala duwan. Kuliyadahaas waxaa kamid-ah: kuliyada siyaasada; kuliyada sharciga; kuliyada dhaqaalaha; kuliyada bay'oo'lo'jiga; iwm. Kuliyadahaas kala-duwani, dhamaantood waxay isticmaalaan luqada af-

Soomaaliga. Laakiinse, ereyada ay isticmaalayaan ayay kuuliyad waliba micne gaar ah u taqaanaa. Tusaale ahaan, kuliyada dhaqaaluhu erey ay micne gaar ah u taqaano, ayaa kuliyada siyaasadu micne kale u taqaan. Kuliyad walibana ma ogola in ay qaadato micne kale oo aan ahayn micnaha ay iyagu u isticmaalaan kelemedahaas. Dhinaca kale, kuliyad waliba si cad ayay u sharaxdaa ereyada ay isticmaalaan, si loo fahmo. Sidaa awgeed, kuliyadihii waxay sameeyeen inay ereyadii ku xidheen gidaaro aan la dhaafi karin.

Hadaba, suugaantu waxay jebisaa gidaaradaas lagu xidhay; waxaanay diidaa micnayaashaas ay kuliyaduhu u samaysteen ereyada. Waxaa kale oo jira, kelemdaha ay shacabka caadiga ahi isticmaalaan ee ay micnaha gaarka ah u yaqaanaan, suugaantu way diidaa oo micne kale ayay u samaysataa marka ay doonto.

Laba, micnaha kale ee uu leeyahay erey suugaaneedku waxaa weeye: ereyo af-Soomaali ah oo suugaanta u gaar ah. Taas micnaheedu ma'aha in aanay dadku ereyadaas u isticmaali karin hadalka caadiga ah. Way isticmaali karaan. Laakiinse, sida caadada ah dadku ma isticmaalaan ereyadaas marka ay sheekaysanayaan. Waa ereyo culus, oo adag. Sidaa awgeed, dadka badankoodu ma yaqaanaan micnaha ereyadaas. Hadii uu qofku isticmaalo ereyadaas isagoo dad u sheekaynaya, waxaa hubaal ah in aanay dadka badankoodu fahmin hadalkiisa.

Sida Loo-qiimeeyo Suugaanta

Marka la-qiimaynayo suugaanta, waxaa jira dariiqooyin kala-duwan oo loo-maro. Dariiqooyinkaas kala-duwannina waxay inaga-caawinayaan inaynu suugaanta ka-qiimayno meelo kala-duwan. Waxaynu soo-qaadanaynaa lix dariiqo

oo kala-duwan. Lixdaas dariiqo ee kala-duwan, dariiq waliba wuxuu inga-caawinayaa in aynu suugaanta ka-qiimayno dhinac gaar ah. Sidaa awgeed, suugaanta waxaynu ka-qiimaynayaa lix meelood oo kala-duwan. Lixdaas dariiqana waxay kala-yihiin siddan soo-socota:

Ujeeddadda: ujeeddaddu waxaa weeye: sababta loo-sameeyey. Waa maxay ujeeddadda (sababta) loo-sameeyey suuganta aad doonayso inaad qiimaysaa? Jawaabta su'aashaasi waxay inaga caawinaysaa inaynu fahano laba arimood oo muhiim ah: *xaaladda* iyo *nuxur*-ka. Maxaan uga-jeedaa "xaaladda" iyo "nuxur-ka?" Xaaladdu waxaa weeye: duruufaha dhaqaale, siyaasadeed, dhaqan, fahan-diimeed, wax-barasho, xadaaradeed, iwm., ee ay bulshaddu ku sugnayd markii la-sameeyey suugaantaas (tix ama sawir-gacmeed) aynu qiimaynayno. Marka aad si-qoto-dheer, oo huffan, u fahanto xaaladda ay bulshaddu ku sugnayd wakhtiga la-sameeyey suugaanta aad qiimaynayso, waxaad u-gudbaysaa qodobka ku-xiga oo ah nuxur-ka. Nuxur-ku waxaa weeye: arinka ay ka-hadlayso suugaanta aad qiimay-naysaa; ama sida ay suugaantu uga-hadashay xaaladaas ay bulshaddu ku sugantay.

Labadaas marka aad fahanto, ayaa waxaa kuu fuddu-daanaya inaad si fiican u fahanto ujeeddada loo-sameeyey suugaantaas aad qiimaynayso. Hadii aad doonayso inay kuu fuddudaato fahanka ujeeddaddu, waxaad is-weydiisaa su'aalahan: waa kuma qofka sameeyey suugaantu? Waa maxay sababta uu u-sameeyey? Goorma (taariikh-dee, wakhtigee) ayaa la-sameeyey? Halkee (degaan-ka, ama wadanka) lagu sameeyey? Waa maxay wax-yaalaha saamaynta ku yeeshay qofka sameeyey suugaanta? Yaa hadlaya?—ma waxaa hadlaya qofka suugaanta sameeyey laftiisa; ma waxaa hadlaya qof kale; mise bulshadii; ma

waxaa hadlaya xoriyadii; ma waxaa hadlaya dhaqankii; iwm?

Mawduuc: mawduucu waxaa weeye waxa ay suugaantaasi ka-hadlayso. Ma waxay ka-hadlaysaa dhowr mawduuc oo kala-duwan, mise hal mawduuc? Waa maxay arinka ugu culus ee salka u ahi? Mawduuc-yadda waxaa ka-mid-ah: dhaqan; diin; falsafad; jacayl; xoriyad; siyaasad; deegaan; dhaqaale; haween; iwm.

Cod (dareen): cod-ka ama dareen-ku waxaa weeye: marka ay hadlayso (ama sawirto), shucuur noocee ah ayay xambaarsantay. Suugaanta aad qiimaynayso cod-keedu ama dareen-keedu ma waxaa weeye: murugo; farxad; dhiilo; cadho; rajo-la'aan; farxad; xukun; diidmo; dhaliil; iwm.

Humaagyadda: marka laga-eeyago dhinaca tixda, humaagayntu waa ereyo xambaarsan (ama ku-tusaya) sawir-maskaxeed. Sawir-maskaxeedkaasina, wuxuu dareenkaaga ku-beerayaa shucuur; sida, farxad, murugo, cadho, rayn-rayn, murugo, iwm. Waa ereyo kuu sawiraya dhacdo-bulsheed, kuuna tusaya qaab ka-duwan qaabka aad u-arkaysay. Dhinaca sawir-gacmeedka, humaagayntu waa sawir-gacmeed isaguna xambaarsan sawir-maskaxeed sida tix-da oo kale; inkastoo uu tixda kaga-duwan-yahay dariiqa uu inoo-soo-maro oo ah 'aragtidda.'

Hadii aynu dhowr ka tilmaano humaagyadda la-istic-maalo, waxaa ka-mid-ah: ekeyn; gud-booneyn; qofayn; xus, yam-xeerid; sila-suggan; tibaax, astaamayn; iwm.

God-ka: god-ku waxaa weeye: nooca tix-da (sawir-gacmeed-ku isna wuu leeyahay). Tix-du waxay leedahay goddad kala-duwan, oo mid waliba uu leeyahay hab-u-dhac gaar u ah. Si aad u ogaato god-ka (ama nooca tix-du) tahay, waxaad kala-fahantaa goddadka tix-uhu kala-leeyihiin; iyo hab-u-dhaca kala-duwan ee ay leeyihiin. Goddad-ka tix-da

waxaa ka-mid-ah: gabay, geeraar, maanso, hees, buraan-bur, iwm.

Saddexda Derejo ee Qiimaynta Suugaanta

Suugaantu waxay leedahay derajooyin kala-sareeya. Laakiin, waxaa is-weydiin muddan: sidee ayaa loo-qiimaynayaa derajooyinka ay suugaantu kala-leedahay? Jawaabtu waxaa weeye: derejadda suugaantu waxay ku-xidhan-tahay kolba dhinaca laga-qiimeeyo. Waxaad ka-qiimayn-kartaa dhinac kaliya; sida, "humaagayn-ta," ama dhinaca "erey suugaaneed-ka" oo kaliya; ama dhinaca "mawduuca" oo kaliya, iwm. Tusaale ahaan, hadii aad ka-qiimaynayso dhinaca "humaagayn-ta," oo ay tix-duna si male-shaxanimo leh, oo aad u heer-saraysa, u isticmaashay "humaagayn-ta," markaa waxay yeelanaysaa derajo sare. Hadii aad ka qiimayso dhinaca "erey-suugaaneed-ka," oo ay tix-duna isticmaashay "erey-suugaaneed" cudoon, oo aad u quruxbadan, markaana waxay yeelanaysaa derejo sare.

Dhinac-yadaas kala-dudwan—iyo qaar kale oo aad u tirro-badanba—waa laga-qiimeeyaa suugaanta; waana meelo aad-iyo-aad u muhiima oo kuu muujinaya male-shaxanimda, miisaanka iyo quruxda tix-da; iyo weliba hoddanimadda qofka tix-da sameeyey. Qaybahaas kala-duwan mid-waliba wuxuu leeyahay muhiimadiisa gaar-ka ah.

Aniguse, maadaama aan doonaayo in aan kuu cadeeyo in aany tixaha Soomaalida ku jirin wax xigmad ahi (marka laga reebo "Sirta Nolosha" iyo "Af-ku-Siran"), waxaan ka-qiimaynayaa: mawduuca oo kaliya. Waayo?

Sababta aan uga qiimaynayo dhinaca mawduucu waxaa weeye: si aynu u ogaano in suugaanta (tix-da) Soomaalida ay ku jirto xigmadi, waa in aynu qiimaynaa mawduuca ay tix-

du ka-hadlayso. Mawduuca ayaa ina-tusaya inay tix-da ku-jirto wax xigmad ahi, iyo in aanay ku-jirin wax xigmad ahi. Marka aynu doonayno inaynu ogaano in tix-da ay ku-jirto xigmadi, dhinacee ayaa haboon in aynu ka-qiimayno suugaanta? Ma waxaynu ka-qiimaynaa dhinaca:

Humaagayn-ta: Maya. Waayo? Humaagayn-tu ina-tusi-mayso inay tix-da ku-jirto xigmadi. Humaagayn-tu waa qalab la-isticmaalo. Laakiin, humaagayntu ma'aha xigmad. Qalab-ka la isticmaalayaa ma noqon-karo xigmad. Waxaad ku-doodi-kartaa: qalabka humaagaynta sida loo-sameeyey ayaa ah xigmad? Taasina ma'aha sax. Sababtoo ah, qalabka 'humaagantu' waa dariiq la-raaco oo inoo fuddeeya in aynu fariinteena ugu gudbino tix-ahaan, sida ugu saraysa. Waxaa jira tixo (gabayo) Soomaaliyeed oo si aad u heer-saraysa u-isticmaalay 'humaagayn-ta;" laakiin, aanay wax xigmad ahi ku-jirin (gabayadaas waxaan kugu tusayaa halka hoose).

Erey-suugaaneed-ka: Ma waxaynu ka-qiimaynaa dhinaca 'erey-suugaaneedka?' Maya. Waayo? Erey suugaaneed-ku ina-tusi-maayo in tix-da ay ku-jirto xigmadi. Erey-suugaaneed-ku waa erey u gaar ah suugaanta. Waa ereyo aanay dadku guud ahaan isticmaalin. Ereyadaasi waa ereyo uu isticmaali karo qof walba oo tixaha tirin-yaqaanaa. Laakiin, erey-suugaaneed-ku isagu sidiisa uma aha xigmad. Wuxuu xigmad noqon-karaa marka lagu-isticmaalo fikir qoto-dheer, oo falsafad ah, oo xigmadaysan.

Mawduuca: Ma waxaynu ka-qiimaynaa dhinaca mawduuca? Haa. Waayo? Sida aynu og-nahay, tix-du waa hadal. Laakiinse, hadalka caadiga ah way ka-duwan-tahay, sida aan kor-kusoo-sharaxay. Maadama ay tix-du tahay hadal, xigmadu xagee ayay kaga-jirtaa? Tusaale ahaan: hadii uu qof tiriyo tix uu mawduuceedu uu aad u liito (ama mawduuceedu aanu micno badan lahayn); laakiin, uu si-qoto-dheer, oo male-shaxanimo leh, u isticmaalay humaagayn-ta

iyo erey-suugaaneed-ka, tix-diisu ma noqonaysaa xigmad? Maya. Waayo?

Sababtu waxaa weeye: hadii uu mawduucaagu yahay mawduuc aad u liita, oo khariban ama aan micno badan lahayn, humaagayn-ta iyo erey-suugaaneed-ku kama dhigayso tixdaas xigmad. Laakiinse, hadii mawduuca aad ka-hadlayso, iyo sida aad uga-hadlaysaa, uu yahay mawduuc aad u qoto-dheer, oo falsafadaysan (oo aanad isticmaalin humaagayn iyo erey-suugaaneed midna), tixdaasi waxay noqonaysaa tix xigmad leh. Halkaa waxaa inooga cadaaday in marka la qiimaynayo in tixda ay ku jirto xigmadi iyo in aanay xigmadi ku jirin, in laga qiimeeyo dhinaca mawduuca.

Hadaba, si aan doodaas kuugu iftiimiyo, waxaynu soo qaadanaynaa suugaantii Soomaalida kuwii ugu heerka sareeyey. Suugaantaas waxaynu u kala-qaybinaynaa saddex meeqaam: (1) suugaan hoose; (2) suugaan dhexe; iyo (3) suugaan sare (xigmad).

Kow, suugaanta hoose waxaa weeye suugaan uu qiima-heedu aad u hooseeyo, oo diciif ah. Suugaanta hoose waxaa ka-mid-ah: suugaanta dadka cayda; suugaanta dadka isku-dirta ee dhiiga Muslimiin-ta daadisa (ama jecel inay daadiso); suugaanta amaanta madaxda aan dadkooda u fiic-nayn; iwm. Laba, suugaanta dhexe waxaa weeye sugaanta ka-hadasha dhacdo-maalmeed-ka. Suugaantan dhexe waxay ka-hadashaa dhacdooyinka ay bulshadda oo dhami ogtahay ee dhexdeeda ka-jira. Dhacdo-maal-meedka ay ka-hadasho suugaanta dhexe waxaa ka mida: 'qabyaalad ayaa ummaddii dib-u-dhigtay;' 'musuq-maasuq ayaa jira;' 'dadkii wadankii way ka tahriibayaan;' 'deegaankii waa la-baa'bi'i-nayaa;' iwm. Saddex, suugaanta sare waxaa weeye suugaanta ku-salaysan falsafada. Waa suugaan si-qoto-dheer, oo falsafadaysan, uga hadlaysa, oo u sharaxaysa,

nolosha. Suugaantani waxay ka-hadashaa arimo aanay dadku wada-ogayn, oo aanay fahansanayn; ama waxay dadka ku-baraarujisaa, oo dareensiisaa, in sida ay nolosha u fahan-sanyihiin ay khaldan-tahay. Suugaantan sare waa suugaanta ay ku-jirto xigmaddu; waana suugaanta ugu-saraysa.

Markii aan qiimeeyey suugaanta Soomaalida (intii aan anigu arkay) anigoo ka-qiimaynaya dhinca mawduuca, waxaan qiray inay jiraan laba 'maanso' oo xigmad ah. Labadaas maanso waxaa sameeyey Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi). Labadaas maansana waxay kala-yihiin: "*Sirta Nolosha*" iyo "*Af-ku-Siran*." Marka labadaas maanso laga-reebo, ma-jirto suugaan Soomaaliyeed oo kale, oo ay wax xigmad ahi ku jirtaa (intii aan arkay).

Hadaba, waxaan soo-qaadanayaa suugaanta Soomaalida kuwa ugu caansan, ee ugu qiimaha badan. Suugaantaas waxaynu qiimaynaynaa inay leedahay wax xigmad ah iyo in aanay lahayn xigmad. Suugaanta aan soo-qaadanayana waxaa ugu-badan gabayo iyo geeraaro caan ah, oo bulshadda Soomaalidu taqaano.

Waxaynu soo-qaadanaynaa lix (6) tix-ood. Lixdaas tixood meeqamkoodu wuu kala-sareeyaa. Suugaantan waxaynu ka-qiimaynaynaa dhinaca mawduuca—oo ah arinka ay ka-hadlayso suugantu. Marka aynu ka-eegno dhinaca mawduuca, lixdaas (6) tixood, waxay yeelanayaan meeqaamyaddan kala-duwan: laba (2) tixood waxay noqonayaan "Suugaanta Hoose;" laba (2) tixood waxay noqonayaan "Suugaanta Dhexe;" laba (2) tixood waxay noqonayaan "Suugaanta Sare."

SUUGAANTA HOOSE

Gabayga Iaad

Dun-dumooyinkoo lala-hadlaa,
damac ma yeeshaane;
Dawo malaha naagtii xun ee,
diidda waanada'e;
Doqontii ku yeeshaa wuxuun,
lagu dabiibaaye;
...
Naag yahay Dannood-baa u weyn,
harada Doolloode;
Duunyada haddii lagu horoo,
saalo lagu daadsho;
Iyaba waa dikhowdaa haddaan,
la-isu diideyne;
...
Dawgii la-marayaa dhexduu,
derri ku yeeshaaye;
Dermadaan la-laabini dhakhsay,
duug u noqotaaye;
Dukhsigaa ku dhaca xeedhadaan,
dabaqu saarrayne;
...
Dirxilaha Madheedh waa cas yahay,
daawashada guude;
Dawliilka baas waxad ku hodi,
duul aan ku aqoonne;
...
Geelaa markuu darrarran yahay,
laba nin duugtaaye;
Wax kaloo la-daran-doorriyaa,
damac ma yeeshaane;



Gabayga 2aad

Isagoo dil-dilihii bisha,
iyo dacaydii haaneed-leh;
Oo wada dunnuu-nucahayuu,
idin dul-joogaaye;
Danbarkiisu way-diin uraa,
waana dabataane;

Laba tix-ood (gabay): labadaas gabay ee aynu kor-ku-xusnay, waxay labaduba ku-jiraan meeqaam-ka ugu-hooseeya ee suugaanta. Aan gabay walba si gaar ah u micneeyo.

Gabayga 1aad: gabayga koowaad, waa gabay 'cay' ah. Gabayaagu wuxuu ku-talax-tagay, oo uu si xun u caayey xaaskiisii uu qabay. Wuxuu xaaskiisa ku eedaynayaa inay samaysay "goggol-dhaaf." Gabaygaas 'cay-da' ah, ee aadka u anshaxa darran, ee aan diin iyo dhaqan midna meel ku-lahayn, markii uu gabadhiisa u tiriryey, ninkii waa la-xukumay. Waxaa lagu-xukumay: kow, inuu bixiyo magtii gabadha; sababtoo ah, waxba ulamuu hadhin gabadhaas; laba, waxaa kale oo lagu-xukumay in gabayga laga-mamnuucay—in aanu dib u gabyin. Labadaas xukun-ba waxay ahaayeen laba xukun oo sax ah.

Hadaba, hadii aad gabaygaas ka-qiimayso dhinaca 'humaagaynta' iyo 'erey-suugaaneed-ka,' wuxuu noqonayaa gabayadda ugu qiimaha sareeya gabayadda Soomaalidda. Taas waxaa markhaati u ah: iyadoo uu gabaygu yahay 'cay,' hadana bulshadda Soomaalidu ilaa iminka way soo-xigtaan, ama way isticmaalaan, meerisyo badan oo gabay-gan ku-jira. Sababta gabaygaas 'xun' ee 'cayda' ah loo-isticmaalayaana waxaa weeye: wuxuu gabayaagu isticmaalay 'humaagayn' iyo 'erey-suugaaneed' aad u qurux-badan, oo

uu u isitcmaalay si male-shaxanimo aad u saraysa ah. Sidaa awgeed, marka gabaygan laga-qiimaynayo dhinaca 'humaagayn-ta' iyo 'erey-suugaaneed-ka,' waa gabay aad u meeqaam sareeya. Waxaad is waydiisaa: gabaygan miyey ku jirtaa wax xigmad ahi? Jawaabtaadu waxay noqonaysaa, MAYA. Waayo? Gabay cay ahi marna ma noqonayo xigmad.

Hadii ay xigmaddu ku-jirto 'humaagayn-ta' iyo 'erey-suugaaneed-ka,' gabaygani wuxuu galayaa kaalinta "Suugaanta Sare." Laakiin, hadii laga-qiimeeyo dhinaca mawduuca, gabaygani wuxuu galayaa "Suugaanta Hoose.' Sababtoo ah, waa gabay lagu caayey gabadh xaas ah. Halkaa waxaa inooga cadaatay in marka la-qiimeynayo in tix-da ay ku-jirto 'xigmdi' iyo in aanay 'xigmaddi' ku jirin, meesha laga-qiimaynayaa ay tahay dhinaca 'mawduuca."

Gabayga 2^{aad}: gabayga labaad, waa gabay 'dira-dirayn' ah. Gabayni waa gabay isku-diraya laba beelood (laba qabiil). Gabayaagu wuxuu doonaayey inuu isku-diro laba beelood oo wada-deggen. Labadaas beelood mid-ka-mid ah ayuu wuxuu u sheegayaa in geeloodii ay xoog ku-haystaan beesha kale. Sidaa awgeed, wuxuu beeshaas ku-guubaabinayaa inay la-dagaalamaan beesha kale oo ay geeloodda kasoo-dhacsadaan. Waa gabay ay ujeeddaddiisu tahay in uu dhiig dad Muslimiin ah daadiyo.

Hadii aynu gabayga ka-qiimayno dhinaca 'humaagayn-ta' iyo 'erey-suugaaneed-ka,' wuxuu noqonayaa gabayadda ugu meeqaamka sareeya Soomaalida. Waayo? Gabaygu wuxuu isticmaalay 'humaagayn' iyo 'erey-suugaaneed' aad u sareeya. Laakiin, hadii aynu ka-qiimayno dhinaca 'mawduuca,' gabaygani wuxuu noqonayaa gabayada ugu liita, ee ugu meeqaamka hooseeya Soomaalida. Sababtoo ah, dad Muslim ah ayuu doonayaa inuu dhiigooda daadiyo. Waxaad is waydiisaa: gabaygan miyey ku jirtaa wax xigmad ahi? Waa maxay xigmada ku jira in dhiig Muslim la daadiyo? Halkana

waxaa inooga muuqata in aanay 'humaagayn-ta' iyo 'erey-suugaaneed-ku' ahayn meesha laga-eego in tix-du ay 'xigmad' leedahay iyo in aanay 'xigmad' lahayn. Waxaa inoo cadaatay in marka la-qiimaynayo in tix-da ay ku-jirto 'xigmaddi,' meesha aynu ka-qiimayn-karnaa aanay ahayn 'humaagayn-ta' iyo 'erey-suugaaneed-ka,' ee ay tahay 'mawduuca.'

SUUGAAN DHEXE

Gabayga 1aad

"*Macaan iyo Qadhaadh*:" gabaygan waxaa tiriyey Axmed Ismaaciil Diiriye (Qaasim). Waxaynu is waydiinaynaa: gabaygan "*Macaan iyo Qadhaadh*," ma yahay gabay ay ku-jirto 'xigmadi,' mise waa gabay aanay ku-jirin wax 'xigmad' ahi? Aynu soo-qaadano dhowr meeris oo gabaygan ka-mid-ah:

Dacartuba marbay malab-dhashaa,
ood muud-sataa dhabaqe;
Waxaan ahay macaan iyo qadhaah,
meel ku-wada-yaale;
. . .
Marbaan ahay maqaam awliyaad, maqaddinkoodiiye;
Marna muddanka shaydaanka iyo,
maal jin-baan ahaye;
. . .
Malaa'iigta naartiyo jannadu,
waygu murtaantaaye;

Gabayga aynu sharaxno. Gabayga 'cida' hadlaysaa ma'aha qofka gabayga tiriyey. Qaasim ma hadlaayo isagu.

Cida hadlaysaa waxaa weeye bani'aadamkii. Waayo? Cida hadlaysa waxaa ku-tusaya meeriskan ku-jira gabayga: "*Malaa'iigta naartiyo jannadu, waygu murtaantaaye*." Wa'ayo cida ay malaa'igta naarta iyo malaa'igta jannaddu ay ku-murantaa? Ma waxay ku-murmeen Qaasim? Jawaabtu waa maya. Qisaddii ay diintu inooga sheekaysay ee malaa'iigta naarta iyo kuwa jannaddu ay ku-murmeen ninkii dhintay, waynu wada-naqaanaa. Markaa cida ay malaa'igtu ku-murmeen wuxuu ahaa qof bani'aadam ah; Qaasina waa bani'aadam. Sidaa awgeed, cida hadlaysa ee odhanaysa "waxaa igu murma ma'aaligta naarta iyo kuwa jannaddu" waa bani'aadam-ka.

Gabaygani wuxuu qalabkii suugaanta u isticmaalay si aad u heer saraysa. Marka laga-eegayo dhinaca 'humaagayn-ta,' 'erey-suugaaneed-ka,' iyo 'dariiqooyin-ka,' iwm., gabaygani wuxuu noqonayaa gabayadda ugu sareeya suugaanta Soomaalida. Laakiinse, hadii aynu ka qiimayno dhinaca 'mawduuca,' gabaygan wax xigmad ahi ku ma jirto? Bal aynu eegno.

Maadaama gabaygan cida hadlaysaa ay tahay bani'aadam-kii, waxay bani'aadamku sheegayaan inay dadku kala-duwan-yihiin; sida, wadaad, hogaamiye, dilaa, beel-daaje, sakhraan, iwm. Kala-duwanaan-shahaas bani'aadamka ee uu gabaygu ka-hadlayo (iyagoo ay bani'aadamkii hadlayaan), waa kala-duwanaansho aynu dhaamaanteen-ba naqaano. Dhamaanteen waynu naqaanaa in uu jiro qof 'wadaad' ahi; iyo qof "waran'le" ahi; qof 'wabiin' ahi; iyo qof 'hogaamiye' fiican ama "hogaamiiye" xun ahi; iwm. Waa kala-duwanaansho uu bani'aadamku leeyahay oo aynu mar-walba aragno. Hadaba, waxaa is-weydiin-leh: waa maxay 'xigmadda' ku-jirta, 'bani'aadamku wuu kala-duwan-yahay? Waynu ognahay inuu bani'aadamku kala-duwan-yahay. Wax xigmad ahi kuma-

jirto. Gabaygu wuxuu inoo-sheegay wax aynu naqaanay; wax cusub inoomuu-sheegin. Maalin walaba waad aragtaa, ama waad maqashaa, qof tuug ah, qof sakhraan ah, qof wanaagsan, qof xun, iwm. Waa maxay xigmada ku jirta intaasi? Hadii gabaygan aad u bedesho hadal caadiya, gabaygu wuxuu noqonayaa: in bani'aadamku uu leeyahay dabeecado iyo hab-dhaqan kala duwan. Sidaa awgeed, gabaygani wuxuu ku jiraa Suugaanta Dhexe.

GEERRAARKA 2AAD

"'*Toloow!' Colka Jooga*:" geerraar-kan waxaa tiriyey Salaan Maxamed Xirsi (Salaan Carabay). Waxaynu is waydiinaynaa: geerraar-kan "'Toloow!' Colka Jooga:" ma yahay geerraar ay ku-jirto 'xigmadi,' mise waa geerraar aanay ku-jirin wax 'xigmad' ahi? Aynu soo-qaadano dhowr tudduc oo geerraarkan ka-mid-ah:

Maalintii Cumar Daahir,
Isu gooyay cayaartiyo,
Nin Caloolacad joogay,
Oo Meygaag Ciidan war qaatay,
Belaayuu curufkeediyo,
Cidhib-teeda danbeetiyo,
Camalkeeda yaqaanoo,
Waa cibaaro qabaaye,
Waar toloow, colka jooja!

Nin habeenno casheeyay,
Cadar aan hadh lahayn iyo,
Ceeryaamay-sugu toostoo,
Inuu caafiyaddiisa,
Cabbaar meel la fadhiisto,

Cindigaaney gelaynoo,
Ceeryaan aan hadh lahayn iyo,
Ciiruunbay-sugu toostoo,
Waa calaamad iblayse,
Kala cawdu bilaystoo,
Waar toloow, colka jooja!

Qisadda geeraarka. Waxaa dagaal isusoo-hor-fadhiistay laba jilib oo ka mid ah beesha uu ka dhashay Salaan. Labada jilib waxay isusoo-gurteen wixii ay hub haysteen; waxaanay u diyaar-garoobeen inay dagaalamaan. Odayaal isugu-jira culimo iyo guurti ayaa isku dayey inay kala dhex-galaan, oo dagaalka baajiyaan. Laakiin, way ku guulaysan-waayeen. Labadii jilib way diideen heshiisiintii.

Markay xaaladii adkaatay, ayuu Salaan odyashii ku yidhi, "Sheek, af-kaa aad kula-hadashay ee diinta ah garan-maayaane, af ay yaqaanaan maku dayaa?" Sheekhii ayaa ugu jawaabay, "Haa! Hadaad maanta ku kala-dareeriso, ajar weyn ayaad yeelanaysaa." Sidaa aawadeed, geerraar-kan wuxuu Salaan ku baajiyey dagaal-kaas dhex-mari-lahaa labadaa jilib ee kasoo-jeedda beeshiisa. Salaan wuxuu isku deyey inuu u caqli celiyo raggii colaadda hurinayey oo uu xasuusiyey cawaaqib-xumida iyo cidhib-xumidda ay colaaddu leedahay. Salaan wuu ku-guulaystay inuu dagaalkaas baajiyo. Geerraarku waa geerraar nabadeed.

Sharaxaadda geerraar-ka. Geerraar-ku wuxuu ka hadlayaa dagaalo hore oo dhex-maray beelo kala-duwan, oo rag badannina ay ku dhinteen. Dhacdooyinkaas uu xusaayo geerraar-ku wuxuu uga gol-leeyahay inuu labadaas beelood ku dareensiiyo cawaaqib-xumidda uu leeyahay dagaalku. Waxaa kale oo uu Salaan geerrar-kan ugu sheegay labadaas beelood, in beeshiisa Salaan ay godob ka-tirsanayso labadaas beelood oo rag ka diley beeshiisa. Sidaa awgeed,

wuxuu Salaan uga digayaa labadaas beelood: hadii ay dagaalamaan in uu rag badani ka dhiman-doono. Markuu ragaasi ka dhintana, ay noqon-doonaan beel tirradoodii raggu is-dhinto, oo yaraato. Marka ay tirrada ragoodu yaraatana, ay dhici-doonto inuu Salaan reerkoodu weerar kusoo-qaadi-doono beelahaas; maadaama ay beesha Salaan godob ka-tirsanayso labaadaas beelood.

Hadaba, waxaas oo dhibaato ahi si aanay usoo gaadhin labadaas beelood, wuxuu geerraar-ku ugu digayaa in ay colaada iyo dagaalka joojiyaan: "Waar toloow, colka jooja!"

Hadii geerrar-kan laga qiimeeyo dhinaca 'humaagaynta,' 'erey-suugaaneed-ka,' iyo 'dariiq-yadda,' wuxuu noqonayaa geerraarradda ugu meeqaama sareeya suugaanta Soomaalida; waxaanu gelayaa "Suugaanta Sare." Laakiin, hadii aynu ka-qiimayno dhinaca 'mawduuca,' wuxuu noqonayaa geerraar fiican; laakiin, wax xigmad ahi aany ku-jirin. Waayo?

Mawduuca uu ka-hadlayo geerraar-ku waxaa weeye: cawaaqib-xumidda uu dagaalku leeyahay; waliba dagaalka sokeeye. Waa xaqiiq jirta. Dhamaanteena waynu ognahay cawaaqib-xumidda uu leeyahay dagaalka sokeeye. Geerraar-ku inoomuu-sheegin wax cusub oo aynaan ogayn. Wuxuu ka-hadlayaa arin aynu dhamaanteen naqaano. Geerraar-ku muu keenin fikir cusub; ama fahan cusub oo nololeed. Waa maxay xigmadda ku jirta: "waar ha dagaalaminee, dagaalka joojiya. Cawaaqib-xumo ayuu leeyahay dagaalku." Inkastoo aanu isagu ereyadaas isticmaalin, hadana micnaha iyo mawduuca geerraar-ku waa intaas. Bes. Waa maxay xigmadda ku-jirta intaas? Jawaab: wax xigmad ahi kuma-jirto. Sidaa awgeed, geerraarkani wuxuu ku jiraa Suugaanta Dhexe.

Dadka qaar ayaa waxay ku odhanayaan: "dadka uu la hadlaayey, ayaa waxaa ku jira dad aan intaasba

fahansanayn. Sidaa awgeed, dadkaas ayuu wax u sheegaayey." Waa fikir fiican. Waana wax fiican in dadka aan fahansanayn intaas wax loo sheegaa. Laakiin, taasi waa wax u sheegid fiican; ee ma'aha xigmad. Xigmadu way ka saraysaa qof ama dad gaar ah oo lala talinayo.

SUUGAANTA SARE (XIGMADA)

Markii aan qiimeeyey suugaanta Soomaalida, waxaa iisoo baxay laba maanso oo gaadhay kaalinta Suugaanta Sare (Xigmada). Labadaas maansana waxaa sameeyey Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi). Labadaas maanso waxay kala-yihiin: *Sirta Nolosha* iyo *Af-ku-Siran*. Waa laba maanso oo falsafad dhab ah ku salaysan. Hadii labadaas maanso la fur-furo sharaxaadooda, waxaa laga qori-karaa buuggaag aad u tirro-badan. Sidaa awgeed, iima suuro-galayso in aan labadaas maanso halkan ku fur-furo ama ku sharaxo. Inkastoo aan isku dayey in aan sharaxo, hadana go'aankaas dib ayaan uga noqday. Waayo? Waxaan dareemay in sharaxaadoodu (ama mid kaliya sharaxaadeedu) ay qaadnayso buug ama buuggaag badan. Sidaa awgeed, buuggani iima saamaxayo in aan maansooyinkaas fur-furo. Qaybo ka-mid-ah maansooyinkaas halkan waan ku fur-furi karaa; laakiin, taasina waxay nusqaan ku noqonaysaa maansooyinkaas aadka u heerka sareeya ee xigmadu ka buuxdo. Mar hadii aannan maansada dhamaanteen fur-furaynin, waxaa haboon in aannan qayb ka-mid-ah halkan ku fur-furin. Sababtoo ah, waa maanso wada socota oo aan meel kaliya laga tegi-karin. Sidaa awgeed, akhristaha ayaan u dhaafayaa inuu maansooyinkaas fur-furo, oo uu fahmo, falsafada qotoda-dheer ee ku duugan.

AFEEF: waxaan ka afeefanayaa in aannan suugaanta

Soomaalida dhameenteed wada arkin. Ma jiro qof Soomaaliyeed oo ku doodi-kara inuu wada arkay suugaanta Soomaalida dhamaanteen. Sidaa awgeed, hadii ay jirto suugaan Soomaaliyeed oo ay xigmadi ku jirto, waxaan codsan-lahaa in layla wadaago; ama bulshada loosoo bandhigo xigmada ku jirtaa waxa ay tahay. Iyadoo ay taasi jirto, hadana waxaan ogahay in aan isku taxalujiyey akhrinta suugaanta Soomaalida intii ugu badnayn.

Suugaanta Soomaaliddu Xigmad Malaha

Marka aynu doonayno in aynu ogaano in suugaan-ta Soomaalida ay ku-jirto 'xigmadi' iyo in aanay ku-jirin 'xigmadi,' sidee ayaynu ku-ogaanaynaa? Hadii aan si kale u dhigo: dhinacee ayaynu ka-qiimaynayaa suugaanta marka aynu doonayno in aynu ogaano in ay ku-jirto 'xigmadi' iyo in aanay ku-jirin 'xigmadi?' Sida aynu kor-kusoo-sharaxnay, marka suugaan-ta la-qiimaynayo waxaa laga-qiimeeyaa meelo-badan. Laakiinse, marka la-doonayo in la-ogaado in suugaanta ay ku-jirto 'xigmadi' iyo in aanay 'xigmadi' ku-jirin waxaa laga qiimeeyaa dhinaca mawduuca.

Waxaan soo qaadanayaa gabayadii ugu cuslaa ee Soomaalida. Soomaaliduna waxay inaga dhaadhicisay in ay gabayadan ku jirto xigmadi. Laakiin, maanta waxaan kuu cadaynayaa in aanay gabayadan ku jirin wax xigmad ahi.

"*Sida Koorta Yucub*:" gabaygan waxaa tiriyey Raage Ugaas. Sidii aynu kor-kusoo-xusnay, gabaygan wuxuu Raage tiriyey markii ay ka-dhimatay xaaskiisii oo uu aad u jeclaa. Raage wuxuu doonaayey inuu inoo-sheego naxdintii, murugadii, iyo calool-xanuunkii uu dareemay markii ay xaaskiisu ka dhimatay. Hadaba, si uu inoo dareensiiyo murugadaas ku-dhacday, wuxuu Raage isticmaalay 'dhawaaqyo' kaladuwan oo aad u tirro-badan. Wuxuu gabayga inoogu shee-

gayaa in 'dhawaaq-yadaa' kala-duwan ee uu gabayga inoogu-sheegay mid-la-mid-ihi uu qalbigiisa ka-baxaayey; ama uu qalbigiisu sidaas oo kale u dhawaaqaayey. Maadaama aynu naqaano dhawaaqyadaas uu gabayga ku sheegay inay yihiin dhawaaqyo aad u dhaa-dheer, waxaynu fahmaynaa in hadii dhawaaq-yadaas oo kale ay qalbigiisa ka baxayeen muruggo awgeed, uu Raage dareemaayey muruggo aad u xun. Aynu soo qaadano dhowr meeris oo gabayga ka-mid-ah.

Sida koorta yucub oo la-sudhay,
koromo buubaala;
. . .
Ama beelo kaynaana ahoo,
kor u hayaamaaya;
. . .
Shini kaaluf galey ama sidii,
koron-korkoo oome;
...
Kub miyaan ka-jabay biixi aan,
kabayo loo-haynin.

Dhowrkan meeris micnahooda iyo male-shaxanimadda heerka-sare ah ee ku-jirtaba waxaynu kusoo sharaxnay boggaga hore. Gabaygan marka laga-qiimeeyo dhinaca 'humaagan-ta,' 'erey-suugaaneed-ka,' 'dariiqooyin-ka,' iwm., wuxuu galayaa "Suugaanta Sare;' waxaanu noqonayaa gabayada ugu meeqaamka sareeya Soomaalida. Raage wuxuu isticmaalay 'humaagayn-tii,' 'erey-suugaaneed-kii,' iyo 'dariiqooyin-kii' ugu-sareeyey ee suugaanta. Intaas waynu u qiraynaa gabayga "Sida Koorta Yucub."

Laakiin, sida aynu kor-kusoo-xusnay, marka aynu baadhayno in gabaygan ay ku-jirto xigmadi iyo in aanay ku-jirin,

kama eegi-karno dhinacyadda 'humaagayn-ta,' 'erey-suugaaneed-ka,' iyo 'dariiqooyin-ka.' Waayo? Sababtu waxaa weeye: 'humaagayn-ta,' 'erey-suugaaneed-ka,' iyo 'dariiqooyin-ku' waa qalab la-isticmaalo marka suugaanta la-tirinayo, ama la-samaynayo. Qalabku ma'aha xigmad. Si aan kuugu cadeeyo, waxaynu soo qaadanaynaa gabayga aynu kor-ku-xusnay ee uu gabayaagu ku caayey xaaskiisa.

Gabayaayaasi wuxuu isticmaalay 'humaagayn-tii,' 'erey-suugaaneed-kii,' iyo 'dariiqooyin-kii' ugu-saraysay. Hadii aynu gabaygaas 'cayda' ah ka-qiimayno isticmaal-ka qalabka suugaanta, wuxuu ka-mid-noqonayaa gabayadda ugu meeqaamka sareeya suugaanta Soomaalida. Laakiinse, inkastoo uu gabaygaasi si male-shaxanimo ah u isticmaalay qalabkii suugaanta, hadana wuxuu noqday gabay aad u liita; sababtoo ah, waa gabay lagu caayey gabadh. Waxa aad u khariban 'mawduuca' uu gabaygu ka hadlayo. Halkaa waxaa inooga cadaatay in marka aynu doonayno inaynu baadhno in gabayga ay xigamadi ku-jirto iyo in kale, aynu ka qiimayno dhinaca 'mawduuca.'

Hadaba, waxaynu is waydiinaynaa su'aashan: gabayga "*Sida Koorta Yucub*," ma yahay gabay ay ku-jirto 'xigmadi,' mise waa gabay aanay ku-jirin wax 'xigmad' ahi? Sidii aynu kor-kusoo-xusnay, waxaan sharaxay micnaha ereyga 'xigmad.' Micnaha 'xigmadduna' wuxuu isugusoo-biyo-shubanayaa, ama gunaanad-kiisu noqonayaa: fahanka nolosha. Si kasta oo aad u micnayso ereyga 'xigmad,' waxaad fahmaysaa in micniihuusu isugusoo-urrurrayo: fahanka nolosha. Xigmaddu ma'aha maaweelo iyo madadaalo. Waxaan uga-jeedaa, xigmaddu ma'aha wax laysku maaweeliyo. Xigmaddu waxay sharaxdaa, oo ay ina-fahansiisaa, noloshan aynu ku noolahay bulsho ahaan (diintu xigmada way ka-saraysaa).

Hadaba, marka aynu baadhayno in gabaygani uu

leeyahay 'xigmad' iyo in kale, waxaynu ka qiimaynaynaa dhinaca 'mawduuca.' Waa maxay mawduuca uu gabaygu ka-hadlayaa? Gabayga mawduuciisu waxaa weeye: nin ay gabadhiisii ka-dhimatay oo murugooday. Gabaygu wuxuu sharaxayaa xanuunkii ay murugaddaasi ku haysay ninkii ay gabadhu ka-dhimatay. Waa maxay xigmadda ku-jirta nin ay gabadhii ka-dhimatay oo murugaysani? Dhamaanteen waynu fahmi karnaa murugadda ay leedahay xaaskaagii oo kaa dhimatay; ama ninkaagii oo kaa dhintay. Wax cusub ma'aha. Bani'aadamka oo dhami wuu fahan-sanyahay murugaddaas. Sidaa awgeed, marka laga qiimeeyo dhinaca mawduuca, gabaygan "*Sida Koorta Yucub*," wax xigmad ah oo ku-jirtaa ma-jirto. Waxaa aan qirayaa in gabaygani uu yahay gabay ay qalbiga ku-qaboojin-jaraan dadka ay ka dhintaan lamaanahoodu. Laakiinse, wax xigmad ah oo ku-jirtaa ma-jirto.

"*Macaan iyo Qadhaadh*:" gabaygan waxaa tiriyey Axmed Ismaaciil Diiriye (Qaasim). Waxaynu is waydiinaynaa: gabaygan "*Macaan iyo Qadhaadh*," ma yahay gabay ay ku-jirto 'xigmadi,' mise waa gabay aanay ku-jirin wax 'xigmad' ahi? Aynu soo-qaadano dhowr meeris oo gabaygan ka-mid-ah:

Dacartuba marbay malab-dhashaa,
ood muud-sataa dhabaqe;
Waxaan ahay macaan iyo qadhaadh,
meel ku-wada-yaale;
. . .
Marbaan ahay maqaam awliyaad,
maqaddinkoodiiye;
Marna muddanka shaydaanka iyo,
maal jin-baan ahaye;
. . .

Malaa'iigta naartiyo jannadu,
waygu murtaantaaye;
. . .

Gabayga aynu sharaxno. Gabayga 'cida' hadlaysaa ma'aha qofka gabayga tiriyey. Qaasim ma hadlaayo isagu. Cida hadlaysaa waxaa weeye bani'aadamkii. Waayo? Cida hadlaysa waxaa ku-tusaya meeriskan ku-jira gabayga: "Malaa'iigta naartiyo jannadu, waygu murtaantaaye." Wa'ayo cida ay malaa'igta naarta iyo malaa'igta jannaddu ay ku-murantaa? Ma waxay ku-murmeen Qaasim? Jawaabtu waa maya. Qisaddii ay diintu inooga sheekaysay ee malaa'i-igta naarta iyo kuwa jannaddu ay ku-murmeen ninkii dhin-tay, waynu wada-naqaanaa. Markaa cida ay malaa'igtu ku-murmeen wuxuu ahaa qof bani'aadam ah; Qaasina waa bani'aadam. Sidaa awgeed, cida hadlaysa ee odhanaysa "waxaa igu murma ma'aaligta naarta iyo kuwa jannaddu" waa bani'aadam-ka.

Gabaygani wuxuu qalabkii suugaanta u isticmaalay si aad u heer saraysa. Marka laga-eegayo dhinaca 'humaa-gayn-ta,' 'erey-suugaaneed-ka,' iyo 'dariiqooyin-ka,' iwm., gabaygani wuxuu noqonayaa gabayadda ugu sareeya suugaanta Soomaalida. Laakiinse, hadii aynu ka qiimayno dhinaca 'mawduuca,' gabaygan wax xigmad ahi ku ma jirto? Bal aynu eegno.

Maadaama gabaygan cida hadlaysaa ay tahay bani'aadam-kii, waxay bani'aadamku sheegayaan inay dadku kala-duwan-yihiin; sida, wadaad, hogaamiye, dilaa, beel-daaje, sakhraan, iwm. Kala-duwanaan-shahaas bani'aadamka ee uu gabaygu ka-hadlayo (iyagoo ay bani'aadamkii hadlayaan), waa kala-duwanaansho aynu dhaamaanteen-ba naqaano. Dhamaanteen waynu naqaanaa inuu jiro qof 'wadaad' ahi; iyo qof 'wabiin' ah; iyo qof

'hogaamiye' ah; iwm. Waa kala-duwanaansho uu bani'aadamku leeyahay oo aynu mar-walba aragno.

Hadaba, waxaa is-weydiin-leh: waa maxay 'xigmadda' ku-jirta, 'bani'aadamku wuu kala-duwan-yahay? Waynu ognahay inuu bani'aadamku kala-duwan-yahay. Wax xigmad ahi kuma-jirto mawduufa ama fariint gabaygan. Gabaygu wuxuu inoo-sheegay wax aynu naqaanay; wax cusub inoomuu sheegin. Hadii gabaygan aad u bedesho hadal caadiya, gabaygu wuxuu noqonayaa: in bani'aadamku uu kala-duwan-yahay.

"*Rogow! Kibirka waa Lagu Kufaa*:" gabaygan waxaa tiriyey Ismaaciil Mire. Waxaynu is waydiinaynaa: gabaygan, ma yahay gabay ay ku-jirto 'xigmadi,' mise waa gabay aanay ku-jirin wax 'xigmad' ahi? Aynu soo-qaadano dhowr tudduc oo gabaygan ka-mid-ah:

Adaa dunida kaligaa leh-buu,
Koofil eersadaye;
Kashiisaba ma-gelin wiil yar-baa,
keebka kuu qabane;
Ragow kibirka waa lagu kufaa,
kaa ha la ogaado;
. . .

Qisadda gabayga. Gabaygan wuxuu Ismaaciil la-hadlaayey nin la-odhan-jiray Carab Dheere. Sheekadda uu gabaygu ka-curtayna waxaa si-kooban uga-sheekeeyey qoraa Axmed Faarax Cali (Idaa-jaa). Gabaygan wuxuu Ismaaciil tiriyey qiyaastii 1920-yaddii; isagoo jooga Laas-caanood. Wakhtigaas, waxaa degeenka ka-talin-jiray gumaystihii Ingiriiska. Maamulka degmadaasna wuxuu Ingiriisku u dhiibay, oo maamuli-jiray Carab Dheere. Carab

wuxuu ahaa nin dadka uu maamulo aad ugu kibri-jiray; oo gabood-fallo badan gaystay.

Maalin-maal-maha ka-mida, ayaa Ismaaciil isagoo dhaan wada ayuu yimi Laas-caanood. Carab ayaa maqlay inuu Ismaaciil magaalada yimi. Ka dib, Carab ayaa u yeedhay Ismaaciil, waxaanu ku yidhi, "Aroos ayaan leeyahaye, caawa aad ka-gabaydid [arooskee], Ismaaciilow caawa noo-joog." Ismaaciil wuxuu ugu-jawaabay, "Ma joogi-karo. Dad iyo maato ooman ayaan ka-imiye, faraha iga qaad." Carab wuxuu amray inuu Ismaaciil joogo, isagoo u hanjabaya.

Maalmo-ka-hor, ayaa wuxuu Carab diley nin wadaad (sheekh) ahaa oo la-odhan-jiray Aw-yamiin, oo uu Ismaaciil-na si fiican u yaqaanay. Aw-yamiin si anshax xun ayuu Carab u diley. Sida la-sheegay, Aw-yamiin inta xadhko lagu xidh-xidhay ayaa geed lagasoo laa-laadiyey. Sidii uu geedkaa uga laa-laaday ayaanu ku dhintay. Ismaaciil warkaas wuu maqlay dhacdadaas murugadda leh; sidaa awgeed, naftiisa ayuu u baqday (cabsooday), waanu joogay. Laakiin, markii uu Ismaaciil arooskii yimid, ayuu Carab ku-yidhi: "Hadii aan gabyo, iigu balan-qaad in aanad i dilin." Carab-na wuu ka-aqbalay; waxaanu ugu balan-qaaday in aanu dileynin. Qisadaa ayuu ka curtay gabayga "*Ragow Kibirka waa Lagu Kufaa*."

Sharaxaadda gabayga. Gabaygan wuxuu Ismaaciil kula-hadlayaa Carab. Maadaama uu Carab ahaa nin kibir-badan, oo ummadda ku kibra. Gabaygu wuxuu Carab uga digayaa cawaaqib xumadda uu leeyahay kibir-ku. Si uu Carab u dareensiiyo cawaaqib xumadda laga-dhaxlo kibir-ka, gabaygu wuxuu xusayaa (soo qaadanayaa) dhacdooyin kala-duwan oo ku suntan taariikhda Soomaalida. Dhacdo kastaana waxay ku salaysan-tahay taariikh dad hore oo kibray, iyo cawaaqib xumaddii ay ka dhaxleen kibirkoodii.

Markuu gabaygu ka hadlo dhacdooyinkaas taariikhigga ah, ayaa gabaygu wuxuu kusoo gebo-geboobayaa digniin uu siinaayo Carab.

Hadii gabaygan laga-qiimeeyo dhinacyada "humaagaynta," "erey-suugaaneed-ka," "dariiqyadda," wuxuu noqonayaa gabayada ugu meeqaamka sareeya Soomaalida; waxaanu gelayaa kaalinta "Suugaanta Sare." Laakiinse, hadii laga-qiimeeyo dhinaca 'mawduuca,' waxaa kuu cadaanaya in aanay wax 'xigmad' ahi ku-jirin gabaygan. Waayo? Gabaygu wuxuu ka hadlayaa arin aynu dhamaanteen naqaano. Dadku way yaqaanaan in kibir-ku aanu fiicanyn; diinteena ayaa inoo sheegtay. Waynu naqaanaa cawaaqib xumadda laga-dhaxlo kibir-ka. Iyadoo ay taasi jirto, haddana waxaa jira dad kibir badan oo aan dan ka lahayn waxaas oo dhan. Dadkaasi awood ayay leeyihiin ay wax walba ku muquuniyaan. Dan iyo muraad toona kama laha cida ay ku kibrayaan. Dhinaca kale, dooda gabayga ee ah in kibirka lagu kufaa, ma'aha fikir sax ah? Kibirka laguma kufo? Aniga ayaa kuu cadaynaya. Wadanka Maraykan-ka, waxaa kusoo duulay oo qabsaday dad kasoo jeedaa qaarada Yurub. Dadkaasi waxay si kibir ah u xasuuqeen dadkii iska lahaa wadanka Maraykan-ka. Ka dibna, waxay kibir usoo afduubeen dad kale oo madow ah oo ay kasoo afduubeen qaarada Africa, si ay ugu shaqaysteen. Dadkaas Maraykan qabsaday, dhowr boqol oo sanadood ayay wadankaas ay kibirka ku qabsadeen maamulaan. Iyaga ayaa iska yeeshay. Weliba waxay noqdeen dadka aduunka ugu quwada wayn dhinac walba. Waxaa kale oo ay si kibir ah ugu duulaan wadamada kale ee aduunka. Maxay Maraykan-ku ugu kufi waayeen kibirka ay sameeyeen? Waa dood aanay waxba ka jirin in kibirka lagu kufaa.

Qofka ku dooda "kibirka ayaa lagu kufaa," waa qof laga adkaaday oo diciifnimo badan dareemaya. Qofka quwada

lehi (ee og in aan cidi ka adkaanaynin muddo dheer), marka ma yidhaahdo "kibirka waa lagu kufaa." Waa qof is huba oo sidii doono u dhaqma. Laakiin, marka qofka laga adkaado, ee la jabiyo, ayuu ereyadaas ku calaa-calaa. Waa ereyo muujinaya qof la jabiyey, oo bilaa awood dareemaya.

Siday doontaba ha ahaatee, gabaygani inoomuu sheegin wax 'nolosha bulshada wax ka-bedla.' Gabaygu muu keenin fikrad cusub; ama hab-u-fikir cusub oo aynaan hore u arkin. Gagaygu wuxuu si tixaysan, oo aad u qurux-badan, inoogu sheegay uun arin aynu dhamaanteen naqaano. Sidaa awgeed, gabaygan kuma jirto wax xigmad ahi.

"'*Toloow!' Colka Jooga*:" geerraar-kan waxaa tiriyey Salaan Maxamed Xirsi (Salaan Carabay). Waxaynu is waydiinaynaa: geerraar-kan "'Toloow!' Colka Jooga:" ma yahay geerraar ay ku-jirto 'xigmadi,' mise waa geerraar aanay ku-jirin wax 'xigmad' ahi? Aynu soo-qaadano dhowr tudduc oo geerraarkan ka-mid-ah:

Maalintii Cumar Daahir,
Is ku gooyay cayaartiyo,
Nin Caloolacad joogay,
Oo Meygaag Ciidan war qaatay,
Belaayuu curufkeediyo,
Cidhib-teeda danbeetiyo,
Camalkeeda yaqaanoo,
Waa cibaaro qabaaye,
Waar toloow, colka jooja!

Nin habeenno casheeyay,
Cadar aan hadh lahayn iyo,
Ceeryaamaysugu toosta,
Oo inuu caafiyaddiisa,
Cabbaar meel la fadhiisto,

Cindigaaney gelaynoo,
Ceeryaan aan hadh lahayn iyo,
Ciiruunbay-sugu toostoo,
Waa calaamad iblayse,
Kala cawdu bilaystoo,
Waar toloow, colka jooja!

Qisadda geeraarka. Waxaa dagaal isusoo-hor-fadhiistay laba jilib oo ka mid ah beesha uu ka dhashay Salaan. Labada jilib waxay isusoo-gurteen wixii ay hub haysteen; waxaanay u diyaar-garoobeen inay dagaalamaan. Odayaal isugu-jira culimo iyo guurti ayaa isku-day-day inay kala-dhex-galaan, oo dagaalka baajiyaan; laakiin, way ku guulaysan-waayeen. Labadii jilib way diideen heshiisiintii. Markay xaaladii adkaatay, ayuu Salaan odyashii ku yidhi, "Sheek, af-kaa aad kula-hadashay ee diinta ah garan-maayaane, af ay yaqaanaan maku dayaa?" Sheekhii ayaa ugu jawaabay, "Haa! Hadaad maanta ku kala-dareeriso, ajar weyn ayaad yeelanaysaa." Sidaa aawadeed, geerraar-kan wuxuu Salaan ku baajiyey dagaal-kaas dhex-mari-lahaa labadaa jilib ee kasoo-jeedda beeshiisa.

Salaan wuxuu isku deyey inuu u caqli celiyo raggii colaadda hurinaayey oo uu xasuusiyey cawaaqib-xumida iyo cidhib-xumidda ay colaaddu leedahay. Salaan wuu ku-guulaystay inuu dagaalkaas baajiyo. Geerraarku waa geer-raar nabadeed.

Sharaxaadda geerraar-ka. Geerraar-ku wuxuu ka hadlayaa dagaalo hore oo dhex-maray beelo kala-duwan, oo rag badannina ay ku dhinteen. Dhacdooyinkaas uu xusaayo geerraar-ku wuxuu uga gol-leeyahay inuu labadaas beelood ku dareensiiyo cawaaqib-xumidda uu leeyahay dagaalku. Waxaa kale oo uu Salaan geerrar-kan ugu sheegay labadaas beelood, in beeshiisa Salaan ay godob ka-tirsanayso

labadaas beelood oo rag ka diley beeshiisa. Sidaa awgeed, wuxuu Salaan uga digayaa labadaas beelood: hadii ay dagaalamaan in uu rag badani ka dhiman-doono. Markuu ragaasi ka dhintana, ay noqon-doonaan beel tirradoodii raggu is-dhinto, oo yaraato. Marka ay tirrada ragoodu yaraatana, ay dhici-doonto inuu Salaan reerkoodu weerar kusoo-qaadi-doono beelahaas; maadaama ay beesha Salaan godob ka-tirsanayso labaadaas beelood. Hadaba, waxaas oo dhibaato ahi si aanay usoo gaadhin labadaas beelood, wuxuu geerraar-ku ugu digayaa in ay colaada iyo dagaalka joojiyaan: "Waar toloow, colka jooja!"

Hadii geerrar-kan laga qiimeeyo dhinaca 'humaagaynta,' 'erey-suugaaneed-ka,' iyo 'dariiq-yadda,' wuxuu noqonayaa geerraarradda ugu meeqaama sareeya suugaanta Soomaalida; waxaanu gelayaa "Suugaanta Sare." Laakiin, hadii aynu ka-qiimayno dhinaca 'mawduuca,' wuxuu noqonayaa geerraar fiican; laakiin, wax xigmad ahi aanay ku-jirin. Waayo? Mawduuca uu ka-hadlayo geerraar-ku waxaa weeye: cawaaqib-xumidda uu dagaalku leeyahay; waliba dagaalka sokeeye. Waa xaqiiq jirta. Dhamaanteena waynu ognahay cawaaqib-xumidda uu leeyahay dagaalka sokeeye.

Geerraar-ku inoomuu sheegin wax cusub oo aynaan ogayn. Wuxuu ka-hadlayaa arin aynu dhamaanteen naqaano. Geerraar-ku muu keenin fikir cusub; ama fahan cusub oo nololeed. Waa maxay xigmadda ku jirta: "waar ha dagaalaminee, dagaalka joojiya. Cawaaqib-xumo ayuu leeyahay dagaalku." Inkastoo aanu isagu ereyadaas istic-maalin, hadana micnaha iyo mawduuca geerraar-ku waa intaas. Bes. Waa maxay xigmadda ku-jirta intaas? Jawaab: wax xigmad ahi kuma-jirto.

Maxaa Sababay Xigmad La'aanta Dhaqanka Soomaalida

Buugga *Losing the Art of Survival and Dignity* ee uu qoray Dr. Hussein A. Bulhan, wuxuu si cilmiyeysan, oo qoto-dheer, ugu sharaxay saddexda qaybood ee ay nolosha bani'aadamku ka-kooban-tahay. Qaybahaas-na wuxuu u kala-bixiyey: "*the world of things, the world of people, and the word of meaning*" (Bulhan, 2013). Saddexdaasna micnahoodu waxay kala-yihiin: (1) "*the world of things*"—micnihiisu waxaa weeye, "dhaqaale abuurka iyo wax-soo-saarka;" (2) "*the world of people*"—micnihiisu waxaa weeye, "xasilinta siyaasadda/dowlada;" (3) "*and the word of meaning*"—micnihiisu waxaa weeye, "fahanka diinta iyo cilmi-nafsiga." Saddexdaas fahankooda ayay ka-dhalataa xigmadda dhabta ahi.

Sida aynu kor-kuso-xusnay, xigmaddu waa fahanka nolosha. Fahanka noloshuna wuxuu ka-dhashaa marka ay bani'aadamku isku-taxalujiyaan (ku-deddaalaan) inay si qoto-dheer u fahmaan laba arimood: degaanka ay ku-noolyihiin iyo nidaamka loo-maamulo bulshada. Isku-taxalujinta iyo ku-deddaalka labadaas arimood wax fuddud ma'aha. Sidaa awgeed, deddaalkaas kacaa-kufka ah ee uu bani'aadamku samaynayo si uu fahmo labadaas arimood ayay ka-dhalataa xigmaddu. Sidaa awgeed, ummadda Soomaaliyeed iskumay taxalujin jirin (ilaa iminkana iskuma taxalujiyaan) fahanka degaankooda iyo hab-u-maamulka bulshadda midna. Ummadda Soomaaliddu marna iskumay-taxalujin (kumanay deddaalin) fahanka "dhaqaale abuurka/wax-soo-saarka" iyo "xasilinta siyaasadda/dowlada."

Sida aan ku-sharaxay Cutubka "*Dhaqanka Soomaalida iyo Wax-soo-saarka*," waxaa kuu cadaanaya in aanay Soomaalidu marna isku-taxalujin fahanka dhaqaale abuurka iyo wax-soo-saarka. Taariikhda Soomaalida inta aynu ka-

ognahay, Soomaalidu weligeed dhaqaale may abuurin, wax-soo-saarna may samaysanin. Wax kale iska-daayo, Soomaalidu weligeed may samaysanin waxyaalaha ugu muhiimsan, uguna hooseeya, nolosha bani'aadamku ku tiir-santay: sida, cunto, biyo, maryo, hub, iwm. Dhinaca kale, weligeed Soomaalidu may samaynin siyaasad ama dowlad kasoo maaxatay fikir Soomaaliyeed.

Dr. Xuseen wuxuu buuggiisa ku sharaxay in Soomaalidu awoodeedii oo dhan isugu-gaysay qayba ah: "fahanka diinta iyo cilmi-nafsigga" (Bulhan, 2013). Laakiin, wuxuu Dr. Xuseen raaciyey in aanay Soomaalidu si sax ah u fahmin diinta Islaamka. Diinta Islaamka, waxaa Soomaalida usoo micneeyey Sucuudiga iyo Yaman. Labadaas wadana, midna may soo gaadhin xadaaradii iyo saynis-kii uu Islaamku dunida gaadhisiiyey.

Anigu waan ku raacsanahay fikirkaa Dr. Xuseen in Soomaaliddu ay awoodeedii isugu-gaysay "fahanka diinta iyo cilmi-nafsigga." Soomaalidu inay ku-dedaashay fahanka 'cilmi-nafsiga'—oo micnihiisu yahay, inay fahmeen hab-u-maamulka qofka Soomaaligga ah—ma'aha hab-u-maamulka bulshada. Hab-u-maamulkaasina wuxuu ahaa mid aad u khaldan, oo qofka bani'aadamka si khaldan loo maamulay. Waana xaqiiq inay Soomaalidu ku guulaysatay inay qofka shakhsigga ah u maamusho si aad u qoto-dheer (tusaale: qabyaaladda). Inkastoo ay Soomaalidu ku-guulaysatay maamulka qofka Soomaaliga ah, maamul-koodaasi ma wuxuu ku-salaysnaa maamulid wanaagsan oo qofka loo-maamulayo si uu hor-u-mar u sameeyo, mise wuxuu ahaa maamul qofka u horseeday dib-u-dhac, bulshaddana ku-keenay dib-u-dhac? Dr. Xuseen wuxuu ku jawaabay: Soomaalidu qaabka ay u maamushay qofka Soomaaliga ahi wuxuu ahaa mid qofka u horseedaya dib-u-dhac, bulshaddana ku ahaa—ilaa

iminkana ku ah—dhabar-jab, una horseeday dib-u-dhac dhinac walba ah.

Hab-maamulkaas khaldani, wuxuu qofka Soomaaliga ah u horseeday dhibaatooyin ay ka-mid-yihiin: kow, in aanu qofku aaminin qof kale oo aan qabiilkiisa ahayn; laba, in qofku uu ku mashquulo sidii uu isaga ilaalin lahaa "reer hebel," saddex, in aanu qofka Soomaaliga ahi ku fikirin wax-soo-saar, ee uu ka fikiro oo kaliya nolol maal-meedkisa; afar, in qofka Soomaaliga ahi aanu waxba tabcanin, oo uu ku xisabtamo qof kale xoolihiisa—qaraamad iyo shaxaad; shan, in labada qof ee Soomaalida ah la kala dhex dhigo shaki iyo is aaminaad la'aan ay qabyaaladu sal u tahay; lix, in ay ummadda Soomaaliyeed awoodi waydo inay dhisato qaran, dowlad, siyaasad, dhaqaale, wax-barasho, cadaalad, horuu-mar, iwm.

Waxaynu soo sharaxnay inay xigmaddu ka-dhalato fahanka degaanka iyo fahanka maamulka bulshadda. Hadaba, maadaama aanay Soomaalidu marna isku taxa-lujin fahanka degaanka iyo fahanka bulshada, wax xigmad ah may yeelanin. Bulshadii Soomaaliyeed ee aan wax xigmad ah lahayn, ayaa markii ay arkeen niman tirinaya gabayo, ayaa waxay bulshaddii u qaadatay in uu gabaygu yahay xigmad. Sababtuna waxaa weeye: bulshadda Soomaalidu may arkin xigmadda dhabta ah. Hadii ay jiri lahaayeen dad Soomaaliyeed oo filosoofaro ahi—oo ka doodaya arimo falsafad ah—bulshadda Soomaalidu waxay ogaan-lahayd in gabayadda ay xigmadda moodayaan, aanay wax xigmad ahi ku-jirin.

Waa Maxay Xigmadda Dhabta ahi

Waxaa inoo-cadaatay in tixaha Soomaalida aanay wax xigmad ahi ku-jirin (marka laga reebo labadaas maanso ee

aan kor-ku-xusay, ee uu alifay Abwaan Hadraawi: *Sirta Nolosh*a iyo *Af-ku-Siran*. Tixaha Soomaaliddu guud ahaan 'mawduuc-yada' ay ka-hadli-jireen (ilaa iminkana ay ka-hadlaan) waxay u badan-yihiin: siyaasad, musuq-maasuq, dowladnimo, qaranimo, qabyaalad, faan, geel la dhacay, gabadh la-kala dhacay, jacayl, hawaale-warran, hoga-tusaalayn; iwm. Mawduuc-yadaas kala-duwan ee ay ka-hadlaana, waxay uga-hadlaan si aad u fudud oo aan qoto-dheerayn. Waxay ka-hadlaan wax ay bulshadda oo dhami isla-taqaano; fikir cusub oo bulshadda hore-u-mariya maysoo gudbin, ilaa iminkana masoo-gudbiyaan.

Intii ay Soomaalidu tixo ku-tirinaysay mawduuc-yadaas aan kor-kusoo-xusay, oo waliba aanay si qoto-dheer uga hadlaynin, muxuu aduunka kale ka-hadlaayey, ama ka-hadli-jiray? Mar hadii aanay wax xigmad ahi ku-jirin tixihii Soomaalida, waa maxay xigmadda dhabta ah ee aan ka hadlayaa? Aynu soo qaadano laba tusaale oo ina-tusaya xigmada dhabta ah, ee falsafada.

Xigmadda 1^{aad}: sidee ayaynu ku ogaanay, waxa aynu ognahay? Su'aashan aad ugu fiirso, oo isku-day inaad fahanto. Waa su'aal aad-iyo-aad u qoto-dheer oo falsafadeed. Hadaan su'aasha si-kale u-dhigo: side ayaad ku ogaatay, waxa aad og-tahay? Ama dariiqee ayay kuusoo-maraan, waxa maskaxdaada ku-jiraa ee aad fahansantay? Sidaynu ognahay, waxaa jira wax-yaabo badan oo maskaxdeena ku-jira, oo aynu ognahay. Jidhkeena qaybta inoo-qaabilsan fahankuna waxaa weeye maskaxda.

Hadaba, fahanka ama casharada maskaxda inoogu-jiraa, halkee ayuu maskaxdeena u-soo-maray? Maskaxdeena yaa u-keena wararka ay hesho? Jawaabtu waxaa weeye: maskaxdeena waxaa wararka u-keena shanteena dareeme; waa dariiqyada macluumaadka usoo-gudbiya maskaxdeena. Shanteena dareeme waxaa weeye: maqalka, araga, dhad-

hanka, taabashada, iyo urta. Wax kasta oo maskaxdeena ku-jiraa, dariiqyadda ay inoo-soo-maraan waa shantaas dareeme. Ma jiraan dariiqooyin kale oo macluumaadku inoo-soo-maraa.

Hadaba, waxaa lays-waydiiyey su'aashan: shanteena dareeme—maqalka, araga, dhadhanka, taabashada, iyo urta—macluumaadka ay inoo-soo-gudbiyaan ma yahay macluumaad sax ah mar-walba, mise waxay inoo-soo-gudbiyaan macluumaad marna sax ah, marna khalad ah? Hadii shantaas dareeme macluumaadka ay inoo-soo-gudbinayaan uu mar walba yahay macluumaad sax ah, markaa dhamaan macluumaadka ku-jira maskaxdeenu waa sax. Hadiise, shantaas dareeme ay marna inoo-soo-gudbiyaan macluumaad sax ah, marna ay inoo-soo-gudbiyaan macluumaad khalad ah; markaa, macluumaadka—ama aqoonta—ku-jirta maskaxdeena qaybina waa sax, qaybina waa khalad.

Markaa, hadii ay macluumaadkaas ay shanteena dareeme inoo-soo-gudbiyaan uu dhamaantii sax yahay, markaa waxaa inagu waajib ah in aynu aamino, rumaysano—oo ku-kalsoonaano—shanteena dareeme wax kasta oo ay inoo-soo-gudbiyaan. Hadiise, macluumaadka ay shanteena dareeme inoo-soo-gudbiyaan uu marna yahay sax, marna uu yahay khalad; markaa, maskaxdeena macuulaamadka—ama aqoonta—ku-jirta ma garan-karno macluumaadka saxda ah, iyo macluumaadka khaladka ah; maadaama qaybina ay tahay sax, qaybina ay tahay khalad. Sidaa awgeed-na, ma'aha inaynu aamino macluumaad kasta oo ay shanteena dareeme inoo-soo-gudbiyaan. Doodani waa dood sax ah.

Hadaba, si aynu u ogaano in shanteena dareeme ay inoo-soo-gudbiyaan macluumad sax ah mar walba, iyo inay inoo-soo-gudbiyaan marna macluumaad sax ah, marna mid khalad ah, waxaynu soo-qaadanaynaa tusaalooyin.

Waxaynu sharaxaynaa laba ka-mid-ah shanteena dareeme. Waxaynu eegaynaa in ay labadaas dareeme inoo-soo gudbiyaan macluumaad sax ah iyo in kale. Labaasdaas dareemana waxay kala-yihiin: taabashadda iyo araga. Saddexda dareeme ee kalana waa la-mid dhinaca soo-gudbinta macluumaadka.

Taabashadda: dareen-ka taabashaddu wuxuu inoo-soo-gudbiyaa macluumaad, si uu inoogu-sheego—ama inooggaga waramo—degaanka ama dhulkan aynu ku-noolahay. Taabashaddu wax-yaalaha ay inoo-soo-gudbiso waxaa ka-mid-ah: kulaylka; qabowga; waxa adag; waxa jilicsan; waxa ku-mudaya; iwm. Tusaale, marka aynu taabano 'shay' ama 'walax,' dareenka taabashaddu wuxuu inoo-sheegaa in 'shay-gaasi' ama 'walax-daasi,' ay adagtay, jilicsantay, kulushahay, qabowday, ku-mudayso, iwm. Hadaba, su'aasha is-weydiinta lihi waxaa weeye: macluumaadka ay inoo-soo-gudbiso dareenka taabashadu ma-yahay macluumaad mar walba sax ah, mise waa macluumaad marna sax ah, marna khalad ah? Waxa jiray tijaabooyin (jirabaad) aad u tirro-badan oo lagu-sameeyey dareenka taabashada, oo kuu-cadayna in dareenka taabashaddu uu marna soo-gudbiyo macluumaad sax an, marna uu soo-gudbiyo macluumaad khalad ah. Aynu xusno tijaabooyinkaas mid-ka-mid ah (adi-guna aad samayn-karto si aad u hubiso).

Waxaad soo-qaadataa biyo qabow. Biyahaas qabow, waxaad gelisaa gacantaada. Inta aanad gacantaada gelin biyaha, heer-kul-ka gacantaadu waa inuu ahaadaa dhex-dhexaad. Waxaan uga-jeedaa, gacantaaddu waa in aanay aadna u qaboobayn, aadna u kululayn. Marka aad gacanta geliso biyahaas, waxay gacantaadu kuu sheegaysaa inay biyuhu qabow yihiin. Intaas ka dib, waxaad gacantaada gelisaa xaga sare ee talaagadda cuntadda qaboojisa. Muddo daqiiqaddo ah gacantaadu haku-dhex-jirto talaagada.

Marka aad dareento in gacantaadii ay aad u qabowday, kasoo-saar gacantaada talaagadda. Ka dib, gacantaadii oo qabow, waxaad gelisaa biyihii qaboobaa ee aad markii hore gacanta gelisay. Gagacantaada oo aad u qabow marka aad geliso biyihii qaboobaa, waxaa gacantaadu kuu-sheegaysaa in ay biyuhu 'diiran-yihiin' ama aanay 'qaboobayn.' Markii ugu horaysay ee aad biyaha qabow gacanta gelisay (gacantaada oo heer-kul-keedu uu yahay dhex-dhexaad), waxay gacantaadu kuu-sheegtay inay biyuhu ay yihiin 'qabow.' Laakiin, markii danbe ee aad gacantaada oo aad kasoo-saartay talaagadda (oo aad u qabow) aad gelisay biyihii, gacantaadii waxay kuu-sheegtay inay biyuhu 'diiran-yihiin." Hada ogow: biyaha heer-kul-koodu ismuu bedelin; waxaan uga-jeedaa, biyuhu sidii ay u qaboobaayeen ayuunbay u qabow yihiin. Halkaa waxaa inooga-cadaatay in gacanteenu marna ay inoosoo-gudbisay macluumaad sax ah (biyuhu waa qabow); marna ay inoo-soo-gudbisay macluumaad khalad ah (biyuhu way diiran-yihiin). Markaa dareenkeena taabashada ma aamini-karnaa?

Hadii dareenkii taabashadu uu biyihii inooga-soo-gudbiyey laba macluumaad oo aad u kala-duwan (biyo qabow iyo biyo kulul) isayadoo aanay biyihii is-bedelin, imisa macluumaad oo sidaa oo kale ah ayuu inoosoo gudbiyaa mar walba? Taasi waxay inoo-cadaysay in aynaan marna aamini karin macluumaadka uu inoo-soo-gudbiyo dareenkeena taabashaddu. Kani waa tusaale fuddud oo aan usoo-qaatay si ay akhristaha ugu fuddudaato inuu fahmo sharaxaada. Laakiinse, waxaa jira boqolaal tusaale oo lagasameeyey dareenka taabashada oo intuba inoo-cadaynayaan in aynaan boqol-kiiba-boqol aamini-karin macluumaadka uu inoo-soo-gudbiyo dareenka taabashadu. Markii arinkaas la-ogaaday, waxaa la-samaystay qalab lagu cabiro cimilada, oo mar walba si sax ah u sheegaya

"qabowga" iyo "kulaylka." Qalabkaasna waxaa ka-mid-ah *thermometer*-ka.

Araga: dareenka aragu wuxuu inoo-soo-gudbiyaa macluumaad aad u tirro-badan. Maskaxdeena marka loo-qaybiyo saddex-meelood, meel-ahaani waxay qaabilsantay araga. Dareemayaasheena oo dhan, araga ayaa ugu-saamayn badan, oo qayb-libaax-leh ka qaata maskaxdeena. Hadaba, su'aasha is-weydiinta lihi waxaa weeye: macluumaadka uu inoo-soo-gudbiyo dareenka aragu, ma-yahay macluumaad mar walba sax ah, mise waa macluumaad marna sax ah, marna khalad ah? Waxa jiray tijaabooyin (jirabaad) aad u tirro-badan oo lagu-sameeyey dareenka araga, oo kuucadayna in dareenka aragu uu marna soo-gudbiyo macluumaad sax ah, marna uu soo-gudbiyo macluumaad khalad ah. Aynu xusno tijaabooyinkaas mid-ka-mid ah.

Waxaa jira 'ashyaa' badan iyo 'noole' badan oo aduunka ka-jira. Ashyaadaas iyo noolahaasna, waxaa ka-mid-ah qaar nolosheena khatar ku ah; qaar aan khatar ku ahayn; iyo qaar nolosheena faa'iido u leh. Hadaban, maadamaa uu dareenkeena aragu qaabil-san-yahay inuu ina-tuso wax kasta oo aduunka ka-jira, mar walba ma inoo-soo-gudbiyaa macluumaad sax ah? Jawaabtu waa MAYA. Waxa jira 'ashyaa' ama 'noole' badan oo aduunka inagula nool oo aanu dareenkeena aragu arki-karin. Tusaale: dareenkeena aragu ma arki-karo waxa loo-yaqaano bakteeeriyadda (bacteria) ama fayrus (virus). Qaar ka-mid-ah bakteeriya iyo fayrus-ku nolosheena ayay khatar ku-yihiin, oo waxay inoohor-seedaan cudduro khatar ah. Laakiinse, bakteeriyadda iyo fayrusku waa noole aad-iyo-aad u yar-yar oo aanay isheenu arki-karin. Maadaama aanu dareenkeena aragu awoodin inuu arko bakteeriyadda iyo fayruska, dareenkeenu inoo-masoo-gudbinayo—ama inooma-sheegayso—inay jiraan bakteeriya iy fayrus; sababtoo ah, ma arki-karo. Sidaa

awgeed, dareenkeena aragu wuxuu inoo-soo-gudbiyey macluumaad khalad ah. Macluumaadka khaladka ah ee uu inoo-soo-gudbiyeyna waxaa weeye: bakteeriya iyo fayrus aduunka ku-nool, oo nafteenana khatar ku-ah ayuu inoo-qariyey oo inooga dhigay in aanay jirin; sababtoo ah, waanu arki-karin. Hadaan si kale-u-dhigo, xaqiiq aduunka ka-jirta ayuu inaga qariyey.

Tusaale labaad, jirabaad ayaa lagu sameeyey dad badan si loogu cadeeyo in arageenu aanu mar walba inoo-soo gudbinin war sax ah. Jirabaadaasina waxay ahayd siddan: waxaa lasoo qaaday girraan u samaysan sida kubada cagta oo kale. Girraantu waxay ka samaysantay dhowr birood oo la qaloociyey; ka dibna loo-sameeyey qaabka kubada oo kale. Girraantii ayaa xadhig lagu xidhay oo meel lagasoo laa-laadiyey. Ka dib, dadkii ayaa lagu amray inay indha isku qabtaan muddo gaaban. Intii ay dadku indhaha isku hayeen, ayaa girraantii oo soo laa-laada dhicana midig loo-wareejiyey. Girrantii oo dhinaca midig u wareegaysa, ayaa dadkii lagu amray inay indha kala furaan, oo ay girraanta eegaan. Markii ay dadkii girraantii eegeen, ayaa waxaa la waydiiyey: "Girraantu dhinacee ayay u wareegaysaa?" Jawaabtii dadku way kala-duwanaatay. Dadka qaar waxay yidhaahdeen, "bidix;" dadka qaarna waxay yidhaahdeen, "midig." Muran ayaa meeshii ka bilaabmay. Halkaas waxaa dadkii ugu cadaatay in macluumaadka uu aragu inoosoo gudbiyaa uu marna yahay sax, marna uu yahay khalad. Waa sababta ay bani'aadamku u samaysteen diirada, mikroscoob-ka, teleskoobka, iwm. Waayo? Waxaa la-xaqi-ijiyey in aan la-aamini karain arageena.

Xigmadda 2^{aad}: ma jiro (mana jiri-karo) qof daacad ahi; sidaa awgeed, ma jiro (mana jiri-karo) hogaamiye daacad ahi. Mar hadii aanu-jirin hogaamiye daacad ahi, qofna kuma aamini-karno maa-mulka dowlada (marka laga-reebo

nebiyada iyo rususha uu Illaahay soo diray). Marka aynu doonayno in aynu qof u igmano (u dhiibano) maamul bulsho, waxaa haboon in aynu fahano dabeecadaha qofka bani'aadamka ah, inta aynaan qofna u igmanin (u dhiibanin) maamul. Hadaba, markii si falsafad ah, oo xigmadaysan, loo-dersay dabeecadaha qofka bani'aadamka ah, waxaa la-xaqiijiyey in aan qof bani'aadam ah—nooca uu doono ha ahaadee (wadaad ama waran'le)—lagu aamini-karin maamul bulsho. Su'aasha is-wey-diinta muddani waxay tahay: hadii aynaan qofka bani'aadamka ah aamini-karin, sidee ayaynu isu-maamuli-karaynaa? Inta aanan su'aashan ka-jawaabin, waxaa haboon in aad fahanto dabeecadaha dhabta ah ee uu leeyahay qofka bani'aadamka ahi. Halkan, waxaan ku-sharaxayaa saddex dabeecadood oo uu leeyahay qof kasta oo bani'aadam ahi, oo marka aad fahanto ay kuu cadaanayso in aynaan qof bani'aadam ah—wadaad iyo waran'le—ku aamini-karin maamul bulsho.

Debeecadda 1^{aad}: qof kasta oo bani'aadam ahi, waa danayste. Maxaa looga-jeedaa qof waliba waa danayste? Waxaa looga-jeedaa: fal kasta oo uu sameeyo qofka bani'aadamka ahi, dantiisa shaqsiga ah ayuu u sameeyaa. Ma jiro—mana jiri-karo—fal uu qof bani'aadam ahi sameeyo (ama uu sameeyey) oo aanu u samaynin dantiisa shaqsiga ah. Hadaan si kale-u-dhigo: ma jiro—mana jiri-karo—qof samaynaya (ama sameeyey) fal aanay dantiisu ku-jirin. Sidaa awgeed, qof kasta oo bani'aadam ahi, waa 'danayste.' Mar-marka qaar waxaa jira fallal inoogu muuqda in aanay wax dan shakhsi ahi ugu jirin qofka samaynaya. Laakiin, marka aad fallalkaas laftooda si qoto-dheer, oo falsafad-aysan, u dhuuxdo, waxaa kuu cadaanaya in fallalkaas laftooda uu qofku u samaynayo dantiisa shakhsiga ah awgeed. Fallalka aanu qofku sida cad u dareensanayn, wuxuu samaynayaa isagoo aan si cad u

dareensanayn inay dantiisa shakhsiga ahi ku jiro; laakiin, wuxuu u dareensan-yahay si qarsoodiya oo aanu sharixi karin (tusaalooyinka hoose ayaa inoo cadaynaya). Hadii falka uu qofku samaynayo aanay ku-jirin dantiisa shaqsiga ahi, falkaas ma samaynayo qofku. Fallalka uu qofku samaynayo, qaarna si cad ayuu u ogyahay inay dantiisu ku jirto; qaarna si cad uma dareensana. Sidaa awgeed, waxaa jira fallal badan oo ay bani'aadamu sameeyaan, oo aynu u aragno in ay yihiin fallal aanay ku jirin wax dan shakhsi ahi. Hadaba, markii ay soo-if-baxday sharaxaaddan xigmadda ahi, waxaa markiiba bilaabmay in su'aalo layska waydiiyo fikirkan cusub. Si doodan loo burriyo, dad badani waxay tusaale usoo-qaateen fallal badan oo ay sameeyaan bani'aadamku; laakiin, aanay dadkaas falka samaysana wax dan shakhsi ahi ugu jirin. Tusaalayaashaas ay dadku soo-qaateena, dhamaantood waa looga-jawaabay; waxaana laga-tusay dhinac aanay weligood ka-eegin. Aynu soo qaadano dhowr ka-mid-ah fallalka ay bani'aadamku sameeyaan, ee aynu moodayno inay u samaynayaan 'hor-Illaahay;' laakiinse, ay xigmaddani ina-tusayso in aanay waxba ka-jirin.

Tusaalaha 1[aad]: hooyadda ilmaha usoo-toosaysa saq-badhka si ay naaska u nuujiso, iyadu ma danaystaa? Waa maxay danta shaqsiga ah ee ugu jirtaa? Siday danayste u noqotay? Hooyadani marka ay ilmaha yar u toosayso saq-badhka si ay naaska u nuujiso, waxay falka noocaas ah u samaynaysaa waxaa weeye: danteeda shakhsiga ah ayaa ku-jirta. Waa maxay danta shakhsiga ah ee ugu jirtaa? Danta shakhsiga ah ee ugu jirtaa waxaa weeye: laba arimood (laba danood). Kow, hooyadani waxay og-thay, hadii ay ilmaheeda u toosi waydo saq-badhka, oo ay ilmahaas dhibaato soo-gaadho (dhaawacmo, xanuun ku dhaco, ama dhinto), in hooyadaas nolosheeda inta hadhsan ay ku-noolaanayso murugo, calool-xumo, is-ciil-kaambi, iwm. Hooyadu waxay

nafteeda ka difaacaysaa xanuunkaa ay leeyihiin murugadda, calool-xanuunka, iyo is-ciil-kaambigu. Sidaa awgeed, waxay hooyadaasi nafteeda ka bad-baadinayaa dhibaatadaas soo gaadhi doonta. Waxay doonaysaa in ay nafteedu ku noolaato degenaan iyo farxad. Laakiin, waxaa laga yaabaa in aanay hooyadu sidaa cad u fahansanayn. Laba, hooyadani waxay doonaysaa in uu ninkeeda, qoyskeeda, qoyska ninka, ama bulshadu ku amaanto inay tahay hooyo wanaagsan. Bani'aadamkuna aad ayuu u jecelyahay in lagu amaano howsha ay qabtaan. Labadaas dan ee shakhsiga ah ayaa hooyaddan ugu jirta inay ilmaha yar u toosto saqda-dhexe. Markaa, hooyadu waa danayste; iyada ayaa nafteeda ilaalinaysa.

Tusaalaha 2[aad]: qofka soo bad-baadinaya qof kale oo ku-jira guri gubanaya, isaguna ma danaystaa? Danayste siduu/siday u noqday/noqotay? Aan sharaxo. Tusaale: Maxamed ayaa wuxuu arkay guri uu dab-qabsaday oo gubanaya. Markii uu gurigii usoo dhawaaday, ayuu wuxuu arkay qof ku-dhex-jira guriga gubanaya. Maxamed wuxuu markiiba galay gurigii gubanaayey si uu qofka usoo bad-baadiyo. Hadaba, falkan uu sameeyey Maxamed, waa maxay danta shakhsiga ah ee ugu jirtaa? Maxamed waxaa ugu jira dhowr dan oo shakhsi ah. Kow, Maxamed wuxuu doon-aayey in marka uu qofkaa bad-baadiyo, ay bulshadu u qirto inuu yahay nin naxariis-leh, wanaagsan, geesi ah, dhiiran, oo dadka caawiya. Qofku markuu helo amaanta bulshadiisa, waxay gelisaa dareen aad-iyo-aad u qaali ah, oo qofka u abuurta farxad, degenaan, hankiisa oo sare-u-kaca, iwm. Laba, Maxamed wuxuu ajar kaga doonayaa Illaahay (SW). Marka uu qofku bad-baadiyo qof kale, waxaa loo-qoraa ajar aad u wayn oo uu Illaahay ugu dhawaado. Saddex, Maxamed wuxuu sii badhi-taarayaa (ama dhiiri-gelinayaa) dhaqanka bulshadiisa ee ah in la-caawiyo qofka dhibtu

qabsato; isagoo doonaya in isagana markay dhib qabsato la-caawiyo. Sidaa awgeed, Maxamed waa danayste. Falkaasna wuxuu u sameeyey dantiisa shakhsiga ah.

Tusaalaha 3^{aad}: wadaadka (sheekha) wakhtigiisa gelinaya fidinta diintu, isaguna ma danaystaa? Qofkani waa danayste. Danayste muxuu ku noqday? Falkan uu wadaadku (sheekhu) samaynayo, waxaa ugu jirta dhowr dan oo shakhiyadeed. Kow, wadaadkani (sheekhani) marka uu diinta fidinayo, ajar ayuu shaqaysanayaa; oo wuxuu doonayaa inuu Illaahay ugu dhawaado. Laba, wuxuu doonayaa inuu bulshada ka-helo magac iyo maamuuc; oo uu noqdo qof la-qadariyo, la-wayneeyo, la-xushamadeeyo, oo meel walba lagusoo dhaweeyo. Saddex, wuxuu doonayaa inay dadku dhegeystaan oo ay maqlaan; una hogaansamaan. Sidaa awgeed, wadaadkani (sheekhani) waa danayte. Falkaasna wuxuu u samaynayaa dantiisa shakhsiga ah.

Debeecadda 2^{aad}: awood buuxda haduu qofku yeesho; wuxuu doono ayuu sameeyaa. Qofka bani'aadamka ahi hadii uu yeesho awood buuxda—oo uu awood u yeesho inuu wax walba samayn-karo—wuxuu noqdaa qof aan waxba ka-xishoonin, xadhkahana goosta. Waxaan uga jeedaa: hadii qofka la-siiyo awood buuxda, xumaan kasta wuu samaynayaa. Si aad u fahanto qodobkan, aan soo qaato tusaale. Kasoo-qaad, waxaa lagu-siiyey kaatun (far-gal). Marka aad kaatunkaas (far-galkaas) xidhato, waxaad yeelanayaa awoodo xad dhaafa: kow, waxaad noqonayaa qof aan la-arki-karin (invisible), sida jinka; laba, waxaa kale oo aad yeelanaysaa awood aad meel walba ku-geli-karto (xataa gidaaradda aad ka dhex bixi-karto). Hadii kaatunkaas (far-galkaas) lagu-siiyo, maxaad samayn-lahayd? Xageed tegi-lahayd? Gurigee ayaad geli-lahayd? Qofka kaatunkaas la-siiyo, dhaqankiisu wuu is-bedelayaa; wixii uu xeerin-jiray, ma-xeeriyo; wixii uu ka-xishoon-jiray, kama-xishoonayo;

wax walbana wuu samaynayaa. Waayo? Jawaabta waxaa inoo sharaxaya Dabeecadda 3aad.

Debeecadda 3aad: ma jiro qof u dhashay wanaag—inuu qofku u dhaqmo si wanaagsan, waa lagu khasbay, ee ma'aha wax uu u dhashay. Waa maxay waxa ku-khasba inuu qofka bani'aamka ahi u dhaqmo si wanaagsan? Jawaabtu waxaa weeye: *baqdin*. Baqdintu waa waxa ugu wayn ee assaaska u ah nabada iyo wada-noolaanshaha bani'aadamka. Hadii qofka bani'aadamka ahi aanu waxba ka baqaynin, wax wanaag ah muu sameeyeen. Tusaale aan soo qaato. Waxaad aragtay gaadhi qurux-badan oo meel taagan, qof bani'aadam ahina aanu ku-dhex-jirin. Gaadhigaas maxaad u xadi-wayday (ama u kaxaysan-wayday)? Jawaabtu waxaa weeye: baqdin. Waxaad ka-baqaysaa dhowr arimood. Waxaad ka-baqaysaa in boolisku ku-xidho. Hadii aanad booliska ka-baqanaynin, oo aanu boolisba jirin; markaa waxaad ka-baqaysaa in dadkii gaadhiga lahaa kusoo weerraraan. Hadii aanad dadkaas ka-baqaynina, markaa waxaad ka-baqaysaa in uu Illaahay (SW) ku-ciqaabo maalinta qiyaamaha. Waxaa kale oo aad ka baqaysaa inaad ceebowdo oo dadku kuugu yeedhaan "tuug." Sida awgeed, sababta aad gaadhigaas u xadi-wayday (u kaxaysan-wayday) waa baqdin. Waxaa la-mid-ah: in aad gabadh kufsato, qof disho, xoolo dhacdo, iwm. Laakiin, waxaad ka-warantaa: hadii aanay intaas aynu kor-kusoo-xusnay, ee aad ka-baqaysaaba, aanay jirin? Aynu tusaale usoo-qaadano, wadan aanay intaas laga-baqaaba ka-jirin.

Waxaad ku-nooshahay wadan. Bulshada wadankaas degen, dhaqankoodu waa siddan: marka uu qofku—rag iyo dumar—qaan-gaadh noqdo, guriga waalidkii waa laga-eryaa. Wuxuu noqdaa qof gooni-socod ah. Sidaa awgeed, qofku kuma-tiirsana qabiil uu ka-dhashay (ma jiro qabiil). Sidoo kale, wadankaas aad ku-nooshahay kama-jirto

dowladi. Ma jiraan boolis, maxkamad iyo jeelal dadka danbiga sameeya lagu-xidhaa. Qof kasta oo bulshada ka-mid-ahi, isaga ayaa laga-rabaa inuu naftiisa bad-baadiyo; maadaama aanay jirin cid difaacaysaa. Taasi waa aduunka aynu ku-noolahay. Dhinaca kale, bulshadaadu ma-aamin-sana wax diin ah. Mar hadii aanay bulshadu aamin-sanayn wax diin ah, markaa ma aamin-sana inay jirto aakhiro. Taasi waxay keentay in aanay bulshadaasi aamin-sanayn in marka ay dhintaan lasoo-saari-doono oo la-xisaabin-doono. Waxay aaminsan-yihiin in marka ay dhintaan aan lasoo-saaraynin, xisaab aakhiran aanay jirin. Dhinaca kale, bulshadaasi ma aaminsana wax la yidhaahdo "sharaf," "karaamo," "magac," iwm. Mar hadii aanu qofku magac iyo sharaf midna illaashanaynina, wuxuu doono ayuu samaynayaa. Waayo? Inuu qofku magaca iyo sharafta ilaashado waxaa ku kalifayaa waa baqdin. Wuxuu ka baqayaa in magiciisa ama sharaftiisu dhaawacanto. Hadii aan soo-koobo tusaalahan aan soo-qaatay: waa wadan aanay ka-jirin qabiil, dowlad, iyo diin. Hadaba, waxaa is-weydiin-muddan: maadaama aad bulshadaas ku-dhex-nooshahay, sidee ayaad u dhaqmi lahayd? Qofka bulshadaas ku-dhex-nooli, siduu u dhaqmayaa?

Qofka bulshadan ku-dhex-nooli wax uu ka-baqayaa ma-jirto. Hadii uu qof dilo, ama gabadh kufsaddo, ama xoolo dhaco, wax ciqaab ahi kuma-dhacayso. Waayo? Qabiil ka aar-goosanayaa ma-jiro; dowlad ciqaabaysaa ma-jirto; aakhirna ma-aaminsana. Sidaa awgeed, if-iyo-aakhiraba wax ciqaab ah oo uu ka-baqayaa ma-jiraan. Halkaa waxaa inooga-cadaatay, mar hadii aanu qofka bani'aadamka ahi waxba ka-baqaynin (if-iyo-aakhiro midna), wuxuu u dhaqmayaa si ka-hoosaysa xayawaanka mayeedhaanka ah. Wuxuu noqonayaa qof dadka dila, dumarka kufsada, xoolaha dhaca, iwm. Sidaa awgeed, qofku inuu u dhaqmo si

wanaagsan, waa lagu-khasbay, ee ma'aha wax uu u dhashay. Wuu baqanayaa.

Saddexdaas dabeecadood ee bani'aadmku leeyahay, waxay inoo-cadeeyeen aanu jirin (mana jiri-karin) qof daacad ahi; sidaa awgeed, ma jiro (mana jiri-karo) hogaamiye daacad ahi. Sababtoo ah: (1) qof kasta oo bani'aadam ahi, waa danayste; (2) qofku haduu awood buuxda yeesho, xadhkaha ayuu goostaa; (3) ma jiro qof u dhashay wanaag—inuu qofku u dhaqmo si wanaagsan, waa lagu khasbay, ee ma'aha wax uu u dhashay. Mar hadii ay inoo-cadaatay in aan qofka bani'aadamka ah lagu-aamini-karin maamul bulsho, sidee ayaynu isu-maamulaynaa? Jawaabtu waxaa weeye: marna ma-aaminayno qofka bani'aadamka ah; laakiin, waxaynu aaminaynaa *nidaam* (*system*). Maxaan uga-jeedaa nidaam? Nidaamka (system) waxaan uga-jeedaa: sharci adag oo shaqaynaya iyo kaabayaashii dowligga ahaa ee hir-galinayaayey sharcigga. Sharcigguna wuxuu xakamaynayaa dadka oo dhan—shacab-ka iyo dowlada labadaba; goleyaasha dowlaadda; sida, fulinta, baarlamaanka, maxkamadaha, iwm. Rukumadda ugu-waaweyn ee dowlada, waxaa ka-sareeya (oo ay hoos-imanayaan) waa sharciga. Sidaa awgeed, mar hadii aanaynu qof bani'aadam ah ku-aamini-karin maamul bulsho, waxaa waajib ah in aynaan ka-firkirin (wakhtina iskaga-lumin) qofka bani'aadamka ahi wuxuu yahay. Waajibku waxaa weeye in aynu ka-fikirno—wakhti badana gelino—sidii loo-dhisi-lahaa nidaam dowladeed oo adag. Qofku muhiim ma'aha; nidaamka ayaa muhiim ah. Qofku wakhtiga uu hayo maamulku waa wakhti-kooban; laakiin, nidaamka dowligga ah, ee si fiican loo-dhisaa, wuu ka-cimir-dheer-yahay qof bani'aadam ah.

Waataas xigmada dhabta ah ee nolosha bani'aadamka wax ka bedeshay. Miyaad garanaysaa tix Soomaaliyeed oo ay

xigmad noocaas oo kale ah—ama xigmad u dhow taas oo kale—ay ku jirto (marka laga reebo Sirta Nolosha iyo Af-ku-Siran)?

Sidee Xigmad Loo-gelin-karaa Suugaanta Soomaalida

Sida ugu-haboon ee xigmed loo-gelin-karo suugaanta Soomaalidu waxay ku-xidhan-tahay qodob muhiim ah: *heerka-aqooneed ee qofka suugaanta tirinaya*. Hab-u-fikirka aadka u qotadda-dheeri wuxuu ku-xidhan-yahay climiga uu leeyahay suugaan-yahanku. Qof walba wuxuu fikir-kiisu gaadh-siisan-yahay inta cilmigiisu gaadhsiisan-yahay. Waxaan isticmaalay kelmedda 'cilmi;' laakiin, maan isticmaalin kelmeda 'aqoon.' Cilmi iyo aqoon waa laba-kelmadood oo kala-duwan. Cilmigu waxaa weeye: jirabaad ku-salaysan baadhi-taan qoto-dheer oo lagu sameeyey nolosha iyo waxa ku xeeran, oo uu bani'aadamka aduunka oo dhami sameeyey; oo meel laysugusoo urruriyey. Aqoontu waxaa weeye khibradda uu qofka bani'aadamka ahi u leeyahay. Aqoontu waxay ku-koobantay fahanka qofkaas bani'aadama ah; mana aha cilmi. Aqoonta iyo cilmigu waxay ku-kala-duwan-yihiin: cilmiga xaqiiqdiisa (inkastoo xaqiiqdaasi is bedeli-karto) waxaa isku-raacay dad tababaran oo kasoo kala-jeeda qaaradaha kala-duwan ee aduunka oo dhan ah; aqoontuna waa fikir ku kooban qof kaliya oo bani'aadam ah, ama bulsho kaliya. Tusaale ahaan: waad odhan-kartaa, "Cali aqoon fiican ayuu u leeyahay beelaha Soomaalida?" Laakiin, ma odhan-kartid "Cali cilmi fiican ayuu u leeyahay beelaha Soomaalida? Ma dareemi-kartaa farqida u dhexeeya? Sidaa awgeed, cilmigu inuu khalad noqdaa way adagtay; laakiin, aqoonta uu qofku gaarka u yaqaanaa, way u badantay in ay khalad noqoto. Taas micanaheedu maaha in cilmigu aanu khaldami-karin.

Xaasha. Cilmiga laftiisu wuu is-bed-bedelaa. Boqol sanadood ka-hor cilmigii la-aaminsanaa, maanta lama-aamin-sana. Taas micnaheedu ma'aha inuu cilmigaasi khalad ahaa. Laakiin, waxaa weeye in cilmigii hore-u-maray, oo la-ogaaday waxyaalo cusub oo aan markii hore la-ogayn; waana quruxda uu leeyahay cilmigu—waa wax mar wala horu-mar samayna.

Hadaba, qofka suugaanta tirinayaa hadii uu leeyahay aqoon, suugaantiisu waxay noqonaysaa mid ku-salaysan aqoontiisa shaqsigga ah; sidaa awgeed, ma noqonayso suugaan xigmad leh. Sababtoo ah, qofkaas fikirkiisu wuxuu ku-kooban-yahay uun aqoontiisaa shakhsiyadeed: "Togba taagtii ayuu rogmadaa." Laakiin, hadii qofka suugaanta tirinayaa uu leeyahay cilmi, markaa suugaantiisu waxay noqonaysaa suugaan xigmad leh. Sidaa awgeed, waxaa loo-baahan-yahay in dadka suugaanta tirinayaa ay ku-dedaalaan inay cilmiga bartaan si ay suugaantoodu xigmad u yeelato.

9

DHAQANKA SOOMAALIDA IYO QOYSKA

Qoysku waa assaaska bulsho. Hadii qosku aanu xasiloonayn, bulshadduna ma xasiloonaanayso. Waayo? Unugga ugu-hooseeya ee bulshaddu waa "qof." Marka uu qofkaasi helo qof kale (lamaane) oo uu nolosha la-wadaago, ee uu ubad (caruur) yeesho, waxaa dhisma qoys. Marka ay dhismaan dhowr qoys, waxaa dhisma bulsho. Sidaa awgeed, waxaa aad-iyo-aad u muhiim ah in xoogga la-saaro sidii loo-dhisi-lahaa (loo-bar-baarin-lahaa) unugga ugu-heeseeya ee bulshada; kaas oo ah, "qofka." Hadii qofka si wanaagsan loo-koriyo, qofkaasina wuxuu dhisaa qoys wanaagsan; qoyskaas wanaagsannina wuxuu dhisaa bulsho wanaagsan. Unuggaas ugu-hoseeya ee bulshadana—qofka—waxaa laga-dhisaa meelo badan; sida, aqoonta, diinta, akhlaaqda, naxariista, kartidda, tacabka, garashada, gar-gaarka, iwm. Laakiin, hadii qofka loo-dhiso (loo-bar-baariyo) si khaldan, waxaa xaqiiq ah inuu qofkaasi dhiso qoys dhinac walba ka bur-bursan, oo khariban. Qoyskaas kharibannina wuxuu dhisaa bulsho khariban. Unuggaas ugu-hooseeya bulshad-

dana, sida khaldan ee loo-dhiso waxaa ka-mid-ah in qofka lagu bar-baariyo cilmi-la'aan, diin-yaraan, akhlaaq-darro, naxriis-darro, karti-darro, tacab-xumaan, garasho-la'aan, iwm. Hadaba, waxaa is-weydiin muddan: Soomaaliddu qaab noocee ah ayay u-bar-baarisaa qofka? Ma waxay u-bar-baariyaan si wanaagsan, mise si khaldan?

Si aan su'aashaas uga-jawaabo, cutubkan waxaan u dhiraan-dhirrinayaa siddan soo-socota. Kow, waxaan si-kooban u sharaxayaa qaabkii ubadka loogu-bar-baarin-jiray miyiga; miyiga oo ah meesha uu kasoo jeedo dhaqankeena ina baray bar-baarinta ubadku. Laba, waxaan qodobay-nayaa qaabka ubadka loogu-bar-baariyo magaalooyinka Soomaalida. Saddex, waxaan faalaynayaa qaabka uu u dhisan-yahay qoyska Soomaaliyeed ee ubadka lagu bar-baarinayaa. Afar, waxaa xusayaa (soo bandhigayaa) dhac-dooyin aad u xanuuun-badan oo kuu cadayna dulmigga, dil-dilaaca, tacaddiga, iyo xasilooni-darrada ka-dhex-jirta qoysaska Soomaalida. Shan, waxaa kusoo-gebo-gebaynaaa dhaawaca iyo khataraha laga-dhaxlay qaabka loo-koriyo ubadka Soomaaliyeed, ee sababta u noqday xasilooni-darrada ka-dhex-jirta qoysaska Soomaaliyeed—taas oo horseeday dib-u-dhaca (dhinac walba ah ee) bulshada Soomaaliyeed ku sugan-tahay, weligeedna ay ku sugnayd.

Bar-baarinta Ubadka Miyiga

Miyugu waa meesha ugu khariba (uguna xun) ee ilmo caruura lagu-koriyo—waa cadaabtii ifka ee ilmaha yar. Soomaalidu—noloshooda intii ugu-badnayn—waxay kuu-noolaayeen miyiga (baadiyaha). Nolosha miyigu waxay ahayd (ilaa iminkana ay tahay) nolol aad u adag oo dhib badan. Miyugu waa dhul oommane iyo qorfe ah. Waa dhul

ay aad ugu yar-yihiin baadka iyo biyuhu. Waana dhul cidla ah. Dadka ku-nool dhulka nocaas ahina, waxay ahaayeen dad xoolo-dhaqato ah. Xoolaha ay dhaqdaan wuxuu u badnaa geela iyo adhiga. Xoolahaasi waxay u baahanyihiin baad iyo biyo. Sidaa awgeed, dadkaas reer miyiga ahi waxay mar walba u guuri-jireen kolba meesha leh baad iyo biyo. Marka ay reeruhu u guurayaan dhullal kala-fog waxay la-kulmi-jireen dhibaatooyin aad u tirro-badan: haraad, hayaan dheer, colaad, cudduro, iwm. Dadkaasi may haysanin cunto ku-filan oo ay cunaan. Waxaa cunto u ahaa caano, hilib mar-mar la-cuni-jiray, iyo midhaha dhirta (mar-marka qaarkood ayay cunto heli-jireen). Dhinaca kale, dadkaas reer miyiga ahi waxay u kala-qayb-sanaayeen qabi-ilooyin aan isku-duubnayn. Qabiil waliba dhul gaar u ah ayuu deganaa. Noloshaa adag, ee dhibta badannina, waxay sababtay colaad joogto ah oo dhex-marta qabiilooyinkaas kala-duwan. Colaadana waxaa sababi-jiray baadka iyo biyaha oo yar; iyo geela oo la-kala dhici-jiray. Hadaba, dadka ku nool nolasha sidaa u adagi, side ayay u korin-jireen ubadka? Dadkaasi si kala duwan ayay u korin-jireen wiilasha iyo gabdhaha.

Bar-baarinta inanka (wiilka): Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi)—oo yaraantiisii kusoo-koray miyiga—ayaa si qoto-dheer uga sheekeeyey sida ubadka ay u bar-baariyaan dadka miyiga degeni. Inanku marka ugu-horeeya ee uu dhasho, waa la-anqariyaa (anqarin micnaheedu waxaa weeye: caano yar ayaa afka luugu-shubaa [lagu-habaa]). Inanku (wiilku) markuu gaadho saddex-jir (3 sano), ee uu naaska hooyadii ka-gudho, ayaa hooyadii laga kaxeeyaa. Waxaa xambaara—oo tuurta saara—nimanka geel-jiraha ah. Waxaan la-dhex-geeyaa geela, oo jooga meel aad-iyo-aad uga fog guriga ay reerku degen-yihiin. Sababta inanka looga fogaynayo hooyaddii iyo

dumarka kaleba waxaa weeye, waxaa loo-diidayaa inuu ku-koro raaxo, kool-koolin, iyo naxariis. Marka uu innanku dhex-jooga geela hal sano (1 sano), ee uu gaadho afar-jir (4-jir), ayaa waxaa loo-bilaabayaa howshii geela. Isaga oo afar-jir ah, ayuu bilaabayaa howshii geela. Howsha ilmahaas yar lagu-bilaabayaana siddan ayay u-kala-horaysaa. Kow, waxaa markiiba la-barayaa magacyadda geela (waxaa laga-yaabaa inay geela tirradoodu yihiin 100-neef ama ka-badan). Laba, waxaa ilmahaas yar loo-diryaa inuu hasha soo-godlo. Saddex, waxaa loo-yeedhaayaa inan (wiil) kale oo isna afar-jir ah (4-jir) oo geel-kale la-jooga. Labadaas inan (wiil) ee yar-yar ayaa loo-golaynayaa (laysu-saarayaa) si ay leg-damaan. Inanka la-legdo, habeenkaas caano lama-siiyo; wuxuu seexanayaa isagoo gaajaysan, oo aan waxba cunin. Mar labaad ayaa loo-golaynayaa labadii inan (wiil) ee yar-yara. Laakiin, markan labaad ma'aha legdintii hore oo kale. Markan labaad, waxaa labada inan (wiil) kasta loo-dhiibayaa laba ullood (dhengadood), oo madheedh ah—oo dubanyo ah. labadaas inan ee yar-yar ayaa dhengedaas isla-dhacaya. Naxariisi ma-jirto. Si axmaqnimo ah ayay dhengedda isula-dhacayaan. Midna-midka-kale uma naxariisanayo. Diirka ayay iskaga-siibayaan. Meel kasta oo ay dhengedaasi kaga-dhacdo ilmahaas yar, diirka ayaa ka-mudhxaya. Jidhkoodu wxuu isu-bedelayaa nabar miidhan; sababtoo ah, dhengedda ayaa jiidhka mudhxinaysa. Ilamaha xejisan-waaya xanuunka dhengedda, oo cabaada ama ooya, wuu ceeboobayaa. Laakiin, ilmaha adkaysta, ee cabaadi waaya, wuu guulaystay. Ujeeddaduna waxaa weeye: ilmaha yar ayaa waxaa laga-baa'bi'inayaa naxariista, qalbi-jileeca, iyo raxmadda. Ragii waaweynaa ee labadaas inan ka-masuulka ahaana, hareeraha ayay taagan-yihiin oo way isu-daawanayaan. Caruurtaas dhengedda isla-dhacaysa, ragaas waaweyni waxay ka-dhiganayaan mada-daalo.

Ciqaabtaas dagaalka ka dib, waxaa ilamahaas yar loo-bilaabayaa inuu howshii geela qabto. Ilmahaasi wuxuu qaadaya, oo dhabarka loo-saarayaa, maqaarka hasha igadha ah, hadhuubka, iwm. Malintii ooo dhan, geela ayuu dabataagan-yahay ilmahaasi, hadii uu geelaasi yahay geedi (socod ku jiro) iyo hadii uu meel-degen-yahayba. Nirgaha yar-yar auu ka-gurayaa shilinta iyo kafana. Intaas ka dib, waxaa loogu-xigsiinayaa inuu barto sida loo-diiro, ee loo-xardho, ee loo-feedho, maraqa (maraqa hasha lagu-maro). Marka uu ilmahaas-yari gaadho todobba-jir (7-jir), waxaa laga-filayaa inuu noqdo nin buuxa, oo qaan-gaadh ah (ogow: waa todobba-jir). Wuxuu masuul ka-noqanayaa—oo uu dusha ku-sidyaa—sibraarka caanaha lagu-qaato; hadhuubka xoolaha lagu-maalo; gudinta wax lagu-gooyo; iwm. Sida caaddada ah, geela waxaa la-geeyaa dhul aad u fog oo daaq-leh. Bishiiba mar ayaa geela lasoo-arrorriyaa si loo-waraabiyo. Marka geela lasoo-arroorrinayo, waxaa loo-lugeeyaa masaafo aad-iyo-aad u dheer. Ilamahaas yarina socodkaa dheer, ee dhibta badan, ayuu lugaynayaa. Waxba ma cunayo; waxba ma cabayo; qodax ayaa mudayasa; qori ayaa mudaya, iwm. Wax-kasta oo dhib ah oo uu dareemo, looma-ogola inuu damqado, ama ka-cawdo, ama "ax' yidhaahdo. Waa inuu u adkaystaa dhibaato kasta oo soo-gaadha. "Waxaa lagaa-dhigayaa," ayuu yidhi Hadraawi, "mustaqbalka in aad 'nin' noqoto . . . Waxaa [lagu-barayaa], samirka, dul-qaadka . . . in aad noqto jittattabe raganimo-leh." Intaa ka dib, waxaa la-gaadhayaa ceelkii. Marka geela la-geeyo ceelka, ee la-waraabinayo, marka hore waxaa geela l-tubaa (lagu-urruriyaa) meel. Ka dibna, kolba qayb geela ka-mid-ah ayaa lasoo-daayaa si loo-waraabiyo. Miyiga waxaa looga-yaqaan: kala-horida geela. Ilmahaas yari, isaga ayaa geela hor-taagan oo kala-horya (kolba qayb soo daynaya). Waxaa ilmahaas yar la-barayaa inuu u adkaysto

gaajada, haraadka, soo-jeedka, socodka, qodaxda, dilka, caggaaga (kabo la'aan inuu ku-lugeeyo). Hadraawi wuxuu intaa sii-raaciyey, sharaxaad murrugo badan oo si dhab ah u tilmaamaysa shakhsiyadda qofka lagu-koriyo miyaga: "Markaa isagoo qofku duban-yoobey, oo sir-sira, oo qallallan, oo naxariis daayey—dee naxariis ilayn mabuu arage" ayuu noqonayaa qof qaan-gaadha. Hadraawi wuxuu yidhi: "Waxaa lagaa-dhigayaa bir-lab [qof adag] . . . Sida maanta [jirta ee] . . . quraacda, qaddada, iyo cashada, iyo dabac-sanaanta, iyo jileeca, iyo nuglaanta iyo waxaasi ma-jiraan. Waxaa la-doonayaa in aad ul madheedha, oo dubanyo ah, noqoto."

Bar-baarinta innanta (gabadha): dadka reer miyiga ahi, habka ay u bar-baariyaan innantu wuu ka-duwan-yahay habka loo bar-baariyo inanka. Culayska ugu-weyn waxaa la-saarayaa innanta. Inantu marka ay dhalato, lama-anqariyo (anqarin micnaheedu waxaa weeye: caano yar ayaa afka luugu-shubaa [lagu-habaa]). Waxaynu soo-aragnay in marka uu inanku dhasho la-anqariyo—caano la-siiyo; laakiin, innanta lama-anqariyo—caano lama-siiyo. Waa maxay sababta inankana caanaha loo-siinayo; innantana aan loo siin-waayey? Hadraawi wuxuu ku-jawaabay: "Halkaas ayaa [innanta] looga-bilaabayaa samirka iyo adkaysiga. Waa innan-oo, shuruuddo badan-baa ku-xidhanoo, marka la-guursaddo ayaa laga-baqayaa inay ceeb keeno." Intaas ka-dib, innanta labadeeda lugood ayaa laysku dhejinayaa; ka dibna, labadii lugood oo isku-dheggen ayaa xadhig laysugu xidhiyaa (Waxaa looga-jeedaa inay innantu lugaha isku-qabsato mar walba). Ogow, waa innan yar oo jirta dhowr saacadood. Iyaddoo innantii ay lugaheedu isku xidhan-yihiin, ayaa waxaa loo-jiifinayaa bar-barka. Laakiin, marka ay innantu jiifto muddo soddon-daqiiqaddood ama saacad ah, ayaa waxoogaa yar oo caano ah afka loogu-

shubayaa. Marka ay innantu gaadho saddex-jir (3-jir), ayaa loo-bilaabayaa inay howsha guriga qabato. Markiiba waxaa loo-dirayaa inay soo-gurto xaabada. Sababta loogu-dirayo inay xaabo soo-gurto iyadoo saddex-jir ahi waxaa weeye: xaabada ay soo gurayso, lama rabo; laakiin, waxaa la-doonayaa in la-baro howsha iyo shaqadda. Marka ay gaadho shan-jir (5-jir), waxaa loo-dirayaa inay raacdo maqasha. Ka dib, marka ay gaadho lix-jir (6-jir) ilaa tobban-jir (10-jir), adhiga ayay raacaysaa. Innanta yari, maalintii oo dhan adhigaas ayay la-joogaysaa. Isagoo Hadraawi ka-hadlaya cuntada ay innantaas yari cunto maalintii oo dhan, wuxuu yidhi: saacadu markay tahay lixda subaxnimo, ayay caano cabtaa. Caanahaas ay subaxii cabtay, cuntadda ugu-xigta ee ay quudataa waa wakhtiga fiidnimadda—marka ay soo-hoyso adhigii ay la-joogtay. Taas micnaheedu waxaa weeye: maalintii oo dhan waxaa cunto ah, caano ay cabto lixda subaxnimo iyo caano ay cabto fiidkii.

Dhinaca kale, innantaas yari iyadoo aan gaadhin tobban-jir (10-jir), ayaa waxaa la-barayaa: xoolaha sida loo-agaasimo, sida loo-raaco, sida loo-liso, sida loo-qalo, sida loo-kariyo; iyo sida loo-dhiso aqal Soomaaliga; sida, xadhigiisa, udubkiisa, dhigtiisa, harrarkiisa, kebediisa, dulsaarkiisa, dheg-saarkiisa, iwm. Intaas ka dib, waxay baranaysaa sida awrta loo-rarro. Innantu waxay baranaysaa sida ay u hannan-lahayd reerkeeda marka la-guursaddo. Hadraawi, wuxuu si qoto-dheer u sharaxay qaabkii arxandarrada ahaa ee reer miyigu ul-bar-baarin-jiray ubadka.

Bar-baarinta Ubadka Magaaladda

Bar-baarinta ubadka ee magaaladdu, dhinacna wuxuu lamid-yahay bar-baarintii miyiga; dhinacna wuu ka-duwan-yahay. Sababtuna waxaa weeye: qaabka loogu nool-yahay

magaaladdu aad ayuu uga duwan-yahay qaabkii loogu noolaa miyiga. Nolosha magaaladdu aad ayay uga dhib-yar-tahay, ugana fuddudahay, nolosha miyiga. Halkan ku shar-ixi-maayo kala-duwanaanshaas; laakiin, waxaan ku-sharax-ayaa bar-baarinta ubadka magaalada.

Marka magaaladda la-joogo, habka loo-bar-baariyo ubadku waa hab aad u khaldan, oo kalifaya inay ubadku noqdaan dad aan naxriis, damiir, garasho, cilmi, dedaal, iyo tacab midna lahay. Aan soo qooto, dhowr qaybood oo khaldan oo ka mid ah sida loo koriyo ubadka Soomaaliyeed.

Garaacida ubadka: habka khaldan ee ugu horeeya waxaa weeye: *garaacida ubadka*. Soomaalidu waxay aamin-santay in garaacida ubadku ay tahay hab wanaagsan oo ubadka loo koriyo. Garaacida ubadku waa habka ugu khaldan ee ubadka loo koriyo. Cilmi-baadhis ay sameeyeen dhakhtarada cilmi nafsigu (psychologists) waxay ku cadeeyeen in garaacida ubadku ay dhaawac maskaxeed u keento ubadka; noloshooda oo dhana ay dhaawac ku noqoto. Cilmi-baadhistaas waxay intaas ku dareen in marka ay ubadkaas la-garaaci jiray waynaadaan ay yeeshaan dabeecado iyo dhaqamo aad u xun. Kuwaasna waxaa ka-mid-ah. Kow, qofka yaraantiisii la-garaaci jiray, waxaa ku dhacda cuqdad nafsi ah (low self-esteem). Waa maxay cuqdada nafsigu? Waxaa weeye marka aanu qofku naftiisa ku salsoonayn. Astaamaha lagu garto qofka cuqdad nafsiga qaba waxaa ka-mid-ah: 1) marka uu khalad sameeyo, waxaa aad ugu adag inuu raali-gelin bixiyo oo uu yidhaahdo, "raali ahow;" 2) waa qof iska dhisa dadka kale—wuxuu u hadlaa, u dhaqmaa, una lebistaa sida dadka uu iska dhiso; 3) dadka casuuma, xalfado u sameeya, ama hadyado siiya si uu dadka uga helo aqbalaad; 4) aaminsan in aanay dadku soo dhaway-naynin marka ay ogaadaan shakhsiyadiisa dhabta ah; 5)

jecel inu dadka kale hoos u dhigo, si uu u dareemo inuu ka sareeyo; iwm. Waa xanuunada ugu xun ee ay keento garaacida ubadku.

Dhinaca kale, garaacida ubadku waxay keentaa in marka uu ilmuhu waynaado uu noqdo qof dagaal badan. Waayo? Marka uu qofka la garaaco isgoo yar, wuxuu dareemaa in loo xoog sheegtay, oo dad ka xoog wayni ay garaaceen. Waxaa ilmaha yar maskaxdiisa ku abuuranta in sababta loo garaacayey ay ahayd itaal yarida lagu arkay. Sidaa awgeed, marka uu qofkaasi waynaado dabeecadiisa ayaa xumaata. Sababtoo ah, hadalada caadiga ah, ee dadka kale caadiga u arkaan, isagu wuxuu u arkayaa in ay yihiin hanjabaad iyo haga-juglayn. Markaa wuxuu isku dayayaa inuu qofkaas ugu jawaabo hadalo aan fiicnayn; halkaasna uu dagaal ka bilowdo.

Qofku markuu cuqdad nafsi qabo, waxaa kale oo uu isku dayaa inuu dadka kale yasso, hoos u dhigo, ku digto, iwm. Waayo? Qofka naftiisa qucdada ka qabaa si uu u dareemo farxad iyo inuu yahay qof isku kalsoon, waa inuu dadka kale yassaa oo hoos u dhigaa. Marka uu dadka kale hoos u dhigo, ayuu dareemaa inuu yahay qof han leh. Hadii uu dadka kale hoos u dhigi kari-waayo, wuxuu isku dayaa inuu dadkaas ka fogaado, oo uu doonto dad uu hoos u dhigi karo oo uu yassi karo. Taasina waxay kaliftaa in ay dadku nacaan marka ay arkaan inuu yassayo. Marka ay dadku nacaan, ee ay ka fogaadaana, wuxuu qofkaasi dareemaa in sababta ay dadku uga fogaadeen ay tahay in uu yahay qof hooseeya oo aan fiicnayn. Qofka cuqdad nafsiga qabaa noloshaas cidhiidhiga ah ayuu ku nool yahay. Waxaas oo dhana waxaa sababay makii uu yaraa ayay waalidkii garaaci jireen. Hadii aad u fiirsato dadka Soomaalida ahna, badankoodu dabeecadahaas aan kor kusoo xusay way leeyihiin. Nebigu (cs) waligii muu garaacin ilma yar oo uu ka

masuul yahay. Dunida horuumartayna waa danbi in ilmaha la garaaco. Soomaalidu labada midna may raacin.

Dagaalka la baraa ubadka: ubadka Soomaalidu marka ay yar-yar yihiin waxaa la baraa in ay la dagaalamaan caruurta yar-yar ee ay is leeg-yihiin. Inamada iyo hablaha, labadaba waxaa lagu koriyaa in ay "iska celiyaan" oo ay la dagaalamaan caruurta jiiraanka (deriska). Caruur yar-yar oo guryaha lagusoo garaacay, oo cadhaysan, ayaa hadana waxaa la-barayaa inay la dagaalamaan caruurta kale. Sidaa awgeed, waxaa layska hor keenaa caruur qabta cuqdad nafsi, oo mid waliba uu doonayo inuu muujiso inuu ka kale ka sareeyo. Sidaa awgeed, caruurtaasi waxay si joogto ah ugu jiraan is-difaacid, dagaal, iyo rabshad. Ilmaha yar ee laga adkaado waa la caayaa; waxaa la tusaa inuu yahay qof liita. Taasina waxay kusii badisaa cuqdad nafsigii. Sidaa awgeed, wuxuu isku dayaa inuu muujiso in aanu liidanin. Si uu taas u muujinaya wuxuu sameeyaa inuu qof dhaawaco; dilo; ama shakhsiyadooda dhaawaco. Waa sababtay ay Soomaalida ugu badan tahay gacan ka hadalka, dilka, dhaawaca, af xumida, iyo cuqdadu.

Beenta ayaa la baraa: Ilmaha yar ee Soomaaliga ah waxaa lagu bar-baariya inuu beenta berto. Beentana cida ugu horaysa ee ku bar-baarisaa waa waalidka. Hablka ilmaha yar beenta loo baraa way noocyo badantay. Aan soo qaato laba tusaale. Tusaalaha koowaad, waalidku marka uu doonayo inuu ilmaha yar wax u dirto (adeegsado) ama uu doonayo inuu casharada iskuulka si fiican u dhigto, ayuu waalidku wuxuu ilamaha yar ugu balan qaadaa inuu alaab usoo iibin doono hadii uu casharada si fiican u dhigto. Ilamaha yari wuu rumaystaa waalidkii, waxaanu ku dedaalaa inuu casharada si fiican u dhigto. Marka uu ilamaha yari ku guulaysto wax-barashada, ayuu waalidki waydiistaa in alaabtii loosoo iibiyo. Ayaan-daaro'se waalidku

balantii wuu ka baxaa. Marka uu ilmaha yari arko dhac-dooyin noocaas ah oo badan, wuxuu fahmaa in beenta iyo in balanta laga baxo, oo ay tahay wax aan dhib lahayn. Tusaalaha labaad, ilamaha yari wuxuu mar walba arkaa aabaha oo been u sheegaya hooyada, ama hooyada oo been u sheegaysa aabaha. Sidaa awgeed, wuxuu ilmaha yari aaminaa inay beentu tahay wax caadiya, oo aan ceeb ahayn. Halkaas ayuu ka bartaa beenta.

Fariid: Soomaalidu waxay fariidka u taqaanaa qofka dhibka badan, rabshada badan, khiyaamda yaqaana, dagaalka badan, iwm. Sidaa awgeed, waxaa ilamaha yar lagu dhiiri-geliyaa inuu yeesho dabeecadahaas aan kor-ku-xusay. Ilamahaas yar waxaa lagu bar-baarinayaa inuu noqdo qof aad u dhaqan xun. Waxaad mar walba arkaysaa caruur Soomaaliyeed oo nin waalan (dhimirka ka buka) dhagac la dhacaya, dilaya, ama ku ciyaaraya. Sababtu waxaa weeye, habka aadka u liita ee ubadkaas loo koriyey.

Nacas: Soomaalidu waxay nacaska u taqaanaa qofka degen, diinta leh, akhlaaqda leh, afka gaaban, aan dadka dhibin, iwm. Dhaqanka Soomaalida qofka dabeecadahan lihi, waa nacas. Sidaa awgeed, marka ay Soomaalidu ubadka korinayaan, waxay ku dedaalaan in aanu ilmahoodu yeelanin dabeecadaas kor-ku-xusan. Dabeecadahaasina, waa dabeecaday ay ina fartay diinteenu in aynu ku dhaqano; waana dabeecadaha ay dhiiri-geliyaan dunida horuumartay. Hadaba, marka ilamaha yar sidaa loosoo koriyo, qof noocee ah ayuu noqdaa marka uu waynaado?

Tacaddiga Qoyska Soomaalida

Bar-baarintaas ubadka ee aan kor-kusoo-xusay, waxaad ka-arkaysaa in ubadka Soomaalida loo-bar-baariyo qaabka ugu liita, ugu khaldan, uguna xun, ee ubad loo-bar-baariyo.

Ubadka Soomaalida—khaasatan inamadda (wiilasha)—waxaa lagu-bar-baariyaa naxriis-darro, karti-darro, tacab-xumo, garasho-la'aan, cilmi-la'aan, diin-yaraan, akhlaaq-darro, iwm. Bar-baarinta noocaas ahina, waxay sababtay in inankii uu u noqdo: axmaq, ma-naxe, oo wax-masuuliyad iyo garasho ah aan lahayn. Dhacdooyinkan hoos-ku-xusani, waa dhacdooyin dhab (run) ah, oo dhacay. Dhacdooyinkan aan soo-xushay waxay u-kala qaybsan-yihiin sidan: dhac-dadda kowaad, waa dhacdo ku-dhacda hooyo Soomaaliy-eed, oo aad u murrugo badan. Waa dhacdo mar walba ka dhici jirtay Soomaaliya oo ay dumarku ku noolaayeen muddo aad u dheer, inkastoo ay iminka sii yaraanayso; dhacdadda labaad, waa dhacdo iyadduna aad-iyo-aad u murrugo iyo xanuun badan—waa dhacdadda uu Abwaan Hadraawi ka-alifay maansada "*Awaal-Tiris*;" dhacddadda saddexaad, waa dhacdo ku-dhacday hooyo ummul ah, oo ubadkeeda u shaqaysa; dhacdadda afaraad, waa ayeeyo u shaqaysa ubadkii uu dhalay inankeedu; dhacdadda shanaad, waa dhacdo aan usoo-taagnaa oo ku saabsan hooyo la-furay, oo caruurtii lagu-dayacay; dhacdadda lixaad, waa dhacdo aan anigu usoo-taagnaa oo ku saabsan masu-uliyad-darrada ka dhalata guurka badan; dhacdadda todobaad, waxay khaldanaa ee hablaha loo-bixin-jiray; dhacdadda siddeeddaad, waxaan ku sharaxayaa dhibta haweenka Soomaaliyeed ku haystay (ilaa iminkana ku-haysata) qoyskooda gudihiisa—oo qaab gumaysi ah. Dhac-dooyinkaas oo dhan waxaa sabab u ah nidaamka khaldan ee aynu u bar-baarino ubadkeena—gaar ahaan wiilasha.

Hooyo Soomaaliyeed: hooyadan magaceeda waxaa la yidhaahdaa Malyuun Xasan Cawad. Malyuun waxay kusoo bar-baartay miyiga. Iyadoo qiyaastii jirta 9 ama 10-sanad-dood, ayaa waxaa reerkoodii soo-weerrarray ciidamadii dhiigya-cabka ahaa ee Daraawiish-ta, ee uu hogaaminaayey

Sayid Maxamed Cabdulle Xasan. Ciidamadii ayaa diley dhamaan qoyskeedii—aabaheed, hooyadeed, iyo walaalaheed oo dhan. Nasiib-wanaag, Malyuun way ka-bad-baaday dilkaas axmaqnimadda, damiir-xumidda, diin-la'aanta, iyo kibirka ahaa. Markii la-laynaayey waalidkeed iyo walaalaheed, waxay ku-dhuumatay geed guriga u dhawaa. Ka dib, way baxsatay. Iyadoo 10-jir ah, ayay naftu ku dirqiday inay dhex lugayso kaymihii, qorfihii, iyo dhulkii libaaxyadda lahaa. Nasiib wanaag, waxay kusoo-baxday reer meel deggen. Reerkii ayay muddo gaaban la-joogtay, oo ay adhiga u raaci-jirtay. Muddo-gaaban ka-dib, iyadoo adhigii la-joogta ayaa waxay aragtay safro agteeda maraya, oo u safraya magaalada. Safrihii markii ay waraysatay, ayay uga warantay wixii dhacay; waxaanay ka-codsatay inay u raacdo magaalada. Safrihiin way ka-aqbaleen.

Markii ay magaalada timi Malyuun, waxay u-tagtay adeerkeed oo magaalada degenaa. Malyuun waxay si wanaagsan ugusoo-kortay guriga adeerkeed. Markii ay barbaartay, ayaa waxaa soo doonay (oo la-siiyey) nin magaalada degenaa. Markii uu ninkaasi soo doonaayey Malyuun, waxay wuxuu watay laba caruur ah oo ay u dhashay gabadh ay kala-tageen. Malyuun way ku ogolaatay inay ku guursato isagoo caruurtiisa wata. Malyuun waxay u korin-jirtay labada caruura ee ay u dhashay gabadha kale. Muddo yar ka dib, Malyuun waxay ku curate wiil. Muddo kale ka dib, iyadoo Malyuun uurka ku-sida gabadhii labaad, ayuu ninkii wuxuu safar gaabay ugu-baxay magaalo kale oo ay qoyskiisu degenaayeen, wuxuuna Malyuun u sheegay inuu soo-noqnayo muddo yar ka-dib. Markii uu tagay magaaladii kale, ayaa wuxuu kula-kulmay walaalkii oo ka wayn. Walaakiina wuxuu ku yidhi, "Kuma noqonaysid magaaladaas aad ka timid ee xaasku kuu joogo. Anaga nala-joog; gabadhna waan kuu dhisaynaa. Hadii aad ku noqoto maga-

aladaas, dib danbaysa kuula hadli maayo; wax inaga-dhax-aynayaana ma jiraan." Ninkii wuxuu aqbalay amarkii walaalkii; waanu guursaday. Ogow, marka uu sidaa samaynayo, Malyuun waa xaamilo, oo waxay uurka ku sidaa gabadh. Waa keligeed. Cid u shaqaysa oo caawisa ma haysato. Iyadoo xaaladaas adag ku-jirta, ayaa maalintii danbe, ninkii fariin usoo-diray Malyuun. Fariintuna waxay ahayd: "Anigu waan guursaday. Magaaladaas aan tagay ayaan deganaanayaa; magaaladaas aad degantayna umasoo socdo. Sidaa awgeed, laba kala-dooro: 1) soo guur oo ii kaalay; ama 2) caruurtayda gaadhiga iisoo-saar, oo iisoo-dir." Malyuun markay warkaas maqashay, naxdin iyo argaggax ayaa hadheeyey. Dhulka ayaa kusoo-yaraaday. Wax ay samayso ayay garan-waday. Way ka diiday inay u guurto oo u tagto, isagoo gabadh kalena guursaday. Laakiin, labadii caruur ahaa ee ay u dhashay gabadha kale, waxay u dirtay oo waxay ugu tageen magaaladaas cusub ee uu degay. Malyuun waxay la-hadhay wiilkii iyo gabadhii yarayd oo ay markaas umushay. Malyuun waxaa ku-kulmay laba murugo oo aad u xun.

Murrugadda koowaad waxay ahayd, iyadoo da'deeddu aad u yar-tahay ayuu la-guursaday. Waa muruggo aad u xanuun kulul. Malyuun waxay ka-ogolaatay ninkaas inay koriso ubadkii ay u dhashay gabadhiisii hore; si fiicana way ugu korinaysay. Waxay dareemaysay sida uu qof kasta oo bani'aadam ahi dareemi-lahaa—inay abaal ku leedahay, oo ay wanaajisay. Marka aad qofka abaal u gashana, waxaad ka-filanaysaa inuu kuu-baal-guddo, ama uu kugu qadariyo, kugu sharfo, oo kugu-qiimeeyo. Intaas midna kamay helin. Malyuun waxay dareentay in iska-daa inuu u-baal-guddo'e, ama uu ku-qadariyo, ama ku-sharfo'e, inuu qalbigeeddii dhaawacay. Murrugadda labaad ee ay Malyuun dareentay waxay ahayd: iyadoo aan haysanin cid caawisa, oo u gar-

gaarta ayuu go'aankaas gaadhay. Iyadoo xaamilo ah, oo aad u jilicsan, ayuu intuu ka nixiyey, ka dhaqaaqay. Taas waxaa kasii darayd, wax masruuf ah (biil ah) umuusoo diri-jirin. Maalintii uu safray ayaa ugu danbay masruuf uu siiyo. Bal waxaad sawirataa arinkan: hooyo korinaysa laba caruur ah, oo aan haysanin cid u shaqaysa, cid caawisa, cid masruufta, oo jilicsan, oo keligeed ah, oo ninkeedii gabadh kale la-guursaday? Miyaad garan-kartaa murrugo, niyad-jab, calool xanuun, iyo qalbi-jab ka wayn? Qof kasta oo ay ku-jirto dadnimo, damiir, diin, garasho, iyo naxriis, wuu garan-karaa murragada ay Malyuun dareemaysay.

Dhibaatadda ay Malyuun kala-kulantay ninkaas waxaa ugusii-darnaa arinkan. Ninku muu fasixin (muu furin) Malyuun. Waxaa habooanayd in uu fasaxo (oo uu warqadeeda iyo meherkeeda siiyo) maadaama uu go'aansaday in aanu mar danbe usoo noqonaynin, gabadh kalena uu guursaday. Ayaan-darro'se sidaa muu samaynin. Malyuun oo da'ddeedu yartahay ayuu ka safray, manuu soo fasixin. Malyuuna xishood aawadii ayaanay marna u waydi-isanin warqadeedii. Malyuun waxay ahayd qof diinta iyo dhaqankeena aad u jecel, oo aad u qadarisa. Marna afkeeda kamuu-soo-bixin inay waydiisato warqadeeda, oo uu Illaahay xaqa u siiyey. Ninkuna muu garanin inuu fasaxo, si ay nolol kale u samaysato. Sidaa awadeed, Malyuun marna umay suurto-galin inay nolol kale samaysato. Bal waxaad u fiirsataa ciqaabta intaa leeg. Marka aad ka eegto dhinaca Shareecada Islaamka, miyaanay ahayn dulmi iyo danbi uu ninkaasi sameeyey? Marka aad ka eegto dhinaca dadni-madda, naxariista, garashadda, iyo caqliga suuban, miyaanay ahayd dulmi? Waa dulmi aannan garan-karin wax aan ku qiyaaso. Malyuun waxay tirin-jirtay buraan-burka. Sidaa awgeed, waxay dareenkaa murrugadda iyo xanuunka leh ku cabirtay buraan-burkan aan ka hayo qaybtan

(buraan-burku intay wuu ka dheeraa; laakiin, intan ayuunbaa lagasii xasuustaa):

Haduu u quweeyey, qowlki walaalkii yidhi,
Haduu ka qormaystay, qoladii talkiis ahayd,
Walee ma talaabsadoo, anigu uguma tago,
Waleee gaadhigaan rooraaya, uma rabaqo,
Walee ubadkan aan u rayfoobay, uguma rido,
Walee qoyskayga Qardho, waan la gaynahayn.

Cismaan iyo Ciise, iyo Cumarka Mudduga dega,
Intii Maxamuud dhalee, magaca dheer lahyd,
Qusuusiga reer Harti, een wiil qalyana lahayn,
Masruufna nimaan i siin, maalna ii xarayn,
Arwaaxaygiyo mid ubadkaygii dayacay,
Alla ma Illaahba iiga dayey, dawri dabarka jaray.
Waxay dumarkoodda, daabad faras ka bixin,
Waxay adhi duuda iyo, geel dugsile dhex furi,
Alla ma Illaahba iiga dayey, dawri dabarka jaray.

Malyuun markii ay wax masruufa ah ka-wayday ninkii, waxay go'aansatay inay shaqaysato; ubadkeedana ay keligeed korsato. Runtii, Malyuun waxay ahayd qof u dhalatay karti iyo sharaf. Markiiba waxay bilowday baayac-mushtar yar, Illaahayna wuu u barakeeyey. Muddo ka dib, dhaqaale fiican ayay ka heshay baayac-mushtarkii yaraa. Garowga ayay kasoo iibsan-jirtay beeraha u dhaw maga-alada ay degentay; ka dibna, waxay ku iibin-jirtay maga-alada ay degentay. Dhaqaale fiican ayay ka samaysay. Ubadkeedii ayay si fiican ugu korsatay. Dhul ayay iibsatay, waxaanay ka dhisatay guryihii wakhtigaas la-dhisan-jiray. Way soo xaj-tay (xaj-ka ayay tagtay, oo waajibkii Illaahay ayay soo gudatay—Illaahay haka aqbalo, aamiin). Waxaa

kale oo ay Malyuun dhaqan-jirtay riyo. Riyahaas waxaa ku-jiray r'i ay aad u jeclayd, oo la-odhan-jiray "Ilays." Maalintii danbe, ayaa la-waayey riyihii meel ay jaan-iyo-cidhib dhigeen. Malyuun aad ayay u raadisay, oo daal badan ayaa ka-qabsaday inay soo hesho. Markii ay ka-quusatay, ayay ka niyad xumaatay riyahaas ay muddadda soo dhaqanaysay ee ay wayday; khaasatan ridii ay jeclayd ee "Ilays." Ilaa iminka lama-garanyo riyahaasi in la-xaday; inay lumeen; iyo wax ku dhacay. Hadaba, Malyuun iyadoo buraan-bur ku cabiraysa niyad-jabkaa ku dhacay markay riyihii wayday iyo daalkii badnaa ee ka qabsaday baadi-doonkoodii, ayaa waxay tidhi (buraan-burkanna intan gaaban ayuunbaa laga xaasuustaa. Laakiin, wuu ka dheeraa intan):

Hadaan maddigii Ilays, ii miliilicayn,
Hadaanaan maadhkeeda iyo, macandiddeedda baran,
Haday mirkahay miraabsay, igu mudnayn,
Oon samir qaato, maanigaa socon lahaa.
Fuluus-kaygii hadaan, faaliye iga guran,
Daaca baas iyo hadaan, lay akhriyin danbaab,
Oon ka saamir qaato, maanigaa socon lahaa.

Malyuun si sharaf-leh, oo aad u wanaagsan, ayay u korisay wiilkeedii iyo innanteedii. Markii uu wiilkii koray, ayuu u shaqo tagay magaalo kale. Malyuun waxaa usoo-hadhay, oo wehel u ahaa, inanteeda. Innantii way kortay, waanay guursatay. Markii ay innantii reer yeelatay, Malyuun waxaa guriga la-degenaa gabadh kale oo ay ka kiraysay qol ka-mid-ah gurigeedii ay dhisatay. Laakiin, cid kale oo Malyuun la degenayd may jirin.

Nuxurka Sheekadda: qof waliba—rag iyo dumar—wuu jecel-yahay inuu nolol iyo mustaqbal samaysto. Qof waliba wuu jecel-yahay inuu helo qof uu nolosha la qaybsaddo;

Illaahay ayaa inoo sheegay; suubanihii Maxamed-na (CS) aad ayuu ugula dar-daarmay dadka Muslimiinta ah—rag iyo dumarba. Nebigu (CS) wuxuu inoo sheegay in marka uu qofku guursaddo ay diintiisuna dhamays-tirranto. Diinteena Islaamku, waxay aad u dhiiri-gelisaa guurka; si uu qofka Muslima ahi ugu xasilo. Waxaa kale oo uu Illaahay dejiyey xuquuq ay isku-leeyihiin lamaanaha reerka wada dhistaa. Ninku xuquuq ayuu leeyahay; xaaskuna xuquus ayay leedahay. Xuquuqdaas uu Illaahay siiyey Muslimiintuna, ma'aha xuquuq layska baryaayo. Waa AMAR uu Illaahay ina siiyey; qofkii xuquuqdaas ku xad gudbaana uu noqnayo qof khatar ku dhacay. Sidaa awgeed, ninkaas guursaday Malyuun wuu ka duuddsiyey—oo wuu ku tuntay—xuquuqdeedii. Xuquuqda ugu wayn ee uu ninkaasi duudsiyeyna waxay ahayd: in aanu fasixin Malyuun (in aanu warqaddeedii siinin). Furitaanku ceeb ma'aha. Waa wax nolosha ka mid ah. Illaahay ayaa inoo-sheegay in labada qof ee is fahmi-waaya ay u banaantay inay kala-tagaan.

Marnaba waxaan la-aqbali-karin, oo aan sina cadaalad u ahayn, in ninku sameeyo siddan soo socota: inuu xaaskiisii—oo aanu waxba kaga cabanaynin—iskaga tago; biil siin waayo; mar kaliya soo booqan waayo; fasixina waayo. Waa tacaddi iyo dulmi halkii ugu saraysay. Xaas dhalinyaro ah, oo wakhtigeeddii oo dhami u hadhay, oo inta la meheriyey; laga tagay; biil aan la siinin; lana furin. Malyuun waxay geeriyootay iyadoo qiyaastii 90-jir ah. Markii uu ninkaasi katagayna, waxay da'ddeedu waxay ahayd qiyaastii 28-jir. Ninkaasi wuxuu dhaawac aan marna la aqbali karin u gaystay Malyuun. Xaqeeddii ayuu duuddsiyey. Noloshii ayuu ka baa'bi'iyey. Dulmi aan la qiyaasi karin ayuu u gaystay.

Ujeeddada aan sheekadan u xusay waxaa weeye: raga Soomaalidu waxay sidaa ku samayn-jireen (ilaa iminkana

ku sameeyaan) haweenka Soomaaliyeed. Inkastoo wakhtigan danbe ay yaraatay, sababta ay u yaraatayna ay tahay in dumarkii fahmeen inay fasaq samayn-karaan, oo ninka iska furi karaan. Laakiinse, berigii hore dumarku may ogayn inay is fasiqi-karaan, raguna umay sheegi jirin. Dhibaatada kale ee jirtayna waxay ahayd, ragii hore dumarka waxay aamin-siiyeen inuu furitaanku yahay "ceeb." Illaahay wax uu baneeyey ayay ka dhigeen inuu yahay ceeb. Ceeb ma'aha furitaanku oo Illaahay ayaa baneeyey marka labada qof is fahmi waayaan. Laakiinse, ragii hore waxay sidaa u samaynayeen inay dumarka ku gumaystaan. Waxaad in badan maqashaa odayaasha waawayn ee miyiga kusoo koray oo odhanaya: "berigii hore, furitaanku ceeb ayuu ahaa. Dumarkana afkooda lagama maqli jirin furitaan." Waa gumaysi xad dhaafa oo dumarka lagu hayay. Hadii aad si fiican u taqaano dhaqanka Soomaalida, waxaad in badan maqashay in marka uu ninku gabadhiisa ku yidhaahdo "waan ku furayaa," ay gabadhu ku odhan-jirtay, "hay furine, i garaac (i dil). Taas micnaheedu waxaa weeye in gabadhu ay codsan jirtay inuu ninku dhenged ku garaaco, oo aanu furin. Sababtoo ah, ragii hore ayaa waxay samaysteen dhaqan aad u khariban oo ah in la-caayo, la af-lagaadeeyo, oo la-dhibo, gabadha la furo. Waa dulmiga dhaqanka Soomaalida. Waxaana kalifay sida khaldan ee aynu u korino ubadka. Waayo? Sidaan kor kusoo sheegnay, inamada marka la-korinayo waxaa laga dilaa naxariista, garashada, dadnimada, iyo wax kasta oo qalbi jileec ah. Markaa inanku wuxuu noqonayaa "ma naxe" aan cidna u naxariisan. Waana waxyaabaha sababay bur-burka ummadda Soomaaliyeed. Waa bulsho wada axmaqiin ah.

"Awaal-Tirris:" Hadraawi: waa qoys ka kooban hooyo, aabo, iyo dhowr caruur ah, oo hablo u badan. Innanta (gabadha) curad (caruurta ugu wayn) waxaa magaceeda la-

yidhaahdaa, Ugaaso. Aabuhu wuxuu caruurtiisa ugu jecelyahay innantan Ugaaso. Waa innan aad ugu ja-jaban, oo ugu dhego-nuggul, aabaheed. Maal-maha qaarkood, marka uu aabuhu guriga ku qayilayo, Ugaaso ayaa u goggli-jirtay meesha uu ku qayilayo; iyadda ayaa shaaha usoo karin jirtay; biyahana usoo dhigi-jirtay (Ugaaso waynu usoo noqonayaa. Xagga hoose ka akhri). Aabaha qoysku, wuxuu dayacay masuuliyaddiisii aabo-nimo. Subaxii wuxuu toosaa barqadda—ilaa 9-ka subaxnimo iyo wixii ka danbeeya. Wakhtigaas uu tooso, caruurtii guriga ma joogaan, oo waxay ku maqan yihiin iskuuladdii iyo maclaamaddihii. Xaaskiisu iyana guriga ma joogto, oo way shaqaysaa. Marka uu tooso, wuxuu quutaa (cunaa) quraacdii loosii-diyaariyey. Ka dib, wuxuu tagaa (adaa) suuqa. Intaas uu suuqa joogo, wuxuu ku mashquulsan-yahay sidii uu u heli laahaa qaddaddii iyo jaadkii (qaadkii) uu maalintaas ku qayili-lahaa. Marka uu suuqa ka qadeeyo ee uu kusoo qayilo, wuxuu guriga kusoo noqdaa goor danbe—qiyaastii 11-ka habeenimo iyo wixii ka danbeeya. Wakhtigaas uu guriga yimaado, caruurtiisii iyo xaaskiisiiba way hurdaan. Markuu seexdo, hadana—sidii ay caaddaddiisu ahayd—wuxuu toosa 9-ka subaxnimo iyo wixii ka danbeeya. Maal-maha qaarkood, wuu dhaxaa (guriga umasoo hurdo doonto). Wuxuu iska maqnaadaa maal-mo badan. Meel uu ku maqan-yahay cidina kama war hayso. Nolol-maal-meedkiisu waa intaas; toddobada maal-moodba. Ma shaqeeyo. Reerka biil ma siiyo. Howsha gurigga kama caawiyo. Caruurta isma arkaan; sidaa awgeed, kama war hayo xaladdooda nolloleed, iskuulkooda, dhibaatadooda, xanuunkooda, cabashaddooda, akhlaaq-dooda, dhaqankooda, diintooda, iwm. Noloshiisiiba wuxuu ku dhamaystay qayilaad.

Maadaama uu aabuhu kasoo bixi-waayey masuuliyaddii saarney, waxaa qoyskii lasoo-dersay baaahi iyo darxumo.

Qoysku ma haystaan cid usoo shaqaysa oo ka bixisa biilka. Ma haystaan lacag ay iskaga bixiyaan cunto, biyo, maryo, laydh, iwm. Waxay waajaheen nollol aad u dhib badan. Waxay waajaheen baahi, caajo, haraad, arrad, niyad-jab, cabsi, iwm. Waxay noqdeen qoys ku nool wer-wer iyo walbahaar. Taasi waxay kaliftay inay hooyaddii isku daydo inay reerka u shaqayso. Hooyaddu ma taqaano xirfad ay ku shaqaysato. Ma haysato dhaqaale ay shaqo ku abuurato. Ma jirto cid shaqo siinaysa. Wax ay samayso ayay garan wayday. Maalintii danbe, markii ay hooyaddii u adkaysan-wayday baahidda iyo muruggadda ka muuqata ubadkeedii, ayay go'aansatay inay raadiso—oo geed-dheer iyo geed-gaabanba—u fuusho sidii ay usoo heli lahayd wax ay quutaan.

Markii ay hooyaddii shaqo kale soo wayday, waxay ogaatay in shaqadda kaliya ee ay ubadkeeda ugasoo saarikarto masruufku ay tahay iibinta jaadka. Hooyooyinku ma jecla inay jaadka iibiyaan; laakiinse, marka ay duruufaha nolosha ee qadhaadhi gil-gilaan, baahidda iyo calool-xanuunka ayaa ku kalifa inay jaadka iibiyaan. Maadaama aanay hooyaddu haysanin lacag ay ku bilowdo iibinta jaadka, waxay soo amaahatay jaad. Jaadkaas ay soo amaahatay ayay suuqa la fadhiisatay si ay u iibiso. Lacagta jaadka kasoo baxda, badankeeda waxaa iska leh—oo ay siisaa—dadkii jaadka iska lahaa. Wixii ugasoo hadha, ee faa'iido ahna waxay ku debertaa nolosha qoyskeeda. Dhibaatooyin aad-iyo-aad u tirro-badan—oo aan lasoo-koobi-karin—ayay kala-kulantaa iibinta jaadka. Waa hooyo. Waxay guriga ka jarmaadaa (ka kalahdaa) subaxa hore—qiyaastii 6-da subaxnimo. Waxay u lugaysaa meesha ay jaadka ku iibiso. Maalintii oo dhan waxay fadhidaa cad-ceeda. Waxay u adkaysataa gaajo, haraad, kulayl, dhaxan, roob, iwm. Shaqada waxay kasoo rawaxdaa marka laga wada iibsado jaadka. Maal-maha badankooda waxay shaqada kasoo

rawaxdaa goor danbe—qiyaastii 8-da habeenimo. Ogow, shaqada waxay bilowda subaxnimadii hore—qiyaastii 6-da subaxnimo; waxaanay kasoo rawaxday 8-da habeenimo.

Mar-marka qaarkood, jaadka waa laga amaahdaa. Mar-marka qaarkoodna nimanka jaadka ka amaahdaa ma bixiyaan amaahdaas. Maadaama ay hooyaddu soo amaahatay jaadka, dadkii jaadka lahaa waxay ka sugayaan inay bixiyo lacagtii jaadka oo dhamays-tirran. Sidaa awgeed, jaadkaas ay ragu amaahdeen, waxaa bixisa hooyadda, meel ay ka keentaba. Intaas waxaa u dheer, in mar-marka qaarkood ay raga jaadka ka iibsanayaa caayaan, aflagaadeeyaan, hiifaan, ku digtaan, oo yasaan. Marrarka qaarkoodna waxaa dhacda in qaar ka mida raga jaadka ka iibsanayaa ay hungureeyaan (shukaansadaan). Dhibkaas waxaa usii dheer, iyada oo suuqa ku iibinaysa jaadkii, ayaa waxaa u yimaada "ninkeeda." Wuxuu waydiistaa inay siiso jaad uu ku qayilo, ama inay siiso lacag uu jaad ku iibsado. "Ninkeedu," iska daa inuu waajibkiisii kasoo-baxee (oo uu biilkii xaqa loogu lahaa siiyee), iyada ayuu ka doonayaa inay siiso lacag uu ku jaad ku iibsado.

Hooyaddu iyadoo daalan—oo diif-iyo-darxumo ooggaddeeda ka muuqato—ayay gurigga timaaddaa. Lacagtii yarayd ee ay ka-faa'iiday iibinta jaadka ayay ubadka iyo "ninkeedaba" ku quudisaa. Markay sariirta tagto, ma gama'ddo. Hurdo way kala-tageen. Barkimaddeeda (barkinteeda) waxaa qooya ilmadda ka dareeraysa indhaheeda. Murrugo iyo calool xumo ayay ku seexataa. Wer-wer iyo walbhaar ayay kolba dhinac isula rogtaa. Ciil iyo catow ayay wehel ka dhigataa. Waxay ku catowdaa: "Maxaan galabsaday? Ciqaabtani halkay iiga timi? Dumarka khayr-kay ahi way nastaan! Rag usoo shaqeeya ayay haystaan! Anigu maxaan gaystay? Cidna gef umaan geysanine, halkay iiga timi ciqaabtani? Dadku way iga amaan helaan! Waan cibaa-

daystaa! Dadka waan caawiyaa! Afkayga-iyo-adinkaygaba nooluhu way ka amaan-helaan!" Weedhahaas murrugadda iyo xanuunka badan ayaa maskaxdeeda ka guuxaya habeenkii oo dhan. Waa hooyo dulman. Waa hooyo la dayacay. Waa hooyo lagu tuntay xaqeedii uu Illaahay siiyey. Waa hooyo aan haysanin hiil bulsho. Waa hooyo aan haysanin hiil culimo. Waa hooyo aan haysanin hiil dowladeed. Waa hooyo aan haysin cid u garowda. Waa hooyo ku nool calool xumo, catow, iyo murruggo. Ma cabato. Ma caytanto. Ma habaaranto. Caruurta ma hiifto. Iyadoo waxaas oo murrugo iyo xanuun ahi isugu biireen, ayay hadana u adkaysataa. Waxay iska ilaalisaa in cabashaddeeda la ogaado; ka dibna, lagu digto. Waxay ilaalinaysaa sharafta iyo magaca ubadkeeda. Waxay ka gil-gilanaysaa in hadii ay cabato, berito caruurteeda lagu caayo.

Maalin maal-maha ka-mida, ayuu aabihii—sidii caaddadda u ahayd—wuxuu guriga ka maqnaa dhowr maalmood. Meel uu ku maqanaa cidina kama war haynin. Markii uu maqnaa dhowr maal-mood, ayuu guriggii yimi maalmo ka dib. Waxaa killin-kiladda (kilin-kilta) ugu jira bac ay ugu jiraan jaad uu suuqa kasoo iibsaday. Wuxuu usoo diyaar-garoobay inuu guriga ku qayilo. Markii uu guriga soo galay, ayuu—sidii caaddaddiisa ahayd—wuxuu ku tirraabay (dhawaaqay): "Ugaasoooy! Naayaa Ugaaso! Kaalay aabo ii goggol! Kaalay shaahii ii kari; biyihiina ii dhig!" Ugaaso umay jawaabin. Cid kalena juuq umay odhanin. Markii uu wax sanqadh ah waayey, ayaa wuxuu arkay xaaskiisii iyo caruurtiisii oo dhamaantood foorrorra, oo muruggo ka muuqato. Wuxuu waydiiyey: "Naa maxaa idinku dhacay ee aad la muruggaysan-tihiin?" Cidna umay juuqin. Markii uu su'aalihii joojin-waayey, ayaa xaaskiisii ugu jawaabtay (iyaddoo ilmaddu dhabankeeda ka darreerayso): "Alla waan hoogay! Alla si walba waan u jabay! Alla

maxaan galab-saday! Alla silicani xaguu iiga yimi! Alla ma darxumo iyo ayaan-darro ayuu Illaahay ii qoray! Alla ma tanbaa ii danbaysay!" Ugaaso meeday? Maansada ka akhriso. Gebo-gebo!

Habada, hooyaddan dulman waxaa u hiiliyey abwaan Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi). Murruggaddii iyo xanuunkii hooyadaas hayey ayuu abwaanku wuxuu si qoto-dheer, oo murrugo ku dheehantay, ugu cabiray maansaddan. Maansada magaceeda waxaa la yidhaahdaa, "Awaal-Tirris." Waa maanso dheer. Laakiin waxaan soo xigtay qayb ka-mid-ah maansadda. Waa qayta si fiican u sawiraysa, cabashadda hooyadaas murrugaysan. Maansaddu waxay tidhi:

Ugaasadu meeday, hee dhe?
Dorraato miyaan la aasin,
Miyaan kafan loo amaahan,
Miyaan axan loo yaboohin,
Markii araggaa la waayay,
Miyaan jinku qaylo oogsan,
Miyaan insigii gadoodin,
Miyaan ollogeenu yaabin!

Ishaaro san kaama hayno,
Shidaad naga oollin maysid,
Ogaal nagu caymin maysid,
Itaal nagu xoojin maysid,
Qudhaanjo afuufi maysid,
Dalool naga awdi maysid,
Xashiish nala ururin maysid,
Aqool nala seesi maysid,
Aqoon nagu biirin maysid,
Xilkaagana oofin maysid,

Afkaagana dhawri maysid,
Sidii gabadhii Ayaan'e,
Ayaan-Hooday dhahaan'e,
Abwaannimo sheegan maysid,
Aroor qudha toosi maysid,
Dhiggaagiyo aynigaaga,
Adduunka la qaybsan maysid,
Iskaaba xusuusan maysid,
Wixii Rabbi kuu abuuray!

Intaydu ku deeqi mayso,
Intaada ku biirin maysid,
Hantida arladoo dhan taalla,
Haddaad irbad nooga keento,
Ducaa ku asqayn lahayd'e,
Inkaar naga waayi maysid.

Ufiyo bacad baan fadhiistay,
Anfaaciga aad cunayso,
Ilaaqda raggaan ku keenay,
Waxaan u adkaystay maagis,
Amaah iyo qaylo joogta,
Uurkayga waxaan ku haysto,
Afkayga ka sheegi maayo,
Asluubtana qoomi maayo,
Awaashiyo waayahayga,
Ka daalaco oogadayda.

Haddaad na ilaalin weydo,
Axsaanta ku laaban weydo,
Abaal nagu yeelan maysid,
Ammaan naga dhowri maysid,
Anigu kugu faani maayo,

Dharaar kugu aarsan maayo,
Adiga kuu uunsan maayo,
Agtaydana jiifi maysid,
Haddaan beri kuu il-duufay,
Haddeer ku abaysan maayo;

Markay ajashaada gaadho,
Cidina kuu ooyi mayso,
Ilaahay ka dhuuman maysid,
Jannada ku aroori maysid,
Cadaabta ka oolli maysid,
Godkaaguna waa aboor,
Abeesiyo waa ciqaab.

Umushii Dayacnayd: waa qoys ka kooban hooyo, aabo, iyo lix caruur ah. Aabuhu ma shaqeeyo. Waxba ma qabto. Subaxii ayuu gurigga ka baxaa; waxaanu dib ugusoo noqdaa saqda dhexe (wixii ka danbeeya II-ka habeenimo). Waxba reerka kumasoo kordhiyo. Waa aabe masuuliyaddiisii dayacay. Hooyaddu waa xaamilo—uur ayay leedahay, oo ilmihii toddobaad ayay uurka ku sidaa. Masuuliyaddeeddii hooyanimo si fiican ayay u gudataa. Intaas waxaa usii dheer, maadamaada aabihii uu masuuliyaddiisii guddan-waayey, hooyadda ayaa labaddii masuuliyaddoodba dusha u ridatay. Hooyaddu waxay dusha u riddatay masuuliyaddii hooyo iyo masuuliyaddii aabo labadaba—iyadda ayaa gurigga ka ah aabe iyo hooyo labadaba. Cuntadda ayay karisaa. Guriga ayay nadiifisaa. Maryaha ayay maydhaa. Suuqa ayay kasoo shaqaysaa. Caruurta ayay maryo u iibisaa. Lacagta iskuuladda oo dhan iyadda ayaa bixisa, iwm. Waxaas oo shaqo iyo howl ah waxay qabataa iyadoo xaamilo ah (uur leh).

Muddo ka dib ayay umushay. Waa ilmihii todobaad. Markii ay umul ahayd laba maal-mood, ayay wayday wax ay

quudato iyadda iyo ubadkeediiba. In nafteedu nasato, oo ay daryeel hesho iska daayoo, waxaanay haysanin cuntaddii ay cuni-lahaayeen. Naftu waxay ku kaliftay inay shaqaddedii tagto si ay biilka reerka usoo xoogsato. Laakiinse, ma haysato qof ay kaga-tagto ilmaha yar ee labada habayn jira. Maalintii oo dhan kama maqnaan-karto ilmahaas yar; sababtoo ah, naaska ayay nuujisaa. Wax ay samayso ayay garan-wayday. Waxay go'aansatay in ay ilmaha yar—ee jiray labadda maal-mood—ay sii qaadato marka ay shaqadda tagayso. Ma haysato gaadhiga yar ee caruurta lagu qaato. Ilmihii yaraa waxay ku riday kartoon-ka alaabta lagu rito. Iyaddoo ilmihii yaraa kartoon-ka ku siddata ayay usii lugaysay meeshii ay ka-shaqayn-jirtay oo aad uga fog. Sababta ay u lugaynaysaana waxaa weeye, ma haysato lacag ku filan oo ay baska ku raacdo. Shaqaddeeddii ayay timi. Shaqaddeedduna waxaa weeye, suuqa ayay la-fadhiisataa tamaandho, basal, baradho, iwm. Khudraddaas yar ayay maantoo dhan cad-ceeda la-fadhidaa. Wixii ay kasoo hesho ayay ubadkeeda ku masruuftaa. Ilmaha yari isagoo kartoon-ka ku dhex-jira ayay agteeda dhigtaa. Cad-ceeda, siigadda, iyo buuqa (qayladda) suuqa ayuu ilmahaas yari maalintii oo dhan dhex jiifaa.

Maalintii danbe, iyadoo khudraddii suuqa la-fadhidda ayaa waxaa u yimi "ninkii qabay." Sidii aan soo sheegay, ninku ma shaqeeyo; waxbana reerka ma-tarro. Ninkii markii uu u yimi, ayuu wuxuu ku yidhi: "Isii lacag aan ku qayilo!" Waxay si dhab ah—oo xaqiiq ah—ugu sheegtay in aanay haynin lacag ay siiso. Lacagta ay haysaaba in aanay ka-badneyn biilka caruurta ee maalin-laha ah. Ninkii intuu cadhooday, ayuu af-lagaadeeyey, caayey, oo isagoo hiifaya, iskaga tagey.

Xaasaska badan (laba sheeko): waxaanu saaxiib ahaan-jirnay nin la-odhan-jiray Jaamac (ma'aha magiisa dhabta

ah). Jaamac wuxuu ka-shaqeeyaa xafiis dowladeed. Musha-harka uu qaataa, waa mushahar aan aad u buurnayn. Intii aanu guursanin, wuxuu Jaamac dhistay guri hanti ah. Markii aanu is-baranay, wuxuu lahaa saddex xaas. Gabadha ugu-weyni (min-weyn) waxay u dhashay lix caruur ah; waxaanay degenayd guriga hantidda ah. Gabadha labaad (mag-magato), waxay u dhashay saddex caruur ah; waxaanay degenayd guri kirro ah. Gabadha saddexaad (meel ma-dayato), wax caruura umay dhalin; waxaanay degenay guri kirro ah. Maadaama aanu Jaamac haysanin wax dhaqaale ah (mushahar-kiisuna uu yar-yahay), waxaa ku-adkaatay inuu biilo saddexdaas reer. Gabadhii saddexaad ayuu u awoodi-waayey inuu ka-bixiyo kirraddii guriga; sidaa awgeedna, gurigii ayaa laga-saaray. Gabadhii ayuu u sheegay inay guriggii aabaheed tagto, oo in muddo ah lasoo-joogto (intuu dhaqaale helayo). Markii ay gabadhii muddo la-joogtay aabaheed, aragtayna in aanu ninkii wax dhaqaale ah helin, ayay ka-codsatay inuu iska furo. Sidii ayuu gabadhii ku-furay. Markaa waxaa usoo-hadhay, oo uu qabaa laba xaas. Aniga iyo Jaamac ismaanu arkin muddo laba sanadood ah. Laba sanadood ka-dib, ayaanu kulanay.

Wuxuu Jaamac ii sheegay in uu guursaday gabadh kale oo saddexaad. Waan yaabay! Waxaan waydiiyey inuu helay wax dhaqaale ah oo cusub. Wuxuu iigu jawaabay, "Maya! Weli waxaan ka-shaqeeyo xafiiskii dowlada ee aad igu-ogayd, wax kale oo dhaqaale ahina imay-soo-gelin." Su'aasha aan is-weydiiyey (ilaa iminkana aan is-weydiiyaa) waxay ahayd: mar hadii uu gabadhii hore u furay dhaqaale la'aan; iminkana aanay soo-gelin wax dhaqaale ah oo cusubi, maxaa ku-kalifay inuu gabadh kale oo saddexaad guursado? Waxaa ii cadaatay inuu yahay qayral-masuul; waana sida ay u badan-yihiin raga Soomaalidu.

Sheekadda 2[aad]: Mar aan booqday Hargaysa, ayaan

sheekaddan la-kulmay. Guriggii aan degenaa, waxaa agtiisa ku-yaalay "cilaaj"—waa guri-weyn oo lagu xannaaneeyo dadka qaba xanuunka dhimir-ka. Guriggaas waxaa ka-shaqeeya, shaqaale kala-duwan. Shaqaalahaas waxa ka-mid-ah, dad qaabilsan inay ilaaliyaan dadkaas xanuun-sanaya, si aanay naftooda ama shaqaalaha kale dhibaato u gaadhsiinin. Maalin-maalmaha ka-mid-ah, anigoo gurigga ka-baxay—oo gaadhi wata—ayaa waxaa igasoo hor-baxay nin ka-mid-ah shaqaalaha cilaaj-ka. Waa nin dhalin-yaro ah, oo aan ku qiiyaasay inuu jiro 30-sanaddood. Ninkii ayaan sii-qaaday. Intii aanu jidka kusii-jiray, ayaanu is waraysanay. Wuxuu ii sheegay, inuu muddo u shaqaynaayey cilaaj-ka; bishiina waxaa mushahar loo-siin-jiray $100 (boqol doolar-ka Maraykan-ka ah). Wuxuu leeyahay hal xaas (gabadh kaliya ayuu qabay). Waxaan waydiidyey in $100 ay biilka reerka ugu filan-yihiin; waxaanu ii sheegay inay ku-filan-yihiin; laakiin, mar-marka qaarkood aanay ku filaanin. Sidaa awgeed, wuxuu ku deddaalaa inuu soo xoogsaddo lacag kale, si uu ugu dabbaro wax-yaalaha ka dhinma.

Markii uu muddo u shaqaynaayey, ayaa wuxuu laba-jeer dalbaday in mushaharka loo-kordhiyo; waana laga aqbalay. Mushaharkii waxaa looga-dhigay $200 (laba boqol oo doolar-ka Maraykan-ka ah). Bishii ugu horeysay ee la-siiyey $200, ayaa wuxuu guursadday gabadh labaad. Waxaan waydiiyey: "Hadii aanay $100 biilka kuugu filaan jirin, sidee ayay kuugu-filaadaan $200 iminka adigoo laba xaas leh?" Wuxuu iigu jawaabay: "Iguma filaadaan. Waxaan isku dayaa in aan lacag kale suuqa kasoo helo, si aan ugu kordhiyo labada-boqol."

Sheekaddani waxay ii cadaysay in raga Soomaalida badankoodu ay yihiin qayral masuul iyo rag aan ku xisaabt-amin mustaqbalka noloshooda, iyo nolosha qosykooda.

Ninkaas waxaaa u fiicnayd inuu siddan sameeyo. Waxaa haboonayd in aanu guursanin gabadh labaad. Waxaa fiicnayd inuu $100 siiyo xaaskiisa; boqolka kalena uu meel dhigto. Hadii uu boqolkaas kale meel dhigan-lahaa—oo uu urrurin lahaa—in muddo ah, waxaa xaqiiqo ah inuu samaysan-lahaa dukaan, ama gaadhi uu ku shaqaysto. Ama uu furan-lahaa baayac-mushtar uu isagu ku shaqaysto. Ayaan-darro'se, sidaa muu samaysanin. Kamuu fikiraynin mustaqbalkiisa iyo barrio siday noqon. Hadii ninkaas shaqadda laga-eryo, ama ay shaqadu ka-dhamaato, waxaa ku adkaanaysa inuu labadaas xaas u helo biil joogto ah. Marka uu biil u waayo, waxaa dhacda inuu labada xaas midkood iska furo, baahi aawadeed. Ama uu dadka qaraabada iyo asxaabtiisa ah shaxaado (baryo; dawarsaddo). Baahi aanu Illaahay gelinin ayuu isagu is geliyey. Nollol cidhiidhiya oo aanu Illaahay galinin ayuu is geliyey. Waana qayral-masuulnimo meeshii ugu saraysay.

Gebo-gebo

Cutubkan waxaan ku gebo-gebaynayaa in habka aynu u korino ubadku uu yahay hab aad u khaldan oo u khariban. Waayo? Sida aan kor kusoo sharaxay, habka aynu ubadka ugu korino miyiga iyo magaalada waxaad ka arkaysaa in uu yahay bar-baarin soo saraysa ubad aad u khariban oo aan dhinacna ku wanaagsanayn. Habkan aynu wax u korinaana waa hab kasoo hor-jeeda sida ay ina fartay diinteena Islaamku; waana hab kasoo hor-jeeda sida ay ubadka u koriyaan dunida hore-u-martay. Sidaa awgeed, dhaqanka Soomaalidu ubadka uma horiyo sidii ay diintu ina fartay iyo sida ay dunida hore-u-martayba u koriso. Taasina waa waxyaabaha sababay inay bulshada Soomaaliyeed noqdaan dadka aduunka ugu liita ee ugu hooseeya dhinac walba.

Waa dadka aduunka ugu hooseeya dhinaca dhaqaalaha, cilmiga, dowladnimada, cadaalada, nadaafada, dhismaha, sinaanta, midnimada, naxariista, iwm. Waxaa dhamaanteen waajib ku ah in aynu bedelo, oo aynu ka guurno, DHAQANKA SOOMAALIYEED EE INA BAA'BI'IYEY.

10

GUNAANAD

Buuggani wuxuu iftiimiyey in dhaqanka Soomaalidu uu sabab u yahay dib-u-dhaca dhinac walba ah ee ummadda Soomaaliyeed. Cutub kasta oo buugga ka-mid-ahi wuxuu sharaxaad ka bixiyey qayb wayn oo muhiim u ah nolasha bani'aadamka iyo degaanka. Qaybahaas muhiimka u ah nolsha, mid kaliya oo aynu dhisnay ama wanaajinay ma jiro. Qayb kasta waynu ku saaqidnay. Sababtuna waxaa weeye: hab-u-fikirka iyo sida aynu nolosha u qiimayno ayaa khaldan. Waa hab-u-fikir ku salaysan dhaqanka Soomaalida ee asalkiisu uu kasoo jeedo noloshii miyiga (baadiyaha). Sidii aan hore usoo sheegay, unnuga ugu hooseeya ee ay bulshadu ku dhisantahay waa qofka. Marka ay nolol wadaagaan laba qof, ee ay lamaane noqdaana, waxaa dhisma qoys. Marka ay dhismaan dhowr qoysna, waxaa dhisma bulsho. Mark ay bulsho dhisantana, waxaa dhisma qaran. Sidaa awgeed, qaranku wuxuu ka kooban-yahay unnugyadaas (qof) oo isku biiran. Hadaba, inuu qaranku dhismo, oo uu hor-u-mar gaadhaa waxay ku xidhantay hab-u-fikirka unnuga ugu hooseeya qaranka. Hadii ay unnugyadaas (dadkaas) hab-u-fikirkoodu aad u

hooseeyo, ma noqon karaan ummad qaran iyo hor-u-mar samaysay. Ummad walba hab-u-fikirkoodana waxaa laga gartaa heerka nolloleed ee ay gaadheen, hadii ay noqoto dhaqaale, wax-barasho, wax-soo-saar, cadaalad, dowladnimo, iwm. Marka aad u fiirsato heerka nolloleed ee weligeenba taagnayn, waxaa kuu cadaanaya in aynu marayno heerka ugu hooseeya ee bani'aadamka. Weligeen waxaynu ahayn ummad aduunka ka danbaysa. Waxaas oo dhana waxaa sabab u ah hab-u-fikirkeena oo ku salaysan dhaqankeena. Sidaa awgeed, waxaa waajib ah in aynu bedelo meelaha khaldan ee dhaqankeena ku jira, ee uu buuggani sharaxay. Meelahaas hadii aad u fiirsatana, waxaa kuu cadaanaya inay dhamaantood kasoo hor-jeedaan diinteena, cilmiga, cadaalada, hor-u-marka, iwm.

Ummadaha kale ee aduunka inagula nooli, dhamaantood way soo mareen marxaladan aynu inagu ka gudbi wayanay. Sidaa awgeed, waxaa is-weydiin muddan: maxay sameeyeen ummadahaas kale ee u suurto-geliyey inay ka gudbaan marxaladan aynu ku jirno? Jawaabtu way fudduday. Hadii aad akhrido taariikhdii ay soo mareen ummadaha aduunka ee hore-u-maray, waxaa kuu cadaanaya inay mar walba bedelaan meelaha dhaqankooda ku jira ee khariban, ee dib-u-dhaca ku keenaya noloshooda. Ummadahaasi waxay mar walba baadhaan meelaha khaldan ee dhaqankooda ku jira. Marka ay ogaadaan, ayay markiiba isku taxalujiyaan sidii ay u bedeli lahaayeen. Tusaale ahaan, wadanka Singapore ama Maraykan-ku, sidii uu dhaqankoodu ahaa 50-sano ka hor, maanta ma'aha. Meelo badan oo ka-mid-ah dhaqankii ay lahaayeen konton sanadood ka hor, maanta ma haystaan oo way bedelaan. Halkaas ayuu ku jiraa hor-u-marku.

Qodobkan kale ayaa isna aad muhiim u ah. Ummadda Soomaaliyeed waxaa caado u ah inay is-amaanaan.

Ummada Soomaaliyeed waxay isugu sheekeeyaan inaynu nahay ummad caqli-badan, cadaali ah, wanaagsa, dadnimo leh, iwm. Marka aad si qoto-dheer ugu fiirsato amaantaasna, waxaa kuu cadaanaya in aanay sal-iyo-raadtoona lahay. Waa amaan been-abuur ah. Maxaynu ku faanaynaa ee aynu samaysanay? Waxba. Haba yaraatee, wax aynu aduunka iyo wadankeena kusoo kordhinay mar jirto. Fiidyow aan duubay ayaan raga Soomaaliyeed ku waydiiyey su'aashan: "Hadii aad uu sheegtaan qalab (tignoologi) ama fikir (dhaqaale, siyaasadeed, iwm) oo aynu aduunka kusoo kordhinay, waxaan idin siinayaa $1000 (kun doolar)?" Su'aashii ilaa iminka waa laga jawaabi kari waayey. Waayo? Waxaan jirin wax aynu aduunka kusoo kor-dhinay. Markaa, mar hadii aanaynu waxba aduunka kusoo kordhinin (irbad-na ha haatee), waa maxay waxa aynu ku faanaynaa? Waa faan been ah.

Anigu waxaan degenay wadanka Maraykan-ka. Waxaynu ognahay inuu Maraykan-ku yahay wadanka maanta aduunka hogaamiya. Waxaynu ognahay sida ay inooga horeeyaan dadkaa Maraykan-ka ahi. Iyagoo sidaa inooga horeeya, ayaa hadana waxaad arkaysaa dadkaas Maray-kanka ah oo mar walba isku canaanaya inay aduunkii ka hadheen. In ay noqdeen dad hurdo galay oo aduunkii kale uu dhaafayo dhawaan. Bal waxaad ka warantaa dadkii aduunka ugu hooseeyey dhinac walba (Soomaalida) oo is faaninaya iyo dadkii aduunka ugu horeeyey (Maraykan-ka) oo is canaanaya? Taasi maxay ku tusaysaa?

Qodobka ugu danbeeya ee aan kusoo gebo-gebaynayaa waxaa weeye: dhaqankeenu wuxuu ka-mid-yahay dhamaqada aduunka ugu hooseeya dhinac walba. In badan ayaad Soomaalida ka maqlaysaa iyagoo amaanaya dhaqan-keena. Laakiinse, markaad akhriday cutubada buuggan,

waxaa kuu cadaatay in aanu dhaqankeenu lahayn wanaagaas lagu sheegayo. Waxaana waajib ah in laga guuro meelaha khariban ee dhaqankeena ku jira, ee aadka u tirrada-badan. Sida buuggani uu ku cadeeyey, meelaha waxyaabaha khaldan ee ku jira dhaqanka Soomaalida ayaa ka badan wanaaga ku jira dhaqanka Soomaalida. Hadii aan si kale u idhaado: xumaanta dhaqankeena ku jirta ayaa ka badan wanaaga dhaqankeena ku jira. Sidaa awgeed, waxaan dhalinyarta kula talinayaa hadii ay doonayaan inay mustaqbal wanaagsan samaystaan—inay ka bedelaan, ka-guuraan, oo diidaan, dhaqankeena ina baa'bi'iyey. Aynu bedelno dhaqanka Soomaalida. Waa waajib diini ah. Waayo? Waa dhaqan kasoo hor-jeeda diintii Illahay, caqliga suuban, cilmiga, cadaalada, haweenka, daryeelka, naxariista, dadnimada, iwm. Waa wakhtigii aynu BEDELI LAHAYN DHAQANKA SOOMAALIDA.

TIX-RAAC

Anderson, B. (2016b). *Imagined Communities: Reflections on the Origin and Spread of Nationalism* (Revised ed.). Verso.

Axmed, I. Y. (2013). *Cadaabtii Carruurta*. Xusuuso. https://xusuuso.wordpress.com/2013/04/10/cadaabtii-carruurta-wq-ibraahim-hawd/

Baig, M. Y. (2014b). *Raising a Muslim Child: Owning a sacred responsibility*. CreateSpace Independent Publishing Platform.

Baig, M. Y. (2014c). *Raising a Muslim Child: Owning a sacred responsibility*. CreateSpace Independent Publishing Platform.

Bulhan, H. A. (2013). *In-Between Three Civilizations: Archeology of Social Amnesia and Triple Heritage of Somalis*. Tayosan International Publishing.

Bulhan, H. A. (2020). *Politics of Cain: One Hundred Years of Crises in Somali Politics and Society*. Tayosan International Publishing.

Cabdillaahi, R. S. (2018). *Qaran iyo Qabiil: Laba aan is qaban (Somali Edition)*. Ponte Invisible (Redsea Cultural Foundation).

Daniels, S. J. (2016). *Working with the Trauma of Rape and Sexual Violence: A Guide for Professionals* (1st ed.). Jessica Kingsley Publishers.

Diamond, J. (1999). *Guns, Germs, and Steel: The Fates of Human Societies* (Gift Inscription Inside on Fep ed.). W W Norton & Co Inc.

Fagan, B. M., & Durrani, N. (2019). *World Prehistory: A Brief Introduction* (10th ed.). Routledge.

Faulkner, N. (2013). *A Marxist History of the World: From Neanderthals to Neoliberals (Counterfire)*. Pluto Press.

Guest, K. J. (2019). *Essentials of Cultural Anthropology: A Toolkit for a Global Age (Third Edition)* (Third ed.). W. W. Norton & Company.

Hamid, S. (2015). *Temptations of Power: Islamists and Illiberal Democracy in a New Middle East* (Reprint ed.). Oxford University Press.

Harrison, L. E., & Huntington, S. P. (2001). *Culture Matters: How Values Shape Human Progress* (0 ed.). Basic Books.

Hobbes, T., & Curley, E. (1994). *Leviathan: With selected variants from the Latin edition of 1668 (Hackett Classics)* (Underlined, Notations ed.). Hackett Publishing Company.

Holy Qur'an. (A.Y. Ali, Trans. & T. Griffith, Ed.). (2001). Wordsworth.

Kant, I. (1985). *The metaphysical elements of justice;: Part I of The metaphysics of morals (The Library of liberal arts)*. Collier Macmillan.

Kim, J. (2015). *Aid and state transition in Ghana and South Korea*, Third World Quarterly, 36:7, 1333-1348, DOI: 10.1080/01436597.2015.1038339

Lewis, I. M., & Samatar, S. S. (1999). *A Pastoral Democracy: Study of Pastoralism and Politics Among the Northern Somali of the Horn of Africa (Classics in African Anthropology)* (New Ed). James Currey.

Mansuur, C. C., & Puglielli, A. (2020). *Qaamuuska Af Soomaaliga: iyo Naxwaha Af Soomaaliga oo Kooban (Somali Edition)* (2nd ed.). Looh Press Ltd.

Maslow, A. H. (1943). A theory of human motivation. *Psychological Review*, *50*(4), 370–396. https://doi.org/10.1037/h0054346

McCoy, M. L., & Keen, S. M. (2013). *Child Abuse and Neglect: Second Edition* (2nd ed.). Psychology Press.

Md, R. M. S. (1987b). *How to Raise a Healthy Child in Spite of Your Doctor: One of America's Leading Pediatricians Puts Parents Back in Control of Their Children's Health*. Ballantine Books.

Muslim, I., & Al-Mundhiri, A. Z. A. (2000). *The Translation of the Meanings of Summarized Sahih Muslim (2 Books)*. Dar-us-Salam Publications.

Oxford University Press. (2010). *New Oxford American Dictionary 3rd Edition* (3rd ed.). Oxford University Press.

Parenti, M. (2010). *Democracy for the Few* (9th ed.). Cengage Learning.

Ph.D., D. E. (2013). *Internalized Oppression: The Psychology of Marginalized Groups* (1st ed.). Springer Publishing Company.

Rodney, W., & Davis, A. (2018). *How Europe Underdeveloped Africa*. Verso.

Rose, R., Sin, T., & University of Strathclyde. Centre for the Study of Public Policy. (1999). *Democratization Backwards*. Amsterdam University Press.

Russell, B. (1967). *A History of Western Philosophy*. Simon & Schuster/Touchstone.

Siegel, D. J. (2012). *The Whole-Brain Child: 12 Revolutionary Strategies to Nurture Your Child's Developing Mind* (Illustrated ed.). Bantam.

Signer, M. (2009). *Demagogue: The Fight to Save Democracy from Its Worst Enemies* (1st ed.). St. Martin's Press.

Skinner, B. F. (1976). *About Behaviorism* (1st ed.). Vintage.

The following data are drawn from the World Bank, "Selected World Develop- ment Indicators,"

Tylor, B. E. (2020). *Primitive culture: researches into the*

development of mythology, philosophy, religion, language, art, and custom (Volume I). Alpha Editions.

UKEssays. (November 2018). Nationhood Is An Important Part Of Culture History Essay. Retrieved from https://www.ukessays.com/essays/history/nationhood-is-an-important-part-of-culture-history-essay.php?vref=1

Wojcicki, E. (2019b). *How to Raise Successful People: Simple Lessons for Radical Results*. Houghton Mifflin Harcourt.

World Development Report 1998/99 (NewYork: Oxford Univer- sity Press, 1999).

Zakaria, F. (2007). *The Future of Freedom: Illiberal Democracy at Home and Abroad (Revised Edition)* (Revised ed.). W. W. Norton & Company.